- **Marinka Lacagbixinta Qaranka:** Marinkan waxa uu ogolaanayaa in lagu bixiyo dhammaan adeegyada dawladda hal madal. Waa nidaam u oggolaanayaa lacagbixinta, iyadoo la adeegsanayo kanaallo kala duwan oo ay ka mid yihiin: lacagta moobaayllada, lacagbixinta kaadhka, boorsooyinka iyo isku dhafka bangiyada.

- **Xarunta Isweydaarsiga Xogta:** Xarunta Isweydaarsiga Xogta (XIX) waa xarun dhexdhexaad ah oo loogu talagalay isdhaafsiga xogta Qaranka. Waa xarun xogisweydaarsi oo bar ilaa bar xogaha la isugu dhaafsado taas oo u oggolaanaysa xafiisyada kala duwan ee danabaysan ee hay'adaha dawladdu in ay wadaagaan macluumaadka u muhiimka ah isu dhaafsadaan xogaha dalka.

ii. Barnaamijka Gelitaanka Kanaaladda badan

Barnaamijkan waxaa lagu hubiyaa in isticmaalayaashu aaladaha danabaysan ay awood u leeyihiin in ay geli karaan adeegyada kannaalada badan. Waxa uu horseedaa korodhka macaamiisha khadka daaran oo looga jeeda macaamiisha *online* ka ah.

Si loo horumariyo helitaanka adeegyada dawladda, waxaa la fuliyaa mashaariicdan soo socda:

- **Xarumaha Adeegyada Guud**: Xarumahan waxay ka shaqeeyaan bixinta adeegyada aasaasiga u ah bulshada, caafimaadka bulshada, ganacsiga, waxbarashada iyo waxsoosaarka beeraha.
- **Kanaalka SMS:** Kannaalkan waxaa uu u qeybsan yahay farriimaha SMS. Waxa uu xaqiijiyaa xidhiidhka dawladda ay kula xidhiidho muwaadiniinta wakhti kasta. Dadweynuhu waxay ku helaan macluumaadka iyo xogaha muhiimka ah ee ay kula socdaan xaaladda dalka.
- **Aqoonsiga Dhijitalka ah ee Khadka Offline ka ah:** Shaqada barnaamijkan waxaa dhijitaaleynta adeegyadii hore oo tooska loo tagi jiray xafiisyada dawladda. Hab *online* ah ayaa loogu adeegayaa muwaaddiniinta. Waa adeeg ku habboon casriyeynta adeegyada dawladda.

iii. Kaabayaasha ICT-ga Danabaysan

Kaabayaashan waxaa lagu gutaa waajibaadka Hay'adda Isgaadhssiinta Qaranka (HIQ). Sida ku cad Siyaasadda iyo Istaraatiijiyada ICT-ga Qaranka,[15] waxa kaabaan horumarinka karaanka aadanaha.

Kaabayaasha ICT-ga ee dawladeednimadda danabaysan waxtarkooda waxaa ka mid ah:

- Fududeynta helidda xogaha hay'adaha dawladda.
- Kahortagga iyo maareynta musiibooyinka.
- Kuxidhnaanta Xarunta Xogta Qaranka Soomaaliya (XXQS).
- **Xarunta Xogta Qaranka Soomaaliyeed** (XXQS) waa xarun danabaysan oo ka masuul ah ururinta, keydinta, ilaalinta & baahinta xogaha rasmiga ah ee lagu baahiyo warbaahinta dawladda.
- **Adeegga Ganacsiga Qaranka:** Waa adeeg ay Dawladdu ku hormariso ganacsiga guud iyo ganacsiga gaar ee danabaysan. Waa adeeg ku habboon horumarka ganacsiga dalka.

iv. Hindisaha Guud ee Dawladda

Hindisaha Guud ee Dawladda (HGD) waa hindise qaran oo horumarineed. Ujeeddoonkiisa waa:

- Horumarinta iyo danabaynta dhammaan hay'adaha dawladda.
- Horumarinta qaybahan hoos ku taxan:
    - Maamulka Maaliyadda.
    - Shaqaalaha.
    - Suuqgeynta.
    - Xidhiidhka.
    - Maareynta musiibooyinka.
    - Waxsoosaarka dalka.
    - Maamulka hantida guud.

[15] Ibid. 1, bogga 21

- **Xafiiska Danabaysan**: Xafiiskan oo afka qalaad ku ah E-Office, waa xafiis si toos ah lambareeyo hawlaha hay'adaha dawladda. Waxa uu habeeyaa oo fududeeyaa waraaqaha codsiyada ah ee hay'adaha ka socda ama ku socda. Waxa uu horumariyaa danabayntooda.
- **Maareynta E-maillada**: Maareynta E-maillada waa maareynta danabaysan ee xidhiidhka E- maillada ay is dhaafsadaan xafiisyada dawladda dhexdooda. Waxa uu E-maillada ka difaacaa budhcadda casriga ah ee dhijitaalka ku jabsata xogaha muhiimka ah ee dawladda.

v. Qaabhismeedka Ganacsiga Qaranka

Qaabdhismeedka Ganacsiga Qaranka (QGQ) waxaa lagu horumariyaa ganacsiga danabaysan ee dalka. Waxa uu hufaa oo hagaajiyaa kaabayaasha danabaysan ee ganacsiga ee kala ah: waxsoosaarka, suuqgeynta, dhoofinta iyo soodejinta cuskan isdhexgalka[16] ganacsiyada.

vi. Kaabayaasha Guud ee Muhiimka ah

Horumarinta kaabayaasha guud ee muhiim ah waxaa lagu dhisaa, laguna dheellitiraa kaabayaasha kala duwan ee dalka Soomaaliya. Hab danabaysan ayaa loogu tayeeyaa kaabashaa dalka oo dhan.

D. Daahfurnaanta Dawladda

i. Kaqaybgalka Danabaysan

Dawladdu waxay horumarisaa ICT-ga, uguna sahashaa muwaaddiniinteeda in ay qayb ka noqdaan maamulka, adeegbixinta, go'aanqaadashada iyo dejinta siyaasadda dalka. Kaqaybgalka mudaaddiiinta ee maamul wanaagga iyo horumarka dalka waxaa bulshada Soomaaliyeed loogu sahlaa:

- **Golayaasha Wadaxaajoodka ee Online-ka ah**: Habkan waxa uu muwaaddiniinta u sahlaa in ay fikradahooda iyo falcelintooda ugu soo gudbiyaan dawladda. Waa hab afkaara la isku dhaafsado.
- **Wikis:** Wikiska kala duwan ayey muwaaddiniinta ku qoraan afkaartooda xorta ah. Dawladda waxay kala socotaa falcelinta ra'yiga guud ee dadweynaha ee dimuquraaddiga ah.
- **Baraha Bulshada**: Dawladdu waxay mudnaan siisaa baraha bulshada: Facebook, Twitter IWM. Waxay muwaaddiniinta ku gaadhsiisaa adeegyada kala duwan ee warbaahineed ee danabaysan.

ii. Bogga Xogta Furan.

Bogga xogta furan waxay dawladda ku soo gudbisaa xogta miisaaniyadda, digniinta iyo daryeelka caafimaadka, fursadaha shaqo. Waa bog u furan dadweynaha Soomaaliyeed.

[16] Dhismaha Ganacsiga Dowladda Queensland 2.0, Australia

Qorshayaasha iyo Siyaasadaha Furan ee Dawladda

Dawladdu waxay horumarisaa siyaasado dawladeed. Waxay ku muwaaddiniinta kaqaybgalka daahfurnaanta dawladnimada danabaysan. Dhammaan hay'adaha dawladda waxay leeyiin qorsheyaal dawladeed oo Furan. Waaxyaha wasaaradaha waxay daabacaan qorshayaasha Furan eedawladda oo ay si sanadle ah u baahiyaan. Waxaa sal u ah fulinta dawladnimada danabaysan.



Jaantus 2: Soo jeedinta Habka istaraatiijiyadeed ee dawladnimadda danabaysan.

9. Habka Maamulka Dawladnimadda Danabaysan

Habka Maamulka Dawladnimada Danabaysan (HMDD) waxaa horumariyaa hannaanka maamulka guud ee danabaysan. Waxa uu hagaa oo hagaajiyaa kaalinta ay tignoolajiyaddu ku leedahay maamulka dalka. Habkan oo ah mid ku dhisan horumarin qaran, waxaa loo fuliyaa sidan hoos ku qoran:

- **Wasiirka Wasaradda Isgaarsiinta iyo Tiknooloojiyadda** ayaa hagaya oo hoggaamiyaa, siyaasadda iyo iskudubarid istiraatiijiyadda dawladnimadda danabeysan ee 2025.
- **Guddiga Fulinta Qaran ee Dawladnimadda Danabeysan** Kadib soo magacaabista Hay'adaha hoos kuxusan xubnaha guddiga,iyo kusoo saarista Magacaabis rasmi ah Wasiirka Wasaaradda Isaarsiinta iyo Teknolojiyadda, Guddigu waxa uu mas'uul ka noqanayaa dejinta hal-beegyada casriyeenta adeegyada doowladda, maamulka, isuduwidda iyo dejinta halbeegyada dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya 2025.

  Wasaaradda isgaarsiinta iyo Teknoljiyadda ayaa laga rabaa dajinta TOR ka Guddiga fulinta qaran ee dowladnimada danbabeeysan
- **Waaxda Dawladnimadda Danabeysan:** Waaxdani waxay masuul ka tahay: isuduwidda, farsamada iyo kormeerka hawlaha danabeeynta Adeegyada wasaaradda, Waaxda ayaa noqaneeyso Xogeenta Guddiga qaran ee fulinta dawladnimada danbeeysan.
- **Wasaaraddaha:** Waa Wasaaradaha ugu muhiimsan oo laga rabo ineey danabeeysaan adeegyada daruuriga ah ee maalinlaha loo isticmaalo.



10. Qodobadda Xasaasiga ah: Kormeerka, Qiimaynta Guusha iyo Khataraha

Qodobbadan waxay iftiiminayaan qaar ka mid ah qodobadda xasaasiga ah ee guusha fulinta dawladnimadda danabaysan. Waxay tilmaamaan khataraha iyo yarayntooda, qiimeynta iyo lasocodka hawlada dawladda. Waxay ifiyaan fahanka saddex shay guusha muhiim u ah iyo maareynta fashilka mashaariicda.

10.1 Guusha

Istaraatiijiyadda dawladdu waxay hirgelisaa dawladnimadda danabaysan. Waxaa fure u ah qodobbadan:

Qodobbada muhiimka ah ee guusha.	Shuruuda
Dawlad udub dhexaad u ah guusha muwaaddiniinta.	• Maamulidda iyo fahanka baahiyaha muwaadiniinta. • Danaynta dawladnimada danabaysan. • Horumarinta tiknoolajiyadda. • Qancinta muwaaddiniinta. • Wacyigelinta bulshada. • Taageeridda wadashaqeynta. • Horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha. • Sugidda amniga danabaysan. • Nidaaminta iyo xoojinta warbaahinta. • Kobcinta waxsoosaarka iyo ganacsiga.
Maamulidda Isbeddelka	• Qiimeynta iyo fahanka isbeddelka. • Hagaajinta kheyraadka dalka. • Maamulidda dakhliga. • Kafaa'iideysiga isbeddelka. • Taageeridda shaqaalaha. • Maamulidda mashaariicda. • Istaraatiijiyadeynta qorshayaasha qaranka. • Tixgelinta rabitaanka muwaaddiniinta. • Abaalmarin iyo dhiirrigelinta maamulayaasha. • Kasbashada kalsoonida muwaaddiniinta.
Taageerada maamulka	• Taageero xoog leh oo maareyn ah oo loogu talagalay muddada mashruuca dawladnimadda danabaysan • Awoodsiinta maamulka. • Maareynta kalaqaybsanaanta maamulka. • Bixinta adeegyo hufan. • Hoggaamin wanaagsan. • Maamul wanaag. • Isku dubarid mashaariicda dawladda. • Qorsheyn wanaagsan. • Wadashaqeyn wanaagsan. • Kormeerid iyo qiimeyn cilmiyeysan. • Maareynta musiibooyinka.

	• Fulinta iyo sarreynta sharciga. • Xoojinta siyaasadda danabaysan. • Horumarinta dawladnimadda danabaysan.
Xiriirka Muwaaddiniinta	• Wanaajinta xiriirka muwaaddiniinta. • Kajawaabidda cabashooyinka muwaaddiniinta. • Iskuxirka dawladda iyo muwaaddiniinta. • Horumarinta aaladaha isgaarsiinta. • Horumarinta hal-abuurka dadka. • Hagaajinta xafiisyada xiriirka dadweynaha. • Taageeridda iyo beeridda dhaqanka nabadda. • Tayeynta adeegbixinta iyo adeeghelidda. • Kobcinta aqoonta xiriirka tiknoolajiyadda. • Casriyeynta ICT-ga. • Hagaajinta nidaamka amniga.
Khabiirad Kordhinta	• Kordhinka iyo isdhaafsiga khibradda. • Kobcinta karaanka shaqaalaha dawladda.
	• Shaqaaleysiinta lataliyayaal leh aqoon iyo khibrad horumarin. • Casriyeynta aqoonta ICT-ga ee shaqaalaha dawladda. • Xoojinta iskaashiga dawladda iyo muwaaddiniinta.
Ilaha dhaqaalaha	• Nidaaminta isticmaalka khidmadaha Premium. • Kobcinta dakhliga fardiga. • Xoojinta maalgashiga tiknoolajiyadda. • Kasbashada taageerada caalamka.
Siyaasadda Gudaha iyo Dibadda	• Horumarinta siyaasadda tiknoolajiyadeed ee gudaha. • Horumarinta siyaadda tiknoolajiyadeed ee dibadda.

10.2 Dersidda Khatarta

Istaraatiijiyaddu waxay wax ka qabanaysaa caqabadaha ay wajihi karta dawladnimadda danabaysan.

Khatar	Saameynta	Yareynta
Kutiirsanaanta Dee q bixiyayaasha	Sare	• Miisaaniyadda dawladda iyo maalgelinta. • Iskaashiga guud iyo midka gaar.
Amniga iyo Ilaalinta Sirta	Sare	• Qaadidda tallaabin amnisugid. • Dejinta siyaasado, xeerar iyo habraacyo. • Danabaynta aqoonsiga qaranka ee dadka. • Danabaynta adeegbixinta aqoonsiga.
Teknolojiyada Duugowday	Sare	• Qorsheynta tiknoolajiyadda la adeegsanayo. • Tababaridda xirfadlayaasha ICT-ga. • Maalgelinta cilmibaarista horumarinta.
Fashil farsamo	Hoose	• Qorshaha kasoobashada musiibooyinka. • Qorshaha dibukobcinta ganacsiga
Iska caabinta isbeddelka	Sare	• Isbeddelka maamulka. • Wax-ka-qabashada xaaladaha deegaanka.
		• Hawlgelinta saamileyda. • Dhisidda wacyiga bulshada.
Ku tiirsanaanta soo saaraha/keenaha tiknolojiyada	Sare	• Fidinta aqoonta • Kobcinta karaanka muwaaddiniinta. • Hagaajinta maamulka xiriirka • adeeghelaha iyo adeegbixiyaha.

Helitaanka agabka & kharashka mashruuca oo xad dhaaf ah	Dhexdhexaad	• Horumarinta dakhliga fardiga. • Danabaysan maamulka mashriicda. • Maalgashiga dawladda. • Agaasimidda shuraakada dawladda iyo shirkada gaarka ah.
Helitaanka agabka & kharashka mashruuca oo xad dhaaf ah	Dhexdhexaad	• Horumarinta dakhliga fardiga. • Danabaysan maamulka mashriicda. • Maalgashiga dawladda. • Agaasimidda shuraakada dawladda iyo shirkada gaarka ah.
Hanashadda iyo Qaadashada hoose	Sare	• Istaraatiijiyada dhijitaalka loo dhan yahay. • Xalka kasbashada macaamiisha. • Yareynta kharashaadka macaamilka. • Kaladoorashada marinnada kannaalada badan. • Habka hirgelinta caddaynta figradaha.

10.3 Kormeerka iyo Qiimaynta (Monistoring And Evaluation)

Istaraatijiyadda dawladda waxay xoojisaa kormeerka iyo qiimeynta hawlaha hay'adaha dawladda. Waxay arrinta ku hagtaa, kuna hagaajisaa gaaridda yoolalka istaraatijiyadeed ee dawladda ee danabaysan.

Dowladdu, iyadoo loo marayo hay'adaha maamula ee loogu talagalay e-government-ka, waxay horumarin doontaa qaab-dhismeed kormeer iyo qiimeyn leh ujeeddooyin, natiijooyin, wax-soo-saaryo, iyo tilmaamayaal si cad loo qeexay oo lagu raadraaco horumarka, guulaha, fashilada, iyo casharrada laga bartay mashaariicda e-government-ka ee ka hirgeliyay dowladda. Habkani wuxuu ka caawin doonaa dowladda inay wax ka qabato arrimaha muhiimka ah ee ka taagan hirgelinta e-government-ka, kuwaasoo aan inta badan ahayn kaliya dhibaatooyin farsamo, balse sidoo kale la xiriira maaraynta nidaamyada iyo wacyigelinta dadka.

Tilmaamayaasha lagu horumarin doono habka kormeerka iyo qiimeynta ayaa loo isticmaali doonaa sidii qalab lagu cabbiro saameynta Istiraatiijiyadda iyo Khariidadda-habeynta e-government-ka Soomaaliya. Sidoo kale, waxa loo adeegsan doonaa qaab waxbarasho si looga faa'iidaysto casharrada laga bartay hirgelinta mashaariicda.

.

11.Qorshe Hawleedka Istaraatiijiyadda Dawladnimada Danabaysan

Dawladdu waxay leedahay qorshe hawleed iyo istaraatijiyad. Waxay ku fulisaa dawladnimada danabaysan. Qorshayaashan waxay u qaabaysan yihiin sida hoos ku qorsheysan oo ay dawladda u fulisaa:

- **Marxaladda 1aad:** Dibuhabeynta iyo hagaajinta adeegbixinta dawladda.
- **Marxaladda 2aad:** Koruqaadista iyo fidinta adeegga danabaysan.
- **Marxaladda 3aad:** Kobcinta hufnaanta wadashaqeynta hay'adaha dawladda.

	2025 - 2026	2026 – 2027	2027 – 2029
	Marxaladda 1aad Hagaajinta adeegbixinta.	**Marxaladda 2aad Koruqaadidda**	Marxaladda 3aad Kobcinta iskaashiga.
1. Nidaamka tooska ee adeegyada danabaysan.	1.1: Sameynta Xarunta Dhexe ee Dawladnimadda Danabaysan ee Qaranka.	1.2 Wajiga 2-aad: Horumarinta Adeegyada danabaysan.	**1.2 Wajiga 3-aad: Horumarinta Adeegyada danabaysan.**
	1.2: Hindisaha mudnaanssiinta adeegga moobaylka.	1.3 Wajiga 2-aad: Hindisaha mudnaansiinta adeegga moobaylka.	**1.3 Wajiga 3-aad: Hindisaha mudnaansiinta adeegga moobaylka.**
	1.3 Mudnaansiinta adeegga moobaylka.		
	1.4 Horumarinta habraacyada adeegbixinta danabaysan.		
2. Dhijitaaleynta Bulshada:	2.1: Horumarinta aqoonta isticmaalayaasha adeegga danabaysan.	2.1 Siikobcinta aqoonta adeegsadayaasha adeegga danabaysan.	**2.1 Siijoogteynta aqoonta adeegsadayaasha adeegga**

			danabaysan.
	2.2: Horumarinta akhriska iyo qoraalka dhijitaalka ah.		
	2.3: Horumarina Siyaasadda dhijitaalka ah ee ilaalinta siraha.		
	2.4: Horumarinta Siyaasadda isgaarsiinta dhijitaalka ah ee qaranka.		
3. Kordhinta Waxtarka Dowladda:	3.1 Hindisaha wada shaqaynta adeegyada danabaysan	3.2: Horumarinta gelitaanka kannaalka badan ee danabaysan.	**3.4: Wajiga 2-aad: Horumarinta hindisayaasha guud ee dawladda.**
	3.3: Horumarinta kaabayaasha ICT-ga ee dawladnimadda danabaysan.	3.3: Horumarinta kaabayaasha ICT-ga ee dawladnimadda danabaysan	
		3.4: Horumarinta Hindisayaasha guud ee dawladda.	
	3.5: Dhismaha ganacsiga qaranka.	3.6: Horumarinta kaabayaasha muhiimka ah ee dawladda.	
4. Xaqiijita Dawlad Daahfuran	4.1 Kaqaybgalka dawladnimada danabaysan.	4.2: Xariir iyo xog daahfuran.	
	4.3 Daahfurnaanta siyaasadaha iyo qorshayaasha dawladda.		

ISTARAATIJIYADDA DOWLADNIMADA DANEBAYSAN

(eGovernment Strategy 2025-2029)

https://Moct.gov.so/

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraax:XRW/374 01/2025 Taariikh: 23/01/2025

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA BIXID 29 JAN 2025 EXIT OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Ku: Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada **Muqdisho**
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada **Muqdisho**
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya **Muqdisho**

UJEEDDO: GO'AAN GOLE EE ANSIXINTA SIYAASADDA QARAN EE DHIJITAALKA LOO DHANYAHAY"

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

Markuu arkay: Warqadda summadeedu tahay **XW/WI&T/035/2024** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyadda Siyaasadda Qaran ee Dhijitaalka loo Dhanyahay;

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW03.106.01.25** ee **23/01/2025**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Dhijitaalka loo Dhanyahay** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Muhiimadda siyaaddani u leedahay hagaajinta iyo ballaarinta hannaanka iyo adeegyadda dhijitaalka loo dhanyahay

Waxa uu Meelmariyay:

Qodobka 1aad:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW03.106.01.25** ee **23/01/2025**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Dhijitaalka loo Dhanyahay** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Isgaarsiinta & Tiknolajiyadda loo igmaday in ay hirgeliso, meelmarisana "Siyaasadda Qaran ee Dhijitaalka Loo Dhanyahay "

Qodobka 3aad

Dhaqangal

Go'aanka Golaha waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Siyaasaddanna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-00-11-2025
TAARIIKH 22-11-2025
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Guuleh
Hantidhowraha Guud Ee XFS

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومـــال الفدرالية
وزارة الاتصالات والتكنولـوجيا
مكتب الوزير

Somali Federal Republic
Ministry of Communications & Technology
Office of the Minister

Ref: XW/WI&T/ 035/2024 **Date:** Dec 11, 2024

Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS **-Muqdisho-**
Og: Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS -Muqdisho-
Og: Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada -Muqdisho-
Og: Wasiir Ku/xigeenka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada -Muqdisho-

Ujeeddo: Soo-gudbin Siyaasadda Qaran ee Dhijitaalka Loo Dhan Yahay

Mudane Ra'iisul Wasaare,

Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada XJFS waxay si xushmad leh halkan ugu soo gudbinaysaa **Siyaasadda Qaran ee Dhijitaalka Loo Dhan Yahay (National Digital ICT Inclusion Policy).**

Diyaarinta Siyaasaddan waxaa eegis ku sameeyay Sharci yaqaanada Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Guddi-hoosaadka Tiirka Horumarinta Dhaqaalaha, Wasaaradda Cadaaladda iyo Garyaqaanka Guud ee Dawladda si loo hubiyo in aanay ka hor imanaynin Dastuurka iyo Shuruucda Dalka.

Haddaba, Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada waxay ka codsanaysaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha in Siyaasaddan loo gudbiyo Xubnaha Golaha Wasiirada si loo Ansixiyo.

Mahadsanid,

Xil. Maxamed Adam Macalin Cali "Somali"
Wasiirka Isgaarsiinta & Teknolojiyada XFS.

P.O. Box: 66, BN03010, Via Republic Mogadishu, Somalia
Tell: +252 615570984
Email: minister@moct.gov.so **Website:** www.moct.gov.so

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda

Siyaasadda Qaran ee Dhijitaalka loo Dhan yahay

Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda, 2024

Hordhac

Teknoolajiyada dhijitaalka ah waa arrin aasaasi u ah bulshooyinka casriga ah, iyadoo laga faa'iidaysanayo adeegyada dawladda, bixinta kharashka adeegyada, helitaanka xawaaladaha, codsashada dukumentiyada aqoonsiga, shaqooyinka, daraasadaha, cilmi baarista, billaabista iyo socodsiinta ganacsiyada iyo fududaynta isdhex-galka iyo xiriirka bulshada, qoysaska iyo asxaabta intaba.

Xanuunkii safmarka ahaa ee COVID-19 ayaa kor u qaaday muhiimada teknoolajiyada dhijitaalka ah, taas oo ka dhigaysa udub dhexaadka shaqada, xiriirka, waxbarashada, helitaanka xogaha, wararka iyo adeegyada asaasiga ah.

Runtii, isticmaalka teknoolajiyada dhijitaalka ah ee Soomaaliya ayaa sii kordhay wixii ka dambeeyay COVID-19 maadaama teknoolajiyada dhijitaalku ahayd mid muhiim u ah sii socoshada, waxbarashada, adeegyada caafimaadka iyo xawaaladaha. Faafitaankii COVID-19-ka ee aduunka oo dhan ayaa muujisay baahida loo qabo teknoolajiyada dhijitaalka inay bulshada oo dhan uu gaarto, gaar ahaan qaybaha ugu nugul ee dadweynaha.

Aragtida Hagaysa Siyaasadda:

Siyaasadda teknoolajiyadda dhijitaalka ah ee loo dhanyahay ujeeddadeeda ugu wayn waa in kor loo qaado helitaanka teknoolajiyada dhijitaalka ah iyo in la buuxiyo gaabisyada ka jira. Siyaasaddan waxay soo gudbinaysaa talooyinka soo socda kuwaas oo si gaar ah diiradda u saaraya bulshada nugul:

• Kor u qaadista iyo hagaajinta isku xirka interneetka ballaadhan iyo helida aaladaha mudnaanta u leh isticmaalka teknoolajiyadda dhijitaalka.
• Kordhinta helitaanka, awooda iyo isticmaalka teknoolajiyada dhijitaalka ah,
• Kobcinta wacyiga, aqoonta iyo xirfadaha dhijitaalka ah.
• Fududeynta bixinta adeegyada guud ee dhijitaalka loo dhan yahay iyo;
• Kormeerka iyo qiimaynta.

- In la horumariyo lana hirgeliyo siyaasado iyo qorshe fog oo lagu xaqiijinayo in qof walba oo Soomaali ah, gaar ahaan dadka nugul ay heli karaan adeeg Internet xawaare badan, aamin ah, jaban la iskuna halayn karo.

- In la kordhiyo helitaanka qof walba uu ku heli karo qalabka iyo xirfadda uu u baahan yahay si uu uga qaybqaato ulana jaan-qaado teknoolajiyadda dhijitaalka ah.
- In lagala shaqeeyo shirkadaha adeegyada bixiya ee gaarka loo leeyahay, hay'adaha dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn sidii loo horumarin lahaa in dadka nugul ay u heli lahaayeen una awoodi lahaayeen adeegga Internet-ka iyo aqoonta dhijitaalka ah.
- In la fududeeyo helitaanka adeegyada online-ka ah ee dawladda, sida waxbarashada iyo adaeegyada kale ee Internet ka lagu bixiyo, lana dhiiri-geliyo curinta iyo isticmaalka macluumaadka awoodda u siinaya bulshada sidii ay u heli lahaayeen fursado horumar dhaqaale iyo kuwo bulsho.

Qodobadda Ugu Muhiimsan ee Siyaasadda

Qodobbada ugu muhiimsan siyaasaddan waxaa kamid ah in:

i. La aqoonsado kooxaha soo socda, meel kasta oo ay ka joogaan dalka, inay yihiin dadka nugul:
   a. Haweenka iyo gabdhaha
   b. Dhallinyarada aan shaqaynin
   c. Reer miyiga
   d. Reer magaalka danyarta ah
   e. Dadka da'da ah ama waayeelka
   f. Dadka baahiyaha gaarka ah qaba
   g. Dadka barakacayaasha ah gudaha
   h. Qaxootiga

ii. In la siiyo dadka nugul, cadaalad lagu xaqiijinayo inay mudnaan u yeeshaan mashaariicda heer qaran ee la xiriira teknoolojiyadda hindisayaasha isgaarsiinta (ICT) ilaa lasoo gaarsiiyo ka qayb-qaadashadooda isticmaalka iyo helidda adeegyada teknoolojiyadda heer gaarsiisan ugu yaraan meel dhexe ama sare.

iii. In la dhiiri-geliyo wax-ka-beddelka sharciyada hadda jira, xeer-nidaamiyeyaasha, qorsheyaasha iyo hay'adaha jira si loo sugo loona xaqiijiyo in si siman oo cadaalad ah uga qayb-qaataan dadka nugul dhaqaalaha dhijitaalka ah (digital economy)

iv. In la curiyo lana hirgeliyo sharciyo, xeernidaamiyeyaal, qorsheyaal iyo hay'ado cusub si loo gaaro ujeedadda ah in dadka nugul ay ka qayb qaataan siyaasadda ka qayb-qaadashadda loo dhan yahay ee dhaqaalaha dhijitalka ah (digital economy).

v. In la siiyo mudnaanta maalgelinta iyo wax-ka-qabadka loo baahan yahay si loo gaaro ka qayb-gal buuxa oo ay ku yeeshaan dadka nugul isticmaalka iyo helidda adeegyada casriga ah ee teknoolojiyadda ku dhisan sanadka 2033.

vi. In la dhaqangeliyo sharciyada iyadoo loo mrayo Hay'adihii fulin lahaa si awood sharci loo siiyo Siyaasaddan Qaran.

Mabaadi'da Hagaya Hirgelinta Siyaasadda

Mabaadi'dan soo socda ayaa hagi doonaan hirgelinta siyaasaddan:

i. **Dhammaan inay heli karaan:** in awood loo siiyo qof walba (gaar ahaan iyadoo la tix-gelinayo caqabadaha ay waajahaan dadka baahiyaha gaarka ah qaba ee kala duwan) inay adeegsadaan, isticmaalaan, la fal-galaan, wadaagaanna kaabayaasha dhijitalka ah ah (digital infrastructure) si waafaqsan sharciyada iyo xeernidaamiyeyaasha jira.

ii. **Dhammaan inay iibsan karaan:** in la sugo in cidna ay uga maqnayn ka qay-qaadashada dhaqaalaha dhijitalka ah (digital economy) caqabadaha la xiriira in aanay iibsan Karin kharash ahaan agabka iyo adeegyada, ama ay joogtayn Karin iska bixinta kharashyadda la xiriira.

iii. **Dhammaan inay ka faa'iidaysan karaan:** In la xaqiijiyo in teknoolojiyadda isticmaalkeeda iyo xogta ay ku helayaan ay ka qayb-qaadato bad-qabka iyo horumarka dhaqaale iyo mid bulsho, kuna heli karaan baraha warbaahinta ama qaabka ugu haboon ee ay ku isticmaali karaan ee ka jawaabaya baahidda gaarka ah ee shacabka.

iv. **Dhammaan ay ku qabaan kalsooni iyo amni:** inay ku qabaan isticmaalka adeegyada online-ka kalsooni iyo dareen amni iyadoo lagu gaarayo kobcinta karaanka iyo aqoonta, teknoolojiyadda, sharciga iyo xeernidaaminta teknoolojiyadda isticmaalkeeda la xiriira.

v. **Iskaashiga dhijitaalka loo dhan yahay:** In la xaqiijiyo ka qayb-qaadashada iyo iska kaashiga hay'adaha dawladda, ganacsiyada gaarka loo leeyahay, bulshada rayidka, bahda waxbarashada iyo saaxiibada horumarka dhijitalka loo dhan yahay, lagana wada shaqeeyo isku-dubaridka dadaalada kala duwan ee lagu dhaqaaqayo.

vi. **Cadaynta ku dhisan dhijitalka loo dhan yahay:** In la xaqiijiyo in dhamaan barnaamijyada iyo mashaariicda dhiiri-gelinta dhijitalka loo dhan yahay ay ku

dhisan yihiin xog-uruurin iyo falanqayn iyo in si joogto ah loo cabiro saamaynta iyo natiijada dadaalada lagu dhiiri-gelinayo dhijitalka loo dhan yahay.

Aragtida Isbedelka (Theory of change) ee ay ku dhisantahay Siyaasaddan:

Aragtida is-bedelka ee siyaasaddan waxay ku dhisan tahay qodobbada soo socda:

i. In dadka oo dhan ay u baahan yihiin inay helaan hab fudud oo ay ku wada xiriiraan, ujeeddada ugu horreysana ay tahay sidii ay u heli lahaayeen xiriir is-dhexgal bulsho (ehel iyo saaxiibbo).

ii. Haddii la helo adeegga isgaarsiinta teknoolojiyadda, waxuu isticmaalkiisu horumarinayaa ganacsiga sida helidda lacagaha, iibsiga agabka, adeegyada taasoo marka dambe ka dhigaysa qalabka isgaarsiinta (talefoonka gacanta iyo kombuyuutarka) aalad muhiim ah oo wax lagu kala iibsado.

iii. Caqabadaha ugu waaweyn ee helidda iyo isticmaalka adeegyada elektaroonigga ah waa mid ama dhawr ka mid ah kuwa soo socda: adeegga isgaarsiinta oo aan baahsanayn ama tayadiisu ay hoosayso iyo qiimaha agabka teknoolojiyadda isgaarsiinta ama adeegyada lagu isticmaalo oo sareeya, Heerka xiga marka ay noqoto in si buuxda teknoolojiyadda loogo faa'iidaysto dhijitalka, waxaa kaloo caqabadaha ka mid ah aqoonta iyo xirfadda isticmaalka dhijitalka oo hooseysa iyo helitaanka xogta iyo macluumaadka oo xadidan ama yar.

iv. In lagu tix-geliyo kooxaha nugul siyaasadaha iyo qorshayaasha guud ee lagu dhiiri-gelinayo helitaanka adeegyada dhijitalka ah waxa ka dhasha in mar walba aysan helin mudnaanta ay leeyihiin. Sidaa awgeed, waxa lagama maarmaan ah in la dejiyo siyaaasado iyo barnaamijyo faragelin gaar ah oo xaqiijinaya in ay si cadaalad ku jirto u helaan.

Jaantuska Qorshaha waxqabad ee Macquulka ah

Jaantuska 1aad wuxuu muujinayaa hanaanka iyo talaabooyinka lagu dedejinayo adeegsiga danabaysan ee teknoolojiyadda dhijitalka ah ee loo dhan yahay.



Hanaanka qorshaha waxqabadka macquulka ah ee la soo jeedinayo wuxuu u baahan yahay:

i. In la xaqiijiyo tiro ahaan heerka uu gaarsiisan yahay ka maqnaanshaha adeegsiga teknoolojiyadda dhijitalka ah ee loo dhan yahay (digital exclusion) iyo asbaabta keenta iyadoo la samaynayo sahamin cilmi baaris ah.

ii. In dib u eegis lagu sameeyo siyaasadaha iyo qorshayaasha jira si loo ogaado caqabadaha iyo daldaloolada ku hor gudban:
   a. Gaarsiinta iyo baahinta adeegyada dhammaan dadka degan Soomaaliya.
   b. Kor u qaadista inay helaan kooxaha nugul qalab munaasab ah oo adeegyada teknoolojiyadda ay ku isticmaalaan.
   c. Inay helaan oo ay isticmaalaan kooxaha nugul adeegyo qiimahooda ay awoodi karaan.

iii. In la hormariyo siyaasadaha iyo qorsheyaasha fog Lana curiyo qaar hor leh hadba sida loogu baahdo si loo xaqiijiyo in la siiyo kooxaha la takooro mudnaantooda ay ku helayaan adeegyada dhijitalka ah si cadaalad ah.

iv. In la go'aamiyo khayraadka loo baahan yahay si adeegsi teknoolojiyadda casriga ah oo loo dhan yahay loo gaaro, lana hirgeliyo siyaasado iyo qorshayala fog oo dib loo saxay ama qaar cusub

v. Talaabooyinka (i) ilaa (iv) ee kor ku xusan waxa ay keeni doonaan in kooxaha nugul ay helaan adeegyo ay iibsan karaan, laakiin kuma filna si ujeedada loo gaaro oo si buuxda looga faa'iidaysto adeegsiga teknoolojiyadda. Waxaa aad loogu baahan yahay qorshayaal la xiriira kor u qaadista wacyiga faa'iidooyinka waaweyn ee la xiriira adeegsiga teknoolojiyadda iyo kobcinta xirfadda adeegsiga teknoolojiyadda dhijitalka ah.

vi. Isku darka adeeg qiime jaban, wacyi-gelin baahsan iyo kobcinta xirfadaha elektaroonigga ah taasoo u hagta in si fiican looga faa'iidaysto adeegsiga teknoolojiyadda dhijitalka ah, taasoo keenaysa in si buuxda oo loo dhan yahay looga qayb-qaato isbedelka dhaqan-dhaqaale ee taabanaya qofka ahaan iyo guud ahaan bulshadda.

vii. Natiijada wakhtiga dheer ee la filayo inay ka dhalato barnaamijkan, keeni doontana inuu noqdo mid waara waa isbedel ku yimaadda hab-dhaqanka kooxaha uu barnaamijku beegsanayo marka faa'iidooyinka ay ka heleen ay kor u qaaddo baahidooda iyo rabitaankooda adeegyo ka tayo badan kuwii hore. Sidoo kale waxay kor u qaadi doontaa rabitaankooda inay iska bixiyaan kharashka isticmaalka adeegyada danabaysan uga baxa (Internet-ka) iyo inay iska bixiyaan kharashka agabka (kombuyuutar, tablet ama mobile) adeegga lagu isticmaalo iibsigiisa ama iska-beddelkiisa la xiriira. Arintan waxay ka yaraynaysaa dawladda culayska dhaqaale ee ay ku bixin l siday barnaamijkan uga dhigi lahayd mid waara.

viii. Waxa jira asbaab badan oo curyaamin Kara guusha barnaamijyada horumarineed ee loogu talo galay dadka dabaqadda hoose ee bulshada, waana inay qayb muhiin ah ka noqdaan La socosho joogto ah iyo qiimeyn muddaysan fulinta si ay u hagaan xeeladaha iyo istaraatiijyadaha toosinta ee loo baahanyahay. Middan waxa kale oo ay jihaynaysaa aragtida Isbeddelkan sidii loo horumarin lahaa, loona ogaan lahaa hanaanka ugu wanaagsan ee ujeedadda loo gaari lahaa.

Malooyinka Asaaska u Ah (Key underlying Assumptions):

Malooyinkan soo socda ayaa loo qaatay inay macquul yihiin laguna saleeyay maangalnimada iyo khibradda laga helay qoraalada laga tixraacay baarista mawduucan:

i. Soomaaliya waxay haysaa dhabbaha xasiloonida iyo nabadda. Isku-dhacyadu waxay si aan kala sooc lahayn nolosha ugu adkeeyaan dadka ugu hooseeya dabaqadaha nolosha.

ii. Kooxaha nugul waxay waajahaan caqabado badan oo la xiriira helidda xuquuqahooda asaasiga ah. Waxaa ka mid ah tusaale ahaan xaqa inay ka qayb qaataan ama ka faa'iidaan fursadaha ganacsi ee ay danaynayaan. Waxaa intaas dheer faragelinnaha la xiriira xalinta caqabadda helidda iyo isticmaalka adeegyada dhijitalkaahee loo dhan yahay iyadoo dawladdu ka shaqaynayso in ay hirgeliso hanaan lagu xaqiijinayo kooxaha nugul inay helaan xuquuq la mid ah kuwa kale ee ku nool Soomaaliya, isla markaana ay raacinayso talaabooyin lagu xaqiijinayo inay soo gaaraan bulshada inteeda kale.

iii. Waxa la heli doonaa maalgelin ku filan, waxaana qoondo hortebin ku dhisan la siin doonaa helidda iyo isticmaalka adeegyada dhijitalka ah oo loo dhanyahay.

iv. Helidda iyo isticmaalka adeegyada dhijitalka ah ee loo dhanyahay waxa lagu geli doonaa hannaan wada-shaqayn oo ay hay'addaha dawladda, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo bulshada rayidka ah ay si hufan uga wada shaqayn doonaan sidii loo dardargelin lahaa helidda iyo isticmaalka dhijitalka ah ee loo dhanyahay Soomaaliya oo idil.

Faragelinnaha Istaraatiijiyadda Muhiimka ah ee Siyaasaddan

i. Horumarinta adeegga isku-xirka Internetka iyo helidda qalab awood u leh in Internet xawaarihiisu sareeyo lagu isticmaalo iyadoo hortebinta la siinayo goobaha aanu adeeggu ka jirin iyo kuwa uu ku liito:

a. Curinta iyo hirgelinta istaraatiijiyadda Internet-ka xawaarihiisu sarreeyo taasoo xaqiijinaysa in si guud oo jaban loo helo oo ay ku jirto helidda Internet qiimihiisa la kabay ama lacag la'aan ah si kooxaha iyo shakhsiyaadka mudan ay u helaan.

b. Ka faa'iideysiga adeegyada Internetka ee hay'addaha sida: iskuulada, hay'adaha dawladda, isbitaalada, maktabadaha.

c. Xaqiijinta ku helitaanka qalabka dhijitaalka ah guud ahaan qiime la awoodi karo (soo iibsiga iyo isticmaalkaba) gaar ahaanna kooxaha nugul.

d. Xaqiijinta helitaanka agab dhijitaal ah oo qiimihiisa la awoodi karo oo si gaar ah u caawiya dadka baahiyaha gaarka ah qaba.

ii. Kordhinta helitaanka, awoodda iibsiga iyo isticmaalka iyadoo:

a. La hirgelinayo talaabooyin qiimaha taleefannada casriga ah loogu yaraynayo dadka isticmaalaya.

b. Iyadoo la samaynayo iskaasho hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ka dhexeeya, waa in kor loo qaado helitaanka ee iskuulada iyo goobaha caafimaadka ee agabka isgaarsiinta (kombuyuutarada, tablet-yada iyo taleefanada casriga ah) iyadoo si gaar ah loogu fududeynayo kooxaha nugul.

c. Curinta iyo hirgelinta barnaamijyo wacyi-gelineed oo la xiriira isticmaalka teknoolojiyadda casriga ah si ay tilmaan ugu noqoto faa'iidooyinka degdegga ah ee ay ka heli karaan kooxaha nugul iyadoo la cayimaayo kooxahan loona abuurayo xog iyo macluumaad baahiyahooda gaarka ah ka jawaabaya.

d. Xaqiijinta in la heli karo adeegyada dawladda ee Internetka oo qiimo yar ama bilaash ah ee xogta

e. In la xaqiijiyo in adeegyada iyo xogta adeegyada dawladdu ay ku baxaan ay ku isticmaali karaan dadka baahiyaha gaarka ah qaba ama caqabado ay ka haystaan helidda adeegyadan (baahi gaar ah oo uu qabo, aqoon darro dhanka qoraalka iyo akhriska ah, luqadda, iwm.)

f. Xaqiijinta in mareegyada adeegyada dawladdu ay waafaqsanyihiin halbeegyada adeeg-helidda kuwoodii ugu dambeeyay.

g. Xaqiijinta in xukuumadda oo dhan ay u hogaansanaato shuruudaha adeeg helista markaay iibsanayso agabka iyo adeegyada teknoolojiyadda isgaarsiinta.

iii. Kobcinta wacyiga, aqoonta dhijitalka ah iyo xirfadaha

a. U cayimidda iyo tilmaanta tusaalayaasha isticmaalka teknoolojiyadda ee hadda jira qaybaha kala duwan ee kooxaha la takooro si ay hogatusaalayn ugu noqoto oo ay u abuuraan ama kor ugu qaadaan wacyigooda la xiriira teknoolojiyadda dhijitalka ah iyo faa'iidooyinkooda dhaqaale iyo horumar bulshaba.

b. Horumarinta iyo kobcinta akhris qoraalka dijitalka ah ee kooxaha inta badan la takooro iyadoo la isticmaalayo hanaan karti-qiimeyneed oo ku tababaraya dhinacyada muhiimka ah sida isticmaalka qalabka isgaarsiinta, aqoonta asaasiga ah ee warbixinnada iyo xogaha, isgaarsiinta iyo wada-shaqaynta casriga ah, curinta macluumaadka (qoraal, maqal, sawiro iyo muuqaallo), iyo isticmaalka Internetka. Macluumaadka iyo habka loo tababarayo waa inuu mar walba

munaasab ku yahay baahiyaha gaarka ah iyo xaaladaha gaarka ah ee qaybaha kala duwan ee kooxaha la takooro.

c. Curinta barnaamijyo la xiriira wacyi-gelinta amniga Internet ka oo ay ku jiraan tababaro sida loo isticmaalo aaladaha dhijitalka ah ee la isku difaaco marka la isticmaalayo Internet-ka.

iv. Fududaynta adeeg-bixin iyo wargelin dadweyne oo lagu helo hab dhijital ah oo loo dhanyahay:

a. Naqshadaynta iyo gaarsiinta isticmaalaha adeegyada danabaysan ee dawladda ee kor u qaadi Kara wax-ku-oolnimada adeegyada dadweynaha iyo isticmaalka teknoolojiyadda dhijitalka ah ee muwaadiniinta guud ahaan, gaar ahaanna kooxaha nugul.

b. Bixinta adeegyo bulsho oo loo dhan yahay, la gaari karo, lana jaanqaadaya heerka akhris-qoraal ee bulshada sida waxbarashada iyo caafimaadka iyadoo loo marsiinayo wadooyin dhawr ah.

c. Dhiirigelinta curinta iyo wadaagista macluumaad dhaqanka iyo nuxurka afka Soomaaliga awood siinaya.

v. La socoshada, qiimeynta iyo wax ka barashada barnaamijkan:

a. Abuuridda tilmaamayaasha waxqabad ee muhiim ka ah si loola socdo horumarka isticmaalka teknoolojiyadda dhijitalka ah oo loo dhanyahay.

b. Horumarinta iyo hirgelinta qorshe la socosho iyo qiimeyn si loo sameeyo sixitaanno istaraatiiji ah iyo kuwo farsamo ba.

c. Diiwaangleinta casharada laga bartay si joogto ah si loogu saxo aragtida isbedelka iyo aqoonsashada hanaanka wanaagsan ee loo hirgeliyo.

Cabirada iyo Hiigsigga

Halbeegyada ujeeddooyinka fog ee muhiimka ah waxa lagu qeexay shaxda Halbeegyada 5-ta Sanno ee hoos ku xusan:

Faragelinno Istaraatiiji ah	Sharaxaad	Hiigsiga 5-ta Sanno
Adeeg Internet xawaarihiisu sareeyo iyo qalabka loo isticmaalo	Jiritaanka Istaraatiijiyadda Internetka Xawaarihiisu sareeyo	Istaraatiijiyadda Internetka xawaarihiisu sareeyo oo la soo saaray

		lana hirgeliyay
	Helitaanka Adeegga shabakadda 4G	100% shabakadda 4G oo waddanka wada gaaray
Helitaanka, qiime la awoodi karo, iyo isticmaalka	% tirada qoysaska haysta adeeg Internet xawaarihiisu sareeyo	45%
	% dadka haysta taleefan casri ah iyo adeeg Internet ay xogta ku heli karaan	75%
	% qoysaska haysta taleefanno casri ah, tablet-yo, iyo kombuyuutaro	25%
Karaanka iyo xirfadda isticmaalka teknoolojiyadda dhijitalkaah	% dhalinyarada isticmaali karta teknoolojiyadda casriga ah	Ugu yaraan 20%
	Karaanka isticmaalka teknoolojiyadda casriga ah guud ahaan	15% Kor u kac heerka karaanka isticmaalka teknoolojiyadda casriga ah .
Helitaanka macluumaadka iyo adeegyada danabaysan ee dawladda	% isticmaalayaasha Intenret-ka eeisticmaala adeegyada dawladda ee danabaysan	Ugu yaraan 15% dadka Internet-ka isticmaala oo isticmaalaya adeegyada dawladda ee dhijitalka ah.
	Tirada magacyada mareegto Internet-ka ee laga heli karo xog faa'iido leh oo Af Soomaali ku qoran	50% kor u kac magacyada mareegta Internetka ee bixiya macluumaad kor u qaadaya dhaqankeenna kuna qoran Af Soomaali
La socoshada, qiimeynta iyo wax ka barashada	Tirada qoraalada cilmi-baaris ee laga soo saaray helista iyo isticmaalka teknoolojiyadda casriga ah (digital-ka)	Ugu yaraan kor u kac shan-jibaar ah oo ku yimaadda cilmi baarista laga sameeyay mawduucyada la xiriira helista iyo isticmaalka teknoolojiyadda casriga ah (digital inclusion).

Qaabaynta Hay’adaha iyo Maalgalinta Siyaasadda.

Helitaanka iyo isticmaalka dhijitalka oo loo dhanyahay waxay u baahantahay, hoggaan iyo qaab-dhismeed hay’adeed iyo sidoo kale Maalgalin lagu hirgaliyo siyaasaddan.

Qaabaynta Hay’adaha:

- Helitaanka iyo isticmaalka teknolojiyadda dhijitalka ah oo loo dhanyahay waxay u baahan tahay hoggaan dhexe iyo isla xisaabtan la xiriira cadaalad-falidda helitaanka teknoolojiyadda casriga ah. Waax ama hay’ad dawladeed ee dhexe ama koox ayaa loo baahanyahay si ay u jiheyso una hirgeliso isla xisaabtan, aqoon isweydaarsi, ka faa’iideysiga khibradaha iyo aqoonta si waarta.
- Iskaashiga Hay’adaha Dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay waa halbawlaha Hirgelinta iyo baahinta kaabayaal isgaarsiin dhijital ah oo tayaysan suurta-gelin kartana helitaan loo dhanyahay waxayna u baahantahay wada shaqaynta laamaha dawladda iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Sidaa awgeed, dawladdu waxay u baahantahay inay xiriir wada-shaqayn iyo iskaashi ka samayso dhanka horumarinta kaabayaasha iyo xalalka dhijitalka loo dhan yahay.
- Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay xaqiijin doontaa helitaanka dhaqaalaha lagu baahinayo helitaanka adeegyada dhijitalka ah iyo xalal hal-abuur leh oo lagu gaarayo isticmaalka dhijitalka oo loo dhanyahay.
- Xukuumaddu waxay u baahan doontaa inay hirgeliso istaraatiijiyad iyo siyaasad guud si loo xaqiijiyo u helidda maalgalinta ay u baahantahay hawl-gelinta siyaasaddan dhijitalka loo dhan yahay.
- Si loo gaaro helitaan iyo isticmaal teknoolojiyadda dhijitalka loo dhan yahay waxay u baahan tahay hanaan dhinacyo badan ay ka qayb-qaataan oo waajibinaysa wada-shaqaynta hay’ado dawladeed oo badan (Wasaarado iyo Wakaalado), ganacsiyada gaarka loo leeyahay, bulshada rayidka ah, hay’adaha aan dawliga ahayn iyo saaxiibada horumarka ka shaqeeya.
- Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay asaasi doontaa Waaxda Isticmaalka iyo Helidda Teknoolojiyadda dhijitalka loo dhanyahay si ay u hogaamiso wadashaqaynta, horumarinta, isku-duba-ridka, la socoshada iyo qiimeynta qorshayaasha iyo hirgelinta si lagu xaqiijinayo gaarista ujeeeddooyinka siyaasaddan muddada la cayimay.

- Waaxda helidda iyo isticmaalka teknoolojiyadda dhijitaalka ah ee loo dhanyahay (Directorate of Digital Inclusion) waxay yeelan doontaa korjoogtaynta siyaasadeed iyadoo sii maraysa Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyadda oo iyaduna guddoon ka noqon doonta gole-hoosaad heer wasaaradeed ah oo ka kooban wasaaradaha soo socda ee ay tahay inay kaalin mug leh ka ciyaaraan fulinta siyaasadda.
- Guddi farsamo ayaa la dhisi doonaa kaasoo ka koobnaan doona xubno heer sare ah oo ka kala socda daneeyayaasha ka qayb-qaadanaya fulinta.

Shaxda soo socota ayaa waxay sharxaysaa qaybo-guud oo ka mid ah daneeyayaasha iyo kaalinta ay ka qaadan doonaan fulinta siyaasaddan iyo Xubnaha lasoo jeedinayo inay ka mid noqdaan Guddiga Farsamo ee siyaasadda.

	Daneeyaha (Wasaarad, Wakaalad, iwm.)	**Kaalinta**
1	Haweenka, dhallinyarada, dadka waaweyn iyo dadka baahiyaha gaarka qaba	Kor-joogteynta qaybaha kala duwan ee kooxaha nugul
2	Waxbarashada	Mus'uuliyadda guud ee waxbaridda bulshada oo dhan
3	Dawladaha hoose	Wada shaqaynta maalinlaha ah ama joogtada ah ee kooxaha la takooro
4	Qaxootiga iyo Barakacayaasha	Mas'uuliyadda gaarka ah ee bad-qabka kooxahan.
5	Teknoolojiyadda Isgaarsiinta (Wasaaradda, Hay'adda Isgaarsiinta)	Qorsheynta qaybta isgaarsiinta iyo teknoolojiyadda, fulinta, nidaaminta iyo maareynta sanduuqa guud ee helitaanka adeeg Internet loo dhanyahay
6	Qorshaha qaranka	Hortebinta hawlaha faragelinta dawladda
7	Maaliyadda	Hortebinta hawlaha dawladda iyo miisaaniyaddooda
8	Tamarta	Helitaanka Khadka Internetka iyo ogolaanshaha dhigista kaabalada
9	Gaadiidka	Helitaanka godadka iyo marinada kaabalada la dhigayo ee ku teedsan jidadka
10	Ganacsiga	Helitaanka fursado ganacsi iyo tusaaleyaasha

		isticmaalka adeegyada teknoolojiyadda ku dhisan
11	Beeraha	Tusaalaynta isticmaalka adeegyada teknoolojiyadda ku dhisan
12	Ganacsiyada gaarka loo leeyahay	Helitaanka kaabayaasha iyo qalabka iyo waliba tusaalayaal isticmaalka teknoolojiyadda la xiriira
13	Hay'adaha aan dawliga ahayn iyo bulshada rayidka ah	wacyi-gelin, tababar iyo u-qareemidda
14	Saaxiibada Horumarka	aqoon khibrad ku dhisan iyo maalgelin
15	kuwo kale	Waxaa qeexi doona Guddiga Hagidda

Maalgelinta Siyaasadda:

Maalgelinta dhaqan-gelinta siyaasadda teknoolajiyadda dhijitaalka loo dhanyahay waa mid aad u muhiim ah , Dowladda Soomaaliya waxay xaqiijin doontaa in la helo maalgalin ku filan si loo ballaariyo helitaanka teknoolajiyadda dhijitaalka loo dhanyahay iyo soo saarista xalal cusub. JFS waxay abaabuli doontaa habab iyo farsamooyin maaliyadeed waxayna dejin doontaa maalgalinta ka mid noqoshada dhijitaalka loo dhanyahay. Waxa ay hirgelin doontaa istaraatiijiyad/siyaasad gelitaanka caalamiga ah si loo hubiyo helitaanka maalgalin ku filan tiknoolajiyadda dhijitaalka loo dhanyahay.

Qorshe Hawleed

Qaybtan waxay soo gudbinaysaa Qorshe Hawleedka iyo Muddada lagu hirgleinayo Siyaasadda Helitaanka iyo Isticmaalka dhijitalka loo dhanyahay. Waxay ku soo koobaysaa siyaasadda iyo faragelinnada istaraatiijiga ah talaabooyin loo baahanyahay in la hirgeliyo iyo muddada lagu hirgelinayo.

i. Hawl-gleinta Siyaasadda Helitaanka iyo Isticmaalka Teknoolojiyadda dhijitalka loo dhan yahay.
ii. Dhaqan-gelinta xeer lagu hawl-gelinayo siyaasadda. Middan waxa ka dhalan doona samaynta Guddiga Heer-Wasiir ee Korjoogtaynta Siyaasaddan, Guddi Farsamo ee Siyaasadda Helitaanka iyo Isticmaalka Teknoolojiyadda dhijitalka ah ee loo dhanyahay iyo Waaxda Helitaanka iyo Isticmaalka Teknoolojiyadda dhijitalka ah ee loo dhan yahay.
iii. Magacaabista agaasimaha helista iyo isticmaalka teknooojiyadda dhijitalka ah ee loo dhan yahay (Director for Digital Inclusion). Qorshe ku-meel-gaar ah oo lagu

magacaabo Agaasime ku-meel-gaar ah ayaa loo baahan karaa si loo yagleelo xoghayn taakulaysa Guddiga Korjoogteynta Siyaasadda.

Gabagabo

Siyaasadda ka mid noqoshada dhijitaalka ah ee Soomaaliya waxay dib u eegis ku samaynaysaa caqabadaha horumarinta bulshada iyo dhaqaalaha ee saameeya teknoolajiyadda dhijitaalka ah. Abaaraha soo noqnoqda, colaadaha, fatahaadaha iyo dhibaatooyinka dhaqaale ee dunida oo ay sii dheertahay, saamayntii COVID-19 ayaa si weyn u saameeyay horumarka Soomaaliya ee ka faa'iidaysiga teknoolajiyada dhijitaalka ah ee horumarinta bulshada iyo dhaqaalaha.

Shirkadaha Ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa kaalin wayn ka qaata kobaca ICT-ga Soomaaliya. Iyadoo tartanka shirkaduhu yahay mid keena qiimo jaban oo lagu heli karo adeegyada isgaarsiineed iyo kordhinta helitaanka shabakadaha mobilada iyo adeegyada maaliyadeed ee dhijitaalka ah ayaa haddana inta badan dadka Soomaaliyeed aysan awoodin inay ka faa’iideystaan dhijitaaleynta iyadoo ay ugu wacan tahay helitaan la’aanta ama yaraanshaha internet xawaare sare leh goobo badan oo ka mid ah Soomaaliya, koobnaanshaha helitaanka macluumaadka iyo sidoo kale koobnaanshaha Adeegyada Danabaysan iyo heerka hoose ee aqoonta dhijitaalka ah iyo xirfadaha.

Iyadoo laga duulayo khibrada caalamiga ah, siyaasada teknoolajiyadda dhijitaalka ah ee loo dhanyahay ayaa bixisa xalal wax ka qabta, caqabadaha aqoon yarida dhanka tiknoolajiyadda. Waxayna soo jeedinaysaa qodobo siyaasadeed oo heer sare ah oo hagi doona siyaasaddan:

• Hagaajinta isku xirka interneedka xawaaraha sare leh iyo helidda aaladaha mudnaanta lasiinayo marka la isticmaalayo teknoolajiyadda,

• Kordhinta helitaanka iyo isticmaalka teknoolajiyada dhijitaalka ah,

• Kobcinta wacyiga, aqoonta, iyo xirfadaha dhijitaalka ah,

• Fududeynta bixinta adeegyada guud ee dhijitaalka loo dhan yahay iyo;

• Kormeerka, qiimaynta iyo barashada.

Sida ku cad dukumeentiga barbar socda siyaasaddan, Khariidadda Fulinta ee Faah-faahinta leh, tallaabooyinkani waxay u baahan yihiin maal-gelin lagu qiyaasay US32 milyan shanta sano ee ugu horreeya. Tan kuma jiraan kharashka isku-xirka balaarinta, laakiin kaliya waxa

ay sahlaysaa horumarinta siyaasadda qaran ee ballaarinta Internet xawaare sare leh. Abaabulka maalgelinta iyo samaynta Waaxda Agaasinka Dijital loo dhan yahay ah ee ka mas'uulka ah hubinta hirgelinta siyaasadda ayaa fure u ah guusha Siyaasadda.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraax:XRW/392**02/2025** **Taariikh: 24/02/2025**

Ku: Wasaaradda Caddaaladda Iyo Arrimaha Dastuurka **Muqdisho**
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada **Muqdisho**
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya **Muqdisho**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
25 FEB 2025
EXII
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

UJEEDDO: **GO'AAN GOLE ANSIXINTA "SIXITAANKA QAAB-DHISMEEDKA MAAMULKA MACHADKA SARE EE TABABBARKA IYO HORUMARINTA"**

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

Markuu arkay: Warqadda summadeedu tahay **WCAD/XW/2005/02/2025** ee ku tariikheysan **18/02/2025** ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka kuna saabsan codsi soojeedinta Sixitaanka Qaab-dhismeedka Maamulka Machadka Sare ee Tababarka iyo Horumarinta Sharciga;

Markuu arkay: Go'aanka Shirkii hore ee Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.02.105.01.25** ee **09/01/2025**, kuna saabsan ansixinta **"Siyaasadda Qaran ee Dhismaha Machadka Sare Tababbarka iyo Horumarinta Sharciga"**

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.07.110.02.25** ee **23/02/2025**, kuna saabsan ansixinta "**Sixitaanka Qaab-dhismeedka Maamulka Machadka Sare ee Tababbarka iyo Horumarinta Sharciga**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgaliyay: Muhiimadda ay leedahay "Sixitaanka Qaab-dhismeedka Maamulka Machadka Sare ee Tababbarka iyo Horumarinta Sharciga".

Waxaa uu meelmariyay:

Qodobka 1aad:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW07.110.02.25** ee **23/02/2025**, kuna saabsan ansixinta "**Sixitaanka Qaab-dhismeedka Maamulka Machadka Sare ee Tababbarka iyo Horumarinta Sharciga**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka loo igmaday in ay hirgeliso, meelmarisana Sixitaankan kor ku xusan.

Qodobka 3aad

Dhaqangal

Go'aanka Golaha waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 171 **Taariikh: 11/01/2025**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
13 JAN 2025
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

XEER: SIYAASADDA QARAN EE DHISMAHA MACHADKA SARE EE TABABBARKA IYO HORUMARINTA SHARCIGA

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

Markuu arkay: Warqadda summadeedu tahay **WCAD/1860/12/2024/, ee ku Taariikheysan 24/12/2024** kuna saabsan codsisoojeedinta Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW02.105.01.25** ee **09/01/2025**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Dhismaha Machadka Sare Tababbarka iyo Horumarinta Sharciga** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Muhiimadda Siyaasaddani u leedahay horumarinta iyo sare u qaadidda karaanka hay'adaha caddaaladda

Waxa uu Meelmariyay:

Qodobka 1aad:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW02.105.01.25** ee **09/01/2025**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Dhismaha Machadka Sare Tababbarka iyo Horumarinta Sharciga** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka loo igmaday in ay hirgeliso, meelmarisana **Siyaasadda Qaran ee Dhismaha Machadka Sare Tababbarka iyo Horumarinta Sharciga**

Qodobka 3aad

Dhaqangal

Siyaasaddan Qaran waxaa ay dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

Jamhuuriyadda Fed. Somaliya
Hantidhowrka Guud
Galid
No. DN-003
TR. 15/1/2025
Saxiix

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-001-25
TAARIIKH :19 01 2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Ise Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA CADAALADDA & ARRIMAHA DASTUURKA

SIYAASADDA QARAN
EE
DHISMAHA MACHADKA SARE EE TABABARKA IYO HORUMARINTA SHARCIGA

TUSMO

SOO-KOOBITAANNO/SOO-GAABITAANNO 3

ARRAR..... 4

HAB-RAACA DEJINTA SIYAASADDA 7

SABABAHA SIYAASADDA 7

UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA 8

UJEEDDOOYINKA GUUD 8

UJEEDDOOYIN GAAR AHAANEED..... 8

CAQABADAHA WAXBARASHO SHARCIYEED 9

XALINTA CAQABADAHA SIYAASADDA..... 10

SHURUUCDA LA XIRIIRTA WAXBARASHADA IYO MIHNADDA SHARCIYEED 11

DIB-U-HABAYNNO SHARCI 11

<u>ILAHA</u> MIISAANIYADA SIYAASADDA 12

DHISMAHA MTHSH..... 13

QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE MACHADKA SARE EE TABABARKA IYO HORUMARINTA SHARCI (MSTHSH) EE JFS 13

GUUDIGA SARE EE MAAMULKA MSTHSH..... 13

MAGACAABISTA GUDDIGA SARE EE MAAMULKA MSTHSH...14

AGAASINKA FULINTA EE MSTHSH..... 14

SOO JEEDINTA QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE 15

HABRAACA OGGOLAANSHAHA KA MID NOQOSHADA MIHNADLAYAASHA SHSRCI EE SOOMAALIYA..... 15

HIRGELINTA SIYAASADDA 16

KORMEERID IYO QIIMEYN 17

DIB-U-EEGISTA SIYAASADDA 18

SOO-KOOBITAANNO/SOO-GAABITAANNO

JFS= Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

WCAD= Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka

JUS = Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed

MSTHSH= Machadka Sare ee Tababarkaiyo Horumarinta Sharciga

BBA= Bulshada Bariga Afrika

ARAR

Xilligii gumeysiga, tababarka hawl-qabadka sharciyeed wuxuu ahaa mid aan ahmiyad la siinin. Ingiriiska iyo Talyaanigu waxay ku dhaqeen Soomaaliya nidaamyadooda sharciyeed, iyadoo hannaanka waxbarasho sharciyeed, qaanuunka garsoor, iyo shuruucda la xiriirta mihnadda sharciyeed, iyo weliba xeer-nidaaminta Qareenno, ay ku saleynaayeen nidaamka gumeystaha.

Horumarinta nidaamka waxbarashada sharciyeed ee JFS waxay bilaabatay muddadii uu jiray maamulkii daakhiliyada (Wasaayada). Machadka Jaamacadda Muqdisho waxaa la unkay 1956[kii] si uu u bixiyo waxbarasho sare ee sharci iyo dhaqaale muddo labo sano ah. Maaddooyinka sharciyeed ee lagu baranayey machadka waxay ka koobnaayeen dhammaan qeybaha shuruucda ee asaasiga ah oo ay ku jiraan shuruucda guud (public) iyo kuwa gaarka ah (private). Ardayda ku dhaqan Gobolada Koonfureed ee dalka, Ka dib marka ay dhammeystaan waxbarashadooda, waxay aadi jireen jaamacadaha Talyaaniga si ay u dhammeystirtaan shahaadooyinkooda jaamacadeed (Law Degrees). Halka Gobollada waqooyi ee dalka Ingiriisku gumeysanayey aysan lahayn machad bixiya waxbarasho sare. Sidaas awgeed, arday badan oo ka timid gobolada waqooyiga ayaa u kicitimay dalal shisheeye si ay ugu soo qaataan waxbarasho sare, sida sharciga iyo dhaqaalaha.

Muddadii ka dambaysay qaadashada xuriyada, xirfadleyaasha sharciyeed waxay u qeybsanaayeen saddex kooxood: doodeyaal, qareenno iyo kuwa ka shaqeeya Arrimaha shareecada Islaamka sida ku tilmaaman axkaamta **Sharci Lr.21 ee Juun 27, 1958**. Shakhsiyaadka haysta shahaado Jaamacadeed (Law Degree), marka ay ku shaqeeyaan tababarteyaal sharci

muddo labo sano ah ayna ka dib ka gudbaan imtixaanka uu qaado Golaha Qareennada ayna helaan oggolaanshihiisa, kuwa ka shaqeeya shareecada waxay ku hawl-galayeen la-taliyaal qeybta madaniga ee Maxkamadda Degmada, Maxkamadda Gobolka iyo Maxkamada Rafcaanka. Qofka ka shaqeeya Hawlaha Shareecada Islaamka waxaa looga baahaa in uu leeyahay aqoon ku filan ee Sharciga Islaamka, gelana imtixaan uu qaado guddi ka kooban garsoore iyo labo qaaddi shareeco. Hawl-wadeennada Shareecada waxaa magacaabi jiray Xoghayaha ee Cadaaladda Dawladda (Wasiirka Cadaaladda).

Waxaa kaloo jira sarkaal loo yaqaanno Nootaayaha Dadweyne oo lagu magacaabo si waafaqsan **Dekreeto Sharci-dejin Lr. 1 ee Maarso 2, 1962**. Nootaayada Dadweyne waxaa magacaaba Wasiirka Cadaaladda, waxaana xilalkiisa ka mid ah tasdiiqinta dokumentiyada sharciyeed, dardaaranada, kala-wareejinta dhulka iyo xeerarka shirkadaha.

Sanadkii 1969[kii] Dawladda Soomaaliyeed waxay dhistay Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (JUS) si waafaqsan **Dekreeto Sharci Lr.10 ee Luuliyo 14, 1969[kii]**, iyadoo Machadka Jaamacadda loo dalacsiiyey kulliyadda sharciga iyo dhaqaalaha oo bixinaysa koorsooyin sharci iyo kuwo dhaqaale muddo afar sano ah. Tartameyaasha haysta Diploma laga qaatay Machadka waxay mudnaayeen magacaabid Garsooreyaal Degmo, halka tartameyaasha haysta shahaado buuxda ee Jaamacadeed (law degree) ay mudnaayeen magacaabid Garsooreyaal Degmo ama Gobol.

Labaatan sano iyo dheeraad oo uu jiray nidaamkii melatariga ahaa ee Soomaaliya, ma jirin horumar la xusi karo oo la xiriira nidaaminta waxbarasho iyo mihnadda sharciyeed si waafaqsan hawl-qabadka ugu wanaagsan ee caalamiga ah. Sharciga Qareennada (Sharci Lr.85 ee Oktoobar 21, 1975) ayaa lasoo saaray si loo nidaamiyo mihnadda

qareennimada. Si hawl-qabad sharci loo sameeyo muddadii nidaamkii militariga ee Soomaaliya ka jiray, waxay ahayd in qofku dhammeystirto waxbarasho jaamacadeed ee Kuliyadda sharciga, isla markaana uu ka gudbo imtixaanka qareenimo oo ay maamuleysay Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta. Xeerkan waxaa wax-ka-baddel lagu sameeyey 1986 iyadoo la baabi'iyey Qodobbada 1aad ilaa 16aad ee Sharciga qareenimada oo ay ka dhalanayso baabi'inta Iskaashatada Qareennada Soomaaliyeed.

Marka la eego sharciga Nootaayooyinka ee Sharci Lr.1 ee Maarso 2, 1962 waxaa dib-u-eegis lagu sameeyey 1986 iyadoo nootaayooyinka laga saaray shaqaalaha Wasaaradda. Dawladdu waxay Dekreeto Lr.3 ee Janaayo 15, 1987 ku soo saartay Xushmadda Nootaayaha si loo nidaamiyo khidmadaha ay ka qaadayaan adeegyada.

Waxaa jiray dadaallo aad u yar, oo ku aaddan midaynta shuruucda is-khilaafsan ee khuseeya waxbrashada iyo mihnadda sharciyeed. Waxaa intaas dheer, inaan la siin muhiimaddii uu lahaa dhisidda machad tababar sharciyeed si uu u bixiyo tababarro sharci oo waafaqsan hal-beegyada heer gobol iyo mid caalami. Waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed ee Soomaaliya ayaa ah mid aan si sharci ah u nidaamsanayn. Waxaa adag in la helo siyaasad ama sharci loo dejiyay waxbarashada ama mihnadda sharciga ee Soomaaliya xilligii gumeysiga ama ka dibb. JFS weli ma dhisin machad takhasus sharci si uu u nidaamiyo una maamulo waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed ee Soomaaliya.

HAB-RAACA DEJINTA SIYAASADDA

Siyaasaddan waxaa lagu diyaariyay hab daah-furnaan, wada-tashi, iyo ka-qeyb-qaadasho leh iyadoo la raacayo tilmaamaha Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka. Hab-raacu wuxuu bilowday 2023, muddadaas ka dibna, xeel-dheerayaasha sharci ee Wasaaradda ayaa si gaar ah ugu hawlanaa diyaarita Siyaasaddan.

Siyaasaddan waxaa lagu dejiyey habraac waafaqasan qaabka loo diyaariyo siyaasadaha sharci oo ay soo saarto Xukuumadda JFS iyo Hay'adaha dawlada si ay ula jaan-qaaaddo habraacyada kale ee Dalka ka jira.

SABABAHA SIYAASADDA

Sababaha Siyaasaddan waxaa ka mid ah:

1. Baahidda wayn ah ee loo qabo "Dhismaha Machadka Sare ee Tababarka iyo Horumarinta Sharciga" oo qeyb weyn ka qaadanaya sare u qaadidda xirfadaha, aqoonta iyo dhisidda kartida mihnadlayaasha sharci.
2. Baahida loo qabo in la mideeyo tababarada sharci ee ardayda ka soo baxaya kulliyadaha sharciga ee Jaamcadaha dalka iyo dibadda.
3. Ku biiritaanka JFS ay ku biirtay BBA wuxuu keensanayaa in laga shaqeeyo sidii la isu-waafajin lahaa shuruucda, siyaasadaha, iyo xeer-nidaamiyeyaasha gudaha iyo kuwa BBA.

UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

UJEEDDOOYIN GUUD

Ujeeddada guud ee siyaasadda waa:

1. In la dejiyo qaab-hawleedka sharci ee ku aaddan dhismaha, horumarinta iyo maareynta MSTHSH.
2. In ay wax ka beddesho, midayso, oo ay dejiso siyaasado khuseeya waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed.

UJEEDDOOYIN GAAR AH

Siyaasaddu waxay xaqiijinaysaa ujeeddooyinka gaar ahaaneed ee soo socda:

1. Waxaa lagu dhisayaa MSTHSH si uu u bixiyo tababar sharciyeed oo wax-ku-ool ah (Practical) iyo mid gaar ahaaneed oo la xiriira qeybaha kale ee sharciga.
2. Waxay bixinaysaa hagitaanno ku aaddan diyaarinta shuruucda, xeer-nidaamiyeyaasha, hal-beegyada iyo hab-raacyada kale ee la xiriira waxbarashada sharciyeed ee dalka.
3. Waxay ka qeyb-qaadanaysaa horumarinta manhajka, hageyaasha tababarka, hababka imtixaanka ee hawl-wadeennada sharciyeed.
4. Waxay abuuraysaa hannaan dhaqaale oo wax-ku-ool ah oo lagu hirgelinayo ujeeddooyinkeeda.
5. Waxay kor u qaadaysaa iskaashi lala wadaago hay'adaha gaarka loo leeyahay, kuwa caalamiga ah iyo hay'adaha tacliinta.
6. Waxay kobcinaysaa cilmi-baaris sharciyeed iyo in ay ka qeyb-qaadato dib-u-habaynnada nidaamka sharciyeed ee JFS.
7. Waxay xoojinaysaa talinta sharciga iyo Dastuurka si loo bari-taaro dawladnimada, horumarinta dhaqaalaha iyo xallinta khilaafaadka.

CAQABADAHA WAXBARASHADA SHARCIYEED EE SOOMAALIYA

Nidaamka waxbarashada sharciyeed ee JFS wuxuu wajahayaa caqabado dhawr ah waxaana ka mid ah:

1. Iyadoo aysan jirin machad tababarid sharciyeed ee ka shaqeeya bixinta tababarada qareennada, sharciyaqaannada, garyaqaannada iyo kuwa ka hawl-gala xarumaha cadaaladda.
2. Iyadoo aysan jirin siyaasad guud iyo hal-beegyo ku aaddan waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed.
3. Iyadoo wali Soomaaliya ay ku dhaqanto shuruucdii Qarnigii 20aad iyo hannaan sharciyeed oo aan nidaaminayn arrimaha la xiriira waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed.
4. Yaraansho mihnadleyaal sharciyeed ee tababaran oo awood u leh fulinta hawlaha culculus ee shuruucda Soomaaliyeed, goboleed iyo caalamiyeed.
5. Is-khilaaf iyo kala-duwanaan nidaam sharciyeed – sharci, xeer-dhaqameed, sharci Islaam, sharci guud, sharci madani, axdiyo goboleed iyo caalami.
6. Nuglaanta qaab-hawleedka hay'adaha taasoo dib-u-dhac ku sababaysa helitaanka cadaaladda ee muwaadiniinta.
7. Isbeddello teknoolojiyadeed ee dheereeya iyo wax-is-dhaafsiga ganacsiyeed ee dhijitaalka ah ee heerarka goboleed iyo caalami.
8. Axdiga lagu dhisay BBA ee ay JFS meel-marisay waxaa loo baahan yahay in dhammaan qaramada Xubnaha ka ah ay is-waafajiyaan shuruucdooda, siyaasadahooda iyo xeer-nidaamiyeyaashooda shuruucda BBA.

9. Hawl-qabadka ka-gudubka xudduudda, sharciyaqaanka Soomaaliyeed wuxuu u baahan tababar gaar ahaaneed si uu u hortago maxkamadda BBA iyo maxkamadaha caalamiga ee kale.
10. Manhajka kulliyadaha sharciga ee Soomaaliya ma ahan mid si mug leh ula jaan-qaadi Kara Qarniga 21aad.
11. Suuqa shaqada ee adeegyada sharciyeed ee JFS wuxuu wajahayaa tartan lixaad leh oo uga imaanaya sharuucda gobolka sida BBA iyo Shirkadaha aan ahayn kuwa Bixiya Adeegyada Sharci.

XALINTA CAQABADAHA SIYAASADDA

Si ay u xaliso siyaasaddan caqabadaha jira, waa in la dhaqan-geliyo tallaabooyinka soo socda:

1. WCAD waxay dhisaysaa MSTHSH si loo tababaro shakhsiyaadka noqonaya mihnadle-sharci iyo in ay xaqiijiso joogteynta horumarinta dhammaan hawl-wadeennada mihnadda sharciyeed.
2. WCAD waxay midaynaysaa, habaynaysaa barnaamijyada, muqararka iyo hab hawl-gal kale ee khuseeya waxbarasho sharciyeed si loo helo oggolaansho goboleed iyo ku-talo-galnimo in sharciyaqaannada Soomaaliyeed ee ka bilaabay tababarkooda mihnadeed gudaha dalka ay heli karaan aqbalaad heer caalami ah.
3. WCAD waxay horumarinaysaa xeer-nidaamiyeyaal, shuruuc, hab-raacyo, iyo halbeegyo ku aaddan waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed ee dalka.

SHURUUCDA LA XIRIIRTA WAXBARASHADA IYO MIHNADDA SHARCIYEED

Ka dib xoriyadii Soomaaliya Dawladdii rayidka iyo Nidaamkii Militariga waxay ansxiyeen shuruuc badan iyo siyaasad-sharciyeed si loo nidaamiyo loona mideeyo nidaamyadii sharciyeed ee la dhaxlay oo kala duwanaa.

Qaar ka mid ah shuruucdii xilligaas waxaa ka mid ah:

1. Sharciga Nidaamka Garsoorka, Sharci Lr.5 ee 1962;
2. Xeerka Nootaayooyinka (Dekreeto Sharci-dejinLr.1 ee Maarso 2, 1962);
3. Sharciga Jaamacadda Ummadda, Sharci Lr.6 ee Diseembar 1, 1969;
4. Sharciga Qareennada (Sharci Lr.85 ee Oktoobar 21, 1975);
5. Sharciga Qareennada (Wax-ka-beddel) Sharci Lr.3 ee Janaayo 13, 1986;
6. Dib-u-eegista Sharciga Nootaayooyinka, Sharci Lr.7 ee Feberaayo 2, 1986; iyo
7. Khidmada Nootaayooyinka, Dekreeto Lr.3 ee Janaayo 15, 1987;

DIB-U-HABAYNNO SHARCI

Si loogu hirgeliyo siyaasaddan si wax-ku-ool ah oo dhammeystiran, waxaa lagu sameynayaa dib-u-habayn sharciyeed oo ku habboon. WCAD waxay dib-u-eegaysaa oo meel-marinaysaa shuruucda la xiriirta:

1. Machadka Sare ee Tababarka iyo Horumarinta Sharciga (MSTHSH) ee JFS si loo dhiso machad tababar hawl-qabad sharciyeed oo ka hana-qaada dalka.
2. Sharciga Ururka Qareennada Soomaaliyeed si loo nidaamiyo Urarada Sharciyaqaanada Dalka. isla markaasna ay u helaa oggolaanshaha iyo

hawl-qabadka garyaqaannada, sharciyaqaannada, iyo mihnadleyaasha sharciyeed ee kale ee gudaha JFS.

3. Sharci Nootaayooyinka Dadweyne si loo sameeyo hal-geeyo lagu magacaabayo Nootaayaha iyo laguna Xadidaayo Hawlahooda.
4. Xeer-hoosaadka qeexaya Khidmadaha Qareenka si loo nidaamiyo xushmaddiisa iyo khidmadaha sharciyeed.
5. Anshax-marinta Qareennada si wax looga qabto dacwadaha ku saabsan anshax-xumada mihnadeed.

ILAHA MIISIINIYADDA HIRGELINTA SIYAASADDAN

Hirgelinta siyaasaddan waxaa lagu maal-gelinayaa hababka soo socda:

1. Qoondayn miisaaniyad sanadle ah. WCAD waxay xaqiijinaysaa in sanad-miisaaniyadeed kasta, dawladdu u qoondayso miisaaniyad loogu talo-galay hirgelinta Siyaasaddan.
2. Dakhli ka yimaad hay'adaha dadweynaha iyo kuwa gaar loo leeyahay, gaar ahaan dhanka horumarinta kaabeyaasha ee MSTHSH.
3. Deeqo iyo gargaarro laga helo gudaha iyo dibadda.

   WCAD oo kaashanaysa miisaaniyadda qaranka waxay xaqiijinaysaa in la helo isku-duwid gargaar waxtar leh ee dhammaan miisaaniyado horumarin oo lagu bari-taarayo dhismaha Machadka Sare ee Tababarka iyo Horumarinta Sharciga (MSTHSH).
4. Maal-gelinta hay'adaha gaarka loo leeyahay ee mashaariic iyo barnaamijyo la xiriira hirgelinta siyaasaddan.
5. Khidmadaha iyo xushmadaha laga helo waxbarashada iyo la-talinta uu bixiyo machadka.

DHISMAHA MSTHSH

1. Siyaasaddan waxaa lagu hirgelinayaa iyadoo loo marayo dhisidda MSTHSH.
2. Siyaasadda waxay xaqiijinaysaa in uu Machadku noqdo mid ku dhisan sharci asigoo u madax-bannaan gudashada xilka iyo waajibaadka loo idmaday lehna Astaan iyo shaabbad u gaar ah.
3. Machadku wuxuu hoos imaanayaa WCAD.

QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE MACHADKA SARE EE TABABARKA IYO HORUMARINTA SHARCI (MSTHSH) EE JFS

Qaab dhismeedka maamul ee MSTHSH wuxuu ka koobanaanayaa:

1. Guddiga sare (Board of Directors) ee MSTHSH iyo;
2. Agaasinka Fulinta ee MSTHSH.

GUDDIGA SARE EE MAAMULKA MSTHSH (BOARD OF DIRECTORS) IYO SIDA XUBNIHIISU KU IMAANAYAAN

Siyaasaddani waxay adkaynaysaa muhimadda dhismaha guddiga sare (Board of Directors) ee MSTHSH si uu u dejiyo aragtida iyo istaraatijiyadda, lagu hawlgalinayo MSTHSH, sidoo kalena ku korjoogteeyo fulinta aragtiyadaas agaasinka fulinta.

Guddiga Sare ee MSTHSH oo tiradiisu ay tahay 11 xubnood, waxay ka kala imaanayaan hay'adaha hoos ku tilmaaman:

a. Xoghaye Joogto/Agaasime Guud, WCAD -Guddoomiye-
b. Xoghaye Joogto/Agaasime Guud, WWHTS -xubin-
c. Xoghaye Joogto/Agaasime Guud, WM -xubin-
d. Garyaqaanka Guud ee Dawladda (GGD) -xubin-
e. Maxkamadda Sare ee Dalka -xubin-
f. Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka -xubin-
g. Ururka Qareennada Soomaaliyeed -xubin-
h. Ururka Nootaayooyinka Soomaaliyeed -xubin-

i. Hormuudka Kulliyadda Sharciga ee JUS -xubin-
j. Midowga Jaamacadaha Soomaaliyed -xubin-
k. Agaasimaha MSTHSH -xoghayn-

MAGACAABISTA GUDDIGA SARE EE MSTHSH

Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka WCAD ayaa Dekreeto kusoo saaraya saraakiisha sare ee xubnaha ka noqonaya Guddiga Sare ee Maamulka MSTHSH (Board of Directors), ka dib markay si qoraal ah ku soo magacaabaan madaxda hay'adahooda.

AGAASINKA FULINTA EE MSTHSH

1. Siyaasaddu waxay soo jeedinaysaa in machadku uu yeesho Agaasime fulineed sare, oo noqonaya Agaasimaha MSTHSH, sidoo kalena u hawl-gelaya xoghayaha Guddiga Sare ee MSTHSH.
2. Wasiirka cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ayaa magacaabaya Agaasimaha machadka iyo ku-xigeennadiisa ee muddo Shan sano ah oo la cusboonaysiin karo.
3. Agaasinka fulinta ayaa diyaarinaya qorshaha hawlgalinta machadka, iyo dhammaan waxkasta oo lagama maarmaan u ah hirgalinta shuruucda, siyaasadaha iyo ujeedooyinka loo aasaasay MSTHSH, isagoo u soo gudbinaya Guddiga sare MSTHSH si ay ugu ansixiyaan.
4. Agaasimaha machadka, ku-xigeennadiisa waxaa la xisaabtamaya Wasiirka WCAD.
5. Machadku wuxuu abuuran karaa faracyo ka hawl-gala qeybaha kale ee dalka.

SOO JEEDINTA QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE MACHADKA SARE EE TABABARKA IYO HORUMARINTA SHARCI (MSTHSH) EE JFS



Habraaca Oggolaanshaha ka mid noqoshada Mihnadleyda Sharci ee Soomaaliya:

1. Siyaasadan waxay qorsheyneysaa isla markaasna nidaamineysaa habraaca oggolaanshaha kamid noqoshada Mihnadleyaasha sharci inay maraan habraaca u degsan urur-goboleedyada aan qeybta ka nahay si ay ula jaan-qaadaan shuruucda iyo habraacyada ay ku dhaqmaan urur-goboleedyadaas sidaas daraadeed, machada wuxuu dhaqan-gelinayaa Habraac wax-ku-ool ah oo wax looga qabanayo arrimahaas.
2. Qofka ka mid noqonaya Mihnedleyaasha Sharci waa inuu haystaa Shahaadada koowaad ee Shareecada iyo Qaanuunka ama midkood uu ka qaatay jaamacad la aqoonsan yahay, isla markaasna dhameystay MSHSH.
3. In Xafiis Qareen uu ka qaato Tababar 6 bilood ah. Leeyahayna Akhlaaq iyo anshax wanaag isla markaasna aan ku sifoowin anshax-xumo baahsan.

HIRGELINTA SIYAASADDA

Hirgelinta siyaasaddan waxay u baahan tahay iskaashi ujeeddo leh oo ka dhexeeya hay'adaha cadaaladda, Xeer-ilaalinta, Xafiiska Garyaqaanka Guud, Bixiyeyaasha waxbarasho sharciyeed (Jaamacadaha), Ururka Qareennada, Garsoorka iyo Wasaaradda Waxbarashada. Habkan wadajirka ah wuxuu xaqiijinayaa in siyaasaddu ahaato mid waafaqsan qaab-hawleedyada iyo hal-beegyada sharci-dejineed ee heer qaran, heer goboleed iyo heer caalami, iyadoo ay ku jirto Heshiiska la xiriira BBA iyo Borotokoolkiisa oo ay Soomaaliya saxiixday.

Sida kor ku xusan, yoolka siyaasaddan waa dhisidda MSTHSH si loo siiyo Hawl-wadeenada Sharciga waxbarasho iyo tababarro sharciyeed oo Wax-ku-ool ah.

Machadku wuxuu kaalin mug leh ka qaadanayaa bixinta tababar la siiyo ardayga jaamiciga ah iyo diyaarinta cilmi-baarisyo ku aaddan arrimaha la xiriira waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed.

Waxaa intaas wehliya, siyaasaddu waxay wax ka qabanaysaa walaacyo mug leh, sida yaraanshaha mihnadleyaal sharciyeed oo tababaran, helitaanka xaddidan ee waxbarasho iyo tababarro sharciyeed oo tayo leh iyo baahi loo qabo dib-u-habayno sharciyeed si dhaqan ahaan iyo nidaamyo sharciyeed oo casri ah iyadoo la waafajinayo hal-beegyada caalamiga ah iyo Heshiiska BBA.

Ugu dambayn, siyaasaddani waxay xoojineysaa talinta sharciga, nabad-dhisidda iyo horumarinta Soomaaliya. Habka iskaashiga, uma laha keliya faa'iidooyin hawl-wadeennada sharciyeed balse wuxuu sidoo kale ka qeyb-qaadanayaa xasilloonida bulshada guud ahaan.

Marka Golaha Wasiirraddu ansixiyo siyaasaddan, Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka wuxuu bixinayaa hagitaanno ku aaddan tallaabo

maamul iyo maareyn ee Machadka ka hor inta aan la meel-marin sharciga lagu maamulayo MSTHSH. hagitaanadan waxay ka qeyb-qaadanayaan dhisidda iyo maareynta machadka. Iyadoo ay ku jirayaan Hawlaha iyo mas'uuliyadaha agaasimaha fulinta ee machadka kana kooban hay'adda maamulka Machadka. hagitaanadan waxay ku talinayaan in dedejin meel-marineed lagu sameeyo dhisidda iyo hawl-galka machadka iyo sidoo kale in ay fududayso qorsheynta, hirgelinta iyo kormeerka siyaasaddan.

KORMEERID IYO QIIMEYN

Mas'uuliyadda guud ee kormeeridda iyo qiimeynta Siyaasadda Qaran ee ku aaddan waxbarashada iyo dhismaha MSTHSH waxay saaran tahay WCAD. Xaqiijinta ujeeddooyinka siyaasaddan waxay u baahnaanaysaa kormeerid iyo qiimeyn joogto ah oo lagu fulinayo iskaashiga wasaaradaha kale ee ay khuseyso, hay'adaha iyo wada-hawl-galeyaasha caalamiga ah. Hab-raaca kormeerka iyo qiimeynta waxay hageysaa ururinta xog waqtiyaysan iyo falanqeynta horumarka laga gaaray hirgelinta siyaasadda. WCAD waxay horumarinaysaa kormeerka iyo natiijooyinka ku saleysan qaab-hawleedka qiimeynta. Qaab-hawleedka la xusay wuxuu cayimayaa, meelaha ay dhibaatadu ka jirto oo ay tahay in la xaliyo, bar-tilmaameedyo waxqabad, miisaaniyado iyo waqtiyeyn ku aaddan hirgelinta siyaasaddan. Qaab-hawleedka waxay ahaanaysaa mid wax-ku-ool ah ee qiimeynta ka qeyb-qaadashada siyaasadeed ee ajendaha horumarinta dalka iyo bixin fal-celin guulaha, horumarka iyo caqabadaha la xiriira hirgelinta siyaasadda iyo in natiijo laga gaaray.

DIB-U-EEGISTA SIYAASADDA

Siyaasadda qaran ee ku aaddan waxbarashada iyo dhismaha Machadka Sare ee Tababarka iyo Horumarinta Sharciga (MSTHSH) ee JFS waxaa lagu sameynayaa dib-u-eegis 5 shantii sanaba mar ama waqti kasta oo ay soo if-

baxdo baahi ku timid is-baddelka dabeecadda ee hawl-qabadka sharciyeed ee MSTHSH.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 15/02/2025

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr 174

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA NIDAAMKA XUKUUMADDA .

BIXID
17 FEB 2025
EXIT
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad farqadaha 1 aad iyo 2aad; Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f); iyo Qodobka 100 aad farqadaha (a) (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Sharciga Nidaamka Xukuumadda (Sharci Lr. 14) ee soo baxay 3 Juun 1962; iyo Qaraarka Golaha Shacabka ee tirsigiisu yahay GSH/11/03/22 ee soo baxay 7 Agoosto 2022.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.06.109.02.25** ee **13/02/2025,** kuna saabsan ansixinta **"Xeer-nidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeer-nidaamiyahan u leeyahay dowlad-diska iyo horumarinta shaqada Dowladda;

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.06.109.02.25** ee **13/02/2025,** kuna saabsan ansixinta "**Xeer-nidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Qodobka 2aad

Oggolaansho iyo Hirgalin Xeer

Waxaa xeer-nidaamiyahan hirgalinaya, meelmarinayana Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jahmuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 3aad

Dhaqangal Go'aan Gole

Xeer-nidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda waxaa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Hgh-006-2025
TAARIIKH : 24-02-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA

XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA NIDAAMKA XUKUUMADDA

TUSMO

CUTUBKA KOWAAD QODOBBO GUUD _____ 4

QODOBKA 1AAD MAGACA XEER-NIDAAMIYAHA _____ 4

QODOBKA 2AAD UJEEDDADA XEER-NIDAAMIYAHA _____ 4

QODOBKA 3AAD EREYBIXIN _____ 5

QODOBKA 4AAD MABAADII'DA GUUD EE HOWLAHA XUKUUMADDA _____ 5

QODOBKA 5AAD XIL-GUDASHADA XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA _____ 5

CUTUBKA LABAAD GOLAHA WASIIRRADA IYO AWOODAHOODA _____ 6

QODOBKA 6AAD GOLAHA WASIIRRADA _____ 6

QODOBKA 7AAD AWOODAHA GOLAHA WASIIRRADA _____ 6

QODOBKA 8AAD GUDDI-HOOSAADYADA GOLAHA WASIIRRADA _____ 7

CUTUBKA SEDDEXAAD XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA _____ 8

QODOBKA 9AAD XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA _____ 8

QODOBKA 10AAD XILK A XOGHAYAHA JOOGTADA AH _____ 9

CUTUBKA AFARAAD KULAMADA GOLAHA WASIIRRADA _____ 9

QODOBKA 11AAD AJENDAHA _____ 9

QODOBKA 12AAD GO'AANKA ISUGU YEERISTA KULAMADA _____ 10

QODOBKA 13AAD KULAMADA AAN CAADIGA AHEYN _____ 10

QODOBKA 14AAD GOOBTA KULAMADA _____ 10

QODOBKA 15AAD WAQTIGA KULAMADA _____ 10

QODOBKA 16AAD GUNTANKA KULAMADA _____ 10

QODOBKA 17AAD HABKA DOODDA _____ 11

QODOBKA 18AAD JOOJINTA AMA HAKINTA KULAMADA _____ 11

CUTUBKA SHANAAD NIDAAMKA KULAMADA GOLAHA WASIIRRADA _____ 11

QODOBKA 19AAD ILAALINTA WAQTIGA KULAMADA _____ 11

QODOBKA 20AAD FADHIGA KULAMADA _____ 12

QODOBKA 21AAD KA TAGISTA KULAMADA _____ 12

QODOBKA 22AAD NIDAAMKA _____ 12

QODOBKA 23AAD DIIWAANKA HADAL-QORAALLADA IYO GO'AANNADA _____ 12

CUTUBKA LIXAAD WASAARADAHA XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA _____ 12

QODOBKA 24AAD WASAARADAHA _____ 12

QODOBKA 25AAD WASAARADDA CADAALADDA IYO DASTUURKA _____ 14

QODOBKA 26AAD WASAARADDA AWQAAFTA IYO ARRIMAHA ISLAAMKA _____ 15

QODOBKA 27AAD WASAARADDA ARRIMAHA DIBEDDA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA AH_____ 16
QODOBKA 28AAD WASAARADDA GAASHAANDHIGGA _____ 17
QODOBKA 29AAD WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA, IYO DIB-U-HESHIISIINTA _ 18
QODOBKA 30AAD WASAARADDA AMNIGA GUDAHA _____ 19
QODOBKA 31AAD WASAARADDA MAALIYADDA _____ 20
QODOBKA 32AAD WASAARADDA QORSHAYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA _____ 21
QODOBKA 33AAD WASAARADDA WAXBARASHADA, HIDDAHA, IYO TACLIINTA SARE _____ 21
QODOBKA 34AAD WASAARADDA CAAFIMAADKA IYO DARYEELKA BULSHADA_____ 22
QODOBKA 35AAD WASAARADDA SHAQADA IYO ARRIMAHA BULSHADA _____ 23
QODOBKA 36AAD WASAARADDA QOYSKA IYO XUQUUQUL INSAANKA _____ 24
QODOBKA 37AAD WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA _____ 24
QODOBKA 38AAD WASAARADDA KALLUUMEYSIGA IYO DHAQAALAHA BULUUGGA _____ 25
QODOBKA 39AAD WASAARADDA XANNAANADA XOOLAHA, DHIRTA IYO DAAQA _____ 26
QODOBKA 40AAD WASAARADDA BATROOLKA IYO MACDANTA _____ 27
QODOBKA 41AAD WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA _____ 27
QODOBKA 42AAD WASAARADDA DEKEDAHA IYO GAADIIDKA BADDA _____ 28
QODOBKA 43AAD WASAARADDA GAADIIDKA IYO DUULISTA HAWADA/RAYIDKA_____ 29
QODOBKA 44AAD WASAARADDA TAMARTA IYO KHEYRAADKA BIYAHA _____ 29
QODOBKA 45AAD WASAARADDA ISGAARSIINTA IYO TEKNOLOJIYADDA _____ 30
QODOBKA 46AAD WASAARADDA DEEGAANKA IYO ISBEDDELKA CIMILADA _____ 31
QODOBKA 47AAD WASAARADDA WARFAAFINTA, DHAQANKA, IYO DALXIISKA_____ 31
QODOBKA 48AAD WASAARADDA HOWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA _____ 32
QODOBKA 49AAD WASAARADDA DHALLINYARADA IYO CIYAARAHA_____ 33
QODOBKA 50AAD WAAJIBKA WADASHAQEYNTA WASAARADAHA _____ 33
CUTUBKA TODDOBAAD NIDAAMKA MAAMULKA GUUD _____ 34
QODOBKA 51AAD SHAQADA WASIIRKA _____ 34
QODOBKA 52AAD SHAQADA WASIIRU DOWLAHA IYO WASIIR-KU-XIGEENKA_____ 35
QODOBKA 53AAD SHAQADA AGAASIMAHA GUUD AMA XOGHAYAHA JOOGTADA AH _____ 35
QODOBKA 54AAD MAAREYNTA SHAQAALAHA DOWLADDA_____ 37
QODOBKA 55AAD QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADAHA DOWLADDA _____ 37
QODOBKA 56AAD QORSHEYAASHA HAY'ADAHA DOWLADDA _____ 39
CUTUBKA SIDDEEDAAD HANNAANKA ISTICMAALKA AWOODDA FULINEED _____ 39
QODOBKA 57AAD AWOODDA SOO SAARISTA XEER-NIDAAMIYEYAASHA _____ 39

QODOBKA 58AAD DIKREETOOYINKA AMA XEERARKA MAAMUL _____ 39

QODOBKA 59AAD GELIDDA HESHIISYADA _____ 40

QODOBKA 60AAD GO'AANNADA MAAMUL _____ 40

CUTUBKA SAGAALAAD KAABEYAASHA XUKUUMADDA _____ 41

QODOBKA 61AAD WADASHAQEYNTA XUKUUMADDA IYO KAABEYAASHEEDA _____ 41

QODOBKA 62AAD WADASHAQEYNTA WASAARADAHA HEER FEDERAAL IYO HEER DOWLAD-GOBOLEED _____ 41

QODOBKA 63AAD HEERARKA MADAXBANNAANIDA _____ 41

CUTUBKA TOBANAAD QODOBBO QUBANE AH _____ 42

QODOBKA 64AAD DIB-U-EEGISTA IYO WAX-KA-BEDDELKA _____ 42

QODOBKA 65AAD DHAQANGAL & BAABI'IN _____ 42

CUTUBKA KOWAAD
QODOBBO GUUD

QODOBKA 1AAD
MAGACA XEER-NIDAAMIYAHA

Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu magacaabayaa **"Xeer-nidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda.**"

QODOBKA 2AAD
UJEEDDADA XEER-NIDAAMIYAHA

Ujeeddada xeer-nidaamiyahaan waa:

a) Dhaqangelinta iyo faahfaahinta mabaadii'da iyo ujeeddooyinka uu xambaarsan yahay Sharci Lr. 14 ee soo baxay 3 June 1962 ee Nidaamka Xukuumadda ee Jamhuuriyaddii Soomaaliya (1962 – 1967kii), iyo qaraarka Golaha Shacabka ee tirsigiisu yahay Tix: GSH/11/03/22 ee ku taariikhaysan 07 Agoosto 2022 laguna ansixiyay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo barnaamijkeeda;

b) Kaabista mabaadii'da iyo ujeeddooyinka ku xusan qodobbada Sharci Lr. 14 ee soo baxay 3 June 1962 iyo wax-ka-beddelkii lagu sameeyay iyo dikreetooyinkii madaxweyne iyada oo la waafajinaayo dhaqanka dastuuriga ah ee taabbagalay seddexdii muddo-xileed ee ugu dambeyeey iyo mabaadii'da aasaasiga ah si waafaqsan Qodobka 139aad ee Dastuurka oo xeerinaya sii socoshada xeerarka;

c) In Xukuumaddu yeelato hannaan sharci ah oo faahfaahsan kaas oo ay ku gudan karto waajibaadkeeda dastuuriga ah;

d) In Wasaaradaha loo kala caddeeyo waajibaadkooda, iyada oo la xoojinayo wada- shaqaynta, iskaashiga iyo xallinta khilaafka;

e) In nidaamka maamulka guud la waafajiyo halbeegyada casriga ah iyada oo la kala qeexayo shaqada Wasiirka iyo midda Agaasimaha Guud;

f) In Wasaaraduhu iyo hay'adaha kaleba ay yeeshaan qaab-dhismeed midaysan iyo qorshe istiraatiijiyeed shan sano ah;

g) In la nidaamiyo xiriirka ka dhexeeya Wasaaradaha iyo hay'adaha hannaan ahaan hoos yimaadda;

h) In la caddeeyo sida awoodda fulineed loo isticmaali karo, iyada oo la faahfaahinayo habraacyada dikreetooyinka/xeerarka maamul, xeer-nidaamiyeyaasha iyo habraacyada go'aannada maamul.

QODOBKA 3AAD
EREYBIXIN

Haddii aan si kale loogu dhex-sheegin xeerar kale, ereyada soo socda waxaa loola jeedaa:

a) **Xukuumadda:** Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

b) **Kaabeyaasha Xukuumadda:** Hay'adaha madaxbannaan, wakaaladaha, iyo xafiisyada kaabaya shaqada Xukuumadda;

c) **Dikreetooyinka ama Xeerarka Maamul:** Xeerarka fulineed oo ay soo saareyso laanta fulinta, iyada oo isticmaaleysa awooddeeda maamul;

d) **Go'aannada maamul:** Go'aannada ay gaarayaan wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee laanta fulinta, iyaga oo isticmaalaya awoodaha lagu siiyay shuruucda, xeer-nidaamiyeyaasha, siyaasadaha iyo qodobbada kale ee leh awood sharci;

e) **Dastuurka:** Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lana ansixiyay 1da Agoosto 2012;

QODOBKA 4AAD
MABAADII'DA GUUD EE HOWLAHA XUKUUMADDA

1. Xukuumadda Federaalka ahi waxa ay ku shaqeyneysaa mabaadii'da dastuuriga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyada oo dhowraysa kala soocnaanta awoodaha dastuuriga ah iyo xuquuqda aadanaha ee Dastuurku dammaanad- qaaday.
2. Shacabka Soomaaliyeed waxay xaq u leeyihiin in ay talooyin ku biiriyaan dejinta siyaasadaha Qaranka ee khuseeya arrimaha gudaha iyo dibedda, dhaqaalaha, caddaaladda, maamulka guud, amniga iyo arrimaha bulshada si toos ah ama iyaga oo u soo maraya ururadooda bulsho.
3. Xukuumaddu waxa ay u isticmaalaysaa awooddeeda fulineed inta uu sharcigu u oggol yahay, waana in go'aannada ka soo baxa ay waafaqsanaadaan Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka.

QODOBKA 5AAD
XIL-GUDASHADA XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

1. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa ay u gudanaysaa waajibaadkeeda ku aaddan siyaasadda arrimaha gudaha iyo dibedda, caddaaladda, dhaqaalaha, amniga, horumarinta Qaranka iyo arrimaha bulshada, si waafaqsan xeer-nidaamiyahaan maamul iyo Xeerarka kale ee Dalka, waxaana ku hoggaaminaya Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

2. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu xeer madaxweyne ku soo saarayaa arrimaha soo socda:

   (a) Dhaqangelinta magacaabista saraakiisha sare ee Dowladda, diblomaasiyiinta, iyo taliyeyaasha ciidamada marka Golaha Wasiiradu soo jeediyaan;

   (b) Arrimaha kale ee sharcigu farayo in lagu soo saaro xeer madaxweyne ama soo galaya awoodihiisa dastuuriga ah.

CUTUBKA LABAAD
GOLAHA WASIIRRADA IYO AWOODAHOODA

QODOBKA 6AAD
GOLAHA WASIIRRADA

1. Golaha Wasiirrada ee xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa uu ka kooban yahay Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka/Ku-xigeenno, wasiirrada wasaaradaha, Wasiiru-dowleyaasha iyo Wasiir ku-xigeennada, si waafaqan Qodobka 97aad (2) ee Dastuurka.

2. Wasiiru-dowleyaasha iyo wasiir-ku-xigeennada waxa ay ka qeybgelayaan kulamada Golaha Wasiirrada iyaga oo aan cod laheyn. Haddii Wasiiru Dowlaha ama wasiir- ku-xigeenku uu metelayo wasiirka waa uu codeynayaa.

QODOBKA 7AAD
AWOODAHA GOLAHA WASIIRRADA

1. Iyada oo aan waxba loo dhimaynin Qodobka 99[aad] ee Dastuurka, Golaha Wasiiradu waxa ay xilkooda u gudanayaan sida soo socota:

   a) Awoodaha Guud:

      i. Diyaarinta iyo meelmarinta siyaasadaha iyo hindise-sharciyeedyada ay Xukuumaddu curiso, iyaga oo ka codsan kara Baarlamaanka Federaalka in uu dib ugu soo celiyo hindise-sharciyeedyo hore loogu gudbiyay;
      ii. Diyaarinta iyo meelmarinta dikreetooyinka xeereed, dikreetooyinka xeer-dejineed ee Baarlamaanka Federaalku u igmaday, iyo xeer-nidaamiyeyaasha loogu xilsaaray Dastuurka ama shuruucda kale ee dalka;
      iii. Meelmarinta heshiisyada caalamiga ah iyo siyaasadda arrimaha dibedda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
      iv. Arrimaha kale ee loogu xilsaaray Dastuurka, shuruucda kale ee dalka iyo xeer-nidaamiyeyaasha.

b) Awoodaha Maaliyadda Guud:

i. Meelmarinta miisaaniyadda Qaranka, ku-noqoshadeeda, iyo xisaab-xirkeeda, iyaga oo u gudbinaya Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, si waafaqsan Shuruucda khuseeysa maamulka maaliyadda guud ee dalka.

ii. Arrimaha kale ee sharcigu u xilsaaray ama ka baxsan awoodaha Wasiirka Maaliyadda iyo xafiisyada kale ee dowladda.

c) Awoodaha Arrimaha Shaqaalaha:

i. Soo jeedinta magacaabista iyo xil-ka-qaadista saraakiisha sare ee lagu sheegay Dastuurka ama shuruucda kale ee dalka si waafaqsan Qodobka 117aad ee Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka;

ii. Soo jeedinta magacaabista xubnaha Guddiyada Madaxabannaan iyo saraakiisha kale ee sharcigu farayo, iyaga oo u gudbinaya Baarlamaanka Federaalka;

iii. Arrimaha kale ee loogu xilsaaray shuruucda shaqaalaha rayidka ee Dowladda iyo shuruucda hay'adaha amniga Qaranka.

QODOBKA 8AAD
GUDDI-HOOSAADYADA GOLAHA WASIIRRADA

1. Golaha Wasiirrada waxa uu yeelan karaa guddi-hoosaadyo joogto ah ama kuwo aan joogto ahayn, kuwaas oo fududeynaya xil-gudashada Golaha Wasiirrada.

2. Guddiyada joogtada ah iyo kuwa aan joogtada ahayn waxaa lagu dhisayaa xeer Ra'iisul Wasaare, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

3. Golaha Wasiirrada lama horgayn karo hindise-sharciyeedyo, xeer-nidaamiyeyaal, siyaasado iyo heshiisyo aan soo marin guddi-hoosaadyada ay khusayso ama aan loo dhammeystirin habraacyada dhaqangalka ah ee Xeer Ra'iisul Wasaare 125, ee ku taariikheysan 06/04/2023.

4. Guddi-hoosaadyadu waxa ay u xilsaaran yihiin ka baaraandegista arrimaha ku cad Faqradda 3aad ee Qodobkaan iyaga oo ka wada hadlaya wixii ka khuseeya una soo gudbinaya Xoghayaha Joogtada ah wixii go'aanno, talooyin, ama aragti ah.

5. Guddi-hoosaadyadu waxa ay yeelanayaan shaqaale uu u soo asteeyo Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

CUTUBKA SEDDEXAAD
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA

QODOBKA 9AAD
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA

1. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waxa uu magac ahaan beddelayaa Guddoonka Golaha Wasiirrada ee ku qoran xeerarkii hore ee nidaamka xukuumadda.
2. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waxa uu ka kooban yahay Ra'iisul Wasaaraha, Ra'iisul- wasaare Ku-xigeen/Ku-xigeenno, Wasiiru Dowlaha Xafiiska, Xoghayaha Joogtada ah, Ku-xigeenka Xoghayaha Joogtada ah, iyo waaxyaha hoos yimaadda.
3. Ra'iisul-wasaaruhu waa madaxa Xukuumadda waana guddoomiyaha Golaha Wasiirrada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxa uuna u xilsaaran yahay arrimaha soo socda:
    a) Gudashada waajibaadka loogu xilsaaray Dastuurka, shuruucda kale ee dalka iyo xeer-nidaamiyeyaashooda;
    b) Qaadashada masuuliyadda howlaha aysan jirin cid gaar ah oo loo xilsaaray ama si guud u saameynaya howlaha Xukuumadda;
    c) Isugu yeerista iyo guddoominta kulamada Golaha Wasiirrada isaga oo go'aaminaya ajendaha la horgeynayo;
    d) Haggaaminta, hagidda, xiriirinta, isu duwidda, iyo korjoogteynta howlaha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;
    e) Jaangoynta yoolasha, hiigsiyada, iyo howlaha hortebinta u leh Xukuumadda si waafaqsan barnaamijka Xukuumadda ee Golaha Shacabku soo ansixiyay;
    f) Oggolaanshaha saraakiisha Dowladda iyo khubarada kale ee ka qeybgalaya kulamada Golaha Wasiirrada, haddii sharci gaar ah uusan waajibin ka qeybgalkooda;
    g) Oggolaanshaha baahinta wararka iyo dukumiintiyada ku saabsan kulamada iyo go'aannada Golaha Wasiirrada, si waafaqsan shuruucda dalka;
    h) Meelmarinta, soo-saarista iyo hubinta dhaqangalka go'aannada Golaha Wasiirrada, si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka;
    i) U gudbinta Baarlamaanka Federaalka arrimaha u baahan ansixintiisa iyo hindise-sharciyeedyada isaga oo u gudbin kara codsiga kala noqoshada hindise-sharciyeedyada haddii loo baahdo;
    j) U gudbinta Madaxweynaha JFS go'aannada ka soo baxay Golaha Wasiirrada ee u baahan in lagu soo saaro xeer madaxweyne.

4. Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka/Ku-xigeennada waxa uu qabanayaa/qabanayaan howlaha loo xilsaaray si waafaqsan Qodobka 101aad ee Dastuurka.
5. Wasiiru Dowlaha Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waxa uu la shaqaynayaa Ra'iisul-wasaaraha, waxa uuna qabanayaa howlaha uu u xilsaaro si waafaqsan Qodobka 102aad (3) ee Dastuurka.
6. Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waa sarkaalka idman ee ugu saarreeya shaqaalaha Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, waxaa uu yeelanayaa ku-xigeen, waxaa uuna qabanayaa howlaha loogu xilsaaray Qodobka 10aad ee Xeer-nidaamiyahaan.

QODOBKA 10AAD
XILKA XOGHAYAHA JOOGTADA AH

Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waxa uu u xilsaaran yahay arrimaha soo socda:

1. Isku-duwidda, kormeerka howlaha iyo waajibaadka waaxyaha Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha;
2. Jihaynta iyo maareynta arrimaha maamulka guud, arrimaha shaqaalaha iyo howlaha waaxyaha kala duwan ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha;
3. Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waa madaxa isku-xirka hay'adaha Xukuumadda heer farsamo, isaga oo raacaya tilmaamaha iyo amarrada Ra'iisul Wasaaraha, qabanayana waajibaadka soo socda oo keliya:
   (a) Xiriirinta iyo isu-duwidda hirgalinta, barnaamijyada waxqabadka iyo howlaha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, isaga oo fulinaya amarrada Ra'iisul Wasaaraha.
   (b) Isugu yeerista iyo shir-guddoominta kulamada Madasha Agaasimeyaasha Guud ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha.
4. Wixii kale oo howlo ah ee uu u xilsaaro Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ama loogu xilsaaro shuruucda dalka.

CUTUBKA AFARAAD
KULAMADA GOLAHA WASIIRRADA

QODOBKA 11AAD
AJENDAHA

1. Ajendaha kulamada Golaha Wasiirrada waxaa go'aaminaya Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.
2. Agaasimaha Golaha Wasiirrada, isaga oo ogaysiinaya Xoghayaha Joogtada ah, waxa uu si joogto ah ugu wargelinayaa Ra'iisul Wasaaraha dukumiintiyada iyo arrimaha u baahan in la horgeeyo Golaha Wasiirrada.

3. Arrimaha la horgeynayo Golaha Wasiirrada waa in loo soo gudbiyaa Agaasinka Golaha Wasiirrada ugu yaraan hal toddobaad ka hor iyada oo Ra'iisul-wasaaruhu si KMG ah u laali karo ku-dhaqanka faqraddaan.

QODOBKA 12AAD
GO'AANKA ISUGU YEERISTA KULAMADA

1. Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa uu awood u leeyahay in uu go'aamiyo isugu yeerista kulamada Golaha Wasiirrada, isaga oo go'aankiisa ku wargelinaya Agaasimaha Golaha Wasiirrada xilli ku habboon.
2. Agaasimaha Golaha Wasiirrada waxa uu diyaarinayaa ogeysiiska kulanka iyo ajendihiisa, isaga oo sheegaya taariikhda, waqtiga, iyo goobta uu kulanku ka dhacaayo.
3. Ogeysiiska kulanka iyo ajendihiisa waa in la gaarsiiyo xubnaha Golaha Wasiirrada iyo ciddii kale ee ka soo qeybgaleysa ugu yaraan hal maalin ka hor kulanka.

QODOBKA 13AAD
KULAMADA AAN CAADIGA AHEYN

Kulamada aan caadiga aheyn ee Golaha Wasiirrada waxaa la isugu yeerayaa habraac gaar ah si waafaqsan shuruucda dalka iyada oo Ra'iisul-wasaaruhu uu isugu yeeri karo xilli kasta iyo goob kasta.

QODOBKA 14AAD
GOOBTA KULAMADA

Kulamada Golaha Wasiirrada waxa ay ka dhacayaan hool gaar ah oo lagu diyaariyay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, haddii Ra'iisul-wasaaruhu uusan go'aamin in meel kale ama qaab kale lagu qabto, isaga oo xeerinaya duruufo gaar ah oo sidaasi khasbaya.

QODOBKA 15AAD
WAQTIGA KULAMADA

1. Kulamada caadiga ah ee Golaha Wasiirrada waxa ay dhacayaan maalinta Khamiista ee toddobaad kasta.
2. Kulamada aan caadiga aheyn waxa ay dhici karaan waqti kasta oo uu go'aamiyo Ra'iisul Wasaaraha.

QODOBKA 16AAD
GUNTANKA KULAMADA

1. Kulamada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn ee Golaha Wasiiradu waxay ku guntamayaan in ay goobjoog yihiin oo codeynayaan aqlabiyad boqolkiiba konton iyo hal dheeri (50%+1) tirada guud ee Wasaaradaha. Go'aannada Golaha Wasiiradu waxay ansax ku noqonayaan boqolkiiba konton iyo hal dheeri (50%+1) ee tirada xubnaha fadhigu ku guntamay. Haddii ay dhacdo in coddadku barbardhac noqdaan, waxaa meelmaraya dhankii uu Ra'iisul-

wasaaruhu u codeeyo, haddii uu maqan yahayna Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka guddoominaya kulanka, haddii ay wada maqan yihiin, dhankii uu Wasiirka Cadaaladdu u codeeyo.

2. Ka hor inta aan la furin kulanka, Agaasinka Golaha Wasiirrada waxa uu ku dhawaaqayaa magacyada xubnaha goobjoogga ah iyo kuwa maqan, isaga oo sidaasi u diiwaangelinaya.

3. Ka hor inta aan la codeynin, Ra'iisul Wasaaraha waxa uu farayaa in la hubiyo guntanka, isaga oo joojinaya wixii codeyn ah haddii guntanku uu gaari waayo aqlabiyadda (50% +1).

QODOBKA 17AAD
HABKA DOODDA

1. Arrin aan ku jirin ajendaha kulanka lama furi karo mana laga doodi karo inta ay socdaan kulamada caadiga ah ee Golaha Wasiirrada. Haddii arrinku uu noqdo lagama maarmaan, waxaa go'aan ka gaaraya Ra'iisul Wasaaraha.

2. Faqradda kowaad ma khuseyso kulamada aan caadiga aheyn kuwaas oo lagu maamulayo habraac gaar ah.

3. Xubnaha ka qeybgalaya doodda ama qaba su'aalo waxaa hadalka siinaya Ra'iisul- wasaaraha, waxaana diiwaangelinaya Agaasinka Golaha Wasiirrada.

QODOBKA 18AAD
JOOJINTA AMA HAKINTA KULAMADA

1. Ra'iisul Wasaaraha, ama cidda meteleysa, waxa uu joojin karaa ama hakin karaa kulanka haddii ay noqoto lama huraan.

2. Haddii guntanka kulanka uu buuxsami waayo si waafaqsan Qodobka 16aad (Guntanka Kulamada), Ra'iisul-wasaaruhu waa in uu joojiyaa kulanka.

CUTUBKA SHANAAD
NIDAAMKA KULAMADA GOLAHA WASIIRRADA

QODOBKA 19AAD
ILAALINTA WAQTIGA KULAMADA

1. Xubnaha iyo ciddii kale oo ka soo qeybgaleysa kulamada Golaha Wasiirrada waa in ay ilaaliyaan waqtiga loogu talagalay in kulamadu furmaan sida ku cad ogeysiiska kulanka.

2. Haddii wasiir ama cid kale oo ka qeybgaleysa kulanka aanay iman karin ama ay ka maqnaaneyso kulanka, waa in ay ogeysiis soo gaarsiisaa Agaasinka Golaha Wasiirrada ugu yaraan hal maalin ka hor taariikhda kulanka.

QODOBKA 20AAD
FADHIGA KULAMADA

1. Xubnaha iyo ciddii kale oo ka qeybgaleysa kulamada Golaha Wasiirrada waxa ay fariisaneysaa meesha loo asteeyay ee ku aaddan magaceeda.
2. Mudnaanta fadhiga ee xubnaha Golaha Wasiirrada waxaa loo raacayaa sida ay ugu kala horreeyaan liiska wasaaradaha ku qoran Qodobka 24aad (2) ee xeer-nidaamiyahaan.

QODOBKA 21AAD
KA TAGISTA KULAMADA

Inta ay kulamadu socdaan, xubnaha iyo ciddii kale ee ka qeybgaleysa kulamada Golaha Wasiirrada waxaa ka reebban in ay kulanka ka tagto haddii aan Ra'iisul- wasaaruhu u fasaxin.

QODOBKA 22AAD
NIDAAMKA

Ra'iisul-waasaraha waxa uu masuul ka yahay ilaalinta nidaamka iyo kala dambeynta inta kulamadu socdaan waxa uuna awood u leeyahay in uu tallaabo ka qaado xubnaha iyo ciddii kale ee ka qeybgaleysa kulamada Golaha Wasiirrada.

QODOBKA 23AAD
DIIWAANKA HADAL-QORAALLADA IYO GO'AANNADA

1. Agaasinka Golaha Wasiirrada waxa uu diiwaan-gelinayaa isaga oo nuqullo rasmi ah keydinaya dhammaan arrimaha looga hadlo kulamada Golaha Wasiirrada iyo hadalka cid kasta oo ka qeybgashay kulamada.
2. Hadal-qoraallada kulan kasta waxaa laga akhrinayaa kulanka xiga iyada oo si gaar ah loo soo koobayo go'aannada uu Goluhu gaaray.
3. Agaasinka Golaha Wasiirrada waxa uu si gaar ah u diiwaangelinayaa go'aannada ka soo baxa Golaha Wasiirrada isaga oo ku summadeynaya lambarro taxane ah oo soconaya iyo waxa ay go'aannadu ku saabsan yihiin.

CUTUBKA LIXAAD
WASAARADAHA XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

QODOBKA 24AAD
WASAARADAHA

1. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa ay ka kooban tahay wasaaradaha uu soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxa ayna ku shaqeynayaan nidaamkaan aasaasiga ah ee lagu faahfaahinayo xeerarkii maamulka ee Jamhuuriyaddii Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 139aad ee Dastuurka (sii socoshada xeerarka).

2. Wasaaradaha Xukuumadda JFS waxaa ay mudnaanta u kala leeyihiin sida ay u kala horreeyaan ee hoos ku xusan:

    a) Wasaaradda Cadaaladda iyo Dastuurka;

    b) Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka, iyo Dib-u-heshiisiinta;

    c) Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah;

    d) Wasaaradda Gaashaandhigga;

    e) Wasaaradda Amniga Gudaha;

    f) Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka;

    g) Wasaaradda Maaliyadda;

    h) Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha;

    i) Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha;

    j) Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka;

    k) Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa;

    l) Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah;

    m) Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta;

    n) Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada/Rayidka;

    o) Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda;

    p) Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyeynta;

    q) Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda;

    r) Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha;

    s) Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha, iyo Tacliinta Sare;

    t) Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada;

    u) Wasaaradda Qoyska iyo Xuquuqul Insaanka;

    v) Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada;

    w) Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha;

    x) Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka, iyo Dalxiiska; iyo

    y) Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada;

3. Ra'iisul-wasaaruhu waxa uu isku-shaandheyn ku sameyn karaa xubnaha Golaha Wasiirrada ee Golaha Shacabku ansixiyay si waafaqsan Qodobka 100aad xarafkiisa (b) ee Dastuurka.

4. Howlaha wasaaradaha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa ay u qaybsan yihiin loona fulinayaa sida lagu qeexay cutubkaan iyo xeerarka dhaqangalka ah.

QODOBKA 25AAD
WASAARADDA CADAALADDA IYO DASTUURKA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leeyahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

Arrimaha Caddaaladda:

1. Dejinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu hagaajinayo nidaamka caddaaladda ee Qaranka laguna ballaarinayo adeegga caddaaladda iyada oo xoojinaysa xallinta mashaakilka bulshada, talinta sharciga iyo la-dagaalanka musuqmaasuqa;
2. Kala shaqeynta Xukuumadda arrimaha ku dhaqanka sharciga iyo soo saarista hageyaasha shuruucda caddaaladda;
3. Ka qeyb-qaadashasa Dib-u-eegista ama qorista shuruucda Dalka iyo xeer-nidaamiyeyaasha, iyada oo waafajineysa shareecada Islaamka, Dastuurka, xeer-dhaqanka Soomaaliyeed, iyo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, si waafaqsan Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 125, ee soo baxay 06/04/2023;
4. Ka qeyb-qaadashada toosinta iyo tifaftirka heshiisyada caalamiga ah oo ay u soo gudbiso Wasaaradda Arrimaha Dibedda si waafaqsan Xeerka Ra'iisul Wasaare Lr. 125, ee ku taariikhaysan 06/04/2023.
5. La socodka xaaladda guud ee maxkamadaha, hannaannada kale ee xallinta murannada, iyo caqabadaha ka jira habsami-u-socodka adeegga caddaaladda iyada oo warbixinno joogto ah uga soo diyaarineysa Golaha Wasiirrada;
6. Xoojinta iyo horumarinta iskaashiga garsoor ee dibedda, iyada oo dejinaysa siyaasadaha iyo shuruucda lagu nidaaminaayo iskaashigaasi;
7. Soo-jeedinta & dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo nidaamka beddelka ah ee xallinta khilaafaadka (ADR) si waafaqsan xeerarka dalka;
8. Ka talabixinta horumarinta manhajka waxbarashada kulliyadaha qaanuunka iyo shareecada, iyadoo kaashaneysa wasaaradda waxbarashada kuna wacyigelineysa bulshada ku dhaqanka sharciga;
9. Nidaaminta iyo xoojinta mihnadaha madaxabannaan ee qareennada iyo nootaayooyinka iyo ururadooda iyada oo diyaarineysa siyaasadaha iyo shuruucda lagu horumarinayo;
10. Gacan-ku-heynta iyo maamulka barmaamijka kaalmada sharci ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;
11. Nidaaminta iyo korjoogteynta maamulka iyo amniga xabsiyada iyo xarumaha

dhaqancelinta iyada oo xoojineysa adeegyada dhaqancelinta ee lagu hirgelinayo xuquuqda gaarka ah ee dadka lagu hayo xabsiyada iyo xarumaha dhaqancelinta;

12. Korjoogtaynta hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha xeerarka caddaaladda;

13. Iskaashiga iyo wadashaqeynta dhammaan daneeyeyaasha adeegyada caddaaladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyada oo kaashaneysa hay'adaha iyo ururada gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeynaya horumarinta talinta iyo sarreynta sharciga.

Arrimaha Dastuurka:

14. Fududeynta iyo kaalmeynta hannaanka dib-u-eegista iyo dhammeystirka Dastuurka iyada oo u mareysa hannaan wadatashi oo loo dhan yahay;

15. Wacyigelinta shacabka Soomaaliyeed ee ku aaddan arrimaha Dastuurka iyo mabaadii'da uu ku dhisan yahay;

16. U fududeynta Baarlamaanka Federaalka iyo hay'adaha u xilsaaran qorista wax-ka- beddelka Dastuurka gacansiinta farsamo ee ay u baahan yihiin;

17. Dhaqangelinta Dastuurka iyada oo soo jeedineysa siyaasadaha iyo shuruucda aasaasiga ah ee lagu dhaqangelinayo Dastuurka lana soconeysa dhaqangalkiisa iyo caqabadaha ka jira;

18. Iskaashiga iyo wadashaqeynta dhammaan daneeyeyaasha adeegyada caddaaladda iyo dib-u-eegista Dastuurka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyada oo kaashaneysa hay'adaha iyo ururada gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeynaya horumarinta caddaaladda, talinta sharciga, iyo arrimaha dastuurka.

QODOBKA 26AAD
WASAARADDA AWQAAFTA IYO ARRIMAHA ISLAAMKA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo gudashada tiirarka diinta Islaamka (Salaadda, Soonka, arrimaha Xajka, iyo Zakada), fatwada, hay'adaha diiniga ah, dugsiyada Quraanka, masaajidda, xarumaha lagu barto diinta islaamka iyo waqafka iyada oo xoojineysa kaalinta horumarineed ee waqafka;

i. shahaado kasta oo canshuur ka-jaris ee la siiyey shakhsiga si waafaqsan Qodobka 94-aad oo la xiriirta lacagaha uu shakhsigu helay sanadkaas gudahiisa;

ii. bayaan kasta ee shakhsigu la siiyo ee ku cad Qodobka 40(3) ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax-kabeddelkiisa); iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

iii. macluumaad kasta oo kale ee ay Wasaaraddu go'aamiso.

Qodobka 102-aad
Shakhsiyaadka Aan Laga Rabin Soo Gudbinta Warbixinta Xisaab Canshuureedka Dakhliga

1) Haddii Wasaaraddu aysan si kale ogaysiis qoraal ah ugu go'aamin ama shakhsigu dooran inuu warbixin xisaab canshuureed dakhli soo gudbiyo, warbixinta xisaab canshuureedka dakhliga ee sanad canshuureed lagama rabo:

b) shakhsi Dalka degaan ku ah:

i. oo aan lahayn ama helin dakhli canshuurgal ah sanadkaas si waafaqsan Qodobka 9(1)(b); ama

ii. oo dakhligiisa canshuurgalka ee sanadka uu yahay oo keliya dakhli ka soo gala shaqo islamarkaasna canshuurta isha lacag-bixinta looga jaro si waafaqsan Qodobka 90-aad; ama

t) shakhsi aan Dalka degaan ku ahayn oo aan lahayn ama helin dakhli canshuurgal ah sanadkaas si waafaqsan Qodobka 9(1)(a).

Qodobka 103-aad
Qiimaynta iyo Canshuur Bixinta

1) Marka la soo gudbiyo iyada oo loo hoggaansamaayo Qodobka 101-aad, warbixinta xisaab canshuureedka dakhliga waxaa loo qadarinayaa is-qiimayn waafaqsan Qodobka 48-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax- kabeddelkiisa) waxaana dib wax uga badali kara Wasaaradda sida uu tilmaamay Qodobka 50-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax- kabeddelkiisa).

2) Canshuurta ay tahay in la bixiyo ee ku cad is-qiimeynta lagu sheegay faqradda 1- aad ee Qodobkan waxa la bixinayaa taariikhda ay waajibka tahay in Wasaaradda loo soo gudbiyo warbixinta xisaab canshuureedka dakhliga (eeg Qodobbada 89(2)(j) iyo 101-aad).

CUTUBKA X
BURINTA, KALA GUURKA IYO DHAQAN GALKA SHARCIGAAN

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 104-aad
Iswaafajinta Wax Ka- Bedellada

1) Qodobbada, faqradaha iyo jadwallada shuruucda ku xusan Jadwalka Lixaad waa la baabi'iyay, la bedelay gebi ahaanba ama wax-ka-beddelid ayaa lagu sameeyey si loo xaqiijiyo dejinta iyo dhaqan-gelinta Sharcigan.

2) Xeer-nidaamiyeyaasha la xiriira qodobbada, faqradaha ama jadwallada lagu sheegay faqradda 1-aad ee Qodobkan ee dhaqangalka ah marka Sharcigan la ansixiyo waxay sii ahaanayan dhaqangal. Xeer-nidaamiyeyaashaas waxay usii shaqaynayaan sidii in loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan ilaa lagu beddelayo ama lagu baabi'inaayo xeer-nidaamiyeyaal loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan. Hase yeeshee, waxaa la joojinaaya isticmaalka xeer-nidaamiyeyaasha aan waafaqsanayn Sharcigan. Qodobkan dhexdiisa, xeer-nidaamiyeyaal waxaa ka mid ah xeerarka, go'aannada, amarrada iyo ogeysiisyada.

Qodobka 105-aad
Xilliga Kalaguurka

1) Iyadda oo la raacayo Qodobkan, qodobbada, faqradaha iyo jadwallada shuruucda ku xusan Jadwalka Lixaad (oo halkaan kadib loogu yeerayo "sharcigii hore") waxay u sii shaqaynayaan sidii loo ansixiyay iyada oo aan waxba laga beddelin marka lagu dabaqaayo xilliyada iyo xaaladaha ka horeeyay taariikhda uu Sharcigani dhaqangalay.

2) Foomamka iyo dukumeentiyada kale ee loo isticmaali jiray sharcigii hore waxa loo sii isticmaali karaa Sharcigan. Tixraac kasta oo foomamkaas ah iyo dukumeentiyadaas ku xusan oo la xiriira qodobbo iyo faqrado katirsan sharcigii hore waxaa loo tixgelinayaa inay tixraacayaan qodobbada iyo faqradaha u dhigma ee ku qoran Sharcigan.

3) Sharcigii hore ayaa lagu sii dabaqayaa:

b) waajibaadka canshuureed ee la xiriira sanad canshuureedka dhamaanaya ka hor taariikhda dhaqangalka Sharcigan, oo ay kujiraan soo gudbinta warbixinta xisaab canshuureedka iyo xisaabinta canshuurta waajibtay; iyo sidoo kale

t) hawlaha iyo talaabooyinka maamul iyo sharci, oo ay kujiraan dacwadaha

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

maxkamadeed oo bilaawday ka hor taariikhda dhaqangalka Sharcigan.

4) Canshuurta waajibtay ee la xiriirta sanad canshuureed kasta oo dhamaanaya ka hor taariikhda dhaqangalka Sharcigan waxaa lagu soo uruurin karaa talaabooyin maamul iyo sharci oo cusub oo la bilaabay iyadoo la adeegsanaayo Sharcigan. Talaabooyinka maamul iyo sharci ee cusub oo loo bilaabay iyadoo la adeegsanaayo Sharcigan si loo soo uruuriyo canshuur baaqatay ma saamayn doonaan talaabooyinka maamul iyo sharci oo horay loo bilaabay oo lagu soo uruurinaayo canshuuraha baaqday.

5) Haddii xaaladda markaas jirta u baahato, marka Sharcigani tixraacayo "Sharcigan" ama qodobbo ama faqrado ka mid ah "Sharcigan," waxa loo fahmayaa inuu tixraacayo sharcigii hore ama qodobbo ama faqrado ka mid ah sharcigii hore.

6) Haddii kororka faa'ido ee laga helo gacan-ka-saarista hanti jirta taariikhda dhaqangalka Sharcigan aan la canshuuri laheyn haddii gacan-ka-saarista hantidaas ay dhici lahayd xilliga sharcigii hore uu dhaqangalka ahaa balse la canshuuraayo si waafaqsan Sharcigan, hantidaas waxaa loo nisbaynayaa kharash udhigma qiimaha suuqa ay ka joogto hantidaas taariikhda dhaqangalka Sharcigan.

7) Xeer-nidaamiyeyaal loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan ayaa go'aamin kara tallaabooyin kalaguur oo dheeri ah oo la xiriira hirgelinta Sharcigan. Tallaabooyinkas waxaa ka mid noqon kara kuwa dib-u-dhigi kara ama wax-ka-beddelli kara habka dhaqan-gelinta qodobbo, faqrado ama jadwallo Sharcigan ka mid ah, balse tallaabooyinkaas kalaguur ah waxa ay jiri karaan oo keliya muddo aan ka badnayn shan (5) sanadood.

Qodobka 106-aad
Dhaqan Galka Sharciga

Sharcigaan waxa uu dhaqan gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, uuna Saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuhiyadda Federaalka Soomaaliya.

JADWALLADA
JADWALKA KOWAAD: BOQOLLEYDA CANSHUURTA (TAX RATES)

(Qodobka 9)

Qodobka 1-aad

Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Shakhsiyaadka Dabiiciga (Rates of Income Tax for Individuals)

1) Iyadoo loo hoggaansamaayo faqradda 2-aad ee Qodobkaan iyo Jadwalka Labaad ee Sharcigan, dakhliga canshuur-galka ah ee sanad canshuureed soo gala shaksi dabiici ah ee Dalka degaan ku ah waxa lagu canshuuraya boqolleyda ku xusan jaantuska socda:

Lr.	Dakhliga Canshuur-galka ah (Sanadle)	Canshuurta Laga Bixinayo
1.	Dakhliga aan ka badnayn $1,200 USD	Wax canshuur ah lagama rabo
2.	Dakhliga u dhexeeya $1,201 USD ilaa $6,000 USD	Boqolkiiba lix (6%)
3.	Dakhliga u dhexeeya $6,001 USD ilaa $18,000 USD	$288 USD oo lagu daray boqolkiiba laba iyo toban (12%) oo lagu dhuftay inta ka badan $6000 USD
4.	Dakhliga ka badan $18,000 USD	$1,788 USD oo lagu daray boqolkiiba siddeed iyo toban (18%) oo lagu dhuftay inta ka badan $18.000 USD

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2) Dakhliga canshuur-galka ah ee sanad canshuureed soo gala shakhsi dabiici ah ee Dalka degaan ku ah oo ay da'diisu ka-yar tahay siddeed iyo toban (18) sanno dhamaadka sanadka waxa lagu canshuurayaa boqolkiiba labaatan (20%) oo ah boqolleey siman, marka laga reebo markii Wasaaraddu:

b) ku qanacdo in dhammaan lacagaha xisaabta lagu darsaday (si toos ah ama si dadban) marka la xisaabinaayay dakhligaas ay yihiin kuwa u hoggaansan nidaamka eex la'aanta ah (arm's length standard) (eeg Qodobka 37-aad); walibana

t) ay qoraal ahaan ku xaqiijisay in shuruuda ku qoran farqad-hoosaadka (b) lasoo buuxiyay.

3) Marka dakhliga canshuur-galka ah ee sand canshuureed soo gala shakhsi dabiici ah ee Dalka degaan ku ah ay ku jiraan kororka faa'ido (gains) ee shakhsigu ka helay gacan-ka-saarista hanti maalgashi ee canshuur-gal ah ama lacag-bixin hawlgab oo halmar si duuduub ah looga helay sanduuqa hawlgab ee la aqoonsanyahay:

b) dakhliga canshuur-galka ah ee aan ka badnayn $18,000 USD waxaa lagu canshuurayaa boqoleyda ku xusan faqradda 1-aad ee Qodobkan; iyadoo

b) dakhliga canshuur-galka ah ee ka badan $18,000 USD lagu canshuurayo:

i. boqolkiiba shan iyo toban (15%), iyada oo aysan ka badan karin cadadka dhabta ah ee kororka faa'ido (gain) ama lacag-bixinta hawlgab ee la helay; halka

ii. wixii dakhli ah ee intaas kabadan lagu canshuuraayo boqolkiiba siddeed iyo toban (18%).

4) Dakhliga canshuur-galka ah ee shakhsi dabiici ah ee aan Dalka degaan ku aheyn sanad canshuureed waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba siddeed iyo toban (18%) oo ah boqolleey siman.

Qodobka 2-aad
Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Ammaanooyinka (Rate of Income Tax for Trusts)

Dakhliga canshuur-galka ah ee Ammaanooyinka ee sanad canshuureed waxa lagu canshuuraya boqolkiiba labaatan iyo lix (26%) oo ah boqolleey

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

siman.

Qodobka 3-aad
Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Shirkadaha (Rate of Income Tax for Corporations)

Dakhliga canshuur-galka ah ee Shirkaddaha ee sanad canshuureedka waxa lagu canshuuraayaa boqolkiiba shan iyo toban (15%) oo ah boqolleey siman.

Qodobka 4-aad
Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Soomaaliyeed (Rates of Income Tax for Somali Permanent Establishments)

1) Dakhliga canshuur-galka ah ee sanad canshuureed soo gala xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed waxaa lagu canshuuraya mid lamid ah boqolleeyda canshuurta dakhliga Shirkaddaha ee ku cad Qodobka 3-aad ee Jadwalkaan.

2) Dakhliga dibadda loo diray sanad canshuureed ee xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed waxaa lagu canshuuraya boqolleeyda canshuureed ee ku cad faqradda (1)(t)(i) ee Qodobka 5-aad ee Jadwalkan.

Qodobka 5-aad
Boqolleeyda Canshuurta Isha Lacag-bixinta Lagu-jaro (Rates of Withholding Tax)

1) Boqolleyda canshuurta isha lacag-bixinta lagu jaro ee la xiriirta lacag-bixinnada ku xusan Qeybta II ee Cutubka IX ee Sharciga waa sidaan:

b) lacag-bixinnada lagu dabaqaayo Qodobka 90-aad ee Sharciga (dakhliga shaqada):

i) haddii uu yahay canshuur-laga-jare (withholdee) Dalka degaan ku ah, waxaa lagu canshuurayaa boqolleeyda canshuurta dakhliga ee lagu dabaqo shakhsiyaadka dabiiciga ah ee lagu cadeeyay faqradda 1-aad ee Qodobka 1- aad ee Jadwalkaan; iyadoo

ii) haddii uu yahay canshuur-laga-jare (withholdee) aan Dalka degaan ku ahayn lagu dabaqaayo boqolleeyda canshuurta dakhliga ee lagu dabaqo shakhsiyaadka dabiiciga ah ee lagu cadeeyay faqradda 1-aad ee

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 1- aad ee Jadwalkaan.

t) lacag-bixinnada lagu dabaqaayo Qodobka 91-aad (investment returns):

i. haddii ay tahay faa'idada saamiga (dividend), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba shan (5%);

ii. haddii ay tahay faa'idada ka dhalata qaamaha (returns on debt claims), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba toban (10%);

iii. haddii ay tahay kiro uu shakhsi Dalka degaan ku ah ka helo hanti maguurta ee Soomaaliya kutaala, waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba shan (5%); iyo

iv. haddii ay tahay kiro nooc kale ah, waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba toban (10%); sidoo kalana

v. hadii ay tahay khidmadda kheyraadka dabiiciga ah ama khidmadda xuquuqda milkiyadda (royalty), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba shan iyo toban (15%); iyadoo

j) lacag-bixinnada lagu dabaqaayo Qodobka 92-aad (service fees):

i. haddii ay tahay khidmadaha adeegga ee lagu sheegay Qodobka 92(1)(b), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba toban (10%);

ii. haddii ay tahay khidmadaha adeegga ee lagu sheegay Qodobka 92(1)(t), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba toban (10%); sidoo kalana

iii. haddii ay tahay lacagaha lagu iibsado caymiska (premium) ee lagu sheegay Qodobka 92(1)(t), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba shan (5%).

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

JADWALKA LABAAD: CANSHUURAHA LA-FUDUDEEYEY (SIMPLIFIED TAXATION)

(Faqradda 4-aad ee Qodobka 9-aad)

Qodobka 1-aad

Mabaadi'da Habraaca Canshuuraha La-fududayeyay

1) Jadwalkani waxa uu dejinayaa saldhiga Sharci ee ogolaanaya in wax laga beddelo, iyadoo loo maraayo xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, habraaca canshuurista shakhsiyaad Dalka deegaan ku ah ee u qalma, isagoo:

b) ogolaanaya in canshuur xisaabinteeda lagu saleeyay qiyaas dakhliyeed (presumptive tax -) lagu soo rogi karo shakhsiyaadka dakhligooda canshuur-galka ah uu ku jiro dakhli ka yimid noocyo ganacsi ee lagu cayimay xeer-nidaamiye; walibana sidoo kale

t) ogolaanaya in la dabaqo hab-xisaabeedka caddaanka ah ee wax laga beddelay (modified cash basis) marka la xisaabinayo dakhliga ka soo xarooda ganacsiyadda lagu cayimay xeer-nidaamiye.

2) Marka ay jiraan meelo aan waxba laga beddelin iyadoo loo maraayo xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan oo dhaqan-gelinaaya ujeedooyinka Jadwalkaan, xeerarka caadiga ah ee uu Sharcigani dejiyay ayaa la dabaqayaa.

Qodobka 2-aad

Xeer-nidaamiyaha Habraaca Canshuuraha La-fududayeyay

1. Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan oo dhaqan-gelinaaya ujeedooyinka Jadwalkaan ayaa lasoo saari doona, kaas oo dejinaaya arrimo ay ka mid yihiin, balse aan ku ekayn:

b) shakhsiyaadka iyo ganacsiyada u qalma iyo kuwa aan u qalmin; shuruudaha daruuriga ah, iyo habraaca canshuuraha oo ay u hoggansaamayaan; iyo

t) shuruudaha ay tahay in loo hoggaansamo, wax-ka-beddellada la oggolyahay, iyo sida loogu dabaqayo hab-xisaabeedka caddaanka ah ee wax laga beddelay (modified cash basis) shakhsiyaadkaad ay ka midyihiin shakhsiyaadka Dalka deegaanka ku ah iyo shuraakooyinka.

JADWALKA SADDEXAAD: DAKHLIGA LA CANSHUUR DHAAFAY (EXEMPT AMOUNTS)

(Qodobka 15)

1) Dakhliga Dowladda Federaalka, Dowlad Goboleedyada iyo Dowladaha Hoose, oo aysan kujirin dakhliga ay ka helaan howlaha si dadban ula xiriira shaqadooda Dowladeed.

2) Ilaa iyo inta uu waajibinaayo heshiiska caalami ah oo Soomaaliya looga baahanyahay inay u hoggaansanto:

b) dakhliga hay'adaha iyo ururada caalamiga ah;

t) mushaharka iyo gunooyinka kale ee wakiilada dublamaasiyadda iyo qunsuliyaddaha dawladaha shisheeye ku helaan hawlaha la xiriira shaqooyinkooda; iyo

j) mushaharka iyo gunooyinka saraakiisha iyo shaqaalaha Qaramada Midoobay iyo hay'adaheeda gaarka ah iyo sidoo kale kuwa hay'adaha caalamiga ah ka helaan hawlaha la xiriirta shaqooyinkooda.

JADWALKA AFARAAD: HANTIDA QIIMO-DHACDA (DEPRECIABLE ASSETS)

(Qodobka 20
Qodobka 1-aad)
Ujeedooyinka Jadwalkan

Jadwalkani waxa uu dejinayaa saldhiga Sharci ee ogolaanaya in xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, uu si waadix ah u faah-faahiyo xeerarka canshuureed ee hagaya kala soocida, isu gaynta, iyo qiimo dhaca hantida loo isticmaalo ganacsiga.

Qodobka 2-aad
Xeer-nidaamiyaha Ku-aadan Sida Loola-dhaqmaayo Hantida Qiimo Dhacda

1. Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan iyo dhaqan-gelinaaya ujeedooyinka Jadwalkaan ayaa lasoo saari doona, kaas oo qeexi doona xeerarka la xiriira sida loola dhaqmaayo hantida qiimo dhacda. Xeer-nidaamiyahan ayaa nidaamin doona arrimo muhiim ah oo ay ka mid yihiin:

b) kala soocidda iyo isu geynta hantida qiimo-dhacda (classifying assets);

t) xisaabinta iyo oggolaanshaha qaddarta qiimo dhaca loo ogol yahay (depreciation calculation);

j) go'aaminta qiimaha hoos u dhaca ee ee koox hanti ah oo isku nooca (depreciation basis); iyo

x) sida loola dhaqmaayo gacan-ka-saarista hantida qiimo-dhacda (asset disposal).

JADWALKA SHANAAD: QIIMAYNTA DHEEFAHA (QUANTIFICATION OF BENEFITS)
(Qodobka 32)
Qodobka 1-aad
Ujeedooyinka Jadwalkan

Jadwalkani waxa uu dejinayaa saldhiga Sharci ee ogolaanaya in xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, uu si waadix ah u faah-faahiyo xeerarka canshuureed ee hagaya qiimaynta (quantification) dheefaha la siiyo shaqaalaha ama xubnaha kale ee katirsan hay'ad, oo ay ku jiraan gaadiid, deymo, iyo hoy.

Qodobka 2-aad
Xeer-nidaamiyaha La-xiriira Sida Loo Qiimeeyo Dheefaha

1. Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan iyo dhaqan-gelinaaya ujeedooyinka Jadwalkaan ayaa lasoo saari doona, kaas oo qeexi doona xeerarka la xiriira sida loo qiimaynaayo (quantification) manfacyada/dheefaha

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

la siiyo shaqaalaha ama xubnaha kale ee katirsan hay'ad. Xeer-nidaamiyahan ayaa nidaamin doona arrimo muhiim ah oo ay ka mid yihiin:

b) qiimaynta dheefaha gaadiid ee la siiyo shaqaalaha ama xubnaha kale ee katirsan hay'ad;

t) qiimaynta dheefaha daymeed ee la siiyo shaqaalaha ama xubnaha kale ee katirsan hay'ad;

j) xisaabinta dheefta hoy ee la siiyo shaqaalaha ama xubnaha kale ee katirsan hay'ad; iyo

x) qeexidda shaqaalaha u qalmda dheefta hoy.

JADWALKA LIXAAD: ISWAAFAJINTA WAX KA- BEDELLADA (CONFORMING AMENDMENTS)

(QODOBKA 104)

Qaybta I
Sharciga Canshuurta Toosan (Sharci Lr. 5 ee 5-ta Noofambar 1966)

Sharciga Canshuurta Toosan (Sharci Lr. 5 ee 5-ta Noofambar 1966) dhamaantiis ayaa la nasakhay.

Qaybta II
Wax-ka-bedelka Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27-ka Oktoobar 2019)

Faqradaha Qodobka 3-aad waxaa lagu bedelay kuwaan soo socda:

1) Shuruucda dakhliga waxaa loo maamulayaa si waafaqsan Sharcigan.

2) "Sharci dakhli" waxa loola jeeda:

a) shuruucda soo socda:

i) Sharcigan;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ii) Sharciga Wax-ka-bedelka Sharciga Canshuuraha Furdooyinka (Sharci Lr. 21 ee 5-ta Febraayo 2020);

iii) Sharciga Canshuurta Dakhliga ee 2025;

iv) Sharciga Canshuurta Wadomarista (Sharci Lr. 4 ee 28 December 1965);

v) Sharciga Canshuurta Stambada (Sharci Lr. 6 ee 6 Disembar 1966);

vi) Sharci Canshuurta Gadidda (Sharci Lr. 2 ee 7 Janaayo 1984);

vii) Sharci Canshuurta Canshuurta Wax Soo Saarka (Sharci Lr. 3 ee 23 May 1985);

viii) Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa (Sharci Lr. 10 ee 20-ka Maarso 2023); iyo

ix) Sharci kasta oo kale oo lagu daro liiska, iyadoo loo maraayo xeer-nidaamiye;

b) Hishiis kasta oo caalami ah oo lagu qeexay Qodobka 5-aad; iyo

c) Xeer-nidaamiye kasta oo loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 6-aad ee Sharcigan ama mid kamid ah shuruucda ku xusan xaraf (b) ee faqradaan.

Farqadda 1(a) ee Jadwalka Labaad waxaa loo beddelay sidaan soo socota:

a) marka ay timaado canshuurta dakhliga:

i) warbixinta canshuurta isha lacag-bixinta lagu jaro ee loo soo gudbiyo si waafaqsan Qodobka 93-aad ee Sharciga Canshuurta Dakhliga ee 2025;

ii) warbixinta qiyaasta dakhliga canshuur-galka ah ama warbixinta qiyaasta lacageed ee laga helay hantida gacanta-laga-saaray ee loo soo gudbiyo si waafaqsan Qodobbada 98-aad ama 100-aad ee Sharciga Canshuurta Dakhliga ee 2025; iyo

iii) warbixinta xisaab-canshuureedka dakhliga ee loo soo gudbiyo si

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

waafaqsan Qodobka 101-aad ee Sharciga Canshuurta Dakhliga ee 2025;

Qaybta III
Is-waafajinta Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa (Sharci Lr. 10 ee 20-ka Maarso 2023) iyo Sharciga Canshuuraha Dakhliga

Wasiirka Maaliyadda waxa halkaan awood loogu siiyay inuu soo saaro Xeer-nidaamiye faah-faahsan oo la'isku waafijinaayo Sharciga Cashuuraha Dakhliga iyo Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa (Sharci Lr. 10 ee 20-ka Maarso 2023) kadib marka la ansixiyo Sharciga Cashuuraha Dakhliga.

Qaybta IV
Sharciyada Kale

Qodobada ku jira sharci kasta oo kale oo ka hor imaanaya qodobada Sharcigani waa la baabi'yay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

SHARCI LR.38 **TAARIIKH: 11-DA MAAJO 2025**

SHARCIGA HAY'ADAHA MAALIYADDA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY:	Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY:	Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY:	Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY:	Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0720/B11/25**, ku taariikheysan **11/05/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Hindise Sharciyeedka Hay'adaha Maaliyadda.
MARKUU TIXGELIYAY:	Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Hay'adaha Maaliyadda.

Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 JUL 2025
BY: Faduma Mohamed Dhaqe Saalihi
AAACAD _____ SAXIIX _____

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-051-2025
TAARIIKH : 09-08-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE-SHARCIYEEDKA SHARCIGA HAY'ADAHA MAALIYADDA

MAARSO 11, 2025

Table of Contents

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA *1*

CUTUBKA KOWAAD *2*

QODOBBO GUUD *2*

Qodobka 1aad: 2

Magaca Sharciga 2

Qodobka 2aad: 2

Qeexitaan 2

Qodobka 3aad: 13

Ujeeddooyinka Sharcigan 13

Qodobka 4aad: 13

Baaxadda 13

CUTUBKA LABAAD: *13*

SHATI- SIIN *13*

Qodobka 5aad: 13

Awoodda Shati- siinta 13

Qodobka 6aad: 13

Noocyada Shatiyada 13

Qodobka 7aad: 14

Mamnuucidda Ganacsi Shati La'aan ah 14

Qodobka 8aad: 14

Codsiga Shatiga 14

Qodobka 9aad: 15

Bixinta Shatiga 15

Qodobka 10aad: 17

Muddada Shatiga 17

Qodobka 11aad: 17

Diidmada Codsiga 17

Qodobka 12aad: 17

Soo-bandhigidda Shatiga 17

Qodobka 13aad: 17

Diiwaanka Hay'adaha Maaliyadda 17

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 14aad:..... 18
Awoodda Baarista Ganacsiga Sharci-darrada ah..... 18
Qodobka 15aad:..... 18
Xafiiska Wakiil Banki Shisheeye 18
Qodobka 16aad:..... 19
Bankiyada Islaamiga ah 19
CUTUBKA SADDEXAAD 19
XEERARKA TAXADDARKA IYO XADDIDAADDA KU DABBAQMAYA HAY'ADAHA MAALIYADEED..... 19
Qodobka 17 aad:..... 19
Shaqooyinka loo oggol yahay Bankiga 19
Qodobka 18 aad:..... 21
Raasamaalka ugu yar ee la bixinayo 21
Qodobka 19 aad:..... 21
Raasamaalka Waajibka ah 21
Qodobka 20 aad:..... 21
Hal-beegyada ku filnaanshaha raasamaalka waajibka ah 21
Qodobka 21 aad: 21
Shuruudaha raasamaalka waajibka ah 21
Qodobka 22 aad:..... 21
Shuruudaha hantida naqad-galka ah 21
Qodobka 23 aad:..... 22
Keydka lacagta caddaanka ah ee la dhigayo Bankiga Dhexe 22
Qodobka 24 aad:..... 22
Xaddidaadda milkiyadda saamiga ee hay'ad maaliyadeed..... 22
Qodobka 25 aad:..... 23
Shirkad milkiyad guud leh oo aan hawlgal ahayn..... 23
Qodobka 26 aad:..... 24
Shaacinta Saamileyda..... 24
Qodobka 27 aad:..... 24
Shuruudda iibsiga ama wareejinta saamiga muhiimka ah ee hay'ad maaliyadeed 24
Qodobka 28 aad:..... 25
Sababaha diidmada soo jeedinta kordhinta, iibsiga ama wareejinta saamiyada 25
Qodobka 29 aad:..... 25

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Shaacinta ku xad-gudubka qodobbo la xiriira saami muhiim ah 25
Qodobka 30 aad: 25
Waajibaadka kordhinta ama dhimista saamiga muhiimka ah ee hay'ad maaliyadeed 25
Qodobka 31 aad: *25*
Qodobka 32 aad: 26
Dhaqan-galka wareejinta, iibsiga ama midowga 26
Qodobka 33 aad: 28
Xaddidaadda Bixinta, Deymaha iyo Dammaanadaha 28
Qodobka 34 aad: 28
Xaddidaadaha Bixinta Faa'iidada Saamiyada 28
Qodobka 35 aad: 29
Xadiddaadda wax kala iibsiga ka dhexeeya hay'ad maaliyadeed iyo dhinac xiriir la leh 29
Qodobka 36 aad: 29
Xaddidaadda u Isticmaalka Saamiyada Rahan ahaan 29
Qodobka 37 aad: 30
Xaddidaadda Maal- gashiga 30
Qodobka 38 aad 30
Xaddidaadda Dhaqdhaqaaqyada Ganacsiga iyo Iibsashada Hantida Ma Guurtada Ah 30
Qodobka 39 aad: 31
Xaddidaadaha lacag-dhigashada u dhexaysa bankiyada 31
Qodobka 40 aad: 31
Xeerarka Taxaddarka iyo Hagayaasha 31
Qodobka 41 aad: 31
Hannaanka maareynta khataraha 31
Qodobka 42 aad: 32
Kala soocidda deynta iyo ka soo kabashadeeda 32
CUTUBKA AFARAAD *32*
MAAMULKA *32*
Qodobka 43 aad: 32
Waajibaadka saamilayda 32
Qodobka 44 aad: 33
Guddiga Maamulka Sare 33
Qodobka 45 aad: 33
Masuuliyadaha Guddiga Maamulka Sare 33

Qodobka 46 aad: 34
Xilkasnimada laga rabo xubnaha 34
Qodobka 47 aad: 35
Guddi-hoosaadyada Guddiga Maamulka Sare 35
Qodobka 48 aad: 35
Kulammada Guddiga Maamulka Sare 35
Qodobka 49 aad: 36
War-bixinta waajibka ah ee guddiga maamulka sare iyo fulinta 36
Qodobka 50 aad: 36
Shaacinta bah-wadaagta iyo danaha 36
Qodobka 51 aad: 37
Mas'uuliyadaha xubnaha maamulka fulinta ee hay'ad 37
maaliyadeed 37
Qodobka 52 aad: 38
Mamnuucidda Jagooyinka Badan 38
Qodobka 53 aad: 38
Ceeb-ka-saliimnimada guddiga maamulka sare, maamulka fulinta iyo saamilayda muhiimka 38
Qodobka 54 aad: 39
Dib-u-baarista guddiga maamulka sare, maamulka fulinta iyo saamilayda muhiimka ah 39
Qodobka 55aad: 40
CUTUBKA SHANAAD 40
XISAABAADKA, SHAACINTA WARBIXINNADA MAALIYADEED IYO HANTI- DHAWRKA DIBADDDA 40
Qodobka 57 aad: 40
Waajibaadka ilaalinta xisaabaadka 40
Qodobka 58 aad: 41
Soo gudbinta iyo shaacinta warbixin maaliyadeedka hay'adda maaliyadeed 41
Qodobka 59 aad: 42
Daabacaadda warbixinta sannadlaha ah 42
Qodobka 60 aad: 42
Xisaabinta wadajirta ee hay'ad maaliyadeed iyo shirkado hoos- yimaadda 42
Qodobka 61 aad: 43
Magacaabidda, xil ka qaadista iyo muddada xil- haynta hanti- dhawraha dibadda 43

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 62 aad: 45
Ku-wargelinta beddelidda hanti-dhawrka ee Bankiga Dhexe 45
Qodobka 63 aad: 45
Waajibka kalsooni-siinta hanti-dhawrka 45
Qodobka 64 aad: 45
Xayiraadda ka dhanka ah hanti-dhawrka dibadda 45
Qodobka 65 aad: 46
Hanti-dhawraha Gudaha 46
CUTUBKA LIXAAD *47*
KORMEERKA BANGIGA DHEXE EE HAY'ADAHA MAALIYADDA *47*
Qodobka 66 aad: 47
Awoodaha Kormeerka ee Bankiga Dhexe 47
Qodobka 67 aad: 48
Baaritaanka Rugta 48
Qodobka 68 aad: 48
Kormeer Wadajir ah 48
Qodobka 69 aad: 49
Kormeerka Shirkadaha Hoos-yimaada Shirkadda Milkiyadda Guud leh, Laamaha iyo Xafiisyada Wakiillada ee Hay'adaha Maaliyadda Soomaaliyeed ee laga Hirgeliyey Dal Shisheeye 49
Qodobka 70 aad: 50
Baaritaannada Gudaha Soomaaliya ee Hay'adda Kormeerka ee Waddan Shisheeye 50
Qodobka 71 aad: 50
Warbixinta Baaritaanka 50
Qodobka 72 aad: 51
Warbixinada Bankiga Dhexe 51
Qodobka 73 aad: 52
Daabacaadda Xaaladda Maaliyadeed ee Hay'adda Maaliyadda 52
Qodobka 74 aad: 52
Wada-shaqayn iyo Iskaashi 52
Qodobka 75 aad: 53
Tallaabo Sixitaan oo Degdeg ah 53
Qodobka 76 aad: 54
Awoodda Bankiga Dhexe ee Talasiinta iyo Jihaynta 54

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 77 aad: 56
Awoodaha Bankiga Dhexe ee Joojinta Shaqooyinka Hay'ad Maaliyadeed 56
Qodobka 78 aad: 56
Nidaamka Caymiska Dhigaalka 56
CUTUBKA TODDOBAAD *57*
TALLAABOOYINKA MAAMULKA IYO GANAAXYADA *57*
Qodobka 79 aad: 57
Ganaaxyada ka Dhanka ah Day'ad Maaliyadeed 57
Qodobka 80 aad: 59
Sababaha kala noqoshada shatiga 59
Qodobka 81 aad: *60*
Qodobka 82 aad: 60
Xayiraadaha ka Dhanka ah Xubnaha Guddiga Maamulka Sare, Maamulka Fulinta iyo Shaqaalaha 60
Qodobka 83 aad: 61
Ganaaxyada Lacageed 61
CUTUBKA SIDDEEDAAD *62*
QORSHAYAASHA SOO-KA-BASHADA EE HAY'ADAHA MAALIYADDA *62*
Qodobka 84 aad: 62
Soo-gudbinta qorshaha soo kabashada 62
Qodobka 85 aad: 62
Nuxurka qorshaha soo kabashada 62
Qodobka 86 aad: 63
Sababaha magacaabista maamule gaar ah 63
Qodobka 87 aad: Awoodaha maamulaha gaarka ah 64
Qodobka 88 aad: 66
Maaraynta hay'ad maaliyadeed ee maamule gaar ah 66
Qodobka 89 aad: 66
Waajibaadka maamulaha gaarka ah ee soo kabashada hay'ad maaliyadeed 66
Qodobka 90 aad: 67
Qaababka dib u soo kabashada hay'ad maaliyadeed 67
Qodobka 91 aad: 68
Raadsashada khubaro 68
Qodobka 92 aad: 68

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Mushaharka maamulaha gaarka ah iyo khubarrada 68
Qodobka 93 aad: 68
Dhammaystirka waajibaadka maamulaha gaarka ah 68
Qodobka 94 aad: 69
Iskaashiga hawlaha soo kabashada 69
CUTUBKA SAGAALAAD *69*
XARAASH *69*
Qodobka 95 aad: 69
Xaraash ikhtiyaari ah 69
Qodobka 96 aad: 70
Qorshaha xaraashka ikhtiyaariga ah 70
Qodobka 97 aad: 70
Meelaynta iyo bixinta Qaan-sheegashada 70
Qodobka 98 aad: 71
Dhammaystirka xaraashka ikhtiyaariga ah 71
Qodobka 99 aad: 71
Sababaha xaraashka khasabka ah 71
Qodobka 100 aad: 72
Hay'adda mas'uulka ah xaraashka khasabka ah 72
Qodobka 101 aad: 73
Faafinta go'aanka xaraashka khasabka ah 73
Qodobka 102 aad: Saamaynta magacaabista xaraashaha 73
Qodobka 103 aad: 74
Awoodaha xaraashaha 74
Qodobka 104 aad: 76
Gudbinta Qaan-sheegashooyinka 76
Qodobka 105 aad: 77
Lacag-siinta dhigtayaasha iyo deyn-bixiyayaasha kale 77
Qodobka 106 aad: 77
Luminta u-qalmitaanka hawlaha maamul ee hay'ad maaliyadeed 77
Qodobka 107 aad: 77
Guddiga maamulka sare waa inay bixiyaan deymaha hay'adaha maaliyadeed 77
Qodobka 108 aad: 78
Muddada uu xaraashku soconayo iyo ka warbixinteeda 78

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 109[aad]: 78
Haynta iyo hubinta buugaagta xisaabaadka ee xaraashaha 78
Qodobka 110 [aad]: 78
Fasixidda xaraashaha 78
Qodobka 111 [aad]: 79
Habka xaraashka kala- duwan 79
CUTUBKA TOBANAAD *79*
QODOBBO CIQAABEED *79*
Qodobka 112[aad]: 79
Dembiyada 79
CUTUBKA KOW IYO TOBONAAD *83*
QODOBBO KMA-DAMBEYS AH *83*
Qodobka 113[aad]: 83
Furitaanka, raridda, iyo xiritaanka rugaha ganacsiga 83
Qodobka 114[aad]: 84
Isticmaalka tignoolajiyadda marka ganacsiga la fulinayo 84
Qodobka 115[aad]: 84
Xadididda faa'iidada laga soo ceshanayo Maalgalinta bixintoodu daahday 84
Qodobka 116 [aad]: 85
Faragelinta celceliska faa'idada 85
Qodobka 117 [aad]: 86
Gelitaanka nidaamyada onlaynka ah 86
Qodobka 118[aad]: 86
Xasaanadda 86
Qodoboka 119[aad]: 86
Shaqo-u-xilsaarasho 86
Qodobka 120 [aad]: 87
Isticmaalka wakiillada 87
Qodobka 121 [aad]: 87
Diiwaannada iyo keydka 87
Qodobka 122[aad]: 88
U hoggaansanaanta ka hortagga lacag-dhaqidda iyo la- dagaallanka maal-gelinta argagixisada 88
Qodobka 123 [aad]: 89

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Tartanka furan 89
Qodobka 124 aad: 89
Xaddidaadda isticmaalka ereyga "banki" 89
Qodobka 125 aad: 90
Koontooyinka fadhiidka ah 90
Qodobka 126 aad: 91
Lacagaha laga tagey 91
Qodobka 127 aad: 91
Sir-qarin 91
Qodobka 128 aad: 92
Ilaalinta macaamiisha 92
Qodobka 129 aad: 92
Xayeysiiska marin-habaabinta lacag-dhigashada 92
Qodobka 130 aad: 93
Dokumentiyada elektaroonigga ah, isgaarsiinta iyo macluumaadka 93
Qodobka 131 aad: 94
Habka xallinta cabashooyinka 94
Qodobka 132 aad: 94
Xalliyaha cabashooyinka 94
Qodobka 133 aad: 94
Warbixin-siinta Bankiga Dhexe 94
Qodobka 134 aad: 95
Wadaagga macluumaadka amaahda 95
Qodobka 135 aad: 95
Isku- xiranka 95
Qodobka 136 aad: Hal-abuur 96
Qodobka 137 aad: 96
Fasaxa bankiga 96
Qodobka 138 aad: 97
Ururka hay'adaha maaliyadeed 97
Qodobka 139 aad: 97
Xiriirka Shuruucda kale 97
Qodobka 140 aad: 98
Qoraallada farsamada 98

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 141 aad: 98
Soo saarista wareegtooyinka iyo habraacyada 98
Qodobka 142 aad: 98
Xeer- nidaamiyayaasha 98
Qodobka 143 aad: 99
Qodobada dhaqangalka ku meel-gaarka ah 99
Qodobka 144 aad: 100
Baabi'in 100
Qodobka 145aad: 100
Dhaqan-gal 100

CUTUBKA KOWAAD
QODOBBO GUUD
Qodobka 1aad:
Magaca Sharciga

"Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "Sharciga Hay'adaha Maaliyadda".

Qodobka 2aad:
Qeexitaan

Sharcigan gudihiisa haddii aan si kale loogu qeexin, ereyada soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa macnaha ku hor qoran:

"Xiriirka la leh" waxaa loola jeedaa - marka loo eego hay'ad maaliyadeed - shirkad hoos timaadda hay'ad maaliyadeed ama shirkad ay hay'adda maaliyadeed hoos timaaddo ama shirkad ay si guud u wada hoos yimaaddaan hay'adda maaliyadeed;

"Raasamaal la qoondeeyay" marka loo eego banki ka yagleelan meel ka baxsan Soomaaliya oo laan ama shirkad hoos timaadda ku leh gudaha Soomaaliya, waxaa loola jeedaa raasamaal maaliyadeed oo loo qoondeeyay laantaas, iyo lacagaha kale ee uu sidaas u tixgeliyo Bankiga Dhexe;

"Bah-wadaag"

a) marka loo eego shirkad ama shirkado waxaa loola jeedaa:

i. shirkadda milkiyadda guud leh ama shirkaddeeda hoos timaadda;

ii. shirkadda hoos timaadda shirkadda milkiyadda guud leh;

iii. shirkadda leh milkiyadda guud shirkadda hoos timaadda;

iv. shirkadda milkiyadda guud leh ee aan u hawlgelayn sida shirkad hoos timaadda;

v. shirkad hoos timaadda shirkadda aan hawlgalka ahayn ee milkiyadda leh.

vi. Shirkad bah-wadaag la ah shirkadda milkiiyaddeeda leh oo aan hawlgal ahayn

vii. Shakhsi kasta oo si keligiis ah ama si wadaag ah gacanta ugu haya shirkad ama midowga shirkado ama bah- wadaagtooda marka loo eego shakhsi ahaan, waxaa loola jeedaa -1

viii. xubin kasta oo qoyskiisa ah;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQYALKA SAARE

ix. shirkad kasta ama shirkado kasta oo kale oo uu u maamulo si toos ah ama si dadban, isagoo keligii ah ama isaga iyo shurakadiisa; iyo

b) Qofkana waxa loo aqoonsanayaa inuu yahay xubin qoyska ah haddii uu yahay waalid, lammaane, walaal, ilmo, adeer, abti, eeddo, habaryar, ilmo waalid loo yahay (walaalku ama walaashu dhashay), aayo, adeer (hooyada qaba), ilmo waalid loo yahay (waalidkiis la qabo ama wax qaba), ilmaha uu korsaday/kafaalo-qaaday (sifo sharci ah lagu kafaalo-qaaday balse uusan jirin xiriir dhiig oo kala dhexeeya) qofka ay khusayso iyo haddii uu jiro ilmo la kafaalo-qaaday, labada waalid ee kafaalo-qaaday.

"Banki" waxaa loola jeedaa shirkad haysata shati ay ku qaban karto shaqo banki balse uusan ku jirin Bankiga Dhexe;

"Ganacsiga bankiyada" waxaa loola jeedaa ganacsiga:

- ka guddooma xubnaha dadweynaha lacag dhigaal ah oo ay dib ula bixi karaan marka ay rabaan ama dhammaadka muddo go'an ama ogeysiis ka dib;
- ka guddooma xubnaha dadweynaha lacag dhigaal ah iyo kala-bixid koontada socota (Current Account), aqbalaadda jeegagga; iyo furidda koontada maalgalinta (Investment Account)
- Ka shaqaysiiya lacagta lagu hayo bankiga ama koontada Socota, ama lacag kasta oo kale, iyadoo lagu bixinayo maalgalin ama qaab kasta oo kale oo aan Shareecada kahor-imanaynin, iyadoo masuuliyadda khatartuna ay saaran tahay sida hishiiska labada-dhinac uu qeexayo;

"Kooxda Bankiyada" waxaa loola jeedaa hay'ad maaliyadeed oo shati leh iyo shirkadaha hoos yimaadda, shirkadaha milkiyadda guud leh ee aan hawlgalka ahayn iyo shirkadaha hoos yimaadda shirkadaheeda milkiyadda guud leh ee aan hawlgalka ahayn;

"Buug" waxaa loola jeedaa diiwaan kasta, dokumenti ama diiwaan kale oo macluumaad iyo diiwaanka xisaabaadka, si kastaba ha loo ururiyee, oo la diiwaan-geliyay ama la keydiyay, ha ahaato qoraal, foom daabacan, muuqaal, habka elektaroonigga ah ama si kale;

" Hantiilaha Haa'idada" waxaa loola jeedaa shakhsiga -

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

- maamula adeeg-bixiyaha maaliyadeed ama shakhsiyad sharci ama isfahan; ama
- leh ama maamula macmiilka ama qofka wax kala iibsiga loo samaynayo iyo marka laba qof ama in ka badan ay wadaagaan lahaanshaha saamiyo isku shirkad ah, qof kastana uu noqdaa milkiile faa'iido ku leh tirada wadarta guud ee saamiyada shirkadda;

"Guddiga Maamulka Sare" waxaa loola jeedaa guddiga maamulka sare ee hay'ad maaliyadeed;

"Laan" waxaa loola jeedaa xarun kasta oo joogto ah oo aan ahayn xafiiskeeda guud, isla markaasna ay hay'adda maaliyadeed ku qabsato hawlaheeda gaancsiga ee gudaha ama dibadda Soomaaliya ;

"Banki aan lahayn faracyo" waxaa loola jeedaa adeegyadaa bankiga ama adeegyada hay'adaha maaliyadeed ee ay hay'ad maaliyadeed bixiso iyadoo aysan jirin dhisme xarun-laameed oo muuq ahaan u jira;

"Xarun-maaliyadeed Bulsho" waxaa loola jeedaa adeegyada xarun loo sameeyay in qaaraan rukumasho ah lagaga ururiyo xubnaha, ama sanduuq lacag horumaris ah laga siiyo xubnaha;

"Ganacsiga Xarun-maaliyadeed Bulsho" waxaa loola jeedaa:
- ganacsiga xubnaha laga ururiyo lacag rukumasho, ama sanduuqa lacago horumaris ah laga siiyo xubnaha; iyo
- arrimaha kale ee lagu qeexo Xeer-nidaamiyayaasha;

"Raasamaal" waxaa loola jeedaa raasamaal saamiyeed la bixiyay, ama haddii ay tahay hay'ad maaliyadeed oo lagu yagleelay meel ka baxsan Soomaaliya, raasamaalkeeda loo qoondeeyay;

"Bankiga Dhexe" waxaa loola jeedaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo lagu aasaasay Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya;

"Shirkad" waxaa loola jeedaa -

- shirkad kasta oo lagu qeexay sharci qoran oo la xiriira shirkadaha oo wakhtigan dhaqan-gal ah, iyo shirkad kasta oo lagu yagleelay

  sama ku diiwaan-gashan sharci qoran oo dhaqan-gal ka ah Soomaaliya waxaana ka mid ah; shirkad kasta, ha ahaato mid lagu yagleelay, lagu sameeyay ama lagu aasaasay meel ka baxsan Soomaaliya; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

- hay'ad kasta oo lagu sifeeyay hay'ad maaliyadeed oo hoos timaadda sharcigan;

"Macmiil" waxaa loola jeedaa –

- cid kasta ama qof kasta oo isticmaala, isticmaalay ama laga yaabo inuu ku fikiro isticmaalka si toos ah ama si dadban mid ka mid ah alaabta ama adeegyada ay bixiso hay'ad maaliyadeed; iyo
- macmiilka hay'ad maaliyadeed;

"Xakameyn" waxaa loola jeedaa –

(a) Awood u lahaanshaha inuu, si toos ah ama si dadban, u saameeyo dhismaha xubnaha guddiga maamulka sare ee shirkad ama shirkado;
(b) haysashada, si toos ah ama si dadban, shakhsi ahaan ama iyadoo loo marayo shirkad milkiyad guud leh ama shirkado hoos yimaadda, ama si kaleba, wadarta guud ee boqolkiiba labaatan (%20) ama ka badan ee awoodda cod-bixinta ee shirkad ama shirkado, keligiis ha ahaado ama ha weheliyaan shuraako ama la-hawlgalayaasha kale ee shirkadda ama shirkadaha; ama
(c) iyadoo loo eegayo go'aaminta Bankiga Dhexe, marka qofku uu awood u leeyahay inuu saamayn weyn ku yeesho maamulka ama siyaasadda shirkad ama shirkado ku salaysan heshiis ama hab kasta oo kale, iyadoo aan loo eegin qaddarka lahaanshaha rasmiga ah, ama xuquuqda cod-bixinta;

"Raasamaalka Asaasiga ah" waxaa loola jeedaa saamileyda joogtada ah ee la soo saaray iyo saamiyada guud ee si buuxda loo bixiyay, ama xaaladda bankiyada lagu yagleelay dhul shisheeye, raasamaalka loo qoondeeyey, oo lagu daray dhammaan keydadka la shaaciyay, lagana jaray hantida aan la taaban karin;

"Amaah" macnaheedu waa ballan kasta oo lagu bixinayo qaddar lacag ah oo aan dulsaar lahayn ama kharashyada kale ee kadhalanaya qaddarkaas, sida dammaanad kasta oo la bixiyo, ama xuquuq kale oo lagu bixinayo qaddar lacag ah oon dulsaar lahayn;

"Maalgalin" macnaheedu waa bixinta lacag horudhac ah, ama heshiis qaab-kasta u dhexmara macaamilka iyo haya'ada maaliyadeed oo lagu sameeyay si waafaqsan Shareecada Islaamka, kaas oo ka mid ah heshiis iib ama iibsasho iyo bixinta dammaanadeeda, heshiis shuraako, ama heshiis kale oo u maalgelin

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ah;

"Hay'adda Tixraaca Amaahda" waxaa loola jeedaa hay'ad si gaar ah ugu xilsaaran ururinta, isku-dhafka, isu-geynta iyo iibinta xogta halbeegga amaah-celinta ee shakhsiyaadka iyo shirkadaha;

"Ganacsiga Hay'adda Tixraaca Amaahda" waxaa loola jeedaa –

a) Ganacsiga ururinta, isku-xirka, isu-geynta iyo faafinta xogta halbeegga amaah-celinta ee shakhsiyaadka iyo shirkadaha; iyo
b) Hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

"Koontada Socota" waxa loola jeedaa koonto uu bankigu ku hayo magaca, ama magaca uu u qoondeeyay macmiilka bankiga, kaas oo lacag lagu bixiyo ama faa'iido ugu jirto macmiilkaas, iyo jeegagga, kambiyaalaha, xawilaadaha iyo dhaqdhaqaaqyada kale ee bankiyeed ee lagu sameeyo amarka macmiilka:

"Lacag-dhigasho" macnaheedu waa lacag la aqbalo ama la bixiyo si waafaqsan Shareecada

1. oo ku saleysan shuruudo aan dulsaar lahayn oo lagu soo celin doono codsiga macmilka ama waqti dambe ama xaalado lagu heshiiyay; ama
2. lacag-dhigasho maalgalin, macmilka dhigtay hay'ada maaliyadeed ayadoo ujeedadu tahay in laqaybsado faa'ido iyo khasaaro; iyo
3. aan la xiriirin bixinta hantida ama adeegyada hoos yimaadda qandaraaska maalgalinta iibka, kiraynta, ama amniga dhigaalka fulinta qandaraaska maalgalinta; iyo tixraac kasta oo ku jira sharcigan oo la xiriira qaadashada ama samaynta lacag-dhigasho waa in loo macneeyaa si tan waafaqsan;

"Ganacsiga Maal-gelinta Horumarka" waxaa loola jeedaa –

a) Ganacsiga bixiya raasamaal halis badan geli kara oo la xiriira mashaariicda horumarinta dhaqaale ee aan macaash-doonka ahayn;

iyo

b) Hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

"Madaxa" waxaa loola jeedaa qof kasta oo haya jagada agaasinka shirkadda magac kasta ha loogu yeero e, waxaana ka mid ah qofka guddiga maamulka sare ay siiyeen awoodda ah inuu ku-sime noqdo haddii agaasimuhu awoodi waayo tegitaanka kulammada;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

"Keydadka la shaaciyey" waxaa loola jeedaa dhammaan keydka lagu abuuray ama lagu kordhiyay saami-kororka, faa'idada la hayo (ka dib marka laga jaro dhammaan kharashyada, lacagta dhitada ah ee loo dhigay si loogu daboolo karashaadka ama dhacdooyinka maaliyadeed ee mustaqbalka dhici kara, canshuuraha iyo faa'iida- qeybsiga sannadlaha ah) iyo keydka guud, haddii keydka la shaaciyay uu yahay mid joogto ah oo saafi ah sidaas awgeedna awood u leh inuu daboolo khasaaraha;

"Urur" waxaa loola jeedaa shirkad, shirkado, hay'ad kheyri ah, iskaashato, xarun- maaliyadeed bulsho, sanduuq, urur ama qof kasta oo kale;

"Khatarta maaliyadeed" waxaa ku jira adeega maalgalinta, deymaha, hormarrinnada, lacag la-bixidda xad-dhaafka ah, haysashada waraaqaha iyo sidoo kale ballan-qaadyada xaanshida xisaabxirka ka baxsan sida aqbalaadaha, dammaanadaha, caymiska, saxiixyada, iibinta saamiyada, warqadda ballan-qaadka bixinta, damiin-ka- noqoshada heshiiska, iyo deymaha kale ee mustaqbalka iman kara;

"Hay'ad maaliyadeed" waxaa loola jeedaa shirkad shati u haysata inay ka waddo ama ka fuliso ganacsiga hay'adaha maaliyadeed gudaha dalka Soomaaliya, waxaana ka mid ah banki, bankiga maalgelimaha yar-yar, shirkadda maalgelinta dhismayaasha, xafiiska sarifka lacagaha qalaad, xawaaladaha; hay'adda tixraaca amaahda; xarun maaliyadeed-bulsho, iskaashatooyinka kaydinta iyo amaahda (SACCO), bankiga kaydka xafiiska boostada, adeeg-bixiyaha kiraynta raasamaalka, adeeg-bixiyaha hafto-ku-gadashada, hay'ad maalgelin oo horumarin ama hay'ad kasta oo Xeer-nidaamiyayaasha Bankiga Dhexe ku qeexaan inay tahay hay'ad maaliyadeed si waafaqsan Shareecada Islaamka;

"Ganacsiga Hay'adaha Maaliyadeed" waxaa loola jeedaa –

a. ganacsiga bankiyada;
b. ganacsiga hay'adaha maal-gelineed ee yar-yar;
c. ganacsiga xafiiska sarifka lacagaha qalaad;
d. ganacsiga maal-gelinta dhismayaasha;
e. ganacsiga lacag dirista;
f. ganacsiga xafiiska tixraaca amaahda;
g. ganacsiga xarun-maaaliyadeed bulsho;
h. ganacsiga iskaashatada keydinta iyo amaahda (SACCO);
i. ganacsiga kireynta raasamaalka;

j. ganacsiga haftada;
k. ganacsiga maal-gelinta horumarka; iyo
l. ganacsiyada kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer- nidaamiyayaal;

" Ganacsiga Kireynta Raasamaalka" waxaa loola jeedaa –

a) ganacsiga maal-gelinta hanti la kireeyay oo uu kireystuhu ku siiyo kiro milkiilaha ama cidda maal-gelinaysa, marka ay dhammaato amminta kirada, kiraystuhu wuxuu leeyahay ikhtiyaar uu ku yeelan karo hantida; iyo
b) hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

"Warbixinnada Maaliyadeed" waxaa loola jeedaa xaashida xisaab-xirka, xaashida dakhliga, xaashida susunta caddaanka iyo lifaaqyada bayaannada xisaabaadka;

"Qof Ceeb-ka-saliim ah" waxa loola jeedaa qof fiyow sida lagu go'aamiyey shuruudaha ku xusan Xeer-nidaamiyayaasha Bankiga Dhexe;

"Banki Shisheeye" waxaa loola jeedaa banki lagu yagleelay meel ka baxsan Soomaaliya oo si sharci ah shati loogu siisay inuu ka fuliyo ganacsi banki gudaha dalka iyadoo ay kor-joogteynayso hay'adda u xilsaaran kormeerka bankiyada;

"Xafiiska Sarrifka Lacagaha Qalaad" waxaa loola jeedaa shirkad uu Bankiga Dhexe siiyay shati ay ku qaban karto ganacsiga sarrifka lacagaha qalaad;

"Ganacsiga Sarrifka Lacagaha Qalaad" waxaa loola jeedaa ganacsiga

a. iibsashada iyo iibinta lacagaha qalaad,
b. adeegyada xawilaadda; iyo
c. hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe jaangoyn karo;

"Koox" waxaa loola jeedaa shirkadaha milkiyadda guud leh ee aan hawlgalka ahayn, shirkadaha hoos yimaadda iyo dhammaan shirkadaha la xiriira shirkadda milkiyadda leh iyo shirkadaha hoos yimaadda;

"Ganacsiga Haftada" waxaa loola jeedaa –

a) Ganacsiga uu gatuhu siiyo lacag horumaris ah milkiilaha hantida oo uu la wareego milkiyadda iyo isticmaalka hantida, ka dibna uu haraaga qiimaha iyo faa'idada qayb-qayb u bixiyo, marka uu si buuxda u bixiyo qiimahana uu la wareego gebi ahaan milkiyadda hantida.
b) maal-gelinta gadashada kirada; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

c) hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

"Hay'ad Kormeer oo maxalli ah" waxaa loola jeedaa hay'adda kormeerka ee dalka hooyo, halkaas oo uu ku yaal xafiiska xarunta dhexe ee shirkadda milkiyadda leh;

"Shakhsi" waxaa loola jeedaa qof caadi ah;

"Daneeye Gudeed" waxaa loola jeedaa agaasime ama qof leh awood fulineed ama saamile hay'ad maaliyadeed oo uu ku jiro qof kasta oo xiriir la leh iyo dan kasta oo khusaysa qofkaas;

" Musallafid" waxaa loola jeedaa xaalad uu adeeg-bixiyaha maaliyadeed –
a) awoodi waayo inuu bixiyo deymaha marka ammintii bixinta la gaaro;
b) leeyahay hanti aan ku filnayn inay daboolaan deymaha; ama
c) leeyahay raasamaal waajib ah oo ka hooseeya inta ugu yar ee loo qoondeeyay;

"Banki Islaami ah" waxaa loola jeedaa ganacsi banki oo u shaqeeya si waafaqsan Shareecada

"Khatar Maaliyadeed Weyn" waxaa loola jeedaa deyn ay qof ama koox dad ah ku leedahay hay'ad maaliyadeed, taas oo u bandhigan halis daran, si waafaqsan qeexidda Bankiga Dhexe ee Xeer- nidaamiyayaasha;

"Shati" waxaa loola jeedaa shati uu Bankiga Dhexe ku bixiyay si waafaqsan sharcigan;

"Maal-gashiga Aqlabiyadda" waxaa loola jeedaa milkiyadda ay hay'ad maaliyadeed ku leedahay shirkad ugu yaraan boqolkiiba toban (%10) raasamaalka hay'adda ama saami ka badan boqolkiiba toban
(%10) raasamaalka waajibka ah ee hay'adda maaliyadeed;

"Xubnaha" Dadweynaha" waxaa loola jeedaa shakhsiyaadka, shuraakada, hay'adaha, maamulayaasha hay'adaha kheyriga ah, hawlgabka, iyo lacagaha hawlgabka ama lacagaha kale ee la midka ah;

"Maamule" waxaa loola jeedaa maamule sare oo hay'ad maaliyadeed, kaasoo awood u leh inuu xakameeyo, jiheeyo ama saameyn ku yeesho, go'aan-qaatista arrin la xiriirta ganacsiga hay'adaha maaliyadeed;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

"Bankiga Maal-gelimaha Yar-yar" waxaa loola jeedaa shirkad shati u haysata inay sii waddo, qabato, gasho ama ka baayac-mushtarto ganacsiga maal-gelimaha yar-yar ee Soomaaliya.

"Ganacsiga hay'adaha maalgelimaha yar-yar" macneheedu waa ganacsiga aan aqbalayn lacag dhigashada iyo amaah aan dulsaar lahayn iyo maalgalinta muddada gaaban shirkadaha yar-yar iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo, badanaana waxaa astaan u ah isticmaalka beddelka curaarta, sida dammaanad kooxeedyada;

"Wasiir" waxaa loola jeedaa Wasiirka Maaliyadda;

"Ganacsiga Xawilaadda Lacagta" waxaa loola jeedaa-

a) ganacsiga qabashada lacag caddaan ah, jeegag, habab kale oo lacageed ama wax kale oo qiimo leh iyo siinta lacag caddaan ah ama foom kale oo u dhigma macmiilka loo diraha ah, iyadoo la adeegsanayo isgaarsiin, farriin, wareejin loona marayo shabakad hufan; iyo
b) hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

"Lacag-dhaqid" waxaa loola jeedaa beddelka ama wareejinta hanti kasta oo ay ku jirto lacag, iyadoo la ogyahay inay ka timid fal-dembiyeed, ujeeddaduna tahay qarinta ama daboolidda asalkeeda sharci- darrada ah ama ku caawinta qof kasta oo ku lug leh fal- dembiyeedka inuu ka baxsado cawaaqibka sharci ee falalkeeda; ama la wareegidda, haysashada ama isticmaalka hantida iyadoo la ogyahay wakhtiga la helayo inay ka timid fal- dembiyeed;

"ganacsiga maalgelinta dhismayaasha"

a) Macnaheedu waa ganacsiga maalgelinta dhismaha iyo iibka guryaha deegaanka ah ama kuwa ganacsiga; iyo
b) waxaa ka mid ah hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

"Shirkadda Milkiyadda Guud leh ee aan Hawlgalka ahayn" waxaa loola jeedaa shirkad, aan ahayn hay'adda maaliyadeed, taasoo oggolaatay inay maamusho hay'ad maaliyadeed, oo hawlaheeda ay ku kooban yihiin maal-gelinta shirkadaha hoos yimaadda, haynta hantida ay isticmaalaan xubnaha kooxdu; ururinta lacagaha lagu maal-geliyo ama lagu taageero shirkadaha hoos yimaadda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ururinta lacag ay ku qabtaan hawlahooda xaddidan, maal-gelinta iyadoo kooxda metalaysa qabashada waxqabadyada looga baahan yahay hawlahooda xaddidan, iyo bixinta adeegyada maamulka, maareynta khatarta iyo maaliyadda si ay u taageeraan taabbagalnimada shaqada kooxda;

"Maamulka Fulinta" marka loo eego hay'ad maaliyadeed, waxaa loola jeedaa agaasime ama qof kale, magaca uu doono ha lahaado, kaasoo fuliya ama awood u leh inuu fuliyo hawlo la xiriira jiheynta guud ee hay'addaas maaliyadeed ama ka qeyb-qaata maamulkeeda guud;

"Qof" waxaa loola jeedaa shaqsi kasta, wakiil gaar ah, shirkad, shuraako, hay'ad kheyri, sanduuq, mu'asaso ama ganacsi meel kasta oo uu ku yaal ama lagu sameeyay;

"Rug Ganacsi" waxaa loola jeedaa dhisme, oo ay ku jiraan xafiiska guud, laan, laan-hoosaad, unug suuq-geyneed, xarunta iibka, unug guurguura, dhisme wakiil, dhismaha qolo saddexaad ama dhismayaal kale ee uu Bankiga Dhexe aqoonsado, oo ah hay'ad maaliyadeed oo baayac- mushtar ku hawlan, dadweynahana u furan;

"Hay'ad Dadweyne" waxaa loola jeedaa Dawlad, Degmo ama Hay'ad Dawladeed oo uu go'aamiyay Wasiirku inay tahay hay'ad dadweyne iyadoo la tixraacayo sharcigan;

"Raasamaal Waajib ah", iyo qaybaheeda, sida uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer- nidaamiyayaal;

j) in ay horumariyaan barnaamijka u-hogaansanaanta AML/CFT ee ku habboon oo ay magacaabaan sarkaalka u-hogaansanaanta si loo hubiyo u- hogaansanaanta Shuruucda iyo Xeerarka AML/CFT;

x) in la siiyo tababarro joogto ah shaqaalaha iyo wakiillada si loo hubiyo in lagu war-geliyo isbeddelada cusub iyo lacagaha la dhaqay iyo farsamooyinka maal- gelinta argagixisada, hababka iyo isbeddelada;

kh) uga warbixiyaan Xarunta Warbixinta Maaliyadda macaamilada laga shakiyo ayadoo la raacayo tilmaamaha ay bixiso Xarunta Warbixinta Maaliyadeed; iyo

d) u soo gudbinta Bankiga warbixinnada loo baahan yahay sida uu Bankigu qeexi doono.

3. Bankigu waa in uu soo saaraa xeer-nidaamiye si Sharciga Ka-hortagga Lacag- dhaqidda iyo Ladagaalanka Maal-gelinta Argagaxisada ee caymiska loogu hirgeliyo arrimaha caymiska.

Qodobka 151aad
Xad-Gudubyada aan Lagu Xusin Sharcigan

1. Haddii Shirkadda Caymiska ama Caymiska-ku-shaqeeyuhu uu ku xad-gudbo qodobbada sharcigan, wakhtiga uu dhaqan-galka yahay, Xeer-hoosaadka, hab- raacyada la ansixiyay iyo arrimaha wareegtooyinka ama Sharciyada kale ee la dhaqan galiyay ee aan sheegin wax ciqaab ah xadgudubka noocaas ah, Bankigu wuxuu qaadi karaa mid ama in ka badan oo ka mid ah tallaabooyinka soo socda:
   a) talo qoraal ah si loo horumariyo Waxqabadka;
   b) digniin qoraal ah;
   c) laalista shatiga ilaa 45 maalmood; ama
   d) laallidda shatiga iyo u-gudbinta dacwadda garsoorka si baaritaan dheeri ah loogu sameeyo.
2. Bankigu waa inuu tixgaliyaa nooca, culayska iyo tirada xad-gudubyada uu sameeyo Caymiyuhu ama Hawl-wadeenka Caymisku.
3. Farqada (1) ee qodobkan, shirkadda caymiska ama Hawl-wadeenka caymiska

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

wuxuu xaq u leeyahay in ay ka andacoon karaan go'aanka bankigu qaatay.

CUTUBKA SAGAAL IYO TOBAN
QODOBBO KAMA DAMBAYS AH

Qodobka 152aad
Xaddidaadda Shatiga

Shatiyada lagu bixiyo sharcigan waa inay ahaadaan mid aan la wareejin karin oo aan lagu meeleyn karin dad aan ahayn kuwa shatiga haysta.

Qodobka 153aad
Heshiiska Maal-gelinta

1. Caymiyuhu wuxuu la geli karaa heshiis maaliyadeed oo waafaqsan shareecada hay'adaha kale ee maaliyadeed.
2. Hay'adaha maaliyadeed ee ku xusan faqradda (1) ee qodobkan uma qalmaan inay shatiyo wakiilnimo iyo dillaal ka helaan Bankiga.

Qodobka 154aad
Isku-dhaca Danaha

Agaasimaha Guud, Agaasimeyaasha kale, Ku-xigeennada, Hanti-dhawrka iyo Mas'uuliyiinta Bankiga ma sameysan karaan Shirkad Caymis, balse waxay ka faa'iidaysan karaan gelintaanka adeegga.

Qodobka 155aad
Asaaska Ururada iyo Hay'adaha kale

Dadka danaynaya waxay asaasi karaan dalladda Shirkadaha Caymiska iyo Machadyada Tababarka Caymiska, waase haddii aanay sinaba u wiiqayn bixinta Caymiska.

Qodobka 156aad
Awoodaha Bankiga ee Soo-saarista Xeer-nidaamiyayaal

1. Si loo dhaqan-geliyo sharcigan, Bankigu wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiyeyaaal, wareegtooyin, xeer hoosaadyo iyo habraacyo.
2. Bankigu waa inuu daabacaa dhammaan dokumentiyada lagu soo saaray farqada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(1) ee qodobkan oo uu dib-u-eegis iyo cusboonaysiin ku samaynayo marka loo baahdo.

3. Bankigu, isagoo ogaysiis ku soo saarayo faafinta rasmiga ah, wuxuu ka dhaafi karaa qof ama koox dad ah dhammaan ama mid ka mid ah qodobbada sharcigan muddadaas oo ay ku xiran yihiin shuruudaha uu bankigu cayimi karo.
4. Bankigu waa kala tashan karaa daneeyayaasha ceymiska hadii uu u arko muhiim.

Qodobka 157aad
Baabi'in

Sharcigaan wuxuu baabi'inayaa dhammaan sharciyadaan hoos ku xusan:

1. Sharci Lr.69 ee 30 Sept 1972, oo ah sharcigii lagu asaasay hay'addii Caymiska Qaranka, oo dowladdu lahayd (sharcigaasi 'private sector' uma oggolayn inay bixiyaan adeegga caymiska).
2. Sharci Lr 20 ee 15ka January 1973, oo ah shircigii waajibka (compulsory) looga dhigay caymiska Baabuurta ee loo yaqaan (third party motor insurance).
3. Sharci Lr. 8 ee 26ka January 1989 waxaa la fasaxay in adeeg caymis oo gaar loo leeyahay (private sector insurance service) la samaysan karo.

Qodobka 158aad
Dhaqan-galka Sharcigan

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka JFS, Madaxweynuhuna saxiixo isla markaasna lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

SHARCI LR.40 **TAARIIKH: 11-DA MAAJO 2025**

SHARCIGA WAX-KA-BEDDELKA SHARCIGA KA-HORTAGIDDA LACAG DHAQIDDA IYO MAALGELINTA ARGAGIXISADA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0722/B11/25**, ku taariikheysan **11/05/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Hindise Sharciyeedka Sharciga Wax-ka-beddelka Sharciga Ka-hortagidda Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Wax-ka-beddelka Sharciga Ka-hortagidda Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
21 JUL 2025
SAACAD ____ SAXNX ____

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-049-2025
TAARIIKH : 09-07-2025
SAXIIX :

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA MAALIYADDA

HINDISE-SHARCIYEEDKA WAX-KA-BEDELKA SHARCIGA KA-HORTAGA LACAGDHAQIDDA IYO MAALGELINTA ARGAGIXISADA

Maarso 11, 2025

Table of Contents

QAYBTA 1-AAD *8*

QEEXITAANNADA IYO UJEEDADA *8*

Qodobka 1-aad 8

Qeexitaannada 8

Qodobka 1A 20

Ujeedada iyo Magaca 20

QAYBTA 2-AAD *20*

DAMBIYADA LACAG DHAQIDDA IYO MAALGELINTA ARGAGIXISADA *20*

Qodobka 2-aad 20

Dambiyada Lacag Dhaqidda 20

Qodobka 2A 21

Ciqaabaha lagu soo rogi karo shakhsiyaadka dabiiciga ah ee gala fal-dambiyeedyada lacag-dhaqidda 21

Qodobka 2B 22

Ciqaabaha lagu soo rogi karo shakhsiyaadka qaanuuniga ah ee gala fal-dambiyeedyada lacag-dhaqidda 22

Qodobka 3-aad 22

Dembiyada Maalgelinta Argagixiso 22

Qodobka 3A 24

Ciqaabaha lagu soo rogi karo shakhsiyaadka dabiiciga ah ee gala fal-dambiyeedyada maalgelinta argagixiso 24

Qodobka 3B 25

Ciqaabaha lagu soo rogi karo shakhsiyaadka qaanuuniga ah ee gala fal-dambiyeedyada maalgelinta argagixiso 25

Qodobka 3C 25

La wareegista khasabka ah ee lacagaha iyo hantida markii dembiyada lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixiso la galo 25

QAYBTA 3AAD *26*

KA HORTAGGA LACAG-DHAQIDDA IYO MAALGELINTAARGAGIXISADA *26*

Qodobka 4-aad 26

Hay'adaha iyo xirfadaha lagu dabaqaayo Sharcigan 26

Qodobka 5-aad 28

Xaqiijinta xogta aqoonsiga ee macmiilka (CDD) 28

Qodobka 6-aad 32

Mamnuucista koontoyinka banki ee mulkiiluhu qarsoonyahay 32

Qodobka 7-aad 32

Xiriirada la mamnuucay 32

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 8-aad 32
Fulinta xaqiijinta xoogan ee xogta aqoonsiga ee macaamiilka (EDD)..... 32
Qodobka 9-aad 32
Waajibaadka ku aadan fulinta baarista khataraha la xiriira lacag dhaqidda iyomaalgelinta argagixisada 32
Qodobka 9A 33
Waajibaadka ku aadan maareynta khataraha lacag dhaqidda iyo maalgelintaargagixisada 33
Qodobka 10-aad 34
Shaqsiyaadka haya xil Dawladeed ama Siyaasadeed (PEPs) 34
Qodobka 11-aad 35
La socodka khaas ah ee macaamilaadka 35
Qodobka 12-aad 36
Waajibaadka xaqiijinta xogta ku aadan bankiga lala yeelanaayo xiriirkaiswakiilashada bankiyada (correspondent banking) 36
Qodobka 13-aad 37
Kaydinta Diiwaanada 37
Qodobka 14-aad 38
Waajibaadka kasoo warbixinta 38
Qodobka 14A 39
Dembiyada kala qaybinta macaalimaadka maaliyadeed (Structuring offenses) 39
Qodobka 14B 39
Ciqaabaha ka dhanka ah dembiyada kala qaybinta macaalimaadka maaliyadeed(Structuring offenses) 39
Qodobka 14C 40
Hay'addaha warbixinnada ee aan lagu dabaqayn waajibaadka kasoo warbixinta 40
Qodobka 15-aad 40
Sir dhawrista iyo marka la oggolyahay in si niyad sami ku dheehantahay loo dirowarbixin ku aadan arrin shaki dhalisay 40
Qodobka 16-aad 41
U hogaansanaan la'aanta waajibaadka sir dhowrista ee Sharcigaan ogolyahay 41
Qodobka 17-aad 41
Barnaamijyada Ka-hortagga Lacag-dhaqidda iyo La-dagaalanka MaalgelintaArgagixisada (AML/CFT programs) 41
Qodobka 18-aad 44
Ka warbixinta lacagaha ka gudbaya goobaha furdooyinka ah 44
Qodobka 19-aad 49
Xawilaad iyo lacaga dirista 49
Qodobka 19A 52
Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman ee la xiriirta Kororka Hubka WaxGumaada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(Proliferation) 52
QAYBTA 4-AAD *54*
XARUNTA WARBIXINADA MAALIYADDA *54*
Qodobka 20 -aad 54
Aasaasidda Xarunta Warbixinada Maaliyadda 54
Qodobka 20A 55
Agaasimayaasha iyo shaqaalaha 55
Qodobka 21-aad 56
Mas'uuliyadaha, awoodaha, iyo shaqooyinka 56
Qodobka 21A 58
Awoodaha gaarka ah ee Xarunta 58
Qodobka 22-aad 60
Sir dhawrista iyo halbeedgyada xirfad wanaagga 60
QAYBTA 4 (A)KORMEERKA *61*
Qodobka 22A 61
Mamnuucista bankiyada aan lahayn meel cayiman oo loogu soo hagaago (shellbanks) 61
Qodobka 23-aad 61
Kormeerka ku aadan sida hay'addaha warbixinnadu (reporting entities) ugu hoggaansanyihiin Sharcigan 61
Qodobka 23A 62
Mas'uuliyaddaha Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka 62
Qodobka 23B 63
Awoodaha Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka 63
QAYBTA 4 (B) *65*
HUFNAANTA LOOGA BAAHANYAHAY SHAKHSIYAADKA QAANUUNIGA AH IYO XIRIIRADA SHARCIGA KU DHISAN *65*
Qodobka 23C 65
Hufnaanta looga baahanyahay shakhsiyaadka qaanuuniga ah 65
Qodobka 23D 70
Hufnaanta looga baahanyahay xiriirada sharciga kudhisan (legal arrangements) 70
Qodobka 23E 72
Iskaashiga caalamiga ah ee ku saabsan shakhsiyaadka qaanuuniga ah iyoxiriirada sharciga kudhisan (legal arrangements) 72
Qodobka 23F 73
Waajibaadyada saaran shakhsiyaadka qaanuuniga ah, ammanooyinka iyoxiriirada sharciga kudhisan (legal arrangements) ee ka u tartamaaya iibkaDowladda 73
QAYBTA 5-AAD *74*
GUDDIGA QARAN EE KA-HORTAGGA LACAG DHAQIDDA IYO LA-DAGAALANKA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

MAALGELINTA ARGAGIXISADA *74*
Qodobka 24-aad 74
Aasaasidda Guddiga 74
Qodobka 25-aad 74
Hawlaha iyo Mas'uuliyadaha Guddiga 74
Qodobka 26-aad 76
Xubnaha iyo Fadhiyada Guddiga 76
QAYBTA 5 A *77*
TIRAKOOBKA *77*
Qodobka 26A 77
Qodobbo guud oo la xiriira tirakoobka 77
Qodobka 26B 78
Tirakoobka Xarunta Warbixinada Maaliyadda laga rabo inay kaydiso 78
Qodobka 26C 79
Tirakoobka laga rabo inay kaydiyan Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka eeawoodda u leh ee la cayimay 79
Qodobka 26D 80
Tirakoobka laga rabo inay kaydiyan hay'adaha sharci fulinta iyo WasaaraddaCadaaladda 80
QAYBTA 6-AAD *81*
CIQAABAHA *81*
Qodobka 27-aad 81
Dabeecada iyo dabaqidda ciqaabaha 81
Qodobka 28-aad 82
Ciqaabaha lagu soo rogaayo hay'adaha warbixinnada (reporting entities) 82
Qodobka 29-aad 82
Racfaan qaadashada 82
QAYBTA 7-AAD *83*
TALLAABOOYINKA KU-MEEL-GAARKA AH, LA-WAREEGISTA HANTIDA EE XUKUNNADA CIQAABTA AH KA DHASHA IYO LA- WAREEGISTA HANTIDA OO AAN KU SALEYSNAYN XUKUNNADACIQAABEED *83*
Qodobka 30-aad 83
Baaxadda qaybtan 83
Qodobka 31-aad 83
Amarrada xannibaada 83
Qodobka 32-aad 84
Habraaca codsiga amarka xannibaada 84
Qodobka 33-aad 86
Nidaamka maareynta hantida inta Dowladdu hayso gacan ku haynteeda 86

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 34-aad 87
Shuruudaha la wareegidda hantida 87
Qodobka 35-aad 88
Habraaca codsiga amarka hanti la wareegista 88
Qodobka 35A 89
Awaamiirta hantid la wareegista oo aan ku saleysnayn xukun ciqaabeed 89
QAYBTA 8AAD 90
ISKAASHIGA CAALAMIGA AH: ISKA-KAASHIGA WADAJIR AH EE DHAQANGELINTA SHARCIYADA IYO ISKU-CELINTA EEDAYSANAYAASHA 90
Qodobka 36-aad 90
Qodob guud 90
Qodobka 37-aad 91
Codsiyada la xiriira iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada 91
Qodobka 38-aad 92
Diidmada ku aadan dhaqangelinta codsiyada la xiriira iska-kaashiga wadajir ahee dhaqangelinta sharciyada 92
Qodobka 39-aad 94
Codsiyada la xiriira dhaqangelinta tallaabooyin baaris 94
Qodobka 40-aad 94
Codsiyada la xiriira dhaqangelinta tallaabooyin ku meel gaar ah 94
Qodobka 41-aad 95
Codsiyada ku aadan hanti la wareegidda ee ka yimaada dalalka shisheeye 95
Qodobka 42-aad 95
Isticmaalka ama iibinta hantida lala wareegay ama la qaatay gacan kuhaynteeda 95
Qodobka 43-aad 96
Baaritaanada loo fuliyo sida wadajirka ah 96
Qodobka 44-aad 96
Isku-celinta eedaysanayaasha 96
Qodobka 45-aad 98
Habka maareynta codsiyada la xiriira isku-celinta eedaysanayaasha iyo iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada 98
Qodobka 46-aad 99
Nuxurka codsiyada 99
Qodobka 47-aad 101
Macluumaadka dheeriga ah 101
Qodobka 48-aad 101
Dhawrista sirta codsiyada 101
Qodobka 49-aad 101

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Dib u dhaca dhaqangelinta codsiyada 101
Qodobka 50-aad 102
Kharashaadka ku baxa dhaqangelinta codsiyada 102
Qodobka 51-aad 102
Habka qaybsiga hantida lala wareegay 102
QAYBTA 9-AAD 102
NOOCYADA KALE EE ISKAASHIGA CAALAMIGA AH 102
Qodobka 51A 102
Qodob guud 102
Qodobka 51B 103
Awoodda hay'addaha Dowladda ee kaalmo siinta hay'addaha shisheeye eedhigooda ah 103
Qodobka 51C 105
Diididda kaalmo siinta hay'addaha shisheeye 105
Qodobka 51D 106
Codsashada kaalmo hay'ado shisheeye 106
QAYBTA 10-AAD 106
QODOBBO GUUD 106
Qodobka 52-aad 106
Awoodda soo saarista Xeer-nidaamiye-yaasha 106
Qodobka 53-aad 107
Wax-ka beddelka sharciyadii ka horeeyay 107
Qodobka 54-aad 107
Dhaqan-Galka 107

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

QAYBTA 1-AAD
QEEXITAANNADA IYO UJEEDADA

Qodobka 1-aad
Qeexitaannada

Sharcigan dhexdiisa, ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa macnaha kuhor qoran:

1. **"Koonto Banki"** waxa ku jira adeeg ama hab kasta oo hay'ad warbixinneed (reporting entity) u adeegsato mid ama in ka badan oo ka mid ah hawlaha soo socda:

   (b) Kaydinta lacagaha caddaanka ah iyo waraaqaha maaliyadeed ee leh qiime lacageed (monetary instruments);

   (t) Bixinta lacagaha caddaanka ah iyo waraaqaha maaliyadeed ee leh qiime lacageed (monetary instruments) ama ku wareejinta ama ka wareejinta isla koontadaas banki;

   (j) Bixinta jeegaga ama amarrada lacag-bixineed ee kayimaada hay'addaha maaliyadeed ama ay u adeegsato ururinta jeegaga ama amarada lacag- bixinneed iyadoo wakiil ka ah shakhsi kale;

   (x) Bixinta adeeg ama nidaam loogu talagalay kaydinta lacagaha la kaydiyo muddada xaddidan ama sanduuqyada lagu shubto alaabaha qiimaha leh(safety deposit box);

   (kh) Bixinta lacagaha iyada oo loo marayo kaararka ku xiran koontooyinka bankiyada (debit cards) ama kaararka deyn-qaadashada ee bankiyada (credit card); ama

   (d) Bixinta lacagaha amaahda ah iyo dib-u-ururinteeda.

2. **"Macluumaad sax ah"** waxaa loola jeeda macluumaad la xaqiijiyay saxnimadiisa iyadoo la hubinaayo aqoonsiga iyo jiritaanka milkiilayaasha sida sharciga ah u leh macluumaadkan. Marka la xaqiijinayo macluumaadkan, waxaa la isticmaalaya dokumantiyo, xog ama macluumaad la isku halayn karo oo si madax banaan loo helay.

3. **"Macluumaad dhamaystiran"** waxaa loola jeeda macluumaad dhamaystiran oo loo isticmaali karo in lagu aqoonsado shakhsiyaadka dabiiciga ah ee isticmaala, walibana sida sharciga ah u leh milkiyaadda macluumaadkaas, iyo sida shaqsiyaadkaas ay u maamulaan xakameeyan macluumaadkaas.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

4. **"Koonto banki oo mulkiiluhu qarsoonyahay (anonymous account)"** waxaa loola jeeda koonto banki oo lagu isticmaalayo magacyo been abuur ah, magacyo aan jirin, ama lambaro keliya, iyada oo aan la qeexin magaca mulkiilaha koontada.

5. **"Macluumaadka aasaasiga ah"** waxa loola jeedaa macluumaadka lagu qeexay farqada 1-aad ee Qodobka 23D ee Sharcigan.

6. **"Waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs)"** waxaa loola jeeda waraaqado maaliyadeed kuwaa oo lahaanshiyaha siiya qofka markaa sita, sida jeegaga safarrada, ama waraaqadaha maaliyadeed ee gorgortanka gala (oo ay ku jiraan jeegaga, balan-qaadyada lacag-bixineed ee qoran, iyo amarrada lacag bixineed) kuwaa oo ay ku jiraan kuwo leh magaca qofka sitaa, kuwo aan lahayn wax magac ah, kuwo leh magac aan jirin, kuwo saxiixan balse magaca lacag- qaataha laga saaray, ama kuwo qaabkoodu u ogolaanayo in milkiyadoodu ay u gudbi karto ciddii lasiiyo, taasoo u ogolaanaysa in qof kasta oo haysta waraaqadahan maaliyadeed uu iibin karo ama ku sarrifan karo lacag caddaan ah ama ku beddelan karo wax kale oo qiimo kale leh.

7. **"Saamiyada uu leeyahay shakhsiga markaas sitaa"** waxaa loola jeeda waraaqado ay ku qoranyihiin saamiyada shirkad, kuwaa oo gorgortan gala, lahaanshiyahana siinaya qofka markaa sita.

8. **"Milkiilaha sida dhabta ah faa'iidada uleh"** waxaa loola jeedaa shakhsiga dabiiciga ah ee ugu dambeyntii iska leh faa'iidada ama maamula macaamilka ama shakhsiga dabiiciga ah ee isagoo wakiil ah fuliya macaamilaad maaliyadeed. Waxa kale oo ka mid ah shakhsiyaadka dabiiciga ah ee iska leh maamuulka dhabta ah ee ugu danbeeya ee ku aadan cidda leh shakhsiyadda qaanuuneed.

9. **"Ka faa'iideyste",** marka loo eego hannaanka sharci ee nidaamiya ammaanada, waxaa loola jeedaa shakhsi dabiici ah, ama cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuneed oo xaq u leh faa'iidooyinka laga helo nidaamka ammaanada ah. Marka loo eego nidaamyada caymiska shakshiga ama maalgashiga kale ee xiriirka la leh caymiska shakhsiyaadka, "ka faa'iideyste" waxaa loola jeedaa shakhsiga dabiiciga ah, cid leh shakhsiyad qaanuuneed ama shakhsiyaad kale kuwaa oo xaq u leh faa'iidooyinka laga helo caymiska marka ay yimaadan arrimaha la iska caymiyay. Marka ay timaado xawilaadda/dirista lacagaha, "ka faa'iideyste" waxaa loola jeedaa shakhsiga dabiiciga ah ama cidda leh shakhsiyadda qaanuuneed ee qofka lacagta soo diraya uu tilmaamay inuu yahay shakhsiga lacagta qaadanaya.

10. **"Faa'iido"** waxa loola jeedaa faa'iido kasta, koror dhaqaale, macaash, ama lacag bixin nooc kasta oo ay tahay ama faa'iidada uu shakhsi ka helo ama

FEDERAAL REPUBLIC OF SOMALIA
FEDERAALKA SOOMAALIYA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

uga soo kordha kuwaas, oo ay ku jiraan faa'iidada shakhsi qaanuuni ah ee uu leeyahay isagu ama hoos yimaada maamulkiisa helo ama u soo kordha.

11. **"Xiriirka ganacsi"** macnehiisu waa xiriir xirfadeed oo bilawgiisaba la filayo inuu socdo in muddo ah, walibana ka koobnaado macaamilaad ama adeeg bixinno badan.
12. **"Hay'adda awoodda u leh"** waxaa loola jeedaa hay'ad Dawladeed ee xil ka saran yahay la dagaallanka lacag dhaqidda iyo/ama maalgelinta argagixisada.

13. **"Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda u leh"** waxaa loola jeedaa hay'addaha Dowladdaha, kuwaa oo si waafaqsan shuruucda iyo xeerar aas-aaska u ah, loo xilsaaray inay mas'uul ka yihiin la socodka iyo hubinta in hay'addaha warbixinnadu u hoggaansamaan waajibaadkooda lagu qeexay Sharcigaan iyo xeer-nidaamiyaashiisa.

14. **"La-wareegis"** waxaa loola jeedaa in si aan ka noqosho lahayn loola wareego lacag ama hantida kale, si waafaqsan amar kasoo baxay hay'ad awood u leh ama maxkamad.

15. **"La-wareegis aan ka dhalan xukun"** waxaa loola jeeda la wareegis lacag ama hantida kale oo la fuliyay iyadoo loo hoggaansamaayo amar kasoo baxay dacwad ka dhacaysa maxkamad oo la xiriira fal-dembiyeed, taasoo aan u baahnayn in maxkamaddu soo saarto ama gaarto xukun ciqaabeed.

16. **"Iswakiilasha Bankiyada (Correspondent Banking)"** waxaa loola jeedaa marka banki (bankiga wakiilka ah) siiyo adeegyada bankiyada, banki kale (bankiga muwakilka ah).

17. **"Dal"** - erayga "dal" ee loo isticmaalo waddan ama waddamo waxaa sidoo kale loo isticmaalaya dhulalka ama maamulada.

18. **"Macaamiil"** waxaa loola jeedaa shakhsi dabiici ah, ama cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuneed, taasoo ka iibsata hay'add warbixin (a reporting entity) alaabo ama adeegyo, oo ay ku jiraan adeegyo talo bixin.

19. **"Shakhsi ama Hay'ad Laga-saaray Liiska"** waxaa loola jeedaa shakhsi ama ha'ad laga saaray liiska cunaqabataynta, taasoo macnaheedu yahay in shakhsigaas ama hay'addas aan lagu dabaqi doonin cunaqabataynta maaliyadeed ee cayiman.

20. **"Ganacsiyada iyo xirfadaha la-cayimay ee aan fulin hawlaha maaliyadeed (DNFBPs)"** waxaa loola jeedaa:

    (b) Dulaaliinta guryaha iyo dhulalka.

FEDERAAL JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(t) Ganacsatada biraha qaaliga ah.

(j) Ganacsatada dhagaxaanta qaaliga ah.

(x) Qareennada, nootaayooyinka, xirfadlayaasha kale ee sharciga ee madax-bannaan iyo xisaabiyeyaasha.

(kh) Shirkadaha ama shakhsiyaadka bixiya adeegyada maamulidda ammaanooyinka (trust) ama adeegyada kale ee la xiriira hawlaha shirkadaha, kuwaas oo ganacsi ahaan, siiya cid saddexaad mid ka mid ah adeegyadan soo socda:

i. iyagoo wakiil ka ah cid kale, dhisidda shirkadaha iyo ururada kale ee leh shakhsiyadda qaanuuneed;

ii. iyagoo wakiil ka ah cid kale (ama u hawgelinta qof kale inuu wakiil noqdo) ka noqoshada agaasime ama xoghaye shirkad, ama xubin ka noqoshada shuraako ama ka qabashada jago kuwaas la mid ah shirkad ama cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuneed;

iii. u samaynta xafiis diiwaan gashan, cinwaan ganacsi, hoy, ama ciwaan maamul oo loogu talagalay shirkad, shuraako ama cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuneed;

iv. iyagoo wakiil ka ah cid kale (ama u hawgelinta qof kale inuu wakiil noqdo) qabashada hawl ka kooban maamulidda ammaano (trust) ama u qabashada shaqo u dhiganta middaas cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuneed; ama

v. noqoshoda saamile magac u yaal ah, iyagoo wakiil ka ah cid kale (amau hawgelinta qof kale inuu wakiil ka noqdo).

21. **"Shakhsi ama hay'ad asteeysan"** waxaa loola jeeda shakhsi ama hay'ad kastaee uu asteeyay Guddi Cunaqabatayn ee Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay, Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay laftiisa ama Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda, taasoo cunaqabatayn cayiman ee maaliyadeed lagu soo rogay.

22. **"Dhaqaale"** waxaa loola jeedaa hanti nooc kasta oo ay tahay, taasoo loo isticmaali karo in lagu helo lacag ama hanti kale, alaab, ama adeegyo.

23. **"Hay'add",** marka loo eego Qodobka 19A, waxaa loola jeedaa qeyb kasta, hay'add aan diwaangashanayn, shuraako, sanduuq, ama koox kasta oo kale oo aanlahayn shakhsiyad qaanuuneed.

24. **"Hay'ad maaliyadeed"** waxaa loola jeedaa cid leh shakhsiyad qaanuuneed oo loo qeexay si waafaqsan ama lagu qeexay Sharciga Hay'addaha Maaliyadda, 2012 iyo wax ka beddellada Sharcigaas ee dib laga sameeyay. Hay'ad maaliyadeed waxaa sidoo kale ka mid ah shakhsi dabiici ah ama mid qaanuuneed kaas oo u qabta macaamil, mid ama in ka badan oo kamid ah hawlaha soo socda:

(b) Kaydinta lacagaha kaydka ah iyo lacagaha kale ee dib loo bixinaayo iyo bixinta adeegyada gaar ah ee bankiyada;

(t) Amaahinta lacagaha, oo ay ku jiraan maalgelinta alaabaha iyo adeegyada (consumer credit), maalgelinta guryaha, maalgelinta iyadoo loo maraayo iibsashada qaansheegyada (factoring) iyo maalgelinta macaamilaadka ganacsi (oo ay kamid tahay iibsashada qaansheegyada alaabaha la dhoofiyay- "forfeiting").

(j) Maalgelinta kiraynta (financial leasing), oo aan ku jirin maalingelinta alaabaha dadku isticmaalan.

(x) Xawilaada/dirista lacagaha iyo dukumintiyada kale ee qiimaha leh;

(kh) Soo saarista iyo maaraynta hababka lacag bixinta (tusaale ahaan, kaararkaku xiran koontooyinka bankiyada "debit cards" iyo kaararka deyn-qaadashada ee bankiyada "credit cards", jeegaga caadiga ah, jeegaga safarrada, amarrada lacag-bixinta, jeegaga bankiyadu bixiyaan "bankers' drafts" ama lacagaha elektarooniga ah);

(d) Bixinta dammaanad-qaadyada iyo ballanqaadyada maaliyadeed

(r) Ka ganacsiga dukumintiyada maalgelinta muddada gaaban (money market instruments) sida jeegaga, dukumintiyada Dowladduhu lacagaha ku aamahdan (treasury bills), shahaadooyinka lacag dhigishada muddada go'an, dammaanadaha iwm; sarifka lacagaha qalaad, qiimaha dulsaarka, iyo dukumintiyada maaliyadeed ee xiriirka la leh suuqyada saamiyada (index instruments), maalgashiyada dammaanad-qaadka leh ee la wareejin karo (transferable securities), ama heshiisyada badeecooyinka mustaqbalka la kala gadanaayo (commodity futures).

(s) Maaraynta maalgashiga shakhsiyaadka iyo hay'adaha kale.

(sh) Ilaalinta iyo maamulida lacagta caddaanka ah ama maalgashiyada dammaanad-qaadka leh ee iibka gali kara isla markaas (liquid securities) iyagoo wakiil uga ah shakhsiyaad kale;

(dh) Maalgelinta, maamulida, ama maaraynta lacagaha iyagoo wakiil uga ah shakhsiyaad kale;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(c) Isku beddelida lacagaha kala duwan;

(g) Bixinta adeegyada lacagaha elegtarooniga ah, oo sidoo kale loo yaqaan adeegyada "e-money".

(f) Soo saarista maalgashiyada dammaanad-qaadka leh ee iibka gali kara (Securities) iyo bixinta adeegyada maaliyadeed ee la xiriira; ama

(q) Bixinta dammaanad-qaadyada (underwriting) iyo maal-gelinta caymiska shakshiyaadka ama maalgashiyada kale ee xiriirka la leh caymiskashakhsiyaadka.

25. **"Maalgelin argagixiso"** waxaa loola jeedaa dembiga maalgelinta argagixisada ee ku qeexan Qodobka 3-aad ee Sharcigan.

26. **"Xayiraad"** waxaa loola jeedaa in la mamnuuco wareejinta, beddellida, iibinta, ama dhaqdhaqaaqyada kale ee wax kastoo maaliyad ah ama hantida nuucayadeeda kale oo ay leeyihiin ama ay maamulaan shakhsiyaad ama hay'ado la asteeyay, iyadoo lagu salaynayo go'aan uu soo saaray Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ama si waafaqsan qaraar dhaqan-gal ah ee Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ama go'aan ka soo baxay hay'adaha awoodda u leh ee Dowladda Federaalka ee Soomaaliya.

27. **"Hay'ad Shisheeye ee Dhiggeeda ah"** waxaa loola jeedaa hay'add shisheeyey eewadankeeda dhexdiisa awood uleh fulinta waajibaadyada iyo shaqooyin lamid ah kuwa ay qabtaan hay'addaha maxalliga ah ee awoodda u leh, shaqooyinkaas oo hoos imaan kara habka wada shaqayn ee la codsaday.

28. **"Hanti"** waxaa loola jeedaa hanti nooc kasta oo ay tahay, si kasta oo lagu soo helayba, ha ahaato mid la taaban karo ama aan la taaban karin, guurto ama ma guurto. Waxa kale oo ka mid ah dukumeentiyada sharciga ah, oo ay ku jiraan kuwa elektaroonig ama dhijitaalka ah, kuwaa oo caddaynaya lahaanshiyaha hantidaas.

29. **"Lacag ama Hanti kale"** waxaa loola jeeda hanti kasta, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn, hanti maaliyadeed, ilo dhaqaale (oo ay ku jiraan shidaalka iyo kheyraadka kale ee dabiiciga ah), hanti nooc kasta, ha ahaato mid la taaban karo ama aan la taaban karin, guurto ama ma guurto, si kastaba oo lagu kasbadayba, iyo dukumeentiyo sharci nooc kasta oo ay yihiin, oo ay ku jiraan kuwa elektarooniga ama dhijitaalka ah, oo caddaynaya lahaanshaha ama dan-ka- lahaansho lacagahaas ama hantidas kale oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, deymaha bankiyada, jeegagga safarrada, jeegagga bankiyada,amarrada lacag bixinta, saamiyada,

AMMUURTADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

maalgashiyada dammaanad-qaadka leh ee iibka gali kara (Securities), dukumeenti muujinaya deymaha Dowladda iyo shirkadaha lasiiyay, damaanadaha bangiyada, faa'iidada saamilayda ama dakhliga kale ama macaash ka soo xarooda ama ay soo saaraan lacagahan ama hantidan kale, iyo hanti kasta oo kale oo laga yaabo in loo isticmaalo si loo helo lacag, alaabo ama adeegyo.

30. **"Lacag ama agab hantiyeed ee loo isticmaalayo in lagu maalgeliyo fal dembiyeed (instrumentalities)"** waxaa loola jeedaa lacag kasta oo loo isticmaalayo ama loogu talagalay in loo isticmaalo, gabi ahaanba ama qayb kamid ah, si loogu maalgeliyo fal dembiyeed. Lacagahaan waxaa kamid ah lacagaha loo isticmaalo ama loogu talagalay in loo isticmaalo maalgelinta argagixisada, falalka argagixisada, ururada argagixisada, ama shakhsiyaad argagixiso ah.

31. **"Dagaalyahan Argagixiso ee Shisheeye"** waxaa loola jeedaa qofka u dhoofa dalaan kiisa ahayn ama deggeneyn, ujeeddadiisuna tahay in uu geysto, qorsheeyo, diyaariyo ama ka qayb qaato falal argagixiso ama bixiyo ama qaato tababar argagixiso.

32. **"Xog loo isticmaali karo aqoonsi"** waxaa loola jeedaa dukumeentiyo laga helo ilo madax banaan, ama xog, ama macluumaad kuwaa oo la isku halayn karo.

33. **"Xiriirada sharciga ku dhisan (Legal arrangement)"** waxaa loola jeedaa xiriirammaano oo qoran ama xiriirada kale ee lamidka ah ee lagu dhisay nidaam sharciga waafaqsan.
34. **"Cid leh shakhsiyad qaanuuneed"** waxa loola jeedaa cid kasta oo aan ahayn shakhsi dabiici ah ama aan ahayn xiriirka lagu dhisay nidaam sharciga waafaqsan,kaas oo la samaysan kara xiriir macaamiil oo joogto ah hay'ad maaliyadeed, ganacsiyada iyo xirfadaha la-cayimay ee aan fulin hawlaha maaliyadeed (DNFBPs) ama hay'addaha ka ganacsada lacagaha iyo hantida dhijitaal ah, ama ah mid iyadu awooda inay hanti yeelan karto.

35. **"Ku darista Liiska"** waxaa loola jeeda ku daabacaadda liiska, magaca shakhsi ama hay'ad kasta oo lagu soo rogay cunaqabatayn maaliyadeed ee cayiman si waafaqsan Qaraar Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ama go'aan Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda, iyo sidoo kale dhammaan macluumaadka la xiriira aqoonsiga shakhsigaas ama hay'addaas, iyo sababaha looasteeyay.

36. **"Lacag-dhaqidd"** waxaa loola jeedaa dembiga lagu qeexay Qodobka 2-aad ee Sharcigan.

37. **"Muwakil (Nominator)"** waxaa loola jeedaa shakhsi dabiici, koox ama ah, ama cid leh shakhsiyad qaanuuneed tasoo, si toos ah ama si dadban, u

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

siisa awaamiir, shakhsi kale ama cid leh shakhsiyad qaanuuneed, kuwaa oo ku aadan inuu ku matalo jogooyinkooda kala ah agaasime ama saamile.

38. **"Wakiil (Nominee)"** waxa loola jeedaa shakhsi dabiici, ama cid leh shakhsiyad qaanuuneed tasoo shakhsi dabiici, ama cid leh shakhsiyad qaanuuneed ay fartay inuu ku matalo macaamil lala yeelanaayo cid leh shakhsiyad qaanuuneed. Shakhsiga wakiilka ah marnaba ma ahan milkiilaha sida dhabta ah u leh faa'iidadakasoo xarota cidda leh shakhsiyad qaanuuneed.

39. **"Tignoolajiyada cusub"** waxaa loola jeeda soo saarista ama abuurista aalado cusub ama nidaamyo cusub ee ganacsi oo ay ku jiraan hababka cusub ee la is kugudiro lacagaha ama loo bixiyo lacagaha iyo u isticmaalida tignoolajiyada cusub iyokuwa soo ifbaxaaya adeegyada cusub iyo kuwa horay u jiray ee shirkad ama hay'ad.

40. **"Adeegsashada koontooyinka banki ee ka furan banki la wakiishay (Payablethrough accounts)"** waxaa loola jeeda koontooyinka banki ee ka furan banki la wakiishay, kuwaa oo ay adeegsadaan dhinacyo saddexaad oo aan ahayn bankiga wakiilka laga yahay, si'ay u sameeystaan macaamilaad ganacsi, iyagoo aan soo marayn bankiga wakiilka laga yahay.

41. **"Shakhsi"** waxaa loola jeedaa shakhsi kasta oo dabiici ah ama mid kasta oo leh shakhsiyad qaanuuni ah.

42. **"Ka gudbinta xuduudaha lacago ama waraaqado maaliyadeed ee sarrifmi kara"** waxaa loola jeedaa ka dhoofinta ama kasoo dejinta xuduudaha lacago ama waraaqado maaliyadeed ee sarrifmi kara, kuwaasoo u kala gudbaaya labo dal, oo ay ku jiraan ka gudbinta xuduudaha ee uu sameeyo shakhsi dabiici ah ama iyadoola isticmaalayo boorsooyinka, ama gaadiidka shakhsigaas. Waxaa sidoo kalekamid ah shixnad ahaan usoo rarista lacago ama waraaqado maaliyadeed ee sarrifmi kara ama marka shakhsi dabiici ah uu boosta kusoo diro lacago ama waraaqado maaliyadeed ee sarrifmi kara.

43. **"Shaqsiyaadka haya xil Dawladeed ama Siyaasadeed (PEPs)"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo ka haya ama lagu aaminay xil Dowladda Federaalka Soomaaliya ama xil dowladda dal shisheeye, tusaale ahaan sida madaxa dowladdaha ama xukuumaddaha, siyaasiinta sarsare, saraakiisha sarsare ee xukuumada, garsoorka ama ciidamada, madaxda shirkadaha dawladdu leedahay ama hoggaamiyaasha iyo saraakiisha xisbiyada siyaasadeed ee muhiimka ah iyo sidoo kale xubnaha sare ee maamulka u haaya ururada caalamiga ah.

44. **"Macaamilaadka aan joogtada aheyn"** wuxuu leeyahay macnaha lagu siiyay Qodobka 5-aad ee Sharcigaan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

45. **"Dambiyada asalka ah (Predicate offences)"** waxaa loola jeedaa fal dembiyeed kasta, ee uu Xeerka Ciqaabta ama sharciyada kale u aqoonsadeen inuu yahay fal dembiyeed, kaas oo soo saara faa'iido lacageed ama hantiyeed. Dambiyada asalkaah ee sharciga lagu qeexay waxaa kamid ah dembiga maalgelinta argagixisada ee lagu qeexay Qodobka 3-aad ee Sharcigaan iyo dembiyada sharci lagu qeexay kuwaa oo lagu galay meel ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, balse waa haddii dembiyadaas ay yihiin kuwo looga aqoonsanyahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya inay yihiin fal dembiyeedyo.

46. **"Faa'idada ka dhalata Dembi"** waxaa loola jeedaa hanti kasta, lacag ama faa'iido ama manfac ka yimid ama laga helay, si toos ah ama dadban, fal dembiyeed.

47. **"Hay'ad warbixinneed (Reporting entity)"** waxaa loola jeedaa shakhsi kasta oo dabiici ah ama mid kasta oo leh shakhsiyad qaanuuni ah oo lagu qeexay Qodobka 4 ee Sharcigan.

48. **"Diiwageliyaha xogta milkiilayaasha sida dhabta ah faa'iidada uleh"** waxa uu leeyahaya macanaha lagu siiyay Qodobka 23C ee Sharcigaan.

49. **"Xannibaad"** waxaa loola jeedaa in la mamnuuco wareejinta, beddellida, iibinta,ama dhaqdhaqaaqyada kale ee wax kastoo maaliyad ah, qalab ah ama hantida nuucayadeeda kale ah, iyadoo lagu salaynayo go'aan xannibaad oo ay soo saarto hay'ad awood u leh ama maxkamad, taaso ku eg ilaa iyo inta laga gaaraayo go'aan la-wareegis oo ay soo saarto hay'adda awoodda u leh.

50. **"Gacan ku dhigis"** waxaa loola jeedaa in la mamnuuco wareejinta, beddellida, iibinta, ama dhaqdhaqaaqyada kale ee wax kastoo maaliyad ah, iyadoo lagu salaynayo nidaam xayiraad kaaso u oggolaanaya hay'ad awoodda u leh ama maxkamad inay gacanta ku dhigto lacag la cayimay.

51. **"Qof hantidiisa geliya nidaam ammaano ah"** waxaa loola jeedaa shakshi dabiici ah ama cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuned, kaas oo ku wareejiya lahaanshaha hantidiisa mid ama in ka badan nidaam ammaano ah, isagoo isticmaalaya heshiis ammaano ah ama nidaam sharciyeed ee lamid ah.

52. **"Banki aan lahayn meel ama maamul loogu soo hagaago (Shell bank)"** waxaa loola jeedaa banki aan ku lahayn meel ama maamul loogu soo hagaago gudaha dalka laga aas-aasay ee uu shattiga ka haysto, kaasoo walibana aan xiriir maamul la laheyn hay'add maaliyadeed...

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

korjoogteeyo. "Leh meel ama maamul loogu soo hagaago" macnaheedu waa in ay bankigu ku leeyahay dalka lagu aas-aasay, ee uu shatiga ka haysto, hannaan maamul iyo go'aan gaaris oo wax ku ool ah.

53. **"Kala-qaybinta macaamilaadka maaliyadeed (Structuring)"** waxaa loola jeedaa in lagu sameeyo ama la isku dayo in lagu sameeyo hal maalin ama maalmo badan gudahood, macaamilaad ku aadan qadar lacageed, iyadoo la adeegsanaayo hal ama in ka badan oo ah hay'ad maaliyadeed, ama hay'ad ka ganacsata lacagaha iyo hantida dhijitaal ah ama mid ka mid ah ganacsiyada iyo xirfadaha la-cayimay ee aan fulin hawlaha maaliyadeed, iyadoo ujeedadu tahay inaan loo hoggaansamin waajibaadka kasoo warbixinta ee saaran hay'addaha warbixinnada ee lagu qeexay Sharcigaan.

54. **"Warbixinta Macaamilaadka Shakiga Dhaliyay (Suspicious Transaction Report)"** waxaa loola jeeda warbixin loo soo gudbiyay si waafaqsan Qodobka 14-aad ee Sharcigaan.

55. **"Cunaqabatayn Maaliyadeed ee Cayiman"** waxaa loola jeeda xayiraada iyo mamnuucista, si looga hortago in lacago ama hanti kale oo ay ka faa'idaysan karan shakhsiyaad iyo hay'addo la asteeyay, loo siiyo shakhsiyaadkaas ama hay'addahaas, si toos ah ama si dadban.

56. **"Argagixiso"** waxaa loola jeedaa shakshi kasta oo dabiici ah oo:

(b) Si toos ah ama si dadban, oo ah sharci darro iyo ula kac, galaa, ama isku dayo inuu galo, falal argagixisanimo nuucay doonaanba ha ahaadaane;

(t) Ka qaybqaata, isagoo gacan ka gaysanaya, falal argagixisanimo;

(j) Abaabula ama ku hagaa shakhsiyaad kale inay gaystaan falal argagixisanimo; ama

(x) Gacan ka geystaa falal argagixisanimo oo ay fulinayaan koox isku ujeedo ah, iyadoo gacan ka gaysashada falka loo sameeyay si ula kac, iyadoo ujeedada laga leeyahay ay tahay in la xaqiijiyo falka argagixisanimo ama falka loo galo iyadoo maanka lagu haayo ujeedooyinka kooxda geysanaysa falal argagixisanimo.

57. **"Fal Argagixiso"** waxaa loola jeedaa:

(b) Fal loo aqoonsanyahay inuu yahay fal dembiyeed si waafaqsan qeexitaannada ku qoran heshiisyada ku lifaaqan Axdiga Caalamiga ah ee La- dagaalanka Maalgelinta Argagaxisada ee 1999; iyo

(t) Fal kasta oo kale oo ujeedadiisu tahay in dhimasho ama dhaawac

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

jireed oo halis ah loo geysto qof rayid ah, ama qof kale oo aan si toos ah uga qayb

qaadanayn dagaaladda, marka ay jirto xaalad colaadeed, iyadoo ujeedada falkaas, marka loo eego dabeecaddiisa iyo xaaladaha lagu dhex fuliyay, ay tahay in la cabsi geliyo shacabka, ama lagu qasbo dowladda ama hay'ad caalami ah inay sameyso ficil ama ka joogsato sameeynta ficil.

58. **"Urur Argagaxiso"** waxaa loola jeedaa koox kasta oo argagixiso oo:

(b) Si toos ah ama si dadban, oo ah sharci darro iyo ula kac, galaa, ama isku dayo inuu galo, falal argagixisanimo nuucay doonaanba ha ahaadaane;

(t) Ka qaybqaata, isagoo gacan ka gaysanaya, falal argagixisanimo;

(j) Abaabula ama ku hagaa shakhsiyaad kale inay gaystaan falal argagixisanimo; ama

(x) Gacan ka geystaa falal argagixisanimo oo ay fulinayaan koox isku ujeedo ah, iyadoo gacan ka gaysashada falka loo sameeyay si ula kac, iyadoo ujeedada laga leeyahay ay tahay in la xaqiijiyo falka argagixisanimo ama falka loo galo iyadoo maanka lagu haayo ujeedooyinka kooxda geysanaysa falal argagixisanimo.

59. **"Hanti argagixiso"** waxaa loola jeedaa:

(b) Dakhli laga helo fulinta fal argagixisanimo ama dakhli ka dhashaa maalgelin argagixiso;

(t) Hanti loo isticmaalay, markaas loo isticmaalayo, ama la rabo in loo isticmaalo fal argagixiso;

(j) Hanti, urur argagixiso ama shakhsi argagixiso ah u isticmaalay, markaas u isticmaalayo, ama uu rabo in uu isticmaalo fal argagixiso;

(x) Hanti uu leeyahay ama uu maamulo urur argagixiso ama ururkaas wakiil looga yahay; ama

(kh) Hanti loo isticmaalay, markaas loo isticmaalayo ama loogu talagalay in loo isticmaalo maalgelin argagixiso.

60. **"Xarunta"** waxaa loola jeedaa Xarunta Warbixinada Maaliyadda ee la soo dhisay Qodobka 20-aad ee Sharcigan.

61. **"Guddiga"** waxaa loola jeedaa Guddiga Qaran ee Ka-hortagga Argag

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Dhaqidda iyo La-dagaalanka Maalgelinta Argagixisada, kaas oo magaciisa loo soo koobi karo "Guddiga Qaran ee Ka-hortagga Lacag Dhaqidda".

62. **"**Shirkadaha ama shakhsiyaadka bixiya adeegyada maamulidda ammaanooyinka **(trust)** ama adeegyada kale ee la xiriira hawlaha shirkadaha **(Trust and Company Service Providers)"** waxa loola jeedaa dhammaan cid kasta, oo ganacsi ahaan, siida cid saddexaad mid ka mid ah adeegyadan soo socda:

    (b) iyagoo wakiil ka ah cid kale, dhisidda shirkadaha iyo ururada kale ee leh shakhsiyadda qaanuuneed;

    (t) iyagoo wakiil ka ah cid kale (ama u hawgelinta qof kale inuu wakiil noqdo) ka noqoshada agaasime ama xoghaye shirkad, ama xubin ka noqoshada shuraako ama ka qabashada jago kuwaas la mid ah shirkad ama cid kale oo lehshakhsiyad qaanuuneed;

    (j) u samaynta xafiis diiwaan gashan, cinwaan ganacsi, hoy, ama ciwaan maamul oo loogu talagalay shirkad, shuraako ama cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuneed;

    (x) iyagoo wakiil ka ah cid kale (ama u hawgelinta qof kale inuu wakiil noqdo) qabashada hawl ka kooban maamulidda ammaano (trust) ama u qabashada shaqo u dhiganta middaas cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuneed; ama

    (kh) noqoshoda saamile magac uyaal ah, iyagoo wakiil ka ah cid kale (ama uhawgelinta qof kale inuu wakiil ka noqdo).

63. **"Macluumaadkii ugu dambayay (Up-to-date information)"** waxaa loola jeedamacluumaadkii ugu dambayay, kaas oo la cusbooneysiiyay hal bil gudaheed, markasta oo ay dhacaan isbeddello taabanaya dhamaystirnaanta macluumaadkan.

64. **"Hanti dhijitaal ah"** macnaheedu waa hanti u jirta qaab dhijitaal ah, taaso looga ganacsan karo qaab dhijitaal ah, loo wareejin karo qaab dhijitaal ah ama loo isticmaali karo ujeedooyin lacag bixineed ama maalgashi.

65. **"Hay'addaha ka ganacsada lacagaha iyo hantida dhijitaal ah (VASPs)"** waxaa loola jeedaa shakhsi kasta oo dabiici aha ama cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuneed, kaas oo ganacsi ahaan u qabta isaga laftigiisa ama isagoo wakiil ah, mid ama in ka badan oo ka mid ah hawlaha soo socda:

    (b) isku-sarrifida lacagaha dhijitaalka ah iyo lacagaha dowladdinhu soo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

saaran.

(t) isku beddellida hantida iyo lacagaha kala duwan ee dhijitaalka ah;

(j) xawiladda iyo dirista hantida iyo lacagaha kala duwan ee dhijitaalka ah;

(x) kaydinta iyo maamulista hantida iyo lacagaha dhijitaalka ah; iyo

(kh) ka qaybqaadashada iyo bixinta adeegyada maaliyadeed ee la xiriira iibintaama iibsashada hantida dhijtaalka ah.

Qodobka 1A
Ujeedada iyo Magaca

1. Ujeedada Sharcigaani ayaa in wax ka bedel lagu sameeyo Sharciga Ka-HortagaLacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada ee 2016 (Sharci Lr. 01 ee Febraayo 21,
2016). Marka uu Sharcigaani dhaqan galo, waxaa la joojinaaya isticmaalka SharcigaKa Hortaga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada ee 2016.

2. Sharcigan waxaa loogu yeerayaa "Wax-ka-bedelka Sharciga Ka-hortaga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada".

QAYBTA 2-AAD
DAMBIYADA LACAG DHAQIDDA IYO MAALGELINTA ARGAGIXISADA

Qodobka 2-aad
Dambiyada Lacag Dhaqidda

1. Shakhsi waxa uu galayaa dambiga lacag-dhaqidda, haddii isaga oo og ama ay ahayd inuu ogaado in lacag, si toos ah ama si dadban, ay tahay ama ay qayb ka tahay lacag kasoo xarootay fal dembiyeed, uu shakhsigaasi:

(b) Beddelo, ama xawilo lacagtaas iyadoo ujeedadu tahay in la qariyo ama la raadtiro asalka sharci darrada ah ee lacagtaas ama uu ka caawiyo shakhsi kasta oo kale oo ku lug leh gelista fal-dembiyeedka lacagtu kasoo xarootay, si uu uga baxsado cawaaqibka sharci ee ka dhalanaaya falka uu galay;

(t) Qariyo ama raadtiro asalka sharci-darrada ah ee lacagtu kasoo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

xarootay, ama nuuca tacagtu tahay, goobta ay taalo, inta lacagtu ka koobantahay, dhaqdhaqaaqeeda, mulkiilayaasheeda ama cidda xaqqa uleh lacagtaas; ama

(j) Qaato, isticmaalo, ama la wareego gacan ku haynta lacagtaas.

2. Shakhsi waxa uu galayaa fal-dambiyeedka isku-day lacag dhaqid, haddii uu isku dayo inuu galo fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 1-aad ee Qodobkan.

3. Shakhsi waxa uu galayaa fal-dambiyeedka fududayn lacag dhaqid, haddii uu ka qaybqaato, kaalmeeyo, ama kula heshiiyo shakshi kale fulinta, ama caawiyo, fududeeyo, ama kala taliyo shakhsi kale gelista fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada koowaad ee Qodobkan.

4. Dembiga lacag-dhaqidda waxaa loo arkayaa inuu yahay mid la galay, iyadoon loo eegayn nooca ama qiimaha lacagta ee sida toos ah ama si dadban uga soo xarootay fal-dembiyeedka. Qasadka iyo ogaalka la rabo si loo cadeeyo denbiga lacag dhaqista waxaa laga soo dheegan karaa duruufaha maadiga ee ku gadaaman dhacdada fal- dembiyeedka.

5. Marka la caddaynayo in lacagtu ay tahay mid kasoo xarootay fal-dambiyeed, looma baahna in la cadeeyo in shakhsi loo xukumay fal-dambiyeedka lacagtu kasoo xarootay.

6. Muddada shakhi lagu soo oogi karo eed la xiriirta fal-dambiyeedka lacag-dhaqidda waxaa lagu xaddiday toban (10) sano oo ka bilaabmaysa waqtiga fal-dambiyeedka lagalay. Socodka muddadan la cayimay way joogsanaysa haddii la bilaabo baaris ku aadan fal-dambiyeedka, oo ay ku jirto in shakhsiga la tuhmay lagu lasoo eedeeyo.

7. Iyadda oo aan waxba loo dhimayn habraaca sharci ee ku xusan Qodobka 47-aad ee Xeerka Habka Ciqaaabta Somaaliya, mudada xiritaanka ka hor bilowga garmaqalka Maxkamadda ee dhamaan dadka loo xiro tuhunka fal-danbiyeedyadda ku xusan Qodobkan waxa ay noqonaysaa 90 maalmood, waxaana la cusboonaysiin karaa hal mar oo kaliya oo ay Maxkamadi ogolaato.

8. Maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwadaha la xiriira dembiyada ku qeexan Qodobkan waa Maxkamadda Gobolka ee uu fal-dembiyeedku ka dhacay.

Qodobka 2A

Ciqaabaha lagu soo rogi karo shakhsiyaadka dabiiciga ah ee gala fal-dambiyeedyada lacag-dhaqidda

1. Shakhsiyaadka dabiiciga ah ee lagu helo fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

1- aad ee Qodobka 2-aad ee Sharcigaan waxa ay mutaysanayaan xabsi u dhexeeya saddex (3) ilaa toban (10) sano, iyo ganaax u dhexeeya kun Dooar (USD $1,000) ilaa toban kun oo Doolar (USD $10,000), iyo saddex u jibaar qiimaha lacagta ku lugta leh, ee walibana ka soo xarootay fal-dambiyeedka. Haddii ganaaxa faqradaan ku qoran uu u muuqdo mid aan wax ku ool ahayn sababo la xiriira xaalada dhaqaale ee dambiilaha,garsooraha ayaa awood leh inuu kordhiyo ama uu dhimo.

2. Shakhsiyaadka dabiiciga ah ee lagu helo fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 2- aad ama farqadda 3-aad ee Qodobka 2-aad ee Sharcigaan waxa ay mutaysanayaan xabsi u dhexeeya sideed iyo toban (18) bilood ilaa shan (5) sano ama ganaax u dhexeeya kun Dooar (USD $1,000) ilaa toban kun oo Doolar (USD $10,000) iyo saddex u jibaar qiimaha lacagta ku lugta leh, ee walibana ka soo xarootay fal- dambiyeedka. Haddii ganaaxa faqradaan ku qoran uu u muuqdo mid aan wax ku ool ahayn sababo la xiriira xaalada dhaqaale ee dambiilaha, garsooraha ayaa awood leh inuu kordhiyo ama dhimo.

Qodobka 2B
Ciqaabaha lagu soo rogi karo shakhsiyaadka qaanuuniga ah ee gala fal-dambiyeedyada lacag-dhaqidda

1. Shakhsiyaadka qaanuuniga ah ee lagu helo fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 1-aad ee Qodobka 2-aad ee Sharcigaan waxa ay mutaysanayaan ganaax lacageed ee u dhexeeya labaatan iyo shan kun oo doolar (USD $25,000) ilaa hal milyan oo Doolar (USD $1,000,000). Haddii ganaaxa faqradaan ku qoran uu u muuqdo mid aan wax ku ool ahayn sababo la xiriira xaalada dhaqaale ee dambiilaha, garsooraha ayaa awood leh inuu kordhiyo.

2. Shakhsiyaadka qaanuuniga ah ee lagu helo fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 2-aad ama farqadda 3-aad ee Qodobka 2-aad ee Sharcigaan waxa ay mutaysanayaan ganaax lacageed ee u dhexeeya labaatan iyo shan kun oo doolar (USD $25,000) ilaa hal milyan oo Doolar (USD $1,000,000). Haddii ganaaxa faqradaan ku qoran uu u muuqdo mid aan wax ku ool ahayn sababo la xiriira xaalada dhaqaale ee dambiilaha, garsooraha ayaa awood leh inuu kordhiyay.

Qodobka 3-aad
Dembiyada Maalgelinta Argagixiso

1. Shakhsi waxa uu galayaa dambiga maalgelin argagixiso, haddii isagoo isticmaalayawaddo kasta oo toosan ama dadban, uu si rabitaankiisa ku salaysan siiyo ama u aruursho lacag ama hantida nuucyadeeda kala duwan, iyadoo ujeedadiisa ama fahamkiisa uu lacagta ama hantida ubixinaayo ama uu aruurinaayo ay tahay mid sharci darro ah, oo looga gol leeyahay in uu isticmaalo ama loo isticmaalo, guud ahaan ama qayb kamid ah lacagtaa ama

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

hantidaas:

(b) Si loo fuliyo fal argagixiso;

(t) Shakhsi argagixiso ah;

(j) Urur argagixiso; ama

(x) Si loogu maalgeliyo safarka dagaalyahan argagixiso ee shisheeye.

2. Dembiga ku xusan faqradda 1-aad ee Qodobkaan waxaa la galay:

(b) Xataa haddii falka argagixiso uusan dhicin ama aan la isku dayin.

(t) Iyada oo aan loo eegayn in lacagta ama hantida nuucyadeeda kale:

i. Dhab ahaantii loo isticmaalay in lagu galo ama la isku dayo in lagugalo falka argagixisanimo;

ii. Ay xiriir la leedahay fal argagixiso oo gaar ah; ama

iii. Ay tahay mid ka timid ilo sharci ah ama kuwo sharci darro ah.

(j) Iyada oo aan loo eegayn dalka ama dhulka gudihiisa:

i. falka argagixiso uu ka dhacay ama la damacsanaa inuu ka dhaco; ama

ii. shakhsiga ama ururka argagixsada ah uu ku suganyahay.

3. Shakhsi waxa uu galayaa fal-dambiyeedka isku-day maalgelin argagixiso, haddii uuisku dayo inuu galo fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 1-aad ee Qodobkan.

4. Shakhsi waxa uu galayaa fal-dambiyeedka fududayn maalgelin argagixiso, haddii:

(b) Uu ka qaybqaato, isagoo kaalintiisu tahay gacan siin, gelista fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 1-aad ee Qodobkan;

(t) Uu abaabulo ama ku hago shakhsiyaad kale inay galaan fal-dambiyeedkalagu qeexay farqada 1-aad ee Qodobkan; ama

(j) Uu si ula kac ah gacan uga geysto gelista fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 1-aad ee Qodobkan, kaas oo ay galayaan koox isku ujeedo ah, iyadoo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

gacan ka gaysashada galista falka loo sameeyay:

i. si loo xaqiijiyo fal-dambiyeedka ama ujeedada sharci darrada ah ee kooxda, iyadoo falkaan ama ujeedada ay kamid tahay galista fal- dambiyeedka lagu qeexay farqada 1-aad ee Qodobkan; ama

ii. iyadoo maanka lagu haayo ujeedooyinka kooxda geysanaysa fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada (1) ee Qodobkan.

5. 5. Qasadka iyo ogaalka la rabo si loo cadeeyo gelista fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 1-aad, 3-aad, ama 4-aad ee Qodobkan waxaa laga soo dheegan karaa duruufaha maadiga ee ku gadaaman dhacdada fal-dembiyeedka.

6. Dembiga lagu qeexay farqada 1-aad, 3-aad, ama 4-aad ee Qodobkan waa dembi asal u ah (predicate offence) lacag dhaqidda.

7. Iyadda oo aan waxba loo dhimayn habraaca sharci ee ku xusan Qodobka 47-aad ee Xeerka Habka Ciqaaabta Somaaliya, mudada xiritaanka ka hor bilowga garmaqalka Maxkamadda ee dhamaan dadka loo xiro tuhunka fal-danbiyeedyadda ku xusan Qodobkan waxa ay noqonaysaa 90 maalmood, waxaana la cusboonaysiin karaa hal mar oo kaliya.

8. Maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwadaha la xiriira dembiyada ku qeexan Qodobkan waa Maxkamadda Gobolka ee uu fal-dembiyeedku ka dhacay.

Qodobka 3A
Ciqaabaha lagu soo rogi karo shakhsiyaadka dabiiciga ah ee gala fal-dambiyeedyada maalgelinta argagixiso

1. Shakhsiyaadka dabiiciga ah ee lagu helo fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 1- aad ee Qodobka 3-aad ee Sharcigaan waxa ay mutaysanayaan xabsi u dhexeeya shan (5) sano ilaa toban (10) sano iyo ganaax u dhexeeya shan kun oo Dooar (USD $5,000) ilaa labaatan kun oo Doolar (USD $20,000. Haddii ganaaxa faqradaan ku qoran uu u muuqdo mid aan wax ku ool ahayn sababo la xiriira xaalada dhaqaale ee dambiilaha, garsooraha ayaa awood leh inuu kordhiyo ama uu dhimo.

2. Shakhsiyaadka dabiiciga ah ee lagu helo fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 3- aad ama 4-aad ee Qodobka 3-aad ee Sharcigaan waxa ay mutaysanayaan xabsi u dhexeeya labo (2) sano ilaa lix (6) sano iyo ganaax u dhexeeya shan kun oo Dooar (USD $5,000) ilaa shan iyo toban kun oo Doolar (USD $15,000). Haddii ganaaxa faqradaan ku qoran uu u muuqdo mid aan wax ku ool ahayn sababo la xiriira xaalada dhaqaale ee dambiilaha, garsooraha ayaa awood leh inuu kordhiyo ama uu dhimo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 3B
Ciqaabaha lagu soo rogi karo shakhsiyaadka qaanuuniga ah ee gala fal-dambiyeedyada maalgelinta argagixiso

1. Shakhsiyaadka qaanuuniga ah ee lagu helo fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 1-aad ee Qodobka 3-aad ee Sharcigaan waxa ay mutaysanayaan ganaax lacageed ee aan ka yarayn shan iyo labaatan kun oo doolar (USD $25,000).

2. Shakhsiyaadka qaanuuniga ah ee lagu helo fal-dambiyeedka lagu qeexay farqada 3- aad ama 4-aad ee Qodobka 3-aad ee Sharcigaan waxa ay mutaysanayaan ganaax lacageed ee aan ka yarayn shan iyo labaatan kun oo doolar (USD $25,000).

Qodobka 3C
La wareegista khasabka ah ee lacagaha iyo hantida markii dembiyada lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixiso la galo

1. Maxkamadduhu waa inay amraan la wareegista lacagaha iyo hantida markasta ooay gaaran xukunnada la xiriira fal-dambiyeedyada lacag-dhaqidda ama isku dayga fal-dambiyeedyada lacag-dhaqidda. Maxkamadduhu waxa ay amrayaan in Khasnadda dhexe ee Dawladda lagu shubo, lacagaha iyo hantida loo isticmaalay ama loogu talagalay in loo isticmaalo gelista fal-dambiyeedka, lacagaha iyo hantida kasoo xarootay fal-dam biyeedka iyo dhammaan hantida guurtada ah iyo ma guurtada ah ee lagu iibsaday ama lagu bedeshay lacagahaas ama hantidaas. Waxaa sidoo kale lala wareegayaa lacagaha iyo hantida sida sharciga ah loo helay ee ku dhex milmay lacagahan iyo hantidaan sharci darrada ah iyo dakhli iyo faa'idooyin kasta oo kale ee kasoo xarooday lacagahaas iyo hantidaas, iyada oo aan loo eegin cidda lacagtaas iyo hantidas iska leh, ilaa ay dhacdo in cidda sida sharciga ah lacagtaas iyo hantidaas uleh ay caddeyso in aysan ka warqabin lacagaha iyo hantida sharci darrada ah ee kudhex milmay lacagtiisa iyo hantidiisa.

2. Maxkamadduhu waa inay amraan la wareegista lacagaha iyo hantida markasta ooay gaaran xukunnada la xiriira fal-dambiyeedyada maalgelinta argagixiso ama isku dayga fal-dambiyeedyada maalgelinta argagixiso. Maxkamadduhu waxa ay amrayaan in Khasnadda dhexe ee Dawladda lagu shubo, lacagaha iyo hantida xiriirka laleh maalgelinta argagixiso iyo dhammaan hantida guurtada ah iyo midda ma guurtada ah ee loo isticmaalay ama loogu talagalay in loo isticmaalo gelista fal-dambiyeedyada maalgelinta argagixiso. Haddii ay u aragto lagama maarmaan, Dawladdu waxay u qoondayn kartaa lacagta iyo hantida kale ee lala wareegay, sanduuq loogu talagalay la dagaaalanka dembiyada abaabulan ama mid magdhow laga siiyo dhibanayaasha ay dhibaatadu kasoo gaartay falalka argagixiso.

3. Go'aanka maxkamdda ee lagu amraya in lala wareego hantida iyo lacagaha

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ee ku xusan farqadaha 1-aad iyo 2-aad ee Qodobkan ayaa tilmaamaya nuuca iyo goobta ay yeelaana lacagaha iyo hantida lala wareegaayo. Haddii ay dhacdo in lacagta iyohantida kale ee lala wareegaayo aan si sax loo tilmaami karin, Maxkamadduhu waxay amrayaan in lala wareego qiimo lacageed ee u dhigma.

4. Shakhsi kasta oo sheeganaya inuu xaq u leeyahay ama uu xaq ku leeyahay lacagahaiyo hantida kale ee lagu soo rogay amarka la wareegista, waxaa uu codsi u gudbisan kara maxkamadda amarka soo saartay, si xuquuqdiisa loo ilaaliyo ama dib loogu soo celsho, muddo lix (6) bilood gudahood ah, oo ka bilaabmaysa maalinta lasoo saaray go'aanka la wareegista.

5. Hadii wax lagu waayo Shakhsiyaadka Dabiiciga ah ama Shakhsiyaadka Qaanuuniga ah ee la soo eedeeyey wuxuu yeelanayaa magdhow u dhigma eediisa.

QAYBTA 3AAD
KA HORTAGGA LACAG-DHAQIDDA IYO MAALGELINTA ARGAGIXISADA

Qodobka 4-aad
Hay'adaha iyo xirfadaha lagu dabaqaayo Sharcigan

Waajibaadka ka hortagga ee lagu qeexay Sharcigan waxa lagu dabaqayaa shakhsiyaadka loogu yeero "Hay'addaha Warbixinnada" kuwaas oo hoos imanaya talaabooyinka iyo waajibaadka ku qeexan Sharcigan:

1. Hay'adaha maaliyadeed;

2. Ganacsiyada iyo xirfadaha la-cayimay ee aan fulin hawlaha maaliyadeed (DNFBPs), gaar ahaan:

   (b) Qareennada, nootaayooyinka, xirfadlayaasha kale ee sharciga ee madax- bannaan iyo xisaabiyeyaasha, marka ay iskudubaridayan ama ay u fulinayaan macaamilaadka macaamiishooda ee ku aadan hawlaha soo socda:

   i. Soo iibinta iyo sii iibinta hantida ma-guurtada ah;

   ii. Soo iibinta iyo sii iibinta hantida guurguurta;

   iii. Maareynta lacagaha, maalgashiyada dammaanad-qaadka leh ee iibka gali kara (securities) ama hantida nuucyadeeda kale oo ay leeyihiin macaamiishu;

   iv. Furista ama maamulka koontooyinka bankiyada, kaydadka

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

lacaga,ama kaydadka maalgashiyada dammaanad-qaadka leh ee iibka gali kara (securities);

v. Soo ururinta maalgashiyada, oo ay ku jiraan lacagaha iyo hantida nuucyadeeda kala duwan ee lagama maarmaanka u ah abuurista, hawlgalinta, ama maamulida shirkadaha; ama

vi. Abuurista, hawlgelinta, ama maaraynta hay'addaha, ururada iyo cid kasta oo leh shakhsiyad qaanuuneed, ammaanooyinka sharciga ku dhisan ama shirkadaha gancsi iyo soo iibinta iyo sii iibinta shirkadahaganacsi.

(t) Shirkadaha ama shaqsiyaadka bixiya adeegyada maamulidda ammaanooyinka (trust) ama adeegyada kale ee la xiriira hawlaha shirkadaha, marka ay iskudubaridayan ama ay u fulinayaan macaamiishooda, macaamilaad ku aadan hawlaha soo socda:

i. iyagoo wakiil ka ah cid kale, dhisidda shirkadaha, ururada iyo cid kasta oo kale ee leh shakhsiyadda qaanuuneed;

ii. iyagoo wakiil ka ah cid kale (ama u hawgelinta qof kale inuu wakiil noqdo) ka noqoshada agaasime ama xoghaye shirkad, ama xubin ka noqoshada shuraako ama ka qabashada jago kuwaas la mid ah shirkad ama cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuneed;

iii. u samaynta xafiis diiwaan gashan, cinwaan ganacsi, hoy, ama ciwaan maamul oo loogu talagalay shirkad, shuraako ama cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuneed;

iv. iyagoo wakiil ka ah cid kale (ama u hawgelinta qof kale inuu wakiil noqdo) qabashada hawl ka kooban maamulidda ammaano (trust) ama u qabashada shaqo u dhiganta middaas cid kale oo leh shakhsiyad qaanuuneed; ama

v. noqoshoda saamile magac uyaal ah, iyagoo wakiil ka ah cid kale (amau hawgelinta qof kale inuu wakiil ka noqdo).

(j) Dulaaliinta guryaha iyo dhulalka, marka ay ku guda jiraan macaalimaadka macaamiishooda ee ku aadan soo iibinta ama sii iibinta hantida ma-guurtada ah;

(x) Ganacsatada biraha iyo dhagaxaanta qaaliga ah, marka ay macaamil kala macaamilayaan lacag caddaan ah oo la eg ama ka badan waddiga lacageed ee lagu cayimay sharciga iyo xeerarka;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

3. Hay'addaha ka ganacsada lacagaha iyo hantida dhijitaal ah; iyo

4. Cid kasta oo kale ee lagu qeexo xeer-nidaamiye ay soo diyaariso Xarunta Warbixinada Maaliyadda, kaas oo loo soo saaro si waafaqsan Qodobka 52-aad ee Sharcigan.

Qodobka 5-aad
Xaqiijinta xogta aqoonsiga ee macmiilka (CDD)

1. Hay'addaha warbixinnada waa inay qaadaan tallaabooyinkan soo socda ee ku aadanxaqiijinta xogta aqoonsiga ee macaamiisha:

(b) Waa inay aqoonsadaan macmiil kasta, iyagoo xaqiijinaaya xogta aqoonsiga macmiilka iyagoo isticmaalaya dokumantiyo, xog ama macluumaad la isku halayn karo oo si madax banaan loo soo helo.

(t) Waa inay xaqiijiyaan in shakhsiga sheeganaya inuu cid kale wakiil ka yahay uu haysto wakaalad sax, kadibna waa inay aqoonsadaan, oo ay xaqiijiyaan aqoonsiga shakhsigaas;

(j) Waa inay aqoonsadaan milkiilaha sida dhabta ah faa'iidada uleh (the beneficial owner), iyagoo qaadaya tillaabooyin wax ku ool ah oo lagu xaqiijinaayo aqoonsiga milkiilaha sida dhabta ah faa'iidada uleh iyagoo isticmaalaya dokumantiyo, xog ama macluumaad la isku halayn karo oo si madax banaan loo soo helo. Tillaabooyinkan waa inay ka dhalataa in hay'adda warbixinnadu ay ku qanacdo inay fahamsantahay milkiilaha sida dhabta ah faa'iidada uleh, iyadoo haddii arrinku khuseeyo cid leh shakhsiyad qaannuuneed ama cid kale oo ku dhisan xiriirada sharciga ogolyahay, ay daruuri tahay in hay'adda warbixinnadu ay ku qanacdo inay fahamsantahay cidda leh iyo haykalka maamulka ee macaamilka;

(x) Waa inay fahmaan, kana helaan macaamilka, xogta ugu habboon ee ku aadan ujeedada uu ka leeyahay xiriirka ganacsi ee uu la yeelanaayo hay'addaaswarbixinnada; iyo

(kh) Waa inay fuliyaan tallaabooyin joogta ee lagu xaqiijinaayo xogta xiriirkaganacsiga, oo ay ku jiraan:

i. Baarista macaamilaadka dhexmaray labadooda intii uu socday xiriirka ganacsi si loo hubiyo in macaamilaadka uu sameeyay shakhsigu ay yihiin kuwa la jaan qaadi kara fahamka hay'adda warbixinnadu ka haysato shakhsigaas, oo ay ku jirto fahamka hay'adda warbixinnadu ka haysato shakhsiga ganacsigiisa, iyo khataraha ka iman kara, iyo waliba haddii loo baahdo, meesha

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

dakhligu kasoo galo; iyo

ii. Hubinta in la cusboonaysiiyo dukumeentiyada, xogta, ama macluumaadka kuwaasoo laga aruuriyay macaamilka markii lagu guda jiray xaqiijinta xogta aqoonsiga ee macaamiilka (CDD), iyadoo dib u eegis lagu samaynayo diiwaanada xogta macaamilka ee gaar ahaan macaamiisha khatartu ka iman karto.

2. Hay'addaha warbixinnada waa inay dabaqaan tallaabooyina xaqiijinta xogtaaqoonsiga ee macaamiilka, markasta oo ay:

(b) La samaysanayaan xiriir ganacsi cid kale:

(t) Fulinayaan macaamilaad aan joogta ahayn ama hal macaamil oo dhacaya halmar oo keliya kaasoo lacagtiisa caddaanka ah ay la egtahay ama ay ka badantahay toban kun oo Doollar (USD $10,000) ama lacag kale ee aanDoolar ahayn oo u dhiganta. Waxaa sidoo kale shuruudaan la dabaqayaahaddii macaamilka la fuliyo halmar oo keliya ama haddii loo fuliyo marar kaladuwan oo u muuqda inay xiriir leeyihiin;

(j) Ka shakiyaan in macaamilku la xiriiro lacag-dhaqis ama maalgelin argagixiso, iyada oo aan loo eegayn cadadka lacagta sharcigu cayimay ama in hay'addahaasi ka reebanyihiin waajibaadka kasoo warbixinta;

(x) Fulinayaan macaamilaad aan joogta ahayn oo nuuciisu yahay xawilaad lacag, taasoo gaaraysa kun Doolar (USD $1,000) ama ka badan ama lacag
kale ee aan Doolar ahayn oo u dhiganta; amd

(kh) Hay'adda warbixinnadu shaki ka qabto dhamaystirnaanta ama saxnaantaxogta aqoonsiga macaamiilka ee hore looga helay macaamiilka.

3. Marka la fulinaayo hawsha aqoonsiga iyo xaqiijinta xogta aqoonsiga ee macaamilka iyo milkiilaha sida dhabta ah faa'iidada uleh (beneficial owner), hay'addaha warbixinnadu waa inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka suurtagalka ah, si ay u helaan, kadibna u kaydsadaan macluumaadka iyo dukumintiyada muujinaaya inay ku qanceen saxnaanta iyo dhamaytirnaanta ku aadan aqoonsiga macaamilka iyo milkiilaha sida dhabta ah faa'iidada uleh.

4. Xogta iyo dukumeentiyada ugu yar oo hay'addaha warbixinnada ee kala duwan ay u baahnyihiin waa in lagu qeexa xeer-nidaamiye faahfaansan oo ay soo diyaariyeen hay'addaha babagalka iyo kormeerka ee awoodda uleh, kadibna waxaa loo soo saaraya si waafaqsan Qodobka 52-aad ee Sharciga.

5. Hay'adda warbixinnadu waxay dabaqi karaan nidaamyo la fududeeyay ee ku

AMHUURKADA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

aadan tallaaboyinka xaqiijinta xogta aqoonsiga ee macaamiilka (simplified CDD), si waafaqsan xeer-nidaamiye-yaal loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 52-aad ee Sharcigaan.

6. Xeer-nidaamiye kasta oo loo soo saaray si waafaqsan faqradda 5-aad ee Qodobkaan,kaas oo dejiyaa nidaamyo la fududeeyay ee ku aadan tallaaboyinka xaqiijinta xogta aqoonsiga ee macaamiilka (simplified CDD), iyadoo danta laga leeyahay ay tahay in kor loo qaado tirada bulshada isticmaasha adeegyada maaliyadeed oo ay bixiyaan hay'addaha warbixinnadu kuwooda maaliyadda, waa inuu ku saleysnaada cilmi-baaris qoran oo muujinaysa in khatarta ka iman karta ay tahay mid iska yar marka la eego duruufaha gaarka ah ee dadka ka faa'idaysanaaya iyo adeegyada ama aaladaha maaliyadeed oo ah kuwo baaxadoodu koobantahay.

7. Aqoonsiga shakhsiyaadka qaannuuniga ah iyo xiriirada sharciga ku dhisan (legal arrangements), oo ay ku jiraan nidaamyada ammaanada ah, waa in lagu saleyaamacluumaadka iyo xogta soo socota:

(b) Magacooda, qaab dhismoodkooda sharci, iyo caddaynta muujinaysa jiritaankooda;

(t) Awoodaha sharci ee lagu maamulo shakhsiyaadka qaannuuniga ah iyo kuwo saldhiga u ah xiriirada sharciga ku dhisan, iyo sidoo kale magacyada shakhsiyaadka dabiiciga ah ee ka hayaa jagooyinka sare kuwaan. Waxaa sidoo kale la isticmaali kara, haddii ay leeyihiin, shatiyadooda iyo oggolaanshiyada ay ku hawl-galaan; iyo

(j) Ciwaanka xafiiskooda diwaangashan, haddii ay kala duwanyihiina, waxaa sidoo kale loo baahanyahay cinwaanka goobta ugu muhiimsan oo ay ku ganacsato.

8. Hay'addaha warbixinnada waa inay aqoonsadaan, iyagoo qaadaaya dhammaan tillaabooyin suurtagalka ah, si ay u xaqiijiyaan aqoonsiga dhammaan milkiilayaasha

sida dhabta ah uleh faa'iidooyinka kasoo xarooda shakhsiyaadka qaanuuniga ah iyo xiriirada sharciga ku dhisan (legal arrangements), oo ay ku jiraan nidaamyada ammaanada. Si taas loo fuliyo, hay'addaha warbixinnadu waa inay ka helaan kuwa hore lagu xusay, dukumintiyo iyo xog dhammeystiran, si ay u fahmaan cidda iska leh iyo haykalkooda maamul. Hay'addaha warbixinnadu waxay aqoonsiga kuwa hore lagu xusay ku saleynayaan macluumaadka soo socda:

(b) Marka tallaabooyinka aqoonsigu ay khuseeyaan shakhsiyaadka qaanuunigaah:

i. Aqoonsiga shakhsiyaadka dabiiciga ah ee sida dhabta ah u

FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

maamulo shakhsiyaadka qaanuuniga ah;

ii. Haddii shaki ka jiro in shakhsiyaadka dabiiciga ah ee sida dhabta ah u maamulo shakhsiyaadka qaanuuniga ah ay yihiin milkiilayaasha sida dhabta ah u leh faa'iidada kasoo xaroota shakhsiyaadkaas qaanuuniga ama haddii uusan jirin shakhsi dabiici ah oo si dhab ah u leh maamulka lahaanshiyaha, waa in lagu tiirsanaadaa macluumaadka aqoonsiga ee shakhsiga dabiiciga ah ee maamula shakhsiga qaanuuniga isagoo usoo maraaya wadooyin kale; iyo

iii. Haddii la aqoonsan waayo shakhsi daabiici ah ee haaya maamulka shakhsiga qaanuuniga ah, iyadoo la raacayo faqrad-hoosadka (ii) ama faqrad-hoosaadka (ii), waxaa la isticmaalaya macluumaadka aqoonsiga ee shakhsiga dabiiciga ah ee haaya jagada ugu sareeysa.

(t) Marka tallaabooyinka aqoonsigu ay khuseeyaan nidaamyada ammaanooyinka, waa in la isticmaala aqoonsiga shakhsiga abuuray ammaanada, cidda lagu aaminay, cidda korjoogtaysa iyo shakhsiga ama shakhsiyaadka ka faa'ideeysta, iyo shakhsi kasta oo dabiici ah oo sida dhabta ah u maamula nidaamka ammaanada, oo ay ku jirto marka maamulka nidaamka ammaanada uu yahay mid loo soo maro wadooyin kale;

(j) Marka tallaabooyinka aqoonsigu ay khuseeyaan xiriirada sharciga ku dhisan ee aan ahayn ammaanada (other legal arrangements), waa in la isticmaala aqoonsiga shakhsiyaadka lamidka ee udhigma midka abuuray ammaanada, cidda lagu aaminay, cidda korjoogtaysa iyo shakhsiga ama shakhsiyaadka ka faa'ideeysta, iyo shakhsi kasta oo dabiici ah oo sida dhabta ah u maamula xiriiradan sharciga ku dhisan ee aan ahayn ammaanada, oo ay kujirto marka nidaamka maamulku uu yahay mid loo soo maro wadooyin kale;

9. Xeer-nidaamiyeyaal loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 52-aad ee Sharcigaan waa inay dejiyaan habraac faahfaansan oo lagu hago dhaqan-gelinta faqradaha kore eekhuseeya hay'addaha warbixinnada ee kala duwan.

10. Haddii hay'adda warbixinnadu aysan awoodin inay u hoggaansanto waajibaadka ku xusan Qodobkan iyo kuwa ku xusan xeer-nidaamiyaasha la xiriira, markaa waa in hay'adda warbixinnadu aysan furin koontada banki, bilaabin xiriirka ganacsi ama aysan fulin macaamilka ganacsi ee aan joogtada ahayn ama ay joojiso xiriirka ganacsi, haddii markaas uu jiro. Xaaladahan kale marka ay la kulanto, hay'adda warbixinnadu waa inay usoo dirtaa Xarunta Warbixinada Maaliyadda, warbixintamacaamilaadka shakiga-dhaliyay ee la xiriirta macaamilka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 6-aad
Mamnuucista koontoyinka banki ee mulkiiluhu qarsoonyahay

Hay'addaha warbixinnada waxaa mamnuuc ka ah inay furaan ama ogolaadan jiritaanka koontooyin banki ee mulkiiluhu qarsoonyahay ama kuwo ku diiwangashan magacyo been abuur ah.

Qodobka 7-aad
Xiriirada la mamnuucay

Hay'addaha warbixinnada waxaa mamnuuc ka ah inay la sameeystaan ama la sii wadaan xiriirka ganacsi, ama ay u fuliyaan macaamil, banki aan lahayn meel cayiman ama maamul loogu soo hagaago (shell bank) ama hay'ad kasta ee maaliyadeed oo aan ku lahayn meel cayiman oo loogu soo hagaago gudaha dalka lagu abuuray ama shatiga ay ka haysato.

Qodobka 8-aad
Fulinta xaqiijinta xoogan ee xogta aqoonsiga ee macaamiilka (EDD)

1. Hay'addaha warbixinnada waa inay fuliyaan xaqiijinta xoogan ee xogta aqoonsiga ee macaamiilka (EDD), haddii intaa markaas la ogyahay oo ku salaysan qiimayn ku filan ee dhanka khataraha ah, xariirka ganacsi ama macaamilaadku uu leeyahay ama keeni karo khatar sare ee la xiriita lacag dhaqid ama maalgelin argagixiso.

2. Tallaabooyinka xaqiijinta xoogan ee xogta aqoonsiga ee macaamiilka (EDD) oo ay dabaqdo hay'add warbixinneed waa in ay sida uga habboon u maareeyaan, una yareeyaan khataraha heerkoodu sareeyo ee la ogaaday.

3. Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh waa inay diyaariyaanXeer-nidaamiye-yaal faahfaahsan oo nidaaminaaya dhaqangelinta habraac ku salaysan heerka khatarta ee markaa jirta (risk-based approach) iyo dabaqidda tallaabooyinka xaqiijinta xoogan ee xogta aqoonsiga ee macaamiilka (EDD). Xeer- nidaamiyeyaashan waxaa loo soo saarayaa si waafaqsan Qodobka 52 ee Sharcigan.

Qodobka 9-aad
Waajibaadka ku aadan fulinta baarista khataraha la xiriira lacag dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada

1. Hay'addaha warbixinnadu waa inay fuliyaan baarista gudaha ee ku aadan khataraha,si ay u aqoonsadaan, u qiimeeyaan, walibana u fahmaan khataraha la

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

xiriira lacag dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada oo ay wajihi karaan. Baarista khataraha ee la fulinaayo waa in ay xisaabta ku darsataa khataraha ka imaan kara macaamiisha kala duwan, wadamada ama deegaanada dhuleed, iyo aaladaha, adeegyada iyo hababka lacag bixinta ee gaarka ah, oo ay ku jiraan macaamilaadka aan ahayn ka fool-ka- foolka. Waa in sidoo kale xisaabta lagu darsadaa khataraha ka imaan kara nidaamyada cusub ee ganacsi oo ay ku jiraan hababka cusub ee lacag bixinta iyo u adeegsiga
tignoolajiyada cusub iyo midda soo ifbaxeeysa adeegyada cusub iyo kuwa horay ujiray ee shirkad ama hay'ad.

2. Marka ay timaado isticmaalka aaladaha, adeegyada, hababka ganacsi iyo tignoolajiyada cusub, hay'addaha warbixinnadu waa inay sameeyaan baarista khataraha ka imaan kara ee lagu qeexay faqradda 1-aad ee Qodobkan, ka hor inta aysan bilaabin hawlgelinta ama isticmaalka aaladahaan, adeegyadaan, hababkaan iyo tignoolajiyadaan.

3. Marka la fulinaayo baarista khataraha ee lagu sheegay faqradda 1-aad ee Qodobkaan, Hay'addaha warbixinnadu waa in ay xisaabta ku darsadaan natiijada kasoo baxday baaritaannada khataraha ee heer Qaran ama heer ganacsi ama hay'adoodee horay loo sameeyay.

4. Nuxurka iyo baaxadda baaritaannada khataraha ee gudaha oo hay'addaha warbixinnadu u sameeyaan si waafaqsan faqradda 1-aad ee Qodobkaan waa inay ahaadan kuwo ku habboon nooca iyo baaxadda ee hay'adda warbixinneed.

5. Baaritaannada khataraha ee gudaha oo hay'addaha warbixinnadu u sameeyeen si waafaqsan faqradda 1-aad ee Qodobkaan waa inay ahaadaan qoraal, la sameeyaa sanad walba ama waqti kasta oo kale oo loo baahdo ama ay soo dalbato Hay'adda Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh. Natiijada baaritaannadaan waa in lala wadaagaa Hay'adda Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda u leh, marka ay soo dalbato.

Qodobka 9A
Waajibaadka ku aadan maareynta khataraha lacag dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada

1. Hay'addaha warbixinnadu waa in ay qiimeeyaan dhammaan meelaha habboon ee khatarahu ka imaan karaan (sida koontooyinka, nuucyada macaamiisha kala duwan, aaladaha, adeegayada, macaamilaadka, deegaanada dhuleed, hababka lacag dirista iyobixinta iyo teknoolojiyadda cusub) ka hor inta aysan go'aan ka gaarin inta ay la'egtahay khatarta guud iyo tallaabooyinka habboon ee lagu yareeyn karo oo ay tahayin dabaqo.

2. Si loo yareeyo, walibana si wax ku ool ah loogu maareeyo khataraha

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ogaaday ee la xiriira lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada, hay'addaha warbixinnadu waa in ay lahaadaan siyaasado, nidaamyo korjoogtayn, iyo habraacyo ay ansixiyaan maamulkooda sare.

3. Siyaasadaha, nidaamyada korjoogtaynta, iyo habraacyada la aasaasay iyadoo loo hoggaansamaayo faqradda 2-aad ee Qodobkaan waa in ay ku jiraan tilaabooyinka xaqiijinta xoogan ee xogta aqoonsiga ee macaamiilka (EDD), si loo maareeyo, loona yareeyo khataraha, haddii hay'adda warbixinnadu ogaato in heerarka khataraha jira ay sareeyaan ama haddii sidaas lagu go'aamiyo xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Qodobkaa 52-aad ee Sharcigaan.

Qodobka 10-aad
Shaqsiyaadka haya xil Dawladeed ama Siyaasadeed (PEPs)

1. Hay'addaha warbixinnadu waa inay lahaadaan nidaamyada ku habboon ee maaraynta khataraha, si ay u ogaadaan in macaamilka, ama milkiilaha sida dhabta ah faa'iidada u leh (beneficial owner) oo ay la macaamilayaan uu yahay shakhsi haya xil Dawladeed ama mid siyaasadeed (PEPs) iyo in kale.

2. Hay'addaha warbixinnadu waa inay qaadaan tillaabooyinkan soo socda ee ku aadanmacmiil ama milkiile kasta oo si dhab ah uleh faa'iidada (beneficial owner), kaas oo ah shakhsi ka haya xil Dawladeed ama mid siyaasadeed (PEPs) dal shisheeye ama Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama ah shakhsi xil sare ka haaya urur caalami ah iyo qaraabada ama saaxiibada shakhsiyaadkaan:

(b) Waa in hay'adda warbixinnadu ka heshaa maamulkeeda sare ogolaanshoku aadan inay macaamilaad u fulin karto ama la yeelan karto xiriir ganacsi ama lasii wadi karto xiriir ganacsi oo horay u jiray;

(t) Waa in hay'adda warbixinnadu qaada tillaabooyin wax ku ool ah oo ay ku ogaanayso ilaha dhaqaalaha iyo lacageed ee shakhsiyaadkaas;

(j) Waa in hay'adda warbixinnadu iska xaqiijisaa macluumaadka ku aadan shakhsiga haya xilka Dawladeed ama midka siyaasadeed (PEPs) iyo halka macluumaadkaasi ka yimaadeen; walibana,

(x) Waa in hay'adda warbixinnadu ku sameeydaa koorjoogtayn xoogan oo joogta ah xiriirka ganacsi oo ay la leedahay shakhsiyaadkaas;

3. Marka arrinku ku saabsan yahay heshiisyada caymiska shakshiga (life insurance policies), waxaa looga baahan yahay hay'adaha maaliyadda:

(b) In ay qaadan tallaabooyin wax ku ool ah oo ay ku ogaanayaan in cidda ka faa'ideysanaysa heshiiska caymiska ama milkiilaha sida dhabta

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ah u leh faa'iidada (beneficial owner) cidda ka faa'ideysanaysa heshiiska caymiska uu yahay shakhsi haya xil Dawladeed ama mid siyaasadeed (PEPs) iyo in kale; iyo

(t) Marka ay ka war helaan jiritaanka khatar heerkeedu sareeyso, hay'adaha maaliyaddu:

i. Waa inay ogeysiiyaan maamulkooda sare ka hor inta aysan bixin lacagta heshiiska caymiska;

ii. Waa inay ku sameeyaan dib u eegis xoogan guud ahaan xiriirka iyo macaamilaadka ganacsi oo ay la leeyihiin cidda ka faa'ideysanysa heshiiska caymiska;

iii. Waa inay ka fikiraan inay habboontahay inay diraan warbixin ku aadan macaamilaad shaki dhaliyay (STR).

4. Xeernidaamiye ayaa qeexaya xilalka loo aqoonsan doono in ay yihiin xilal muhiim ah oo Dawladeed ama Siyaasadeed (PEPs) iyo waqtiga laga saarayo shakhsiga asteeynta ah inu yaahay shakhsi haaya xil Dawladeed ama Siyaasadeed (PEPs), kadib marka uu xilkaas baneeyo.

Qodobka 11-aad
La socodka khaas ah ee macaamilaadka

1. Hay'addaha warbixinnadu waa inay, iyagoo diiwangelinaaya tallaabo kasta, kudabaqaan tallaabooyinka xaqiijinta xoogan ee xogta aqoonsiga ee macmiilka (EDD) macaamilaadkaan soo socda:

(b) Macaamilaadka waaweyn ama kuwa u baahan shaqooyin badan ee kala duwan (complex) iyo macaalimaadka aan hore loo arag ama ka baxsan noocyada caadiga ah, kuwaa oo aan lahayn ujeeddo sharci ah oo si cad u muuqata ama ah kuwo laga shakiyay.

(t) Xiriirada ganacsi iyo macaamilaadka lala sameeynaayo shakhsiyaad dabiici ah ama kuwo qaanuuni ah, iyo hay'addo maaliyadeed oo ku saleysan deegaanoiyo wadamo kuwaa oo Hay'adda Caalamiga ah ee Ka-hortagga Lacag- dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada (FATF) ama Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh ay u asteeyeen inay kajirto khatar heerkoodu sareeyso ee lacag-dhaqid ama maalgelin argagixiso. Tallaabooyinka xaqiijinta xoogan ee xogta aqoonsiga ee macmiilka (EDD) ee la dabaqaayo waa inay ahaadaan kuwo u dhigma khatarta ka imaan karta deegaannadaas iyo wadamadaas.

2. Hay'addaha warbixinnadu waa inay qaadaan tillaabooyinka kasoo baxa Hay'adda Caalamiga ah ee Ka-hortagga Lacag-dhaqidda iyo Maalgelinta

Argagixisada (FATF) ama Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh, kuwaa oo looga hortagaayo khataraha la ogaaday ee ka imaan karaaya shakhsiyaadka dabiiciga ah iyo kuwa qaanuuniga ah iyo hay'addaha maaliyadda ee ku saleysan deegaannada iyo wadamada ay kajirto khatar heerkoodu sareeyso ee la xiriirta lacag-dhaqidda ama maalgelinta argagixisada.

3. Natiijooyinka kasoo baxay iyo dukumintiyada ku aadan tallaabooyinka hay'addaha warbixinnadu u qaadeen si waafaqsan faqradda 1-aad iyo 2-aad ee Qodobkaan waa in si waqtiyeysan loola wadaaga Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh, markay soo codsadaan.

Qodobka 12-aad
Waajibaadka xaqiijinta xogta ku aadan bankiga lala yeelanaayo xiriirka iswakiilashada bankiyada (correspondent banking)

1. Marka la galayo xiriirka iswakiilashada bankiyada (correspondent banking relationships), hay'addaha maaliyaddu waa inay:

(b) Aqoonsadaan, oo ay xaqiijiyaan xogta aqoonsiga ee bankiga la wakiisha eeadeega bixinaaya (respondent institution);

(t) U ururiyaan qaab qoraal ah, xog sugan oo ku saabsan bankiga la wakiisha
ee adeegga bixinaaya (respondent institution), si ay ugu fahamaan si buuxda nuucyada ganacsiyada ee bankigu bixiyo;

(j) Baaran sumcadda bankiga la wakiisha ee adeeggaa bixinaaya (respondent institution), tayada kormeerka uu ku sameeyo macmiilkiisa, iyo sidoo kale in horay loogu sameeyay baaris la xiriirta lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada ama ay tallaabo ka qaaday hay'adda dowladeed ee isaga kormeerta. Marka baaristaan la sameeynaayo waxaa la isticmaalaya macluumaadka sida guud looga heli karo ilaha madaxa banaan.

(x) Maamulkooda sare ka kelaan ogolaansho qoran, kahor inta xiriirka iswakiilashada bankiyada (correspondent banking relationships) aysan la sameeysan bankiga cusub ee loo wakiilinayo inuu adeeg siiyo bankigaan (respondent institution);

(kh) Soo helaan, kadibna qiimeeyaan siyaasadaha, nidaamyada korjoogtaynta, iyo habraacyada loogu talagalay la dagaalanka lacag-dhaqidda iyo kahortaga maalgelinta argagixisada ee uu dhaqan-geliyay bankiga la wakiisha ee adeeggabixinaaya (respondent institution). Waa in hay'addaha maaliyaddu la wadaagan hay'adaha kale ee maaliyadeed ee xiriir lasameeysanaaya iyaga(correspondent institutions) nuqulada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

siyaasadaha, nidaamyada korjoogtaynta,iyo habraacyada loogu talagalay la dagaalanka lacag-dhaqidda iyo kahortaga maalgelinta argagixisada ee uu dhaqan-geliyay bankiga la wakiisha ee adeega bixinaaya (respondent institution), si hay'addahaas maaliyadeed iskaaga xaqiijiyaan.

(d) Heshiis la galaan bankiga la wakiishay ee adeega bixinaaya (respondent institution), kaas oo dejinaya xilalka ay kala leeyihiin oo ku aadan la dagaalanka lacag-dhaqidda iyo kahortaga maalgelinta argagixisada; iyo

(r) Iska xaqiijiyaan in bankiga la wakiishay ee adeegga bixinaaya (respondent institution) uusan ahayn bankiyada aan lahayn meel cayiman oo loogu soo hagaago (shell banks), walibana uusan xiriir ganacsi la laheyn bankiyada aan lahayn meel cayiman oo loogu soo hagaago (shell banks).

2. Markii arrinku ku saabsanyahay adeegsashada koontooyinka banki ee ka furan banki la wakiishay ee adeeg bixinaay (payable through accounts), hay'addaha maaliyaddu waa inay xaqiijiyaan in bankiga la wakiisha ee adeeggaas bixinaaya(respondent institution):

(b) Inuu ka qaaday tallaabooyinka xaqiijinta xogta aqoonsiga ee macmiilka (CDD) dhammaan macaamiisha sida tooska ah u adeegsan kara koontooyinka uu leeyahay bankiga wax wakiishay (correspondent institution); iyo

(t) Uu heshiis qoraal ah ku aqbalo, walibana uu awooddo inuu si waqtiyeysan kula wadaago bankiga wax wakiishay (correspondent institution), xogta macmiilka ee la xaqiijiyay marka bankiga wax wakiishay (correspondent institution) oo soo codsado.

Qodobka 13-aad
Kaydinta Diiwaanada

1. Hay'addaha warbixinnadu waa in ay kaydiyaan, ugu yaraan **shan (5)** sano oo ka bilaabmaysa taariikhda macaamilku dhacay, dhammaan diiwaannada lagama maarmaanka ah ee macaamil, ha ahaado mid la xiriira gudaha dalka ama dibaddaba, si ay awood ugu yeeshaan in ay si degdeg ah ugu hoggaansamaan codsiyada macluumaad wadaagista oo ay soo diraan Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh. Haddii loo baahdo, si ay u noqdaa caddaymo loo isticmaali karo dacwad oogis fal dambiyeed, diiwaanada noocan ah waa inay ahaadaan kuwo dhamaystiran oo oggolaanaaya in masawir cad laga qaadan karo macaamilaadka shakhsiyaadka (oo ay ku jiraan caddadka iyo noocyada lacagta lagu macaamilay), ha ahaadaan macaamilaad ay sameeyeen shakhsiyaad leh koontooyin iyo kuwo aan lahayn

FEDERAALKA SOOMAALIYA
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

intaba.

2. Hay'addaha warbixinnadu waa in ay kaydiyaan, dhammaan diiwaanada la xiriira tallaaboyinka xaqiijinta xogta aqoonsiga ee macmiilka, oo ay ku jiraan galalka macmiilka, galalka koontooyinka, waraaqaha xiriirada ganacsi iyo natiijooyinka kasoo baxay baarisyada hay'addu ay ku sameeyday macmiilka, ugu yaraan **shan (5)** sano kadib marka xiriirka ganacsi uu dhammaaday ama taarikhda la sameeyay macaamilaadka ay leeyihiin shakhsiyaadka aan hay'adda la lahayn xiriir ganacsi.

3. Xogta aqoonsiga, diiwaannada macaamilaadka, iyo dhammaan macluumaadka ka dhashaa tallaaboyinka xaqiijinta xogta aqoonsiga ee macmiilka iyo baaritaannada hay'addaha warbixinnadu sameeyaan waa in si waqtiyeysan loola wadaago Xarunta Warbixinada Maaliyadda, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh, iyo hay'addaha kale ee awoodda u leh, marka ay soo codsadaan.

Qodobka 14-aad
Waajibaadka kasoo warbixinta

1. Hay'addaha warbixinnadu waa inay si degdeg ah ugu wargeliyaan Xarunta Warbixinada Maaliyadda dhammaan macluumaadka la xiriira lacag kasta, macaamilaad ama macaamilaadyo kasta oo dhawr ah ee xiriira, oo ay ku jiraan isku dayga kasta ee macaamilaad, iyada oo aan loo eegayn qaddarka lacagta macaamilaadka, haddii ay ka shakiyaan ama ay haystaan sababo maangal ah oo ay uga shaki karaan in lacagaha, macaamilaadka ama macaamilaadyada dhawrka ah ee xiriira ama isku dayga macaamilaadkaas ay yihiin ama ay la xiriiran:

(b) Lacag-dhaqidda lagu qeexay Qodobka 2 ee Sharcigan ama ay yihiin dakhlikasoo xarooday fal-dembiyeedka; ama

(t) Maalgelinta argagixiso ee lagu qeexan Qodobka 3-aad ee Sharcigaan.

2. Hay'addaha warbixinnadu waa inay si degdeg ah ugu soo wargeliyaan Xarunta Warbixinada Maaliyadda macaaamilaad kasta, macaamilaadyo kasta oo dhawr ah ee umuuqda inay xiriiran ama isku day kasta ee macaalimaad nuuciisu yahay lacag caddaan ah, kuwaa oo ka badan qaddarka lacageed ee lagu cayimay xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 52-aad ee Sharcigaan. Warbixinnada ku salaysan qaddarka lacageed ee la cayimay (threshold-based reporting) waxaa sidoo
kale lagu dabaqi kara macaamilaadyada kale iyadoo loo maraayo xeer-nidaamiye. Sidoo kale, hay'addaha warbixinnadu waa inay si degdeg ah ugu soo wargeliyaan Xarunta Warbixinada Maaliyadda macaaamilaad kasta, isku day macaamilaad kasta, ama macaamilaadyo kasta oo dhawr ah ee u muuqda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

inay xiriiran ama isku daygooda,kuwaa oo sababo la xiriira qaddarkooda lacageed, waqtigooda, ama duruufahoodakale ee u gaarka ah, u muuqda inay yihiin kala qaybin macaalimaad maaliyadeed (structuring) oo looga dan leeyahay in looga baxsado ama looga dhuunto waajibaadkakasoo warbixinta macaamilaadka ee Sharcigaani soo rogay.

3. Warbixinada looga baahan yahay inay soo diraan hay'addaha warbixinnada eeSharcigaan lagu qeexay waa in loo diraa Xarunta Warbixinada Maaliyadda iyadoo la raacayo qaab-qoraalka iyo habraaca lagu dejiyay xeer-nidaamiye ay soo diyaarisay Xarunta Warbixinada Maaliyadda ama Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda u leh, kaas oo loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 52-aad ee Sharcigaan. Hay'addaha warbixinnadu waa inay markasta u hoggaansamaan habraacyadaan.

Qodobka 14A
Dembiyada kala qaybinta macaalimaadka maaliyadeed (Structuring offenses)

1. Shakhsi waxa uu galayaa fal dambiyeedka kala qaybinta macaalimaadka maaliyadeed (structuring offense), hadii, iyadoo ujeeddada uu ka leeyahay ay tahay inuu ka baxsado ama ka dhuunto waajibaadka kasoo warbixinta ee Sharcigaani soo rogay, uu ku sababo ama isku dayo inuu ku sababo hay'ad warbixinneed in ay ku guuldarraysato inay soo dirto warbixin uu Sharcigaani waajib ka dhigay ama lagu jideeyay xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigaan.

2. Shakhsi waxa uu galayaa fal dambiyeedka fududaynta kala qaybin macaalimaadka maaliyadeed, haddii uu ka qaybqaato, kaalmeeyo, ama kula heshiiyo shakshi kale gelista, ama caawiyo, fududeeyo, ama kala taliyo shakhsi kale gelista fal- dambiyeedka lagu qeexay farqada 1-aad ee Qodobkan.

3. Maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwadaha la xiriira dembiyada ku qeexan Qodobkan waa Maxkamadda Gobolka ee uu fal-dembiyeedku ka dhacay.

Qodobka 14B
Ciqaabaha ka dhanka ah dembiyada kala qaybinta macaalimaadka maaliyadeed(Structuring offenses)

1. Ciqaabaha soo socda ayaa lagu soo rogi karaa shakhsiyaadkii galaa fal dambiyeedyada lagu qeexay faqradda 1-aad iyo 2-aad ee Qodobka 14A:

(b) Xabsi aan ka yarayn lix (6) bilood, iyo/ama

(t) Ganaax aan ka yarayn shan boqol oo doolar (USD $500) iyo ilaa laba ujibaar lacagta ku lugta leh fal dambiyeedka la galay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 14C
Hay'addaha warbixinnada ee aan lagu dabaqayn waajibaadka kasoo warbixinta

Iyadoo laga reebayo, oo an lagu dabaqayn shuruudaha ku qoran Qodobka 14-aad iyo 14A ee Sharcigaan, Qareennada, nootaayooyinka, xirfadlayaasha kale ee sharciga ee madax-bannaan iyo xisaabiyeyaasha loogama baahna inay u hoggaansamaan waajibaadka kasoo warbixinta haddii macluumaadka ay hayaan uu yahay mid ay heleen iyagoo fulinaya shaqooyinkooda looga baahanyahay inay u hoggaansamaan waajibaadka ilaalinta sirta shaqada iyo xogta macmiilka iyo qareenka ka dhaxeeysa,oo ay kujiraan macluumaadka ay soo heleen inta ay kug guda jireen hawlaha xaqiijinta tallaabooyin sharci ee u furan macmilkooda ama kuwa la xiriira ka difaacidda ama ku matalaadda macmiilkooda dacwado ka furan maxkamad ama meelo kale ee dhexdhexaadin, iyadoon loo eegayn in macluumaadkaas ay soo heleen ka hor, inta lagu jiro ama ka dib dacwaddaas. Hay'addahan warbixinnada kama faa'iidaysanayan, lagumana dabaqaayo ka reebista lagu sheegay qaybta hore ee faqradaan haddii ay ka qaybqaateen falal la xiriira lacag-dhaqid ama maalgelin argagixiso, ama ay bixiyeen talo-bixin sharci oo lagu taageeraayo ujeedoodin lacag- dhaqid ama maalgelin argagixiso ama ay ka war qabeen in macmiilkoodu soo raadsaday talo-bixinta sharci si'uu u sameeyo hawlo la xiriira lacag-dhaqid ama maalgelin argagixiso.

Qodobka 15-aad
Sir dhawrista iyo marka la oggolyahay in si niyad sami ku dheehantahay loo dirowarbixin ku aadan arrin shaki dhalisay

1. Hay'addaha warbixinnada, agaasimayaashooda, saraakiishooda, iyo shaqaalahooda midna looma qabansan karo in ay mas'uul ka yihiin xad-gudub, oo ay ka mid tahay xad-gudub ciqaabeed, madani, ama maamul, haddii aysan u-hoggaansamin wajibaadkooda ku aadan xakameynta xog wadaagis, kaas oo loo soo rogay si waafaqsan heshiis ama sharci, xeer-nidaamiye ama habraac maamul, inta ay ku guda jiraan u hoggaansanaanta waajibaadkooda kasoo warbixinta macaamilaadka laga shakiyo ama kuwo lacagaha caddaan ah oo dhaafsiisan xadka lacageed ee lagu cayimay Xeer-nidaamiye ama markasta oo ay si niyad sami ku dheehantahay ugu soo gudbiyaan Xarunta Warbixinada Maaliyadda maclumaad habbon.

2. Hay'addaha warbixinnada, agaasimayaashooda, saraakiishooda, iyo shaqaalahooda waxaa ka mamnuuc ah inay cid la wadaagan xogta ku aadan in warbixin macaamilaad shaki-dhaliyay (STR) ama macluumaad la xiriira loo gudbiyay ama loo gudbinaayo Xarunta Warbixinada Maaliyadda iyo Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda u leh.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

3. Tallaabo kasta oo ay qaadaan qareenno, nootaayooyin, xirfadlayaasha kale ee sharciga ee madax-bannaan iyo xisaabiyeyaal, iyagoo ku dadaalaya si ay ugu qanciyaan macmiilkooda inuusan ka qaybqaadan fal sharci darro ah kama dhigna xog wadaagista lagu mamnuucay farqada (2) ee Qodobkan.

4. Agaasimayaasha, saraakiisha iyo shaqaalaha hay'addaha warbixinnada waxay usheegi karaan hay'adaha garsoorka ama hay'adaha sharci fulinta ee haysta amar maxkamadeed in warbixin lala wadaagay Xarunta Warbixinada Maaliyadda si waafaqsan Qodobka 14-aad ee Sharcigaan. Xaaladahan oo kale marka ay jiraan,

hay'adaha garsoorka ama sharci fulinta ee haysta amar maxkamadeed waxay ka codsan karaan Xarunta Warbixinada Maaliyadda inay u xaqiijiso in warbixinta lala wadaagay.

5. Warbixinta macaamilaad shaki-dhaliyay (STR) iyo warbixinnada kale waxaa lala wadaagi karaa oo kaliya hay'adaha garsoorka ama hay'adaha sharci fulinta ee haysta amar maxkamadeed marka ay soo codsato Xarunta Warbixinada Maaliyadda, waana shardi in warbixintaas lagama maarmaan u tahay in la cadeeyo xadgudub ay sameeyeen hay'addaha warbixinnada ee lagu qeexay Qodobka 4-aad ee Sharcigaan, ama agaasimayaasha, saraakiisha iyo shaqaalaha hay'addahaas ama marka baaris fal dambiyeed ay muujiso in hay'addahaan ama shakhsiyaadka u shaqeeya ay ku lug yeelan karaan lacag-dhaqis iyo maalgelin argagixiso oo ay soo sheegeen.

Qodobka 16-aad
U hogaansanaan la'aanta waajibaadka sir dhowrista ee Sharcigaan ogolyahay

Hay'addaha warbixinnada, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda u leh iyo hantidhawrayaashu waa inay u hoggaansamaan shuruudaha Sharcigan soo rogayo iyadoo aan lagu Xadgudbeyn waajibaad kasta ee sir dhowris ama xaddidaad kasta oo kale ee aan ogolayn wadaagista macluumaad, taasoo lagu jideeyay sharci kale ama nidaam kale.

Qodobka 17-aad
Barnaamijyada Ka-hortagga Lacag-dhaqidda iyo La-dagaalanka MaalgelintaArgagixisada (AML/CFT programs)

1. Hay'addaha warbixinnadu waa in ay diyaariyaan oo ay hirgeliyaan barnaamijyo looga hortaggaayo lacag-dhaqidda, lagulana dagaalamaayo maalgelinta argagixisada. Waa inay sidoo kale diyaariyaan oo ay hirgeliyaan barnaamijyo loo adeegsanaayo qiimeeynta, ogaanshaha, maaraynta, iyo yaraynta khataraha la xiriira lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada. Barnaamijyadaan waa inay ka koobnaadaan kuwan soo socda:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(b) Siyaasado, habraacyo iyo nidaamyo korjoogtayn oo gudaha ah ee qoran, taariikhaysan, walibana ay ansixiyaan maamulkood sare, kuwaas oo ku salaysan qiimeyn lagu sameeyay heerka khatarta jirta ee la xiriirta lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada iyo baaxadda ganacsiga, iyo sidoo kale shuruucda, xeer-nidaamiyeyaasha, iyo hagayaasha ku aadan arrimahan;

(t) Habraaca hubinta u hoggaansananta siyaasadaha, habraacyada iyo nidaamyada korjoogtayn gudaha iyo wax ku oolnimadooda iyo magacaabista sarkaal loo xilsaaray hubinta u hoggaansananta iyo dhaqangelinta siyaasadaha,habraacyada iyo nidaamyada korjoogtayn ee ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada. Sarkaalka loo xilsaaray hubinta u hoggaansananta nidaamyada:

i. Waa inuu awood u yeesha inuu heli karo dhammaan buugaagta, diiwaannada, iyo shaqaalaha hay'adda warbixinnada, mar kasta oo uu u baahdo si'uu u guto waajibaadkiisa.
ii. Waa inuu ahaada maareeye sare oo leh khibrad ku filan, waana inlasiiya waxyaabaha uu u baahanyahay oo ku filan.

(j) Nidaamyo xaqiijin oo la isku halayn karo si loo hubiyo shaqaaleysiinta dad aqoon leh marka la qaadanaayo shaqaalaha;

(x) Tababarro joogta ah ee la siinaayo shaqaalaha, maamulka iyo wakiilada adeegyada xawilaadaha lacagta iyo alaabaha kale ee, kaas oo la diiwaangelinaayo marka uu qabsoomo, walibana la korjoogtaynaayo, si loo hubiyo in loo hoggaansamo jadwallada qabashadiisa;

(kh) Hantidhawris madaxa banaan ee gudaha ah ama mid ay fuliyaan shakhsiyaad bannaanka ka ah hay'adda si loo hubiyo u hoggaansanaanta, iyo waxtarka, siyaasadaha, habraacyada iyo nidaamyada korjoogtayn ee gudaha eelagu qeexay faqrad-hoosaadka (b) iyo dhammaan tallaabooyinka kale ee la qaaday si dabaqo Sharcigan; iyo

(d) Shakhsiyaad mas'uulka ka ah baarista hanti-dhawrista ee gudaha waa inay sidoo kale mas'uul ka noqdaan qiimeynta ku aadan isku halaynta lagu qabi karo barnaamijka ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada, iyagoo baaraya dhaqangelintiisa iyo sida loogu hoggaansamayo.

2. Hay'addaha warbixinnada oo ay weheliyaan laamahooda iyo shirkadaha ka farcamaoo saamiga ugu badan ay ku leeyihiin, waxaa loo arkayaa inay isku yihiin hal koox, waxana looga baahan yahay inay fuliyaan barnaamijyo saamaynaaya dhamman xubnaha kooxda kaas oo loogu talagalay ka-hortagga lacag dhaqidda iyo la- dagaalanka maalgelinta argagixisada. Waxay barnaamijyado noqdaan kuwo lagu dabaqi karo, kuna habboon dhammaan

FEDERAAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

laamaha iyo shirkadaha ka farcama kooxda. Barnaamijyadani waa in ay ka koobnaadaan:

(b) Tallaabooyinka loo baahan yahay ee ku xusan inta u dhaxeeysa faqrad- hoosaadyada (b) ilaa (d) ee faqradda (1) ee Qodobkaan, kuwaas oo ay tahay in lagu dabaqqo dhammaan xubnaha kala duwan ee kooxda ay ka koobantahay hay'adda warbixinnada;

(t) Siyaasado iyo habraacyo lagu nidaamiyo habka wadaagista macluumaadka ku aadan macmiilka, koontooyinka, iyo macaalimaadka, kaas oo ka dhaxeeya xubnaha kamidka ah kooxda hay'adda warbixinnada, oo ay kujiraan laamaha iyo shirkadaha ka farcama hay'adda warbixinnada oo ay saamiga ugu badan ayku leedahay, mar kasta oo wadaagista macluumaaadka uu uyahay lagamamaarmaan ka-hortagga lacag-dhaqis iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada, sida fulinta tallaabooyinka la xriira xaqiijinta xogta aqoonsiga eemacmiilka, baarista iyo kasoo warbixinta macaamilaadka shakiga laga qabo iyo maareynta khataraha ka imaan kara lacag dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada; iyo

(j) Nidaamyo waxtar leh oo lagu ilaaliyo sir dhawrista iyo habka maclumaad wadaagista, sidoo kalana looga hortagi karo u digista macaamiisha xogtooda lala wadaagay Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh (tipping-off);

3. Haddii nidaamyada aasaasiga ah ee ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada ee ka jira wadamada ay ku saleysanyihiin laamaha iyoshirkadaha ka farcama hay'adda warbixinnada oo ay saamiga ugu badan ku leedahay ay yihiin kuwo ka ka daciifsan kuwa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:

(b) Hay'addaha warbixinnadu waa inay ku waajibiyaan laamaha iyo faracyada ay ku leeyihiin wadama shisheeye inay adeegsadaan nidaamyo loogu talagalay ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada ee la jaanqaadi kara kuwo u degsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyagoo ku saleynaaya ilaa iyo inta shuruucda iyo xeer-nidamiyaasha ka jira dalkaas shisheeye ay oggolyihiin.

(t) Haddii shuruucda iyo xeer-nidamiyaasha ka jira dalkaas shisheeye aysan oggoleen in loo hoggaansamo waajibaadka ku xusan farqad-hoosadka (b) ee kor ku xusan, waa in hay'addahaas warbixinnada iyo laamaha iyo faracyadooda kuyaala dalka shisheeye oo ay isku kooxda yihiin ku wargeliyaan arrinkaan Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda ulehee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Xaaladahan oo kale marka ay dhacaan, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

awoodda uleh waxay qaadi karaan talaabooyinka kormeerka ee ku haboon, iyagoo ku dabaqayaa kooxdaas tillaabooyinka dheeriga ah ee ku haboon si loo mareeyo khataraha ka imaan kara lacag dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada.

(j) Haddii ujeedooyinka Sharcigan la fulin kari waayo, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay go'aamin karaan in la xiro laamaha ama shirkadaha ka farcama hay'adda warbixinnada ee kuyaala dalkaas shisheeye.

(x) Hay'addaha warbixinnada waxaa looga bahanyahay inuu kala dhaxeeyo laamaha iyo shirkadaha ka farcama oo ay saamiga ugu wayn ku leeyihiin ee kuyaala dalalka shisheeye nidaam wax ku ool ah ee macluumaad wadaagis, si ay awood ugu yeeshaan in ay si waqtiyeysan ugu soo jawaabaan codsiyada macluumaad soo gudbinta ee ka yimaada Hay'addaha Dabagalka iyoKormeerka ee awoodda uleh.

Qodobka 18-aad
Ka warbixinta lacagaha ka gudbaya goobaha furdooyinka ah

1. Shakhsi kasta oo:

(b) Ka baxaya ama soo galaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya isagoo wata, ama ka soo dejiyaa ama ka dhoofiya isagoo isticmaalaya boosto, adeegyada alaabaha qaada ama si kale, lacag dhan toban kun oo Doollar (USD
$10,000) ama ka badan ama lacago kale ee u dhigma qaddarkaas oo ah lacago maxaalli ah ama kuwa shisheeye, ha ahaadaan kuwo nuucoodu yahay lacago caddaan ah ama waraaqado maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs), waa inuu siiya Maamulka Waaxda Canshuuraha Furdooyinka ee Wasaaradda Maaliyadda ("Waaxda Canshuuraha Furdooyinka") ee kuyaala goobtaas furdada ah, warbixin qoran taasoo sax ah. Waajibaadka warbixin dhiibista
looma arkaayo in loo hoggaansamay haddii macluumaadka la bixiyay uuyahay mid khaldan ama aan dhamaystirnayn;

(t) U hoggaansami waaya faqrad-hosaadka (b) ee faqraddan waxa uu mutaysanayaa ciqaabaha ku xusan faqradaha 16-aad iyo 17-aad ee Qodobkan iyo shuruucda kale ee arrinkaan khuseeya.

2. Sarkaal katirsan Waaxda Canshuuraha Furdooyinka ee tuhmaa xad-gudub ka dhan waajibka ka-warbixinta ee ku xusan faqrad-hoosaadka (b) ee faqraddaa 1-aad ee Qodobkaan, waxa uu awood u leeyahay in uu:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(b) Baaro wax kasta oo shakhsigu wato ama kujira boorsadiisa; iyo

(t) Baaro shakhsiga laftiisa.

3. Shakhsiyaadka loo baaraayo si waafaqsan faqrad-hoosaadka (t) ee faqradda 2-aadee Qodobkaan waxa baaraya hal ama in ka badan oo ah saraakiisha Waaxda Canshuuraha Furdooyinka, kuwaa oo ku jinsi ah shakhsiga la baaraayo.

4. Si loo xaqiijiyo fulinta iyo dhaqangelinta waajibaadka ka-warbixinta ee ku xusan faqrad-hoosaadka (b) ee faqrada 1-aad ee Qodobkan, saraakiisha Waaxda Canshuuraha Furdooyinka waxay awood u leeyihiin inay joojiyaan, fuulaan, walibanabaaran markab, iyo diyaarad kasta ama nooc kasta oo kale oo gaadiid ah oo ku sugan goobaha ay maamusho Waaxda Canshuuraha Furdooyinka.

5. Haddii sarkaal katirsan Waaxda Canshuuraha Furdooyinka oo helo lacag caddaanah ama waraaqado maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) kuwaa oo aan laga soowarbixin ama laga dhiibay warbixin been abuur ah, si waafaqsan faqrada-hoosaadka
(b) ee faqrada 1-aad ee Qodobkan, sarkaalku waa inuu ku sameeya baaris dheeraad ahkiiska, wuxuuna awood u leeyahay inuu ka dalbado ama ka qaato shakhsiga la baaraayo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sababaha iyo ujeedooyinka looga safrinaayo xuduudaha dalka lacagta caddaanka ah ama waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs), asalkooda iyo isticmaalka loogu talagalay. Sarkaalka Waaxda Canshuuraha Furdooyinka wuxuu sidoo kale adeegsan karaa awoodo kuwaa lamid ah,xataa haddii iyadoo laga soo warbixiyay lacagta caddaanka ah ama waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs), ay u muuqato, iyadoo lagu saleynaayo xaqiiqooyinka iyo duruufaha markaas jira, in loo baahanyahay in shakhsiga waraysi lala yeesho, walibana laga uruuriyo xog, si jawaabo loogu helo arrimo kale.

6. Haddii lacag caddaanka ah ama waraaqado maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) aan laga warbixin ama laga bixiyo warbixin been abuur ah, sarkaalka Waaxda Canshuuraha Furdooyinka waxa uu caddaynta arrinkaa ku saabnsan siinayaa maamulka Waaxda Canshuuraha Furdooyinka ee ku sugan furdadaas, iyadoo maamulka Waaxda Canshuuraha Furdooyinka ee ku sugan furdadaas looga baahan yahay inay la wareegaan gacan ku haynta lacagtaas caddaanka ah ama waraaqadahaas maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) muddo aan ka badnayn sodon (30) maalmood, oo ka bilaabmaysa marka lagala wareegay gacan ku haynta lacagta caddaanka ah ama waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) shakhsiga sitay ama mulkiilaha. Kadib marka muddadani dhammaato, lacagta caddaanka ah ama waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) waxaa dib loogu soo celinayaa shakhsigii lagala wareegay gacan ku haynteeda ama mulkiilaheeda ahaa, iyada oo aan waxba laga dhimayn suurtagalnimada in mar kale hay'adaha garsoorka ee awoodda u leh

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ama hay'addaha kale ee awoodda uleh oo isticmaalaya amar maxkamadeed ay dib ula wareegi karaan gacan ku haynteeda.

7. Haddii laga shakiyo lacag-dhaqid, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqidda (predicate offenses) ama maalgelin argagixiso, sarkaalka Waaxda Canshuura Furdooyinka, oo ay weheliyaan maamulka Waaxda Cashuuraha Furdooyinka ee furdadaas, wuxuu awood u leeyahay inuu joojiyo shakhsiga sida, kadibna uu la wareego gacan ku haynta lacagta caddaanka ah ama waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) muddo soddon (30) maalmood ah, taasoo ay maxkamadda gobolku kordhin karto oo ay ka dhigi karto sagaashan (90) maalmood, kadib marka uu soo codsado Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, si go'aan looga gaaro in la bilaabaayo baaris rasmi ah oo ku saabsan lacag-dhaqis, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqista (predicate offenses) ama maalgelin argagixiso. Kadib marka muddadani dheeriga ah dhammaato, lacagta caddaanka ah ama waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) waxaa dib loogu soo celinayaa shakhsigii lagala wareegay gacan ku haynteeda ama mulkiilaheeda ahaa,iyada oo aan waxba loo dhimayn suurtagalnimada in mar kale hay'adaha garsoorka ee awoodda u leh ama hay'addaha kale ee awoodda uleh oo isticmaalaya amar maxkamadeed ay dib ula wareegi karaan gacan ku haynteeda.

8. Hay'adaha sharci fulinta ayaa soo saaraaaya xeer-nidamiyaasha dejinaya habraacyada loo ururinaayo caddaymaha dheeriga ah ee lagama maarmaan ah u ah dembi-baarista.

9. Waaxda Canshuuraha Furdooyinka waa inay:

(b) Hubisaa inay kaydiso macluumaadka la xiriira falalka ka safrinta xuduudaha dalka lacagaha caddaanka ah ama waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs), haddii ay dhacdo:

i. In lasoo gudbiyo warbixin ku aadan lacag dhan toban kun oo Doollar (USD $10,000) ama ka badan ama lacago kale ee u dhigma qaddarkaas oo ah lacago maxaalli ah ama kuwa shisheeye; ama

ii. In aan lasoo gudbin wax warbixin ah ama lasoo gudbiyay warbixin been abuur ah; ama

iii. Inuu jiro shaki laga qabo lacag-dhaqis, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqista (predicate offenses) ama maalgelin argagixiso.

(t) Hubisaa in macluumaadka la kaydiyay ay ku jiraan, ugu yaraan, tirada lacagta caddaanka ah ama waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(BNIs) oo ah Doolar, lacagta maxalliga ah ama lacago qalaad, ha ahadaan kuwa laga soo warbixiyay ama kuwo baaris lagu ogaaday, iyo sidoo kale macluumaadka ogolaanaya aqoonsiga shakhsiga lacagahaas sitay, ama shakhsiyaadka lalaxiriirinaayo, haddii ay ahaayeen kuwo aan lala socon. Macluumaadkan waa in lagu kaydiyaa nidaam elektaroonig ah kaas oo oggolaanaya in macluumaadkan

si wax ku ool ah, degdeg ah, oo walibana ammaan loola wadaago Xarunta Warbixinada Maaliyadda, hay'addaha kale ee awoodda uleh ee maxalliga ah ama hay'addaha awoodda uleh ee shisheeye.

10. Lacag kasta oo caddaan ah ama waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs)ee gacan ku hayntooda loola wareego si waafqsan farqadaha 6-aad iyo 7-aad ee Qodobkan waxa lagu wareejinayaa Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, kaas oo kaydinaaya lacagta caddaan ah ama waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) ee lala wareegay gacan ku hayntooda si waafaqsan Xeer-nidaamiye Sharciga Canshuuraha Furdooyinka, 2020, ee uu soo saaray Wasiirka Maaliyadda.

11. Haddii laga shakiyo lacag-dhaqis, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqista (predicate offenses) ama maalgelin argagixiso, ama aan lasoo gudbin wax warbixin ah ama lasoo gudbiyay warbixin been abuur ah, Waaxda Canshuuraha Furdooyinka waa inay hubisaa in lala wadaago Xarunta Warbixinada Maaliyadda dhammaan macluumaadka lagu xusay faqrad-hoosaadka (t) ee Qodobka 9-aad. Macluumaadkan waxa lagula wadaagaya Xarunta Warbixinada Maaliyadda sida ugu dhakhsaha badan oo aan ka dambaynayn afar iyo labaatan (24) saacadood gudahood. Macluumaadkaan waa in loo diraa qaab elegtaroonig ah si loo hubiyo in macluumaadku noqdo mid wax ku ool ah, degdeg loo helo, aminigiisuna suganyahay. Marka ay soo codsato, waa in muddo aan ka badnayn shan iyo toban (15) maalmood lagula wadaaga Xarunta Warbixinada Maaliyadda, nuqullada warbixinnada shakhsiyaadku bixiyeen (declarations) ee la xiriira lacagaha caddaan ah iyo waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs).

12. Macluumaadka ay ururiso Waaxda Canshuuraha Furdooyinka waa in sidoo kale lala wadaaga hay'adaha kale ee awoodda u leh, oo ay ku jiraan Hay'adda Socdaalka, Waaxaha kale ee Canshuuraha, hay'addaha dembi baarista iyo dacwad-oogista, iyo hay'adaha kale ee Dawladda ee ku habboon, marka ay soo codsadaan. Macluumaadkaan waa in loo diraa qaab elegtaroonig ah si loo hubiyo in macluumaadku noqdo mid wax ku ool ah, degdeg loo helo, aminigiisuna suganyahay.

13. Macluumaadka ay ururiso Waaxda Canshuuraha Furdooyinka waa in sidoo kale lala wadaaga hay'adaha kale ee awoodda u leh ee dalalka shisheeye, waafaqsan heshiisyada iskaashiga caalamiga ah ee dhaqangalka ah. Mar kasta oo ay suurtogal tahay, macluumaadkaan waa in loo diraa qaab elegtaroonig ah si loo hubiyo in macluumaadku noqdo mid wax ku ool ah, degdeg loo helo,

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

aminigiisuna suganyahay.

14. Haddii laba (2) sano ay ka soo wareegato markii hay'adda awoodda uleh ay gaartay go'aanka ah in lacagaha caddaanka ah iyo waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) ee lala wareegay gacan ku hayntooda aysan xiriir la lahayn wax dambi ah ama dambi-baaris socota, walibana lacagahaas caddaanka ah iyo waraaqadahaas maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) Dawladdu aysan ula wareegin si aan ka soo noqosho lahayn ama uusan soo sheegan shakhsigii xaqa u lahayd, Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka wuxuu ka codsan karaa maxkamadda awoodda u leh in si'aan ka soo noqosho lahayn loogu wareejiyo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,lacagahaas caddaanka ah iyo waraaqadahaas maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs). Cidda sida xaqa ah uleh lacagahaas caddaanka ah iyo waraaqadahaas maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) waa in la ogeysiiyaa maxkamaddu inta aysan go'aanka gaarin kahor, iyadoo fursad loo siinaayo inay iska difaacan codsiga ah in si'aan ka soonoqosho lahayn loogu wareejiyo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

15. Hay'addaha awoodda uleh waa inay soo saaraan habraacyada kale ee dheeraad ah oo lagama maarmaanka u ah hirgelinta faqraddaha Qodobkan. Hay'addaha awoodda uleh waa in sidoo kale hubiyaan in macluumaadka lagu uruuriyo nidaamka macluumaad uruurinta (declaration system) aysan sinaba u xadidin isku socodkalacagaha ganacsiga ee la xiriira is dhaafsiga badeecadaha iyo adeegyada ee u dhaxeeya wadamada iyo isku socodka xorta ah ee maalgashiyada.

16. Xad-gudubyada ama isku-dayga xad-gudubyada ka dhanka ah wajibaadka ka warbixinta ee lagu xusay faqradda 1-aad ee Qodobkaan waxa lagu ciqaabayaa ganaax aan ka yarayn shan boqol oo Doollar (USD $500) ama ilaa boqolkiiba saddex (3%) eeqiimaha lacagaha caddaanka ah ama waraaqadaha maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs). Haddii ay dhacdo in xadgudubku soo noqdo shan sano gudahood ka dib xadgudubkii hore, ciqaabta waa la labanlaabayaa. Warbixinta rasmiga ah oo ay soo saarto Waaxda Canshuuraha Furdooyinka ayaa noqonaysa cadaynta ka dhanka ah xadgudubyada iyo isku dayga xadgudubyada.

17. Shaqsiyaadka ka safriyaa xuduudaha dalka lacago caddaanka ah ama waraaqado maaliyadeed ee sarrifmi kara (BNIs) ee la xiriira lacag-dhaqis, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqista (predicate offenses) ama maalgelin argagixiso, waxay mutaysanayaan ciqaabaha lagu sheegay Qodobbada 2A, 3A iyo 3B, iyo talaabooyinka kale ee lagu xusay Qaybta 7-aad ee Sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 19-aad
Xawilaad iyo lacaga dirista

1. Marka ay samaynayaan xawilaad ama lacaga diris, Hay'addaha Maaliyaddu waa inay:

(b) Kaydiyaan magaca lacag diraha, iyadoo haddii lacagta la diraayo ay le'eg tahay ama ka badantahay kun Doolar (USD $1,000) ama ay tahay lacag kale ee u dhiganta lacagtaas, ay waajibtahay inay aqoonsadaan, waliba xaqiijiyaan aqoonsiga shakhsiga lacagta diraaya;

(t) Kaydiyaan lambarka koontada ee shakhsiga lacagta diraaya, iyadoo haddii shakhsiga lacagta diraaya uusan lahayn koonto, ay waajib ku tahay inay kaydiyaan lambarka gaarka ah ee tixraac macaamilka, kaas oo ogolaanaya in la raadraaci karo macaamilkaas;

(j) Kaydiyaan ciwaanka ama xogta goobta uu deganyahay shakhsiga lacagta diraaya, iyadoo haddii uusan lahayn ciiwan muujinaya deegaankiisa, ay waajibtahay in la kaydiyo lambarka aqoonsiga ama taariikhda iyo goobta uu ku dhashay shakhsiga lacagta diraaya;

(x) Kaydiyaan lambarka koontada ee shakhsiga lacagta loo diraayo, iyadoo haddii shakhsiga lacagta loo diraayo uusan lahayn koonto, ay waajib ku tahay inay kaydiyaan lambarka gaarka ah ee tixraac macaamilka, kaas oo ogolaanaya in la raadraaci karo macaamilkaas;

(kh) Ku daraan macluumaadka lagu qeexay farqad-hoosaadyada (b) ilaa (x) ee faqraddaan, fariinta ama foomka lacag-dirista ee la socda lacag dirista;

2. Marka ay timaado lacag dirista ama xawilaadda, iyadoon loo eegayn waajibaadka ku xusan faqradda 1-aad ee Qodobkaan, hay'addaha maaliyadda loogama baahna inay xaqiijiyaan aqoonsiga macmiilka ay la leedahay xiriir ganacsi oo markaas jira, iyadoo shuruudu tahay in ay ku qanacsantahay inay aqoonsatahay macmiilka, oo ay walibana soo xaqiijisay xogta aqoonsigiisa. Balse, haddii uu jiro tuhun laga qabo lacag-dhaqis ama maalgelin argagixiso ama haddii hay'adda maaliyadeed ay shaki ka qabto saxnaanta ama dhammaystirnaanta xogta aqoonsiga ee macmiilka ee hore loo helay, waa in hay'adda maaliyaddu dabaqdaa shuruudaha ku xusan faqradda 1-aad ee Qodobkaan.

3. Marka hay'ad maaliyadeed ay udhaxeeyso labo hay'ad maaliyadeed ee lacag isku diraaya (intermediary) waa inay:

(b) Hubisaa in ay kaydiso dhammaan macluumaadka la xiriira shakhsiga lacagta soo diraaya iyo midka loo diraayo ee la socda lacag dirista caalamiga ah;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(t) Kaydisaa, ugu yaraan shan (5) sano, diiwaannada dhammaan macluumaadka laga helay hay'adda maaliyadeed ee lacagta soo diraysa ama hay'ad kale ee maaliyadeed ee u dhaxeeysa laba hay'addood oo kale, haddii ay dhacdo in xaddidaad farsamo awgeed, hay'adda maxalliga ah ee maaliyadeed ee lacagta loo diraayo aysan kaydin karin macluumaadka shakhsiga lacagta soo diraayaa iyo mid loo diraayo ee la socda lacag dirista caalamiga ah;

(j) Qaadaa tillaabooyin macquul ah, kuwaas oo la jaanqaadi kara nidaamka lacag-bixinta ee elegtarooniga tooska ah (STP), si ay u aqoonsadaan, una qabtaan lacag dirista caalamiga ah ee aan lahayn macluumaadka loo baahanyahay ee ku aadan shakhsiga lacagta soo diraaya iyo midka lacagta loo diraayo; iyo

(x) Sameesataa, kuna dhaqantaa siyaasado iyo habraacyo loogo talagalay kahortaga khataraha, kuwaa oo saldhig u noqonaaya marka la go'aaminaayo in la fasixi karo, la diidi karo ama la joojin karo lacag diris aan lahayn macluumaadka loo baahanyahay ee shakhsiga lacagta soo diraaya iyo midka lacagta loo diraayo, iyo tallaabooyinka dabagalka ee ku habboon arrimahan.

3A. Marka hay'ad maaliyadeed ay tahay hay'adda lacagta lagu soo hagaajinaayo amaloo soo diraayo, waa inay:

(b) Qaadaa tillaabooyin macquul ah, oo ay ku jiraan dabagal lasameeyo dhacdada lacag dirista ah kadib, ama haddii ay suurtagal tahay, la socodka lacag diris kasta oo markaas dhacaysa, si ay u aqoonsadaan, una qabtaan lacag dirista caalamiga ah ee aan lahayn macluumaadka loo baahanyahay ee ku aadan shakhsiga lacagta soo diraaya iyo midka lacagta loo diraayo;

(t) Xaqiijisaa aqoonsiga shakhsiga lacagta loo soo diraayo, marka aqoonsiga shakhsigaas aan horay loo xaqiijin, haddii lacagata lasoo diraayo ay tahay ama

ka badantahay un Doolar (USD $1,000) ama ay tahay lacag kale oo aan Doolar ahayn ee u dhiganta lacagtaas. Hay'adda maaliyaddu waa inay kaydisaa, ugu yaraan shan (5) sano, dhammaan diiwaannada macluumaadka lahelay marka la xaqiijinaayay aqoonsiga shakhsiga iyo sidoo kale baaris kasta oo la xiriirta arrinkaan oo lasameeyay; iyo

(j) Sameesataa, kuna dhaqantaa siyaasado iyo habraacyo loogo talagalay kahortaga khataraha, kuwaa oo saldhig u noqonaaya marka la go'aaminaayo in la fasixi karo, la diidi karo ama la joojin karo lacag diris aan lahayn macluumaadka loo baahanyahay ee shakhsiga lacagta soo diraaya iyo midka lacagta loo diraayo, iyo tallaabooyinka dabagalka ee ku habboon arrimahan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

3B. Hay'adaha maaliyadda ee bixiya adeegyada xawilaada lacagaha ama aaladaha kale ee maaliyadeed ee sarifmi kara (MVTS) waa inay u hoggaansamaan shuruudaha ku habboon ee Qodobkan ku qoran, marka ay ka hawl galayaan dhammaan waddamada ay ka shaqeeyaan, ha ahaato dal ay si toos ah uga hawl galaan mise mid ay ku leeyihiin wakiil.

3C. Marka hay'add maaliyadeed ee bixisa adeegyada xawilaada lacagaha ama aaladaha kale ee maaliyadeed ee sarifmi kara (MVTS) ay xukunto labada waji ee kala ah lacag dirista iyo lacag bixinta, waa inay:

(b) Isticmaasha dhammaan macluumaadka ka imanaya labada waji ee lacag dirista iyo lacag bixinta ee adeegga lacag dirista, marka ay diyaarinayso ama go'aansanayso inay dirto warbixinta macaamilaad shaki-dhaliyay (STR); iyo

(t) Mar kasta oo ay soo gudbinayso warbixinta macaamilaad shaki-dhaliyay (STR), la wadaaagtaa warbixintaas dal kasta oo ay saamaysay xawilaadda ama lacag dirista warbixintu ku saabsantahay, iyadoo markasta sidoo kale la wadaagaysa Xarunta Warbixinada Maaliyadda macluumaadka ku saabsan arrinkan.

4. Xeer-nidaamiye lagu xoojinayo dhaqangelinta Qodobkan waa inay soo diyaarisaa Xarunta Warbixinada Maaliyadda iyo/ama Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh, waxaana loo soo saaraya si waafaqsan Qodobka 52-aad ee Sharcigan.

5. Faqrada (1) ilaa (3C) ee Qodobkan laguma dabaqaayo:

(b) Xawilaada iyo dirista lacagaha ee loo maro iyadoo la isticmaalayo kaararkaku xiran koontooyinka bankiyada (debit cards) ama kaararka deyn-qaadashadaee bankiyada (credit card), iyadoo shuruudu tahay in lambarrada kaararka lacagta laga diray ay ka muuqdaan macluumaadka ka dhalanayamacaalimaadka lacag dirista; ama

(t) Kala wareejinta lacagaha ay leeyihiin hay'addaha maaliyadda ee u dhaxaysahay'adahaas maaliyadda laftigooda.

6. Iyada oo aan loo eegayn faqrad-hoosadka (x) ee faqradda (3) iyo faqrad-hoosadka
(j) ee faqrada (3A) ee Qodobkan, marka hay'ad maaliyadeed iyadoo udhaxeeysa labo hay'ad maaliyadeed ee lacag isku soo diraaya (intermediary) ama iyadoo ah hay'adda
lacagta lagu soo hagaajinaayo ama loo soo diraayo, ay hesho lacag diris ama xawilaadlacageed oo aan lahayn xogta shakhsiga lacagta soo diraaya, waa in ay:

(b) Qaadaa tillaabooyinka ku habboon si'ay macluumaadka maqan ugu

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

hesho, ugana xaqiijiso hay'adda maaliyadeed ee lacagta soo diraysa ama hay'adda maaliyadeed ee lacagta loo soo diraayo; iyo

(u) Diidaa in ay fuliso lacag wareejinta ama lacag bixinta, haddi aanay ka helinhay'adda maaliyadda ee hayso macluumaad maqan ee lagu sheegay farqad- hoosadka (b) ee faqradaan.

Qodobka 19A
Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman ee la xiriirta Kororka Hubka Wax Gumaada (Proliferation)

1. Dhammaan shakhsiyaadka iyo hay'adahu waa in ay xayiraan lacagaha ama hantida kale ay leeyihiin shakhsiyaadka iyo hay'adaha ay asteeyeen hay'adaha iyo guddiyada Qaramada Midoobay (UN) si waafaqsan qaraar kasoo baxay Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay (UNSCRs) ee la xiriira kororka hubka wax gumaada (WMD proliferation) ee lagu qeexay xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan faqrad hoosaadka (b) ee faqradda 6-aad ee Qodobkaa.

2. Xayiraadda ku xusan farqada 1-aad ee Qodobkan taasoo looga baahanyahay inay dhaqangeliyaan shakhsiyaadka iyo hay'addaha, waa in lafuliyaa:

(b) Labaatan iyo afar (24) saacadood gudahood oo ka bilaabmaysa marka hay'adda ama guddiga Qaramada Midoobay uu asteeyay shakhsiga ama hay'adda, si waafaqsan qaraar kasoo baxay Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay (UNSCRs) ee la xiriira kororka hubka wax gumaada (WMD proliferation) ama isla markiiba, kadib markasta oo lasoo codsado ama la isku dayo macaamil la xiriira lacago ama hanti kale oo ay saarantahay xayiraad Qaramada Midoobay, iyadoo loo fiirinaayo hadba midka soo hormara oo laga warhelo.

(t) Iyadoon ogaysiis hore la siin shakhsiyaadka ama hay'addaha la asteeyay, wakiilada, asxaabta ama hawl-wadeennada shakhsiyaadka ama hay'addaha la asteeyay ama cid kasta oo kale taasoo u digi karta shakhsiyaadka ama hay'addaha la asteeyay.

3. Si loo fuliyo ujeedooyinka Qodobkaan iyo xeer-nidaamiyaasha la xriira, shakhsiyaadka iyo hay'addaha waxaa loo tixgelinayaa in la asteeyay marka la soo saaro war-saxaafadeedka Qaramada Midoobay oo si guud ugu dhawaaqaya go'aanka hay'ad ama guddi katirsan Qaramada Midoobay, kaas oo waaqfsan qaraar kasoobaxay Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay (UNSCRs) ee la xiriira kororka hubka wax gumaada (WMD proliferation).

4. Lacagaha ama hantida kale oo ay leeyihiin shakhsiyaadka iyo hay'addaha la asteeyay oo ay tahay in lagu fuliyo tallaabooyinka xayiraadda ah ee lagu

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

cayimay faqradda 1-aad ee Qodobkaan waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

(b) Dhammaan lacagaha ama hantida nuucyadeed kale ee uu leeyahay ama uu gacanta ku hayo shakhsiya ama hay'adda la asteeyay, kumana eka oo keliya lacagaha iyo hantida nuucyadeed kale ee lala xiriirin karo ficil, qorshe ama khatar gaar ah oo ku aadan kororka hubka wax gumaada.

(t) Lacagaha ama hantida nuucyadeeda kale oo ay si toos ah ama si dadban, oobuuxda ama wada jir ah ay u leeyihiin, ama ay gacanta ugu hayaan, shakhsiyaad ama hay'addo la asteeyay.

(j) Lacagaha ama hantida nuucyadeeda kale ee laga soo saaray lacagaha ama hantida nuucyadeeda kale oo ay si toos ah ama si dadban, oo buuxda amawada jir ah ay u leeyihiin, ama ay gacanta ugu hayaan, shakhsiyaad ama hay'addo la asteeyay.

(x) Lacagaha ama hantida nuucyadeeda kale oo ay leeyihiin shakhsiyaadka iyo hay'addaha wakiilka ka ah ama ku shaqeeya tilmaamaha shakhsiyaad ama hay'addaha la asteeyay.

5. Marka laga reebo xilliga iyo marka si cad Guddigu ugu oggolaado, dhammaan shakhsiyaadka iyo hay'addaha waxaa laga mamnuucay in, si toos ah ama dadban, si buuxda ama wadajir ah, ay siiyaan ama u oggolaadan wax lacag ah ama hanti nuucyadeeda kale, awood dhaqaale, ama adeegyo maaliyadeed ama adeegyo kale oola xiriira:

(b) Shakhsiyaadka ama hay'addaha lagu xusay faqradda 1-aad ee Qodobkaan ama cid kale oo shakhsiyaadkaas ama hay'addahaas usoo wareejinta karta faa'iido;

(t) Shakhsiyaadka ama hay'addaha, si toos ah ama dadban, ama si buuxda ama wada jir ah ay u leeyihiin, ama ay gacanta ugu hayaan shakhsiyaadka ama hay'addaha lagu xusay faqradda 1-aad ee Qodobkaan, ama cid kale oo shakhsiyaadkaas ama hay'addahaas usoo wareejinta karta faa'iido; ama

(j) Shakhsiyaadka iyo hay'addaha wakiilka ka ah ama ku shaqeeya tilmaamahashakhsiyaad ama hay'addaha lagu xusay faqradda 1-aad ee Qodobkaan amacid kale oo shakhsiyaadkaas ama hay'addahaas usoo wareejinta karta faa'iido.

6. Dhaqan-gelinta Qodobkan waxaa korjoogtaynaaya Guddiga, kaasoo mas'uul ka ah:

(b) Diyaarinta xeer-nidaamiyaasha xoojinaya dhaqangelinta Qodobkan kuwaaoo loo soo saarayo si waafaqsan Qodobka 52-aad ee Sharciga aan;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(t) La wadaagista hay'addaha warbixinnada, go'aamadda la xiriira asteeynta, wax ka beddelka liiska shakhsiyaadka la asteeyay iyo ka saarida shakhsiyaad ama hay'addo liiska shakhsiyaadka la asteeyay;

(j) Soo saarista hagayaal loogu talagalay hay'addaha warbixinnada oo ku aadan waajibaadkooda la xiriira fulinta faqradaha Qodobkan iyo xeer-nidaamiyaasha la xiriira;

(x) Oggolaanshaha arrimaha aan lagu dabaqeyn faqradaha Qodobkaan iyoxeer-nidaamiyaasha la xiriira iyo maarayntooda;

7. Marka la fulinayo faqradaha Qodobkan iyo xeer-nidaamiyaasha la xiriira, dhammaan shakhsiyaadka iyo hay'adahu waa in ay ixtiraamaan xuquuqda dhinacyada saddexaad ee daacadda ah, kuwaa oo u dhaqmaya si niyad wanaag ku dheehantahay.

QAYBTA 4-AAD
XARUNTA WARBIXINADA MAALIYADDA

Qodobka 20 -aad
Aasaasidda Xarunta Warbixinada Maaliyadda

1. Waxaa halkaan lagu aasaasay Xarunta Warbixinada Maaliyadda (oo loogu yeeri doono "Xarunta"), taaso noqonaysa hay'adda dhexe ee heer Qaran oo mas'uul ka ah uruurinta, dalbashada iyo falanqaynta warbixinnada loo soo gudbiyo si waafaqsan Qodobbada 14-aad iyo 18-aad ee Sharcigaan iyo macluumaadka iyo xogaha kale ee laxiriira lacag-dhaqidda, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqista (predicate offenses) iyo maalgelin argagixisada. Xaruntu waxay sidoo kale mas'uul katahay in sida ugu habboon loo faafiyo natiijooyinka kasoo baxa falanqaynta warbixinnadaas iyo macluumaadkaas.

2. Xarunta waxay noqonaysaa hay'add gooni u taagan (autonomous), oo si buuxda ugu madax-bannaan gudashada waajibaadkeeda shaqo, taasoo macnaheedu tahay inay ka madax-banaan tahay jihaynta, tilmaamaha ama korjoogtaynta shakhsi iyo hay'add kasta marka ay gudanayso waajibaadkeeda shaqo.

3. Xarunta waa in la siiyaa maaliyadda, shaqaalaha iyo taageerada farsamo ee lagama maarmaanka u ah waajibaadkeeda shaqo. Si taas loo gaaro:

(b) Miisaaniyadda Xarunta waxa soo diyaarinaaya Agaasimaheeda Guud, waxaana ansixinaaya Guddiga.

(t) Miisaaniyadda Guddigu ansixiyay sida ku cad faqrad-hoosaadka (b)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ee faqradan waa in la tixgeliyo marka la diyaarinaayo soo jeedinta miisaaniyad sanadeedka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

(j) Xarunta waxay awood u leedahay in ay deeqo ka hesho meelo kale, oo ay ku jirto taageero dhaqaale ee ka timaada deeq bixiyayaal caalami ah, kuwaas oo loo maaraynaayo si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

Qodobka 20A
Agaasimayaasha iyo shaqaalaha

1. Xarunta waxaa hoggaaminaaya Agaasime Guud oo ah mas'uulka ugu sarreeyaXarunta. Agaasimaha Guud ayaa u xilsaaran hoggaanka iyo maamulka Xarunta. Agaasimaha Guud waxa uu dejinaaya qaab dhismeedka Xarunta iyo waliba tirada iyo noocyada jagooyinka shaqaalaha ee Xarunta.

2. Xaruntu waxay yeelanaysaa Ku-xigeen Agaasime Guud oo u xilsaaran fulinta hawlaha uu Agaasimaha Guud u igmado, si loo hubiyo madax-bannaanida shaqo ee Xarunta. Ku-xigeenka Agaasimaha Guud waxa uu qabanayaa xilka Agaasimaha Guud marka Agaasimaha Guud uu ka maqan yahay ama aanu gudan karin hawlaha xafiiska.

3. Agaasimaha Guud waxaa magacaabaya Guddiga, ka dib marka uu soo jeediyo wasiirka maaliyadda halka Ku-xigeenka Agaasimaha Guud oo magacaabayo Agaasimaha Guud. Agaasimaha Guud ee la magacaabay wuxuu xilka haynayaa muddo shan (5) sanadood ah oo la cusbooneysiin karo.

4. Qof aan soo buuxin shuruudaha soo socda looma magacaabi karo xilka Agaasimaha Guud ama midka Ku-xigeenka Agaasimaha Guud ee Xarunta:

(b) Waa in aan si kama dambays ah loogu xukumin dembi;

(v) Waa in aysan jirin sababo loogu diidi karo inuu qabto Xafiis Dawladeed;iyo

(j) Waa in uu leeyahay tacliinta iyo waayo-aragnimada shaqo ee ku haboon.

5. Agaasimaha guud iyo Ku-xigeenka Agaasimaha Guud waa in:

(b) ay maraan dambi baaris iyo baaris dhanka sumcad wanaagga ah oo xilliyeeysan, si loo hubiyo inay soo buuxin karaan shuruudaha lagu cayimay faqrad-hoosaadka (b) ee faqrada 5-aad ee Qodobkaan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(t) aysan hayn xil siyaasadeed oo ay doorasho ku yimaadeen ama xil iyo xafiis kale oo ay lacag ku qaatan, kaas oo aan la jaanqaadi karin madax-banaanida ama sumcadda Xarunta.

6. Agaasimaha Guud xilka lagama qaadi karo inta lagu guda jiro muddada xilhayntiisa haddii aan lagu helin eedo si cad loogu helay oo ku xusan farqooyinka (b), (t) iyo (j) ee isla qodobkan. Sidoo kale waxaa Agaasimaha guud xilka looga qaadi karaa marka ay ku cadaadaan eedaymaha farqooyinka (b), (t) iyo (j), ee isla qodobkan isla markaana saddex meelood labo meel ee xubnaha Guddiga ay si codeyn ah iskugu racaan. Agaasimaha Guud ama masuul sare ee kasta ee Xarunta ku matalaaya Guddiga kama qayb qaadan doono codayntan. Xil kaqaadista ayaa lagu saleynaya mid ama ka badan oo ka mid ah sababahan soo socda:

(b) Waxa la go'aamiyay in aan lasoo buuxin mid kamid ah shuruudaha ku xusan faqrada 5-aad ee Qodobkaan;

(t) Waxa Agaasimaha Guud ama Ku-xigeenka Agaasimaha Guud lagu soo oogay eed fal-dembiyeed ama waxaa lagu xukumay fal-dembiyeed; ama

(j) Agaasimaha guud ama Ku-xigeenka Agaasimaha Guud waxa uu noqday mid aan u qalmin ama aan awoodin jagadaas sababo la xiriira:

i. Dhaqan xumo daran; ama
ii. Naafanimo jireed ama maskaxeed oo aan laga soo kaban karin.

7. Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeenka Agaasimaha Guud xilka lagama qaadi karo si waafaqsan faqrada 7-aad ee Qodobkan ilaa Agaasimaha Guud ama Ku-xigeenkaAgaasimaha Guud ama qareenkooda la siiyo fursad lagu dhageysto.

8. Shaqaalaha Xarunta waa shaqaale Dawladeed, waxaana lagu salaynayaa habka qorista, maamulka iyo maaraynta shaqaalaha Xarunta habraacyada Xeer-nidaamiye ay usoo diyaarisey Xaruntu si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkaan.

Qodobka 21-aad
Mas'uuliyadaha, awoodaha, iyo shaqooyinka

Marka laga yimaaddo fulinta dhammaan hawlaha lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadkeeda asaasiga ah ee lagu cadeeyay faqrada 1-aad ee Qodobka 20-aad ee Sharcigaan, Xaruntu waa inay:

1. Sameeysaa hawgallada falanqaynta ee maalinlaha ah (operational analysis

SHIHHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

iyadoo adeegsanaysa warbixinnada ay hayso iyo kuwa ay heli karto, oo ay ku jiraan macluumaadyada kale, si loo ogaado bartilmaameedyada gaarka ah ee loo baahanyahay, ama loo raadraaco falal gaar ah ama macaamilaad, kadibna loo go'aamiyo xiriirka ka dhexeeyn kara arrimaha lagu bartilmaameedsaday hawgallada falanqaynta iyo lacago ama hanti kale oo suurtagal ah inay kasoo xarootay fal dembiyeed, lacag dhaqis ama maalgelin argagixiso.

2. Sameeysaa falanqeynta istaraatiijiga ah iyadoo adeegsanaysa warbixinnada ay hayso iyo kuwa ay heli karto, oo ay ku jiraan macluumaadyada kale, si ay ula socoto, u baarto, walibana u aqoonsato isbeddellada, noocyada, khataraha, qaababka, iyo horumarada la xiriira lacag dhaqista iyo maalgelinta argagixisada.

3. In ay la wadaagto Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud macluumaadka iyo natiijooyinka ka dhashaa falanqaynteeda istaraatiijiga ah iyo midda maalinlaha ahee lagu xusay faqrada 1-aad iyo 2-aad ee Qodobkan, marka ay jiraan sababo macquul ah oo keeni kara in laga shakiyo jiritaanka falal la xiriira lacag-dhaqis, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqista (predicate offenses) ama maalgelinta argagixiso.

4. La wadaagto falanqaynteeda ama macluumaadka ay hayso hay'addaha sirdoonka qaranka iyo kuwa sharci fulinta, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka, hay'addaha kale ee Dowladda ee awoodda uleh, hay'addaha sirdoonka maaliyadda ee shisheeye, kadib marka ay soo codsadaan ama marka Xaruntu go'aansato. Macluumaadka iyo natiijooyinka falaqaynta ee la diraayo waa inuu yahay mid u suurta gelinaaya hay'adda Dowladda ee warbixinta loo gudbinaayo inay gudato waajibaadkeea ku cad Sharcigaan. Waajibaadka macluumaad- wadaagista ee ku xusan faqradaan waa in loo fuliyaa si waafaqsan shuruudaha soo socda:

   (b) Xaruntu waxay la wadaagi kartaa macluumaadka ay hayso hay'addaha sirdoonka qaranka iyo kuwa sharci fulinta, haddii macluumaadku la xiriiro arrimo amniga ama tuhun ku addan fal-dembiyeed.

   (t) Xaruntu waxa ay la wadaagi kartaa macluumaadka ay haysto hay'addaha sirdoonka maaliyadda ee dalalka shisheeye, iyadoo u hoggaansameeysa mabaadi'da sir qarsoodiga iyo isku tiirsanaanta (reciprocity), iyadoo aysan qasab ahayn inuu jiro heshiis is-afgarad (MOU) ee udhaxeeya Xaruntu iyo hay'adda shisheeye.

   (j) Iyada oo aan la saamaynayn farqad-hoosaadka (t) ee faqradaan, xaruntu waxay awood u leedahay inay si madaxbanaan ula gasho heshiisyo is-afgarad ah (MOUs) mar kasta oo loo baahdo ama uu sahlaayo hawlaha macluumaadka wadaagista ee ka dhaxeeya Xaruntu

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

iyo hay'ddaha awoodda uleh ee Dowladda,Hay'addaha Dowladda ee Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh ama hay'addaha sirdoonka maaliyadda ee shisheeye.

5. Dhisto, oo ay hawlgeliso nidaam sirta dhawri kara oo amnigiisu suganyahay, kaas oo ay u adeegsanayso ku kaydinta warbixinnada iyo macluumadyada kale oo ay uhesho si waafaqsan Sharcigaan. Marka ay hay'addaha kale la wadaageysto macluumaadka iyo natiijooyinka falanqaynteeda, Xaruntu waa inay isticmaasha nidaam amnigiisu suganyahay, la ilaaliyo oo gaar u ah hawlahaan macluumaad wadaagista.

6. Siiso hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh iyo hay'addaha warbixinnada (reporting entities), tilmaamo iyo macluumaadka kale ee daruuriga ah oo ku aadan khataraha maxalliga ah ee la xiriira lacag dhaqista iyo maalgelinta argagixisada, caalamadaha khatarta (risk indicators) ee lagu garto lacag dhaqista iyo maalgelinta argagixisada, waajibaadyada gaarka ee warbixin soo dirista, iyo arrimaha kale ee lagu xoojinaayo wax ku oolnimada nidaamyada maxalliga ah ee ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada.

7. Siiso hay'addaha warbixnnada (reporting entities) jawaab celin waqtigeedu habboonyahay oo ku aadan hab-dhaqankooda warbixin soo dirista iyo sidoo kale tayada iyo faa'iidada warbixinnada ay soo direen. Xaruntu waxay sidoo kale la socodsiin kartaa hay'addaha warbixnnada (reporting entities), marka ay habbontahay, tallaabooyinka dheeriga ah oo Xarunta qaaday ee la xiriira warbixinnadooda.

8. Siiso Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh, macluumaad ku aadan hab-dhaqanka warbixin soo dirista ee hay'addaha warbixinnada (reporting entities) iyo sidoo kale tayada iyo faa'iidada laga gelay warbixinnada ay soo direen.

9. Ku matashaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, shirarka laba geesoodka ah,kuwa heer gobol, iyo heer caalami, iyo ururada diiradda saara la dagaallanka lacag dhaqista iyo/ama maalgelinta argagixisada.

10. U qabataa Guddiga shaqooyinka xoghaynimada iyo adeegyada kale ee aas-aasiga ee Guddigu u baahanyahay.

Qodobka 21A
Awoodaha gaarka ah ee Xarunta

1. Xaruntu waxay ka dalban kartaa hay'addaha warbixinnada (reporting entities) dhammaan macluumaadka iyo dukumentiyada laga rabo inay uruuriyaan, walibana kaydiyaan. Marka hawshaan la fulinayo:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(b) Hay'adaha warbixinnadu (reporting entities) waa inay Xarunta kula wadaagaan muddada loo cayimay gudaheed, dhammaan macluumaadka iyo dukumeentiyada ay soo dalbato.

(t) Bixinta macluumaadka iyo dukumeentiyada ay Xaruntu soo dalbatay si waafaqsan faqrad-hoosaadka (b) ee faqradan looma qaadaanayo inay xad- gudub kutahay sir dhawrista ama waajibaadyada kale ee la xiriira xogta dhawrista.

(j) Hay'adaha warbixinnada (reporting entities) waa inay u hoggaansamaan dhammaan tilmaamaha Xaruntu soo saartu ee ku saabsan sida macluumaadka iyo dukumeentiga lasoo dalbaday loola wadaagaayo Xarunta.

2. Xaruntu waxay ka codsan kartaa hay'addaha awoodda uleh ee Dowladda, wixii macluumaad ama dukumintiyo maaliyadeed, maamul, ama sharci fulin oo ay u baahantahay si'ay u fuliso dhammaan hawlaha lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadkeeda asaasiga ah ee ku xusan faqrada 1-aad ee Qodobka 2-aad ee Sharcigaan iyo sidoo kale dhammaan hawlaha lagama maarmaanka u ah fulinta hawlaheeda ku xusan Qodobka 21-aad ee Sharcigaan. Marka hawshaan la fulinayo:

(b) Hay'adaha awoodda uleh ee Dowladda waa inay Xarunta kula wadaagaan muddada loo cayimay gudaheed, dhammaan macluumaadka iyodukumeentiyada ay soo codsato.

(t) Bixinta macluumaadka iyo dukumeentiyada ay Xaruntu soo dalbatay si waafaqsan faqrad-hoosaadka (b) ee faqradan looma qaadaanayo inay xad- gudub kutahay sir dhawrista ama waajibaadyada kale ee la xiriira xogta dhawrista.

3. Xaruntu waxa ay ku amri kartaa hay'ad warbixineed (reporting entity) inay joojisyo,muddo aan ka badnayn afartan iyo siddeed (48) saacadood fulinta dhammaan macaalimaad gaar ah ama macaamilaadyo loo sameeynaayo macaamiil cayiman, haddii ay hayso sababo macquul ah oo la rumaysan karo, kuwaas oo ku salaysan macluumaad laga dhex-helay dadwaynaha ama ay bixisay hay'ad warbixineed (reporting entity), hay'add Dowladeed ee awood uleh ama hay'ad awood uleh ee dowlad shisheeye, kuwaas oo muujinaya in macaamilaad ama macaamilaadyo gaar ah:

(b) Ay ku lug leeyihiin lacag ama hantid kale ee kasoo xarootay fal dambiyeed; ama

(t) Ay yihiin kuwo la xiriira lacago dhaqis, dambiyada asalka ah ee lacagta soosaara ee saldhiga u ah lacag-dhaqista (predicate offences) ama maalgelin argagixiso.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

4. Xaruntu waa inay si degdeg ah u ogaysiisaa Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Maxkamadda Gobolka ee awoodda u leh marka ay soo saarto amarka ku xusanfaqrada 3-aad ee Qodobkan.

Qodobka 22-aad
Sir dhawrista iyo halbeedgyada xirfad wanaagga

1. Haddii Sharcigaan uusan meel kale ku oggolaan, dhammaan hawl-wadeennada Xarunta, oo ay ku jiraan Agaasimaha Guud, Ku-xigeenka Agaasimaha Guud, saraakiisha, shaqaalaha, wakiillada, ama dadka kale ee jagooyinka ka haaya Xarunta waa inay haystan cadayn muujinaysa heerka sir helista (security clearance levels), waxaana looga baahan yahay inay xafidaan macluumaad kasta oo ay helaan inta ay ku guda jiraan gudashada waajibaadkooda shaqo. Dhammaan hawl-wadeennada korewaxaa sidoo kale looga baahanyahay inay xafidaan macluumaadkaas xataa marka ay joojiyaan shaqadaas ay Xarunta u haaya. Si loo dhaqan geliyo faqradaan:

(b) Agaasimaha Guud, Ku-xigeenka Agaasimaha Guud, saraakiisha, shaqaalaha, wakiillada, ama dadka kale ee jagooyinka ka haaya Xarunta oo si sharci-darro ah u faafiya ama cid kale ula wadaagga macluumaad ay helaan inta ay ku guda jiraan gudashada waajibaadkooda shaqo waxaa loo ciqaabaayaa si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo sharuucda kale ee dhaqan galka ah ee habboon.

(t) Agaasimaha Guud, Ku-xigeenka Agaasimaha Guud, saraakiisha, shaqaalaha, wakiillada, ama dadka kale ee jagooyinka ka haaya Xarunta waain la siiyaa tababarada ku haboon, si ay u fahmaan mas'uuliyadda ka saaran maaraynta iyo habka wadaagista macluumaadka xasaasiga iyo kuwa sirta ah.

2. Macluumaadka Xarunta hesho inta ay ku guda jirto gudashada waajibaadkeeda shaqo looma isticmaali karo ujeedooyin aan ka ahyn kuwo lagu sheegay Sharcigaan, iyadoo macluumaadkaas lala wadaagi karo oo keliya hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh marka ay habboontahay, si loo baaro, walibana looga hortago lacag dhaqis, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqista (predicate offenses) ama maalgelin argagixiso.

3. Xaruntu waa inay dhaqan-gelisaa hagayaal iyo habraacyo shaqo oo gudaha ah, ee uu kujiro Xeerka Anshaxa, si ay u xaqiijiso heerar sare ee dhanka anshax wanaagga, sumcad wanaagga, iyo xirfad wanaagga, walibana looga hortaggo loona yareeyo danaha is diidan iyo musuqmaasuqa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

QAYBTA 4 (A) KORMEERKA

Qodobka 22A
Mamnuucista bankiyada aan lahayn meel cayiman oo loogu soo hagaago (shellbanks)

Waxaa ka mamnuuc Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya abuurista ama sii wadida hawlgallada bankiyada aan lahayn meel ama maamul cayiman oo loogu soo hagagi karo (shell banks).

Qodobka 23-aad
Kormeerka ku aadan sida hay'addaha warbixinnadu (reporting entities) uguhoggaansanyihiin Sharcigan

1. Mas'uuliyadda dabagalka iyo kormeerka ee lagu hubinaayo sida hay'addaha warbixinnadu (reporting entities) ugu hoggaansanyihiin shuruudaha iyo waajibaadyada ku xusan Sharcigan waxaa iska leh hay'addaha dabagalka iyo kormeerka ee lagu cayimay xeer-nidaamiyaasha loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 52-aad ee Sharcigan.

2. Dhammaan hay'addaha dabagalka iyo kormeerka waa in ay u fuliyaan hawlaha kormeerka hab ku salaysan heerka khatarta ee markaa jira (risk-based approach). Inta jeer ee kormeerka la sameeynaayo, meesha diirada lagu saarayo iyo baaxaddiisawaxaa lagu salaynaya:

(b) Khataraha lacag dhaqista iyo maalgelinta argagixisada oo ay wajihi karto hay'ad warbixineed (reporting entity), iyo siyaasadaha, habraacyada iyo nidaamyada korjoogtayn ee gudaha oo ay leedahay, oo lagu ogaaday qiimayn ay sameeysay hay'adda dabagalka iyo kormeerka ee awoodda uleh, oo laxiriirta khataraha lacag-dhaqista iyo maalgelinta argagixisada oo ay wajihi karto hay'addaas warbixineed (reporting entity);

(t) Khataraha lacag dhaqista iyo maalgelinta argagixisada ee kajira hay'addaha warbixinnada (reporting enties) ee gaar ah iyo khataraha kadhex jira Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo

(j) Astaamaha hay'addaha warbixinnada (reporting enties) ee ka hadl gala ganacsiyo gaar ah, gaar ahaan nuucyada kala duwan iyo tirada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

hay'addaha warbixinnada (reporting enties) iyo awooddaha lagu dhex siiyay hay'addahaas nidaamka ladagaalanka lacag dhaqista iyo maalgelinta argagixisada oo kusaleysan heerarka khataraha jira (risk-based approach).

Qodobka 23A
Mas'uuliyaddaha Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka

Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh waa inay:

1. Diyaariyan xeer-nidaamiyaasha loogu talagalay in lagu nidaamiyo hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ee hoos yimaada koormeerkooda, iyo xoojinta
dhaqangelinta Sharcigan. Xeer-nidaamiyaashan waxaa loo soo saaraya si waafaqsanQodobka 52-aad ee Sharcigan;

2. La socdaan, kormeeraan, walibana ay xaqiijiyaan sida hay'addaha warbixinnadu (reporting entities) ugu hoggaansanyihiin shuruudaha iyo waajibaadyada saaran ee ku xusan Sharcigan, xeer-nidaamiyaasha loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan iyo sharci kasta uu dalku lee yahay oo looga hortagaayo lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada;

3. Ka qaadan tillaabooyinka ku habboon hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ee ku xad-guduba shuruudaha iyo waajibaadyada saaran ee ku xusan Sharcigan, xeer- nidaamiyaasha loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan iyo sharci kasta uu dalku lee yahay oo looga hortagaayo lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada. Waa in tillaabooyinka looga qaada hay'addaha warbixinnada (reporting entities) si waafaqsan Sharcigan, xeer-nidaamiyaasha loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan iyo sharci kasta uu dalku lee yahay oo looga hortagaayo lacag- dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada.

4. Iskaashi la yeeshaan, walibana macluumaadkaa isla wadagaan hay'addaha kale ee dabagalka iyo kormeerka ee awoodda uleh, hay'addaha kale ee Dowladda ee maxalliga ah iyo hay'addaha dowladaha shisheeye, oo ay kujiraan hay'addaha dhigooda ah ee dowladaha shisheeye;

5. Soo saaraan hagayaal, walibana siiyan jawaab celinnada ay u baahanyihiin hay'addaha warbixinnada (reporting entities) si loogu garab siiyo hay'addaha warbixinnada (reporting entities) dhaqan-gelinta Sharcigan, xeer-nidaamiyaasha loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, iyo sharci kasta uu dalku lee yahay oo looga hortagaayo lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada. Hagayaashaas waa in sidoo kale ay ka taageeran hay'addahaas fahamkooda ku aadan khataraha la xiriira lacag dhaqista iyo maalgelinta

DAMMUUNIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

argagixisada oo ay wajihi karaan, sida loo baaro khatarahaas iyo sida loo soo diro warbixinta macaamilaad shaki-dhaliyay (STR); iyo

6. Si iskood ah, walibana degdeg ah, ugu soo wargeliyaan Xarunta Warbixinada Maaliyadda, xadgudubyada ay kusoo ogaadeen hawlahooda la xiriira kormeerada hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ee ka dhanka ah waajibaadka kasoo warbixinta macaamilaadka shakiga dhaliya iyo macaamilaadyada kale, si waafaqsan Qodobka 14-aad ee Sharcigan.

Qodobka 23B
Awoodaha Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka

1. Iyada oo aan waxba laga beddelayn mas'uuliyadaha lagu siiyay shuruucda kale, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh, si ay u fuliyaan mas'uuliyadahooda ku xusan Qodobka 23A ee Sharcigan, waxay xaq u leeyihiin:

(b) Ka helaan hay'addaha warbixinnada (reporting entities), wakqtiga lo cayimay gudahiis, macluumaad iyo dukuminti kasta oo ay uga codsadaan si waafaqsan hawlahooda kormeerka iyo dabagalka;

(t) Marin buuxa u helaan xog kasta oo ay haayan hay'addaha warbixinnada (reporting entities) kuwaa oo hoos yimaada awoodahooda dabagalka iyo kormeerka, taasoo lagama maarmaan u ah gudashada mas'uuliyadahooda ku xusan qodobka, sida buugaagta, diiwaannada, dukumentiyada, iyo nidaayada kale ee wax lagu kaydiyo nuuc walba oo ay yihiin, oo ay kujiraan kuwa elegtarooniga ama dhijitaalka ah, oo ay sidoo kale ka mid tahay xogta ku jirta gacanta ama hoos timaada gacan ku haynta maamule, agaasime, agaasime kormeer, hanti-dhawrka banaanka ah, ama shaqaale ka tirsan hay'adda warbixinnada (reporting entity) ama ku jirta gacan ku haynta garab saddexaad. Marin siinta loogu talagalay kormeerka waxaa kamid ah in ay nuqullo ka qaadan karaan xogta; iyo

(j) Marin buuxa u helaan nidaamkasta ee tignoolajiyadeed oo lagu kaydiyo macluumaadka ama nidaamyada aan ku tiirsanayn tignoolajiyadda (manual systems) oo ay hadda isticmaalan ama ay horay u isticmaaleen hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ee hoos yimaada awoodahooda kormeerka iyo dabagalka, si ay ugu hoggaansamaan wajibaadkooda ku xusan Sharcigan, xeer-nidaamiyaasha loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, iyo sharci ama xeer-nidaamiye kasta oo loogu talagalay ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la- dagaalanka maalgelinta argagixisada.

2. Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh waxay awoodda uleyihiin inay macluumaad ka helaan, kuna sameeyaan kormeer xarumaha ay

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

leeyihiin hay'adaha warbixinnada (reporting entities) ee hoos yimaada awoodahooda kormeerka iyo dabagalka. Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerku waxay kormeeri karaan xarumaha hay'adaha warbixinnada (reporting entities), ogeesiis muddo **1maalin ah** iyo inta jeer oo ay u arkaan daruuri.

3. Si Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh u gutaan mas'uuliyadahooda ku xusan Qodobka 23A ee Sharcigan, hay'ad kasta ee warbixineed (reporting entity) waxaa waajib ku ah in ay si daacad ah ula shaqeyso Hay'addahaas Dabagalka iyo Kormeerka.

4. Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh waxay siin karaan awaamiir qoraal ah mid kasta oo ka mid hay'adaha warbixinnada (reporting entities) ee hoos yimaada, taasoo aan u hoggaansamin waajibaadkeeda ku xusan Sharcigan, xeer-nidaamiyaasha loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, iyo sharci kasta uu dalku lee yahay oo looga hortagaayo lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada. Awaamiirta ay soo saareen Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka waxay ka dalban karaan hay'addaha warbixinnada (reporting entities) inayku fuliyaan, waqti macquul ah gudahiis, tallaabooyin cayiman oo ku aadan arrimolagu sheegay awaamiirta. Awaamiirta noocaan ah waxaa sidoo kale la siin karaa hay'adda warbixinnada (reporting entity), saraakiisheeda, maareeye-yaasheeda iyo/ama agaasimayaasheeda sare.

5. Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh waxay ku soo rogi karaan ganaax lacageed oo nuuciisu yahay mid maamul hay'addaha warbixinnada (reporting enties) ee aan gudan waajibaadkooda ku xusan Sharcigan ama xeer-nidaamiyaashaloo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, ama kuwa ku xusan sharci sharci kasta uu dalku lee yahay oo looga hortagaayo lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelintaargagixisada ama aan gudan waajibaadkooda ku xusan awaamiirta loo soo saaray si waafaqsan faqrada 4-aad ee Qodobkaan ama aan u gudan waajibaadkooda si waafaqsan waqtigii loo cayimay.

6. Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh waxay ka qaadi karaan, halama in ka badan oo ka mid ah tallaabooyinkan soo socda, oo ay wehliyaan ama aysan wehlin tallaabooyinka ku xusan faqrada 4-aad iyo 5-aad ee Qodobkan, oo ka dhan ah hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ee aan gudan waajibaadkooda ku xusan Sharcigan ama xeer-nidaamiyaasha loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, ama kuwa ku xusan sharci kasta uu dalku lee yahay oo looga hortagaayo lacag- dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada ama aan gudan waajibaadkooda ku xusan awaamiirta loo soo saaray si waafaqsan faqrada 4-aad ee Qodobkaan ama aan u gudan waajibaadkooda si waafaqsan waqtigii loo cayimay:

(b) Wax siin karaan digniin qoraal ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(t) Waxa ku amri karaan so gudbinta warbixinno.

(j) Waxay kormeeri karaan xarumaha, walibana geli karaan nidaamyada hay'addaha warbixinnada (reporting entities). Waxay sidoo kale korjoogtayn karaan hawlgallada hay'addaha warbixinnada, iyagoo isticmaalaya korjoogayaal ay Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerku magacaabeen, kuwaas oo kharashka ku baxaaya ay dhiiban hay'addaha warbixinnada (reporting entities).

(x) Waxay xaddidi karaan shatiyada ama ama hawlaha ganaci ee hay'addaha warbixinnada (reporting entities), oo ay kamid tahay xaddidaad ka dhan ah badeecaddaha ama adeegyada ay iibiso, gaar ahaan nuccyada, tirada, ama qiimaha macaamilaadka ay hay'addu sameeyn karto. Waxay sidoo kale xaddidi karaan nuucyada iyo tirada macaamiisha ay hay'adduhu adeegga siin karaa ama gobollada dalka ama wadamada kale oo ka hawlgali karto, ama ay ka sameeyn karto ama ka fududeeyn karto macaamilaad.

(kh) Waxay joojin karaan isticmaalka shatiyada hay'addaha warbixinnada ama,haddii Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka aysan ahayn hay'adda shatiyada bixisay, waxay ka codsan karaan hay'adda shatiyada bixisay inay joojiso isticmaalkooda.

(d) Waxay kala noqon karaan shatiyada hay'addaha warbixinnada ama, haddii Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka aysan ahayn hay'adda shatiyada bixisay, waxay ka codsan karaan hay'adda shatiyada bixisay inay kala noqoto shattiyada.

(r) Waxay ka codsan karaan Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud inuu ku soo oogo dacwad ciqaabeed.

QAYBTA 4 (B)
HUFNAANTA LOOGA BAAHANYAHAY SHAKHSIYAADKA QAANUUNIGA AH IYO XIRIIRADA SHARCIGA KU DHISAN

Qodobka 23C
Hufnaanta looga baahanyahay shakhsiyaadka qaanuuniga ah

1. Dhammaan shakhsiyaadka qaanuuniga ah ee lagu abuuray, kana hawlgala Soomaaliya:

(b) Waa inay keenaan, walibana diiwaan-geliyaan macluumaadkaan

DAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

aasaasiga ah ee soo socda, marka la aas-aasaayo ama la diiwaangelinaayo, marka dib loo cusboonaysiinayo diiwaangelinta sannadlaha ah ama markasta oo isbeddel lagu sameeyo macluumaadkooda aasaasiga ah:

i. magaca shirkadda;
ii. shahaadada shirkadda ee diiwaangelinta
iii. qaabka dhismaheeda sharci iyo xaaladda ay ku sugantahay;
iv. cinwaanka goobta u ku yaalo xafiiska u diiwaangashan;
v. xeerka dhismaha shirkadda;
vi. liiska agaasimayaasha;
vii. Lambarka aqoonsiga canshuur-bixiyaha
viii. diiwaanka saamilayda ama xubnaha, oo ay ku jiraan magacyada saamilayda iyo xubnaha, tirada saamiyada uu haysto saamile kasta iyo nuucyada saamiyada oo muujinaya nooca ay tahay xuquuqda cod bixinta ee la xiriirta;

(t) Waa inay hubiyaan in xogtooda aasaasiga ah ay ahaato mid sax ah oo xilli kasta dhammeystiran, walibana ku wargeliyaan Diiwaangeliyaha Shirkadaha isbeddel kasta oo lagu sameeyo macluumaadkan, sida ugu dhakhsaha badan uguna suurtogalsan, ama hal (1) bil gudaheed oo ka bilaabmaysa taariikhda isbeddelku dhacay. Haddii ay suurtagal tahay, dhammaan xogtaan waa in loo soo gudbiyaa qaab elektaroonik ah;

(j) Waa inay ku kaydiyaan macluumaadka ku xusan faqrad-hoosaadka (b) ee faqradaan, gudaha Dalka, xafiiska u diiwaangashan shakhsiga qaanuuniga ah ama goobta uu cayimo Diiwaangeliyaha Shirkaddaha.Shakhsi qaanuuni ah wuxuu ku kaydin karaa oo kaliya diiwaanka saamilaydiisa ama xubnahiisa Dalka dibadiisa, haddii lasoo buuxiyo labadan shuruudood ee soo socda:

i. Macluumaadka milkiilaha sida dhabta uleh faa'iidada waxaa lagu hayaa Dalka gudihiisa, si waafaqsan farqada 22-aad ee Qodobkan; iyo
ii. Shakhsiga qaanuuniga wuxuu si degdeg ah ku keeni karaa macluumaadkaan marka laga soo dalbado;

(x) Waa inay haayan macluumaad sax ah oo dhammeystiran oo ku saabsan milkiilayaasha sida saxda uleh faa'iidadooda, walibana ku kaydiyaan macluumaadkan diiwaanka milkiilayaasha sida saxda uleh faa'iidada kaas oo yaala xafiiska u diiwaangashan shakhsiga qaanuuniga ah ama goobta uu
cayimo Diiwaangeliyaha Shirkaddaha oo kutaala Soomaaliya. Shakhsiyaadka qaanuuniga waa inay sidoo kale hubiyaan in marka macluumaadka milkiilaha sida saxda ah uleh faa'iidaa uu yahay ugu danbeeyay oo dhammeystiran, walibna sax ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(kh) Waa inay la wadagaan Diiwangeliyaha Shirkaddaha, marka la aas-aasaayo ama la diiwaangelinaayo, marka dib loo cusboonaysiinayo diiwaangelinta sannadlaha ah ama markasta oo isbeddel lagu sameeyo macluumaadkooda aasaasiga ah, macluumaadkii ugu danbeeyay, oo dhammeystiran, walibana sax ah oo ku saabsaan shakhsiga sida dhabta ah uleh faa'iidada, iyagoo raacaya habka uu tilmaamay Diiwangeliyaha Shirkaddaha. Isbeddelada lagu sameeyo macluumaadka ku saabsan shakhsiga sida dhabta ah uleh faa'iidada waa in lala wadaaga Diiwangeliyaha Shirkadaha, sida ugu dhakhsaha badan uguna suurtogalsan, ama hal (1) bil gudaheed oo ka bilaabmaysa taariikhda isbeddelku dhacay. Haddii ay suurtagal tahay, dhammaan xogtaan waa in loo soo gudbiyaa qaab elektaroonik ah;

(d) Waa inay si buuxda ula shaqeeyaan hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh si loo ogaado milkiilayaasha sida dhabta ah uleh faa'iidada, iyada oo la hubinayo:

i. Shakhsiga dabiiciga ah ee degan Dalka ee shakhsiga qaanuuniga ahi wakiishay, kaas oo hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh kala xisaabtami karaan bixintinta dhammaan macuulmaad ku saabsan shakhsiga qaanuuniga ah iyo macluumadka ku aadan shakhsiga sida dhabta ah uleh faa'iidada iyo wixii kale oo wadashaqayn ah oo hay'addaha Dowladdu u baahdaan; ama

ii. Ganacsiyada iyo xirfadaha la-cayimay ee aan fulin hawlaha maaliyadeed (DNFBPs) ee degan Dalka ee shakhsiga qaanuuniga ahi wakiishay, kuwaas oo hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh kala xisaabtami karaan bixintinta dhammaan macuulmaad ku saabsan shakhsiga qaanuuniga ah iyo macluumadka ku aadan shakhsiga sida dhabta ah faa'iidada uleh iyo wixii kale oo wadashaqayn ah oo hay'addaha Dowladdu u baahdaan.

(r) Waa inay marka laga soo dalbado, la wadaagaan waqtiga loo cayimay gudahiis, hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh, macluumaadkii ugu danbeeyay, oo dhammeystiran, waliban saxan oo ku saabsan shakhsiga sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial ownership), iyagoo raacaya habka loo tilmaamay;

(s) Waa inay la wadaagan macluumaadkii ugu danbeeyay, oo dhammeystiran, waliban saxan oo ku saabsan shakhsiga sida dhabta ah uleh faa'iidada shakhsiga qaanuuniga ah (beneficial ownership) marka ay xiriir ganaci la abuuranayan hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ee waajibaadku saaranyahay ama marka la sameeysanayaan macaamilaad aan joogta ahayn. Shakhsiyaadka qaanuuniga ah waxaa

JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

sidoo kale looga baahanyahay inay kula wadaagan hal (1) bil gudaheed hay'addahaas isbeddel kasta ee ku yimaada macluumaadka shakhsiga sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial ownership), iyagoo si gaar ah u tilmaamaya xilliga isbeddelku dhacay; iyo

(sh) Waxay mutaysanayaan ciqaab maamul oo u dhaxeeysa shan boqol oo Doolar (USD$500) ilaa shan iyo toban kun oo doolar (USD $15,000), haddi ayu hogaansami waayaan shuruudaha ku xusan inta udhaxeeysa faqad- hoosaadka (b) ilaa (s) ee faqradda 1-aad ee Qodobkan.

2. Diiwaangeliyaha Shirkaddaha waa inuu hubiyaa in macluumaadka aasaasiga ah eeku xusan faqradda 1(b) si guud loo heli karo.

3. Diiwaangeliyaha Shirkaddaha waa in:

(b) Uu dhisaa diiwaanka milkiilayaasha sida dhabta ah faa'iidada u leh (register of beneficial owners), kadibna ururiyaa, walibana kaydiyaa macluumaadkii ugu danbeeyay, saxda ahaa oo dhammeystiran oo ku saabsaanshakhsiyaadka sida dhabta uleh faa'iidada (beneficial owners) shakhsiga qaanuuniga ah iyo haykalka maamulka ee dhammaan shakhsiyaadka qaanuuniga ah aa lagu abuuray ama ka hawlgalla Soomaaliya. Waa inuu sidoo kale hubiyaa in macluumaadkan lagu kaydiyo diiwaanka macluumaadka ee shakhsiyaadka sida dhabta uleh faa'iidada (register of beneficial owners) ee uu dhisay;

(t) Inuu dhisaa nidaam xog-kaydin oo gaar ah, sii loo ilaaliyo diiwaanka lagu dhisay faqrad-hoosaadka (b) ee faqradaan. Waa inuu sidoo kale dejiyaa xeer- hosaadyada iyo habraacyada hagaya amniga iyo dhawrista macluumaadka, oo ay ka mid yihiin habraacyo loogu talagalay maareynta, kaydinta, ilaalinta iyo habka wadaagista macluumaadka lagu kaydiyay nidaamka xog-kaydinta;

(j) Dib u eegis waqtiyeeysan ku sameeyaa, walibana xaqiijiya macluulaadka ku saabsan shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial ownership information) ee ku kaydsan nidaamka keydinta macluumaadka ee loo dhisay si waafaqsan faqrad-hosaadka (t) ee faqradaan. Waa inuu sidoo kaleqaada tallaabooyinka loo baahanyahay si uu u hubiyo in macluumaadka kujira diiwaanka ay yihiin kuwii ugu daneebayay oo saxan;

(x) hubiyaa in Xarunta Warbixinada Maaliyadda, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh, hay'addaha sharci fulinta, hay'addaha garsoorka iyo hay'addaha kale ee Dowladda ee awoodda uleh ay si toos ah u heli karaan macluumaadka kujira nidaamka xog-kaydinta ee diiwaanka milkiilayaasha sida dhabta ah faa'iidada u leh

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(register of beneficial owners); iyo

(kh) Hubiyaa in hay'addaha warbixnnada (reporting entities) ay si waqtiyeeysan ku heli karaan macluumaadka kujira diiwaanka milkiilayaasha sida dhabta ah faa'iidada u leh (register of beneficial owners).

4. Saamileyda iyo agaasimayaasha magac uyaalka ah ee la wakiishay (nominees):

(b) waa in la siiya shatiga looga talagalay shirkadaha ama shakhsiyaadka bixiya adeegyada maamulidda ammaanooyinka (trust), si waafaqsan faqrad- hoosaadka (t) ee faqradda 2-aad ee Qodobka 4-aad, iyadoo macluumaadka ku

aadan darajadooda wakiilnimo ama magac-uyaaleed lagu kaydinaayoDiiwaanka Shirkadaha;

(t) waa in ay usheegaan darajadooda hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ee lagu xusay Qodobka 4-aad ee Sharcigan;

(j) waa in ay kaydiyaan macluumaadka caddaynaya shakhsiga soo wakiisha(the nominator), walibana la wadaagaan macluumaadka hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh markay ay soo dalabadaan; iyo

(x) waxay mutaysanayan ciqaab maamul oo udhaxeeysa shan boqol oo Doolar (USD $500) ilaa shan iyo toban kun oo doolar (USD 15,000), haddii ay u hoggaansami waayaan faqrad-hoosadyada (b) ilaa (j).

5. Macluumaadka lagu sheegay farqadaha 1-aad, 2-aad iyo 3-aad ee Qodobkan waa inay ku kaydsanaadan Diiwaanka Shirkadda, ama ay kujiraan gacanta hay'adahawarbixinnada (reporting entities) ee lagu sheegay Qodobka 4-aad ee Sharcigan, shakhsiyaadka qaanuuniga ah laftigooda ama maamulkooda, xirfadlayaasha masuulkaka ah iskudubaridka xirista shirkadaha (liquidators) ama shakhsiyaadka kale ee ku lugta lahaa xirista shirkad, muddo toban sano ka dib taariikhda ay shirkaddu burburtay ama la xiray, ama muddo toban (10) sano ka dib taariikhda cida leh shakshiyadda qaanuuniga ay joojisay inay ahaato macmiilka hay'add warbixineed (reporting entity).

6. Waxaa ka mamnuuca ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya in la sameeyo ama la isticmaalo saamiyada aan cid ku diiwangashneen (bearer shares).

Qodobka 23D
Hufnaanta looga baahanyahay xiriirada sharciga kudhisan (legal arrangements)

1. Shakhsiyaadka mas'uulka ka ah ammaanooyinka (trustees) iyo shakhsiyaadka kale ee ka haya jagooyinka kuwaa lamid ah nidaamyada ammaanada ee sharciga lagu dhisay iyo/ama xiriirada sharciga ku dhisan (legal arrangements), kuwaas oo lagu aas-aasay ama ka hawlgala Soomaaliya:

(b) waa inay ka helaan, walibana kaydiyaan macluumaadkii ugu danbeeyay, oo dhammeystiran oo sax ah oo ku aadan aqoonsiga:

i. shakhsiyaad ammaanada abuurtay;
ii. shakhsiyaadka kale ee mas'uulka ka ah ammaanada;
iii. shakhsiyaad korjoogteeya, oo ilaaliya ammaanada;
iv. shakhsiyaadka looga talagalay inay ka faa'idaystaan ammaanada; iyo
v. shakhsi kasta oo dabiici ah oo leh maamulka ugu danbeeya ee wax kuoolka ah ee ku aadan ammaanada;

(t) waa inay ka helaan, walibana kaydiyaan macluumaadka shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial ownership information) iyo macluumaadkii ugu danbeeyay, oo dhammeystiran oo sax ah oo ku saabsan shakhsiyaadka qaanuuniga ah ama xiriirada sharciga ku dhisan (legalarrangement) ee dhinacyada ka ah dhismaha ammaanada iyo xiriirada sharciga ku dhisan (legal arrangement);

(j) waa inay haayan xogta aasaasiga ah ee wakiilada sharciyeeysan iyo shakhsiyaad adeegga siiya ammaanada, oo ay ku jiraan lataliyayaasha arrimaha maalgashiga ama maamulayaasha, xisaabiyeyaasha, iyo lataliyayaasha cashuuraha;

(x) waa inay hubiyaan in macluumaad ku qeexan faqrad hoosaadka (b) iyo (t) ee faqrada 1-aad ee Qodobkan uu yahay midkii ugu danbeeysay oo sax ah, walibana ay cusbooneysiiyaan macluumaadka hal (1) bil gudaheed oo kabilaabmaysa taariikhda isbeddelka lagu sameeyay;

(kh) waa inay haayan macluumaadka ku xusan faqrad-hoosaadka (b) iyo (t) ee faqrada 1-aad ee Qodobkaan muddo ugu yaaran ah toban (10) sano, kadib marka ay dhammaato doorka ay ku lahaayeen ammaanda, haddii ay yihiin xirfadlayaal ku shaqeeysta maamulida ammaanooyinka (professional trustees);

(d) waa inay la wadaagan darajadooda hay'addaha warbixinnada (reporting entities) marka ay la abuurayan xiriir ganaci hay'addaas ama marka loo fulinaayo macaalimaad aan joogto ahayn;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(r) waa inay siiyaan Diiwaangeliyaha Shirkaddaha macluumaad sax ah oo ku saabsan shakshiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial owners) ammaanada iyo xiriirada kale ee sharciga ku dhisan, marka ay noqdaan cidda mas'uulka ka ah ammaanada ama jago taas lamid ah ka haysa xiriirada sharciga ku dhisan (legal arrangement), iyo markasta uu isbeddel ku yimaado macluumaadk shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial owners);

(s) waa inay ku wargeliyaan Diiwaangeliyaha Shirkaddaha, hal (1) bil gudaheed oo ka bilaabmaysa taariikhda isbeddelka lagu sameeyay, isbeddel kasta ama cusbooneeysiis kasta oo lagu sameeyo macluumaadka ku xusan faqrad-hoosaadka (r) ee faqradaan;

(sh) waa inay si buuxda ula shaqeeyaan hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh, oo aay ka mid tahay la wadaagista hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh dhammaan macluumaadka la xiriira ammaanada iyo xiriirada kale ee sharciga kudhisan (legal arrangement);

(dh) waa inay la wadaagan, marka ay soo codsadaan, hay'addaha warbixinnada (reporting entities) macluumaadka la xiriira shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial ownership) iyo hantida ay leedahay ammanadu, kuwaa oo loo haayo ama loo maareeyo si waafaqsan xiriirkaganaci oo ay la leeyihiin hay'addaha warbixinnada (reporting entities); iyo

(c) waxay mutaysanayan ciqaab maamul oo u dhaxeeysa shan boqol oo Doolar(USD $500) ilaa shan iyo toban kun oo doolar (USD $15,000) haddii ay u hoggaansami waayaan shuruudaha faqrad-hoosaadyada (b) ilaa (dh) ee faqradaan.

2. Diiwangeliyaha Shirkaddaha ayaa ah cidda loo xilsaaray uruurinta macluumaadka ku aadan shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada ka dhalata ammaanada iyo xiriirada sharciga ku dhisan ee lamidka ah (legal arrangements). Maclumaadka shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial ownership information) ee uu uruuriyo,walibana uu kaydiyo Diiwangeliyaha Shirkaddaha waa in la dhawraa inay yihiin kuwii ugu danbeeyay, dhammaystiran, walibana sax ah.

3. Diiwangeliyaha Shirkaddaha waa inuu hubiyaa in Xarunta Warbixinnada Maaliyadda, hay'addaha kormeerka iyo dabagalka ee awoodda uleh, hay'addaha sharci fulinta, hay'addaha garsoorka iyo hay'addaha kale ee Dowladda ee awoodda uleh, ay si toos ah u heli karaan macluumaadka Diiwangeliyaha Shirkaddahu u haayo siwaafaqsan Qodobkaan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 23E
Iskaashiga caalamiga ah ee ku saabsan shakhsiyaadka qaanuuniga ah iyoxiriirada sharciga kudhisan (legal arrangements)

1. Diiwangeliyaha Shirkaddaha waa inuu hubiyaa in hay'addaha Dowladda Soomaaliya ay si toos ah u heli karaan dhammaan macluumaadka aasaasiga ah iyo macluumaadka ku saabsan shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial ownership) si'ay uga jawaaban codsiyada caalamiga ah ee ku aadan helista macluumaadkaas. Diiwangeliyahu waa inuu sidoo kale hubiyaa in qaabka loo heli karo macluumaadkan uu yahay mid waafaqsan shuruucda Soomaaliya ee la xiriirta iskaashiga caalamiga ah.

2. Hay'addaha Dowladda ee awoodda u leh waa inay:

(b) Hubiyaan inay jiraan nidaamyada fududayn kara in si amnigeedu suganyahay, oo degdeg ah loo diri karo macluumaadka ku saabsaan shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidaa (beneficial ownership), walibana sahli kara in laga jawaabo codsiyada lagu xusay faqrada 1-aad ee Qodobkaan, si waafaqsan shuruucda kale iyo xeer-nidaamiyaasha xiriirka laleh arrimahan;

(t) hubiyaan in iskaashiga caalamiga ah oo ay la leeyihiin dhigooda dowladaha shisheeye ee arrimaha la xiriira hufnaanta shakhsiyaadka qaanuuniga ah ay ku saleysantahay heshiisyo iskaashi, heshiisyo caalami ah, ama mabaadi'da sir qarsoodiga iyo isku tiirsanaanta (reciprocity);

(j) waa inaysan ku xirin shuruudo aan macquul ahayn ama shuruudo keenaya xaddidaad badan, isdhaafsiga iyo wadaagista macluumaadka aasaasiga ah iyo macluumaadka ku saabsan shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada ama kaalmo siinta la xiriirta hufnaan shakhsiyaadka qaanuuniga ah;

(x) la wadaagan macluumaadka hay'addaha dhigooda dowladaha shisheeye, iyadoon loo eegayn nooca ay yihiin hay'addahaas (sida, hay'addo madani ah, kuwo maamul, kuwo sharci fulin, kuwo garsoor, ama kuwa kale) ama in codsigu ku saabsanyahay arrimo maaliyadeed ama uu xiriir laleeyahay baaris, ama dacwad maxkamadeed ee socota;

(kh) aysan isticmaalin cudurdaaro ay ka mid yihiin dhawrist sir maaliyadeed
ama siraha kale ee sharcigu ilaaliyay, si'ay u diidan inay macluumaad la wadaagaan ama kaalmo siiyaan hay'ad awood uleh ee dowlad shisheeye marka laga reebo qareennada, nootaayooyinka, xirfadlayaasha kaas ee sharcigaee madax-bannaan iyo xisaabiyeyaasha, haddii macluumaadkas yahay mid ay heleen iyagoo fulinaya shaqooyinkooda [illegible]

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

baahanyahay inay u hoggaansamaan waajibaadka ilaalinta sirta shaqada, xogta macmiilka iyo macluumaadka dhexmara qareenka iyo macmiilkiisa, oo ay kujiraan macluumaadka ay soo heleen inta ay kug guda jireen hawlaha xaqiijinta tallaabooyin sharci ee u furan macmilkooda ama kuwa la xiriira ka difaacidda ama ku matalaadda macmiilkooda dacwado ka furan maxkamad ama meelo kale ee dhexdhexaadin, iyadoon loo eegayn in macluumaadkaas ay soo heleen ka hor, inta lagu jiro ama ka dib dacwaddaas;

(d) fududeeyaan helitaanka macluumaadka aasaasiga ah ee ku jira Diiwaanka Shirkaddaha iyo wadaagista macluumaadka ku saabsan saamilayda;

(r) isticmaalaan awoodooda, si waafaqsan shuruuca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, si ay u soo helaan macluumaadka ku saabsan shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial ownership information) oo ay u baahanyihiin hay'addaha dowladaha shisheeye ee dhiggooda ah; iyo

(s) la socdaan tayada taageerada iskaashi oo ay ka helaan hay'addaha dowladdaha shisheeya kadib marka ay ka codsadaan in lala wadaago macluumaadka aasaasiga ah iyo macluumaadka la xiriira shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial ownership information) ama codsiyada kuaadan taageerada la xiriirta helitaanka shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada ee degan dalalka shisheeye;

Qodobka 23F

Waajibaadyada saaran shakhsiyaadka qaanuuniga ah, ammanooyinka iyoxiriirada sharciga kudhisan (legal arrangements) ee ka u tartamaaya iibka Dowladda

1. Dhammaan shakhsiyaadka qaanuuniga ah, ammanooyinka ah iyo xiriirada sharciga kudhisan (legal arrangements) ee ka qaybqaadanaya hawlaha iibka Dowladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa inay usoo gudbiyaan hay'adda Dowladeed ee hawsha iibka hoggaaminaysa, marka ay soo gudbinaayan dukumintiyada tartanka, macluumaad dhammeystiran oo sax ah oo ku saabsan shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial ownership information). Dukumentiyada tartanka oo aysan la socon macluumaadka ku saabsan shakhsiyaadka sida dhabta ah uleh faa'iidada shirkadda soo tartameeysa lama tixgelinaayo, waxaana laga saaraya hawsha iibka Dowladda.

2. Marka la bixiyo qandaraas kasta ee Dowladeed kadib, hay'adda Dowladda ee hoggaaminaysa hawlaha iibka waa inay kusoo daabacdaa boggeeda internetka, magaca shakhsiga dabiiciga ah ama qaanuuniga ah ee qandaraaska la siiyay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

3. Haddii ay kasoo codsadaan, hay'adda Dowladeed ee bixisay qandaraaska waa inay la wadaagtaa ururada aan dawliga ahayn, warbaahinta, iyo machadyada tacliinta ee diiwaan gashan, macluumaadka kusaabsan shakhsiyaadka sida dhabta ah u leh faa'iidada (beneficial ownership information) shakhsiyaadka qaanuuniga ah, ammaanooyinka ama xiriirada sharciga ku dhisan (legal arrangements) ee la siiyay qandaraas Dowladeed. Ujeedada macluumaadkaan loo bixin karo ayaa ah in la ogaado in musuqmaasuq la xiriira hawshaas iibka Dowladeed ah uu dhacay iyo in kale.

4. Hay'adda Dowladeed ee qanaraaska bixisay ayaa go'aaminaysa shuruudaha hagayaa isticmaalka macluumaadka ku saabsan shakhsiga sida dhabta ah uleh faa'iidada (beneficial ownership information) ee loo bixiyay si waafaqsan faqrada 3- aad ee Qodobkaan.

QAYBTA 5-AAD
GUDDIGA QARAN EE KA-HORTAGGA LACAG DHAQIDDA IYO LA-DAGAALANKA MAALGELINTA ARGAGIXISADA

Qodobka 24-aad
Aasaasidda Guddiga

Waxa halkan lagu aasasay Guddiga Qaran ee Ka-hortagga Lacag Dhaqidda iyo La- dagaalanka Maalgelinta Argagixisada.

Qodobka 25-aad
Hawlaha iyo Mas'uuliyadaha Guddiga

Hawlaha iyo mas'uuliyadaha Guddigu waa:

1. Kor u qaadida iyo fududaynta xog iswaydaarsiga, iskaashiga, iyo wada shaqayntalabada heer ee siyaasad dejinta iyo hawl-fulinta ee ka dhaxaysa hay'adaha xubnaha ka ah ee ujeeddooyinkoodu yihiin ka-hortagga lacag dhaqidda iyo la- dagaalanka maalgelinta argagixisada, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqista (predicate offenses), iyo markii loo baahdo,maalgelinta kororka hubka wax gumaada.

2. Taageerista iyo isku dubaridka dhisidda awooddaha hay'adaha Dowladda ee awoodda u leh, si ay ula dagaallamaan lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada, iyo markii loo baahdo, maalgelinta kororka hubka wax gumaada.

3. Isku-dubbaridka hawlaha Qiimaynta Khatarta Dalka kajirta ee la xiriirta

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

lacag- dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada iyo korjoogtaynta dib-u-eegistiisa xilliyeeysan, iyo la wadaagista hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh iyo hay'addaha warbixinnada (reporting entities) natiijooyinka kasoo baxay qiimayntaas.

4. Dejinta siyaasadaha Qaranka iyo istaraatiijiyad guud ee lagula dagaalamayo lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada, iyo markii loo baahdo, maalgelinta kororka hubka wax gumaada, iyagoo tixgalinaya khataraha la xiriira lacag- dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada ee la oggaaday, iyagoo sidoo kale si joogta ah qiimayn iyo dib-u-eegis ugu sameeynaaya khatarahas.

5. Qiimaynta nidaamyada Dalku leeyahay ee ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la- dagaalanka maalgelinta argagixisada, si loo dejiyo, lana iskaga kaashado dhaqangelinta istiraatiijiyadda Dalka ee ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada.

6. Fududeynta wada shaqaynta iyo iskaashiga ka dhexeeya hay'addaha Dowladda eeawoodda uleh, hay'addaha warbixinnada (reporting entities) iyo ururada is- maamula ee ku aadan dejinta iyo dhaqangelinta siyaasado iyo barnaamijyo lagula dagaallamayo lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada, iyo markii loo baahdo, maalgelinta kororka hubka wax gumaada.

7. Hoggaaminta hawlaha la xiriira qiimaynta bannaanka ka imaanaysa ee ku saabsan nidaamyada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee la dagaallanka lacag- dhaqidda, maalgelinta argagixisada, iyo maalgelinta kororka hubka wax gumaada.

8. Kor u qaadida wacyiga ku aadan iyo soo saarista talooyin la xiriira khataraha ka imaan kara nidaamyada daciifka ah ee ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la- dagaalanka maalgelinta argagixisada ee ka jira wadamada kale iyo dhaqangelinta tallaabooyinka xaqiijinta xoogan ee xogta aqoonsiga ee macmiilka (EDD) iyo sidoo kale tallaabooyin-ka-hortagga ah oo ay codsatay Hay'adda Caalamiga ah ee Ka-hortagga Lacag-dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada (FATF) ama ay si guud ugu baaqday Hay'adda Caalamiga ah ee Ka-hortagga Lacag-dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada (FATF).

9. Fududeynta wada shaqaynta iyo iskaashiga ka dhexeeya hay'addaha Dowladda eeawoodda uleh, si loo xaqiijiyo in shuuradaha uu dejiyay nidaamka sharci ee ka- hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada ay la jaan- qaadi karaan shuruucda dhawrista xogta iyo sirta.

10. Isku-dubbaridka hawlaha ururinta iyo middaynta xogta tirakoobka iyo

FEDERAALKA SOOMAALIYA
JAMHUURIYADDA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

kujirta gacanta hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh, si waafaqsan Qodobbada 26A iyo 26D ee Sharcigan.

11. Korjoogtaynta dhaqangelinta cunaqabataynta maaliyadeed ee cayiman, si waafaqsan faqrada 6-aad ee Qodobka 19A ee Sharcigan.

Qodobka 26-aad
Xubnaha iyo Fadhiyada Guddiga

1. Guddiga wuxuu ka koobanyahay kow iyo toban (11) xubnood ee soo socda ama ciddii kawakiil ah oo ay soo xusheen:

(b) Wasiirka Maaliyadda oo noqonaya Gudoomiyaha Guddiga;

(t) Wasiirka Cadaaladda;

(j) Xeer-ilaaliyaha Guud;

(x) Wasiirka Ganacsiga iyo

Warshadaha;(kh) Wasiirka Amniga

Gudaha;

(d) Wasaaradda Isgaarsiinta iyo tiknoolajiyadda

Qaranka

(r) Gudoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya;

(s) Agaasimaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka;

(sh) Agaasimaha Guud ee Xarunta Warbixinada Maaliyadda oo ah XoghayahaGuddiga; iyo

(dh) Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed;

(c) Hay'ada Isgaarsiinta Qaranka.

2. Markasta oo loo baahdo, si loo guto waajibaadka iyo mas'uuliyadaha Guddiga ee ku xusan Qodobka 25-aad Sharcigan, Guddoomiyaha Guddigu wuxuu ku martiqaadi karaa shirarka Guddiga, hay'adaha kale ee Dawladda iyo wakiilada ganacsiyada gaarka loo leeyahay, si ay uga qayb qaataan doodaha.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Guddiga, iyadoo doorkoodu ahaan doono goob-joogayaal aan cod lahayn.

3. Iyada oo Guddoomiyaha isugu yeearyo, Guddigu waxa uu yeelanayaa ugu yaraan afar (4) fadhi oo caadi ah sanadkii ama goor walba oo loo baahdo, ama marka ay ugu yaraan shan xubnood soo dalbadaan kulan hab qoraal ah.

4. Guntanka fadhiyada Guddiga wuxuu ku ansaxayaa joogitaanka ugu yaraan shan xunbood.

5. Haddaan si kale loo sheegin qodob kale oo Sharcigan ah, go'aannada Guddigu waxa ay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah.

QAYBTA 5 A
TIRAKOOBKA

Qodobka 26A
Qodobbo guud oo la xiriira tirakoobka

1. Si ay uga qayb qaatan diyaarinta qiimaynta khatarta Dalka kajirta ee la xiriira lacag dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada, walibana awood loogu yeesho in la qiimeeyso wax ku oolnimada nidaamka Dalka ee ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada, dhammaan hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh waainay kaydiyaan tirokoob dhammaystiran oo ay ku jiraan:

(b) Xog cabbir buuxda ka bixin karta baaxadda iyo muhiimadda ay leeyihiin hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ee hoos yimaada Sharcigan, gaar ahaan tirada hay'addaha maaliyadda, kuwa ganacsiyada iyo xirfadaha la- cayimay ee aan fulin hawlaha maaliyadeed (DNFBPs) iyo hay'addaha ka ganacsada lacagaha iyo hantida dhijitaal ah (VASPs). Sidoo kale, xogtu waa inay bixisaa muhiimada dhaqaale oo ay kala leeyihiin hay'addaha warbixinnada ee kala duwan; iyo

(r) Xog fahan buuxda ka bixin karta wejiyada kala duwan ee nidaamyada Dalka u yaala ee ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada, oo ay ka midyihiin wajiga kasoo warbixinta, wajiga baarista iyo wajiga garsoorka.

2. Dhammaan xogta la xiriirta tirakoobyada waa in la dhammeystira Diisambar 31 ee sannad kasta, kadibna loo soo gudbiyaa Guddiga ka hor Janaayo 31 ee sanadka cusub. Xogta la xiriirta tirakoobyada waa in sidoo kale loo soo gudbiyaa Guddiga waqtikasta oo kale ee uu codsado.

3. Guddigu waa inuu cayimaa hay'adda Dowladeed ee u xilsaaran hawsha kaxoo uruurinta hay'addaha Dowladda ee kale xogta la xiriirta tirokoobka.

JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 26B
Tirakoobka Xarunta Warbixinada Maaliyadda laga rabo inay kaydiso

1. Xarunta Warbixinada Maaliyadda waa inay diyaarisaa oo ay cusboonaysiisaa xogtatirakoobka la xiriira:

(b) Tirada macaamilaadka shakiga dhaliyay iyo warbixinnada kale ee loo soo gudbiyay, iyo sidoo kale hawlaha dheeriga ee la xiriira warbixinnadaan oo ay qabatay, oo ay kujiraan tirada warbixinnada ay la wadaagtay hay'addaha kale ee Dowladda ee awoodda uleh.

(t) Tirada iyo boqolleyda warbixinnada ay gudbisay oo ay ka dhalatay ama macluumaad ku biiriyay baaris, haddii ay jiraan.

(j) Marka la eego codsiyada ay u dirtay hay'addaha dowladaha shisheeye ee dhiggeeda ah ee la xiriira macluumad la wadaagista Soomaaliya, tirada codsiyada:

i. la diray;
ii. jawaabtooda la sugayo;
iii. la diiday;
iv. la aqbalay in laga jawaabo (ha ahaato jawaab dhammaystiran amamid dhammaystirnayn); iyo
v. waqtiga ay qaadatay in jawaab loo helo codsi ladiray, iyadoo codsigaas uun lagu tiirsanyahay.

(x) Marka la eego codsiyada ay soo dirsadeen hay'addaha dowladaha shisheeye ee dhiggeeda ah ee la xiriira in macluumad lala wadaago, tirada codsiyada:

i. lasoo diray;
ii. jawaabtooda la sugayo;
iii. la diiday;
iv. la aqbalay in laga jawaabo (ha ahaato jawaab dhammaystiran amamid dhammaystirnayn); iyo
v. waqtiga ay qaadatay in jawaab laga bixiyo codsi lasoo diray, iyadoocodsigaas uun lagu tiirsanyahay.

(kh) Tirada inta jeer oo ay si iskeed ah macluumaad ula wadaagtay macluumaad hay'ad dowlad shisheeye ee dhiggeeda ah.

2. Xaruntu waa inay diyaarisaa warbixin sanadle ah, si ay ugu wargeliso hay'adaha warbixinnada (reporting entities) faahfaahinta la xiriirta tirada, tayada iyo faa'iidada ay lahaayeen warbixinnada macaamilaadka shakiga dhaliyaya (STRs) oo ay soo gudbiyeen iyo tallaabooyinka dheeriga ah warbixinnadan la xiriira oo ay qaaday.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 26C
Tirakoobka laga rabo inay kaydiyan Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda u leh ee la cayimay

1. Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh ee la cayimay waa in ay hayaan tirakoobka la xiriira:

(b) inta jeer oo ay kormeer ku sameeyeen hay'addaha hoos yimaada kormeerkooda, iyo baaxadda iyo dabeecadda kormeeradaas (ha ahaadan kormeero lagu sameeyay xarumaha hay'addahaas iyo kuwo loo sameeyaysiyaabo kale);

(t) noocyada xadgudubka lasoo oggaaday; ciqaabaha iyo tilaabooyin kale ee sixidda ah oo lagu soo rogay hay'addahaas hoos yimaada kormeerkooda iyo tusaalooyin la xiriira mararka ciqaabaha iyo tilaabooyin kale ee sixidda ah ay dhaliyeen in loo hoggaansamo nidaamyada ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada;

(j) Noocyada iyo tirada heshiisyada iskaashi ee lala galay hay'addaha awooddauleh ee waddamada shisheeye (oo ay ku jiraan is-fagaradyada laba-geesoodka ah iyo kuwa dhinacyada badan, iyo heshiisyada, iskaashiyada ku salaysan is- dhaafsiga xogaha, ama hababka kale ee iskaashiga ee jira);

(x) Marka la eego codsiyada ay u dirtay hay'addaha dowladaha shisheeye ee dhiggeeda ah ee la xiriira macluumad la wadaagista Soomaaliya, tirada codsiyada:

i. la diray;
ii. jawaabtooda la sugayo;
iii. la diiday;
iv. la aqbalay in laga jawaabo (ha ahaato jawaab dhammaystiran amamid dhammaystirnayn); iyo
v. waqtiga ay qaadatay in jawaab loo helo codsi ladiray, iyadoo codsigaas uun lagu tiirsanyahay.

(kh) Marka la eego codsiyada ay soo dirsadeen hay'addaha dowladaha shisheeye ee dhiggeeda ah ee la xiriira in macluumad lala wadaago, tirada codsiyada:

i. lasoo diray;
ii. jawaabtooda la sugayo;
iii. la diiday;
iv. la aqbalay in laga jawaabo (ha ahaato jawaab dhammaystiran

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

amamid dhammaystirnayn); iyo

v. waqtiga ay qaadatay in jawaab laga bixiyo codsi lasoo diray, iyadoo

codsigaas uun lagu tiirsanyahay.

(c) Tirada inta jeer oo ay si iskeed ah macluumaad ula wadaagtay macluumaadhay'ad dowlad shisheeye ee dhiggeeda ah.

Qodobka 26D
Tirakoobka laga rabo inay kaydiyan hay'adaha sharci fulinta iyo WasaaraddaCadaaladda

1. Hay'adaha sharci fulinta ee ku shaqada leh waa inay hayaan tirakoobka:

(b) Falalka iyo dembiyada lacag-dhaqidda, oo ay ku jiraan:

i. Tirada baaritaannada, dacwad-oogisyada, iyo xukunnada falalka iyo dembiyada lacag-dhaqidda;
ii. Inta ay la'egyihiin ciqaabaha xabsi ku haynta ee lagu xukumay shakhsiyaadka lagu helay dembiyada lacag-dhaqidda;
iii. Inta ay la'egyihiin qiimaha ganaaxyada lagu xukumay shakhsiyaadka lagu helay dembiyada lacag-dhaqidda;
iv. Tirada tallaabooyinka kale ee ciqaabeed ee lagu soo rogay shakhsiyaadka lagu helay dembiyada lacag-dhaqidda;
v. Qiimaha lacagaha la dhaqay, lacagaha laga helay falal dambiyeedyada, dukumintiyada maaliyadeed (instrumentalities) ama lacagaha u dhigma ee Dowladdu la wareegtay;
vi. Qiimaha hantida laga helay falal dambiyeedyada ee gacan ku hayntooda Dowladdu la wareegtay ama la xayiray;
vii. Lacagaha laga helay falal dambiyeedyada (proceeds of crime) ee loo celiyay dhibbanayaashii lahaa, la wadaagay ama loo diray dal shisheeye; iyo
viii. Haddii ay suurtagal tahay, tirakoobyada dembiyada iyo falal lacag- dhaqidda waa in lagu daraa noocyada dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqista (predicate offenses), walibana ay kala saaran lacag-dhaqidda uu sameeyay garab saddexaad, lacag dhaqidda iskeeda u taagan, iyo lacag-dhaqidda la xiriirta dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara oo ka dhacay dal shisheeye.

(t) Fal dembiyedyada iyo falalka maalgelinta argagixisada iyo dhiqan-gelinta cunaqabataynta maaliyadeed ee cayiman ee ka dhanka

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

maalgelinta argagixisada, oo ay ku jiraan:

i. Tirada baaritaannada, dacwad-oogisyada, iyo xukunnada falalka iyo dembiyada maalgelinta argagixisada;
ii. Inta ay la'egyihiin ciqaabaha xabsi ku haynta ee lagu xukumay shakhsiyaadka lagu helay dembiyada maalgelinta argagixisada;
iii. Inta ay la'egyihiin qiimaha ganaaxyada lagu xukumay shakhsiyaadka lagu helay dembiyada maalgelinta argagixisada;
iv. Tirada shakhsiyaadka dabiiciga ah, hay'addaha ama ururada la asteeyay iyo/ama koontoyinka bankiyada ee lagu soo rogay cunaqabataynta maaliyadeed ee cayiman;
v. Tirada asteeymaha uu sameeyay Guddiga Qaran ee Ka-hortagga Lacag Dhaqidda iyo La-dagaalanka Maalgelinta Argagixisada;
vi. Qiimaha hantida loo xayiray si waafaqsan nidaamka cunaqabataynta maaliyadeed ee la cayiman;
vii. Tirada kiisaska ay ka dhalatay in Dowladdu ay ula wareegto si aan kasoo noqosho laheyn ama ay la wareegto oo keliya gacan ku haynta hanti ay leeyihiin shakhsiyaad ama ururo argagixiso ah, ama kuwo gaysanaaya falal argagixiso;
viii. Qiimaha hantida Dowladdu ay ula wareegto si aan kasoo noqosho laheyn ama ay la wareegto oo keliya gacan ku hayntooda oo ayleeyihiin shakhsiyaad ama ururo argagixiso ah, ama kuwo gaysanaaya falal argagixiso; iyo
ix. Tirada baaritaannada lagu sameeyay si xun u adeegsashada ururrada aan faa'iido doonka ahayn oo ay gaysteen kooxo ama shakhsiyaad argagixiso ah;

QAYBTA 6-AAD
CIQAABAHA

Qodobka 27-aad
Dabeecada iyo dabaqidda ciqaabaha

1. Mabda' ahaan, tallaabooyinka iyo/ama ciqaabaha ay kusoo rogaan Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ee aan gudan waajibaadkooda ku xusan Sharcigan ama xeer-nidaamiyaasha loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, ama kuwa ku xusan sharci iyo xeer-nidaamiye kasta oo loogu talagalay ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada amaaan gudan waajibaadkooda ku xusan awaamiirta loo soo saaray si waafaqsan faqrada 4-aad ee Qodobka 23B ee Sharcigan ama aan u gudan waajibaadkooda si waafaqsan waqtigii loo cayimay, waa inay noqdaan, iyadoo loo eegayo duruufaha dhabta ah ee xadgudubka markas dhacay, kuwo wax ku ool ah, u dhigma, waliba ku-

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

hortaggi kara xadgudubyada nuucas ah.

2. Mas'uuliyadda xadgudubka ee saaran hay'ad warbixineed (reporting entity) oo leh shakhsiyad qaanuuneed meesha kama saarayso mas'uuliyada xadgudubka shakhsi ahaaneed ee noqon karata mid maamul, madani ama ciqaabeed ee saaran shakhsiyaadka dabiiciga ah ee kala ah saraakiisha, maareeyayaasha sare, agaasimayaasha sare iyo shaqaalaha hay'adda warbixineed (reporting entity).

Qodobka 28-aad
Ciqaabaha lagu soo rogaayo hay'adaha warbixinnada (reporting entities)

1. Hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ee aan gudan waajibaadkooda ku xusan Sharcigan ama xeer-nidaamiyaasha loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, ama kuwa ku xusan sharci kasta uu dalku lee yahay oo looga hortagaayo lacag- dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada ama aan gudan waajibaadkooda ku xusan awaamiirta loo soo saaray si waafaqsan faqrada 4-aad ee Qodobka 23B ee Sharcigan ama aan u gudan waajibaadkooda si waafaqsan waqtigii loo cayimay, waa in lagu soo rogaa tallaabooyina ku xusan faqrada 5-aad ilaa faqrada 6-aad ee Qodobka23B ee Sharcigan.

2. Ganaaxyada maamul ee ku xusan farqada 5-aad ee Qodobka 23B ee Sharcigan waa in aanay ka yarayn shan boqol oo Doolar (USD$500) oo aysan ka badanaan Boqol kun oo Doolar (USD $100,000) oo ay Maxkamid go'aamineyso.

Qodobka 29-aad
Racfaan qaadashada

Hay'addaha warbixinnadu (Reporting entities) waxay xaq u leeyihiin inay rafcaan ka qaataan tallaabooyinka lagu soo rogay si waafaqsan farqada 1-aad ee Qodobka 28-aadee Sharcigaan, iyagoo racfaanka marka hore u qaadanaya Hay'adda Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh. Haddii ay ku qanci waayeen go'aamada Hay'adda Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh, waxay u qaadanayaan rafcaankooda Maxkamadda Sare ee Dalka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

QAYBTA 7-AAD
TALLAABOOYINKA KU-MEEL-GAARKA AH, LA-WAREEGISTA HANTIDA EE XUKUNNADA CIQAABTA AH KA DHASHA IYO LA- WAREEGISTA HANTIDA OO AAN KU SALEYSNAYN XUKUNNADACIQAABEED

Qodobka 30-aad
Baaxadda qaybtan

1. Qaybtan waxaa lagu dabaqayaa lacag dhaqidda, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqidda (predicate offenses) iyo maalgelinta argagixisada.

2. Qaybtan waa la dabaqayaa xitaa haddii falka saldhigga u ah dembiga uu dhacay ka hor intaanay qaybtani dhaqan gelin, waxaana lagu dabaqaya lacag, dhaqaale, hanti iyofaa'ido kasta oo la helay ka hor ama ka dib marka ay qaybtan dhaqan-gashay.

3. Codsiyada hoos yimaada qaybtan waxaa la horgeeynayaa Maxkamadaha Gobolka.

4. Hay'adaha sharci fulinta waa in ay u adeegsadaan awoodahooda:

(b) si ay aqoonsadan, u raadraacan, walibana u baaran hantida ay tahay in lala wareego;

(t) si ay u qaadan tillaabooyin loogo talagalay ka-hortaga iyo baabi'inta falalkalidka ku ah awoodda Dowladda ee xannibaada, la wareegista gacan ku haynta ama dib usoo celinta hanti ay tahay in lala wareego; iyo

(j) si ay qaadan tallaabo kasta oo habboon ee baariseed.

Qodobka 31-aad
Amarrada xannibaada

1. Marka uu codsado Xeer Ilaaliyaha Guud, maxkamaddu waa in ay soo saartaa amar xannibaad ah si looga hortaga isticmaalka hanti, haddii:

(b) hantidas ay noqon karto mawduuca codsiga amar la wareegis hanti ee ku xusan Qodobka 34-aad ee Sharcigan; ama

(t) hantidaas ay noqon karto mawduuca codsiga amar la wareegis hanti oo aan ku saleysnayn xukun ciqaabeed ee ku xusan Qodobka 36-aad ee Sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2. Maxkamaddu waxay amri kartaa mid ama in ka badan oo ka mid ah kuwan soo socda:

(b) in hantida ama qayb kamid ah iyada oo lagu cayimay amarka aan shakhsina wareeji karin ama uusan si kale ugu macaamili karin, marka laga reebo qaabka iyo xaaladaha maxkamaddu oggolaatay ee lagu cayimay amarka,haddii ay jiraan;

(t) in gacan ku haynta, ilaalinta ama maamulka hantida ama qaybo iyada kamid ah ee lagu cayimay amarka, lagu wareejiyo sarkaal Dowladeed ee loo idmay, magiciisana lagu sheegay amarka ama hay'add kale ee Dowladeed ama cid kale oo ay maxkamaddu u magacaawdo hawshaan; iyo

(j) haddii ay maxkamaddu ku qanacdo in xaaladu sidaas u baahan tahay, waxay ku amari kartaa shakhsi inuu la wareego gacan ku haynta iyo maamulka hantida ama qayb kamid ah oo lagu cayimay amarka, kadibna u maamulo ama ugu macaamilo qayb ama dhammaan hantidaas si waafaqsan tilmaamaha ay bixiso maxkamaddu.

3. Haddii shakhsi loo magacaabo, si waafaqsan faqrad-hoosaadka (j) ee faqrada 2-aad ee Qodobkaan, gacan ku haynta, maamulka ama ku macaamilka hanti, waxaa loo oggolyahay inuu qaado tallaabo kasta oo daruuri ah oo lagu ilaalinaayo hantidaas iyo qiimaheeda.

4. Maxkamaddu waxay cayimi kartaa in amarkeeda xannibaada ah lagu dabaqi doono hantida kale ee uu helay shakhsiga amarku ku aadanyahay, kadib markii maxkamaddusoo saartay amarkeeda.

5. Amarka xannibaada waa in lasameeya iyadoon loo eegayn inay jirto caddeyn muujinaysa khatar la xiriirta in hantida la wareejin karo ama loogu macaamili karo qaab aan suurtagelinayn dhaqangelinta Sharcigan.

Qodobka 32-aad
Habraaca codsiga amarka xannibaada

1. Haddii shakhsi lagu sameeynaayo baaris la xiriirta fal demiyeed ama lagu soo eedeeyay fal dembiyeed ama lagu xakumay inuu gelay fal demi ah, oo haddana ay jiraan sababo maangal ah oo keeni kara shaki la xiriira in shakhsigaas uu faa'iido ka helay fal dembiyeed ama uu haysto hanti laga helay fal dembiyeed ama lagu gelay fal dembiyeed, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxa uu ka codsan karaa maxkamadda inay soo saarto amar xannibaad ah oo [illegible]

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ilaalinaayo sugnaanta hantida inta laga soo gudbinaayo codsi ku aadan la wareegis nuuceedu yahay mid ka dhalatay xukun ama mid aan ku saleysnayn xukun, oo ku aadan:

(b) Hantida loo adeegsaday fulinta fal dembiyeedka;

(t) Hantida laga helay fal dembiyeedka;

(j) Faa'iidooyinka laga helay hantidaas; iyo/ama

(x) Lacago qiimaha ahaan u dhigma hantida ama faa'iidooyinka laga helay fal dembiyeedka, oo ay kujiraan hanti kasta ee shakshigu ku leeyahay maamul wax ku ool ah ama hanti kasta ee shakhsigu hadiyad ahaan usiiyay shakhsi kale shantii sano ee lasoo dhaafay, oo ka horeeysay inta aan maxkamadda loo gudbin codsiga.

2. Marka uu soo codsado Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, haddii aysan si cad uga soo horjeedin cadaaladda, codsiga ku aadan soo saarista amarka lagu sheegay Qodobkaan waxay maxkamaddu dhageeysanaysa iyada uusan joogin shakhsiga amarku ku aadanyahay ama wakiiladiisa, iyadoo isticmaalaysa goob aan dadwaynaha u furneen.

3. Codsiga soo saarista amarka xannibaada ah waa inuu ahaa qoraal, waana inay la socotaa qoraal dhaar ah ee soo saaray sarkaal sharci fulinta katirsan, kaas oo muujinaaya arrimaha sarkaalku ka shakisanyahay iyo sababaha shakiga ku dhaliyay oo ah in hantidu tahay midda lagu sheegay faqrad-hoosaadyada (b) ilaa (x) ee faqrada 1-aad ee Qodobkan.

4. Haddii codsiga lagu sheegay faqrada 1-aad ee Qodobkan lasoo gudbiyo kahor inta aan shakhsi lagu xukumin inuu gelay fal dembiyeed, qoraalka dhaarta ah ee uu soo gudbinaayo sarkaal ka tirsan sharci fulinta waa inay ku qornaata sababaha keenayinuu aamino in shakhsiga arrintu khuseeydo uu gelay fal demibiyeed iyo in shakhsigaas ay ku socoto baaris ku aadan fal dembiyeedka, iyo sidoo kale dukumintiyada daruuriga ah ee shakiga dhaliyay.

5. Haddii, hantida loo soo raadsay amarka xannibaada ah, ay tahay mid uu gacanta ku haayo garab saddexaad, waa in qoraalka dhaarta ah uu muujiyaa in sarkaal katirsan sharci fulinta uu ka shakisanyahay hantidaas, sababaha keenay inuu ka shakiyo iyo in hantida loo soo raadsaday amarka xannibaada ah ay tahay hanti si wax ku ool ah uu u maamulo shakhsiga arrinku ku saabsanyahay. Qoraalka dhaarta ah waa inuu sidoo kale sheega hanti kasta ama qiimaheeda ee shakhsiga arrinku khuseeyo hadiyad ahaan u siiyay shakhsi seddexaad shantii sano ee lasoo dhaafay ee kahoreeysa taarikhda codsiga xannibaada ee lasoo gudbiyay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

6. Haddii maxkamaddu soo saarto amarka xannibaada ah, waa in Xeer Ilaaliyaha Guud ku ogeeysiiyaa shakhsiga amarku saameeynaayo, labaatan iyo kow (21) maalmood gudahood oo ka bilaabmaysa maalinta amarka lasoo saaray, ama waqtiga maxkamaddu cayintu gudihiis.

7. Maxkamaddu, marka uu soo codsado shakhsiga amarka xannibaada ah uu saameeyay, waxay oggolaan kartaa in hantida xannibaadu saarantahay ama qaybo kamid ah hantidaas loo isticmaalo si loo dabaro mid ama kabadan oo kamid ah kuwaa soo socda:

(b) Kharashaadka nololeed ee macquulka ah ee uu u baahanyahay shakhsiga hantidiisa la xannibay (iyo kuwo ay u baahanyihiin dadka ku tiirsan shakhsigaas);

(t) kharashyada ganaci ee maalinlaha ee macquulka ah ee shakshigaas u baahanyahay;

(j) deymo cayiman ee si daacad ah shakhsigaas u galay.

Qodobka 33-aad
Nidaamka maareynta hantida inta Dowladdu hayso gacan ku haynteeda

1. Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa mas'uul ka ah maareynta hantida gacan ku haynteeda lala wareegay. Waa in Xeer Ilaaliyaha Guud u maareeya hantidaas qaab ilaalin kara inaysan lumin qiimaaheeda kahor inta aan la go'aamin in Dowladdu la wareegi karto iyoin kale.

2. Xeer-ilaaliyaha Guud waa inuu dhisaa Xafiiska Maareynta Hantida oo hoos yimaada Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud. Xafiiska Maareynta Hantida waa inuu lahaada Maareeye mas'uul ka ah hawlaha maalinlaha ah ee Xafiiska ama Waaxada, ooay kujiraan gaarista go'aamadda, marka ay haboontahay, isagoo raacaya tilmaamaha Xeer Ilaaliyaha Guud, in shirkad ganacsi oo gaar loo leeyahay loo xilsaaray inayfuliso qaybo kamid ah hawlaha maareynta ee ku aadan hantida lala wareegay.

3. Maareyaha Xafiiska Maareynta Hantida waa inuu u maareeya hantida gacan ku haynteeda lala wareegay, si maangal ah oo daruuri u ah ilaalinta hantida ama qiimaheeda, oo ay kujiraan balse aan ku ekayn:

(b) Inuu garab ka noqodo dacwad kasta oo madani ah oo saameynaysa hantida;

(t) Inuu hubiyo in dhammaan waajibaadyada saaran hantida la fuliyo;

(j) Iibinta hantida haddii ay tahay mid halaabeysa, qiimaheedu uusan

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

ahayn mid fadhiya ama kharashka ku baxaaya maareeynteeda ay ka badnaan karto qiimaheeda. Markasta oo la iibinaayo hanti gacan ku haynteeda lala wareegay waa in la helaa oggolaanshaha maxkamadda, marka laga reebo:

i. Haddii shakhsiga markii hore hantida lagala wareegay uu aqbalo inhantida la iibiyo ama si kale hantida loola macaamilo;
ii. Haddi waqtiga galaaya helitaanka oggolaanshaha maxkamadda uukeeni karo in qiimaha hantida waxbadan ka lumaan; ama
iii. Haddi kharashka iyo waqtiga galaaya helista oggolaanshaha maxkamadda uu yahay mid kabadan qiimaha hantida lala wareegay.

(x) Haddii hantida lala wareegay badankeed ay tahay mid ganacsi:

i. Shaqaalaysiinta shaqaale cusub, ama shaqa ka joojinta shaqaale horayuga shaqeeynaayay ganacsiga;
ii. Samaynta wax kasta oo lagama maarmaan ah, sharciga waafaqsan oo ku habboon in lagu sii wado ganacsiga;
iii. Iibinta, baabiinta, ama xirista ganacsiga, kadib marka uu soo helo amarka maxkamadd; iyo
iv. Haddi hantidu ka koobantahay saamiyo kujira shirkad, inuu isticmaalo xuquuqda saamiyada la xiriira, isagoo u isticmaalaya sidii inuu yahay samilihii lahaa saamiyada.

Qodobka 34-aad
Shuruudaha la wareegidda hantida

1. Ka dib marka shakhsi lagu xukumo dembi, waxyaabaha soo socda waa in lala wareegaa:

(b) Hantida loo adeegsaday fulinta fal dembiyeedka;

(t) Hantida laga helay fal dembiyeedka;

(j) Faa'iidooyinka laga helay fal dembiyeedka; iyo/ama

(x) Lacagaha qiima ahaan u dhigma hantida ama faa'iidooyinka laga helay faldembiyeedka.

2. Marka ay maxkamaddu soo saarayso amar ku xusan faqrada 1-aad ee Qodobkan taasoo ku saabsan hanti aan lacag ahayn, maxkamaddu waa inay ku qeexdaa amarka, qiimaha lacageed oo ay aragtu inuu yahay midka hantida xilliga ay soo saarayso amarka.

JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

3. Haddii aan la aqoonsan dhibbanayaasha fal dambiyeedka, dhammaan hantida loola wareegay si aan kasoo noqosho lahayn waxaa lagu wareejinayaa lahaanshiyaheeda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Haddii dhibbanayaasha la aqoonsan karo,maxkamaddu waxay go'aansan kartaa inay magdhow siiso dhibbanayaasha iyadoo la isticmaalayo hantidaas lala wareegay.

Qodobka 35-aad
Habraaca codsiga amarka hanti la wareegista

1. Si loo helo amarka la wareegista aan kasoo noqoshada lahayn ee hanti, Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waa inuu codsi usoo gudbiyaa maxkamaddaha awoodda u leh, isagoo ku caddeeynaaya codsiga in hantidu tahay middii loo adeegsaday fulinta fal dembiyeedka, mid laga helay fal dembiyeedka, ama faa'iidooyinka laga helay fal dembiyeedka ama lacago qiima ahaan u dhigma hantida ama faa'iidooyinka laga helay fal dembiyeedka.

2. Marka laga reebo haddii maxkamaddu ogolaato, Xeer Ilaaliyaha Guud waa inuu ku soo gudbiyaa codsiga ku xusan faqrada 1-aad ee Qodobkaan hal sano (1) gudahiisa oo
ka bilaabmaysa taariikhda shakhsiga sida kama dambeysta ah loogu xukumay faldembiyeedka.

3. Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu wax ka beddeli karaa codsiga amarka la wareegidda hantida waqti kasta ka hor inta maxkamaddu aysan gaarin go'aanka kama dambaysta ah ee codsiga. Waa in ogeysiis macquul ah oo kusaabsan wax ka beddelka codsiga la siiyo shakhsiyaadka ay khusayso.

4. Marka laga reebo haddii maxkamadda awoodda u leh ay u ogolaato, marka codsiga ku xusan faqrada 2-aad ee Qodobkan laga gaaro go'aan kama dambays ah, Xeer Ilaaliyaha Guud uma gudbin karo maxkamadda awoodda u leh codsi dheeraad ah ooku saabsan soo saarista amar la wareegis hanti ee ku aadan isla halka fal dambiyeed. Maxkamaddu ma bixinayso oggolaansha ilaa ay ku qanacdo:

(b) In hantida iyo faa'iidada codsiga cusub uu la xiriiro ay tahay mid la aqoonsaday ama laga warhelay, kadib markii la go'aamiyay codsigii hore;

(t) In caddaymo lagama maarmaanka ah la helay, ka dib markii la go'aamiyay codsigii hore; ama

(j) In danta cadaaladdu ay ku jirta.

5. Codsi dheeri ah ee ku xusan faqrada 4-aad ee Qodobkan lama soo gudbin karo lix

(6) sano ka dib oo ka bilaabmaysa taariikhdii la gaaray go'aankii kama dambaysta ah ee codsiga ee ku xusan faqrada 3-aad ee Qodobkan.

6. Si loo gaaro ujeedooyinka Qodobkan, shakhsiga waxa sidoo kale loo tixgelinaya in lagu xukumay fal dambiyeed, haddii:

(b) Aan lagu helin fal dembiyeed waalli darteed, ka dib markii la go'aamiyay in fal dambiyeedka la galay;

(t) Maxkamaddu, si waafaqsan raali ahaanshaha shakhsi lagu helay fal dembiyeed, ay xisaabta ku darsato fal dembiyeedka marka ay xukunka riddayso (TICs);

(j) Shakhsiga ay khusayso uu dhinto ama la waayo ka hor inta aan la xukumin,balse maxkamaddu ay go'aamiso in fal dambiyeedka la galay.

Qodobka 35A
Awaamiirta hantid la wareegista oo aan ku saleysnayn xukun ciqaabeed

1. Marka uu soo codsado Xeer-ilaaliyaha Guud, maxkamadda awoodda uleh waa inaysoo saartaa amarka la wareegis hanti oo aan ku saleysnayn xukun ciqaabeed, haddii maxkamaddu ku qanacdo in ay u badantahay in hantidu tahay mid loo adeegsaday fulinta fal dembiyeed ama mid laga helay fal dembiyeed, ama ay tahay hanti ay leedahay argagixiso, iyadoon loo eegayn in la yaqaan cidda dembiga gashay iyo in kale.

2. Si loogu qanciyo maxkamadda in hantidu tahay mid laga helay fal dambiyeed, looma baahna in la caddeeyo in hantidu, si toos ah ama dadban, gebi ahaan ama qayb kamid ah, ay tahay mid laga helay fal dambiyeed gaar ah oo cayiman ama inuu jiro shakhsi lagu soo eedeeyay fal dambiyeedkaas ama inay jirto in layaqaano shakhsiga galay fal dambiyeedka. Waxa loo baahan yahay oo kaliya in maxkamadda laguqanciyo in hantidu tahay mid laga helay hal fal dambiyeed ama fal dambiyeedyo badan.

3. Hantida waxaa lagu heli karaa in ay tahay hantia lagu sheegay faqrada 1-aad ee Qodobkan xitaa haddi shakhsi lagu waayay fal dembiyeed, ama lagala laabto eedaha kahor inta aan xukunka lagaarin ama maxkamaddu joojiso garmaqalka.

4. Codsi ku aadan soo saarista amar la wareegis hanti oo aan ku saleysnayn xukun ciqaabeed waxaa sidoo kale laga gudbin karaa hantida lagu beddeshay iyadoo loo maraayo iib ama nidaam kale, hantidii asalka ahayd ee loo adeegsaday fulinta fal dembiyeed ama middii laga helay fal dembiyeed iyo/ama hantidii aheyd mid ay laheyd argagixiso.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

5. Amarka ku aadan la wareegis hanti oo aan ku saleysnayn xukun ciqaabeed waxaa loo codsan karaa hanti, iyadoon loo eegayn xilliga la helay hantidas.

6. Amarka ku aadan la wareegis hanti oo aan ku saleysnayn xukun ciqaabeed waxaa laga soo saari kara hantida la helay ama la isticmaalay ka hor inta uusan Sharcigani dhaqangelin.

7. Amarka ku aadan la wareegis hanti oo aan ku saleysnayn xukun ciqaabeed waxaa la codsan karaa haddii uu dhintay shakhsiga galay falka uu ku saleysanyahay codsiga la wareegista hantida.

8. Marka la fulinayo faqradaha Qodobkan, waa in la ixtiraamaa xuquuqda dhinacyada saddexaad oo si daacadnimo ku jirto u dhaqmaya.

QAYBTA 8AAD
ISKAASHIGA CAALAMIGA AH: ISKA-KAASHIGA WADAJIR AH EE DHAQANGELINTA SHARCIYADA IYO ISKU-CELINTA EEDAYSANAYAASHA

Qodobka 36-aad
Qodob guud

1. Hay'addaha Dowladda ee awoodda uleh waa in ay siiyaan wada shaqaynta ugu balaaran ee suurtogalka ah hay'addaha awoodda uleh ee dowladaha shisheeye sii loo fududeeyo isku celinta eedaysanayaasha iyo iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada ku aadan baaritaanada dembiyada iyo dacwadaha la xiriira lacag-dhaqidda, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag- dhaqidda (predicate offenses) iyo maalgelinta argagixisada.

2. Haddii ay dhacdo in dalka shisheeye ee codsiga soo dirsanaaya uu codsado in tallaabooyin awood iyo qasab ku saleysan loo fuliyo, waa in lasoo buuxiya shuruuda ah in fal dambiyeedka shakhsiga lagu eedeeyay uu yahay mid dembi ka ah labada dal.

Tallaabooyin awoodda iyo qasab ku saleysan waxaa kamid ah balse kuma eka, xarig, baarista goobaha, la wareegista gacan ku haynta shay iyo dhageesiga isgaarsiinta.

3. Shuruuda ah in falka shakhsiga lagu eedeeyay uu yahay mid dembi ka ah labada dalwaxaa loo arkayaa in lasoo buuxshay, iyada oo aan loo eegayn in shuruucda dalka shisheeye ee codsiga soo dirsaday ay fal dambiyeedka ku daraan kooxaha dambiyada ah oo ay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku darto ama ay ugu yeerayaan magac lamid ah midka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay ugu yeerto, balse shuruudo waxay tahay in falka

saldhiga u ah dembiga taageerada loo soo raadsadayuu yahay mid ka ah fal dambiyeed Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo dalka shisheeye ee codsiga soo dirsaday.

4. Wasaaradda Cadaaladda oo kaashanaysa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qarankaiyo Xarunta Warbixinnada Maaliyadda waa inay:

(b) Diyaarinaysa xeer-nidaamiyaasha qeexaya habraacyada, foomamka, iyo waqtiyada kama dambaysta ah ee jawaab celinta, si loo hubiyo in codsiyada la xiriira iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada loo maareeyo si wax ku ool ah, walibana looga jawaabo waqtiga ku haboon gudihiisa. Xeer- nidaamiyaashan waa in loo soo saara si waafaqsan Qodobka 52-aad ee Sharcigan; iyo

(t) Uruurisaa xogta si loola socdo oo loo qiimeeyo wax ku oolnimada habraaca dirista iyo ka jawaabista codsiyada la xiriira iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada.

Qodobka 37-aad
Codsiyada la xiriira iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada

Markay dal shisheeye soo dirsado codsi, waa in codsiyada la xiriira iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada ee la xiriira lacag-dhaqidda, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqidda (predicate offenses) iyo maalgelinta argagixisada, loo fuliyaa si waafaqsan mabaadi'da lagu sheegay Qaybtan. Iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada waxa gaar ahaan ka mid noqon kara balse kuma eka, arrimahan:

1. Uruurinta caddaymaha ama ka qaadista shakhsiyaadka bayaannada, oo ay ku jiraan bayaannada lagu qaado maxkamaddaha dhexdoodo;
2. Ka gacan siinta arrimaka la xiriira in loo fududeeyo shakhsiyaadka la hayo, markhaatiyaasha iskood isku xilqaamay, ama shakhsiyaadka kale inay la kulmaan hay'addaha garsoorka ee dalka codsiga soo dirsaday, si ay u bixiyaan caddaymo ama gacan uga geystaan baaritaannada;

3. In si wax ku ool ah loogu gudbiyo dukumentiyada garsoorka shakhsiyaadka ay ku socdaan;

4. Fulinta baarista shakhsiyaadka iyo xarumaha, iyo la wareegista gacan ku haynta cadaymaha;

5. Baarista walxaha iyo goobaha;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

6. Bixinta macluumaadka, walxaha caddaymaha gala, iyo talo-bixin khubaro;

7. Bixinta dukumintiyada asal ah ama nuqullada la hubiyay, iyo diiwaanada, oo ay kujiraan diiwaanada dowlada, bankiyada, maaliyadda, shirkadaha iyo ganacsiyada oo ay haayan hay'addaha maaliyada, ganacsiyada iyo xirfadaha la-cayimay ee aan fulin hawlaha maaliyadeed (DNFBPs) iyo shakhsiyaadka dabiiciga ah iyo kuwa qaanuuniga ah;

8. Aqoonsiga, raacraaca, xayiraada, la wareegista gacan ku haynt ama sitoos ah ula wareegista hantida la dhaqay ee ka timid fal dambiyeedyada, iyo hantida ama lacagaha qiima ahaan u dhigma ama hantida loo isticmaalay ama larabo in loo isticmaalo lacag-dhaqidda, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqidda (predicate offenses) iyo maalgelinta argagixisada, si cadeeyn ahaan loogu isticmaalo ama si aan kasoo noqosho laheyn loola wareego;

9. Bixinta nooc kasta oo kale oo ah kaalmo la xiriirta iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada oo aan ka hor imanayn shuruucda maxalliga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 38-aad
Diidmada ku aadan dhaqangelinta codsiyada la xiriira iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada

1. Codsiyada la xiriira iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada lama diidi karo iyadoo loo tiigsanaayo shuruudo keenaya xaddidaad aan maangal ahayn.

2. Codsiyada la xiriira iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada waxaa la diidi kara oo keliya:

(b) Haddii codsiga aysan soo gudbin hay'adda dowladeed ee awoodda uleh si waafaqsan shuruucda dalka shisheeye ee codsiga soo dirsaday, ama haddii codsiga loo soo gudbiyay si aan waafaqsaneeyn shuruucda arrinkaa nidaamisa ama haddii nuxurka codsigu uusan waafaqsaneyn Qodobka 44-aad ee Sharcigan.

(t) Haddii dhaqangelinta codsiga uu soo dirsaday dalka shisheeye uu wax u dhimayo sharciga iyo kala danbeynta, madaxbannaanida, amniga, xasiloonida guud, ama danaha kale ee muhiimka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

(j) Haddii fal dambiyeedka codsigu la xiriiro uu yahay mid dacwad oogistiisu ka socoto Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama mid maxkamaddaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay xukun horay

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

uga gaareen;

(x) Haddii ay jiraan sababo macquul ah oo lagu aamini karo in tallaabooyinka ama amarka dhaqangelitiisa lasoo codsaday uu yahay mid loo abaabulay oo kadhan ah shakhsiga ay khuseeydo sababo la xiriira oo keliya isirkiisa, diintiisa, dhalashadiisa, meesha uu ka soo jeedo, fikradaha siyaasadeed ee uuaaminsanyahay, jinsiga ama xaalad kale ee shakhsiyadeed ee shakhsigaas u
gaar ah;

(kh) Haddii fal dambiyeedka lagu xusay codsiga uusan aheyn mid kuyaala ama ay aqoonsanyin shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama uusan la wadaagin asaatamo fal dambiyeedka lagu sheegay shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Balse, markii xaaladaan oo kale ay timaado, waa in la bixiyaa kaalmada sharci ee la xiriirta iska-kaashiga wadajirah ee dhaqangelinta sharciyada, haddii dhaqangelinta codsiga aysan u baahnayn in la isticmaalo tallaabooyin awood iyo qasab ku saleysan oo ka dhan ah shakhsiga ay khuseeydo.

(d) Haddii tallaabooyinka ama amarka dhaqangelintiisa lasoo codsaday aan la dhaqangelin karin sababo la xiriira dhamaadka muddada xaddidaada ah ee lagu dabaqo dembiya lacad lacag-dhaqidda, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqidda (predicate offenses) iyo maalgelinta argagixisada ee ku xusan shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama sharuucda dalka codsiga soo dirsaday.

3. Dhaqangelinta codsiga la xiriira iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada lama diidi karo iyadoo lagu saleynaayo shuruuc waajibinaaysa in hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ay dhawraan sirta, marka laga reebo haddii macluumaadka lasoo codsado uu yahay mid ay haayan qareenno oo hoos imaanaya shuruucda ilaalinta xogta dhexmarta qareenka iyo macmilkiisa.

4. Kaalmada la xiriirtaa iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada lama diidi karo iyadoo lagu saleynaayoo oo keliya in fal dambiyeedku uu xiriir la leeyahay arrimo maaliyadeed iyo dhaqaale.

5. Go'aanka maxkamadeed ee ku aadan codsi la xiriira iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada waxaa laga qaadan karaa racfaan.

6. Hay'adda Dowladda ee awoodda uleh waan inay si degdeg ah ugu wargelisaa hay'addaha awoodda uleh ee dalka shisheeye, sababaha loo tiigsaday diidmada fulinta codsiga.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 39-aad
Codsiyada la xiriira dhaqangelinta tallaabooyin baaris

1. Tallaabooyinka baarista ee dal shisheeye soo codsado, oo ay kujiraan kuwa lagu xusay Qodobka 37-aad ee Sharcigan, waa inoo dhaqangeliya si waafaqsan habraacyada baarista ee ku xusan shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, marka laga reebo haddii dowladda shisheeya ay soo codsato habraac baaris oo gaar ahoo aan khilaafsaneyn shuruucdaas Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Sarkaal idman oo wakiil ka ah hay'adda awoodda uleh ee dowladda shisheeye ayaa ka qayb gali kara dhaqangelinta tallaabooyinka ay soo codsatay dowlada shisheeye.

Qodobka 40-aad
Codsiyada la xiriira dhaqangelinta tallaabooyin ku meel gaar ah

1. Tallaabooyinka ku meel gaarka ah oo ay soo codsato dowlada shisheeye waa in loo dhaqangeliya si waafaqsan shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Haddii codsiga dowladda shisheeye uu u qoranyahay si guud oo an cayimnayn, waa in la dhaqangeliya tallaabooyinka ugu habboon oo ay oggolyihiin shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Haddii shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya aysan qorayn tallaabooyinka dowladda shisheeye soo codsatay, hay'adda Dowladda ee awoodda uleh ayaa ku beddeli karta, kadib marka ay la tashato hay'addaha awoodda uleh ee dalka codsiga soo dirsaday, tallaabooyinka lasoo codsay tallaabooyin kale ee ku xusan shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kuwaa oo leh saameynta ugu dhawee lamidka ah tallaaboyinka lasoo codsaday.

3. Tallaabooyinka ku meel gaarka ah waxa iskood uga laaban kara xilli kasta hay'addaha garsoorka ee markii hore amray dhaqangelinta tallaabooyinkaas ku meel gaarka ah ama marka uu codsado Xeer Ilaaliya Guud, shakhsiyaadka laga shakiyay ama shakhsiyaadka ku doodaya inay xuquuq ku leeyihiin hantida, haddii ay jiraan sababo maangal ah oo muujinaya in fal dambiyeedka laga shakiyay uusan dhicin. Kahor inta aan laga laaban tallaabooyinka ku meel gaarka ah, waa in lagu wargeliya dalka shisheeye ee codsiga soo dirsaday.

Qodobka 41-aad
Codsiyada ku aadan hanti la wareegidda ee ka yimaada dalalka shisheeye

1. Haddii ay dhacdo in lasoo codsado kaalmo la xiriirta iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada oo kuu aadan dhaqangelinta amar hanti la wareegis, waa in hay'adda Dowladda ee awoodda uleh ee codsiga lagu soo hagaajiyay usoo gudbisaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, kaasoo aqoonsan kara, kadibna dhaqangelinaya amarka la wareegista hantida ee kasoo baxay hay'addaha garsoorka ee dalka shisheeye ee codsiga soo dirsaday ama ka codsan kara maxkamaddaha maxalliga ah ee awooddauleh inay siiyaan amar la wareegis hanti ee maxalli ah, kaasoo haddii lasoo saaro, ay tahay in Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud uu dhaqangeliyo.

2. Haddii Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud uu aqoonsado, walibana uu dhaqangeliyo amar la wareegis ee kasoo baxay hay'addaha garsoorka ee dalka shisheeye, waa inuuu tixgeliyaa xaqiiqooyinka lagu saldhiga u ah amarka la wareegista.

Qodobka 42-aad
Isticmaalka ama iibinta hantida lala wareegay ama la qaatay gacan ku haynteeda

1. Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:

(b) Waa inay la gashaa dalalka shisheeye heshiis ku aadan habraaca la'iskaga kaashanaayo arrimaha la xiriira qaadashada gacan ku haynta iyo la wareegista hantida;

(t) Waxay awood uleedahay maareynta iyo iibinta hantida taala dhulkeeda ee lala wareegay ama hantida la qaatay gacan ku haynteeda iyadoo dhaqangelinaysa codsiga uu soo dirsaday dalka shisheeye, haddii sidaas si ka

duwan aan lagu sheegin heshiis lala galay dalka codsiga soo dirsaday. Waa in tallaabooyinka maareynta iyo iibinta hantidaas aysan waxba u dhibin xaqqa ayuleeyihiin milkiilayaasheeda ku helay si niyadsan inay helaan hantidooda; iyo

(j) Waxay awood uleedahay inay la qaybsato dalalka shisheeya hanti lala wareegay, gaar ahaan, marka tallaabada la wareegista hantida ah, ay si toos ah ama si dadban uga dhalatay iskaashi ka dhaxeeyay hay'addaha sharci fulinta eeJamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo kuwa dalalka shisheeye.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 43-aad
Baaritaanada loo fuliyo sida wadajirka ah

Hay'addaha Dowladda Soomaaliya ee awoodda uleh iyo hay'addaha dowladaha shisheeye ee awoodda uleh waxay geli karaan heshiisyo laba geesood ah ama dhinacyo badan leh ama nidaamyo kala ee wadashaqayn oo laxiriira arrimaho ay baaristoodu ama dacwadoodu ka socoto hal wadan iyo in kabadan, si ay u abuuran kooxo si wadajir ah baaritaanada u fuliya. Heshiisyada ama nidaamyada wadashaqaynta ee noocaan ah waa inay qeexaan waajibaadyada, awoodaha, nidaamka macluumaad wadaagista, kharash-bixinta, iyo arrimaha kale ee la xiriira. Haddii uusan jirin heshiis ama nidaam wadashaqeyn, baaritaan wadajir waxaa loo samayn karaa si ku kooban hal hal kiis.

Qodobka 44-aad
Isku-celinta eedaysanayaasha

1. Lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada waa dembiyo lagu dhaqaayo mabda'aisku-celinta eedaysanayaasha.

2. Dhaqangelinta codsiyada ku aadan isku-celinta eedaysanayaasha ee la xiriira dembiya lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada waa inay u hoggaansamaan habraacyada iyo mabaadi'da lagu xusay heshiisyada isku-celinta eedaysanayaasha ee dhaqangalka ah. Haddii aysan jirin heshiisyo nuucaas ah ama haddii arrinku uusan hoos imaan heshiisyada jira, waxaa loo hoggaansamaya habraacyada ku qoran shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

3. Isku-celinta eedaysanayaasha ee ku salaysan Sharcigan waa in la fuliyaa oo keliya haddii fal dmabiyeedka la xiriira codsiga isku-celinta eedaysanayaasha ama dembiyada ku nuuca ah ay yihiin kuwo ku qoran ama ay aqoonsanyihiin shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

4. Codsiga isku-celinta eedaysanayaasha lama aqbalaayo:

(b) Haddii ay jiraan sababo macquul ah oo lagu aamini karo in codsiga isku- celinta eedaysanayaasha loo soo dirsaday si loo maxkamadeeyo ama loo ciqaabo shakhsi sababo la xiriira oo keliya isirkiisa, diintiisa, dhalashadiisa, meesha uu ka soo jeedo, fikradaha siyaasadeed ee uu aaminsanyahay ama jinsigiisa ama haddii fulinta codsiga ay dhaawac u gaysaneeyso shakhsiga arrinku khuseeyo sababo la xiriira asbaabta lasoo xusay;

(t) Haddii xukun kama dambaysta ah ay maxkamaddaha Jamhuuriyadda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Federaalka Soomaaliya ay ka gaareen dembiga la xiriira codsiga isku-celinta eedaysanayaasha.

(j) Haddii shahsiga la codsaday in lasoo celiyo uu noqday mid aan la maxkamadeeyn karin ama la ciqaabi karin si waafaqsan shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama kuwa dalka codsiga soo dirsaday, sababo ay ka midyihiin dhamaadka muddada xaddidaad ee fal dambiyeedka lagu soo eedeeyay ama cafis loo fidiyay; ama

(x) Haddii ay jiraan sababo maangal ah oo muujinaya in shakhsiga in lasoo celiyo la codsaday uu yahay mid lagu soo sameeyay ama lagu sameeyn karo jirdil ama dhaqamo ama ciqaabo arxan darro ah, bini'aadantinimada ka baxsan, ama sharaf dhac ah, ama haddi shakhsigaas horay uusan uga helin ama uusan ka helin karin dalka soo codsaday in loo soo celiyo dammaanadda aasaaska ah ee la xiriira dacwadaha ciqaabta ah ee ku xusuan Qodobka 14-aad ee Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda.

5. Isku-celinta eedaysanayaasha lama diidi karo iyadoo lagu saleynaayoo oo keliya infal dambiyeedku uu xiriir la leeyahay arrimo maaliyadeed iyo dhaqaale.

6. Codsiga isku-celinta eedaysanayaasha waa la diidi karaa:

(b) Haddii ay jirto eed ama dacwad aan wali dhammaan oo ka socota Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo la xiriirta fal dambiyeedka lagu soo eedeeyay shakhsiga lasoo codsado soo-celintiisa;

(t) Haddii fal dambiyeedku ka dhacay meel ka baxsan dhulka labada dal, oo walibana shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya aysan awood usiinayn Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya inay maxkamadayn karto dambiyada nuucan oo kala u dhaca, kuwaas oo ka dhaca meelo ka baxsan dhulkeeda.

(j) Haddii shakhsiga dib usoo-celintiisa lasoo codsaday horay loogu xukumay isla fal dambiyeedka la xiriira codsiga soo celinta eedeeysanaha ama hadii shakhsiga uu khatar ugu jiro in lagu maxkamadeeyo maxkamad aan ahayn kuwa caadiga ah ama maxkamad gaar ah kuwaasoo ee uu kala kulmi karo caddaalad darro xoogan;

(x) Haddii Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyadoo sidoo kale tixgelinaysa dabeecadda fal dambiyeedka iyo danaha dalka codsiga soo dirsaday, ay u aragto in dib u celinta shakhsiga lasoo codsaday, iyadoo ku saleynaysa xaaladaha khaas u ah kiiska, ay tahay arrin khalo horjeeda arrimo la xiriira bini'aadantinimada sababo la xiriira da', caafimaadka ama duruufaha kale ee shakhsi ahaaneed ee shakhsiga lasoo codsaday in lasoo celiyo gaar u ah;

(kh) Haddii codsiga soo-celinta shakhsiga loo codsaday si loo dhaqan geliyo xukun kama dambeys ah oo la gaaray iyada uusan joogin shakhsiga la xukumay, iyadoo maqnaanshaha shakhsiga ay tahay mid ka dhalatay sababoka baxsan awooddiisa, in shakhsigu uusan helin ogeeysiis ku filan ee ka qaybgalka dacwadda ama in shakhsigu uusan helin fursad ku filan diyaarinta difaaciisa ama in shakhsigu uusan heli doonin fursad ku aadan in dacwadiisa dib loo dhageeysto ama dib loo maxkamadeeyo isagoo jooga; amd

(d) Haddii Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay la wareegtay ikhtisaas maxkamaddeynta fal dambiyeedka.

7. Haddii codsiga la xiriira isku-celinta eedaysanayaasha loo diiday si waafaqsan faqrada 4-aad iyo 6-aad ee Qodobkan, waa in Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud si'uu u furo dacwad ciqaab oo ka dhan ah shakhsiga codsiga soo celintu ku saabsaneyd, isagoo kusoo eedeeynaya fal dambiyeedka ku xusan codsi soo celinta.

8. Marka ay timaado fal dambiyeedyada lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa ay aqbali kartaa codsiga soo celinta kadib marka ay ka hesho dalka codsiga soo gudbinaaya, codsi ku aadan in lasameeyo xarig ku meel gaar ah. Codsiga la xiriira isku-celinta eedaysanayaasha waxaa la fulinayaa haddii shakhsiga codsigu ku saabsanyahay uu maxkamadda awoodda uleh horteeda ku aqbalo in la celin karo.

Qodobka 45-aad
Habka maareynta codsiyada la xiriira isku-celinta eedaysanayaasha iyo iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada

1. Sii loo gaaro ujeedooyinkaan Sharcigan, dembiyada lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada looma tixgelinaayo dembiyo siyaasadeed ama dembiyo la xiriira fal-dambiyeed siyaasadeed, ama dembiyo ka dhashay ujeeddooyin siyaasadeed.

2. Codsiyada la xiriira isku-celinta eedaysanayaasha iyo iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada waa in loo maareeya sida soo socota:

(b) Wasaaradda Cadaaladda ayaa mas'uul ka ah, iyada ayaana awood uleh in loo soo gudbiyo codsiyada la xiriira iska-kaashiga wadajir ah ee dhaqangelinta sharciyada ama codsiyada la xiriira isku-celinta eedaysanayaasha oo ay soo diraan hay'addaha dalalka shisheeye, kuwaa oo ku aadan dembiya lacad lacag- dhaqidda, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag- dhaqidda (predicate offenses) iyo maalgelinta argagixisada. Marka ay hesho codsiyada, waa inay u

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

gudbisa Xeer Ilaaliyaha Guud si uu uga shaqeeyofulintooda.

(t) Wasaaradda Cadaaladda waa inay hubisaa in si degdeg ah loogu gudbiyo Xeer Ilaaliyaha codsiyada ay soo gudbiyeen hay'addaha dalalka shisheeye, oo walibana ay ku dhiirigelisa in si degdeg ah loo dhaqan-geliyo.

(j) Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waa in uu dhisaa habraacyo faahfaahsan, oo ay ku jiraan nidaamka maaraynta kiisaska, si loo hubiyo in si waqtiyeeysan oo mudnaan ku dheehantahay loo dhaqangeliyo codsiyadaas.

(x) Markii ay jiraan xaalado degdega ah, codsiyada waxaa lagu soo dhex gudbin karaa Hay'adda Booliska Caalamiga ah ee La-dagaalanka Dambiyada (ICPO/Interpol) ama waxaa si toos ah loogu soo gudbin karaa Xafiiska Xeer

Ilaaliyaha Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Markii tani dhacdo, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waa inuu ogeysiiyaa Wasaaradda Cadaaladda.

(kh) Codsiyada iyo jawaabaha waa in lagu gudbiyaa boosto ama habab kale eedegdegta ah oo amnigoodu suganyahay oo usoo gudbin kara si saxa oo aan waxba iska beddelin, diiwaanada iyo dukumintiyada lagu soo diray, taasoo u oggolaan karta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, inay xaqiijiso saxnaanta dukumintiyada ama diiwaanada lasoo gudbiyay.

(d) Codsiyada iyo lifaaqyadooda waa in ay la socodaan tarjumaad ku qoran luqad ay aqbali karto Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 46-aad
Nuxurka codsiyada

1. Codsiyada waa in lagu qeexaa:

(b) Magaca hay'adda dowladda shisheeye ee codsaneysa tallaabooyinka;

(t) Magaca iyo mas'uuliyadaha hay'adda ama hay'addaha dowladda shisheeye ee sameeynaysa baarista, eedaynta iyo maxkamadeynta;

(j) Magaca hay'adda Dowladda ee laga codsanaayo tallaabooyinka;

(x) Ujeedada codsiga iyo sharaxaad ku aadan duruufaha

kiiska;(kh) Xaqiiqooyinka taageeraya codsiga;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(d) Faahfaahin kasta oo la haayo oo sahlaysa in la aqoonsado shakhsiyaadka codsiga ku saabsan yahay, gaar ahaan magaca, xaaladda guur, dhalashada, ciwaanka goobta laga heelayo, iyo shaqada uu qabto;

(r) Macluumaad kasta oo lagama maarmaanka u ah in la aqoonsado ama la raadraaco shakhsiyaadka lagu eedeynaayo falka, iyo/ama hantida loo isticmaalay fal dambiyeedka amd hantida kale ee su'aalaha laga qabo;

(s) Qodobada sharciga ee dhigaya dembiga ama, haddii ay suurta gal tahay, sharaxaad maxkamadeed ee ku aadan qodobada sharciga ee dhigaya dembiga iyo sharaxaad la xiriirta ciqaabta lagu soo rogi karo shakhsiga gala dembiga; iyo

(sh) Sharaxaad ku saabsan kaalmada loo baahan yahay iyo tafaasiisha kuaadan habraac kasta oo gaar ah ee dalka codsiga soo dirsay uu rabo in loo dabaqo, oo ay kamid tahay in tallaabooyinka uu codsanaayo ay yihiin kuwo u baahan awood iyo qasan iyo inay ku tiirsan yihiin amar maxkamadeed ee kasoo baxay maxkamaddaha dalka codsiga soo dirsanaaya. Haddii uu ku tiirsanyahay amar maxkamadeed waa in nuqul ka mid ah amarka maxkamaddalagu soo daraa codsiga.

2. Marka laga soo tago kuwa kor ku xusan, waa in ay ku jiraan codsiyada faahfaahinnada gaar ah ee soo socda markii kiisasku yihiin kuwo si gaar ah loo cayimay:

(b) Markii codsigu kusaabsanyahay tallaabooyin ku-meel-gaarka ah, waa inay jirtaa sharraxaad ku aadan tallaabooyinka la codsanaayo;

(t) Markii codsigu kusaabsanyahay in loo soo saaro amar maxkamadeed ee la wareegista hanti, waa in lagu soo daraa codsiga, sharaxaad ku aadan xaqiiqooyinka iyo doodaha la isticmaali karo, si loogu qanciyo maxkamadda awoodda uleh inay soo saaran amar hanti la wareegis oo waafaqsan shuruucda maxalliga ah;

(j) Markii codsigu kusaabsanyahay dhaqangelinta amarro maxakamdeed ee la xiriira tallaabooyin ku meel gaar ah iyo la wareegis hanti, waa in codsiga ay la socdaan:

i. Nuqul ah amarkii maxkamadda oo la xaqiijiyay inuu yahay midkii maxkamaddu soo saartay iyo asbaabta lagu saleyay soo saarista amarka, haddii aysan kudhex qorneen amarka laftigiisa;

ii. Dukumeenti xaqiijinaya in amarku yahay mid kama dambeys ah, la dhaqangelin karo, oo aan racfaan ka furnayn;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

iii. Tilmaamo ku aadan ilaa xadka amarka la fulinayo iyo, haddii loo baahanyahay, lacagaha qayb ka ah hantida oo ay tahay in dib looga soo celiyo cid kale;

iv. Haddii ay lagama maarmaan noqoto, oo ay suurtagal tahay, macluumad kasta oo ku saabsan xuquuqda dhinacyada saddexaad ee ku aadan hantida loo adeegsaday in fal dambiyeedka lagu galo, hantida fal dambiyeedka laga helay iyo hantida iyo waxyaabaha kale ee hoos imaanaya codsiga;

3. Marka codsigu la xiriiro isku-celinta eedaysanayaasha, haddii shakhsiga lagu xukumay fal dambiyeed, waa in codsiga ay la socdaan xukunka maxkamadda ee asalka ah ama nuqul xukunka ah oo la xaqiijiyay ama dukuminti kale oo qeexaya xukunka iyo ciqaabta lagu soo rogay, iyo sidoo kale sharaxaad xaqiijinaysa in xukunku yahay mid dhaqangeli kara iyo inta ciqaabta ka harsan oo ay tahay in shakhsigu maro.

Qodobka 47-aad
Macluumaadka dheeriga ah

Wasaaradda cadaaladda ama hay'addaha Dowladda ee kale ee ka hawl galeysa dhaqangelinta codsiga waxay ka codsan kartaa hay'adda dowladda shisheeye ee soo gudbisay codsiga macluumaad dheeri ah, haddii ay u aragto inuu u yahay daruuri hawsha dhaqangelinta codsiga.

Qodobka 48-aad
Dhawrista sirta codsiyada

Haddii codsi lasoo gudbiyaya uu u baahanyahay in jiritaankiisa iyo nuxurkiisa sir ahaan loo dhawro, waa in loo hoggaansama shuruudaas. Haddi aysan suurtogal ahayn in la fuliyo shuruudaas, waa in hay'addaha dowladda shisheeye ee codsiga soo gudbisay si degdeg ah lagu oggeeysiia.

Qodobka 49-aad
Dib u dhaca dhaqangelinta codsiyada

Wasaaradda Cadaaladda waxay go'aansan kartaa inay daahiso u dirista codsiga loo soo gudbiyay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud si loo dhaqangeliyo, haddii tallaabooyinka iyo amarka lagu dhex codsaday codsiga uu ku yeelan karo saameyn taban baaris ama dacwad socota. Markii ay go'aankaan gaarto Wasaaradda Cadaaladda waa inay si degdeg ah ku oggeysiiya hay'adda dowladda shisheeye ee codsiga soo dirsatay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 50-aad
Kharashaadka ku baxa dhaqangelinta codsiyada

Kharashaadka ku baxay dhaqangelinta codsiga ay soo gudbisay dowladda dalka shisheeye waxaa bixinaaya dowlada dalka shisheeye ee soo gudbisay codsiga, haddii sidaas si ka duwan aan la'isku raacin.

Qodobka 51-aad
Habka qaybsiga hantida lala wareegay

Hantida loola wareegay si waafaqsan dhaqangelinta codsi la wareegis hanti oo ay soo dirtay dowladda dal shisheeye, waxaa loo qaybsanayaa sidaan:

(b) Haddii hantida lala wareegay ay qiima ahaan kayartahay shan kun oo Doollar (USD $5,000), ama lacag kale oo aan Doollar ahayn ee u dhiganta lacagtaas, dhammaan lacagtaas ama hantidaas oo dhan waxaa lagu wareejinaaya Khasnadda Dhexe ee dowladda Federaalka Soomaaliya.

(t) Haddii hantida ama qiimaha hantida ay ka badan tahay shan kun oo Doollar (USD $5,000), ama lacag kale oo aan Doollar ahayn ee u dhiganta lacagtaas, labada dowladood waa inay ka heshiiyaan habka loo wadaagaayo hantidaas.

QAYBTA 9-AAD
NOOCYADA KALE EE ISKAASHIGA CAALAMIGA AH

Qodobka 51A
Qodob guud

1. Inta ay ku guda jiraan dagaalka ka dhanka ah lacad lacag-dhaqidda, dambiyada asalka ah ee lacagta soo saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqidda (predicate offenses) iyo maalgelinta argagixisada, Xarunta Warbixinnada Maaliyadda, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh iyo hay'addaha kale ee Dowladda ee awoodda uleh waa inay hubiyaan in iskaashi dhaw ay la yeeshaan hay'addaha dowladaha shisheeya ee dhigooda ah, ha ahaato mid ka dhalatay codsi kayimid dalalka shisheeye ama mid hay'addaha Dowladda ay iskood u bilaabeen. Waa inay sidoo kale hubiyaan in habka iskaashiga uu yahay mid waafaqsan shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, heshiisyada caalamiga ah oo ay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixday ama mid ku saleysan mabaadi'da isku-tiirsanaanta (reciprocity) iyo sir dhawrista.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2. Si loo fuliyo iskaashiga lala yeenalaayo hay'addaha awoodda uleh ee dowladdaha shisheeye ee lagu sheegay faqrada 1-aad ee Qodobkan, Xarunta Warbixinnada Maaliyadda, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh iyo hay'addaha kale ee Dowladda ee awoodda uleh:

(b) waa inaysan ku xirin shuruudo aan macquul ahayn ama keenaya xaddidaadaan maangal ahayn marka ay bixinayaan macluumaad ama kaalmo iskaashi, waana inay la wadaagaan hay'addaha dowladaha shisheeye ee dhigooda ah macluumaadka ay u baahanyihiin, iyadoon loo eegayn nooca ay yihiin hay'addahaas (sida, hay'addo madani ah, kuwo maamul, kuwo sharci fulin, kuwo garsoor, ama kuwa kale) ama in codsigu ku saabsanyahay arrimo maaliyadeed ama uu xiriir laleeyahay baaris, ama dacwad maxkamadeed ee socota;

(t) waa in ay isticmaalaan nidaamyo cad oo aminoogu suganyahay oo sahlaya gudbinta iyo fulinta codsiyada; iyo sidoo kale

(j) waa inay dhisaan, oo ay isticmaalan nidaamyo cad si loo ilaaliyo macluumaadka, xogaha, iyo dukumintiyada ay ka heleen hay'addaha dowladaha shisheeye ee dhigooda ah, waana inay sidoo kale isticmaalan sir dhawrista ku habboon codsiyada iskaashiga iyo xogaha, macluumadka iyo dukumintiyada , taaso waafaqsan waajibaadyada saaran hay'addaha labada dal ee la xiriira dhawrista xogta.

Qodobka 51B
Awoodda hay'addaha Dowladda ee kaalmo siinta hay'addaha shisheeye ee dhigooda ah

1. Xarunta Warbixinnada Maaliyadda, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh iyo hay'addaha kale ee Dowladda ee awoodda uleh waxay awood uleeyihiin inay kaalmo iskaashi siiyaan hay'addaha dowladaha shisheeye ee dhigooda ah.

2. Xarunta Warbixinnada Maaliyadda waxay awood uleedahay inay la wadaagto dhigeeda dowladaha shisheeye:

(b) dhammaan macluumadka iyo dukumintiyada ay u heli karto si toosan ama dadban, oo ay kujiraan macluumaadka ay soo gudbiyaan hay'addaha warbixinnada (reporting entities) iyo hay'addaha kale ee dowladda ee awooddauleh, si waafaqsan Qodobka 23-aad ee Sharcigan; iyo

(t) macluumaad iyo dukuminti kasta oo ay awood leedahay inay si toosan ah ama dadban, kaga hesho hay'addaha maxalliga. Dhinsta macluumaadka iyo dukumintiyadaan waa inay u hoggansantahay mabda'a isku-tiirsanaanta(reciprocity).

JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

3. Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh waxay awood uleedahayinay la wadaagaan dhigooda dowladaha shisheeye:

(b) macluumaadka ay u heli karaan sida maxalliga ah, oo kujiraan macluumaadka ay haayan hay'addaha maaliyadda iyo ganacsiyada iyo xirfadaha la-cayimay ee aan fulin hawlaha maaliyadeed (DNFBPs). Waa inay macluumaadka wadaagan iyagoo eegaya baahida loo qabo.

(t) marka ay daruuri u tahay ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada, waxay wadaagi karaan macluumaadkan:

i. macluumaadka la xiriira korjoogteeynta, oo ay ka midyihiin macluumka la xiriira nidaamyada korjoogteeynta, iyo macluumaadka guud ee la xiriira hay'addaha warbixinnada (reporting entities) sida hay'addaha maaliyadda iyo ganacsiyada iyo xirfadaha la-cayimay ee aan fulin hawlaha maaliyadeed (DNFBPs); iyo
ii. macluumaadka la xiriira nidaamyada ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada, oo ay ka midyihiin macluumaadka la xiriira habraacyada iyo siyaasadaha gudaha ee ku aadan ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada oo ay isticmaalan hay'addaha warbixinnada (reporting entities) sida hay'addaha maaliyadda iyo ganacsiyada iyo xirfadaha la-cayimay ee aan fulin hawlaha maaliyadeed (DNFBPs) iyo sidoo kale macluumaadka la xiriira nidaamyada xaqiijinta xogta aqoonsiga ee macmiilka, nuucyada koontooyinka bankiyada iyo macaamilaadka.

(j) Marka laga soo tago macluumaad wadaagista, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh waxay awood uleeyihiin in iyagoo wakiil ka ah hay'addaha dowladaha shisheeye ee dhigooda ah, inay jaawaabo u raadiyaan su'aalo ay qabaan hay'addahaas. Marka ay habboontahay, waxay sidoo kale awood uleeyihiin inay u oggolaadan hay'addaha dhigooda ah ee shisheeye inay jawaabo u raadsan karaa su'aalaha ay qabaan, iyagoo la xiriiraya hay'addaha warbixinnada (reporting) ee hoos yimaada kormeerka Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda uleh.

4. Hay'addaha sharci fulinta waxay awood uleedahay inay la wadaagaan dhigoodadowladaha shisheeye:

(b) macluumaadyada maxalliga ah oo ay hayaan ee ah mid sirdoon ama mid
baaris ee la xiriira lacag-dhaqidda, dambiyada asalka ah ee lacagta soo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

saara ee saldhiga u ah lacag-dhaqidda (predicate offenses) ama maalgelinta argagixisada, oo ay kujiraan macluumadyada la xiriira aqoonsiga iyoraadraaca hantida loo isticmaalay galista denmbiyada ama hantida laga helay dembiyada.

(t) marka laga soo tago macluumaad wadaagista, hay'addaha sharci fulinta waxay sidoo kale awood uleeyihiin:

i. inay u isticmaalan awoodooda, oo ay kamid tahay farsamooyinkooda baarista si waafaqsan shuruucda maxalliga ah, si'ay jawaabaha iyo macluumaadka ay u baahanyihiin hay'addaha dowladaha shisheeye eedhigooda ah ay usoo helaan.
ii. inay la fuliyaan baaritaano wadajir ah hay'addaha dowladdaha shisheeye ee dhigooda ah, oo marka ay daruuri tahayna, ay la sameeystaan heshiisyo iskaashi ee laba dhinac ah ama dhinacyo badan hay'addaha shisheeye ee dhigooda ah, si loo fududeeyo fulinta baaritaannada wadajirka.

Qodobka 51C
Diididda kaalmo siinta hay'addaha shisheeye

1. Xarunta Warbixinnada Maaliyadda, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda u leh iyo hay'addaha kale ee Dowladda ee awoodda u leh waxay diidi karaan inay macluumaad ama dukumintiyo la wadaagan hay'addaha dowladaha shisheeye ee dhigooda ah, haddii:

(b) hay'addaha dowladda shisheeye ee dhigooda ah aysan u dhawri karinmacluumaadka, xogta iyo dukumintiyada si wax ku ool ah;

(t) ujeedooyinka loo isticmaalaayo macluumaadka, dukumintiyada iyo xogta oo aan loo caddeyn si lagu qanci karo;

(j) ujeedooyinka loo isticmaalaayo xogta, macluumaadka iyo dukumitiyada aysan xiriir la lahayn ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada;

(x) wadaagista xogta, macluumaadka iyo dukumitiyada ay saameyn taban ku yeelan karto baaris ama dacwad oogis ka socota Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

(kh) wadaagista xogta, macluumaadka iyo dukumitiyada ay ku tahay xadgudub danaha sharciga waafaqsan ee shakhsiyaadka dabiiciga ah iyo kuwa qaanuuniga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama waxa ay ka hor imaanaysa mabaadi'da aasaasiga ah ee shuruucda maxalliga ah. Marka ay diidaan, Xarunta Warbixinnada Maaliyadda, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda u leh iyo hay'addaha kale ee

Dowladda ee awoodda u leh, waxaa saraan mas'uuliyada ah inay u cadeeyaan hay'addaha dowladdaha shisheeye ee dhigooda ah saxnaanshaha sababta loo diiday wadaagista macluumaadka.

Qodobka 51D
Codsashada kaalmo hay'ado shisheeye

1. Marka ay kaalmo ka codsanayaan hay'addaha dowladaha shisheeye ee dhigooda ah,Xarunta Warbixinnada Maaliyadda, Hay'addaha Dabagalka iyo Kormeerka ee awoodda u leh iyo hay'addaha kale ee Dowladda ee awoodda u leh:

(b) waa inay ku daraan codsigooda, sharaxaad kooban oo muujinaysa xaqiiqooyinka ay ka warqabaan, walibana ay cadeeyaan ujeedooyinka looisticmaalaayo macluumaadka la codsaday;

(t) in aysan u isticmaalan macluumaadka iyo dukumintiyada ay soo gudbiyeen hay'addaha dowladda shisheeye ujeedooyin ka duwan kuwii loo codsaday, waana inaysan la wadaagin macluumaadka iyo dukumintiyada loo soo gudbiyay garab saddexaad ama aysan u isticmaalin macluumaadkaas iyo dukumintiyadaas baaris horudhac ah ama baaris dambiyeed, ama dacwad maamul ama mid madani ilaa ay ka helaan oggolaansho hay'adda dowladda shisheeye ay soo gudbisay macluumaadka iyo dukumintiyada; iyo sidoo kale

(j) waa inay marka laga soo codsado, ula wadaagan si waqtiyeeysan hay'addaha dowladdaha shisheeye ee soo gudbiyaya macluumaadka iyo dukumintiyada, warbixin ku aadan sida macluumaadki iyo dukumintiyadii loo isticmaalay iyo inta ay la ekeyd faa'iidada macluumaadka ay heleen.

QAYBTA 10-AAD
QODOBBO GUUD

Qodobka 52-aad
Awoodda soo saarista Xeer-nidaamiye-yaasha

1. Wasiirka Maaliyadda ayaa dikreeto wasiir ku soo saaraya, ka dib markii Guddigu ansixiyo, xeer-nidamiyeyaasha lagu dhaqan-gelinayo Sharcigan.

2. Xeer-nidaamiyeyaasha lagu soo saaro si waafaqsan faqradda 1-aad Qodobkaa waa in ay waafaqsanaadaan Sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 53-aad
Wax-ka beddelka sharciyadii ka horeeyay

Sharcigani waxaa uu beddelayaa Sharci Lr. 01 oo soo baxay Febraayo 21, 2016 oo ah Sharciga Ka Hortagga Lacag Dhaqista iyo Maalgelinta Argagixisada 2016.

Qodobka 54-aad
Dhaqan-Galka

Sharcigaani waxa uu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 364 **TAARIIKH: 04-TA JANAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1762/11/2024**, ku taariikheysan **18/11/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Sakariye Cabdullaahi Axmed.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Sakariye Cabdullaahi Axmed** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxa uu **Dr. Sakariye Cabdullaahi Axmed** ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-043-2025
TAARIIKH: 10-01-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Eadumo Mohamed Qaresadih.
AACAD _____ SAXIIX _____

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 365 **TAARIIKH: 04-TA JANAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1426/07/2024**, ku taariikheysan **08/07/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Mustaf Cabdulle Cosoble**.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Mustaf Cabdulle Cosoble** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxa uu **Dr. Mustaf Cabdulle Cosoble** ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-0042-2025
TAARIIKH: 10-03-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Omar
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY:
SAACAD SAXIIX

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.368 **TAARIIKH: 06-DA JANAAYO 2025**

MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA HEY'ADDA QAXOOTIGA & BARA-KACAYAASHA QARANKA

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, xarafka 'k'ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharci Lr.2 ee 21/02/2016, dhismaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-kacayaasha Qaranka.

MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay **XRW/366/01/2025**, ku taariikheysan **04/01/2024**, kuna saabsan Go'aan Gole Ansixinta Magacaabidda Guddoomiyaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-Kacayaasha Qaranka.

MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay **WAGF&D/XW/2871/2024**, taariikheysan **29/12/2024**, kuna saabsan Soo-Jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-U-Heshiisiinta ee Magacaabidda Guddoomiyaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-Kacayaasha Qaranka.

MARKUU GARWAAQSADAY: In ay laga maarmaan tahay in la magacaabo Guddoomiyaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-Kacayaasha Qaranka.

MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Marwo Safiya Xasan Maxamed** laga qaaday xilkii **Guddoomiyaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-kacayaasha Qaranka.**

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia
Tell: +252 1 861000 / 261000 | Email: contact@presidency.gov.so | Web: www.villasomalia.gov.so

2. waxa uu u magacaabay **Mudane Axmed Xuseen Cilmi** in uu noqdo **Guddoomiyaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-kacayaasha Qaranka.**

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa faafinta rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Fadumo Mohamed Omer
SAACAD _____ SAXIIX _____

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-041-2025
TAARIIKH : 29-05-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guhle
Hantidhowraha Guud ee JFS

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia
Tell: +252 1 861000 / 261000 | Email: contact@presidency.gov.so | Web: www.villasomalia.gov.so

XEER MADAXWEYNE LR. 369 **TAARIIKH: 08-DA JANAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: **Xeerka Lr. 1**, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: **Xeerka Lr. 7,** ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1859/12/2024**, ku taariikheysan **22/12/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Asad Maxamed Maxamuud Wehliye**.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Asad Maxamed Maxamuud Wehliye** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxa uu **Dr. Asad Maxamed Maxamuud Wehliye** ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-004-2025
TAARIIKH: 10-01-2025
SAXIIX:
Hantidhowraha Guud Ee J.F.S

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 KAN 2025
BY:
SAACAD SAXIIX

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

ـورية الصـومال الفيدرالـية
مكتـب الرئيـس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 371 **TAARIIKH: 15-TA JANAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1868/12/2024**, ku taariikheysan **23/12/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Burhaan Cabdullaahi Xuseen**.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Burhaan Cabdullaahi Xuseen** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxa uu **Dr. Burhaan Cabdullaahi Xuseen** ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-1059-2025
TAARIIKH: 15-03-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY:
SAACAD: SAXIIX

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia
Tell: +252 1 861000 / 261000 | Email: contact@presidency.gov.so | Web: www.villasomalia.gov.so

XEER MADAXWEYNE LR. 373 **TAARIIKH: 18-DA JANAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: **Xeerka Lr. 1**, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: **Xeerka Lr. 7**, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1917/01/2025**, ku taariikheysan **13/01/2025**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee ay leedahay **Dr. Faaduma Cali Abuukar**.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Faaduma Cali Abuukar** loo magacaabay in ay yeelato Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Faaduma Cali Abuukar** ay ka howl galaysaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HDW-038-2025
TAARIIKH: 19-03-2025
SAXIIX:
AVV. Abdirisak Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
RIXID / SENT
29 MAR 2025
SAACAD SAXIIX

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

هـورية الصـومال الفيدرالـية
مكتـب الرئيـس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 374 **TAARIIKH: 20-KA JANAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: **Xeerka Lr. 1**, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: **Xeerka Lr. 7**, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/732/10/2023**, ku taariikheysan **11/10/2023**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Muuse Macalim Maxamed**.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Muuse Macalim Maxamed** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Muuse Macalim Maxamed** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-037-2025
TAARIIKH: 10/03/2025
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
RIXID / SENT
29 MAR 2025
BY:
SAACAD SAXIIX

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia
Tell: +252 1 861000 / 261000 | Email: contact@presidency.gov.so | Web: www.villasomalia.gov.so

XEER MADAXWEYNE LR. 378 **TAARIIKH: 05-TA FEBRAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: **Xeerka Lr. 1**, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: **Xeerka Lr. 7**, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1702/2024**, ku taariikheysan **05/09/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Maxamed Axmed Ciyow.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Maxamed Axmed Ciyow** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Maxamed Axmed Ciyow** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HHH-036-2025
TAARIIKH: 10-02-2025
SAXIIX
AVV Ahmed Issse Gulaid
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
SENT
29 NOV 2024
BY:
MACAD SAXIIX

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 379 **TAARIIKH: 05-TA FEBRAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: **Xeerka Lr. 1**, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: **Xeerka Lr. 7**, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Maxamed Cabdullaahi Maxamed.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Maxamed Cabdullaahi Maxamed** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Maxamed Cabdullaahi Maxamed** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO. HAW - 035 - 2025
TAARIIKH 10-02-2025
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Guiale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
LAXIID / SENT
09 FEB 2025
SAXIIX

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 380 **TAARIIKH: 05-TA FEBRAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: **Xeerka Lr. 1**, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: **Xeerka Lr. 7**, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Sakariye Daahir Xuseen.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Sakariye Daahir Xuseen** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Sakariye Daahir Xuseen** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRAKA GUUD
DIIWAAN NO: HAP-0341-2025
TAARIIKH: 10-02-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Issa Guhad
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
RCVD / SENT
09 FEB 2025
SAXIIX

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR. 385 **TAARIIKH: 18-KA FEBRAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: **Xeerka Lr. 1**, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: **Xeerka Lr. 7**, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1625/2024**, ku taariikheysan **07/09/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cali Xuseen Nuur.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cali Xuseen Nuur** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Cali Xuseen Nuur** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO:
TAARIIKH
SAXIIX
AVV Ahmed Issa Osoble
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

XEER MADAXWEYNE LR. 386 **TAARIIKH: 19-KA FEBRAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: **Xeerka Lr. 1**, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: **Xeerka Lr. 7**, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1850/2024**, ku taariikheysan **18/12/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Salad Cilmi Fiidow.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Salad Cilmi Fiidow** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Salad Cilmi Fiidow** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN- 082 - 2025
TAARIIKH: 10-03-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Guuleed
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
20 MAR 2025
BY:
SAACAD ——— SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

هـورية الصـومال الفيدرالـية
مكتـب الرئيـس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 387 **TAARIIKH: 19-KA FEBRAAYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: **Xeerka Lr. 1**, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: **Xeerka Lr. 7**, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1933/2025**, ku taariikheysan **21/01/2025**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Xasan Maxamed Taajir.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Xasan Maxamed Taajir** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Xasan Maxamed Taajir** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-051-2025
TAARIIKH: 10-05-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
20 MAR 2025
BY:
LACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia
Tell: +252 1 861000 / 261000 | Email: contact@presidency.gov.so | Web: www.villasomalia.gov.so

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

هـورية الصـومال الفيدرالـية
مكتـب الرئيـس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.389 **TAARIIKH: 23-DA FEBRAAYO, 2025**

MAGACAABIS LA-TALIYAHA SARE MADAXWEYNAHA EE ARRIMAHA DIFAACA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leedahay Marwada loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista La-Taliye Sare Madaxweynaha ee Arrimaha Difaaca.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay **Marwo Jihaan Cabdullaahi Xasan** in uu noqdo La-Taliye Sare Madaxweynaha ee Arrimaha Difaaca.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-030-2025
TAARIIKH: 10-03-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gulale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Ferduna Mohamed Omar Sadhi
SAACAD _____ SAXIIX _____

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

هـورية الصـومال الفيدرالـية
مكتـب الرئيـس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 399 **TAARIIKH: 05-TA MAARSO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: **Xeerka Lr. 1**, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: **Xeerka Lr. 7**, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1925/01/2025**, ku taariikheysan **19/01/2025**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Saciid Cabdullaahi Axmed.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Saciid Cabdullaahi Axmed** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Saciid Cabdullaahi Axmed** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-029-2025
TAARIIKH: 10-05-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gulale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY:
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

XEER MADAXWEYNE LR. 406 **TAARIIKH: 24-TA MAARSO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: **Xeerka Lr. 1**, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: **Xeerka Lr. 7**, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1915/01/2025**, ku taariikheysan **14/01/2025**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Muuse Xasan Ibraahim.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Muuse Xasan Ibraahim** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Muuse Xasan Ibraahim** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRAKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-028
TAARIIKH: 24/03/2025
SAXIIX:
AVV Xamdi Isse Guuleed
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
24 MAR 2025
BY:
NACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.414 **TAARIIKH: 19-KA APRIIL 2025**

MAGACAABIS GARSOORE

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, xarafka 'k'ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Sharciga Nidaamka Garsoorka lambar 3, soona baxay 12 Juun 1962.
MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay **MFA/FRS/OFM/5511/2025,** taariikheysan **06/04/2025,** kuna saabsan Soo-Jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ee Magacaabidda Garsoore.
MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Mudanaha loo magacaabayo xilkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan Waxaa **Avv. Abdiwahid Warsame Abdullahi,** in uu noqdo **Garsooraha ku Matali Doono J.F.S Maxkamadda Caddaaladda ee Bulshada Bariga Afrika (EACJ).**

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa faafinta rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
21 JUL 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Saalihi
SAACAD _____ SAXIIX _____

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-052-2025
TAARIIKH : 09-09-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Awale
Hantidhowraha Guud ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 432 **TAARIIKH: 11-DA MAAJO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/2094/05/2025, ku taariikheysan 06/04/2025, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Noot-aayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cumar Xasan Cilmi.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cumar Xasan Cilmi** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Cumar Xasan Cilmi** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-056-2025
TAARIIKH : 09-08-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 JUL 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Sachihi
SACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 438 **TAARIIKH: 28-DA MAAJO, 2025**

XILKA-QAADIS GUDDOOMIYIHII HORE EE GOBOLKA BENAADIR AHAANA DUQA MAGAALADA MUQDISHO & MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA CUSUB EE GOBALKA BENAADIR AHNA DUQA MAGAALADA MUQDISHO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY:	Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY:	Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S
MARKUU ARKAY:	Qodobka 8aad, Faqradda 4aad ee Xeer Lr. 6 ee soo baxay 12/02/1980, kuna saabsan in G/Banadir iyo Dowladda Hoose ay hoos yimadaan Madaxtooyada J.F.S.
MARKUU ARKAY:	Warqadda summadeedu tahay **WAGF&D/XW/2810/2025**, ku taariikheysan **28/05/2025**, kasoo baxday Xafiiska Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dib-U-Heshiisiinta, ujeeddaduna tahay soo jeedinta Magacaabista Guddoomiyaha Gobolka Benaadir,ahna Duqa Magaalada Muqdisho.
MARKUU TIXGELIYAY:	Waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.
MARKUU GARWAAQSADAY:	In ay jirto baahi loo qabo in loo magacaabo G/Benaadir Guddoomiye Cusub.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Maxamed Axmed Amiir** laga qaaday xilkii guddoomiyaha Gobolka Benaadir, ahna Duqa magaalada Muqdisho.
2. Waxaa **Mudane Dr. Xasan Maxamed Xuseen (Muungaab)** loo magacaabay in uu noqdo **Guddoomiyaha Gobolka Benaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho**.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
21 JUL 2025
BY: Fadumo Mohamed Omer Salihi
MACAD ____ SAXIIX ____

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-054-2025
TAARIIKH : 09-08-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guhle
Hanti Dhowraha Guud ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 441 **TAARIIKH: 02-DA JUUN 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/521/07/2023, ku taariikheysan 20/07/2023, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Noot-aayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cabdifatax Cumar Maxamed.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cabdifatax Cumar Maxamed** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Cabdifatax Cumar Maxamed** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MADAXWEYNAHA JFS
DIXID / SENT
11 JUL 2025
ACAD ____ SAXIIX ____

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HA N-055-2025
TAARIIKH : 09-08-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guteh

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 442 **TAARIIKH: 02-DA JUUN 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/519/07/2023, ku taariikheysan 20/07/2023, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Noot-aayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cusmaan Cumar Kaatib.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cusmaan Cumar Kaatib** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Cusmaan Cumar Kaatib** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-057-2025
TAARIIKH : 05-08-2026
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Awale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F. S.

MADAXWEYNAHA JFS
SENT
21 JUL 2025
ACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.453 **TAARIIKH: 14-TA JUUN, 2025**

XILKA-QAADIS AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABAD-SUGIDDA QARANKA & MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABAD-SUGIDDA QARANKA.

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY:	Qodobada **90aad** iyo **87aad** Farqadda **2aad** ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY:	Qodobka **117aad** ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY:	**Sharci Lr. 0003/2023** ee soo baxay **08 Maarso 2023**, Qodobka **9aad** faqraddiisa **1aad** oo tilmaameysa hannaanka Magacaabista Agaasimaha Guud Hay'adda Sirdoonka & Nabad- Sugidda Qaranka.
MARKA UU ARKAY:	Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summadiisu tahay **SHGW.16.119.06.25** ee **01/06/2025** iyo soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S warqadda summadeedu tahay **XRW/435/06/2025** ee soo baxday taariikh **01/06/2025** kuna saabsan Go'aan Gole Soo jeedinta ''**Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sirdoonka & Nabad-Sugidda Qaranka**.
MARKUU TIXGELIYEY:	Baahida loo qabo dardargalinta iyo adkeeynta Amniga Dalka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Maxamed Cabdullaahi Maxamed Cali (Sanbaloolshe)** laga qaaday xilkii Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sirdoonka & Nabad-Sugidda Qaranka.
2. Waxaa **Mudane Mahad Maxamed Salaad** loo magacaabay in uu noqdo Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sirdoonka & Nabad-Sugidda Qaranka.

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
21 JUL 2025
BY: Fadumo Mohamed Omer Sadiki
SAACAD _____ SAXIIX _____

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-053-2025
TAARIIKH : 09-08-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.469 **TAARIIKH: 28-DA JUUN 2025**

MAGACAABIS MAAREEYAHA GUUD EE WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA.

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY:	Qodobada 87 aad iyo 90 aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY:	Xeer Lambar 3 ee 2da Janaayo 1971, kuna saabsan dhismaha wakaaladda Madbacadda Qaranka.
MARKUU ARKAY:	Xeer Lr. 16 ee 1970kii (Law on Autonomous Agencies), ee ku saabsan Sharciga Hay'adaha Madaxa Banaan.
MARKUU ARKAY:	Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Mudane Wali Guuleed Nuur** loo magacaabay in uu noqdo Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Madbacadda Qaranka.

Qodobka 2aad

Mudanaha kor ku tilmaaman waxay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

...WEYNAHA JFS
...NT
1 JUL 2025
Faduma Mohamed Omer Saaiki
...AD _____ SAXIIX _____

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
BIIWAAN NO: HAN-058-2025
TAARIIKH: 09-08-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gulale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Tariikh: 29/05/2024

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.157

XEERKA: **XEER-NIDAAMIYAHA QIIMEYNTA IYO LASOCODKA SAAMEYNTA DEEGAANKA IYO BULSHADA**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
28 MAY 2024
EXII
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summadeedu tahay **WD&IC/0122/2024** ee ku taariikheysana 05/05/2024 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasaaradda Deegaanka & Isbedelka Cimilada.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.18.75.05.24** ee **23/05/2024,** kuna saabsan **Xeer-Nidaamiyaha Qiimeynta iyo Lasocodka Saameynta Deegaanka iyo Bulshada** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta **Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta & Lasocodka Deegaanka iyo Bulshada.**

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.18.75.05.24** ee **23/05/2024,** kuna saabsan ansixinta "**Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta iyo Lasocodka Saameynta Deegaanka iyo Bulshada**" oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Degaanka & Isbeddelka Cimiladda loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta iyo Lasocodka Saameynta Deegaanka iyo Bulshada.

Qodobka 3aad

Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta iyo Lasocodka Saameynta Deegaanka iyo Bulshada, waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo Saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-045-2025
TAARIIKH : 09-09-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA DEGAANKA IYO ISBEDDELKA CIMILADA

XEER-NIDAAMIYAHA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA, BULSHADA IYO DABA-GALKA

Waxaa diyaarisay: Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada 2024

Qodobka 1aad

Magaca

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa “**Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada**”.

Qodobka 2aad

Qeexid

Macnaha erayada lagu isticmaalay Xeer-nidaamiyaha waxay noqonayaan sidan hoos ku xusan, hadii aan dib wax looga badelin:

“Xeer” waxaa loola jeedaa Xeerka Ilaalinta iyo Maareynta Degaanka 2024;

“Falanqeyn” waxaa loola jeedaa tijaabinta ama baarista arrin kasta, walax kasta ama hab-raac kasta oo ujeeddadu tahay in la garto waxay tahay (waxyaabaha ay ka kooban tahay), tayadeeda, iyo Saameynta ay ku leedahay qeyb kasta oo degaanka ka mid ah;

“Beddelka Shay” waxaa loola jeedaa eray sheegaya in shay ama walax laga tago iyadoo mid kale oo beddelkeeda ah la qaadanayo/adeegsanayo, iyadoo aan marnaba wax laga beddelayn shaqadii, tayadii iyo astaamihii shaygaas la beddelay qabanayey, kuwaasoo laga yaabo iney ku jiraan: goobta, nooca waxqabadka, naqshadeynta/qaabeynta, tiknoolajiyada, hawlaha, agabka, iwm;

“Wasaaradda” waxaa loola jeedaa Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee Xukuumadda JFS;

“Warbixinta Daraasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada" waxaa loola jeedaa warbixinta la soo saaray dhammaadka hab-raaca daraasadda Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada ee hoos timaada Qeybta 56aad ee Xeerka iyo Xeer-nidaamiyahan;

"Maareynta Degaanka" waxaa ka mid ah ilaalinta iyo isticmaalka joogtada ah ee walxaha ama qeybaha kala duwan ee degaanka;

"Qorshaha Maareynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada" waxaa loola jeedaa dhammaan faahfaahinta hawlaha mashruuca, Saameynta, tallaabooyinka yareynta, jadwalka waqtiga, kharashka, mas'uuliyadaha iyo ballan-qaadyada la soo jeediyey si loo yareeyo Saameynta degaanka iyo bulshada ee dhammaan wejiyada mashruuca;

"Hay'adda Hoggaamineysa" waxaa loola jeedaa wasaarad kasta, waax, ama hay'ad dawladeed ama hay'ad kasta oo uu sharci ku waajibiyey iney kaalin ka qaadato xakamaynta ama maareynta degaanka iyo arrimaha bulshada;

"Tallaabooyinka Yareynta" waxaa ka mid ah shaqooyinka injineernimada, horumarinta tiknoolajiyada, maareynta iyo dariiqooyinka iyo hababka lagu yareynayo dhinacyada taban, kuwaasoo laga yaabo iney ku jiraan khasaaraha dhaqan-dhaqaale iyo dhaqameed ee soo gaaray bulshooyinka iyo shakhsiyaadka, iyadoo kor loo qaadayo dhinacyada togan ee mashruuca;

"Doorbid Mashruuc La'aan" waxaa loola jeedaa doorbidid in aan la fulin mashruuc ama hawl ka mid ah;

"Barnaamijka" waxaa loola jeedaa ajande habaysan, ama jadwal ballan-qaadyo, hindiseyaal, qalabyo, iyo/ama hawlo sharraxaya oo hirgelineya siyaasad;

"Mabda'a Taxaddarka ah" waa mabda'a in haddii ay jiraan khataro waxyeello u geysanaya degaanka, ha ahaato mid halis ah ama aan laga noqon karin, la'aanta hubanti cilmiyeed oo buuxda waa inaan loo isticmaalin sabab dib loogu dhigo tallaabooyin wax-ku-ool ah si looga hortago xaalufka degaanka;

"Mashruuc" waxaa loola jeedaa waa hawl ama hawlo u gaar ah goob, oo ay ku jiraan kuwa siyaasad ahaan loo doortay, qorshayaasha iyo barnaamijyada kuwaasoo Saameyn ku yeelan kara degaanka;

"Milkilaha ama Wakiilka Mashruuca" waxaa loola jeedaa qofka soo jeedineya ama fulineya mashruuc, barnaamij ama ku hawlan ku qeexan Jadwalka kowaad ee xeer-nidaamiyahan;

"Diiwaanka" waxaa ku jira qoraal kasta, qoraallo, buug, qorshe, khariidad, sawir jaantus, sawir-gacmeed ama shaqo garaaf, sawir filin, qaab-yar, duubis cod, cajalad fiidiyow, rikoodh uu aqrin karo mashiin, iyo walxo kale oo dokumenti ah, iyadoo aan loo eegin qaabka ama sifaha;

"Dib-u-eegis" waxaa loola jeedaa hab lagu hubineyo ku filnaanta daraasadda Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada si loo hubiyo iney buuxisay shuruudaha sharciga iyo hubinta in ay gaartay heerkii laga rabay ee natiijooyinka daraasadda Saameynta degaanka iyo

bulshada; **“Baaritaan Kooban ama Daalacasho”** waxaa loola jeedaa marxaladda kowaad ee habka qiimeynta degaanka iyo bulshada, waxaana loo adeegsadaa in lagu go'aamiyo mashaariicda, siyaasadaha, qorsheyaasha ama barnaamijyada loo baahan yahay in lagu sameeyo baaritaanka degaanka iyo bulshada ee loo baahan yahay;

"Warbixinta Baaritaanka kooban" waxaa loola jeedaa warbixin soo koobeysa natiijada baaritaanka;

"Lafo-gurka Arrimaha Bulshada" waxaa loola jeedaa in la qiimeeyo ama hore loo sii qiyaaso cawaaqibka bulsho ee ka iman kara ficillada siyaasadeed ee gaarka ah ama horumarinta mashruuca oo ay ku jiraan cadaaladda bulshada iyo sinnaanta, hubanti la'aanta bulshada, wadajirka bulshada, shabakadaha bulshada iyo is-dhex-galka, heerka bulshada iyo takoorka jinsiga ku saleysan;

"Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee lagu sameynayo Istaraatijiyad" waxaa loola jeeda gorfayn iyo falanqayn arrimaha bulshada iyo xaalka degaanku ku sugan yahay si dhinacyada/meelaha wax-ka-qabashada u baahan tahay in loogaga jawaabo siyaasadaha, qorsheyaasha, iyo barnaamijyada, lana qiimeeyo xiriirada ka dhexeeya iyadoo la tixgelineyo dhaqaalaha iyo bulshada;

“Horumar Waara” waxaa loola jeedaa horumar daboolaya baahiyaha hadda jira, iyadoo aan la wiiqin awoodda jiilalka soo socda ay ku daboolayaan baahidooda;

"Saameynta/dhibaatada Xuduudka ka baxsan" waxaa loola jeedaa saameyn/dhibaatada ka baxsan xudduudaha Soomaaliya; iyo

“JFS” waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 3aad
Baaxadda

1) Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu dhaqayaa:

a) Dhammaan mashaariicda ku xusan lifaaqa Xeerka sida uu dhigayo Cutubka 11aad ee Xeerka.
b) Dhammaan mashaariicda lagu daray Jadwalka Kowaad ee shuruucdan; iyo

c) Dayactir kasta oo weyn, kordhin, wax-ka-beddel ama dayactir aan caadi ahayn ama mashruuc kasta sida uu dhigayo Xeerku.

2) Qof kasta oo ah milkile ama wakiil mashruuc ma fulin karo mashruuc, kaasoo loo baahan yahay in la helo oggolaansho sida uu dhigayo Xeerka Ilaalinta iyo Maareynta Degaanka iyo Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada lagu soo gebangabeeyo si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.

3) Kormeeruhu waqti kasta oo macquul ah, wuxuu geli karaa dhul kasta, dhismo kasta si uu u go'aamiyo in mashruucu waafaqsan yahay shuruudaha Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada ee hoos yimaada Xeer-nidaamiyahan, isagoo u maraya hay'adaha amniga.

Qodobka 4aad
Ujeeddo

Ujeeddada Xeer-nidaamiyahani waa in la ilaaliyo nidaamka iyo shuruudaha sida ku cad qodobka 8aad ee Xeerka ee la xiriira diyaarinta, Qiimeynta, soo gudbinta, habaynta iyo tixgelinta, iyo go'aan-kaqaadashada codsiyada oggolaanshaha degaanka ee bilaabista hawlaha ku saabsan Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada, si looga fogaado ama loo yareeyo Saameynta waxyeelada leh ee degaanka iyo bulshada, iyo si loo wanaajiyo Saameynta togan, iyo arrimaha khuseeya.

Qodobka 5aad
Miisaaniyadda Qiimeynta Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

(1) Codsiga iyo kharashka socodsiinta, daraasadda iyo kharashka ra'yi-urrurinta dadweynaha iyo bixinta dokumentiyada loo baahan yahay inta lagu jiro daraasadda, dib-u-eegista iyo marxalad kasta oo kale ee habka Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada waa inuu bixiyaa milkilaha mashruucu.

(2)Wasaaradda iyo Wasaaraddaha Degaannka ee Dawladdaha Xubnaha ka ah Federaalka (DXF) iyadoo uu kharashka bixineyo milkilaha mashruucu, waxay fulin karaan daraasado ka baxsan doorkeeda adeegga dadweynaha si ay u dhammaystiraan daraasadda, ama u soo saarto macluumaad iyo xog.

Qodobka 6aad

Mas’uuliyadda

1. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada waa iney xiriirisaa, maamushaa oo ay kormeertaa Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada iyo Hannaanka hanti-dhawrka ee mashaariicda khatarta sare leh iyo mashaariicda xuduudaha ka baxsan si gaar ah:

a) In la sameeyo baaritaanka mashruuca la soo jeediyey;
b) go'aan ka gaaraan habka ku habboon ee macluumaadka iyo ka qeybgalka dadweynaha;
c) Isku-dubaridka dhegaysiyada dadweynaha marka loo baahdo; iyo
d) Bixinta Oggolaanshaha ama diidmada mashruuca ka dib Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada.

2. In la sameeyo hanti-dhawr xilliyeed ee mashruuca khatarta sare leh ee la ansixiyey; iyo la-talinta milkilaha mashruuca lagala talineyo tillaabooyinka hagaajinta xaaladaha u-hoggaansanaan-la'aanta tallaabooyinka hore loo go'aamiyey.

3. Wasaaradda Degaanka ee DXF ayaa isku-dubaridi doona, maamuli doona oo kormeeri doona Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada iyo hannaanka hanti-dhawrka ee heer gobol iyo gaar ahaan:

(a) Hesho warbixin kooban oo mashruuc oo loogu talo-galay mashaariicda khatarta hoose iyo kuwa dhexdhexaadka ah;
(b) Isku-dubaridka dhegaysiyada dadweynaha marka loo baahdo;
(c) Bixinta ansixinta ama diidi karaan qoraallada mashruuca ee aan buuxin heerarka; iyo
(d) Go'aamiya haddii mashruuca la soo jeediyey uu u baahan yahay daraasad buuxda oo Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ah oo aan ahayn warbixin mashruuc oo kooban sababtoo ah saameynta uu ku leeyahay degaanka;

4. Shirkadda sameyneysa Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshadu waa iney kala shaqeysaa Maamulka Nidaamka Qiimeynta Saameynta Degaanka Bulshada (Heerka Federaalka iyo Gobolka) waxayna si gaar ah mas'uul uga tahay:
(a) Ku wargelinta milkilaha mashruuca baahida loo qabo Qiimeynta

Saameynta Degaanka iyo Bulshada in la qabto;

(b) Ku hagidda milkilaha mashruuca bixinta macluumaadka ku haboon ee fulinta nidaamka baarista; iyo

(c) Diidista oggolaanshaha fulinta mashruuc kasta ka hor inta aan la bixin oggolaanshaha Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada iyadaoo loo marayo Maamulka.

5. Milkilaha mashruucu waa inuu-

a) Bixiyaa macluumaadka ku habboon ee loo baahan yahay baaritaanka bilowga ah ee mashruuca la soo jeediyey;
b) Ka qeyb-galka shirka gogol-dhiga;
c) Bixinta dokumentiyada baaritaanka rasmiga ah iyo kan dadweynaha;
d) iney bixiyaan, marxalad kasta oo mashruuca ah, xogta dadweynaha goor hore si waafaqsan talada Hay'adda ee habka ku habboon; Qaado habka loo baahan yahay ee wadatashiga dadweynaha;

6. Guddi-hawleedka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa inuu sannad walba dhisaa Guddi-Hawleedka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada heer federaal ah, Guddi-Hawleedkaasi waxa ka qeyb ahaandoona xubno matalaya xafiisyada Dawladda ee ay khusayso arrintani, Hay'adaha bulshada rayidka ah iyo qeybaha gaarka loo leeyahay.

7. Guddi-hawleedka Qiimeynta Saameynta Degaanka ee Heerka Federaalka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa iney kala taliyaan Wasaaradda arrimaha farsamada ee la xiriira fulinta Qiimeynta degaanka iyo Saameynta dhigayo Xeerku, iyo sharciyada kale ee khuseeya, gaar ahaana waa iney ku jiraan: siduu:

a) dib-u-eegista iyo ka talinta hababka fulinta ee Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada iyo usoo jeedinta talooyinka Wasaaradda;
b) dib-u-eegis iyo ka talinta hab-raacyada uu agaasinku u soo saaro milkileyaasha mashaariicda;
c) dib-u-eegis iyo tala-bixin ku saabsan daraasaddha Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada, iyo warbixinaha hanti dhawrka;

d) Tixgelinta isku dhacyada iman kara ee ka dhalan kara shuruudaha u tartamidda kheyraadka degaanka;

e) Ku talinta mudnaanta xakameynta degaanka iyo bulshada, iyo tallaabooyinka maaraynta in la meel mariyo inta lagu guda jiro fulinta mashaariicda la soo jeediyey;

f) Ka talinta iswaafajinta siyaasadda Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada iyo siyaasadaha wadaagaha/tubta khayraadka dabiiciga ah iyo degaanka;

g) La-talinta iyo ka-talo-bixinta hababka lagu hubineyo isgaarsiinta waxtarka leh ee khuseeya degaanka iyo arrimaha bulshada ee la xiriira mashaariicda horumarineed si kor loogu qaado ka qeybgalka qeybaha badan iyo dadweynaha ee hirgelinta siyaasadda degaanka;

h) Ka qeyb-qaadashada dhegaysiga dadweynaha ee la xiriira qaadashada ama wax-ka-bedelka habka Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada ee Soomaaliya; iyo kala talinta Maamulka wixii arrimo kale ah ee la xiriira Qiimeynta Saameynta degaanka.

i) Guddi-hawleedku waa inuu diyaariyaa oo uu u gudbiyaa Wasaaradda warbixin-sannadeedka waxqabadkiisa.

j) Shirarka Guddi-hawleedka ee la qabto mar kasta oo loo baahdo, waa in la qabanqaabiyo iyadoo lala tashanayo Wasaaradda.

k) Guddi-hawleedku wuxuu asaasi karaan Guddiga Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada, Guddi-hawleedku waxay dooran karaan xubin kasta oo ka mid ah shaqaalaha Wasaaradda ama qof kasta oo kale oo ay u aragto iney lagama maarmaan u yahay haboonaanta hawl-qabadkeeda.

l) Dawladdaha xubinta ka ah federaalka si ay u gutaan mas'uuliyadahooda waxay soo saarayaan warbixinno ku saabsan mashruuca iyagoo bixineya tallooyinka lagama-maarmaanka u ah fulinta mashaariicda khatarta hoose/dhexe ee hoos yimaada xeernidaamiyahan.

QEYBTA LABAAD

XOGTA KOOBAN EE MASHRUUCA

Qodobka 7aad

Sameynta iyo Gudbinta Xogta Kooban ee Mashruuca

(1) Milkile ama wakiil kasta oo fulineya mashruuca ah nooca B - khatar hoose iyo Khatar dhexdhexaad Mashruucyadda leh, ee Jadwalka kowaad ee Xeer-nidaamiyahan waa iney diyaariyaan xogta kooban ee mashruuca oo ay u gudbiyaan Wasiirka Dawladdaha xubinta ka ah Federaaalka, kaas oo qaabilsan degaanka. Marka la qorayo xogta kooban ee mashruuca waxaa la'isticmaalayaa Jadwalka saddexaad ee Xeer-nidaamiyaha.

(2)Marka la diyaarineyo xogta kooban ee mashruuca, milkiluhu ama wakiil ku waa inuu ugu yaraan hal shir la yeeshaa dhinacyada uu saameeyey iyo bulshooyinka ee ay ka mid yihiin haweenka, dhallinyarada, dadka naafada ah iyo kooxaha kale ee nugul si ay ugu sharraxaan mashruuca, saameyntiisa bulsho, dhaqaale iyo degaan, iyo in la helo faallooyin hadal ama qoraal ah oo ku saabsan mashruuca la soo jeediyey, waana in lagu lifaaqaa caddaynta ka qeyb-galka dadweynaha ee warbixinta mashruuca oo leh diiwaanka xaadiriska oo saxiixan, ajendihii shirka, hadal-qoraalka iyo sawirro. Ogeysiiska shirka waa in la sheego ugu yaraan todoba (7) maalmood ka hor qabsoomidda kulanka.

(3)Xogta mashruuca oo kooban waa inuu diyaariyaa khabiir (khubaro) u diiwaan gashan Qiimeynta degaanka iyo bulshada sida ku cad Xeernidaamiyahan.

(4)Codsiga shatiga Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshadu waa inuu ahaadaa foomka 1aad sida ku cad Jadwalka Labaad ee Xeernidaamiyahan, codsaduhuna waa inuu u soo gudbiyaa maamulka codsi oo ay la socdaan ugu yaraan saddex nuqul oo daabacan iyo nuqul elektaroonik ah oo xogta kooban ee mashruuca ah.

Qodobka 8aad
Codsi Faallo Ka Dhiibashada Xogta Kooban ee Mashruuca

1) Haddii qoraalka kooban ee mashruucu waafaqsan yahay shuruudaha Xeer-hoosaadka, Wasiirku waa in uu shan (5) maalmood gudahooda ka dib marka uu helo warbixinta mashruuca u soo diraa nuqul ka mid ah qoraalka kooban Hay'adahan soo socda si uu u helo faallooyin qoraal ah afar iyo toban (14) maalmood gudahood laga bilaabo maalintii la helay xogta mashruuca

a) Mid kasta oo ka mid ah Hay'adaha Hogaanka ah ee ay khusayso; iyo
b) Guddiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka ee ay Khusayso marka ay habboontahay.

(2) Marka la helo faallooyinka lagu sheegay xeer-hoosaadka 8 (1) ee sare ama haddii aan wax faallooyin ah la helin dhammaadka muddada kow iyo labaatanka (21) maalmood ee laga bilaabo taariikhda la helo xogta mashruuca, Wasiirka Dawladdaha xubinta ka ah Federaaalka ayaa sii wadi doona inuu go'aamiyo qoraalka kooban ee mashruuca.

Qodobka 9aad
Diiwaanka Go'aanka Xogta Kooban ee Mashruuca

(l) Marka la go'aamiyo qoraalka kooban ee mashruuca, go'aanka Wasiirada dawlad-goboleedyda xubnaha ka ah federaalka, oo ay weheliyaan sababaha, waa in lagu wargeliyaa milkilaha/wakiilka soddon (30) maalmood gudahooda maalintii lasoo gudbiyey xogta mashruuca.

(2)Maamulku waa inuu eegaa xogta kooban ee mashruuca, iyadoo la raacayo hagayso shuruudaha baarista ee ku xusan Jadwalka saddexaad ee Xeer-nidaamiyahan

(3)Ka dib marka la eego si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha, Wasiirka Dawladdaha xubinta ka ah Federaaalka waa inuu soo saaraa qoraal/isgaarsiin rasmi ah oo tilmaamaysa in mashruucu;

a) U baahan yahay soo gudbinta Daraasadda Saameynta Degaanka iyo Bulshada (sida hoos timaada qeybta III ee Xeer-nidaamiyahan) in sidoo kale loo gudbiyo mashruuca xafiiska Wasaaradda;
b) In loo baahan yahay gudbinta macluumaad dheeri ah.
c) la oggolaaday oo la siiyey shati; marka mashruucu aanu wax Saameyn ah ku yeelan doonin degaanka, ama in xogta kooban ee mashruucu ay shaaca ka qaado talaabooyinka yaraynta khatarta oo ku filan
d) Ama in la diiday Haddii Wasiirka dawlad-gobaleedka uu ogaado in mashruucani yeelan doono Saameyn la taaban karo oo degaanka iyo bulshada ah ama uusan waafaqsanayn siyaasadda ama sharciyada dhaqan-gal ka ah, soo-bandhigiyaasha waxaa

laga filayaa iney tixgeliyaan ama doortaan beddel kale oo ka habboon.

(4)Milkilaha/wakiilka mashruuca, hadii aanu ku qanacsanayn go'aanka Wasiirka dawlad-gobaleedka ee diidmada codsiga qoraal mashruuc ah, waxa uu qaadan karaa afartan iyo shan (45) maalmood gudahooda rafcaan go'aanka, si waafaqsan qodobka 51aad ee Xeer-nidaamiyahan.

QEYBTA SADAXAAD
DARAASADDA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA

Qodobka 10aad
Ururinta Xogta Muhiimka Ah Iyo Diyaarinta Arjiga Faahfaahinta Shaqada Daraasadda Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

(1) Daraasadd Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa in loo qabtaa dhammaan mashaariicda khatarta sare leh ee hoos ku xusan nooca Mashruuca 'B' Jadwalka Kowaad ee Xeer-nidaamiyahan.

(2)Milkilaha/wakiilka mashruucu waa in uu adeegsadaa koox khubaro ah si ay u qabtaan Daraasadda Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada oo ay ku jiraan warbixinta urrurinta xogta ee muhiimka ah iyo arjiga faahfaahinta shaqada, iyadoo lala tashanayo Wasaaradda ka hor inta aan la bilaabin Daraasadda.

(3)Warbixinta ururinta xogta muhiimka ahi waa iney qeexdaa baaxadda daraasadda Saameynta Bulshada Degaanka ee uu fulineyo milkilaha/wakiilku, waana in lagu daraa arjiga faahfaahinta shaqada, kaas oo tilmaamaya arrimaha muhiimka ah ee lagu wajahayo daraasadd Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada.

(4)Arjiga faahfaahinta shaqada ee Daraasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee kor lagu sheegay waa iney ahaadaan ugu yaraan si waafaqsan shuruudaha lagu tilmaamay Jadwalka Saddexaad ee Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 11aad

Kooxda Khubarada Ah ee Qabanaya Daraasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

(1) Milkilaha/wakiilka waa in ka dib marka la ansixiyo warbixinta ururinta xogta muhiimka ah iyo arjiga faahfaahinta shaqada, oo uu usoo xushay koox khubaro ah oo ka kooban koox karti leh oo diiwaangashan oo ah khubaro Qiimeynta degaanka iyo bulsheed aqoon u leh loona oggolaaday si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan Jadwalkiisa Shanaad si loo fuliyo Daraasadda Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada.

(2)Daraasad kasta oo Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada waa in uu kormeero khabiir hurmuud u ah oo diiwaangashan sida waafaqsan shuruudaha lagu qeexay Jadwalka Shanaad ee Xeer-nidaamiyahan.

(3)Qofka sameynaya Daraasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa inuu u dhaqmaa si waafaqsan anshaxa khubarada - Jadwalka Shanaad ee Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 12aad

Sameynta Warbixinta Qiimeynta Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

(1) Warbixinta daraasadda Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada ee lagu diyaariyey si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan waa iney tixgelisaa degaanka, bulshada, dhaqanka, dhaqaalaha, sharciga, amniga iyo caafimaadka.

(2)Nuxurka warbixinta daraasaadka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa iney ugu yaraan u hoggaansamaan macluumaadka Daraasadda Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada ee ku xusan Jadwalka Saddexaad ee Xeerarkan.

Qodobka 13aad

Ka Qeyb-galka Dadweynaha

(1) Inta lagu jiro daraasadda Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada, milkilaha/wakiil ku, waa inuu raadiyaa aragtida dadka uu

Saameynayo mashruuca Isaga/iyada oo qaadaya talaabooyinkan hoos ku xusan:

(a) Qabashada ugu yaraan saddex (3) kulan dadweyne ama tirada lagu go'aamiyey arjiga faahfaahinta shaqada ee la ansixiyey si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, iyadoo dhinacyada ay khusayso iyo bulshooyinka ay ka mid yihiin dhalinyarada, dadka naafada ah iyo kooxaha kale ee jilicsan lagu kulmiyo goob ku habboon oo ay iman karaan, iyo luqad ay fahmi karaan daneeyeyaasha kala duwan in lagu sharxo mashruuca iyo saameyntiisa iyo iney helaan faallooyinkooda oo qoraal ah ama oraah ah;

(b) Hubinta in ogaysiisyada ku habboon ee tilmaamaya taariikhaha, waqtiyada iyo goobaha shirarka, loo bandhigo bulshooyinka ay khusayso iyo dhinacyada kale ee danaynaya ugu yaraan afar iyo toban (14) maalmood ka hor shirarka lagu sheegay qodobka (a) ee kor ku xusan;

(c) Ku dhejinta boorarka goobaha istaraatijiga ah ee dadweynaha iyo agagaarka goobta mashruuca la soo jeediyey ee ogeysiinta dhinacyada ay saameeyeen iyo bulshada mashruuca la soo jeediyey;

(d) Hubinta in xusuus qorka shirarka dadweynaha in lagu lifaaqo warbixinta daraasadda Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada;

Qodobka 14aad
Soo-gudbinta Warbixinta Daraasadda Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

Milkilaha/wakiil ka mashruuca waa inuu u soo gudbiyaa shan (5) nuqul oo qabyo qoraal ah daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada wasaradda si loogu sameeyo dib-u-eegis gudaha ah oo bilow ah si loo hubiyo iney ku habboon tahay dib-u-eegis dadweyne oo ballaaran.

Qodobka 15aad
Dib-u-eegista Daraasadd Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

(1) Agaasinku waa inuu dib-u-eegis ku sameeyaa qabyo-qoraalka daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada, ka dibna sameeyaa

faallo qoraal ah soddon (30) maalmood gudahood laga bilaabo maalinta la helo.

(2)Haddii ka dib marka dib-u-eegis lagu sameeyo qabyo-qoraalka daraasadda Saameynta degaanka iyo bulsheed uu Agaasinku ku qanco inuu dhammaystiran yahay, milkilaha/wakiil ka waa in lagu logeysiiyaa qoraal soddon (30) maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta la helo.

(3)Marka warbixinta daraasaadka Qiimeynta degaanka iyo bulshada lagu ogaado aysan ku filnayn, Agaasinku waa inuu dib ugu celiyaa milkilaha/wakiil si uu dib-u-eegis ugu sameeyo, isaga/iyada oo tixgelineya/sa faallooyinka iyo diidmada Wasaaradda.

Qodobka 16aad
Martiqaadka Faallooyinka Dadweynaha

(1) Milkilaha/wakiilka mashruuca waa inuu qaab-qoraal ah ku martiqaadaa dadweynaha iney fikradahooda ka dhiibtaan qabyoqoraalka daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada muddo labaatan (20) maalmood oo shaqo ah gudahood marka ay ka helaan ogeysiis oggolaansho Wasaaradda.

(2)Martiqaadka uu dadweynaha u fidineyo milkilaha/wakiilka mashruuca waa in lagu faafiyaa tebin heer qaran ah gaar ahaan wargeysyada iyo idaacadaha si waafaqsan waqtiga uu agaasinku qeexay.

(3)Casuumadda milkilaha/wakiilka mashruuca ee dadweynaha waa iney tilmaantaa:

(a) Nooca mashruuca iyo goobta;

(b) Saameynta xun ee iman karta iyo saameynta togan ee mashruuca;

(c) istaraatiijiyadaha yaraynta ee la soo jeediyey si looga jawaabo Saameynta xun; iyo muddada dib-u-eegista iyo xarumaha;

(d) Ogeysiiska waafaqsan Xeer-nidaamiyahan waa inuu ahaadaa qaabka lagu qeexay Foomka 6aad ee ku xusan Jadwalka Labaad ee Xeernidaamiyahan.

Qodobka 17aad
Dib-u-eegista Faallooyinka Dadweynaha

(1) Agaasinku waa in uu labaatan (20) maalmood gudahood ka dib marka uu helo faallooyinka dadweynaha u diraa nuqullo ka mid ah

qabyo qoraalka daraasadda Saameynta bulsho ee degaanka iyo faallooyinka ay dadweynuhu ka bixiyaan xubin kasta oo ka mid ah guddihawleedka ee Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada si ay dib ugu eegaan oo ay faallo uga bixiyaan.

(2)Guddi-hawleedka Qiimeynta Saameynta Degaanka waa iney ku shiraan labaatan (20) maalmood oo shaqo gudahood markay helaan qabyo-qoraalka iyo dhammaan faallooyinka si waafaqsan Xeernidaamiyahan oo ay go'aan ka gaaraan.

Qodobka 18aad
Gundhigga Go'aan Ka Qaadashada Shatiga Qiimeynta Degaanka Iyo Saameynta Bulshada

(1) Marka la sameynayo go'aan ku saabsan daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada ee waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, agaasinku waa inuu ku xisaabtamaa:

a) Inta lagu kalsoonaan karo saadaasha lagu sameeyey daraasadda
Saameynta degaanka iyo bulshada

b) Aragtida dadweynaha ee lagu sameeyey Xeer-nidaamiyahan;

c) Falanqaynta Saameynta dhaqan-dhaqaale iyo dhaqan ee mashruuca;

d) Ku filnaanta talaabooyinka yareynta ee la soo jeediyey iyo degaanka iyo qorshaha maamulka bulshada; iyo

e) Dhinacyo kale oo loo arko iney muhiim yihiin oo khuseeya mashruuca Wasaaradda.

(2)Agaasinku waa in uu go’aan ka gaaro si waafaqsan Xeernidaamiyahan sodon (30) maalmood oo shaqo gudahooda laga bilaabo taariikhda daraasadda la gudbiyey.

Qodobka 19aad
Go'aanka Wasaaradda

(1) Agaasinku isagoo tixgelineya dhammaan habka dib-u-eegista waa inuu:

a) Ansixiyo mashruuca; isagoo bixineya oggolaansho ku-meelgaarka ah ee ku salaysan caddaymaha la bixiyey;

b) U baahan in mashruuca dib loo habeeyo oo ay ku jirto in tiknoolajiyada kala duwan ama goob kale la doorto;
c) Dib-ugu-celiyo mashruuca ama qeyb ka mid ah - milkilaha/wakiilka halka aanay macluumad ku filan ku jirin, si daraasaad dheeraad ah loogu sameeyo ama soo gudbinta macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan degaanka iyo maamulka bulshada iyo qorshaha kormeerka, si loogu fududeeyo in agaasinku u gaaro go'aan; iyo
d) iney diido mashruuca.

(2)Go'aanka Wasaaradda iyo sababaha sida waafaqsan Xeernidaamiyaha waa in lala socodsiiyaa milkilaha iyo wakiilka mashruuca afar iyo toban (14) maalmood oo shaqo gudahooda.

Qodobka 20aad
Shuruudaha Ansixinta Mashruuca

Marka la gaarayo go'aanka lagu ansixineyo mashruuca, agaasinku isagoo la tashanaya guddiga hawl-gelinta heer federaal waa inuu:

a) Bixiyaa oggolaansho ku xiran shuruudaha ay u aragto lagama maarmaan;
b) Sheegaa muddada ay ansixintu shaqeynayso; iyo
c) Bixiyaa shatiga oggolaanshaha mashruuca qaabka ku jira foomka 2aad ee Jadwalka Labaad ee Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 21aad
Burinta Ansixinta

(1) Agaasinku wuxuu awood buuxda u leeyahay in uu burriyo shahaadada uu hore u bixiyey amaba ansixiyey marka:

a) Ay jirto u hogaansanaan la'aanta shuruudaha ku xusan shatiga oggolaanshaha degaanka iyo bulshada;

b) Marka ay jirto wax-ka-bedel la taaban karo oo lagu sameeyo fulinta ama hawl-galka mashruuca taasoo keeni karta saameyn xun oo degaanka ah;

c) Meesha ay jirto Saameyn la taaban karo oo aan loo baahnayn lana sii ogayn waqtigii ansixinta.

(2)Ku xadgudubka qodobka 20aad, wuxuu sababi karaa burrin degdeg ah haddii uu:

a) ka tanaasula sheegashada/cabashada iyo sii wadidda qiimeynta iyo dib-u-eegista nidaamka hoos yimaada Xeer-nidaamiyahan; iyo

b) Ka-noqoshada, macluumaadka loo gudbiyey Qiimeynta iyo joojinta nidaamka dib-u-eegista ee hoos yimaada Xeernidaamiyahan.

QEYBTA AFARAAD
QIIMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA EE ISTARAATIIJIYADDEED

Qodobka 22aad
Daraasadda Istaraatijiyadda ee Degaanka iyo Qiimeynta

Bulshada

(1) Agaasinku waa inuu go'aamiyaa baahida loo qabo Qiimeynta Istaraatijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada si loo tixgeliyo welwelka ay bulshadu ka qabto degaanka, Siyaasadda, Qorshayaasha, ama Barnaamijyada, iyagoo tixgelineya sida xiriirka ula leeyihiin dhaqaalaha iyo bulshada.

(2) Ujeedooyinka Istaraatijiyada Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada waa iney:

a) Si loo bixiyo go'aan qaadasho xog-ogaalnimo ku dhisan iyadoo la aqoonsanayo ficillada la soo jeediyey ee Saameynta degaanka, sidoo kale la tixgelineyo beddelka ugu wanaagsan ee la taaban karo iyo aqoonsiga tallaabooyinka yareyn kara dhibaato dhici karta;

b) iney gacan ka geysato horumarinta degaan ka: odoroska iyo ka hortagga Saameynta degaanka bar-bilowga, in goor hore laga digo khataraha iyo dejinta ilaalinta degaanka oo ku salaysan mabaadi'da horumarka waara;

c) Si kor loogu qaado joogtaynta siyaasadda, barnaamijka iyo qorshaha ee qeybaha kala duwan, iyo marka ay khusayso, si cad loo sameeyo is-dhaafsiga ama is waafajinta ujeedooyinka qeybaha kala duwan;

d) Ka qeyb qaadataa dejinta siyaasadaha iyo barnaamijyada buuxineya waajibaadka heshiisyada degaanka ee caalamiga ah;

e) Sameynta isla xisaabtanka degaanka ee wakaaladaha gaarka ah si loo yareeyo waxyeelada degaanka ee ka imaanaya qeybaha kala duwan;

f) Hubinta tixgelinta mabaadi'da degaanka ee muhiimka ah oo ay ka mid tahay ka qeyb-galka dadweynaha, sinnaanta jiilaalka, mabaadi'da ka hortagga iyo mabda'a ah in Wasakheeyuhu uu sameeyo adeegyo horumarineed iyo siyaasado maareynaya qashinka, si loo sameeyo qorshayaasha horumar waara.

g) iney gacan ka geysato hufnaan iyo furfurnaan xagga go'aan gaarista iyada oo loo marayo ka-qeyb-gal dhinacyo badan leh inta geeddi-socodku socdo.

(3)Tallaabooyinka loo marayo Istaraatijiyadda Qiimeynta Bulshada Degaanka waa:

a) Baaritaanka (go'aaminta in loo baahan yahay Daraasadda iyo in kale);

b) Xakamaynta (go'aaminta baaxadda arrimaha degaanka iyo arrimaha bulshada ee ay daboosho Daraasaddu);

c) Diyaarinta qabyo-qoraalka warbixinta istaraatiijiyadda degaanka iyo bulshada;

d) Fulinta wada-tashiga iyo tixgelin ra'yiga dadweynaha ee qabyo qoraalka warbixinta Qiimeynta Istaraatiijiyadeed ee Degaanka iyo
Bulshada;

e) Ku daridda tixgelinta degaanka ee qorshaha ama barnaamijka;

f) faafinta macluumaadka go'aanka (Bayaanka Qiimeynta Istaraatiijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada).

Qodobka 23aad

Soo Gudbinta Uu Milkiluhu/Wakiilku Ku Soo Gudbineyo Siyaasadda, Qorshaha Ama Barnaamijka Kooban

1) Qiimeynta Istaraatiijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada waa inuu fuliyaa/hor kacaa soo jeediyuhu, isaga/iyada oo la wadaagaya/sa xogta loo baahan yahay Wasaaradda si ay go'aan u gaarto.

2) Agaasinku waa inuu todoba (7) maalmood gudahood ku gaarsiiyaa natiijada baarista soo-jeediyaha:

3) Natiijooyinka baaritaanka:

a) Qiimeynta Istaraatiijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada oo buuxda ama dhamaystiran ayaa loo baahan yahay;

b) Daraasad dheeri ah ayaa loo baahan yahay si loo go'aamiyo baahida Qiimeynta Istaraatiijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada; iyo

c) Qiimeynta Istaraatijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada looma baahna.

Qodobka 24aad
Soo Gudbinta Iyo Ansixinta Warbixinta Ururinta Xogta Muhiimka Ah

(1) Agaasinku waa inuu kula taliyaa soo-jeediyaha ama milkilaha siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka inuu sameeyo xog-ururin ku saabsan xogta muhiimka ah iyadoo ujeeddadu tahay qeexidda baaxadda mawduuca iyo goobta (juquraafiga), iyadoo gebogebadu noqonayso in lagu talo-bixiyo in loo baahan yahay Qiimeynta Degaanka Istaraatijiga ah ee waafaqsan Xeer-nidaamiyahan .

(2)mas'uulka soo jeediya siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka waa inuu doortaa khabiirka ama khubarada hoggaamiya Qiimeynta degaanka iyo bulshada ama shirkad khubaro ah oo uu shati siiyey Agaasinku si ay u sameeyaan daraasadda oganshaha baaxadda.

(3)Soo-jeediyaha Siyaasadda, Qorshaha ama Barnaamijku waa inuu diyaariyaa warbixinta ururinta xogta muhiimka ah oo uu u gudbiyo ugu yaraan saddex (3) nuqul Wasaaradda si loo ansixiyo.

(4)Agaasinku waa inuu dib-u-eegis ku sameeyaa warbixinta ururinta xogta muhiimka ah ee la soo gudbiyey oo uu ka faa'iidaysto diiwaanka go'aanka si loo ansixiyo ama u codsado macluumaad dheeraad ah muddo kow iyo labaatan (21) maalmood oo shaqo gudahood ah, laga billaabo taariikhda la soo gudbiyey warbixinta ururinta xogta muhiimka ah.

Qodobka 25aad
Diyaarinta Warbixinta Istaraatijiyadda Qiimeynta

Degaanka Iyo Bulshada

Qofka soo-jeediya siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka waa inuu iyadoo u adeegsanayo khubarada Qiimeynta degaanka iyo arrimaha bulshada sameeyaa daraasadda oo ay diyaariyaan warbixinta qabyoqoraalka ah ee Istaraatijiyadeed ee Degaanka iyo Qiimeynta Bulshada marka ay ansixiyaan Agaasinku warbixinta Ururinta Xogta Muhiimka ah. Nuxurka Qiimeynta Istaraatijiyadeed ee Degaanka iyo Bulshada waa iney ka kooban tahay waxyaabahan soo socda:

1. Sharaxaadda qorshaha, wuxuu sharaxaa xiriirka ka dhexeeya qorshayaasha iyo barnaamijyada kale ee khuseeya.
2. Sharaxaadda xaaladaha degaan iyo bulsho ee hadda jira, arrimaha iyo sida ay u horumarin lahaayeen qorshaha la'aantiis.
3. Yoolka, Ujeeddooyinka, asbaabta.
4. Wax yaalaha bedelka u noqon kara qaar kale ama hawlaha kale ee Siyaasadda, Qorshaha ama Barnaamijka; iyo qorshaha fulinta iyo waqtiga.
5. Is la jaanqaadka Qiimeynta u nuglaanshaha isbeddelka cimilada, tallaabooyinka dhibaatada lagu yaraynayo iyo u adkaysiga mudnaanta leh.
6. Aqoonsiga Saameynta suurtogalka ah ee qorshayaasha ama barnaamijyada la soo jeediyey.
7. Yaraynta Saameynta la taaban karo ee laga yaabo in laga helo qorshayaasha ama barnaamijka la soo jeediyey.
8. kormeerka/lasocod ka Saameynta muhiimka ah ee laga yaabo in laga helo qorshayaasha ama barnaamijka la soo jeediyey
9. Soo koobid aan farsamo ahayn oo si kooban u qeexaysa daraasadda iyo natiijooyinkeeda.

Qodobka 26aad
Wada-tashiga iyo Ka-qeyb-galka Dadweynaha

1. Mas'uuliyiinta siyaasadda soo jeediyey, qorshaha ama barnaamijka waa iney la tashadaan Dawlad Goboleedka ay khusayso, hay'adaha u idman, daneeyeyaasha muhiimka ah iyo xubnaha dadweynaha inta lagu jiro dhammaan geeddi-socodka Qiimeynta

   Istaraatijiyadeed ee Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada.

2. La-tashiga iyo ka-qeyb-galka dadweynuhu waa iney si isdaba-joog ah u dhacaa, dhammaan geeddi-socodka Qiimeynta

Istaraatijiyadeed oo ay ugu muhiimsan tahay inta lagu jiro baaritaanka, ururinta xogta muhiimka ah iyo go'aan-qaadashada.

3. Hubi in ogeysiiska kulanka la soo diray ugu yaraan afar iyo toban (14) maalmood oo shaqo ka hor shirka iyo in goobta, taariikhda iyo waqtiga shirku ku habboon yahay dhammaan.

4. In la qabto ugu yaraan saddex (3) shirar dadweyne oo lala yeesho daneeyeyaasha iyo bulshooyinka ay khusayso si loo fahmo siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka soo-jeediyaha iyo Saameynta ay ku leedahay, iyo in la helo faallooyinkooda oo hadal iyo qoraal ah.

Qodobka 27aad
Soo-gudbinta Qoraalka Qabyada Ah ee Warbixinta Qiimeynta Degaanka Iyo Bulshada

1. Siyaasadda, Qorshaha ama barnaamijka mas'uulka qaabilsani waa inuu u soo gudbiyaa Wasaaradda ugu yaraan shan (5) nuqul oo daabacan ama sida uu dalbado Agaasinku waqtiyada qaar iyo hal (1) nuqul elektroonik ah oo ah warbixinta qabyo qoraalka ah ee Qiimeynta degaanka oo ay la socoto soo gudbinta Foomka 1aad ee ku xusan Jadwalka Saddexaad ee Xeer-nidaamiyahan.

2. Agaasinku waa in uu afar iyo toban (14) maalmood oo shaqo gudahooda ah laga bilaabo maalinta la soo gudbiyo warbixinta qabyo qoraalka ah uu ku sameeyo dib-u-eegis gudaha ah si loo ogaado ku filnaanta warbixinta qabyada ah.

Qodobka 28aad
Martiqaadka faallooyinka warbixinta qabyada ah ee qiimeynta Istaraatijiyadda degaanka iyo bulshada

1) Agaasinku waa inuu todobo (7) maalmood gudahood ku go'aamiya ku filnaanshiyaha sida waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, uu u soo diro nuqullada warbixinta qabyada ah ee Wasaaradda Degaanka ee heer Dawlad-gobaleed iyo guddiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer Dawlad-gobaleed ee ay khusayso, guddiga heer federaal ee Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada halka ay khusayso, hay'adaha hogaamiya iyo daneeyeyaasha kale faallooyinkooda.

2) Markay helaan warbixinta qabyada ah, Wasaaradda Degaanka ee heer Dawlad-gobaleed iyo guddiyada heerka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer Dawlad-goboleed, guddi hawleed heer federaal ah oo Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ah, hay'adaha hogaamineya iyo daneeyeyaasha kale waa iney dib-u-eegis ku sameeyaan oo soo gudbiyaan aragtidooda shan iyo afartan (45) maalmood gudahooda ama waqtigii uu Agaasinku u qabtay.

3) Agaasinku waa inuu toddobo (7) maalmood gudahooda ka dib marka la go'aamiyo ku filnaanshiyaha, waa inuu:

   a) ku daabaco ogeysiis ku saabsan warbixinta qabyada ah ee Qiimeynta degaanka ee siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka laba wargays oo ka soo baxa dalka, laba usbuuc oo midkiiba ay u dhaxayso usbuuc iyo faafinta idaacadaha ka baxa dalka oo dhan ugu yaraan hal mar todobaadkii laba todobaad oo isku xigta oo dadweynaha lagu martiqaado iyo daneeyeyaasha kale ee ay khusayso iney soo gudbiyaan faallooyin qoraal iyo hadal ah siday u kala horreeyaan;

   b) agaasinku waa inuu ku daabacaa nuqulka qabyo qoraalka ah ee Qiimeynta istaraatiihiyadda degaanka mareegaha Wasaaradda inta lagu jiro nidaamka ka Qeyb-galka dadweynaha; iyo

   c) dadweynuhu waxay ra'yigooda ugu soo gudbin karaan Wasaaradda shan iyo afartan (45) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda daabacaadda ugu horreysa ee ogaysiiska ee martiqaadka faallooyinka dadweynaha.

Qodobka 29aad
Ku-daridda Faallooyinka Qabyo-qoraalka Qiimeynta Istaraatijiyadda Saameynta Degaanka Iyo Bulshada

1. Markay helaan oo ay dib-u-eegaan faallooyinka Wasaaraddaha Degaanka ee Dawlad-goboleedka, guddiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer Dawlad-goboleed iyo guddi hawleedka heer federaal ee Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, hay’adaha hogaamineya, xubnaha dadweynaha iyo daneeyeyaasha kale, Agaasinku waa in marka uu falanqeeyo faallooyinka u soo diro mas'uulka siyaasadda. , qorshaha ama barnaamijka iyadoo ujeeddadu tahay in lagu daro

warbixinta qabyada ah ee Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada.

2. Faallooyinka ka soo baxa Wasaaradda ay khuseyso Degaanka ee Gobolka, guddiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer gobol iyo guddi-hawleedka heer federaal ee Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, hay'adaha hoggaamineya, xubnaha dadweynaha iyo daneeyeyaasha kale, waa in lagu daraa siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka soo-jeedinta gudaha lixdan (60) maalmood laga bilaabo taariikhda Codsiga Wasaaradda oo u soo gudbiyo saddex (3) nuqul oo daabacan iyo hal (1) nuqul elektaroonik ah oo ah warbixinta Qiimeynta Istaraatijiga ah ee dibu-eegay Agaasinku.

3. Marka la helo oo la xaqiijiyo warbixinta qabyada ah ee Qiimeynta istaraatijiyadeed ee dib loo eegay, Wasaaradda isagoo la tashanaya mas'uulka siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka, waxay qaban qaabin doontaa aqoon-isweydaarsiga ansixinta soddon (30) maalmood gudahooda oo ay ku lug leeyihiin dhammaan daneeyeyaasha ujeeddada ansixinta nuxurka iyo ku filnaanta warbixinta qabyada ah ee dib loo eegay Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada.

Qodobka 30aad
Soo-gudbinta Warbixinta Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada ee u dambeysa

Marka la isku daro dhammaan faallooyinka, taageeraha siyaasadda, Qorshaha, ama barnaamijka waa inuu warbixinta ugu dambeysa ee qiimeynta degaanka iyo istaraatijiyadeed ee ay soo gudbiyaan shan (5) nuqul oo daabacan oo ah warbixinta qiimeynta Istaraatijiyadeed ee ugu dambeysa ee degaanka iyo bulshada ama sida uu Agaasinku u arko waqtiyada qaar iyo hal (1) koobbi elektroonik ah oo ay la socoto foom si sax ah loo buuxiyey ee 1aad ee lagu sheegay Jadwalka Labaad ee Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 31aad
Diiwaan-gelinta Go'aanka Warbixinta Qiimeynta Istaraatijiyadda Degaanka iyo Bulshada

1) Marka dib-u-eegis lagu sameeyo warbixinta Qiimeynta istaraatijiyadda ee u dambeysa ee degaanka iyo bulshada, Agaasinku waa inuu ku bixiyaa Qorshaha Diiwaanka Go'aanka ama Barnaamijka soddon (30) maalmood gudahooda laga bilaabo

taariikhda la soo gudbiyo warbixinta ugu dambaysa ee Qiimeynta degaanka iyo bulshada ee hoos timaada Xeer-nidaamiyahan.

2) Haddii ay dhacdo in diiwaanka go'aanka Qorshaha ama Barnaamijku la ansixiyo/oggolaado, agaasinku waa inuu u soo bandhigaa mas'uulka Qorshaha ama barnaamijka oggolaansho shuruuda leh.

3) Haddii ay dhacdo in warbixinta qiimeynta degaanka iyo bulshada ee ugu dambeysa ee la soo gudbiyey lagu sheego mid aan lagu qancin, agaasinku waa inuu soo saaraa ogeysiis qoraal ah oo sheegaya iney warbixintu kala dhimman tahay oo u baahan mas'uulka qorshaha iyo barnaamijka iney u hoggaansamaan talooyinka Wasaaradda.

4) Dhanka Siyaasadda, agaasinku waa inuu soo diyaariyaa qoraal kooban soddon (30) maalmood gudahooda una gudbiyaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.

5) Nuxurka qoraalka kooban waa inay ku jiraan kuwa soo socda iyo kuwa kale:
    a) magaca siyaasadda iyo mas'uulka/soo-jeediyaha;
    b) hordhac kooban oo ku saabsan Siyaasadda;
    c) ujeedooyinka siyaasadda iyo caddaymaha;
    d) habka istaraatijiiyadda Qiimeynta degaanka iyo bulshada oo kooban;
    e) arrimaha muhiimka ah ee degaanka, bulshada, dhaqaalaha dhaqanka iyo Saameynta;
    f) bedelka wanaagsan;
    g) kala-sarreynta doorarka kale;
    h) ganacsi, dib-u-dejin iyo magdhow; iyo
    i) gunaanadka iyo talooyinka siyaasadda.

5. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ee u xilsaaran Siyaasadda ayaa horgeyn doona Baarlamaanka si loo ansixiyo.

Qodobka 32aad
Kormeerka iyo Qiimeynta Siyaasadda, Qorshaha ama Barnaamijka

1) Kormeerka iyo Qiimeynta, waxay wanaajisaa xiriirka ka dhexeeya fara-gelinta siyaasadda natiijooyinkooda iyo Saameyntooda, waxay kor-u-qaadaysaa la xisaabtanka iyo siyaasadaha waxtarka iyo waxtarka leh ee wax-ka-qabashada arrimaha degaanka, bulshada, dhaqaalaha iyo dhaqanka.

2) Mas'uulka/soo-jeediyaha Siyaasadda, Qorshaha ama Barnaamijku waa inuu mas'uul ka yahay dhammaan arrimaha Kormeerka iyo Qiimeynta oo u soo gudbiyaa warbixinnada Kormeerka iyo Qiimeynta Wasaaradda laba iyo tobankii biloodba mar (12) ama sida uu u arko lagama maarmaan agaasinku waqtiyada qaar agaasinku waa inuu si rasmi ah u qiimeeyaa natiijooyinka Kormeerka iyo Qiimeynta gudaha soddon iyo lix bilood (36) ama sida laga yaabo inuu agaasinku u arko iney lagama-maarmaan u tahay waqtiyada qaar iyadoo ku xiran xaaladda siyaasadda, qorshaha ama barnaamijka.

3) Agaasinku waa inuu kormeeraa kormeerka iyo Qiimeynta Siyaasadda iyadoo taageero farsamo ka helaysa Guddi-hawleedka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer Federaal ah iyo Wasaaraddaha Degaanka ee Dawladdaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyo Guddida Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer dawlad-goboleed hadii loo baahdo.

QEYBTA SHANAAD
HANTI-DHAWRKA DEGAANKA IYO BULSHADA
Qodobka 33aad
Hanti-dhawreyaasha Degaanka iyo Bulshada

Qof ma sameyn karo hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada ilaa qofkaas si sax ah loo cadeyey oo loo diiwaan-geliyey si waafaqsan qodobka 46aad ee Xeerka Maaraynta Degaanka (Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada), 2024.

Qodobka 34aad
Mabaadi’da Aasaasigaa ee Hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada

Qabashada hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada waa in lagu saleeyaa mabaadi'dan soo socota:

a. Waxaa qabta shakhsi ama shirkad shahaado lagu siiyey oo ka diiwaan-gashan xafiiska Wasaaradda, si waafaqsan Xeerka Degaanka iyo Bulshada (Qiimeynta Saameynta, iyo hantidhawrka), 2024 waxaana loo fulineyaa si xirfadaysan; iyo

b. mas'uulka/soo-jeediyaha mashruucu wuxuu ku qasban yahay inuu ilaaliyo oo uu dheelitiro xaalada/awooda degaanka iyo horumar waara.

Qodobka 35aad
Hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada

1) Dhammaan mashaariicda suurtagal ka ah inay saameyn xun ku yeelan karaan degaanka iyo bulshada waa in lagu sameeyaa hantidhawr degaanka iyo bulshada oo ku saleysan hagaha/hab-raaca Wasaaradda.

2) Mas'uulka/soo-jeediyaha mashruucu waa inuu ku sameeyaa hantidhawrka bilowga ah ee degaanka iyo bulshada muddo aan ka yarayn hal (1) sano oo aan ka badnayn saddex (3) sano ka dib marka la dhammeystiro ama la bilaabo mashruuca.

3) Mas'uulka/soo-jeediyaha waa inuu qabto hanti-dhawr ku salaysan Qiimeynta khatarta. Mashruucyada khatarta yar ee hoos yimaada mashruuca nooca B ee Jadwalka Kowaad ee la qabanayo saddexdii (3) sanoba mar, mashaariicda khatarta sare leh ee hoos timaada Mashruucyada Nooca A ee Jadwalka ugu horreeya oo la sameeyo laba iyo toban (12) biloodba mar, Haddii nolosha/muddada mashruucu ka gaaban tahay waqtiga aan kor ku soo xusnay,waxaa laga yaabaa in hanti-dhawrka loo baahdo si dhakhso ah, agaasinku waxa uu u baahan karaa baaris kale oo ku xiga hanti-dhawrka hore haddii loo arko lagama maarmaan.

4) Hanti-dhawrka hore ee degaanka iyo bulshada waa iney fuliyaan Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada iyo khabiir ku takhasusay hanti dhawrka oo uu ansixiyey agaasinku.

5) Hanti-dhawrka degaanka iyo arrimaha bulshada ee la cayimay waa in lagu sameeyaa iyadoo oo la raacayo arjiga faahfaahinta shaqada ee Agaasinku ansixiyey ee Wasaaradda.

Qodobka 36aad
Diyaarinta Warbixinta Hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada

1. Warbixinta hanti-dhawrka degaanka iyo arrimaha bulshada waa in la diyaariyaa iyadoo la raacayo tilmaamaha guud ee hantidhawraha degaanka iyo bulshada kaas oo madax u noqon doona koox hanti-dhawrayaal ah.

2. Isbeddel kasta oo ku yimaadda baaxadda shaqada inta lagu jiro diyaarinta warbixinta degaanka iyo hanti-dhawrka waa iney ku heshiiyaan dhinacyada hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada.

Qodobka 37aad
Qabashada Hanti-dhawrka Saameynta Degaanka iyo Bulshada

1. Qabashada hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada waa inay ku jirto isticmaalka waydiimo la diyaariyey, booqashada goobaha degaanka, falanqaynta iyo tijaabada falaqaynta si waafaqsan Xeernidaamiyahan, qeybaha Warbixinta hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada waa iney waafaqdaa shuruudaha loo dejiyey sida ku cad Jadwalka Afraad ee Xeer-nidaamiyahan.

2. Hanti-dhawraha degaanka iyo bulshada waa inuu:
    a) marka kowaad talada ku darsado faahfaahinta mashruuca;
    b) caddeeya ujeedada mashruuca, baaxadiisa iyo shuruudaha hanti-dhawrka;
    c) inuu u hoggaansamo sharciga degaanka ee qaranka iyo kan caalamiga ah iyo qaab-dhismeedka sharci ee caafimaadka iyo badbaadada iyo isticmaalka joogtada ah ee kheyraadka dabiiciga ah;
    d) xaqiijiyaa heerka u hoggaansanaanta mas'uulka/soojeediyaha mashruuca ee shuruudaha lagu dejiyey qorshaha maamulka degaanka iyo bulshada;
    e) qiimeeyaa wacyiga milkilaha/horumariyaha, aqoonta iyo mas'uuliyadda ku aaddan ku dhaqanka sharciyada khuseeya;
    f) dib-u-eegaa dokumeentiyada mashruuca ee la xiriira dhammaan kaabeyaasha dhaqaalaha iyo nashqadeynta si loo hubiyo ujeeddada ilaalinta degaanka iyo ka hortaga waxyeelo kasta;

g) baaraa barnaamijyada la socodka, hal-beegyada, iyo habraacyada loo dejiyey xakamaynta iyo sixitaanka tallaabooyinka degdega ah;

h) baaraa diiwaannada dhacdooyinka iyo shilalka iyo suurtogalnimada mustaqbalka ee dhacdooyinka iyo shilalka;

i) isku daraa Qiimeynta u nuglaanshaha cimilada, tallaabooyinka mudnaanta leh kuwaas oo lagu yaraynayo culayska ay keentay isbedelka cimiladu iyo falalka la qabsiga isbedelka cimilada;

j) kormeeraa dhammaan dhismeyaasha, goobaha iyo deyrarka ay wax-soo-saarka, tijaabinta iyo isku socodka alaabuhu ka socdaan gudaha iyo dibadda mashruuca, iyo sidoo kale meelaha alaabta lagu keydiyo, meelaha alaabta lagu tuuro, iyo in la diiwaan-geliyo dhammaan khataraha degaanka iyo bulshada ee la xiriira arrimahan oo kale;

k) baaraa oo uu helaa aragtida kooxda mashruuca, bulshooyinka degaanka ah kooxa nugul ee goobta mashruuca iyo dadka kale ee Saameyn caafimaad ama nabad-gelyo ku yeelan karo mashruucu; iyo

l) Qiimeyaa welwelka caafimaadka iyo degaanka ee hawlihii hore iyo kuwa socda.

Qodobka 38aad
Qaabeynta warbixinnada Hanti-dhawraha

1) Warbixinta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada waa iney lahaataa qaabkan soo-socda:

a) hordhaca kooban ee warbixinta;
b) Xogta heerka mashruuca ee hadda;
c) Ujeeddooyinka iyo baaxadda hanti-dhawrka;
d) Hab-maamuuska hanti-dhawrka, shuruudaha iyo hababka isticmaalka;
e) Natiijooyinka iyo indho-indhaynta;
f) Sharraxaadda arrimaha muhiimka ah oo ay ku jiraan meelaha uu ku wanaagsan yahay iyo meelaha uu ku liito mashruuca;
g) Tallooyinka;
h) Gebogebada;
i) liiska dokumantiyada la isticmaalay ama lasoo xigtay; iyo

j) lifaaqyada (sawiro, Qorshe hawleedka mustaqbalka, latalinta iyo liiska dadka ay khusayso ee lagala tashaday.)

2) Warbixinta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada waa inuu Saxiixa mid kasta oo ka mid ah shakhsiyaadka sameeyey hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada.

3) Marka la dhammeeyo warbixinta daraasadda hanti-dhawrka bulshada iyo degaanka, mas'uulka/soo-jeediyuhu waa inuu soo gudbiyaa ugu yaraan shan (5) nuqul oo daabacan ama sida uu Agaasinku u oggolaado waqtiyada qaar iyo nuqul ka mid ah warbixinta oo ah qaab elektaroonig ah oo ku qoran qaabka la sheegay.

4) Marka la helo warbixinta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada, Agaasinku waa inuu todoba (7) maalmood gudahood ugu diraa nuqulka warbixinta:

a) dawlad-goboleedyada ay khuseyso;
b) mid kasta oo ka mid ah dhinacyada (hay'adaha dawliga ah) ee ay khusayso;
c) guddi-hawleedka heer federal,Guddiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada iyo guddiga hantidhawrka ee heer gobol; iyo
d) marka ay wax ka badan hal Gobol ay ku lug leeyihiin, Maamulka Gobolka ee ay khusayso iyo qeybaha maareynta degaanku waa inay faallooyinkooda oo qoraal ah ugu soogudbiyaan Wasaaradda afar iyo toban (14) maalmood gudahood laga bilaabo maalinta ay helaan warbixinta hantidhawrka ee Wasaaradda.

5) Marka la helo faallooyinka ama haddii aan faallooyin la helin dhammaadka muddada kow iyo labaatanka (21) maalmood ah ee laga bilaabo taariikhda la helo warbixinta hanti-dhawrka, Wasaaradda ayaa sii wadi doonta iney qiimeyso warbixinta hanti-dhawrka.

6) Marka agaasinku ku qanco in hawlaha mashruucu u hogaansameen qorshaha maamulka degaanka iyo bulshada isla markaana aanay jirin wax Saameyn ah oo degaan iyo bulsho ah, agaasinku waa inuu sanad walba bixiyaa shahaadada u hogaansanaanta degaanka iyo bulshada ee foomka shanaad (5) ee

ku xusan Jadwalka labaad ee Xeernidaamiyahan shan iyo afartan (45) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda la helo warbixinta hanti-dhawrka.

Qodobka 39aad

Gudbinta Warbixinta Hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada Warbixinta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada waa in loo gudbiyaa milkilaha ama hawl-wadeenka xarunta afar iyo toban maalmood (14) gudahood ka dib dhamaystirka hanti dhawrka.

Qodobka 40aad
Xakamaynta Hanti-dhawrka Degaanka iyo Bulshada

1. Xakameynta baaritaanka hanta-dhawrka degaanka iyo bulshada waa iney fuliyaan Wasaaradda mar kasta oo ay lagama maarmaan u aragto si loo hubiyo u hogaansanaanta mashruuca ee Qorshaha Maareynta Degaanka iyo Bulshada, waxaa kale oo la dammaanad qaadi karaa ka dib markii lagu guulaysto codsi qoraal ama hadal ah oo xubin dadweynaha ka mid ah u soo jeediyo si uu u sameeyo hantidhawrka.

2. Xakameynta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada waa iney xaqiijiyaan in mashruucu u hoggaansan yahay Qorshaha Maareynta Degaanka iyo Bulshada ee la dejiyey oo uu xaqiijiyaa ku filnaanshaha talaabooyinka yaraynta Saameynta xun ee degaanka.

3. Kormeerka ilaalinta degaanka iyo bulshada waa iney sameeyaan kormeerayaasha degaanka iyo bulshada.

Qodobka 41aad
Dalabka Hanti-dhawrka Ka dib

Guddi-hawleedka Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada waxa suurtagal ah iney soo saarto amar hagaajin ah oo lagu fulinayo tallaabooyinka sixitaanka ee lagu dhimayo xaalufka degaanka ee la muujiyey intii lagu jiray daraasad kasta oo hanti-dhawr ah.

Qodobka 42aad
Kormeer

1) Kormeeraha degaanka ee sharcigu awood u siiyey, waqti macquul ah, wuxuu geli karaa dhul kasta, dhismo ama goob kasta oo

mashruuc isagoo ay ujeeddadiisu tahay kormeer, si uu u baara diiwaannada iyo inuu wax ka weydiiyo mashruuca, kormeeraha degaanku wuu sameyn karaa ama sabab u noqan karaa in lagu sameeyo dhaqangelinta hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada xarun kasta oo ay jirto sabab macquul ah oo lagu aamino in:

a) hawlaha laga qabanayo xarunta waxay jebineyaan ama ay u badan tahay iney ku xad-gudbaan Sharciga ama Xeernidaamiyahan;

b) dhaqdhaqaaqyada ka socda xarunta waxay u badan tahay iney keenaan khatar degdeg ah iyo waxyeello caafimaadka aadanaha, ama waxyeello aan loo baahnayn oo aan laga soo kaban karin u geystaan degaanka;

c) ku xad-gudub sharci kasta oo kale oo la xiriira degaanka, oo aan ahayn midka lagu sheegay farqada (1) (a) ee qodobkan, ayaa dhacaya.

2) Kormeeraha degaanka waa inuu:

a) Si waafaqsan qodobka (42) farqadiisa (1) (a) ama (b), u diraa hawl-wadeenka ama milkilaha xarunta ogeysiis qoraal ah, ugu yaraan siddeed iyo afartan (48) saacadood ka hor inta aan la sameyn hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada; iyo

b) Si waafaqsan qodobka (42) farqadiisa (1) (c), waa in laga dalbadaa milkilaha inuu hanta-dhawr geliyo mashruuciisa muddada la cayimay, iyadoo wargelin ku filan loo dirayo.

3) Qofka diida inuu ka jawaabo su'aalaha, diido inuu isticmaalo dokumenti ama diido inuu bixiyo macluumaad kale oo uu si sharci ah u raadiyo kormeeraha degaanku wuxuu gelayaa dembi sida ku cad sharciga.

Qodobka 43aad
Kormeerka Degaanka iyo Bulshada ee Guddi-hawleedka Heer Federaal

1. Guddi-hawleed heer federaal ah waa inay la tashadaan Wasaaraddaha Degaanka ee Dawladdaha iyo guddiyada heer gobol iyo heer faderaal ama hay'adaha kale ee ay khuseyso:

a) la socdaan dhacdooyinka degaanka iyo bulshada iyadoo la eegayo in la sameeyo qiimeyn ku saabsan isbeddelada suurta-galka ah ee degaanka dabiiciga ah iyo saameyntooda;

b) la socodka hawlaha warshad kasta, mashruuc ama hawl kasta iyadoo la eegayo in la go'aamiyo Saameynta dhow iyo mustaqbalka fog ee degaanka;
c) marka laga reebo hadii daraasad barbilow ah la sameeyey, waa in milkilaha mashruuca laga dalbadaa in uu sameeyo daraasad si loogu ogaado halbeegyada aasaasiga ah ee degaanka iyo bulshada ee aagga mashruuca ka hor intaan la hirgelin;
d) go'aamiyaan halbeegyada iyo tilmaamayaasha la cabbiri karo ee loo adeegsan doono la socodka mashaariicda; iyo
e) in la sameeyo cabbiraadda isbeddellada degaanka ee dhacay intii lagu jiray hirgelinta mashruuca.

2. Guddi-hawleed heer federaal ah, isagoo la tashanaya Wasaaradda Degaanka ee Dawladda Federaalka iyo Dawladdaha xubinta ka ah fadaraalka ama hay'adaha kale ee ay khusayso waxay si joogto ah ula socdaan mashaariicda socda si waafaqsan hab-raacyada.

3. Guddi-hawleed heer federaal ah, marka la ogaado u hoggaansanaan la'aanta shuruudaha oggolaanshaha shahaadada daraasadda Saameynta degaanka iyo bulshada isla markiiba, waa inay bilaabaan tallaabo sixid ah.

Qodobka 44aad
Warbixinta Kormeerka

1) Ka dib marka la sameeyo kormeerka sida uu dhigayo qodobka 41aad ee sharciga, guddiga farsamadu waa inay u gudbiyaan warbixinta kormeerka Wasaaradda. Warbixinta waa inay ku jiraan:
a) magaca iyo ciwaanka goobta shaqada ee milkilaha mashruuca;
b) magaca mashruuca la soo-jeediyey;
c) taariikhda fulinta mashruuca la soo-jeediyey;
d) taariikhda warbixinta kormeerka ee ugu dambeysay, oo ay ku jiraan natiijooyinka warbixinta, tallaabada la qaaday iyo natiijada;
e) faahfaahinta xuduudaha degaanka ee lagu kormeerayo sida ku qeexan Qorshaha Maareynta Degaanka;
f) natiijooyinka shaqada kormeerka dhabta ah;
g) tallaabooyin cusub ee la fulineyo oo ay ku jiraan shuruudaha Qiimeynta soo socota; iyo

h) Natiijooyinka, gunaanadka iyo tallooyinka kooban oo aan farsamo ahayn.

2) Kormeeraha degaanku wuxuu u soo gali karaa dhul kasta ama dhisme kasta si uu ula socdo saameynta hawl kasta oo laga sameeyo dhulkaas ama dhismahaas ee degaanka.

QEYBTA LIXAAD
QODOBBO GUUD

Qodobka 45aad
Arrimaha Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee
Xuduudaha Ka Gudba

1) Marka mashruuc la filayo inuu saameyn ku yeesho xuduudaha, milkiluhu isagoo la tashanaya Wasaaradda waa inuu xaqiijiyaa in la sameeyey tallaabooyin yareyn kara oo ku habboon si looga fogaado waxyeello kasta oo imaan karta iyadoo la tixgelineyo heshiisyada jira ee u dhexeeya Soomaaliya iyo Dawladdaha kale.

2) Meesha ay u badan tahay in dhaqdhaqaaqu saameyn ku yeesho meel ka baxsan xudduudaha Soomaaliya, qiyaasidda baaxadda waa inay arrinkan muujisaa iyadoo la aqoonsanayo la Lana tashanayo dhinacyada danaynaya iyo kuwa ay khusayso ee dalalka deriska ah. Caawimaadda laga helayo Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada waxay noqoneysaa iney raadiyaan si loola xiriiro dhiggooda dalalka deriska ah.

3) Iyadoo la-talinta guud ee bulshada ee habka lagu qeexay Xeerka Maareynta Degaanka laga yaabo ineysan ka suuroobeynin dalalka ay saameysay, waxaa suurta-gal ah in la helo fikradahooda iyadoo loo marayo dhiggooda (Wasaaradaha Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada) ee dalalkaas. Marka la eego nidaamkan warbixinta furan ah ee loo marayo (Wasaaradaha Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada) ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo.

4) Hubinta tabashooyinka ay soo-jeediyeen dalka ay dhibaatadu saameysey si waafi ah loogu wajaho arjiga daraasadda Qiimeynta Saameynta degaanka.

5) Raadinta dhammaan macluumaadka loo baahan yahay ee khuseeya dalalka ay dhibaatadu saameysey, Wasaaradda ayaa gacan ka geysaneysa.

Qodobka 46aad
Helitaanka Xogta iyo Arrimaha ay tahay iney Qarsoonaadaan

1. Macluumaadka ama dokumentiyada uu qof kasta u soo gudbiyo Wasaaradda ee la xiriira qeybaha (2, 3, 4, 5, iyo 6) ee Xeernidaamiyahan iyo go'aanka xafiiska Agaasinku gaaro waa in dadweynaha loogu baahiyaa wargeysyada gudaha ah iyo warbaahinta elektaroonigga ah labadaba si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan.

2. Qofka u soo gudbinaya macluumaad, Wasaaradda waxaa laga yaabaa inuu ka codsado Wasaaradda in macluumaadka qeyb ka mid ah ay tahay sir oo laga reebo macluumaadka loo soo bandhigayo dadweynaha iyadoo lagu saleynayo Sirta Ganacsiga Ama Danta Amni ee Qaranka.
3. Waa in xogtani ay sii ahaato mid ay heli karto Wasaaradda, agaasinkuna waa inuu qaadaa dhammaan tallaabooyinka lagu ilaalineyo sirta macluumaadka oo aan la koobiyeyn, faafin, daabicin ama shaacin macluumaadkaas.

Qodobka 47aad
Diiwaan-gelinta Khubarada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada

1) Qofka codsanaya in loo diiwaan-galiyo xirfadle (Sarkaal sare, Sarkaal xigeen ama shirkad) si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan waa inuu u hoggaansamaa shuruudaha u-qalmitaanka iyo xeerka anshaxa sida ku cad Jadwalka Afaraad ee Xeer-nidaamiyahan.

2) Codsiga diiwaan-gelinta xirfadlaha waa inuu ku jiraa foomka 3aad ee lagu qeexay Jadwalka Labaad ee Xeer-nidaamiyahan.

3) Codsiga ku xusan xeerkan waa inay la socotaa kharashaadka diiwaangelinta sida lagu qeexay Jadwalka Afaraad ee Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 48aad
Shatiga Khubarada Qiimeynaya Degaanka iyo Bulshada

Shatiga khabiir ku takhasusay Qiimeynta degaanka iyo bulshada ee la tixraacayo waa inuu ahaadaa mid waafaqsan Foomka (1) ee ku xusan Jadwalka Labaad ee Xeer-nidaamiyahan, waxaana lagu bixin doonaa kharashaadka uu cayimay agaasinku waqtigaas.

Qodobka 49aad
Anshaxa Khubarada Qiimeynaya Saameynta Degaanka iyo Bulshada

1) Khubarada Qiimeynta Degaanka waa inay u dhaqmaan si xirfadeysan, sax ah, cadaalad ah iyo si aan eex laheyn u gutaa shaqadooda.

2) Khubarada Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada oo shahaado iyo shati haysta si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha, waxaa ay asaasi karaan urur xirfadeed si ay u taageeraan horumarinta xirfadeed oo ay ku jirto sida ku cad qeybta anshaxa- Xeer-nidaamiyahan ee Jadwalka Afaraad.

Qodobka 50aad
Ansixinta ama Diidmada Mashruuca

1. Wasaaradda ama qof ka socdo mas'uuliyad madani ah ama ciqaab ah, kama saarno ansixinta mashruuc ama natiijada ka timaadda mashruuca la ansixiyey, lagumana qaadi karo fal-dambiyeed madani ah ama ciqaab ah, sababtiisa tahay oggolaanshaha, diidmada, ama shardi kasta oo ku lifaaqan oggolaanshaha.

2. Xaqiijinta la xiriirta Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee ka difaaceysa fal kasta oo madani ah ama Dacwad ciqaab ah ama fal kasta oo hoos yimaada sharci kasta oo khuseeya mashruuca ama qaabka loo maamulay ama looga shaqeeyey.

Qodobka 51aad
Dembiyada

1. Iyadoo aan loo eegin shati oggolaansho lagu bixiyey si waafaqsan sharciga, qof kasta oo bilaaba, fuliya, ama dhaqan-geliya mashruuc kasta isagoo aan oggolaansho ka helin Wasaaradda sida ku xusan Xeer-nidaamiyahan, wuxuu gelayaa dembi isagoo muteysanaya ciqaabta lagu qeexay qeybtan.

2. Qofka wuxuu gelayaa fal-dembiyeed hadii uu:
    a. ku guul dareysto inuu diyaariyo oo u gudbiyo warbixinta mashruuc kooban/Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo

Bulshada Wasaaradaha Degaanka ee Dawlad goboleedyada ama Wasaaradda taas oo ka soo horjeedda Xeernidaamiyahan;

b. ku guul dareysta inuu diyaariyo oo uu soo gudbiyo Warbixinta Daraasadda Saameynta Degaanka iyo Bulshada taas oo ka soo horjeeda Xeer-nidaamiyahan; iyo
c. jebiya shuruudaha lagu siiyay shatiga mashruuca Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada.

Qodobka 52aad
Rafcaan

1. Qof kasta oo:
   a) Loo diiday bixinta shatiga ama wareejinta shatiga si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan;
   b) Lagu soo rogo shuruudo ama xaddidaad ama hakin lagu sameeyo shatigiisa;
   c) La buriyo shatiga lagu bixiyey si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan;
   d) Lagu soo rogay amar dib loogu soo celiyo degaanka ama lagu horumarineyo degaanka, amarkaas oo uu bixiyey Wasaaradda Degaanka;
   e) Loo diiday ansixinta ama dib-u-celinta shatiga Qiimeynta Saameynta degaanka;
   f) Loo Diiday oggolaanshaha qorshe ama barnaamij ama in lagu soo rago xaddidaad shati ama hakin oggolaansho la bixiyey.

2. Qof kasta oo ku qanci waaya go'aanada lagu gaaray si waafaqsan faqrada (1) ee qodobkan, wuxuu rafcaan ka qaadan karaa muddo lixdan (60) maalmood gudahooda oo ka bilaabanyso taariikhda go'aanka uu go'aanka soo baxay ama lasoo gaarsiiyo, go'aanka Gudiyada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer Fadaraal iyo Guddi-hawl-wadeenka Hanti-dhawrka.

3. Qofka go'aanka ku qanci waaya soddon (30) maalmood gudahood ka dib go'aankaa ama amarkaas, wuxuu rafcaan ka qaadan karaa go'aankaas wuxuuna cabashadiisa u gudbin karaa Guddiga Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee heer fadaraal iyo guddihawleedka hanti-dhawrka.

4. Oggolaanshaha lagu bixiyey oo la xiriirta qiimeynta saameynta degaanka uma noqoneyso difaac dacwad madani ama ciqaab ah oo uu fal-dembiyeed ka dhigayo Xeerarka Dalka.

Qodobka 53aad
Diiwannada

Agaasinku waa inuu ilaaliyaa diiwaannada soo socda:

a) Dhammaan diiwaannada shatiga Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada ee lagu bixiyey Xeer-nidaamiyahan;
b) Diiwaanka Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, kormeerka, iyo hanta-dhawrka degaanka;
c) Diiwaanka oggolaanshaha codsiyada doonaya ka saarista macluumaadka gaarka loo leeyahay xogta ay dadweynuhu heli karaan;
d) Dhammaan Diiwaannada khubarada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ama shirkado khubaro ah oo si sharci ah loogu oggolaaday iney qabtaan ama diyaariyaan hanti-dhawrka degaanka iyo diiwaanka warbixinnada hanti-dhawrka degaanka iyo bulshada;
e) Dhammaan Dokumentiyada machadyada tababarrada ee la aqoonsan yahay ee bixiya shahaadooyin si ay u qabtaan Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada;
f) Dadweynuhu waa iney heli karaan Diiwaanadda ay hayso wasaaradda, waxayna u baari kartaa cid kasta si waafaqsan shuruudaha ay dajisay Wasaaradda.

Qodobka 54aad
Kaalinta Wasaaradda

Kaalinta Wasaaradda iyo Wasaaradaha Degaanka ee Dawladdaha Xubinta ka ah Federaalka ee ku aaddan dhaqan-galinta Xeernidaamiyaha waa:

1. Hoggaaminta Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada ee siyaasadaha, barnaamijyada iyo istaraatijiyadaha heer Federaal ee Soomaaliya.
2. Wasaaradaha Degaanka ee Dawladdaha xubinta ka ah Faderaalka si ay u helaan xog kooban oo ku saabsan mashaariicda qeybta B (khatarta dhex-dhexaadka ah iyo kuwa yar yar) ee gudaha Gobolka.

Qodobka 55aad

Wareejinta ama U-idmashada Hawlaha

Wasaaraddu waxay u wareejin kartaa ama u idman kartaa hawlo kasta oo uu Xeer-nidaamiyahani jideeyey, Wasaaraddaha Degaanka ee Dawlad-goboleedyada ama waax ka tirsan wasaaradda, si ay u gutaan hawshaas.

JADWALKA KOWAAD
MASHAARIICDA LA DHAQAN-GELINAYO
QEYBTA (A)
MASHAARIICDA HALISTA BADAN KA DHALAN KARTO

TILMAAN GUUD:

a) Mashaariicda sababaya in isbedel balaaran uu ku dhaco isticmaalka dhulka;
b) Qorsheyaasha heer Qaran iyo kuwa dawlad-goboleed;
c) Mashaariicda dhalan-rogeysa dhulka cagaaran ama keymaha, dhul-beereedka ku yaala magaalooyinka ee cabir kiisu ka badan yahay 20 Hektar; iyo
d) Kaabeyaasha waaweyn ee ku dhaw dhulka u nugul fatahaadda.

BEERAHA:

a) qodaalka(carageddinta) beeraha ee ka badan 100 Hectare (Ha);
b) mashaariicda horumarinta biyaha;
    (i) Baliyada ka wayn 300Ha;
    (ii) Biyo gaarsiinta ama gelinta ka badan 500 Ha;
    (iii) Fatahaadda ama daad celinta/moosidda ka badan 500 Ha;
c) gacamada (kanaallada) waraabka ee ka badan 500 Ha;
d) falidda dalaga kaligis ee ka badan 100 Ha;
e) qodaalka (carageddin) ubaxa ee ka badan 5Ha; iyo
f) hadiiba, qodaalku keenayo barakac ku dhacaysa bulshada waxaa lagama-maarmaan ah in la helo qorshaha dib-u-dejinta.

MAAREYNTA DHUL-DAAQ-SIMEEDKA IYO XOOLAHA:

a) dhaqidda xoolaha tiradoodu ka badan tahay 1000 neef; iyo
b) socodka ama geediga xoolo (Lo') ka badan 5000 neef.

KEYMAHA:

a) jarida dhirta qoriga looxa (dhirta loo beeray in looxa laga dhigo) ee ka badan 5 Ha;
b) jarida iyo farsameynta qoriga looxa iyadoo la'isticmaalayo kiimiko;

c) dhismaha wadooyinka dhex maraya kaymaha (muhiim ma aha dhererka wadadu inta uu la eg yahay);
d) banneynta iyo dhalan-roga kaymaha si loogu isticmaalo ujeedo/isticmaal kale; iyo
e) Marka dhir qalaad la rabo in lagu beero, marka la sameynayo dhirayn/ kayn dad sameeyen, la rabo in nooca dhirta ka mid ah kaynta laga dabar-jaro.

KALUUMAYSIGA:
a) beerashada/dhaqashada kaluun, sida Aargoosatada si looga ganacsado; ama
b) Warshadeynta kaluunka iyo keydintiisa ee ka badan 50 tan maalintii.

DUUR-JOOGTA:
a) dib-u-soo celinta ama beddelka noocyada cusub ee noolaha dhirta iyo xayawaanka ah;
b) dhaqashada noocyada xayawaanka; iyo
c) marka la sameynayo goobo:
   (i) xayawaanka lagu ilaaliyo laguna daryeelo;
   (ii) lagu ilaaliyo, daryeelo islamarkaana lagu daawado, aqoonna laga kororsado; iyo
   (iii) goob lagu ilaaliyo oo lagu daryeelo xawayaanka dhasha ah ee gacanta lagu dhigo, kuwaas oo aan noolaan karin hadii aanay helin daryeel iyo xanaano dheeraad ah.

HORUMARINTA GOOBAHA DALXIISKA IYO TAMASHLAYNTA:
a) dhismaha hoteelada iyo adeegyada la xiriira ee harooyinka, wabiyada, jasiiradaha iyo badaha;
b) hoteelada iyo adeegyada la xiriira ee laga dhisayo dusha sare ee buuraha; iyo
c) Horumarinta adeegyada dalxiiska iyo tamashlaynta ee dhulka seereyaasha ah amaba agagaarka seereyaasha (seere kaymeedka, seere dalxiiska, seere badeedka IWM.)

TAMARTA:
a) horumarinta habka gudbinta xoogga korontada,
b) qoddidda iyo soosaarida tamarta Gaasta (LPG);
c) warshadaha tamarta kulka loogu badelo tamarta korontada, taas oo awooddeedu ka wayn tahay 50 MW;

d) Sameynta goobaha tamarta korantada lagaga dhaliyo qulqulka biyaha.
e) sameynta warshadaha tamarta ka dhaliya awooda Nukliyarka;
f) sameynta goobaha tamarta korontada lagaga dhaliyo awoodda dabeysha; iyo
g) Horumarinta nooca ama noocyada kala duwan ee tamarta la cusboonaysiiyo, kuwaas oo laga dhalineyo koronto baaxad leh.

BATROOLKA:
a) sahminta iyo horumarinta goobaha saliidda iyo gaaska;
b) dhismaha dhuumaha badda iyo kuwa barriga;
c) dhismaha iyo horumarinta ceelasha saliidda iyo gaaska, farsameynta, habeynta, maareynta iyo keydintooda;
d) dhismaha warshadaha saliida lagu sifeeyo; iyo
e) gudbinta saliida iyadoo la'isticmaalayo dhuumaha saliida qaada.

GAADIIDKA IYO WADOOYINKA:
a) dhismaha iyo/ama balaarinta wadooyinka;
b) dhismaha garoonnada diyaaradaha ee waaweyn, garoonnada diyaaradaha ee yaryar iyo adeegyada kale ee la xiriira;
c) dhismaha iyo balaarinta xadiidka tareenadu maraan; iyo
d) dhismaha iyo balaarinta dekadaha.

CUNTADA IYO CABITAANKA:
a) warshadaha Sokorta soo saara; iyo
b) warshadaha tubaakada farsameeya.

WARSHADAHA MARYAHA:
Warshadaha wax-soo-saarka dharka cudbiga, suufka iyo adeegyada kale ee la xariira sida (tolidda, falkinta, qalajinta cudbiga iyo suufka).

WARSHADAHA HARGAHA:
Warshadaha farsameeya hargaha, saamaha iyo wax-soo-saar kale ee la xiriira.

WARSHADAHA WARQADAHA IYO BUUGAAGTA:
Warshadaha soo saara warqadaha, buugaagta iyo agabka la xiriira iyadoo laga farsameynayo qoriga dhirta.

DHISMAHA IYO INJINEERIYADA:
a) goobaha warshadaha iyo goobaha degsiimada; iyo
b) horumarinta xeebaha.

WARSHADAHA KIIMIKOOYINKA:

a) soo-saarista iyo keydinta sunta cayeyaanka ama kiimikooyinka kale ee khatarta ah;
b) soo-saarists alaabta dawooyinka (Farsamo);
c) soo-saarista rinjiga;
d) soo-saarista saabuunta iyo nadiifiyeyaasha kale; iyo
e) soo-saarista carro-nafaqeeyeyaasha.

QODDIDA KHEYRAADKA:

a) Qoddida iyo sifeynta shidaalka Gaaska (LPG); iyo
b) Qoddida macdan si kooban ama si balaaranba.

WARSHADAHA KALE EE WAX-SOO-SAARA (Macdanta ahayn) Soo-saarista shamiitada (sibidhka):

BIRRAHA IYO FARSAMEYNTOODA:

a) Soo-saarista noocyada biraha ee ay kamid yihiin (Aluminium, Copper, Lead, Nickel, Tin, Titanium and Zinc); iyo
b) Soo-saarista birta iyo xaddiidka culus.

KORONTADA IYO ELEKTOROONIKADA:

Soo-saarista beteriyada iyo dib-u-farsameyntooda.

MAAREYNTA QASHINKA IYO GOOBAHA QASHIN-QUBKA:

1. Qashinka sunta ah iyo kuwa halista ah:
    a. dhismaha goobaha qashinka lagu gubo;
    b. dhismaha warshadaha dib-u-habeynta qashinka;
    c. dhismaha warshadaha lagu sifeeyo biyaha wasakheysan ee bullaacadaha;
    d. dhismaha goobo qashin-qub oo amaan ah; iyo
    e. dhismaha goobo ku-meel-gaar ah oo qashinka lagu keydiyo.

2. Qashinka adag ee ka soo baxa magaalooyinka;
    a. dhismaha goobo qashin-qub oo lagu xabaalo qashinka adag ee ka soo baxa magaalooyinka;
    b. wasakhda dareeraha ah ee magaalooyinka; iyo
    c. dhismaha nidaamka bullaacadaha.

QEYBINTA BIYAHA:

a) qeybinta biyaha togagga iyadoo la isticmaalayo kanaalo;
b) duwidda qulqulka biyaha ee dabiiciga ah;

c) hababka biyaha looga jiito/kaxeeyo goob ilaa goob kale;
d) ka faa'iidaysiga biyaha dhulka hoose ku jira iyo kuwa dusha mara;
e) warshadaha biyaha lagu sifeeyo; iyo
f) baliyada ama biyo-xireennada.

QORSHEYNTA HORUMARINTA DHULKA, HAGAAJINTA DHULKA, GURIYEYNTA IYO GOOBAHA LA DAGAN YAHAY:

a) dhulka loo baahan yahay in dib-u-dejin lagu sameeyo;
b) sameynta xarumo/goobo qoxoonti degan yahay;
c) dhulka biyuhu fadhiyaan ama dhul biyoodka loo rogayo dhulka qalalan; iyo
d) qodidda gidaarada loogu talo-galay celinta fatahaada mowjadaha badda, jidadka dadku ku lugeeyaan, moosaska fatahaada la iskaga difaaco, saaqiyadaha (tubooyinka) biyaha qaada iyo meelaha wabiyadu ay biyaha kaga daraan badweynta.

QEYBTA B. MASHAARIICDA HEERKA DHEXE IYO KUWA YARYAR EE AAN LAHAYN HALIS WEYN

FAAHFAAHINTA MASHAARIICDA LOO BAAHAN YAHAY
Liiska mashaariicda heer ka dhexe iyo kuwa yaryar ee u baahan in diiwaanka lagu qoro, hasayeeshee, aan u baahnayn in lagu sameeyo daraasad buuxda oo lagu ogaanayo dhibaatada ka dhalan karta. Sidoo kale, mashaariicdani uma baahna in lagu sameeyo daraasad hordhac ah iyo mid koobanba, kaliya waxay u baahan yihiin in la eego nuxurka mashruuca ka dibna, la siiyo shahaadada ansaxinta.

BEERAHA,
a) qodaal balaaran (<50 ilaa 10 Ha); (b) Mashaariicda horumarinta khayraadka biyaha;
b) qeybinta biyaha (baaxadda dhulka (<200 ilaa <50 Ha, fatahaadcelinta (baaxadda dhulka (<200 ilaa <50Ha); (iii) waraabka, saaqiyadaha (tubooyinka) (baaxadda dhulka (<200 ilaa <50), qodaal keliya oo ku fadhiya dhul balaaran (<50 Ha).
c) qodaalka ubaxa (<2 Ha).

MAAREYNTA DHUL-DAAQSIMEEDKA IYO XOOLAHA

a) dhaqidda xoolaha tiradoodu ka badan tahay (< 1000 ilaa <500 neef); iyo
b) Socodka ama geediga xoolo (Lo) ka badan (< 500 ilaa < 100 neef.

KEYMAHA Marka la rabo in nooc dhirta ka mida keynta laga dabar-jaro.

KALLUUMAYSIGA Warshadeynta kalluunka iyo keydintiisa ee ka yar 10 tan maalintii.

HORUMARINTA DALXIISKA IYO TAMASHLAYNTA

Booqashada dhulka baadiyaha ah, iyadoo guryo ku-meel-gaar ah goobta laga dhisanayo si loogu hoydo.

CUNTADA IYO CABITAANKA

a) habeynta tubaakada;
b) sharaabka iyo cuntada la warshadeeyey; iyo
c) kawaannada xoolaha lagu gawraco (Mashaariicda oo dhan, kuwaasoo tirada xoolaha ay qalayaan ka yar tahay).

WARSHADAHA MARYAHA

Tolliinka iyo falkinta dharka cudbiga iyo suufka ah ee ay sameynayaan qof ama dad kooban.

DHISMAHA IYO INJINEERIYADDA,

a) iskuulka ay dhiganayaan arday ka yar 360, Rug caafimaad,

Xarumaha caafimaadka daryeelka hooyooyinka iyo dhallaanka; b) riigagga; iyo

c) balliyada yaryar.

BIRAHA IYO FARSAMEYNTOODA Goobaha gaadiidka lagu dayactiro/Geerashyada.

KORANTADA IYO ELEKTOROONIKADA
Qotominta/rakibaadda biraha isgaarsiinta iyo fidintooda.

MAAREYNTA QASHINKA IYO GOOBAHA QASHIN-QUBKA

a) qashinka qoysaska magaalooyinku soo saaraan;
b) dhiska warshadaha carro nafaqeeyeyaasha ka sameeya haraaga cuntada, caleemaha dhirta iyo digada xoolaha; iyo
c) wasakhda dareeraha ee magaalooyinka.

MASHAARIICDA SHIDAALKA LA XIRIIRA

Kaalimaha shidaalka iyo Warshadaha yaryar ee gaaska (LPG).

JADWALKA LABAAD,
FOOMKA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA
FOOM KOWAAD, ISTICMAALKA

Tixraaca isticmaalka No.

XEERKA MAAREYNTA DEGAANKA

CODSI OGGOLAANSHO SAMEYN DARAASAD LAGU OGAANAYO SAAMEYNTA DEGAAN KA IYO BULSHADA KU LEEYAHAY MASHRUUC AMA QORSHE HORUMARINEED

QEYBTA, A FAAHFAAHINTA MILKILAHA MASHRUUCA

A1. Magaca milkilaha (Qof ama Shirkad) ----------

A2. Lambarka boostada ----------

A3. Magaca qofka lala xiriiri karo ----------

A4. Telefoon lambarka ----------

A5. Email-ka ----------

QEYBTA B. FAAHFAAHINTA MASHRUUCA

B1. Magaca mashruuca ----------

B2. Ujeeddada mashruuca iyo inta uu la egyahay ama ka kooban yahay --

---

B3. Faahfaahin kooban oo ku saabsan tallaabooyinka waaweyn ee mashruucu qaadayo ----------

---

B4. Meesha mashruuca laga fulineyo (bedka goobta, gobolka, loolka iyo dhigta goobta mashruuca laga fulineyo) ----------
---

QEYBTA C. CADEYNTA MILKILAHA MASHRUUCA AMA WAKIIL KIISA

Waxaan halkan ku caddeynayaa in xogta sare ku xusan ay saxan tahay isla markaana ay run tahay inta aan ka ogahay

Magaca: ----------
mas'uuliyadda qofka hayo----------

Saxiixa----------Wakiil ka ahay ----------

Taariikhda ---------- (Magaca shirkadda iyo Shaabbadda) ----------

QEYBTA D. FAAHFAAHINTA KHUBARADA SAMAEYNAYSA DARAASADDA/QIIMEYNTA DEGAANKA.

Magaca (Qofka ama Shirkadda) ----------

Shahaadada diiwaan-gelinta shirkadda ----------

Lambarka shatiga mihnadda Qiimeynta degaanka ----------

Lambarka Boostada ----------Telefoonka ----------

Emial-ka ----------

Mas’uuliyadda qofka ----------Saxiixa----------

---Tariikhda----------

QEYBTA E. WAXAA ISTICMAALI KARA KALIYA MAS'UULIYIINTA DAWLADDA EE SHAQADAN U XILSAARAN



La ansixiyey Lama ansixin

Faallo.

Magaca mas'uulka ---------- mas'uuliyadda uu hayo----------

Saxiixa----------Taariikhda----------

Qof kasta oo si been-abuur ah u sheega warbixin ama wax-ka-beddela warbixinta mashruuca wuxuu gelayaa dembi sida waafaqsan xeerkan.

F.G:

Fadlan soo gudbi kuwan soo socda:
(a) Saddex (3) nuqul oo foomkan ah oo si sax ah loo buuxiyey; (b) Saddex (3) nuqul oo ah warbixinta Kooban ee Qiimeynta Saameynta Degaanka uu mashruucu ku yeelan karo.

Agaasimaha Guud,
Wasaaradda Degaanka iyo Isbaddelka Cimilada,
Muqdisho, Somalia

FOOMKA LABAAD
SHATIGA OGGOLAANSHAHA QIIMEYNTA SAAMEYNTA
DEGAANKA IYO BULSHADA EE MASHRUUCA

Lamberka shatiga ----------

Tixraaca codsiga ----------

WAXAA ISTICMAALI KARA KALIYA MAS'UULIYIINTA DAWLADDA EE SHAQADAN U XIL SAARAN
XEERKA MAAREYNTA DEGAANKA
SHATIGA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA

Waxaan halkan ku caddeynayaa in warbixinta Qiimeynta Saameynta Deeganka iyo Bulshada ee mashruuca ---------- ee uu soo gudbiyey ---------- (magaca qofka /ama shirkada), xarunteedu/tiisu tahay ----------, warbixin taasoo loo soo gudbiyey Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada, ee Dawladda Federalka Soomaaliya si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan Lr--- 2024, Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee Mashaaruuca. (magaca mashruuca) ----- ---------- ujeeddadiisu tahay in uu sameeyo ----------, mashruucaas oo laga fulineyo goobta----------degmada ----------waa la hubiyey, waxaana la siiyey shatigan oggolaanshaha fulinta mashruuca.
Waxaa la raaciyey shuruudaha ku xusan lifaaqa.
Taariikhda: ----------
Saxiixa ---------- Shaabbadda ----------

Ku: Agaasimaha Guud,
Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada,
Muqdisho, Somalia

FOOMKA SADDEXAAD
CODSIGA KHUBARADA SAMAYSA QIIMEYNTA SAAMEYNTA
DEGAANKA IYO BULSHADA EE MASHRUUCA

Tixraaca codsiga----------

XEERKA MAAREYNTA DEGAANKA 2024
CODSIGA SHATIGA MIHNADA QIIMEYNTA SAAMEYNTA
DEGAAN IYO BULSHO EE MASHAARIICDA
QEYBTA A, FAAHFAAHINTA CODSADAHA

A1. Magaca codsadaha (qof ama shirkad) ----------

A2. Jinsiyadda ----------

A3. Haddii ay shirkadu tahay (ma wadanibaa mise waa shisheeye) ----
---

A4. Lambarka diiwaan-gelinta ganacsi ee shirkadda ----------

A5. Lambarka Boostada ----------

A6. Lambarka teleefoonka ----------

A7. Email-ka----------

A8. Heer waxbarasho iyo khibrada codsadaha ----------

A9. Liiska khubarada, dhalashadooda, heer kooda waxbarasho iyo khibradooda. ----------
---

A10. Takhakhuska ----------

A11. Khibrada shaqo ee la xiriira Qiimeynta Saameynta degaan iyo bulsho (Jaantus geli) ----------
---
A12. Xubinnimada urrurada ay ku midoobeen khubarada arrimaha degaanku ----------

A13. Codsiga shatiga shaqada lagu qabanayo (dooro meesha ku haboon) Hormuud Kaliye hormuud Shirkad

QEYBTA B, CADEYNTA CODSADAHA
Waxaan halkan ku caddeynayaa in xogta sare ku xusan ee aan bixiyey tahay mid sax ah, oo run ah inta aan ka ogahay, sidaas ayaanna aamin sanahay.

Magaca codsadaha ----------

Saxiixa codsadaha ----------

Tariikhda ----------

Ka wakiil ah ----------

Magaca shirkadda iyo shaabbadda

QEYBTA C, WAXAA ISTICMAALI KARA KALIYA MAS'UULIYIINTA DAWLADA EE SHAQADAN U XIL SAARAN.

La ansaxiyey

Lama ansixin

Faallo

Magaca ---------- Mas'uuliyada ----------

Saxiix ----------

Taariikhda ----------

FOOMKA AFARAAD, SHAHAADADA MIHNADA

Tixraaca codsiga----------
Lambarka diiwaan-gelinta ----------

XEERKA MAARAYNTA DEGAANKA 2024
SHAHAADADA MIHNADA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAAN IYO
BULSHO EE MASHRUUCA

Waxaan caddeynayaa in Mudane/Marwo ----------
----------oo laga helo ----------
inuu /inay dhamaystiray/tay shuruudihii looga baahnaa ee mihnada Sameynta Qimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee mashruuca si waafaqsan Xeerka Maareynta Degaanka 2024. waxaanna loo oggolaaday inay/inuu qaban karo shaqada kor ku xusan, heerka ----------
-

Shahaadadani waxay shaqayneysaa laga bilaabo ----------
---------- ilaa ---------- Tariikhda ----------
Saxiixa ---------- Agaasimaha Guud,
Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada,
Muqdisho, Somalia

FOOMKA SHANAAD
U HOGAANSANKA SHAHAADADA

Tixraaca codsiga ----------
Lambarka shahaadada ----------

XEERKA MAARAYNTA DEGAANKA 2024
SHAHAADADA U HOGAANSANAANTA QIIMEYNTA SAAMEYNTA
DEGAANKA IYO BULSHADA

Tixraaca codsiga ----------
Tariikhda ----------
Cinwaanka ----------
Milkiilaha Mashruuca ----------

Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee Dawlada Federalka Somaliya, waxaa uu dib u eegay warbixinta, waxaanu ogaaday iney u hoggaansantay oo ay waafac san yahay shuruudaha Maareynta Degaanka (Qiimeynta Istaraatijiga, Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada), 20--- sidaaradeed waxaa uu bixineyaa Shahaadada U hogaansanaanta Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada muddo dhan ----- oo ka bilaabanta --------- kuna eeg---------

Taariikhda ----------
Saxiix ----------
Shaabbada ----------

Agaasimaha Guud,
Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada,
Muqdisho, Somalia

Shuruudo sugnaanta shahaadada.

1. Waa in la hubiyaa in si buuxda loogu hogaansamo qorshaha maareynta degaanka ee ay soo jeedisay warbixinta baarista degaanku.

2. Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee Dawladda Federaalka Soomaaliya waxaa uu leeyahay awood buuxda uu kaga xayuubiyo ama ku tirtiro shahaadada la bixiyey haddii loo hogaansami waayo shuruudaha iyo xeerarka saldhiga u ah ay ku jirto, Xeerka Maaraynta Degaanka 2024 iyo Xeer-nidaamiyahan.

FOOMKA LIXAAD
OGEYSIIS FAALLOOYINKA DADWEYNAHA
XEERKA MAAREYNTA DEGAANKA 2024

OGEYSIINTA DADWEYNAHA SIDII AY U SOO GUDBIN LAHAAYEEN FAALLOOYINKA KU SAABSAN WARBIXINTA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA

Iyadoo la raacayo Xeerka Maareynta Degaanka 2024 iyo Xeernidaamiyahan (Qiimeynta Degaanka iyo Saameynta Bulshada), Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada waxaa loo soo gudbiyey warbixinta Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada ee mashruuca
la fulinayo ----------

Faahfaahinta Mashruuca ----------

Mashruuca laga fulinayo degmada----------
----Saameynata mashruuca ee la saadaaliyey waxaa ka mid ah ---------
-----

(Si kooban u sharax Saameynta mashruucu ee la filayo inuu yeesho iyo tallaabooyinka la qaadayo si loo yareeyo)----------
---

Warbixinta dhamaystiran ee mashruuca la soo jeediyey waxaa laga eegi karaa sida hoos ku xusan saacadaha shaqada,

1. Xarunta guud ee Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada

2. Xafiisyada Wasaaradda ee Maamul-goboleedyada
3. Website ka Wasaaradda : http://www.decc.gov.so/

Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada waxay dadweynaha ka codsaneysaa inay ka soo ra'yi dhiibtaan hab-qoraal soddon (30) maalmood gudahood oo ka bilaabanaysa maalinta ogaysiiskan la baahiyey, kuna soo hagaajiyaan.

1. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Degaanka iyo Isbaddelka Cimilada
2. Xafiisyada heer Maamul-goboleed

Taariikhda ----------

Saxiixa ----------

Agaasimaha Guud,
Wasaaradda Degaanka iyo Isbaddelka Cimilada,
Muqdisho, Somalia

JADWALKA SADDEXAAD
HAGE GUUD OO KU SAABSAN QIIMEYNTA SAAMEYNTA
DEGAANKA IYO BULSHADA
WAAFAQSAN XEER-NIDAAMIYE 8(1)
ARJIGA XOGTA MASHRUUCA OO KOOBAN
MAAMUL GOBOLEEDYADA

Wasaaradda Degaanka iyo Isbeddelka Cimilada
Dhammaan waraaqaha waxaa lagu socod siinayaa wasiirka

Tixraac---------- Lambarka qabashada ----------

---Tariikh----------

1. Xogta mashruuca oo kooban iyo Faahfaahinta nooca iyo qeybaha shaqada.

Tilmaamaha loogu talo-galay si loo dhammeystiro xogta kooban ee mashruuca.
Fadlan la soco in dhammaan qeybaha foomka ay tahay in la buuxiyo, haddii aanay meesha banaani ku filnayn kusoo lifaaq macluumaadka dheeraadka ah (wax-ka-beddelka foomka lama oggola).

Qof kasta oo ku qora xog been abuur ah qeybta xogta kooban ee mashruuca wuxuu mutaysanayaa ciqaab, sida uu dhigayo qodobka 50aad ee Xeerka Maaraynta Degaanka, Si loo hubiyo in aanu dib-u-dhac ku imaan fulinta mashruuca, waxaa haboon in xogta kooban ee mashruuca lasoo gudbiyo xili hore.

Fadlan ogow, haddii hay'adda Dawladda ee ku shaqada leh go'aamiso in mashruucu u baahan yahay qiimayn gun-dheer, faahfaahinta khubarada mas'uulka mashruucu soo jeediyey iyo shahaadada mihnadooda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, waa inuu u gudbiyaa hay'adda Dawladda ee ku shaqada leh ka hor inta aan Qiimeynta degaanka iyo bulshada la sameyn.

QEYBTA A

Faahfaahinta codsadaha:

1. Magaca mashruuca ----------
2. Qarashaadka mashruucu ku kacayo ---------- 3. Milkilaha mashruuca ----------
4. Cida lala xiriirayo ---------- 5. Lambarka Boostada ---------- 6. Meesha uu degan yahay/tahay ----------
- 7. Telefoonka ---------- 8. Email-ka ----------
9. Meesha mashruuca laga fulineyo (khariidad tusaysa goobta mashruuca laga fulineyo) ----------

QEYBTA B,

1. Faahfaahinta mashruuca
    a. xog kooban oo ku saabsan mashruuca;
    b) waa maxay heerka ama baaxda mashruucu; iyo
    c) waa maxay cimriga mashruucu amaba sida la odarasayo intee buu jiri karaa.

2. Habka mashruucu u shaqeyn doono (raaci lifaaq jaantus tusaya habka mashruucu u shaqeyn doono, raaci sawir meesha ku habboon)

    a) waa maxay agabka/qalabka shaqada lagu isticmaali doono ay ku jiraan kuwa xiliga dhismaha; iyo

b) waa maxay nooca wax soo-saarka iyo haraadiga wax soosaarka oo ku jiraan qashin ka soo baxay shaqada wax soosaarka.

3. Qorshaha mashruuca:
   a) mashruuca miyaa dhul la siiyey? (raaci lifaaqa waraaqaha cadeynta dhulka);
   b) waa sidee xilligan isticmaalka/ ka-faa'ideysiga dhulka mashruuca la siiyey?;
   c) ma laga yaabaa in mashruucu dhul beddel u baahdo?; iyo
   d) adeegyada hoos ku xusan miyaa laga helaa meesha mashruuca laga fulineyo?:
      i. waddo --------
      (faahfaahi); ii. biyo --------
      --(faahfaahi); iii. koronto -
      ------- (faahfaahi);
      iv. isgaarsiin ---------- (faahfaahi);
      v. habka maareynta wasakhda dareeraha ah ee magaalooyinka ---- ----------
      ----
      --(faahfaahi); vi. maareynta qashinka ---------

      (faahfaahi); iyo vii. hadii ay jiraan adeegyo kale -----
      ---------- (faahfaahi).

   e) mashruucu ma sababi karaa barakac dad iyo mid hantiyeed?;
   Hadii jawaabtu tahay haa (imisa qoys ayaa ku barakacay)?;
   f) mashruucu masaafo intee la eg ayuu u jiraa noocyada isticmaalka dhulka ee hoos ku xusan;
      i. Goobaha dadku degan yahay ----------
      -- ii. Goobaha warshadaha ----------

      - iii. Ganacsiga ----------

      --- iv. Dhul beereedka ----------

      ---
      v. Goobaha bixiya adeegyada bulshada (masaajid, Iskuul, goob loogu talo-galay in lagu tamashleeyo).

g) mashruucu miyuu ku yaalaa ama ku dhow yahay goobaha hoos ku xusan:

Goobta	**Haa**	**Maya**	**Inta ay u jirto**
Seere dalxiis ama xayawaan			
Seere lagu daryeelo noolaha iyo dabeecada leh mudnaanta gaarka ah			
Dhulka qoyan ee leh mudnaanta gaar ka ah (agagaarka webiyada, baliyada, harooyinka, IWM)			
Dhulka leh biyaha sare ee			
dhulka (biyo joogta ah iyo qaar aan joogto ahayn)			
Dhulka daadadku ku biyo furaan			
Goobaha xayawaan ku tarmaan (dhigaan ukuntooda ama marka ay dhalayaan yimaadaan)			
Goobaha laga helo xayawaanka ama dhirta tirada yar ama naadirka ah (dabar-go'aya)			
Goobaha leh ahmiyada gaarka ah sida (asaarta dabiiciga ah/arkiyolijiyadda, goobaha taariikhiga ah, ahmiyada diiniga ah, iyo tan dhaqan ba)			
Goobaha xiran ee xeerarka dalka ku xusan			
Buuro yaryar			

QEYBTA C,

1. Si kooban u qor Saameynta mashruuca ee suurta-gal ka ah ee uu ku yeelan karo degaanka (noocyada noolaha ee kala duwan, dhaqaalaha iyo bulshada), ee dhinacyada kala ah:

a. Dhibaatada ka dhalan karta (Saameyn taban) ----------

---

milkileyaashooduba kala duwan yihiin, arjiga faahfaahinta daraasadduna wuu kala duwanaanayaa.

Waxaa loo baahan yahay in arjiga faahfaahinta daraasaddu si fiican u sheegto baaxadda daraasaddu qiimeynta degaanka, iyo jadwalka shaqada si ay ula jaan-qaado diyaarinta, qorsheynta iyo fulinta mashruuca.

Dhammaan shaqooyinka ay daraasaddu ka koobnaanayso waa in si fiican loo faahfaahiyaa, ugu yaraana waa iny ku jiraan waxyaabaha hoos ku xusan:

1. Faahfaahinta siyaasadaha iyo xeerarka Dalka ee mashruuca khuseeya;
2. Faahfaahinta xaaladda degaanka shaqada laga fulinayo ku sugan yahay (noocyada noolaha ee kala duwan iyo ma noolaha)
3. Xaaladda dhaqan dhaqaale ee bulshada (xilligan iyo mustaqbalka dhawba);
4. La-tashiga dadweynaha si ay uga ra'yi dhiibtaan;
5. Gorfeynta iyo ka baaraandega xalalka suurta-galka ah;
6. Odoroska Saameyn kasta oo suurta-gal ah taas oo ka dhalan karta mashruuca;
7. Soo-jeedinta xalalka suurta-gal ka ah (arjiga faahfaahinta daraasadu waa in uu si fiican u sheegaa in khubarada daraasadd wada laga rabo iney soo jeediyaan xalalka ugu haboon ee suurta galka ah, isla markaana ku kacaaya kharash macquul ah iyada oo mar walba la hubineyo in xalka la qaadanayaa yahay ka ugu haboon ee yareynaya Saameynta/dhibaarada la odorosay);
8. Qorshe cad oo lagu fulinayo dhammaan xalalka habboon ee la doortay/qaatay si looga hortago iney dhacaan Saameynta taban (dhibaatada) suurta-gal ka ah ee la saadaaliyey (arjiga faahfaahintu waa inuu sheegaa shaxda rasmiga ah ee loo adeegsanayo marka la sameynayo qorshaha cad ee kor ku xusan, sidoo kale, waa inuu sheegaa sidii qorshaha daba-gal loogu sameyn lahaa iyo dhinacyada doorka ku leh mas'uuliyadda fulinta)
9. Saameynta asaarta qadiimiga ah (Archaeological);
10. Warbixinta daraasadda Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshadu waa inay noqotaa mid kooban oo macno leh, tusaysa dhammaan Saameynaha suurta-gal ka ah.

WAAFAQSAN XEER-NIDAAMIYAHA 13 (2)

QEYBAHA AY KA KOOBAN TAHAY DARAASADD QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHDA

Ujeeddada Xeer-nidaamiyuhu waa inuu bixiyo macluumaadka asaasiga ah iyo kan ugu yar ee ay tahay inay ku jirto warbixinta Daraasadda Saameynta Qiimeynta Degaanka iyo Bulshada. Warbixinta waa inay ku jirtaa dhammaan xogta loo baahan yahay sida ku cad xeerka. Sidaa daraadeed, qaabka iyo qeybaha ay daraasaddu ka kooban tahay waa inay noqdaan sidan hoos ku xusan:

1. Faahfaahin dhamaystiran oo ku saabsan milkilaha mashruuca iyo khubarada daraasadda sameynaysa. Xogta waa inay ku jirtaa lambarka boostada, telefoonka, iyo Email-ka oo ay tahay in lagu qoro xaga sare ee warbixinta.
2. Gogol-dhigga warbixinta daraasadda (xog kooban oo ku saabsan warbixinta, mashruuca, meesha mashruuca laga fulinayo, milkilaha mashruuca, xeelada iyo farsamada la adeegsaday si daraasaddan loo sameeyo, Saameynta mashruuca ee la odorosay, xalalka suurta-gal ka ah, talo soo-jeedinta khubarada iyo gunnaanad ka warbixinta.
3. Hordhaca warbixintu waa inay faahfaahisaa mashruuca iyo nooca uu yahay, meesha laga fulineyo. Haddii mashruucu qeyb ka yahay mashaariic wadajirta waa in la qoraa xogta asaaska mashruuca iyo asbaabaha keenay.
4. Siyaasadda, xeerarka, Xeer-nidaamiyeyaasha, qorsheyaasha iyo hageyaasha la xiriira mashruuca, ee ay tahay in loo hogaansamo mar walba waa in si faahfaahsan loo qoraa.
5. Xogta faahfaahinta mashruuca waa inay ku jiraan wax yaaban hoos ku xusan:
    i. ujeeddada mashruuca;
    ii. heerarka mashruucu marayo (ka baraandegga suurta-gal nimada mashruuca, naqshadda iyo Qiimeynta Injineerka oo faahfaahsan, fulinta iyo dhammeystirka);
    iii. khariidad tusaysa goobta mashruuca laga fulineyo; iv. naqshadii bilowga (hadii ay jirto) ee dhismeyaasha iyo baaxadda horumarka;
    v. muddada uu qaadanayo dhismuhu iyo xiliga la filayo in lasoo gabo-gabeeyo;
    vi. Gaadiidka la isticmaalayo iyo jidadka ay marayaan; vii. Fahamka guud ee hawl-galka mashruuca; viii.

Noocyada iyo xadiga walxaha (ashyaada) la isticmaalayo; iyo

ix. Noocyada, xaddiga, isku-dhiska, haraadiga wasakhda iyo qorshaha lagaga hortagayo ama loo maaraynayo.

6. Xaaladda degaanku ku sugan yahay ee dhinacyada kheyraadka noolaha (dhirta iyo xayawaanka) dhaqan dhaqaalaha bulshada, iyo dhulka waa in la diiwaan-geliyaa/qoraa si loo isticmaalo xilayada danbe marka la sameynayo is-barbar dhig ku saabsan xaalka degaanku ku sagan yahay hadda iyo ka hor intii aan mashruuca la fulin.

7. Qeybtani waa inay ka hadashaa ujeeddada laga leeyahay la-tashiga dadweynaha, habka loo maray, iyo miraha ka dhashay (Scooping), waxaa sidoo kale loo baahan yahay in la xuso habka iyo xiliga, xeeladaha la isticmaali doono marka la sameynayo la-tashi dadweyne xiliga daraasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada (ESIA).

8. Qeybtani waa qeybta ugu muhiimsan daarasadda Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada (ESIA), waa inay ka hadashaa dhammaan Saameyn kasta (dhib) oo suurtagal ah iney dhacdo xiliyada lagu gudo-jiro qeybaha mashruuca sida sahaminta, dhismaha iyo dhamaystirka ama gabo-gabada, taasoo fure u ah in la helo xal suurta-gal ah oo lagaga hortagayo. Faahfaahintan hoos ku xusan waxay tusaysaa astaamo ay leedahay saamaynta degaanka iyo tan bulshadu.

i. saameynta fiican ama faa'idada bulshadu heli karto (togan) iyo dhibaatada ka soo gaari karta (taban) marshruuc;
ii. saameynta toos ka ah iyo tan dadban ee ka dhalatay mashruuca, had iyo goor way fududahay in la garto Saameynta toos ka ah sida barakac dadweyne, laakiin, way adag tahay in Saameynta aan toos ka ahayn la garto;
iii. saameynnada (dhibaatooyinka) soo noqnoqda iyo kuwa mar kaliya dhaca;
iv. kuwa Saameynaya dhul kooban iyo Saameynnada u gudbaya dhul balaaran oo baaxad leh ama gobollo;

v. kuwa haraadigoodu marka uu isbiirsado ay ka dhalan karto dhibaato weyn iyo kuwa aanu haraadigoodu isbiirsan; iyo
vi. kuwa gaysan kara dhibaatada baaxadda leh ee aan laga soo waaqsan karin iyo kuwa aan lahayn Saameyn sii ridan ama weyn.

9. Waxaa jira Saameynno ka gudba xuduudaha caalamiga ah iyo kuwa aan ka gudbin, sidaa daraadeed, waxaa loo baahan yahay in daraasaddu ay eegto saameynnada ka gudbi kara.

10. Falan-qeynta xalalka suurta-galka ah: qorsheynta maal-gashiga la soo-jeediyey, goobta, tiknoolajiyada iyo hababka hawl-gelinta waa in si nidaamsan loo barbardhigo Saameynta ay yeelan karaan, kharashka ay ku kacayaan marka ugu horaysa ee la hawl-gelineyo iyo korjoogtada ay u baahan yihiin, la qabsiga/la jaan-qaadka degaanka laga shaqeynayo iyo hay'adaha qaabilsan, tababarrada iyo kormeerka.

11. Tallaabooyinka lagu yareynayo dhibaatada/Saameynta mashruuca, waxaa loogu talo-galay in tallaabooyin la qaado si loo hubiyo in bulshadu ka faa'ido isla markaana wax dhibaato ah oo weyni aanu dhicin, faa'idooyinka laga helayo:

i. helitaanka habab kala duwan oo lagu fuliyo mashruuc iyadoo la hubineyo inaan wax dhibaata ah oo weyni degaanka soo gaarin;
ii. baabi'inta ama yareynta Saameynta/dhibaatada ka dhalata fulinta mashruuca iyo balaarinta faa'idada bulshadu helayso;
iii. In la ilaaliyo xaqa ay xubnaha bulshadu ama guud ahaan bulshadu u leedahay magdhowga;
iv. sahminta mashruuca iyo tallaabooyinka kharash ahaan suurtagal ka ah waa in la isticmaalaa si loogu yareeyo dhammaan dhibaatooyinka ka imaan kara fulinta mashaariicda inta ugu badan ee suurtagal ka ah.
Tallaabooyinkaa waxaa ka mid ah kharash lagu fuliyo iyo mid lagu daboolo kharash ka soo noqnoqda, iyo tababaro la siinayo hay'adaha ku shaqada leh si ay waajibkooda u gutaan;
v. dib-u-hagaajinta meelaha ay dhibaatadu soo gaartay;

vi. Dib-u-soo-celinta degaan dhibaato hore usoo gaaray sidii sii hore iyadoo la isticmaalayo farsamada injineerrada oo heer sare ah; iyo

vii. Magdhow in la siiyo dad dhibaato ka soo gaartay mashruuc sida dad barakacay ama waayey ilihii dhaqaale ee ay ku maareynayeen noloshooda.

12. Qiimeynta aasaarta Qadiimiga ah; Saameynta mashruuc ku yeeshay ama dhibaatada ka soo gaaray aasaarta dabiiciga ah iyo talo-bixinta khubarrada waa in si faahfaahsan loo sharaxaa iyadoo la tixraacayo liiska Saameynnada iyo talo-bixinnada.

13. Qorshaha fulinta tallaabooyinka lagu yareynayo dhibaatada degaan iyo tan busho ee ka dhalan karta mashruuc; qorshuhu wuxuu qeexayaa cid waliba mas'uuliyadda ay qaadanayso, dhaqaalaha loo baahan yahay iyo waqtiga la fulineyo, mid ka mid ah qeybaha qorshaha ugu muhiimsan waa qorshaha daba-galka, kaas oo lagu hubineyo in qorshuhu si fiican u hirgalay iyo in kale, sidoo kale wuxuu sahlayaa in la ogaado in loo hogaasamay hageyaasha, heerrarka mashruuca iyo xeerrarka dalka. Qorshuhu wuxuu kale uu taabanayaa in la laga digtoonaado inaan wax dhibaato ahi aanay degaanka soo gaarin xiliga mashruucu dhamaado, wixii waxyeelo ah ee dhacay intii shaqadu socotayna la hagaajiyo.

14. Gabagabada iyo talo-bixinta; waxaa loo baahan yahay in warbixinta Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshadu yeelato gabagabo iyo talo-bixin si fiican loo qoray, iyadoo hadalka la soo urrurineyo, gabagabadu waxay taabanaysaa xeeladda iyo farsamada la adeegsaday, Saameynta/dhibaatada suurta-galka ah ee mashruuca, iyo tallaabooyinka la qaadi karo si looga hortago dhibaatooyinkaasi inay dhacaan.

15. Tixraac; waxaa laga maarmaan ah in warbixintu yeelato liis ay ku dhan yihiin dhammaan tixraacyada meelaha laga soo qaatay xogta.

16. Lifaaqyada; qoraalada muhiim ka ah ee aan warbixinta guud ka midka ahayn, lakiin hadhow loo baahan karo si ay khubarada u tixraacdo waxaa laga dhigayaa lifaaqa warbixinta. Liiska lifaaqyada;

a) Arjiga faahfaahinta Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada;
b) Ilaha xogta iyo macluumaadka laga helay;
c) Liiska dhammaan dadka iyo xafiisyada lalatashaday waqtigii daraadasada Qiimeynu socotay;
d) Xogta la soo urruriyey muddadii daraasadu socotay;
e) Xogta ku saabsan asaarta qadiimka ah ee la soo helay;
f) Xogaha badan ee la helay muddadii daraasaddu socotay, taas oo aan badan keedu waxbixinta lagu dari karin maadaama oo ay aad u faahfaahsantahay, sida naqshada dhismaha, sawirada, khariidadaha, dikhowga degaanka, caro-guurka, baahiyaha adeegyada bulshada;
g) Xog kooban oo ku saabsan la-tashigii dadweynaha, waxaa loo baahan yahay qoraalka laga qoray (meeting minutes) shir walba oo dadweynaha lala yeeshay; iyo
h) Magacyada, xogaha waayo-aragnimada (CV), iyo macluumaadka kale ee loo baahdo.

F.G:
Inta ay la eg tahay faahfaahinta xogta ee la helayaa waxay ku xiran tahay hadba inta Saameynta/dhibaatada mashruuca uu keeni karo ay la eg tahay iyo tallaabooyinka la qorsheeyey.

JADWALKA AFARAAD
KHUBARADA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO MASHRUUCA

WAAFAQSAN XEER-NIDAAMIYAHA 47(1)
AQOONTA LOOGA BAAHAN YAHAY KHUBARADA QIIMEYNTA SAAMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA, IYO DEGAAN DHAWREYAASHA HUBINEYA IN LOO HOGAANSAN YAHAY XEERRAR KA IYO HAGEYAASHA

1. Khubarada danaynaysa inay sameeyaan/qabtaan shaqada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee mashaariicda, qorsheyaasha iyo hubinta u hogaasan ka xeerrarka iyo hageyaasha dhawrida degaanka waxaa looga baahan yahay haday yihiin

muwaadiniin ama ajanabi iney iska diiwaan-galiyaan Wasaaradda Degaanka iyo Isbadelka Cimilada.

2. Ka dib marka ay buuxiyaan shuruudaha hoos ku qoran, khubarada muwaadiniinta ah iyo shisheeye, saraakiisha sare, saraakiisha dhexe iyo shirkaduhu waa iney bixiyaan qarashaadka ku waajibay, iyagoo ku bixinaya canshuuraha Berriga ee Wasaaradda Maaliyadda, ka dibna dhammeystirka diiwaan-gelinta iyo oggolaanshaha rasmiga ah ka qaadanaya Wasaaradda Degaanka iyo Is-beddelka Cimilada.

3. Shuruudaha diiwaan-gelinta khubarada:
   a) Sarkaal sare (Khabiirka hogaamineya daraasadda Qiimeynta);
   b) Sarkaalka sare waa inuu leeyahay aqoonta hoos ku xusan;
   c) Waa inuu haystaa shahaaddada heerka labaad ee jaamacadeed, taas oo la xiriira shaqada laga shaqeynayo, sidoo kale, waa inuu leeyahay ugu yaraan 5 sano oo waayo-aragnimo ah oo la xiriira Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ah, cilmi-baarista iyo tababarrada;
   d) Qarashaadka diiwaan-gelinta sarkaal sare –khabiirka muwaadinka ah (40 Doolar) qarashaadka diiwaan-gelinta sarkaal sare – khabiirka shisheeyaha ah (100 Doolar).
   e) Sarkaal dhexe (kaaliyaha khabiirka hogaamineya daraasadda Qiimeynta);
   f) Sarkaal xigeenku waa inuu leeyahay aqoonta hoos ku xusan. Waa inuu haystaa shahaaddada kowaad ee heer jaamacadeed, taasoo la xiriira shaqada laga shaqaynayo, ama waa inuu haystaa heerka wax barasho ee DIBLOOMADA iyo tababaro farsamo oo ku saabsan Qiimeynta Saameynta degaanka iyo bulshada.
   g) qarashaadka diiwaan-gelinta sarkaal xigeenka –khabiirka muwaadinka ah (30 Doolar);
   h) qarashaadka diiwaan-gelinta sarkaal xigeenka– khabiirka
   shisheeyaha ah (70 Doolar).

   A. Shirkada rabta inay noqoto mid ku takhakhustay Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada

Shirkadu waa inay buuxisaa shuruudaha hoos ku xusan:

1. Waa inay noqotaa shirkad ka diiwaan-gashan dalka Somaliya;

2. Waa inay xogta shirkada ee tusaysa awooddeeda farsamo, maamul, iyo khubaradeeda u gudbisaa Wasaaradda Degaanka iyo Is-bedelka Cimilada;

3. Sarkaalka sare ee iska diiwaan-geliyey Wasaaradda Degaanka iyo Is-bedelka Cimilada waa inuu haystaa shati muddadiisu aanu dhicin, kaas oo shaqaynaya;
4. Shirkada ay leeyihiin dadka ajaanibka ahi, waa inay shaqaaleysiiyaan khubarada muwaadiniinta ah.

Qarashaadka diiwaan-gelinta shirkada ay leeyihiin –khabiirka muwaadinka ah (60 Doolar)
Qarashaadka diiwaan-gelinta shirkada ay leeyihiin – khabiirka shisheeyeah (180 Doolar).

B. Codsiga dib-u-cusbooneysiinta shatiga mihnada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Is-bedelka Cimilada.

Ka dib marka ay khubaradu iska diiwaan-geliyaan Wasaaradda Degaanka iyo Is-bedelka Cimilada waa inay codsadaan shatiga mihnada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, kaas oo dib loo cusbooneysiineyo sanadkiiba hal mar.
Shuruudaha dib-u-cusbooneysiinta

1. Waa in la bixiyaa qarashaadka ku waajibay, waraaqda lacag qabashadana la keenaa.
2. Nuqul ka shatigii sanadkii hore ama shahaaddada diiwaan-gelinta shirkada.

Qarashaadka dib-u-cusbooneysiinta:

Nooca	**Muwaadin**	**Shisheeye**
Sarkaal sare khabiirka hogaamineya daraasadd Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada	$50	$200
Sarkaal xigeen –kaaliyaha khabiirka hogaamineya daraasadd Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada	$40	$100

Shirkad ku takhakhustay Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada	$240	$720

Wasaaradda Degaanka iyo Isbedelka Cimiladu waa iney xaqiijisaa inuu helay arjiga codsiga 14 maalmood guddahood, islamarkaana uu ku bixiyaa shatiga mihnada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada 45 ilaa 90 maalmood gudahood si waafaqsan Xeerka Maaraynta Degaanka.

Waajibka macmiilka

Waxaa fiican oo u habboon in milkilaha mashruucu inuu codsado shahaaddada bad-qabka degaanka iyo bulshada (ESIA Licence) 90 maalmood ka hor waqtiga la qorsheeyey inuu bilaabmo mashruuciisu Milkilaha waxaa looga baahan yahay inuu bixiyo qarashaadka ku waajibay

Waa inuu soo gudbiyaa dhammaan waraaqaha looga baahan yahay xili hore

Khubarada sameynaysa Qiimeynta Saameynta degaanka waxaa looga baahan yahay inay si fiican u shaqadooda u gutaan iyaga oo isticmaalaya xog ama macluumad dhab ah.

C. Waxbarashada jaamacadeed ee khusaysa Qiimeynta Saameynta Degaanka

Daraasadda degaanka, cilmiga noolaha (bayuulojiga), kiimikada, injineeriyada (shibil, beeraha, biyaha, iyo kiimikada), juqraafiga, cilmiga dhulka, cilmiga noolaha il-ma-qabatada cilmiga dabiiciga, degaanka, daraasadd dhaqanka bulshada, sharciga degaanka ama kuwa kale oo ay ansixiso hay'ada iyadoo raaceysa soo-jeedinta hay'ad ku foogan arimaha degaanka ama xeel-dheere.

HUBIN

Ka dib marka codsiga la helo, codsadaha waa loo yeeri karaa si loola yeesho waraysi gaara, ama laga hubiyo waraaqaha iyo xogta uu soo gudbiyey

Sii horumarinta aqoonta

Waxaa looga baahan yahay in khabiir waliba uu sanadkii qaato ugu yaraan hal tababar oo ah kuwa ay soo qabanqaabiyaan urrurada ay ku midoobeen khubarada arrimaha degaanku iyadoo lala tashanayo

Wasaaradda Degaanka iyo Isbedelka Cimilada si ay u ansixiso xubnaha ku jira liiska urrurka.

WAAFAQSAN XEER-NIDAAMIYAHA 49 (2)
ANSHAXA LOOGA BAAHAN YAHAY KHUBARADA IS DIIWAANGELISAY
SI WAAFAQSAN XEERKA

Khubaradu waa inay shaqadooda u gutaan sida ugu fiican ee suurta-gal ka ah ee waafaqsan mabaadiida caalamiga ah ee dhawrida degaanka iyo horumarka waara, waxaa kale oo loo baahan yahay in la raaco xeerrarka dalka, lana hubiyo in la sameeyo shaqo heer sare ah.

1. Khubarada sameynaysa daraaasada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waxaa looga baahan yahay in wax walba ka horaysiiyaan mudnaanta ilaalinta degaanka, caafimaadka iyo mabaadiida yoolka horumarka waara.
2. Khubarada sameynaysa daraaasada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada waa inay tixgalin dheeraad ah siiyaan arrimaha khuseeya ilaalinta degaanka ee la xusay xiligii mashruuca la diyaarinayey.
3. Khubaradu waa inay shaqadooda u qabsadaan si daacadnimo ah, kana dheeraadaan wax isweydaarin, been iyo musuqmaasuq.
4. Khubaradu waa inay si fiican warbixintooda ugu kala saaraan ra'yiga dadweynaha iyo arrimaha xaqiiqada ah.
5. Khaburadu waa inay u dhego nuglaadaan oo ay la socdaan horumarka cilmiga ku saabsan Qiimeynta Saameynta degaanka, kaas oo maalinba maalinta ka danbaysa soo kordhaya, ka dibna, waa iney aqoonta ay helaan ku dabaqaan shaqadooda.
6. Khubaradu waa iney ku wargeliyaan loo shaqeeyaha wax kasta oo kala shaki keenaya, taas oo dhaawici karta qiimaha iyo qaayaha shaqada.
7. Khubaradu waa iney si fiican u isticmaalaan oo ay uga faa'ideyaan xogta la heli karo.
8. Khubaradu waa iney qaadaan mas'uuliyada macluumaadka ay warbixin tooda ku soo saareen, laakiin, mas'uul kama aha go'aan ka cid kale ay qaadato.
9. Khabaradu waa in qabtaan/sameeyaan Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada ee ay aqoon iyo waayo-aragnimo ku filan u leeyihiin.
10. Khubaradu waa in aanay xayeysiin shaqada ay bulshada u qabanayaan si aanay u dhaawicin qiimahooda iyo kalsoonida lagu qabi karo.

11. Khubaradu waa in aysan been ka sheegin heerkooda aqoonta iyo waayo-aragnimadooda shaqo iyo ta kaaliye-yaashooda midna, sidoo kale waa in aysan buunbuunin shaqada ay qabanayaan. Marka laga dalbado inay soo gudbiyaan codsigooda shaqo/qardaraas waa inay si habboon oo tafatiran u soo gudbiyaan.
12. Khubaradu waa in aysan isticmaalin warbixinaha Qiimeynta Saameynta Degaanka ee dadka kale, iyagoo aan oggolaansho ka helin.
13. Khubaradu waa inay ku ekaadaan ujeeddada Qiimeynta Saameynta Degaanka iyo Bulshada, kuna dedaalaan sidii ay u gaari lahaayeen.

FOORMKA TODOBAAD,
XAASHIDA DIIWAAN-GELINTA KHUBARADA SAMEYNEYSA

DARAASADDA QIIMEYNTA DEGAANKA IYO BULSHADA

No.	Magaca Khabiirka	Lambarka diiwaan-gelinta	Lambarka shatiga mihnada	Email-ka iyo Telefoonka	Takhakhuska
1.					
2.					
3.					

Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 181 **Taariikh: 05/07/2025**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA BIXID 07 JUL 2025 EXIT OFFICE OF THE PRIME MINISTER

XEER: SIYAASADDA QARAN EE SOCDAALKA SHAQADA

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (g); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG ah ee JFS;

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay **WASHAB/WSHXSH/319/2025** ee ku taariikheysan **27/03/2025** ee Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulashada, kuna saabsan codsiga soojeedinta "**Siyaasadda Qaran ee Socdaalka Shaqada**";

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.18.121.07.25** ee **03/07/2025**, kuna saabsan ansixinta **"Siyaasadda Qaran ee Socdaalka Shaqada"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Muhiimadda ay Dalka u leedahay Siyaasadda Qaran ee Socdaalka Shaqada;

Waxaa uu Meelmariyay:

Qodobka 1aad :

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.18.121.07.25** ee **03/07/2025**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Socdaalka Shaqada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Qodobka 2aad:

Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Siyaasadda Qaran ee kor ku xusan.

Qodobka 3aad:

Dhaqangal

Siyaasaddan waxa ay dhaqangalaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN- 047- 2025
TAARIIKH : 09- 08- 2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada

SIYAASADDA QARAN EE SOCDAALKA SHAQADA

Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, 2025

TUSMO

I. ERAY-BIXIN 539

II. SOO-GAABIN ERAYO IYO WAXAY U TAAGAN YIHIIN 541

III. DULMAR KOOBAN OO KU SAABSAN HIRGELINTA SIYAASADDAN..... 546

IV. HIMMILLOOYINKA 546

V. HIGSIGA..... 546

VI. UJEEDDADA 546

VII. QIYAMKA ASAASIGA AH IYO MABAADI'DA HAGEYSA.. 546

VIII. UJEEDDOOYINKA ISTIRAATIJIYADEED EE SIYAASADDAN 547

IX. MOWDUUCYO IS-DHEX-GALA (CROSS-CUTTING THEMES) 547

X. FAL-GELIDDA SIYAASADDA IYO TALLAABOOYINKA LA SOO JEEDIYEY 547

Qeybta 1: Xoojinta Maamulka Socdaalka Shaqada 548

Qeybta 2: Horumarinta, Tayeynta iyo Aqoonsiga Xirfadaha.... 548

Qeybta 3: Ballaarinta Illaalinta Shaqaalaha iyo Daryeelka Bulshada ee Shaqaalaha 549

Socdaalaya iyo Qoysaskooda..... 549

Qeybta 4: Siyaasadda Xoojinta Doorka La-hawl-galeyaasha Bulshada, Bah-wadaagta 549

Horumarineed iyo Qeybaha Ganacsiga Gaarka Ah 549

Qeybta 5: Xoojinta Xog-ururinta, Maareynta, iyo Faafinta Xogta La Xiriirta 550

Socdaalka Shaqada 550

Qeybta 6: Nidaaminta Wakaaladaha Shaqaaleysiinta ee Gaarka Loo 550

Leeyahay..... 550

Qeybta 7: Taageeridda Nidaamyada Dib-u-soo celinta iyo Dib-u-dhexgelinta..... 551

Shaqaalaha Socdaalaya 551

Qeybta 8: Horumarinta Waxtarka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Qurba- joogta Ah..... 551

XI. HANNAANKA FULINTA SIYAASADDAN 552

XII. FURSADAHA MAAL-GELINTA..... 553

XIII. GAARSIINTA IYO FAAFINTA SIYAASADDAN 553

1. Hordhac iyo Falanqayn Xaaladeed..... 555

1.1 Xogta Dadweynaha, Dhaqaalaha iyo Xaaladda Shaqooyinka 555

1 .2 Muuqaalka Shaqada iyo Baahida Kor-u-qaadista Xirfadaha Si 556

Tartiib Tartiiib Ah 556

1. 3 Muuqaalka Socdaalka Soomaaliya 557

1.3.4. Ka-qeyb-galka Jaaliyadaha Soomaaliyeed 559

1.3.5 Lacagaha ay Dibadda Ka Soo Diraan Jaaliyadaha 559

1.4 Qaab-dhismeedka Maamulka Socdaalka Shaqada 559

1.5 Xaaladda Dhibaatada iyo Sababaha Asaasiga ah ee Siyaasaddan..... 561

1.6 Sababaha Asaasiga ah ee Siyaasadda..... 561

2. Jihada Istiraatijiyadda..... 562

Aragtida 562

2.1 Himmillada 563

2.2 Ujeeddada 563

2.3 Qiyamka Asaasiga ah iyo Mabaadi'da Hageysa Siyaasaddan. 563

2.4 Ujeeddooyinka Istaraatijiyadeed ee Siyaasaddan..... 564

2.5 Mowduucyada Is-dhex-gala 564

3. Tallaabooyinka, Faro-gelinada iyo Hababka Siyaasaddan..... 566

Qeybta 1: Xoojinta Maamulka Socdaalka Shaqada si waafaqsan hal-beegyada iyo Xeerarka Caalamiga ah ee Shaqada 566

Qeybta 2: Aqoonsiga Xirfadaha iyo Horumarintooda..... 566

Qeybta 3: Ballaarinta Ilaalinta Shaqada iyo Dammaanadda Bulsho ee Shaqaalaha Socdaalka iyo Qoysaskooda 567

Qeybta 4: Xoojinta Doorka La-hawl-galeyaasha Bulshada, La-hawlgaleyaasha Horumarinta, iyo Qeybaha Gaarka Loo Leeyahay 568

Qeybta 5: Xoojinta Soo-saarista, Maareynta, iyo Faafinta Xogta Socdaalka Shaqaalaha 568

Qeybta 6: Nidaaminta Wakaaladaha Shaqaaleysiinta Gaarka Loo Leeyahay 569

Qeybta 7: Taageeridda Nidaamyada Soo-noqoshada iyo Dib-u-milanka Shaqaalaha Socdaalka 569

Qeybta 8: Kordhinta iyo Hagaajinta Ka-qeyb-galka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Qurbaha 570

4. QAAB-DHISMEEDKA HIRGELINTA SIYAASADDAN..... 570

4.1 Qaab-dhismeedka Sharciyada iyo Xeerarka 571

Qaab-dhismeedka Qaranka 571

Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (2012) 571

Qorsheha Shaqo ee Qaranka (NEP) iyo Qorshaha Fulinta (2019) 571

Qorshaha Horumarinta Qaranka 2020–2024 571

Siyaasadda Qaranka ee Qurbo-joogta (2023) 572

Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga Soo noqday iyo Barakacayaasha Gudaha 573

Hab-raaca Shaqo-siinta Dibadda (Overseas Employment Guidelines) (2022) 574

Sharciga Maal-gashiga Shisheeye 2015 574

Qaab-dhismeedka iyo Heerarka Caalamiga ah 575

Heshiisyada Caalamiga ah ee Ururka Shaqaalaha Adduunka ee Socdaalka Shaqaalaha 576

Barnaamijka Shaqo Hufan ee Dalka (DWCP 2023-2025) 577

Qaab-dhismeedka Kale ee Horumarinta Qaranka 577

Qabyo-qoraalka Istiraatijiyadda Socdaalka Qaranka (2024) 577

Qabyo-qoraalka Istiraatijiyadda Xalka Waara ee Qaranka (2025-2029) 578

Qabyo-qoraalka Siyaasadda Qaran ee TVET Waxbarashada Farsamada iyo Tababarka Xirfadaha) 578

Qaab-dhismeedyada Heer Goboleedka ah 578

4.2 HABABKA DHAQAN-GELINTA SIYAASADDA 579

4.3 Dhaqan-geliyeyaasha Fulinta, Isku-dubbaridka iyo Wada-shaqeynta Hay'adaha 580

6. Hababka Isgaarsiinta 589

12. Qaab-dhismeedka Kormeerka, Qiimeynta iyo Barashada 591

12.1 Kormeerka 591

12.2 Qiimeynta 592

13. GUNAANADKA 593

I. ERAY-BIXIN

“Wada-xaajood Wadajirka ah” waxaa loola jeedaa dhammaan wadahadallada u dhexeeya loo-shaqeeyeyaasha iyo/ama ururrada loo-shaqeeyeyaasha dhinacooda, iyo ururrada shaqaalaha dhinacooda, oo loogu talo-galay in lagu go'aamiyo xaaladaha shaqo iyo shuruudaha shaqaaleysiinta, xeerarka xiriirka u dhexeeya loo-shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha, xeerarka xiriirka u dhexeeya loo-shaqeeyeyaasha ama ururradooda iyo ururrada shaqaalaha.

“Siyaasadaha Tixgelinta Jinsiga” waxaa loola jeedaa tallaabooyin istiraatiji ah oo si gaar ah loogu talo-galay in lagu garowsado in ragga iyo dumarkuba ay u socdaalaan sababo dhaqaale iyo fursado shaqo oo wanaagsan, balse shaqaalaha haweenka ah ay la kulmaan caqabado badan, dulmi, iyo takoorkaan heer kasta oo socdaalka ah. Siyaasaddan waxay diiradda saaraysa yareynta caqabadaha iyo xaqiijinta sinnaanta jinsiga ee dhammaan marxaladaha socdaalka.

“Xalka Waara” waxaa loola jeedaa iyadoo la tixracaayo tallaabooyin la dejiyey oo bixiya fursado ay haystaan qaxootiga, soo-noqdeyaasha, ama dadka gudaha ku barakacay kuwaasoo aan mar dambe u baahnayn gargaar iyo ilaalin gaar ah. Tallaabooyinkan waxay u oggolaanayaan inay si waara u helaan xuquuqdooda asaasiga ah ee dastuuriga ah iyo kuwa xuquuqda aadanaha, iyagoo si deggan oo sharaf leh ugu dhex noolaan kara bulshadooda.

“Ka-ganacsiga Dadka” waxaa loola jeedaa hawlo ay ka mid yihiin qorista, gaadiidka, kala-wareejinta, qarinta, ama helidda dad si loo isticmaalo. Sidoo kale, waxaa loo yaqaan **Ka-ganacisiga Dadka** sida ku cad **Heshiiska Palermo**. Ganacsigan waxaa lagu fuliyaa iyadoo la adeegsanayo cabsi-gelin, xoog, ama qaabab kale oo qasab ah, afduub, khiyaano, marin-habaabin, ama xad-gudub awood, ka-faa'idaysi qof nugul oo xaalad adag ku sugan, bixinta ama helidda lacag ama faa'iidooyin si qof kale loo maamulo. Ujeeddada ugu weyn ee ka-ganacsiga dadka waa ka-faa'idaysiga dadka, taasoo noqon karta shaqo qasab ah, addoonsi, ka-ganacsiga jirka, ama xad-gudubyo kale oo bani'aadannimo.

“Nidaamka Xogta Suuqa Shaqada” waxaa loola jeedaa shabakad isku-xirta hay'adaha, shakhsiyaadka, iyo ilaha macluumaadka oo leh door heshiisyo, iyo hawlo la wada aqoonsan yahay oo la xiriira soo-saarista, keydinta, faafinta, iyo isticmaalka macluumaadka suuqa shaqada.

Nidaamkani wuxuu higsanayaa in uu sare-u-qaado awoodda sameynta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo barnaamijyada la xiriira

“Siyaasadda Socdaalka Shaqaalaha ee Tixgelinta Jinsiga” waxaa loola jeedaa Siyaasaddan waxay aqoonsanaysaa in ragga iyo dumarku labaduba ay u socdaalaan sababo dhaqaale iyo fursado shaqo oo wanaagsan, iyadoo la tixgelinayo khibradaha kala duwan ee socdaalka ee ragga iyo dumarka. Waxay, sidoo kale, aqoonsanaysaa in shaqaalaha dumarka ah ee socdaalka ay la kulmaan fursado yar iyo takoor inta lagu jiro socdaalka, iyagoo wajahaya dhibaatooyin, sida xayiraadaha shaqo, shuruudaha waxbarasho, iyo xaq-jirnimo, taasoo badanaa sii xumaysa iyadoo ay jiraan dhibaatooyin kale oo lagu wajahayo, iyadoo loo marayo caddaalad-darro is-daba-joog ah oo ku saleysan arrimo badan.

“Socdaalka Shaqaalaha” waxaa loola jeedaa Socdaalka shaqaalaha ee ka dhaca dalalka kala duwan ama gudaha dalka ay ku nool yihiin si ay u helaan shaqo.

“Heerka Ka-qeyb-galka Suuqa Shaqada” waxaa loola jeedaa Awoodda shaqaalaha ee shaqada, boqolkiiba dadka da'da shaqada ku jira, ayaa muujinaysa heerka ka-qeybgalka suuqa shaqada.

“Xoogagga Shaqada (Labour Force)” waxaa loola jeedaa dhammaan dadka ku jira da'da shaqada, kuwa shaqeeya iyo kuwa aan shaqeyn.

“Shaqaalaha Socdaalka” waxaa loola jeedaa Qof socdaal ah ama qof ka soo guuray dal kale si uu shaqo u helo.

“Socdaal” waxaa loola jeedaa Dhaqdhaqaaqa dadka ee meel ka mid ah adduunka oo dhan, oo inta badan isaga gudba masaafo dheer oo ka mid ah waddan ilaa waddan kale ama gudaha waddanka, iyadoo socdaalka guduhu yahay qaabka ugu badan ee socdaalka aadanaha ee adduunka.

“Bed-qabka iyo Caafimaadka Goobta Shaqada” waxaa loola jeedaa Meeleynta iyo ilaalinta shaqaalaha ee degaanka goobta shaqada oo la waafajiyey awoodahooda jireed iyo maskaxeed.

“Wareejin Karaanka Xuquuqda” waxaa loola jeedaa Qaadashada Tallaabooyinka loogu talo-galay in lagu ilaaliyo xuquuqaha la helay ama habka helitaanka iyo bixinta manfacyada si ballaaran. Wareejintu waxay u baahan tahay iskaashi ka dhexeeya wadamada martida loo yahay iyo kuwa asal ahaan laga soo jeedo.

“Shirkadaha Shaqaaleysinta Gaarka” waxaa loola jeedaa qof dabiici ah ama qof leh shakhsiyad qaanuuneed ama hay’ad ka madax-bannaan maamul Dawladeed, oo bixisa hal ama in ka badan oo ka mid ah adeegyada la xiriira shaqada, sida ku cad Qodobka 1aad ee Heshiiska Hay’adaha Shaqaaleysiinta Gaarka ah ee ILO 1997 (Lambarka 181). Sidoo kale, waxaa loo yaqaan shirkadaha shaqaaleysiinta.

“Tababar Ka Hor Socdaalka” waxaa loola jeedaa Hab-raacyada loogu talo-galay dhisidda awoodda iyo bixinta macluumaad ku saabsan nidaamyada dal-ku-galka (visa) iyo rukhsadaha shaqada, dokumentiyada loo baahan yahay, sharciyada khuseeya ee ilaalinaya shaqaalaha, hay'adaha la xiriiri kara marka loo baahdo, iyo xiriirka ururrada qurbo-joogta ee dadka soo dhaweynaya.

“Shaqaaleysiin” waxaa loola jeedaa Hannaanka ka kooban xayeysiinta, faafinta macluumaadka, xulashada, meeleynta shaqo, iyo marka ay khuseyso, dib-u-celinta shaqaalaha socdaalaya (migrant workers) waddankii ay asal ahaan ka yimaadeen. Hannaankani wuxuu khuseeyaa shaqo-doonayaasha iyo kuwa hore u shaqeynayey ee ku jira xiriirka shaqo

“Waafaqsanaanta Xirfadaha” waxaa loola jeedaa Habab iyo tallaabooyin lagu kordhinayo shaqo- helidda shaqaalaha iyo yaraynta yaraanta xirfadaha iyadoo la buuxinayo shaqooyinka bannaan oo lagu meeleynayo shaqo-doonayaal aqoon iyo xirfad u leh.

“Wada-hadalka Bulshada” waxaa loola jeedaa Dhammaan noocyada wadahadallada, la-tashiga iyo is-weydaarsiga macluumaadka ee u dhexeeya wakiillada shaqaalaha, loo-shaqeeyeyaasha, iyo Dawladaha oo ku saabsan

danaha guud ee siyaasadaha dhaqaale, shaqo iyo bulshada, iyadoo ujeeddadu tahay in la siiyo daneeyeyaasha cod iyo saameyn ku saabsan arrimaha khuseeya bulshooyinka iyo goobaha shaqada.

"Wada-hawl-galeyaasha Bulshada" waxaa loola jeedaa Wakiillada maamulka iyo shaqaalaha (ururrada loo-shaqeeyeyaasha iyo ururrada shaqaalaha), iyo xaaladaha qaarkood, hay'adaha Dawladda iyo bulshada rayidka ah, kuwaasoo door ka ciyaara arrimaha la xiriira xiriirka shaqo iyo ka-qeyb-qaadashada wada-hadallada saddexgeesoodka ah (tripartite discussions) ee lala yeesho Dawladda.

"Daneeyeyaasha Saddex-geesoodka ah (Tripartite Constituents)" waxaa loola jeedaa Dawladda, ururrada loo-shaqeeyeyaasha, iyo ururrada shaqaalaha.

II. SOO-GAABIN ERAYO IYO WAXAY U TAAGAN YIHIIN

ERAYGA GAABSAN	MACNAHA UU U TAAGAN YAHAY
AU	Midowga Afrika (African Union)
BLA	Heshiiska Labo-geesoodka ah ee Shaqada (Bilateral Labour Agreement)
BLMAs	Heshiisyada Labo-geesoodka ah ee Socdaalka Shaqada (Bilateral Labour Migration Agreements)
BRMM	Maareynta Wanaagsan ee Socdaalka Gobol (Better Regional Migration Management)
CERD	Guddiga Ciribtirka Midab-takoorka (Committee on the Elimination of Racial Discrimination)
COMESA	Suuqa Wadajirka ah ee Bariga iyo Koonfurta Afrika (Common Market for East and Southern Africa)
CSOs	Ururrada Bulshada Rayidka ah (Civil Society Organizations)
DACs	Bulshooyinka Saameynta Ka Soo Gaartay Barakaca (Displacement Affected Communities)
DTM	Habka Daba-galka Barakaca (Displacement Tracking Matrix)

DWCP	Barnaamijka Shaqo Wanaagsan ee Dalalka (Decent Work Country Programme)
EAC	Bulshada Bariga Afrika (East African Community)
EASO	Xafiiska Taageerada Magangelyo-doonka ee Yurub

	(European Asylum Support Office)
ESCWA	Guddiga Dhaqaalaha iyo Bulshada ee Galbeedka Aasiya (Economic and Social Commission for Western Asia)
EU	Midowga Yurub (European Union)
FCDO	Xafiiska Arrimaha Dibadda, Barwaaqo-sooranka iyo Horumarinta (Foreign Commonwealth and Development Office)
FDI	Maal-gashiga Shisheeye ee Gudaha (Foreign Domestic Investment)
FESTU	Ururda Shaqaalaha Soomaaliyeed (Federation of Somali Trade Unions)
FMPT	Dhaqdhaqaaqa Xorta ah ee Dadka iyo Xoolaha (Free Movement of Persons and Transhumance)
FMS	Sahanka Daba-galka Socodka (Flow Monitoring Survey)
FRS	Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (Federal Republic of Somalia)
GCM	Heshiiska Caalamiga ah ee Socdaalka (Global Compact for Migration)
GCR	Heshiiska Caalamiga ah ee Qaxootiga (Global Compact on Refugees)
GDP	Wax-soo-saarka Guud ee Dalka (Gross Domestic Product)

GIZ	Wakaaladda Jarmalka ee Horumarinta Caalamiga ah (German International Cooperation - Gesellschaft für Internationale Zusammenarbeit)
HIV	Fayraska Dilaaga ah ee Difaaca Jirka (Human Immunodeficiency Virus)
ICLS	Shirweynaha Caalamiga ah ee Xog-ururinta Shaqada (International Conference of Labour Statisticians)
IDPs	Dadka Gudaha Ku Barakacay (Internally Displaced

	Persons)
IEC	Xoggaha, Waxbarasho iyo Wacyi-gelin (Information, Education and Communication)
IGAD	Urur Goboleedka Horumarinta ee IGAD (Intergovernmental Authority on Development)
ILO	Ururka Shaqaalaha Caalamiga ah (International Labour Organization)
IOM	Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (International Organization for Migration)
KPIs	Calaamadaha Lagu Qiimeeyo Waxqabadka (Key Performance Indicators)
LMIS	Nidaamka Macluumaadka Suuqa Shaqada (Labour Market Information System)
M&E	Kormeerka iyo Qiimeynta (Monitoring and Evaluation)
MDAs	Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha (Ministries, Departments and Agencies)
MoJCA	Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka (Ministry of Justice and Constitutional Affairs)
MoLSA	Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (Ministry of Labour and Social Affairs)

MPO	Falanqaynta Dhaqaalaha iyo Saboolnimada (Macro Poverty Outlook)
MWSS	Nidaamka Taageerada Shaqaalaha Socdaalaya (Migration Worker Support System)
NBS	Hay'adda Istaatitikada Qaranka (National Bureau of Statistics)
NCM	Hannaanka Iskuduwidda Qaranka (National Coordination Mechanism)
NDP	Qorsheha Horumarinta Qaranka (National Development Plan)
NGOs	Ururrada Aan Dawliga Ahayn (Non-Governmental

	Organizations)
NLFS	Sahanka Shaqada Qaranka (National Labour Force Survey)
ODA	Taageerada Horumarka Dibadda (Overseas Development Assistance)
PPP	Iskaashiga Dawladda iyo Shirkadaha Gaarka loo Leeyahay (Public-Private Partnerships)
PrEAs	Shirkadaha Shaqaaleysiint Gaarka loo Leeyahay (Private Recruitment and Employment Agencies)
PRMN	Shabakadda Ilaalinta iyo Daba-galka Dib-u-soocelinta (Protection and Return Monitoring Network)
PWD	Dadka Naafada Ah (Persons with Disabilities)
ReDSS	Xohaynta Xarunta Xalalka Waara ee Gobolka (Regional Durable Solutions Secretariat)
SCCI	Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed (Somalia Chamber of Commerce and Industry)
SDGs	Yoolalka Horumarka Waara (Sustainable Development Goals)

SNDP	Qorsheha Horumarinta Qaranka ee Soomaaliya (Somalia's National Development Plan)
SOM	Soomaaliya (Somalia)
STEM	Saynis, Tiknoolaji, Injineernimo iyo Xisaab (Science, Technology, Engineering and Mathematics)
SWOT	Xoogagga, Daciifnimada, Fursadaha, iyo Caqabadaha (Strengths, Weaknesses, Opportunities and Threats)
TVETs	Xarumaha Tababarka Farsamada iyo Xirfadaha (Technical, Vocational Education and Training Institutions)
TWG	Kooxda Farsamada ee Shaqada (Technical Working Group)
UN	Qaramada Midoobay (United Nations)
UNDP	Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay (United Nations Development Programme)
UNHCR	Xafiiska Qaramada Midoobay ee Qaxootiga (United Nations High Commissioner for Refugees)
UNOCHA	Xafiiska Qaramada Midoobay ee Isku-dubbaridka Gargaarka Bani'aadamnimo (United Nations Office for the Coordination of Humanitarian Affairs)
USD	Doollarka Mareykanka (United States Dollars)

III. DULMAR KOOBAN OO KU SAABSAN HIRGELINTA SIYAASADDAN

Siyaasaddan ayaa bixinaysa jihayn istiraatijiyadeed oo lagu maamulayo socdaalka shaqada ee Soomaaliya, iyadoo la higsanayo in la sameeyo nidaam ilaalinaya awoodna u siinaya shaqaalaha socdaalka ah, taasoo sare u qaadaysa kaalintooda ku aaddan horumarka qaranka Soomaaliya. Siyaasaddani waxay, sidoo kale, hagaysaa dadaallada lagu doonayo in lagu beddelo muuqaalka shaqada ee Soomaaliya, oo ay ku jirto kor-uqaadista aqoonta iyo xirfadaha bulshada si loo kordhiyo faa'iidooyinka fursadaha shaqo ee gudaha iyo dibadda, loona waafajiyo himmillooyinka guud ee horumarinta dalka.

IV. HIMMILLOOYINKA

In la helo Hannaan socdaal shaqao mideysan oo waara, kaasoo tixgelinaya kaladuwanaanshaha labada jinsi kuna saleysan xuquuqaha shaqaalaha si loogu horumariyo Qaranka.

V. HIGSIGA

Dhisidda hannaan dhammeystiran oo caddaalad ku dhisan, kaasoo fududeeya bedqabka iyo amaanka socdaalka shaqada.

VI. UJEEDDADA

Ujeeddada siyaasaddani waa Sare-u-qaadidda faa'idooyinka si loo horumariyo nolosha shaqaalaha socdaalka gudaha iyo dibadda.

VII. QIYAMKA ASAASIGA AH IYO MABAADI'DA HAGEYSA SIYAASADDAN

Siyaasaddan waxay ku saleysan tahay qiyam iyo mabaadi' ay ka mid yihiin:

1. Maamul-wanaagga iyo dhawrista sharciga.
2. Shaqo wanaagsan, oo ay ka mid tahay: bed-qabka iyo daryeelka shaqaalaha ee goobaha shaqada.
3. Awood-siin, ka-qeyb-galka, iyo sinnaanta.
4. Ilaalinta bulshada, cadaaladda iyo wada-xaajood bulsho.
5. Hufnaan iyo isla-xisaabtan.

6. Horumar waara.

VIII. UJEEDDOOYINKA ISTIRAATIJIYADEED EE SIYAASADDAN

Ujeeddooyinka muhiimka ah ee siyaasaddan waa:

1. Xoojinta maamul-wanaagga socdaalka shaqada iyadoo la waafajinayo halbeegyada iyo xeerarka caalamiga ah ee shaqada.
2. Horumarinta, tayeynta iyo aqoonsiga xirfadaha.
3. Ballaarinta ilaalinta iyo xuquuqda shaqaalaha socdaalaya iyo qoysaskooda.
4. Xoojinta doorka la-hawl-galeyaasha bulshada, bah-wadaagta horumarineed, iyo qeybaha ganacsiga gaarka ah.
5. Xoojinta xog-ururinta, maareynta, iyo faafinta xogta la xiriirta socdaalka shaqada.
6. Nidaaminta wakaaladaha Shaqaaleysiinta ee gaarka loo leeyahay.
7. Taageeridda nidaamyada dib-u-soo-celinta iyo dib-u-dhex-galka shaqaalaha dibadda ka soo laabta.
8. Horumarinta waxtarka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee qurbaha.

IX. MOWDUUCYO IS-DHEX-GALA (CROSS-CUTTING THEMES)

1. Si loo xaqiijiyo dhaqan-gal dhammeystiran oo tixgelinaya kala-duwanaanshaha jinsiga, iyadoo la raacayo hababka ugu wanaagsan ee caalamiga ah, Dawladdu waxay wax ka qabanaysaa arrimaha bulshada iyo dhaqaalaha.
2. U-hoggaansanaanta sinnaanta jinsiga.
3. Ka-qeyb-galka iyo xaqiijinta xuquuqda dadka naafada ah.
4. Yareynta nuglaanta bulshada.
5. Iskaashi caalami ah iyo taageerada Qunsuliyadaha.
6. Wada-shaqeynta Dawladda iyo Shirkadaha Gaarka loo leeyahay
7. Nabadaynta iyo xallinta khilaafaadka Isbeddelka cimillada, faafitaanka cudurrada saf-marka ah iyo arrimaha dabiiciga ah ee sababa guuritaan qasabka ah iyo barakaca.

X. FAL-GELIDDA SIYAASADDA IYO TALLAABOOYINKA LA SOO JEEDIYEY

Fal-gelidda siyaasadeed ee ugu weyn ee lagu hirgelinayo siyaasaddan laguna gaarayo ujeeddooyinkeeda waa:

Qeybta 1: Xoojinta Maamulka Socdaalka Shaqada

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Xoojinta Habka Iskuduwidda Qaranka

   Habka Iskuduwidda Qaranka ee hoos yimaad Xafiiska Madaxweynaha si loo hagaajiyo isku-xirka Hay'adaha muhiimka u ah fulinta siyaasadda (laga bilaabo heer Federaal ilaa heer Dawlad-goboleed).

2. Bilowga, gorgortanka, xoojinta, iyo dib-u-eegista Heshiisyada Socdaalka Shaqada ee Labo-geesoodka ah iyo kuwa Caalamiga ah (BLMAs & MLMAs), iyadoo la hormarinayo waddamada ay shaqaalaha Soomaalida ugu badan ku sugan yihiin.

3. Ansixinta, Meel-marinta, hirgelinta, iyo daba-galka hirgelinta heerarka shaqo ee caalamiga ah (heshiisyada, xeerarka, iyo ballan-qaadyada la xiriira socdaalka shaqada).

Qeybta 2: Horumarinta, Tayeynta iyo Aqoonsiga Xirfadaha

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Dhisidda Nidaamka Qaranka ee Qiimeynta Xirfadaha (National Skills Profiling Mechanism) si loo taageero baahiyaha suuqa shaqada iyo horumarinta xirfadaha ee Soomaaliya, Hirgelinta barnaamijyada Socdaalka Xirfadaha (Labour Mobility Schemes), oo diiradda saaraysa iskaashiga xirfadaha si kor loogu qaado horumarka xirfadeed ee kobaca Soomaaliya.

2. Maal-gelinta barnaamijyo kor loogu qaadayo xirfadaha iyo dib-u-tababaridda shaqaalaha socdaalaya ee gudaha iyo dibadda.

3. In la sameeyo shabakado iyo goobo shaqo-baahin oo heer kasta oo dawladeed, kuwaasoo xayeysiiya fursadaha shaqo iyo xirfadaha u baahan in la isku xiro, looshaqeeyeyaasha iyo kuwa shaqo-doonka ah ee jooga gudaha iyo dibadda Soomaaliya.

4. Kobcinta barnaamijyada isweydaarsiga aqoonta iyo xirfadaha ee shaqaalaha socdaalaya gudaha iyo dibadda.

5. Horumarinta nidaamyada taageeraya helitaanka macluumaadka, waxbarashada, tababarka, aqoonsiga xirfadaha, iyo helitaanka maal-gelinta shaqaalaha socdaalaya iyo qoysaskooda.

Qeybta 3: Ballaarinta Illaalinta Shaqaalaha iyo Daryeelka Bulshada ee Shaqaalaha Socdaalaya iyo Qoysaskooda

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Dib-u-eegista siyaasadaha, shuruucda, iyo barnaamijyada daryeelka bulshada si loogu daro shaqaalaha socdaalaya iyadoo lagu saleynayo mabda'a sinnaanta xuquuqda.
2. Xoojinta awoodda Hay'adaha iyadoo la sameynayo Mas'uuliyiinta Xiriirka ee illaalinta bulshada iyo xuquuqda shaqaalaha socdaalaya ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) iyo Hay'adaha la xiriira. Sidoo kale, waxaa la dhisayaa Guddi saddex-geesood ah (tripartite committee) oo horumarinaya aqoonta gudaha ee daryeelka bulshada ee shaqaalaha socdaalaya iyadoo lala kaashanayo la-hawl-galeyaasha bulsheed ee dawliga iyo kuwa maxalliga.
3. Sameynta heshiisyo Shaqo oo labo-geesood ah (BLAs) oo ay ku jiraan qodobbo daryeelka bulshada, iyo/ama heshiisyada daryeelka bulshada oo dhinacyo badan leh, si loo hubiyo qaadista iyo wanaajinta dheefaha ama faa'iidooyinka..
4. Taageeridda hirgelinta Xeerarka Suuqa Wadajirka ah ee Bulshada Bariga Afrika (EAC Common Market) ee 2023, si loo hagaajiyo iskuduwidda xuquuqda iyo faa'iidooyinka bulshada.

Qeybta 4: Siyaasadda Xoojinta Doorka La-hawl-galeyaasha Bulshada, Bah-wadaagta Horumarineed iyo Qeybaha Ganacsiga Gaarka Ah

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Kor-u-qaadidda awoodda la-hawl-galeyaasha bulshada si ay uga qeyb-qaataan wada-hadalka bulshada ee la xiriira socdaalka shaqada.
2. Taageeridda la-hawl-galeyaasha bulshada iyadoo la bixinayo macluumaad iyo barnaamijyo awood-siineed si ay shaqaalaha socdaalaya uga caawiyaan abaabulkooda iyo u-doodista xuquuqdooda.
3. Taageeridda doorka la-hawl-galeyaasha bulshada ee ku aaddan difaacidda xuquuqda shaqaalaha socdaalaya, helitaanka cadaalad.
4. Xoojinta iskaashiga Dawladda, daneeyeyaasha horumarka iyo qeybaha gaarka loo leeyahay.

Qeybta 5: Xoojinta Xog-ururinta, Maareynta, iyo Faafinta Xogta La Xiriirta Socdaalka Shaqada

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Dhiirri-gelinta in lagu daro arrimaha socdaalka shaqada ee nidaamka macluumaadka suuqa shaqada (Labour Market Information System - LMIS).
2. Sameynta Qaab-dhismeedka xog-ururinta ee la xiriita socdaalka shaqaalaha, si joogto ahna loogu warbixiyo dhaqdhaqaaqa shaqaalaha socdaalaya iyo sifooyinkooda, iyadoo la raacayo talooyinka Shirweynaha Caalamiga ah ee Xogururinta Shaqada (ICLS).
3. In sahanno xilliyeed loo sameeyo xoogga shaqada, oo ay ku jiraan qeybo gaar ah oo ku saabsan socdaalka shaqada, si loo bixiyo xogta socdaalka shaqada iyo maamulka qurba-joogta, iyadoo la raacayo talooyinka Shirka Caalamiga ah ee Tiro-koobka Shaqada.
4. Kor-u-qaadidda awoodda Dawladda iyo qaab-dhismeedyadeeda si loo soo ururiyo, loo falanqeeyo, loona faafiyo xogta la xiriirta socdaalka shaqada, iyadoo la hubinayo kala-soocidda xogta sida jinsiga iyo sifooyinka kale ee la xiriira, xaqiijinta in xogta la heli karo guud ahaan Dawladda iyo dadweynaha (si ay uga faa'iidaystaan warbaahinta, jaamacadaha, ururrada bulshada, daneeyeyaasha horumarka, iyo Hay'adaha kale ee aan Dawliga ahayn).

Qeybta 6: Nidaaminta Wakaaladaha Shaqaaleysiinta ee Gaarka

Loo Leeyahay

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Dejinta qaab-dhismeedka sharciga, siyaasadda iyo hab-raacyada hay'adaha shaqaaleysiinta ee gaarka loo leeyahay.
2. Dhaqan-gelinta hab-raacyada habaynta iyo daba-galka hay'adaha shaqaaleysiinta ee gaarka loo leeyahay.
3. Dhisidda barnaamijyo dhisaya awoodda shirkadaha shaqaaleysiinta gaarka loo leeyahay si loo xaqiijiyo shaqaaleysiin caddaalad ah, iyo xoojinta awooddooda si ay u hirgeliyaan habab la jaan-qaadaya sinnaanta jinsiga dhammaan nidaamyada socdaalka shaqada, laga bilaabo hawlaha dhoofitaanka ka hor ee shaqaalaha (predeparture processes) Tababarka,

Imaanshaha dalka shaqada, qorsheha dib-unoqoshada iyo dib-u-dhex-gelinta shaqaalaha.

4. Nidaaminta hab-dhaqanka wakaaladaha shaqaaleysiinta iyadoo la sameynayo hagayaal sharci oo si siman loo fulin karo.

Qeybta 7: Taageeridda Nidaamyada Dib-u-soo celinta iyo Dib-udhex-gelinta Shaqaalaha Socdaalaya

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Taageeridda Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) si ay u saadaaliso uguna diyaar-garowdo soo-laabashada shaqaalaha socdaalka ah. Waxaa la dhisayaa hannaan lagu bixiyo macluumaad, tababar, iyo kaalmo sharci (ama talo sharci) si dib-u-soo-noqdeyaashu ugu dhex milmaan dalka, iyadoo la kaashanayo shirkadaha shaqaaleysiinta ee gaarka loo leeyahay iyo xarumaha waxbarashada farsamada iyo xirfadaha (TVET).

2. Taageeridda dadaallada ay sameynayaan Hay'adaha dhexdhexaadiyeyaasha maaliyadeed si ay u bixiyaan adeegyada maaliyadeed (tusaale, xisaabaadka kuwa aan deganeyn dalka) si looga hortago khasaaraha maaliyadeed ee shaqaalaha socdaalaya iyo in la hubiyo xorriyadooda maaliyadeed.

3. Fududeynta nidaamyada xawilaadaha iyadoo la adkaynayo Qaab-dhismeedka la xiriira wareejinta xuquuqda daryeelka bulshada.

4. Xoojinta nidaamka dib-u-mideynta qoysaska iyo carruurta shaqaalaha socdaalaya ee dalka dib ugu soo laabanaya, iyadoo la dhex-gelinayo nidaamka waxbarashada iyo tababarka xirfadaha ee dalka.

5. Dhisidda hannaan daba-gal degdeg ah oo awood u leh in lagu soo gudbiyo cabashooyinka lana bixiyo mag-dhaw si loo hubiyo in caqabadaha soo if-baxa inta lagu jiro kala-guurka shaqaalaha laga soo celinayo ilaa ay si buuxda u dhexgalaan bulshadooda.

Qeybta 8: Horumarinta Waxtarka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Qurba- joogta Ah

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Dhisidda iyo xoojinta adeegyada Qunsuliyadaha iyo u-qeybsanayaasha shaqada

(oo ay ku jiraan hababka cabashooyinka iyo wax-ka-qabashadooda) ee safaaradaha, Ergooyinka, iyo qunsuliyadaha dibadda si loo sameeyo sahanno dhammeystiran oo la xirira xaaladda jaaliyadaha Soomaaliyeed (marka la eego tirada, goobta, xirfadaha, jinsiga, iyo adeegyada loo baahan yahay).

2. Taageeridda shaqada shabakadaha iyo ururrada jaaliyadaha dibadda si ay uga qeyb-qaataan taageeridda shaqaalaha socdaalaya.

3. Dhisidda iyo dardar-gelinta xarunta isku-xirka jaaliyadaha Soomaaliyeed.

4. Kor-u-qaadidda wacyi-gelinta dadweynaha iyo siyaasad-dejiyeyaasha ee ku aaddan ka-qeyb-qaadashada horumarka Qaranka.

XI. HANNAANKA FULINTA SIYAASADDAN

1. Iyadoo uu kormeerayo Xafiiska Madaxweynaha, Xukuumaddu waxay xoojinaysaa habka Isku-dubbaridka Socdaalka Qaranka. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha oo hoggaaminaya hay'adaha fulinta ayaa kormeeraya meel-marinta siyaasaddan, iyadoo la kaashanayo Golaha Wasiirrada iyo Baarlamaanka.

2. Hannaanka Iskuduwidda Qaranku wuxuu taageero ka helayaa Guddiga Iskudubbaridka Socdaalka Shaqaalaha, oo ay ku jiraan wasaaradaha iyo hay'adaha xirirka la leh, oo ay horjooge ka tahay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada. Xafiiska Madaxweynaha waxaa matalaya Ergeyga Gaarka ah oo u xilsaaran Arrimaha Socdaalka, Shaqaalaha Dib u soo laabanaya iyo Xuquuqda Caruurta. Guddigan Isku-dubbaridku waxay bixinayaan siyaasad iyo hagitaan istaraatijiyadeed oo ku saabsan arrimaha socdaalka shaqaalaha wuxuuna ka shaqeynayaa hirgelinta qaraarrada la xiriira siyaasaddan.

3. Si loo ogeysiiyo tallaabooyinka siyaasadda, Wasaaradda waxay xoojinaysaa Xarunta Qaranka ee Kheyraadka Dijitaalka Socdaalka si loo ururiyo xog muhiim ah oo la xiriirta isbeddellada socdaalka shaqada. Wasaarradda, iyadoo adeegsanaysa madal la-hawl-galeyaasha bulshada, waxay la shaqeynaysaa ururrada shaqaalaha iyo shaqo-bixiyeyaasha, oo ay ka mid yihiin Ururka Shaqaalaha Soomaaliyeed, Rugta Ganacsiga Soomaaliyeed, Jaaliyadaha Dibadda, daneeyeyaasha horumarka iyo Hay'adaha aan Dawliga ahayn, si loo dardar-geliyo hirgelinta siyaasaddan.

4. Heer Dawlad-goboleed, siyaasaddan waxaa laga hirgelinayaa dhammaan gobollada dalka iyadoo ay hoggaaminayaan Agaasimeyaasha Guud, oo ay hoos yimaadaan Saraakiisha Shaqada ee Wasaaradaha Shaqada oo ka hawl-gelaya Waax Shaqo oo si buuxda loo asaasay. Shaqaalaha socdaalaya

ee gudaha iyo dibadda waxay noqonayaan kuwa ugu faa'iidada badan, iyadoo la hubinayo in siyaasaddan ay kor u qaaddo fursadaha ay ka helayaan socdaalka shaqada.

XII. FURSADAHA MAAL-GELINTA

Iyadoo laga duulayo caqabadaha maaliyadeed iyo kheyraadka xaddidan ee dalka, Dawladdu waxay adeegsanaysaa habab kala duwan oo lagu maal-gelinayo hirgelinta siyaasaddan, kuwaasoo kala ah:

1. Miisaaniyadda loo qoondeeyey Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladeed ee ka timaadda miisaaniyadda Qaranka.
2. Taageero laga helo daneeyeyaasha horumarka iyo Hay'adaha caalamiga ah.
3. Kheyraadka laga soo ururiyo gudaha dalka iyadoo loo marayo ilo dakhli oo aan cashuur ahayn.
4. Maal-gelin laga helo iskaashiga Dawladda iyo Shirkadaha Gaarka loo leeyahay.
5. Deymo iyo deeqo, oo ay ku jiraan deymaha fudud ee Dawladda ay codsan karto si loo fuliyo mashaariic muhiim ah.
6. Isticmaalka sanduuqa Saamiyada gaarka loo leeyahay iyo xirmooyinka maaliyadeed ee hay'adaha maaliyadeed.
7. Ilaha maal-gelineed ee kale (oo ay ku jiraan maaliyadda cimillada) iyo dhaqaaleururinta Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Dibadda.

XIII. GAARSIINTA IYO FAAFINTA SIYAASADDAN

Siyaasaddan waxaa la gaarsiinayaa qeybaha kala duwan ee bulshada iyadoo la adeegsanayo habab kala duwan oo isgaarsiineed si loogu waafajiyo baahiyahooda gaarka ah.

XIV. GAARSIINTA XUKUUMADDA IYO HAY'ADAHA KALE EE DAWLADDA

Waxaa dib-u-eegis loogu sameynayaa hab-raac la mid ah habr-aacii lagu ansixiyey, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda. Nuqulka siyaasaddan oo kooban ayaa loo gudbinayaa dhammaan wasaaradaha iyo waaxyaha dawladda, heer federaal, heer dawlad-goboleed iyo dhammaan hay'adaha ay khuseyso, iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

XV. GAARSIINTA LA-HAWL-GALEYAASHA BULSHADA

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada oo matalaysa dhinaca Dawladda ee Qaabdhismeedka saddex geesoodka ah waxay adeegsanaysaa xiriiro shabakado, wada-hadallo bulsho, shirar, aqoon-isweydaarsiyo, wargelin warbaahineed iyo Wargeysyo, si loo gaarsiiyo siyaasaddan la-hawl-galeyaasha bulshada.

XVI. GAARSIINTA SHAQAALAHA SOCDAALAYA (GUDAHA IYO DIBADDA)

Si loo xariiriyo shaqaalaha socdaalka ee dibadda u baxaya, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxay sameynaysaa dadaallo kala duwan oo isgaarsiineed, kuwaasoo ka mid ah barnaamijyo laga sii-daayo idaacadaha iyo telefishinnada, shirar, kulammo bulshada lala yeesho, iyo is-dhex-gal fogaan arag ah oo lala yeesho muwaadiniinta Soomaaliyeed ee qurbaha ku nool, baraha bulshada, iyo mareegyadeeda ee is-dhex-galka leh.

Dhanka shaqaalaha socdaalka ee gudaha soo galaya, farriimo si gaar ah loogu talo-galay ayaa la diyaarinayaa si ay u daboolaan baahidooda xogeed, kuwaasoo ay ka mid yihiin siyaasaddan, siyaasado la xiriira, nidaamyada sharci, iyo adeegyada ay Dawladda u fidinayso.

Ururka Shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu adeegsanayaa xaruntiisa la xiriirta socdaalka iyo habab kale si uu siyaasaddan ugu faafiyo daneeyeyaasha ay khuseyso.

XVII. GAARSIINTA DAWLADAHA DALALKA MARTIDA LOO YAHAY

Dawladdu waxay adeegsanaysaa safaaradaha, xarumaha diblomaasiyadeed, iyo qunsuliyadaha dibadda si ay ula xiriirto Dawladaha dalalka ay shaqaalaha Soomaaliyeed u socdaalaan ama ka shaqeeyaan. Sidoo kale, Dawladda waxay ka faa'iidaysanaysaa teknoolojiyadda casriga ah iyo aaladaha isgaarsiinta si loo hagaajiyo hufnaanta isgaarsiinta iyo gudbinta macluumaadka muhiimka ah ee la xiriira shaqaalaha socdaalka ah.

XVIII. KORMEERKA IYO QIIMEYNTA SIYAASADDA

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa hoggaaminaysa kormeerka joogtada ah ee hirgelinta siyaasaddan, waxayna mas'uul ka noqonaysaa qiimeynteeda. Wasaaraddu waxay natiijada dib-u-eegista iyo qiimeynta siyaasadda u gudbinaysaa Guddiga Iskuduwidda Qaranka, waxayna warbixino iyo talooyin cusub u gudbinaysaa Wasaaradda Qorsheynta iyo Xafiiska Tiro-koobka Qaranka.

Dhammaan hawl-wadeennada fulinta waxaa looga baahnaanayaa inay la socdaan dhaqdhaqaaqyada sida ku qeexan siyaasaddan oo ay soo gudbiyaan warbixin sannadeedka horumarka. Sahan asaasi ah ayaa la sameynayaa sanadka ugu horeeya ee dhaqan-gelinta siyaasaddan si loo ururiyo macluumaadka iyo xogta heerka bilowga ah ee socdaalka shaqada, kaasoo lagu go'aaminayo ujeeddooyinkan siyaasadeed:

1. Dib-u-eegis sanadeed oo ku saabsan waxqabadka ayaa la sameynayaa si loo cabbiro horumarka.
2. Dib-u-eegis dhexdhexaad ah ayaa la sameynayaa si loo qiimeeyo waxqabadka siyaasadda.
3. Dib-u-eegis lagu sameeyo qaab-dhismeedka fulinta siyaasadda ayaa la soo jeedinayaa Dhammaadka muddada hirgelinta siyaasadda.
4. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa loo xilsaarayaa sameynta qiimeynta ugu dambeysa, taasoo gacan ka geysanaysaa dejinta siyaasadda soo socoto ka dib 10 (toban) sano oo fulin ah.

1. Hordhac iyo Falanqayn Xaaladeed

Siyaasaddani waxay dawladda iyo bulshada siinaysaa jihayn istaraatijiyadeed oo dhammeystiran oo ku aaddan maamulka socdaalka shaqada ee gudaha iyo dibadda Soomaaliya, Waxay ku saleysan tahay hab xasaasi ah oo ku saleysan sinnaanta jinsiga iyo ilaalinta xuquuqaha si loo xaqiijiyo qaab badbaado leh, nidaamsan oo joogto ah oo loogu talo-galay socdaalka shaqada ee dalka.

Siyaasaddan waxaa sidoo kale loo dejiyey inay hagto faragelinta loogu talo-galay in lagu taageero isbeddelka muuqaalka shaqada ee Soomaaliya, taasoo ay ku jirto koru-qaadidda xirfadaha shaqo ee bulshada si loo wanaajiyo fursadaha shaqo ee gudaha iyo dibadda.

1.1 Xogta Dadweynaha, Dhaqaalaha iyo Xaaladda Shaqooyinka

Waxaa la qiyaasayaa in tirada guud ee shacabka Soomaaliyeed ay gaartay 20 milyan, iyadoo dhaqaalaha dalka uu ku tiirsan yahay adeegyada (gaar ahaan ganacsiga), beeraleyda la nooshahay dalagyada iyo kalluumeysiga. Qeybta ugu badan ee bulshada waxay ka shaqeysaa Beeraha iyo xoolaha nool, iyadoo beeraha ay ka qeybqaataan 80.3% GDP-ga guud ee dalka.

Sanadkii 2023, GDP-ga Soomaaliya wuxuu ahaa $10.42 bilyan, halka dakhliga qofkiiba uu ahaa $592 sanadkii. Kobaca dhaqaalaha dalka wuxuu u dhexeeyey 2-3% muddadii u dhaxaysay 2019-2023, waxaana la saadaalinayaa inuu kor u kaco ilaa 3.1% sanadka 2024, taasoo ka sarreynaysa heerka kororka dadka oo lagu qiyaasay
2.92%.

In kasta oo la saadaalinayo koror dhaqaale, haddana dalka wuxuu wajahayaa caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin soo-xareynta dakhliga gudaha oo

hooseeya iyo heerka faqriga oo sarreeya, taasoo ka sii dhigtay amni-darro joogto ah. Sidaas darteed, dadaallada lagu soo jiidanayo maal-gashiga tooska ah ee shisheeye iyo dhiirri-gelinta ganacsiga gaarka loo leeyahay waxay muhiim u yihiin horumarka dhaqaale ee dalka, abuurista fursado shaqo, iyo dhimista heerka faqriga ee haatan jira.

1 .2 Muuqaalka Shaqada iyo Baahida Kor-u-qaadista Xirfadaha Si Tartiib

Tartiiib Ah

Dhallinyarada Soomaaliya waxay haystaan fursad weyn oo lagu horumarin karo dhaqaalaha dalka. Si kastaba ha ahaatee, shaqo-la'aanta dhallinyarada, gaar ahaan kuwa wax bartay, waxay weli tahay caqabad weyn. Dhallinyarada leh xirfado qiimo leh ayaa inta badan u hayaama dibadda iyagoo raadinaya fursado shaqo oo ka wanaagsan.

Sanadkii 2021, heerka wax aqriska iyo qoraalka Soomaaliya wuxuu ahaa 41.03%. Heerka ka-qeyb-galka xoogga shaqaalaha ee qeybta rasmiga ah wuxuu ahaa 15.9% sanadkii 2022, halka heerka guud ee shaqo-la'aantu uu gaaray 19.3%, iyadoo heerka shaqo-la'aanta dhallinyarada gaar ahaan uu aad u sarreeyey, oo gaaray 34.6%.

Dadka Soomaaliyeed intooda badan waxay ka shaqeeyaan qeybaha (sector-ka) adeegyada, gaar ahaan: Ganacsiga (tafaariiqda iyo jumlada) – 48% Beeraha iyo dhirta – 24% Shaqooyinka guryaha iyo adeegga gudaha – 17% Dhismayaasha, marti-gelinta iyo adeegyada hoteellada – 11%. Sida lagu sheegay warbixinta IOM Shaxda Daba-galka Barakaca ee 2023, 59% haweenka iyo 18% ragga ah ee shaqaalaha socdaalka ah ee ka shaqeeya dibadda waxay sheegeen inaysan haysan wax shahaado waxbarasho ah. Warbixinta DTM waxay ku salaysnayd xog laga qaaday 1,628 qof, oo ay ka mid ahaayeen 926 rag ah iyo 702 dumar ah.

Sida warbixinta lagu sheegay: Keliya 8.2% dadka la wareystay waxay dhammeeyeen heer jaamacadeed (7.4%) ama waxbarasho farsamo (0.8%). Keliya 0.5% ayaa haystay shahaado tababar shaqo. Laga soo bilaabo 2021, keliya 8.2% shaqaalaha socdaalka Soomaaliyeed waxay ka shaqeynayeen qeybaha shaqooyinka Heshiiska Adeegyada Xirfadeed.

Iyadoo la eegayo heerka hadda ee xirfadaha iyo tababarrada, Dawladda waxay u jeedaa inay dejiso jihada siyaasadeed ee xaqiijinaysa xuquuqaha shaqaalaha socdaalaya gudaha iyo dibadda, iyadoo abuuraysa jawi shaqo-sharafeed oo nidaamsan, taasoo gacan ka geysanaysa kobcinta shakhsiyaadka iyo horumarinta qaranka.

1. 3 Muuqaalka Socdaalka Soomaaliya

Soomaaliya waa dal socdaal badan leh oo ah dal laga tahriibo, loo tahriibo, oo marin u ah socdaalka ka gudba Geeska Afrika iyo meelo kale. Dalka wuxuu wajahaya caqabado la xiriira abuurista shaqooyin iyo fursado ku filan, iyadoo heerka shaqola'aantu uu gaarayo 19.29%.

Faqriga iyo Saboolnimadu waxay si baahsan ugu fidsan yihiin bulshada, iyadoo in ka badan 60% dadweynaha ay ku nool yihiin wax ka yar $1.90 maalintii. Heerka wax aqriska iyo qoraalka ee Soomaaliya wuxuu taagan yahay 41.03%.

Ka-qeyb-galka Suuqa Shaqada waxaa jira farqi weyn oo u dhexeeya jinsiga marka la eego ka-qeyb-galka shaqada. 33% ragga iyo 12% dumarka ayaa si firfircoon uga shaqeeya suuqa shaqada. Dawladda Soomaaliya, iyadoo loo marayo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA), waxay la shaqeynaysaa bah-wadaagta horumarineed si loo dhiso Hay'ado adag oo tag leh.

Soomaaliya waxay leedahay dhallinyaro, taasoo awood u leh inay horseedo koboc dhaqaale. Si kastaba ha ahaatee, shaqo-la'aanta dhallinyarada ayaa weli caqabad weyn ah, gaar ahaan kuwa wax bartay. Shakhsiyaadka leh xirfado qiimo leh ayaa aad ugu dhow inay ka hayaamaan dalka iyagoo raadinaya fursado shaqo oo wanaagsan.

1.3.1 Qaxootiga iyo Magan-gelyo-doonka

Sida laga soo xigtay xogta Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan qaxootiga (UNHCR), laga soo bilaabo Abriil 2023, waxaa jiray 685,198 qaxooti Soomaali ah, oo u badan dalalka deriska ah, oo ay ugu horreyso Kenya (301,526) iyo Itoobiya (253,616). Sannadkii 2020, Soomaaliya waxay marti-gelisay 35,461 qaxooti iyo magan-gelyo-doon ah oo u diiwaan-gashan, badina waxay ka yimaadeen Itoobiya (23,701). Soomaaliya waxaa kale oo ay leedahay jaaliyado aad u badan oo qurbojoog ah, oo lagu qiyaaso 1-1.5 milyan oo qof, oo ay ugu horreeyaan Boqortooyada Midowday (UK), Netherlands, Norway, Sweden, Mareykanka, Kanada, iyo Australia (FMPT, 2022).

1.3.2 Socdaalka Soo-galootiga

Socdaalka gudaha wuxuu ka kooban yahay dadka gudaha ku barakacay iyo qaxootiga. Warbixinta Shabakadda Ilaalinta iyo Daba-galka Soo-noqoshada ee UNHCR (PRMN) waxay sheegtay in sannadkii 2023 ay jireen in ka badan 1.2 milyan oo qof oo cusub oo gudaha ku barakacay. Warbixinta IOM Shaxda Daba-galka Barakaca (Displacement Tracking Matrix (DTM) ee 2021 ee Soomaaliya waxay muujisay in ay jireen 121,671 qof oo dalka soo galay, kuwaasoo intooda badan ka yimid Itoobiya (66%), Kenya (13%), iyo Jabuuti (10%).

Sannadkii 2020, waxaa Soomaaliya ka baxay 159,812 qof, iyagoo aaday badankooda Itoobiya (46%), Sucuudiga (23%), Yemen (15%), Kenya (11%), iyo Jabuuti (6%).

Sida laga soo xigtay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA), muddo 2 (labo) sano ah waxaa Soomaaliya lagu bixiyey qiyaastii 15,000 rukhsado shaqo, kuwaasoo intooda badan la siiyey muwaadiniinta Uganda, Kenya, Hindiya, Boqortooyada Midowday (UK), Pakistan, iyo Bangladesh.

Sida lagu xusay Warbixinta Horumarka Aadanaha ee Isku-dhafan (Integral Human Development Report 2024) oo ay WSHAB (MoLSA) wax ka diyaarisay, inta badan shaqaalaha ajaanibta ah ee yimaad Soomaaliya waxay ka shaqeeyaan jagooyinka kala ah La-taliye iyo shaqaalaha ka tirsan Hay'adaha caalamiga ah ee aan Dawliga ahayn (NGOs) iyo ururrada bulshada rayidka (CSOs), Shaqaale dhanka amniga ah, Shaqaalaha dhismaha. Tuubooleyda iyo farsamo-yaqaannada gaarka ah (inta badan heshiisyo kooban), Shaqaalaha ka hawl-gala hoteellada, hawlaha bini'aadannimada iyo waaxda marti-gelinta. Si kastaba ha ahaatee, ma jiro xog qeexan oo muujinaysa sida loo kala qeybiyey shaqaalaha ajaanibta ee haysta rukhsadaha shaqo, taasoo sabab u ah qaab-dhismeed iyo nidaamyo-la'aan lagu daba-galo xogtooda.

1.3.3 Socdaalka Shaqaalaha Dibadda

Waddooyinka ugu badan ee ay shaqaalaha socdaalka Soomaaliyeed u maraan dibadda waa saddex waddo oo waaweyn:

1. Badda – Iyagoo ka tallaabaya badda si ay u gaaraan Yemen, ka dibna uga sii gudbaya waddamada Khaliijka. Si kastaba ha ahaatee, waddadan ayaa hoos u dhacday tan iyo 2015, sababo la xiriira dagaalka Yemen.
2. Jidka Koonfureed – Iyagoo mara Kenya, ka dibna uga sii gudbaya dhanka Koonfur Afrika.
3. Jidka Galbeed – Iyagoo mara Sudan iyo Libya, iyagoo rajeynaya inay ka tallaabaan Badda Mediterraneanka si ay u gaaraan Yurub.

Weli ma jirto xog la cusboonaysiiyey oo ku saabsan socdaalka aan sharciyeysnayn (irregular migration).

Dawladda Soomaaliya waxay dhammeystirtay Heshiiska Shaqo ee labo-geesood (Bilateral Labour Agreement (BLA)) ee u dhexeeya JFS iyo Qatar, waxaana heer gebagabo ah maraya heshiis la mid ah oo ay la leedahay Boqortooyada Sacuudi Carabiya, taasoo ah waddanka marti-geliya inta badan shaqaalaha socdaalka Soomaaliyeed, gaar ahaan haweenka.

1.3.4. Ka-qeyb-galka Jaaliyadaha Soomaaliyeed

Soomaaliya waxay leedahay jaaliyado ballaaran oo ku kala firirsan daafaha caalamka, iyadoo lagu qiyaasay in ay ku nool yihiin 2 (labo) milyan oo Soomaali ah waddamada kala ah: **Boqortooyada Midowday (UK), Holland, Norway, Sweden, Mareykanka (USA), Kanada, Koonfur Afrika, Australia (FMPT, 2020).**

1.3.5 Lacagaha ay Dibadda Ka Soo Diraan Jaaliyadaha

Socdaalka shaqaalaha iyo doorkiisa ku aaddan horumarka dhaqaale waa ududbdhexaadka siyaasaddan. Jaaliyadaha Soomaaliyeed waxay door muhiim ah ka ciyaaraan horumarka Dalka, gaar ahaan marka la eego lacagaha ay dibadda ka soo diraan (remittances). Sanadihii 2023 iyo 2024, lacagaha ay jaaliyaduhu u soo direen Soomaaliya waxaa lagu qiyaasay inay u dhaxayso $1.73 bilyan ilaa $2 bilyan. Lacagtan ay dirayaan jaaliyaduhu waxay dhaaftay qiimaha guud ee dhoofinta Soomaaliya sanadkii. Waxay kaalinta labaad kaga jirtaa dhaqaalaha Soomaaliya, iyadoo ka dambeysa oo keliya Gargaarka Horumarinta Dibadda (Overseas Development Assistance - ODA), kaasoo gaaray $2.6 bilyan sanadkii 2023.

1.4 Qaab-dhismeedka Maamulka Socdaalka Shaqada

Marka la eego heerka caalamiga ah, Soomaaliya waxay ansixisay 26 Heshiisyo Caalami ah ee ILO, 22 ka mid ah hadda waa dhaqan-gal. Kuwaas waxaa ka mid ah 8 (siddeed) heshiis oo asaasi ah (C097 iyo C143). Bishii Feberaayo 2021, Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa ansixiyey 7 (toddobo) Heshiisyo Caalami ah oo dheeraad ah oo ILO ah isagoo ka wakiil ah Xukuumadda JFS.

Heerka Qaranka, Hannaanka Iskuduwidda Qaranka ee Socdaalka (NCM) waxaa dib loo asaasay 2023, waxaana la hoos geeyey Xafiiska Madaxweynaha JFS. NCM wuxuu ka kooban yahay saddex guddi-hoosaad oo ay ku jiraan (FESTU).

Heer Qaran: Hannaanka Iskuduwidda Qaranka ee Socdaalka (NCM) waxaa dib loo asaasay 2023, wuxuuna hoos imaanayaa Xafiiska Madaxweynaha, wuxuu ka kooban yahay 3 (saddex) kooxood oo hawl fulin ah:

- **Kooxda Hawl-fulinta ee Maareynta Socdaalka:** Hoggaaminaysa horumarinta siyaasadaha shaqo iyo shuruucda heer qaran, si waafaqsan heerarka iyo xeerarka caalamiga ah. Waxaa hoggaaminaya Wasaaradda Amniga Gudaha.
- **Kooxda Farsamo ee La-dagaallanka Tahriibka iyo Ka-ganacsiga Dadka:** Waxaa si wadajir ah u guddoominaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka, iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha

Dastuurka, Xukuumadda JFS. Waxay taageertaa hirgelinta siyaasadaha iyo xeerarka la xiriira socdaalka.

- **Kooxda Farsamo ee Soo-celinta iyo Dib-u-qaadashada Shaqaalaha Soomaaliyeed ee Tahriibay:** Waxay isku-dubbaridaa soo-celinta iyo dib-uqaadashada shaqaalaha Soomaaliyeed ee qurbaha ku nool.

Hannaanka Iskuduwidda Qaranka ee Socdaalka wuxuu bixiyaa qaab-dhismeed maamul oo hagaya, wadaagaya xogta, nidaaminayaa dadaalada lagu hirgelinayo siyaasadda qaran ee socdaalka. Sanadkii 2024, Xafiiska Madaxweynaha wuxuu marti-geliyey Ergeyga Gaarka ah ee Xuquuqda Carruurta iyo Muhaajiriinta, Iyadoo taageero laga helayo UNHCR, ILO, iyo IOM, waxaa la dhisayaa Koox Farsamo oo Socdaal Iskudhafan, taasoo wax ka taraysa kooxaha heer federaal ee maareynta socdaalka.

Bishii Maarso 2024, waxaa la asaasay Guddiga Isuduwidda Qaranka ee Socdaalka Shaqada, kaasoo hoos imaanaya NCM. Dawladda, iyadoo loo marayo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, oo kaashanaysa ILO iyo IOM, waxay dhistay guddigan oo ay xubno ka yihiin hay'adaha soo socda:

1. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada;
2. Wasaaradda Arrimaha Dibadda & IC – Waaxda Qurbo-joogta;
3. Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha;
4. Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka;
5. Xafiiska Tiro-koobka Qaranka ee Soomaaliya; 6. Ururka Xiriirka Shaqaalaha Soomaaliyeed (FESTU); iyo
7. Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliya (SCCI).

Jaantus muujinaya Qaab-dhismeedka Hay'adaha iyo nidaamka maamulka socdaalka shaqada wuxuu ku xusan yahay Qeybta 4.4 ee dokumintigan.

Shantii sano ee la soo dhaafay, waxaa muuqday horumar dhanka wada-shaqeynta ah oo u dhexeeya Dawladda iyo la-hawl-galeyaasha bulshada, iyadoo la adeegsanayo wadahadal saddex-geesood ah. Shaqaalaha socdaalka waxay billaabeen ka-qeyb-galka ururrada shaqaalaha ee Soomaaliya, gaar ahaan iyadoo loo marayo Taageerada ILO, FESTU waxay horumarisay una ansixisay istiraatijiyad abaabul oo shaqaalaha socdaalka u saamaxaysa inay helaan wakiillo matala, Tani waxay u fududeysay inay si firfircoon uga qeyb-qaataan shaqooyinka ay qabtaan ururrada shaqaalaha iyo arrimaha la xiriira gorgortanka wadajirka ah. Sidaas darteed, waa lama-huraan ah in FESTU ay sii wado dadaalladeeda wacyi-gelinta iyo xoojinta shaqaalaha socdaalka, si ay u helaan xuquuqohooda, loona horumariyo xaaladooda shaqo ee u baahan fiiro gaar ah.

1.5 Xaaladda Dhibaatada iyo Sababaha Asaasiga ah ee Siyaasaddan

Maamulka socdaalka shaqada ee Soomaaliya wuxuu daciif ka yahay xagga iskuduwidda hay'adaha iyo maqnaanshaha nidaam xog-ururin ee suuqa shaqada, taasoo caqabad ku noqotay xeer-nidaaminta iyo maareynta shaqaalaha socdaalka.

Sanadkii 2024, Dawladda Soomaaliya waxay dhammeystirtay Heshiisyada Shaqaalaha Socdaalka ee ay la gashay Qatar, halka ay weli wada-hadallo kula jirto Boqortooyada Sacuudi Carabiya, oo hoy u ah bulsho weyn oo Soomaali ah. Shaqada Shirkada Shaqaaleysiinta Gaarka loo leeyahay ee dalka weli si wanaagsan looma nidaamin, taasoo sababtay in shaqaalaha Soomaaliyeed ee socdaalka ah ay la kulmaan dhibaatooyin la xiriira xaquuq-la'aan, xaalado shaqo oo liita, iyo nuglaansho ka dhan ah tahriibinta iyo shaqada qasabka ah. Gaar ahaan, dalalka Khaliijka, oo ay ka jirto nidaamka dammaanadda shaqada (kafala system), waxaa si joogto ah loo diiwaan-geliyey xadgudubyo iyo takoorid ka dhan ah shaqaalaha socdaalka, gaar ahaan haweenka inta badan ka shaqeeya guryaha. Dhibaatadan waxay sii adkeyneysaa baahida loo qabo nidaam sharci oo xaqiijinaya ilaalinta xuquuqda shaqaalaha socdaalka Soomaaliyeed.

In kasta oo Xeerka Shaqada Qaranka uu Baarlamaanku ansixiyey Feberaayo 2025, haddana dalka wuxuu weli la tacaalayaa caqabado la xiriira hirgelinta iyo fulinta xeerkaas, maadaama ay jirto qaab-dhismeed hay'adeed oo daciif ah oo cusub. Xeerka Shaqaalaha Ajnabiga ah ee 2015 – oo nidaamiya socdaalka shaqaalaha ee imaanaya Soomaaliya ma lahan hab-raacyo dhammeystiran oo ilaaliya shaqaalaha socdaalka, wuxuuna si kooban uga hadlaa keliya shuruudaha iyo hannaanka lagu helo rukhsadda shaqo ee shaqaalaha ajnabiga ah ee dalka yimaad. Taageero dheeraad ah ayaa looga baahan yahay la-hawl-galeyaasha bulshada si ay kor ugu qaadaan awoodooda ayna u habeeyaan shaqaalaha oo ay u matalaan loo-shaqeeyeyaasha, oo ay ku jirto ka-qeybqaadashada wax-ku-oolka ah ee dadaalka gorgortanka wadajirka ah.

Arrimahan, iyo kuwo kale ayaa dammaanad-qaaday baahi degdeg ah oo loo qabo asaaska siyaasaddan socdaalka shaqada ee qaran.

1.6 Sababaha Asaasiga ah ee Siyaasadda

Maqnaanshaha siyaasadda iyo qaab-dhismeedka sharci ee u dhigma, shaqaalaha soogalootiga ah waxay sii wadayaan inay la kulmaan xad-gudubyada xuquuqda, dhiigmiirashada, iyo baylahda la xiriirta jawi shaqo oo khatar ah, oo ay ku jiraan caynsanaanta hoose ee badbaadada shaqada iyo caafimaadka, mushaar yar, takoorid isgoysyada, shaqo mushaar yar oo aan rasmi ahayn ama ku-meel-gaar ah, xorriyadda xaddidan ee ururka iyo gorgortan wadajir ah, xorriyad xaddidan ee dhaqdhaqaaqa, ilaalinta xaddidan ee helitaanka. Siyaasaddan ayaa

Soomaaliya u sahlaysa in ay gaarto yoolalka la higsanayo, gaar ahaan marka loo eego Himmillooyinka Horumarka Waara ee (SDGs (8) iyo (10). Waxay fulinaysaa ballan-qaadkii dawladda ee ku aaddan Qaabdhismeedka socdaalka shaqada ee Urur-goboleedka IGAD, ballan-qaadyadii ay u sameysay suuqa ganacsiga Bariga iyo Koonfurta Afrika (COMESA) iyo bulshada Bariga Afrika (EAC) iyo la jaan-qaadka siyaasadda socdaalka ee Soomaaliya.

1.7 La-tacaalidda Arrimaha Jinsiga

Qaabka socdaalka shaqada iyo natiijooyinkiisa waxay si weyn ugu kala-duwanaan karaan ragga iyo dumarka shaqaalaha socdaalka ah. Siyaasadaha suuqa shaqada iyo socdaalka mar walba waxay leeyihiin saameyn jinsiyeed, mana ahan kuwo dhexdhexaad ah, Siyaasaddan waxaa loo sameeyey iyadoo la tixgelinayo dhismaha nidaamyo iyo qaab-dhismeedyo dabooli kara baahiyaha kala duwan ee ragga iyo dumarka, taasoo dhiirri-gelinaysa fursadaha loo siman yahay. Soomaaliya gudaheeda, haweenka waxay la kulmaan caqabado badan oo aanay raggu la kulmin marka ay shaqo u socdaalaan. Tani waxay inta badan ka dhalatay aragtiyo isir-jinsiyeed xaq-jir ah, kuwaasoo dumarka siinaya heer ka hooseeya ragga, isla markaana hoos u dhigaya qiimaha shaqadooda. Naqshadeynta siyaasadda socdaalka shaqadu waxay qabataa hab ka jawaabaya jinsiga si wax looga qabto arrimahan iyo kuwa kale.

1.8 Ku-saleysanaanta Xuquuqda

Qaabeynta siyaasadda socdaalka shaqaalaha waxay qaadanaysaa hab-xuquuqeed, si waafaqsan heerarka shaqada ee caalamiga ah, ballan-qaadyada caalamiga ah iyo mid goboleed, iyo habka dhaqannada wanaagsan ee soo if-baxaya, Siyaasaddan waxay xoojinaysaa socdaal shaqo oo nabdoon, nidaamsan, iyo sharciyeysan, iyadoo la xaqiijinayo ilaalinta xuquuqda shaqaalaha socdaalka, gaar ahaan haweenka oo inta badan la kulma takoorid iyo xad-gudubyo la xiriira jinsiga, dadka naafada ah, si loo hubiyo in aysan la kulmin caqabado dheeraad ah marka ay shaqo raadsanayaan ama shaqo hayaan.

2. Jihada Istiraatijiyadda

Siyaasaddan waxay dejinaysaa jihada istiraatijiyadda ee maareynta socdaalka shaqaalaha Soomaaliya, iyadoo ujeeddadu tahay in la adkeeyo mabaadi'da ilaalinta iyo awood-siinta shaqaalaha socdaalka ah, loona suurta geliyo ka-qeybgalka ugu wanaagsan ee horumarka qaranka.

Aragtida

In la helo Hannaanka socdaalka shaqaalaha oo waara, isku-dhafan, loo dhan yahay, kuna saleysan xuquuqda aadanaha si kor loogu qaado horumarka qaranka.

2.1 Himmillada

In la dhiso qaab-dhismeed dhammeystiran oo caddaalad ah kaasoo fududeeya socdaal shaqo oo badbaado leh, nidaamsan oo joogto ah.

2.2 Ujeeddada

In la xoojiyo faa'idooyinka socdaalka shaqaalaha ee gudaha iyo dibadda si loo horumariyo noloshada shaqaalaha Soomaaliyeed iyo koboca dhaqaalaha qaranka.

2.3 Qiyamka Asaasiga ah iyo Mabaadi'da Hageysa Siyaasaddan

Qiyamka iyo mabaadi'da asaasiga ah ee siyaasaddan hagaya waa:

1. Maamul-wanaagga iyo u-hoggaansanaanta Sharciga hubinta hannaan ka-qeybqaadasho oo ay hoggaaminayaan shuruuc iyo xeerar hufan, laguna hirgeliyey hannaan hay'adeed oo la isku-dubbariday oo la iska kaashaday si kor loogu qaado danaha shaqaalaha socdaalaya si waafaqsan heerarka caalamiga ah.

2. Shaqo hufan Hubinta in shaqadu tahay mid wax-soo-saar leh, bixisa dakhli ku filan, hubinta amniga iyo xasilloonida goobaha shaqada, ilaalinta shaqaalaha iyo qoysaskooda, wanaajinta rajada is-dhex-galka bulshada shakhsi ahaaneed iyo horumarinta qaranka.

3. Xoojinta, ka mid noqoshada iyo ka qeyb-galka - Xoojinta nidaamyada, habaynta shaqada si loo hubiyo in aan cidna ka harin, iyo ilaalinta xuquuqda shaqaalaha socdaalka ah ee nugul iyo kuwa la takooro.

4. Ilaalinta, Cadaaladda iyo Wada-tashiga Bulshada - Bixinta ilaalinta bulshada dhexdeeda iyadoo la eegayo qeybo kamid dammaanad-qaadka badbaadada bulshada ee asaasiga ah, hubinta caddaaladda bulshada iyadoo la sameynayo nidaam ku habboon xuquuqaha loo siman yahay, iyo horumarinta wada-hadal bulsho oo waara.

5. Xaqiijinta wada-hadal bulsho oo waara oo ka yimaada dhanka Dawladda wadahadalkas oo ay ku jiraan dhammaan noocyada gorgortanka, wada-tashiga iyo xogisweydaarsiga u dhexeeya wakiillada Dawladda, loo-shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha kuna saabsan arrimaha danta guud ee la xiriirta siyaasadaha dhaqaalaha iyo bulshada.

6. Daah-furnaanta iyo La-xisaabtanka Xaqiijinta daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka dhammaan daneeyeyaasha si loo dhiso iskaashi ku habboon oo kor loogu qaadayo kalsoonida nidaamka socdaalka shaqaalaha, Isla-xisaabtanka wuxuu saameynayaa dhammaan daneeyeyaasha, kuwaasoo si

joogto ah loo qiimeeyo, loo cabbiro, loona hubiyo waxqabadkooda la xiriira waajibaadkooda.

7. Horumarinta Joogtada ah Dejinta hannaan waara oo loogu talo-galay socdaalka shaqalaha kaasoo tixgelinaya baahida jiilka hadda jira iyo kuwa mustaqbalka si loo gaaro yoolalka Horumarineed ee Joogtada ah.

2.4 Ujeeddooyinka Istaraatijiyadeed ee Siyaasaddan

Ujeeddooyinka asaasiga ah ee siyaasaddan waa:

1. Xoojinta maamulka socdaalka shaqaalaha si waafaqsan hal-beegyada iyo xeerarka caalamiga ah ee shaqada.
2. Aqoonsiga xirfadaha iyo Horumarintooda.
3. Xoojinta ilaalinta bulshada iyo dammaanadda bulsho ee shaqaalaha Socdaalka ah.
4. Xoojinta doorka la-hawl-galeyaasha bulshada.
5. Xoojinta soo-saarista, maareynta iyo faafinta xogta la xiriirta socdaalka shaqaalaha.
6. Nidaaminta wakaaladaha shaqaaleysiinta ee gaarka loo leeyahay.
7. Dhisidda iyo taageeridda nidaamyada lagu maareeyo soo-noqoshada iyo dib-umilanka shaqaalaha socdaalka ah.
8. Horumarinta waxtarka jaaliyadaha qurbaha.

2.5 Mowduucyada Is-dhex-gala

Dawladdu, iyadoo qeyb ka ah hirgelinta siyaasaddan, waxay wax ka qabanaysaa arrimaha is-dhex-gala leh si loo hubiyo in fulinta siyaasadda ay noqoto mid loo dhan yahay, u janjeera sinnaanta jinsiga, laguna waafajiyo hab-dhaqannada caalamiga ah ee ugu wanaagsan:

1. **Arrimaha Dhaqaalaha iyo Bulshada**– Sida lagu xusay Qorsheha Horumarinta Qaranka ee Soomaaliya, wax-ka-qabashada arrimaha socdaalka shaqaalaha waxay noqonaysaa qeyb ka mid ah dadaallada ballaaran ee lagu yareynayo saboolnimada, sinnaan-la'aanta dakhliga, iyo helitaanka adeegyada asaasiga ah ee dadka nugul. Waxaa la tixgelinayaa caqabadaha ay ka mid yihiin waxbarasho la'aanta, ku-tiirsanaanta, iyo caqabadaha kale ee ka hor istaagaya helitaanka adeegyada bulshada.
2. **Ka-jawaabista aragtida kala-duwanaanshaha jinsiga iyo Sinaanta**– Haweenka iyo carruurta ayaa si xad dhaaf ah u saameeye caqabadaha la xiriira socdaalka shaqaalaha. Si wax looga qabto arrintan, Dawladda waxay hirgelinaysaa tallaabooyin lagu ilaalinayo shaqaalaha socdaalka ah, gaar ahaan haweenka ka shaqeeya shaqooyinka guryaha iyo

daryeelka. Waxaa la xakameynayaa takooridda ku saleysan midabka, jinsiga, doorashada, (guurka) aqoonsiga jinsiga, luqadda, diinta, aragtida siyaasadeed, dhalashada, asalka qowmiyadeed ama bulsho, xaaladda maskaxeed, da'da, ama cudurka HIV, si waafaqsan Xeerka Shaqada Soomaaliya (2025),

3. **Ka-qeyb-galka Dadka Naafada ah-** Dadka naafada ah waxay la kulmaan takoor iyo caqabado la xiriira socdaalka shaqaalaha. Dawladda, oo si buuxda u ogsoon xaqiiqadan, waxay xoojinaysaa dadaallada lagu ilaalinayo xuquuqda dadka naafada ah. Waxaa la hirgelinayaa tallaabooyin gaar ah oo suurtagal ka dhigaya in ay si buuxda uga qeyb-galaan suuqa shaqada ee Soomaaliya iyo dibadda.
4. **Yareynta Nuglaanshaha-** Dawladdu waxay hirgelinaysaa tallaabooyin lagu yareynayo nuglaanta shaqaalaha socdaalka ah, iyadoo la hubinayo in heshiisyada shaqo ee labada dal (BLAs) ay si cad u qeexaan xuquuqda shaqaalaha, dammaanad bulsho, mag-dhaw shaqo, iyo ka-qeyb-galka ururrada shaqaalaha si ay u helaan xuquuqdooda shaqo iyo awoodda go'aan-qaadashada shaqo.
5. **Iskaashiga Caalamiga ah iyo Taageerada Qunsuliyadaha-** Dawladdu waxay xoojinaysaa iskaashiga caalamiga ah iyo wada-shaqeynta si loo hirgeliyo siyaasaddan si hufan. Waxaa la adeegsanayaa habab kala duwan oo lagu maareeyo socdaalka shaqaalaha, oo ay ka mid yihiin iskaashi goboleed, qaaradeed iyo caalami ah, si loo xaqiijiyo in shaqaalaha socdaalka ah ay helaan adeegyada qunsuliyadeed ee tayada sare leh, oo ay ku jiraan caawinta habraacyada fiisaha iyo adeegyada kale ee lagama-maarmaanka ah. Si arrintan loo xaqiijiyo, Dawladda waxay u diraysaa ku-qeybsanaha, xiriiriyeyaasha shaqaalaha waddamada ay shaqaalaha Soomaalida u badan yihiin si loo ilaaliyo xuquuqdooda.
6. **Iskaashiga Dawladaha iyo Ganacsiga Gaarka loo leeyahay-** Dawladdu waxay si dhow ula shaqeynaysaa hay'adaha shaqaaleysiinta ee gaarka loo leeyahay si loo hirgeliyo siyaasaddan, iyadoo la aqoonsanayo doorkooda muhiimka ah ee dhiirri-gelinta socdaal shaqo oo badbaado leh, nidaamsan oo joogto ah. Iskaashigan wuxuu xaqiijinayaa in baahiyaha iyo aragtiyada shaqaalaha iyo loo-shaqeeyeyaasha lagula xisaabtamo inta lagu guda jiro hirgelinta siyaasadda. Hindisayaal muhiim ah waxaa ka mid noqonaysaa horumarinta xirfadaha iyo abuurista fursado shaqo iyadoo la dhiirri-gelinayo ganacsiyada shaqaalaha qaxootiga ah.
7. **Nabadda iyo Xallinta Khilaafaadka-** Dawladdu waxay garwaaqsan tahay in nabadda iyo ammaanku ay lagama-maarmaan u yihiin abuurista jawi shaqo oo xasilloon. Sidaas darteed, Dawladda waxay sii wadaysaa dadaallada lagu hirgelinayo hannaanka xallinta khilaafaadka si kor loogu qaado maal-gashiga, abuurista shaqo, iyo horumarka dhaqaale. Waxaa sidoo kale la hirgelinayaa istiraatijiyado horumarineed oo lagu dhiirri-

gelinayo horumarinta miyiga, dhismaha nabadda, wacyi-gelinta bulshada iyo kor-u-qaadista isku-duubnida bulshada Soomaaliyeed.

8. **Isbeddelka Cimilada iyo Masiibooyinka Dabiiciga ah-** Isbeddelka cimilada, cudurrada faafa iyo masiibooyinka dabiiciga ah waxay si weyn u saameeyeen Soomaaliya, iyadoo 31% dadka Soomaaliyeed ay ku qasbanaadeen inay ka hayaamaan guryahooda sababo la xiriira abaaro iyo fatahaado daran. Si wax looga qabto arrintan, Dawladdu waxay xoojinaysaa nidaamyada digniinta degdegga ah (early-warning systems) si bulshada looga ilaaliyo saameynta masiibooyinka. Siyaasaddan waxaa la fulinayaa iyadoo la kaashanayo waaxyaha kale si loo ilaaliyo, loo xajiyo, loona dhawro degaanka.
9. **Dijitaalaynta (Casriyeenta)-** Soomaaliya waxay ka faa'iidaysanaysaa dijitaalaynta si loo horumariyo socdaalka shaqaalaha ee bed-qabka nidaamsanl

eh ee joogtada ah, iyadoo la aqoonsanayo hufnaanta iyo hal-abuurka ay teknolojiyaddu u keenayso dunida shaqada.

3. Tallaabooyinka, Faro-gelinada iyo Hababka Siyaasaddan

Si loo hirgeliyo siyaasaddan, loogana miro dhaliyo ujeeddooyinkeeda, waxaa la qaadayaa Faragelimhan, hababkan iyo tallaabooyinka asaasiga ah ee soo socoda**:**

Qeybta 1: Xoojinta Maamulka Socdaalka Shaqada si waafaqsan hal-beegyada iyo Xeerarka Caalamiga ah ee Shaqada

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Xoojinta Hannaanka Iskuduwidda Qaran ee hoos yimaada xafiiska madaxweynaha si la isku xiro shaqada hay'adaha muhiimka ah ee ku hawlan hirgelinta siyaasadaha socdaalka, lana gaarsiiyo dawlad-goboleedyada xubnaha ka ah federaalka.

2. Bilaabidda, dib-u-eegidda iyo xoojinta heshiisyada labo-geesoodka iyo kuwa dhinacyada badan ee socdaalka shaqaalaha (BLMAs iyo MLMAs), si gaar ah wadamada ay joogaan shaqaalaha Soomaaliyeed ee tiro badan. Waxaa sidoo kale la xaqiijinayaa ansixinta, hirgelinta, iyo daba-galka fulinta heerarka shaqaalaha ee caalamiga ah, oo ay ka mid yihiin xeerarka, heshiisyada iyo ballan-qaadyada la xiriira socdaalka shaqaalaha.

Qeybta 2: Aqoonsiga Xirfadaha iyo Horumarintooda

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Dhisidda hannaan qaran oo lagu qiimeeyo xirfadaha iyo qorsheynta shaqo.
2. Abaabulka iyo hirgelinta barnaamijyo lagu xoojinayo nidaamyada dhaqdhaqaaqa shaqaalaha, iyadoo diiradda la saarayo iskaashiga xirfadaha si loo daboolo baahida suuqa shaqada ee Soomaaliya iyo kobcinta xirfadaha.
3. Maal-gelinta barnaamijyada kobcinta xirfadaha oo ay ku jiraan xirfado cusub, sare-u-qaadidda xirfadaha iyo dib-u-tababaridda shaqaalaha gudaha iyo dibadda ka shaqeeya.
4. Hirgelinta shabakado iyo goobo shaqo baahin ee heer kasta oo dawladeed kuwaasoo xayeysiiya fursadaha shaqo iyo xirfadaha u baahan in la isku xiro loo shaqeeyeyaasha iyo kuwa shaqo-doonka ah ee jooga gudaha iyo dibadda.
5. Dhiirri-gelinta is-weydaarsiga aqoonta iyo xirfadaha ee shaqaalaha gudaha iyo kuwa dibadda.
6. Horumarinta habab taageero oo lagu xoojinayo helitaanka macluumaadka, waxbarashada, tababarada, aqoonsiga xirfadaha iyo maal-gelinta shaqaalaha socdaalka ah iyo qoysaskooda.

Qeybta 3: Ballaarinta Ilaalinta Shaqada iyo Dammaanadda Bulsho ee Shaqaalaha Socdaalka iyo Qoysaskooda

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Dib-u-eegista siyaasadaha, shuruucda, iyo nidaamyada dammaanadda bulshada si ay u daboosho shaqaalaha socdaalka iyadoo lagu saleynayo mabda’a sinnaanta xuquuqda shaqaalaha.
2. Xoojinta awoodda hay’adaha iyadoo la dejinayo xafiisyo gooni u ah arrimaha ilaalinta bulshada iyo shaqaalaha socdaalka, lana dhisayo guddi saddex-geesood ah si loo horumariyo aqoonta maxalliga ah ee ilaalinta shaqaalaha iyo dammaanadda bulsho.
3. Hirgelinta heshiisyada labo-geesoodka ah ee shaqaalaha oo ay ku jiraan dammaanado bulsho, iyo/ama heshiisyada ammaanka bulsho ee heer caalami si loo xaqiijiyo wareejinta iyo isticmaalka faa'iidooyinka.
4. Taageeridda hirgelinta xeerarka Suuqa Wadajirka ah ee Bariga Afrika (EAC Common Market regulations – 2023) ee isku-dubbaridka xuquuqaha iyo faa’iidooyinka dammaanadda bulsho.

Qeybta 4: Xoojinta Doorka La-hawl-galeyaasha Bulshada, Lahawl-galeyaasha Horumarinta, iyo Qeybaha Gaarka Loo Leeyahay

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Dhisidda awoodda ururrada shaqaalaha iyo daneeyeyaasha bulshada si ay uga qeyb-qaataan wadahadalka la xiriira socdaalka shaqaalaha.
2. Taageeridda ururrada shaqaalaha iyadoo la bixinayo macluumaad iyo dadaallo awood-siineed, si shaqaalaha socdaalka ah ay isugu abaabulaan una difaacdaan xuquuqdooda.
3. Taageeridda ururrada shaqaalaha si ay ugu doodayaan xuquuqda shaqaalaha socdaalka ah iyo helitaanka caddaaladda.
4. Xoojinta iskaashiga u dhexeeya Dawladda, daneeyeyaasha horumarineed, iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, si loo abuuro jawi shaqo oo hufan, badbaado leh, laguna kalsoonaan karo.

Qeybta 5: Xoojinta Soo-saarista, Maareynta, iyo Faafinta Xogta Socdaalka Shaqaalaha

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Ku-dhex-daridda qeybta socdaalka shaqaalaha nidaamka macluumaadka suuqa shaqada.
2. Dhisidda qaab-dhismeedka tiro-koobyada socdaalka shaqaalaha, kaasoo suurtagal ka dhigaya daba-gal joogto ah oo lagu sameeyo dhaqdhaqaaqa shaqaalaha socdaalka ah iyo astaamahooda, lana waafajinayo talooyinka Shirweynaha Caalamiga ah ee Tiro-koobyada Shaqada.
3. Daraasado joogto ah oo lagu sameeyo suuqa shaqada, iyadoo lagu darayo cutubyo khaas ah oo la xiriira xogta socdaalka shaqaalaha iyo maareynta jaaliyadda qurbaha, lana waafajinayo talooyinka (International Conference of Labour Statisticians ICLS). Waxaa la dhisayaa awoodda Dawladdu si ay si hufan u ururiso, u falanqeyso, uguna faafiso xogta socdaalka shaqaalaha, iyadoo la hubinayo in xogtaas lagu kala saaro jinsiga iyo astaamo kale oo muhiim ah. Waxaa la xaqiijinayaa in xogta si joogto ah loo faafiyo lana xoojiyo helitaankeeda dhammaan waaxyaha Dawladda iyo dadweynaha (warbaahinta, jaamacadaha, bulshada rayidka, daneeyeyaasha horumarineed iyo dhinacyada kale ee aan dawliga ahayn).

Qeybta 6: Nidaaminta Wakaaladaha Shaqaaleysiinta Gaarka Loo Leeyahay

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Dhisidda qaab sharci iyo xeerar nidaaminaya Shirkadda shaqaaleysiinta gaarka loo leeyahay.
2. Hirgelinta xeerar iyo hagitaan lagu nidaaminayo la-socodka iyo maareynta xarumaha shaqaaleysiinta gaarka loo leeyahay.
3. Dhisidda barnaamijyo kobcinta awoodda xarumaha shaqaaleysiinta si loo hubiyo inay si hufan u shaqeeyaan, loona sugo in shaqaaleysiinta ay noqoto mid cadaalad ah. Barnaamijkan wuxuu xoojinayaa awoodda xarumaha si loo hubiyo in habraacyo u janjeera sinnaanta jinsiga lagu daro dhammaan marxaladaha socdaalka shaqaalaha, oo ay ku jiraan Ka-hor bixitaanka Tababarka shaqaalaha, Imaanshaha waddanka loo socda Xaaladda shaqo ee waddanka loo tegay, Soonoqoshada iyo dib-u-milanka shaqaalaha.
4. Nidaamin sharci oo la xakameynayo hab-dhaqanka Shirkadaha shaqaaleysiinta, iyadoo la dejinayo hagitaanno sharciyeed oo labada dhinacba (Dawladda iyo shirkadaha shaqaaleysiinta) si siman u fulin karaan.

Qeybta 7: Taageeridda Nidaamyada Soo-noqoshada iyo Dib-umilanka Shaqaalaha Socdaalka

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Taageeridda Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) si ay hore ugu sii qorsheyso soo-noqoshada shaqaalaha socdaalka, iyadoo la dhisayo hannaan bixiya macluumaad, tababar iyo caawinaad sharci ama talo-bixin ah, si shaqaalaha soo laabanaya dib ugu milmaan bulshada. Tani waxaa ka mid ah taageerada ay ka heli karaan shirkadaha shaqaaleysiinta gaarka loo leeyahay iyo machadyada TVET.
2. Xoojinta dadaallada ay wadaan hay'adaha maaliyadeed si loo fududeeyo bixinta adeegyada maaliyadeed ee shaqaalaha socdaalka ah, sida xisaabaadka maaliyadeed ee dadka aan dalka joogin (non-resident accounts), taasoo qeyb ka ah dadaallada looga hortagayo khasaaraha maaliyadeed iyo xaqiijinta xorriyadda maaliyadeed ee shaqaalaha socdaalka ah.
3. Hirgelinta nidaam fududeeya wareejinta lacagaha xawaaladaha iyadoo la xoojinayo qaab-dhismeedka wareejinta faa'iidooyinka ilaalinta bulshada.

4. Fududeynta mideynta qoysaska iyo kor-u-qaadista is-dhex-galka carruurta shaqaalaha soo laabanaya, iyadoo lagu darayo nidaamka waxbarashada qaranka iyo tababarrada xirfadeed. Waxaa la dhisayaa nidaam daba-gal iyo cabashooyinka lagu xalliyo si dhibaatooyinka ka dhasha kala-guurka laga soo bilaabo soonoqoshada ilaa dib-u-milanka loo xalliyo si degdeg ah.

Qeybta 8: Kordhinta iyo Hagaajinta Ka-qeyb-galka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Qurbaha

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Dhisidda iyo xoojinta adeegyada qunsuliyadaha iyo xiriiriyeyaasha shaqaalaha ee safaaradaha, qunsuliyadaha, iyo xafiisyada diblomaasiyadda ee dibadda. Waxaa lagu darayaa habab cabasho iyo xal-u-helid si loo sameeyo tiro-koob joogto ah (diaspora mapping) oo lagu ogaanayo tirada, goobaha ay joogaan, xirfadahooda, jinsigooda, iyo adeegyada ay u baahan yihiin.

2. Taageeridda hawlaha ay wadaan shabakadaha iyo ururrada jaaliyadda Soomaaliyeed si ay gacan uga geystaan difaacidda xuquuqda shaqaalaha socdaalka ah iyo taageeridda ka-qeyb-galka bulshada.

3. Dhisidda xarun isku xirta jaaliyadda Soomaaliyeed ee qurbaha taasoo fududeynaysa wada-shaqeynta iyo iskaashiga jaaliyadda iyo Dawladda.

4. Wacyi-gelinta guud ee bulshada iyo siyaasiyiinta ee la xiriirta doorka muhiimka ah ee jaaliyadda Soomaaliyeed ay ka ciyaaraan horumarka qaranka, si loo kordhiyo aqoonsiga iyo taageerada loo fidiyo.

4. QAAB-DHISMEEDKA HIRGELINTA SIYAASADDAN

Soomaaliya waxay qaadanaysaa hab **“Dawlad iyo bulsho wadajir ah”** si loo xaqiijiyo in hirgelinta siyaasaddan ay noqoto mid dhammaan bulshada ka faa'iidaysato, loona hubiyo in cidna laga tagin. Dawladdu waxay dhisaysaa qaab-dhismeed maareynta socdaalka shaqaalaha oo dhammeystiran, iyadoo xoojinaysa awoodda hay’adaha u xilsaaran fulinta, isku-xirka, iyo iskaashiga daneeyeyaasha muhiimka ah.

Hannaankani wuxuu ka koobnaanayaa Dhisidda qaab sharci iyo xeer nidaaminaya socdaalka shaqaalaha hagaajinta xiriirka hay’adaha dawliga ah ee ka shaqeeya hirgelinta siyaasadda abuurista hannaan isku xiraya hay’adaha fulinta si loo hubiyo wada-shaqeyn hufan waafajinta qaab-dhismeedka Soomaaliya ee socdaalka shaqaalaha xeerarka goboleed iyo caalami ah

4.1 Qaab-dhismeedka Sharciyada iyo Xeerarka

Qaab-dhismeedka Qaranka

Sharciyada, siyaasadaha, istiraatijiyadaha, iyo qorsheyaasha Qaran ee qaabaynaya macnaha guud ee siyaasaddan waa:

Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (2012)

Dastuurka Qaranka wuxuu qeexayaa dhawr qodob oo muhiim ah oo la xiriira siyaasaddan:

1. Qodobka 24 – Wuxuu xaqiijinayaa in dhammaan shaqaaluhu ay leeyihiin xuquuqda xiriirka shaqo ee cadaaladda ku dhisan. Qodob-hoosaad (5) wuxuu si gaar ah u xusayaa in “dhammaan shaqaalaha, gaar ahaan haweenka, ay leeyihiin xuquuq gaar ah oo lagu ilaalinayo ku-xad-gudubka galmada, takoorka, iyo caddaalad-darro shaqo.”

2. Sharci kasta oo la xiriira shaqada iyo dhaqankeeda waa in uu kor u qaadaa sinnaanta jinsiga ee goobaha shaqada. Muwaadiniintu waa xor inay sameystaan ururro siyaasadeed ama kuwa aan siyaasadeed ahayn. Waxay sidoo kale leeyihiin xuquuqda dhaqdhaqaaqa dalka gudihiisa, xorriyadda ka-bixidda dalka iyo soonoqoshada, iyo xaqa ay u leeyihiin inay helaan baasaboor u oggolaanaya in ay safraan. Dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed waxay xor u yihiin in ay doortaan xirfadda ay doonayaan oo ay si xalaal ah ugu shaqeystaan.

Qorsheha Shaqo ee Qaranka (NEP) iyo Qorshaha Fulinta (2019)

Siyaasaddan waxaa lagu hirgelinayaa iyadoo la kaashanayo qodobbada muhiimka ah ee ku xusan **Qorshaha Shaqo ee Qaranka,** gaar ahaan kor-u-qaadista shaqo-abuurka iyadoo lala kaashanayo wadahadalka Dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay. Hirgelinta siyaasad canshuur iyo ganacsi oo dhiirri-gelisa koboca fursadaha shaqo. xoojinta arrimaha is-dhex-galka bulshada, oo ay ka mid yihiin xuquuqda shaqaalaha carruurta, saameynta isbeddelka cimilada, da’yarta, haweenka, iyo kooxaha kale ee nugul, iyo wax-ka-qabashada kaladuwanaanshaha magaalooyinka iyo miyiga.

Qorshaha Horumarinta Qaranka 2020–2024

Iyadoo la raacayo qorshahan, siyaasaddan waxay mudnaan siinaysaa:

1. Abuurista shaqo iyo horumarinta xirfadaha shaqaalaha.

2. Xoojinta wax-soo-saarka dhaqaalaha, oo ay ka mid yihiin beeraha, xoolaha, iyo kalluumeysiga.

3. Hirgelinta qorshayaal lagu xallinayo khilaafaadka soo noqnoqda.
4. Dadaallada wax looga qabanayo saameynta taban ee isbeddelka cimilada, taasoo saameyn weyn ku leh socdaalka shaqaalaha.

Xeerka Shaqada Soomaaliya ee Dib-u-eegista Lagu Sameeyey

Siyaasaddan waxay la jaan-qaadaysaa Xeerka Shaqada, iyadoo xoogga la saarayo qodobadan muhiimka ah:

1. **Qodobka 60 (2)** – Shaqaalaha khasaaraha shaqo la kulmay waxay xaq u leeyihiin inay si toos ah dacwad uga gudbiyaan shirkadaha qandaraaska bixiya.
2. **Qodobka 59 (2)** – Haddii ay jiraan heshiisyo qoran oo dhex mara qandaraaslaha iyo shirkadaha hoos yimaada (sub-contractors), qandaraasluhu waxaa waajib ku ah inuu labo nuqul oo heshiiska ah u gudbiyo xafiiska shaqada ee awoodda u leh, isagoo muujinaya goobta shaqadu ka socoto.
3. **Qodobka 48 (a)** – Shaqo bixiyaha waxaa waajib ku ah inuu si sax ah u bixiyo mushaharka ay ku heshiiyeen, iyadoo la raacayo shuruudaha, xilliyada, iyo goobaha lacagta lagu bixiyo sida ku xusan heshiiska shaqo.
4. **Qodobka 93** – Wuxuu qeexayaa ciqaabta iyo mas'uuliyadda qof kasta oo shakhsi kale ku qasba ama marin-habaabiya inuu u safro dibadda iyadoo aan la helin heshiis shaqo oo sharciyeysan.

Siyaasadda Qaranka ee Qurbo-joogta (2023)

In kasta oo barnaamijyo kala duwan oo jaaliyadda Soomaaliyeed la xiriira ay gaareen guulo waqti-gaaban ah iyo maal-gelin la heli karo, saameyntooda horumarineed wali waa mid xaddidan. Sida lagu xusay siyaasaddan, tani waxay ka dhalatay "la'aanta awoodda lagu qaabeeyo lana hirgeliyo faragelin wax-ku-ool ah oo ballaaran." Siyaasaddan waxay ka faa'iidaysanaysaa qodobbada muhiimka ah ee lagu xusay Siyaasadda. Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah ayaa hormuud u ah hirgelinta siyaasaddan, iyadoo la kaashaneysa safaaradaha, qunsuliyadaha, iyo xafiisyada diblomaasiyadda ee Soomaaliya. Siyaasaddan waxaa si gaar ah loo asaasay si loo fududeeyo iskaashiga lala yeesho daneeyeyaasha caalamiga ah ee la xiriira arrimaha jaaliyadda Soomaaliyeed. Si loo xaqiijiyo hirgelin wax-ku-ool ah, Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah waxay ka qeyb-qaadanaysaa Hannaanka ama Habka Iskuduwidda Qaranka (National Coordination Mechanism). Guddiga Isku-dubbaridka Socdaalka

Shaqaalaha. Labadan madal waxay gacan ka geysanayaa doodaha iyo xallinta arrimaha soo kordha ee la xiriira jaaliyadaha Soomaaliyeed ee qurbaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha Soomaaliyeed ee socdaalka ah.

Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga Soo noqday iyo Barakacayaasha Gudaha

Hirgelinta siyaasaddan waxay ka faa'iidaysanaysaa qodobbada muhiimka ah ee ku xusan Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga Soo noqday iyo Barakacayaasha:

1. Ilaalinta ka dhanka ah barakaca qasabka ah.
2. Ilaalinta dadka inta ay ku jiraan xaaladda barakaca.
3. Soo-noqoshada qaxootiga si mutadawacnimo ah iyo xorriyadda doorashada xal waara.
4. Xuquuqda dhaqdhaqaaqa xorta ah iyo doorashada goobta deegaamaynta.
5. Xuquuqda nolol ku filan oo waafaqsan heerarka aadanaha.
6. Xuquuqda dadka naafada ah si loo sugo ka-qeyb-gal buuxa oo xuquuqdooda lagu ilaaliyo.
7. Diiwaangelinta iyo haynta dukumentiyada saxda ah ee qaxootiga soo noqday iyo barakacayaasha gudaha.
8. Ka-hortagga takoorka iyo qaxootiga soo noqday iyo barakacayaasha gudaha.

Sharciga Shaqo-qorista Shaqaalaha Shisheeye (2015)

Shacriga Shaqo-qorista Shaqaalaha Shisheeye ee 2015 wuxuu xeerinayaa arrimo kala duwan oo la xiriira shaqaalaha ajaaniibta oo ay ka mid yihiin:

1. Shuruudaha shaqada iyo xaaladaha ka reeban.
2. Codsiga rukhsadda dhiirri-gelinta maal-gashiga.
3. Degganaanshaha iyo fiisaha shaqaalaha dibadda.
4. Soo-saaridda iyo ansaxnimada rukhsadaha shaqada.
5. Bixinta kordhin mushahar la xiriirta.
6. Shaqaaleysiinta, meeleynta, ama is-casilaadda shaqaalaha.

7. Dhisidda Guddiga Qiimeynta Shaqaalaha Ajaanibta.
8. Xad-gudubyada xuquuqda shaqaalaha ajaaniibta.

Siyaasaddan waxay si gaar ah u dhammeystiraysaa qodobbada soo socda:

1. Qodobka 3: Xaaladaha shaqada iyo ka dhaafitaannada la xiriira.
2. Qodobka 5: Dhiirri-gelinta maal-gashiga iyo codsiga rukhsadaha la xiriira.
3. Qodobka 6: Degganaanshaha iyo fiisaha shaqaalaha ajaaniibta.
4. Qodobka 7: Xaaladda shaqaalaha ajaaniibta, dadka la musaafuriyey, iyo shakhsiyaadka jinsiyaddooda laga noqday; iyo sidoo kale dadka Soomaaliya ku dhashay balse aan wali helin jinsiyadda Soomaaliga ah.

Hab-raaca Shaqo-siinta Dibadda (Overseas Employment Guidelines) (2022)

Siyaasaddan waxay ku salaysnaanaysaa dhinacyadan soo socda ee hagaha//Siyaasaddan waxay ku salaysnaanaysaa qodobbada muhiimka ah ee ku jira Hab-raaca Iyo Adeegga Guud ee Shaqo-siinta Dibadda Shaqaalaha Hagaha Shaqada Dibadda (2022) waxaa ka mid ah:

1. Xaaladaha shaqo ee dibadda iyo hubinta inay yihiin kuwo wanaagsan oo ku habboon shaqaalaha.
2. Dhawrista iyo u-hoggaansanaanta heshiisyada shaqada ee shaqaalaha socdaalka ah inta ay dibadda joogaan.
3. Bixinta mag-dhawga shaqaalaha marka ay waxyeello gaarto ama ay khasaaro la kulmaan.
4. Shaqaaleysiinta iyo qorista shaqaalaha loo dirayo wadamada aan la lahayn heshiisyada shaqo ee labo-geesoodka ah (bilateral labour migration agreements) ee Soomaaliya la leedahay.

Heshiisyada Socdaalka Shaqaalaha ee Labo-geesoodka ah

Dawladdu waxay la gelaysaa Heshiisyo Labo-geesood ah oo la xiriira Socdaalka Shaqaalaha dalalka ugu waa weyn ee ay shaqaalaha Soomaaliyeed ay u socdaalayaan. Heshiisyadan waxay ujeeddoodu tahay in la dhiso nidaam is-faham leh oo ku saleysan qorista, dirista, iyo dib ucelinta shaqaalaha, iyadoo lagu saleynayo sharciyada, xeerarka, iyo qawaaniinta khuseeya.

Sharciga Maal-gashiga Shisheeye 2015

Sharciga Maal-gashiga Shisheeye ee 2015 wuxuu dhiirri-gelinayaa horumarinta dhaqaalaha, iyadoo la hubinayo ilaalinta shaqaalaha iyo xuquuqdooda.

Qodobada muhiimka ah ee sharcigan waxaa ka mid ah:

1. Kor-u-qaadista maal-gashiga shisheeye ee dalka si loo kobciyo dhaqaalaha.
2. Abuurista fursado shaqo oo ay ka faa'iidaystaan shaqaalaha gudaha iyo kuwa socdaalka ah.
3. Horumarinta xirfadaha shaqaalaha iyo dhiirri-gelinta tababaro xirfadeed.
4. Hubinta in heerarka shaqada cadaalad yihiin, oo la ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha.
5. Soo-gelinta iyo fududeynta Is-dhaafsiga Teknolojiyadda si loo horumariyo waxsoo-saarka.
6. Dhiirri-gelinta koboc waara oo waafaqsan shuruudaha horumarineed ee dalka.
7. La jaan-qaadidda baahida suuqa shaqada, iyadoo shaqaalaha loo diyaarinayo xirfado la jaan-qaadi kara shaqooyinka la heli karo.
8. Taageeridda ka mid noqoshada shaqaalaha socdaalka ah ee nidaamka rasmiga ah ee shaqo

Qaab-dhismeedka iyo Heerarka Caalamiga ah

Hadafyada Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay

Hadafyada Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay (SDGs), oo sidoo kale loo yaqaan Ajandaha 2030, waxay aqoonsan yihiin in socdaalka shaqaalaha uu yahay arrin muhiim u ah horumarka waara. Mowduuca "in cidna aan la dayicin" wuxuu muujinayaa dadaal caalami ah oo lagu hubinayo in dhammaan dadka, oo ay ku jiraan shaqaalaha qaxootiga ah, lagu daro qorsheyaal horumarineed oo waara.

Siyaasaddan waxay si gaar ah diiradda u saaraysaa hadafyada SDGs ee la xiriira socdaalka shaqaalaha, kuwaasoo kala ah:

1. Hadafka 1: Ciribtirka saboolnimada iyo hubinta in shaqaalaha qaxootiga ah ay helaan fursado dhaqaale.
2. Hadafka 5: Xaqiijinta sinnaanta jinsiga iyo awood-siinta haweenka iyo gabdhaha shaqaalaha qaxootiga ah.
3. Hadafka 8: Kobcinta shaqo cadaalad ah, koboc dhaqaale, iyo ilaalinta xuquuqda shaqaalaha qaxootiga ah.
4. Hadafka 10: Yaraynta sinnaan-la'aanta iyo hubinta in shaqaalaha socdaalka sameynaya ay helaan xuquuqdooda shaqo.
5. Hadafka 16: Xoojinta hay'adaha cadaaladda iyo dawlad wanaagga, si loo hubiyo ilaalinta xuquuqda shaqaalaha.

Si loo xaqiijiyo hirgelinta hadafyadan, Dawladda Soomaaliya waxay billowday dadaal bishii Janaayo 2016 si ay u waafajiso hadafyadan qorsheyaasha qaran.

Si loo fududeeyo hirgelinta Ajandaha 2030 ee la xiriira siyaasaddan:

1. Dawladdu waxay xoojinaysaa isku-xirka hay'adaha muhiimka ah ee ururinaya xogta la xiriirta socdaalka shaqaalaha.
2. Waxaa la xallinayaa caqabadaha ku xeeran ururinta iyo keydinta xogta, si gaar ah goobaha muhiimka ah iyo waaxyaha shaqo.
3. Waxaa la xoojinayaa awoodda dawlad-goboleedyada iyo heerka federaalka ee la xiriirta maareynta iyo falanqeynta xogta socdaalka shaqaalaha.

Siyaasaddan waxay la jaan-qaadaysaa hadafyada horumarineed ee caalamiga ah, iyadoo xoojinaysa nidaamyada maareynta shaqaalaha qaxootiga ah, ilaalinta xuquuqdooda iyo kobcinta dhaqaalaha Soomaaliya.

Hadafyada Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay (SDGs), oo sidoo kale loo yaqaan Ajandaha 2030, waxay u aqoonsan yihiin socdaalka shaqada inuu yahay arrin muhiim ah oo horumar waara. Mowduuca "in cidna aan la dayicin" waxay xoogga saaraysaa dadaal caalami ah oo hubinaya ka-qeyb-galka, oo ay ku jiraan socdaalka shaqo, si loo helo xal waaro. Himmillooyinka ku habboon siyaasaddan ayaa ah Yoolalka
1, 5, 8, 10, iyo 16. Si loo xaqiijiyo dhaqan-gelinta qorsheyaasha Qaramada Midoobay ee SDGs, Dawladda Soomaaliya ayaa bishii Janaayo 2016 bilowday dadaallo lagu xaqiijinayo hadafyadaas laguna waafajinayo qorsheyaasha qaranka. Si loo taageero geeddi-socodkan, Dawladdu waxay kor u qaadaysaa isku-dubbaridka xog-ururinta ee ka dhexeeya daneeyeyaasha muhiimka ah, wax-ka-qabashada duduleelada xogta iyo xogururinta ee goobaha muhiimka ah iyo qeybaha muhiimka ah, xoojinta nusqaamaha, Farqi awoodeed heer federaal iyo heer Dawlad-goboleed ee maamulka iyo falanqaynta xogta.

Heshiisyada Caalamiga ah ee Ururka Shaqaalaha Adduunka ee Socdaalka Shaqaalaha

Marka laga soo tago Heshiiska Caalamiga ah ee Shaqaalaha Socdaalka ee ILO No. 97 ee 1949 (kaasoo tixraacaya xogta, siyaasadaha qaran, sharciyada iyo xeerarka la xiriira soo-galootiga iyo socdaalka; macluumaadka ku saabsan qodobbada gaarka ah ee la xiriira shaqo-doonista iyo xaaladaha shaqada iyo nolosha socdaalka shaqo-doonka ah) iyo Heshiiska ILO No. 143 ee 1975 ee Shaqaalaha Socdaalka (kaasoo sheegaya in dalalka ay waajib ku tahay inay ilaaliyaan danaha shaqaalaha marka ay ka shaqeynayaan waddamo aan dalkooda ahayn), waa lama huraan in la ogaado in qaar ka mid ah heshiisyada muhiimka ah aan weli la ansixin, balse ay tahay in la tixgeliyo si kor loogu qaado maamulka socdaalka shaqaalaha ee Soomaaliya. Kuwaas waxaa ka mid ah:

1. Heshiiska Siyaasadda Shaqaalaynta No. 122 ee 1964

2. Heshiiska Shaqaalaha Guryaha No. 189 ee 2011
3. Qoritaanka Heshiiskii Shaqaalaha Wadaniga ah ee No. 50 ee 1936
4. Qandaraasyada Shaqada (Shaqaalaha asaliga ah) Heshiiska No. 64 ee 1939 Hubinaya in shaqaalaha socdaalka ay helaan damaanad bulsho oo siman (Social

Security) Heshiiskii No. 118 ee 1962

5. Iyadoo qeyb ka ah hirgelinta siyaasaddan, Dawladdu waxay tixraacaysaa aaladaha kale ee caalamiga ah ee ay Soomaaliya qeyb ka tahay, oo ay ku jiraan: Is-afgaradka Caalamiga ah ee Bed-qabka, Nidaaminta iyo Socdaalka Joogtada ah.
6. Hagidda Caalamiga ah ee Heshiisyada Socdaalka Shaqada ee Labogeesoodka ah
7. Guddiga Ciribtirka Takoorka Jinsiga
8. Guddiga Ilaalinta Xuquuqda Dhammaan Shaqaalaha Socdaalka ah iyo Xubnaha qoysaskooda.

Barnaamijka Shaqo Hufan ee Dalka (DWCP 2023-2025)

Dhaqan-gelinta siyaasaddan waxay la jaan qaadaysaa hawl-gelinta Barnaamijka Labaad ee Shaqo Hufan ee Soomaaliya (DWCP 2023-2025). Barnaamijku wuxuu ku baaqayaa in cadeymo lagu saleeyo falanqaynta xaaladda bulsho, siyaasadeed iyo dhaqaale ee Soomaaliya. Waxay gacan ka geysataa gaaritaanka afar ujeeddooyin istiraatijiyadeed oo ILO ah: shaqaaleysiinta, ilaalinta bulshada, wada-hadalka bulshada iyo saddexgeesoodka iyo mabaadi'da asaasiga ah iyo xuquuqda shaqada.

Qaab-dhismeedka Kale ee Horumarinta Qaranka

Dhawr qaab-dhismeed heer qaran ah ayaa ku socda horumarinta oo khuseeya hirgelinta siyaasaddan:

Qabyo-qoraalka Istiraatijiyadda Socdaalka Qaranka (2024)

Dawladdu waxay hirgelinaysaa Istaraatijiyadda Socdaalka Qaranka, taas oo ujeeddadeedu tahay in lagu bixiyo hagitaan qaran oo ku aaddan aragtida, mabaadiida iyo yoolalka socdaalka ee Soomaaliya. Aragtida istaraatijiyadu waa in la hubiyo fursadaha socdaalka joogtada ah, badbaado iyo nidaamsan, iyo sidoo kale horumarinta natiijooyinka horumarinta ee dhammaan. Siyaasaddani waxay ka soo qaadanaysaa dhinacyada soo socda ee istiraatijiyaddan: horumarinta nabad-gelyada iyo is-xilqaanka dib-u-soo-celinta iyo dib-u-dhex-galka muhaajiriinta Soomaaliyeed, joogtaynta waddooyinka socdaalka, la-dagaalanka tahriibka iyo tahriibinta dadka, ka-qeyb-galka qurba-joogta horumar waara iyo dhimista kharashaadka xawaaladaha. Hirgelinta istiraatijiyaddan waxay hoos imaanaysaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, si ay ula jaan-qaado

Siyaasadda Socdaalka Qaranka. Siyaasaddan ayaa ah qaabdhismeedka guud ee hagaya dhammaan arrimaha socdaalka, oo ay ku jirto socdaalka shaqaalaha.

Qabyo-qoraalka Istiraatijiyadda Xalka Waara ee Qaranka (20252029)

Istaraatijiyadan waxaa fulinaya Wasaaradda Qorsheynta, Maal-gashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-uheshiisiinta. MuddadaWasaaradahan hadda jira waxay dhammaanauaan 2024, iyadaoo qorshooyinka lagu bilaabayo hirgelinta 2025. Siyaasaddani waxay tixraacaysaa istaraatijiyada xalalka waara ee qaranka taas oo abuurtay jawi awood u leh halabuurnimo badan iyo dadaallo saameyn leh (iyo sidoo kale Xoghaynta Xalalka Waara ee la asaasay 2019). Istaraatijiyaddu waxay ujeedadeedu tahay in lagu taageero Soomaaliya sidii loo dammaanad-qaadi lahaa boos maaliyadeed iyo mid siyaasadeed, taasoo u gogol xaareysa xaqiijinta horusocod ee jawi karti leh. Degaankani wuxuu hubinayaa in bulshooyinka ay saamaysay barakaca, oo ay ku jiraan dadka gudaha ku barakacay, qaxootiga, magangalyo-doonka, kuwa soo laabtay iyo bulshooyinka martida loo yahay, ay helaan xalal waara.

Qabyo-qoraalka Siyaasadda Qaran ee TVET Waxbarashada Farsamada iyo Tababarka Xirfadaha)

Ujeeddooyinka ugu waaweyn ee Siyaasadda TVET ee Soomaaliya, marka loo eego socdaalka shaqaalaha, waxay diiradda saaraan xoojinta awoodda shaqaalaha si ay u daboolaan baahiyaha suuqa shaqada gudaha iyo caalamiga ah. Ujeeddooyinkan waa la kala saari karaa dhawr qodob oo muhiim ah:

1. Xoojinta Horumarinta Xirfadaha iyo Fursadaha Shaqo.
2. Hubinta Aqoonsiga Shahaadooyinka iyo Xirfadaha.
3. Taageeridda Socdaalka Ammaan oo Sharci ah.
4. Horumarinta Koboca Dhaqaalaha Waara.
5. Xoojinta Taageerada Dib-u-soo-noqoshada.
6. Dhiirri-gelinta Sinnaanta Jinsiga.

Qaab-dhismeedyada Heer Goboleedka ah

Dhismaha siyaasadda socdaalka shaqaalaha waxaa, sidoo kale, laga dhaxlayaa siyaasadaha sharci iyo qaab-dhismeedyada hay'adaha goboleed ee soo socda:

1. Qaab-dhismeedka Siyaasadda Socdaalka ee Midowga Afrika (MPFA) iyo Qorshaha Hawleedkeeda (2018-2030)
2. Tilmaamaha Midowga Afrika ee Dejinta Heshiisyada Labo-geesoodka ee Shaqaalaha (BLAs)

3. Bayaanka Midowga Afrika ee Ilaalinta iyo Horumarinta Xuquuqda Shaqaalaha Socdaalka
4. Hannaanka Khartoum, Hindisaha Jidka Socdaalka Geeska Afrika ee Midowga Yurub (Noofembar 2014)
5. Qaab-Dhismeedka IGAD ee Socdaalka Shaqaalaha
6. Siyaasadda Socdaalka Shaqaalaha ee Bulshada Bariga Afrika (2024)
7. Shirwaynaha Wasiirrada Goboleedka ee Socdaalka Bariga iyo Geeska Afrika (2020)
8. Qorshaha Ka-jawaabista Socdaalka ee Gobollada Geeska Afrika iyo Yemen (2022)
9. Wadahadalka Socdaalka ee COMESA (2013)

4.2 HABABKA DHAQAN-GELINTA SIYAASADDA

Dawladdu waxay xoojinaysaa Haanaanka Iskuduwidda Qaranka (NCM) ee Socdaalka oo hoos imanaya Xafiiska Madaxweynaha. Guddiga Isku-xirka Shaqaalaha Socdaalka, oo ay guddoominayso Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, ayaa taageeraya hannaankan. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, oo ah hoggaanka fulinta ee Dawladda, ayaa kormeeraya hirgelinta siyaasadda, isagoo fududeynaya xiriirka Golaha Wasiirrada iyo Baarlamaanka.

Xafiiska Madaxweynaha waxaa nidaamkan ku matalaya Ergayga Gaarka ah ee Socdaalka, Soo-noqoshada iyo Xuquuqda Carruurta. Guddiga Isku-xirka Shaqaalaha Socdaalka wuxuu bixinayaa hagitaan siyaasadeed iyo jiheyn istaraatijiyadeed oo ku saabsan arrimaha shaqaalaha socdaalka, isagoo hagaya hirgelinta go'aannada la gaaray. Si ay u hesho xog lagu hagayo tallaabooyinka siyaasadeed, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MOLSA) waxay xoojinaysaa Xarunta Qaran ee Kheyraadka Dijitaalka ee Socdaalka, si loo helo xog lagama-maarmaan ah oo ku saabsan isbeddellada socdaalka shaqada.

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, iyadoo adeegsanaysa madal-wadaaga bulshada, waxay la shaqeynaysaa ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo shaqeeyeyaasha, oo ay ku jiraan Ururka Xiriirka Shaqaalaha Soomaaliyeed sdia, Rugta Ganacsiga Soomaaliyeed, jaaliyadda qurbo-joogta, bah-wadaagta horumarinta, iyo daneeyeyaal kale oo aan dawli ahayn, si ay u fududeeyaan hirgelinta siyaasaddan.

Heer dawlad-goboleed, siyaasaddan waxaa laga hirgelinayaa guud ahaan dalka, waxaana taageeraya Agaasimayaasha Guud iyo saraakiisha shaqada ee ka hawl-gala Waaxda Shaqada ee si buuxda loo dhisay. Dadkii ugu horreeyey ee ka faa'iideysanaya siyaasaddan waa shaqaalaha socdaalaya, kuwaasoo si wanaagsan uga faa'iideysanaya fursadaha shaqo ee socdaalka shaqada.

Dawladdu waxay horumarinaysaa nidaam wada-shaqeyn iyo is-dhex-gal leh oo u dhexeeya hay'adaha kala duwan, si loo xaqiijiyo hirgelinta waxtarka leh ee

siyaasaddan. Si loo dhiso nidaam waara oo isku-dhafan oo loogu talogalay shaqaalaha socdaalaya ee Soomaaliya, Dawladdu waxay dhisaysaa hab hufan, midaysan, oo si wanaagsan loo maal-geliyey, ee leh qaab-dhismeed hirgelin oo cad.

4.3 Dhaqan-geliyeyaasha Fulinta, Isku-dubbaridka iyo Wadashaqeynta Hay'adaha

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa mas'uul ka noqonaysaa iskuxirka iyo wada-shaqeynta Hay'adaha kala duwan, iyadoo hubinaysa in siyaasaddan si mideysan loo hirgeliyo. Wasaaradda waxay hadda martigelisaa shirarka Kooxda Farsamada ee Socdaalka Shaqaalaha. Nidaamkan wuxuu soo koobayaa ka-qeyb-galka daneeyeyaal aan dawli ahayn, oo ay ka mid yihiin: ururrada shaqaalaha, ururrada loo shaqeeyeyaasha, ganacsiga gaarka loo leeyahay, jaaliyadda qurbo-joogta, ururrada aan dawliga ahayn, ururrada ku saleysan bulshada, iyo bah-wadaagta horumarinta.

Natiijooyinka ka soo baxa wada-hadalladan waxay hagayaan shaqada Haanaanka Iskuduwidda Qaranka (NCM), oo hoos yimaada Xafiiska Madaxweynaha, si loo xaqiijiyo daba-galka guud iyo jihaynta siyaasadeed ee shaqaalaha socdaalaya.

Iyadoo qeyb ka ah maareynta socdaalka shaqaalaha, Dawladda waxay saxiixaysaa, ansixinaysaana, hirgelinaysaa, fulinaysaa, oo si joogto ah uga warbixinaysa heshiisyada caalamiga ah, aaladaha goboleed, borotokoollada, axdiyada iyo shuruucda khuseeya shaqaalaha socdaalaya. Sidoo kale, Dawladda waxay horumarinaysaa socdaal shaqo oo sugan, nidaamsan oo joogto ah, iyadoo la adeegsanayo Heshiisyada Shaqo ee Labogeesoodka ah.

Jaantuskan Tusaalaha ah Wuxuu Muujinayaa Doorka Hay'adaha kala duwan ee Fulinta Siyaasaddan



4.4 Qaab-dhismeedka Hay'adaha

Doorarka muhiimka ah ee Hay'adaha kala duwan ay ku leeyihiin hirgelinta siyaasaddan waa:

Hay'adda	Mas'uuliyadaha Fulinta Siyaasadda

Xafiiska Madaxweynaha	• Guddoominta Hannaanka Iskuduwidda Qaranka ee Socdaalka" • Bixinta Taageerada Ergayga Gaarka ah ee Socdaalka, Soonoqoshada, iyo Xuquuqda Carruurta.
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha	Isku-dubbaridka wasaaradaha, hay'adaha iyo waaxyaha si loo hubiyo hirgelinta waxtarka leh ee waajibaadkooda iyo in la soo gudbiyo warbixinno la xiriira tallaabooyinka lagu gaari karo yoolalka siyaasadda. Wakiil ka noqoshada dalka shirarka goboleed iyo kuwa caalamiga ah ee la xiriira socdaalka shaqaalaha."
Baarlamaanka	• In la xaqiijiyo in dhaqaale iyo agab ku filan loo qoondeeyo fulinta siyaasadda • Sameynta, dib-u-eegista iyo kormeerka hirgelinta siyaasadda. • Dejinta, dib-u-eegista iyo la-socodka dhaqan-gelinta siyaasadda
Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda	• Dib-u-eegista Sharciyada iyo Siyaasadaha • Matalaad Sharci • Bixinta Talo Sharciyeed ku saabsan Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha Socdaalka • Bixinta Talo Sharciyeed ee hannaanka Xallinta Khilaafaadka • Wada-shaqeynta Hay'adaha kale ee Sharci • Daba-galka Saameynta Sharciga ee Socdaalka Shaqaalaha • Latalinta Xeerarka Socdaalka iyo Shaqaaleysiinta • Soo-jeedinta dib-u-habaynta Xeerarka Socdaalka Shaqaalaha
Hannaanka Iskuduwidda Qaranka	Isku-dubbaridka guddi-hoosaadyada iyadoo la adeegsanayo hab qaran iyo hab bulsho si loo wadaago xogta, loona xoojiyo jawaabaha isku-dubbaridan ee heer qaran ee mudnaanta la siinayo arrimaha socdaalka, oo ay ku jirto socdaalka shaqaalaha.
Guddiga Iskuduwidda Qaranka ee Socdaalka Shaqaalaha Soomaaliya	Guddigan oo uu guddoominayo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA), wuxuu ka koobnaanayaa wakiillo ka socda hay'adaha muhiimka ah ee Dawladda iyo wada-hawlgaleyaasha bulshada. Ujeeddada ugu weyn ee guddigan waa in la xoojiyo isku-xirka daneeyeyaasha kala duwan iyo in la hubiyo hirgelinta siyaasadda si mideysan oo isku-dhafan.

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada	• Hoggaaminta guud hagidda iyo taageerada farsamo si loo fududeeyo hirgelinta siyaasaddan. • Dhisidda iyo isku-dubbaridka xafiis isku-xir qaran si loo kormeero hirgelinta siyaasadda. • Wada-xaajood la yeelashada bah-wadaagta horumarineed si loo abaabulo kheyraad. • Isku-dubbaridka miisaaniyadda, qorsheynta istiraatijiga ah, sharciyeynta iyo hirgelinta siyaasadaha waaxyaha kala duwan. • Fududeynta dhammeystirka Heshiisyada Labo-geesoodka ee Socdaalka Shaqaalaha (BLMAs). • Kormeerka la jaan-qaadidda, hirgelinta, iyo warbixinta heerarka caalamiga ah ee shaqaalaha. • Bixinta rukhsadaha shaqada. • Hagidda hab-raacyada guud iyo adeegyada la xiriira shaqaalaha Soomaaliyeed ee dibadda u socda shaqo-doon. • Hoggaaminta hirgelinta Nidaamka Xogta Suuqa Shaqada, iyadoo lala kaashanayo Hay'adda Qaranka ee Istaatistikada (Tiro-koobka) Soomaaliya, si loo soo saaro, loona maareeyo, lana faafiyo xogta socdaalka shaqaalaha.
Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah	• Martigelinta Waaxda Qurbo-joogta, taasoo kormeerta hirgelinta siyaasadda qaran ee jaaliyadda dibadda. Siyaasaddan waxay xiriir dhow la leedahay socdaalka shaqaalaha, sida lagu xusay dokumentigan." • Taageeridda dadaallada iyo hab-raacyada sharciyeynta ee lagu hirgelinayo siyaasadda socdaalka shaqaalaha gudaha iyo dibadda. • Taageeridda dejinta iyo dhaqan-gelinta Heshiisyada Labogeesoodka ee Socdaalka Shaqaalaha si loo hubiyo in shaqaalaha ay helaan faa'iidooyin wanaagsan. Fududeynta shaqada safaaradaha, qunsuliyadaha iyo xafiisyada diblomaasiyadeed si ay u taageeraan qurbo-joogta.
Wasaaradda Waxbarashada	• Aqoonsiga shahaadooyinka iyo xirfadaha shaqaalaha socdaalka ee gudaha iyo dibadda. • Taageeridda horumarinta xirfadaha ee machadyada Waxbarashada Farsamada iyo Tababarka Xirfadaha (TVET) iyo jaamacadaha, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo heerarka waxbarashada ilaa heer Diploma. • Waa in la ogaadaa in waajibaadka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) uu daboolayo horumarinta xirfadaha ilaa heer Diploma, halka Wasaaradda Waxbarashadu ay mas'uul ka tahay waxbarashada ka sarreysa heerka Diploma.

Wasaaradda Amniga Gudaha	• Maareynta hab-raacyada dhalashada, socdaalka iyo maamulka kastamada • Taageeridda tallaabooyinka waxtarka leh ee xuduudaha si loo fududeeyo socdaal ammaan ah oo nidaamsan.
Wasaaradda Maal-Qorsheynta, iyo gashiga, Horumarinta Dhaqaalaha	• Taageeridda qaabeynta iyo hirgelinta siyaasadaha kobcinaya shaqaaleysiinta, qorsheynta iyo miisaaniyadda. • Bixinta taageero dhaqaale si loo hirgeliyo siyaasadaha, iyadoo la hubinayo in kheyraadka si hufan loo qoondeeyo lagana xisaabtamo. hirgelinaysaa nidaam xisaabeed hufan si loo xaqiijiyo in kheyraadka la isticmaalo si waafaqsan baahiyaha shaqaalah
Wasaaradda iyo Horumarinta Qoyska Xuquuqda Aadanaha	• Ilaalinta xuquuqda shaqaalaha socdaalka. • Dhiirri-gelinta sinnaanta jinsiga ee socdaalka shaqaalaha. • Bixinta taageero loo fidinayo kooxaha nugul ee shaqaalaha socdaalka. • Sii wadidda u doodista iyo bixinta kaalmo-sharciyeed ee shaqaalaha socdaalka. • La-shaqeynta hay'adaha xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah. • Horumarinta siyaasado la xiriira dib-u-midoobidda qoysaska. • Daba-galka iyo soo-saarista warbixinnada la xiriira daryeelka shaqaalaha socdaalka. • Hirgelinta ololayaal wacyi-gelin iyo barnaamijyo waxbarasho oo ku saabsan xuquuqda shaqaalaha socdaalka. • Isku-dubbaridka barnaamijyada ilaalinta bulsho ee shaqaalaha socdaalka. • Hubinta in siyaasadaha iyo xeerarka ay la jaan-qaadaan heerarka xuquuqda aadanaha.

Wasaaradda Caafimaadka	• Qiimeynta xaaladda caafimaadka shaqaalaha iyo go'aaminta baahiyaha daryeel caafimaad. • waxay hubinaysaa in dhammaan shaqaalaha helaan caymis caafimaad iyo adeegyada lagama-maarmaanka ah. • Wasaaradda Caafimaadka waxay xoojinaysaa dadaallada lagu ilaalinayo caafimaadka dadweynaha iyo ka hortagga cudurrada faafa. • Iskaashi lala yeesho hay'adaha caalamiga ah si loo xoojiyo nidaamka daryeelka caafimaadka shaqaalaha. • Cilmi-baaris joogto ah iyo daba-gal lagu sameeyo xaaladaha caafimaadka si loo hagaajiyo adeegyada caafimaad. • Hirgelinta barnaamijyo wacyi-gelin caafimaad ah si bulshada loogu baraarujiyo muhiimada nadaafadda iyo ka hortagga cudurrada. • Xuquuqda caafimaad ee shaqaalaha socdaalka waa in la ilaaliyo

	oo la hormariyo si ay helaan daryeel caafimaad oo habboon.
Hay'adda Qaranka ee Istaatistikada (Tiro-koobka) Soomaaliya	• Qorsheynta iyo sameynta sahanno si loo ururiyo xog muhiim ah oo ku saabsan socdaalka shaqaalaha. • Ururinta iyo faafinta tiro-koobka si loogu daro Nidaamka Macluumaadka Suuqa Shaqada (the Labour Market Information System LMIS). • In la taageero maamul-daadejinta iyo kala-soocidda adeegyada tiro-koobka iyo bixinta kaalmo farsamo oo ku saabsan soo-saarka tiro-koobka shaqada. • In la diiwaan geliyo oo la faafiyo daraasaadka cilmi-baarista iyo qiimeynta mowduucyada ee isbeddellada soo baxaya ee qorsheynta shaqaalaynta, iyadoo la siinayo aragtiyo siyaasadeed si loo ogeysiiyo hirgelinta. Ka qeyb-qaado hirgelinta Nidaamka Macluumaadka Suuqa Shaqada, iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Shaqada MoLSA, si loo soo saaro, loona maareeyo oo lana faafiyo xogta socdaalka shaqada.

Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda	• Bixinta fiisooyinka iyadoo la raacayo xeerarka la dejiyey. Difaacida xakamaynta xuduudaha iyo sharciyada socdaalka. Dokumentiga iyo diiwaangelinta shaqaalaha socdaalka. • Sameynta qiimeyn ku saabsan suuqa shaqada iyo go'aaminta tirada shaqaalaha loo baahan yahay. • Wada-shaqeynta loo leeyahay loo-shaqeeyeyaasha iyo shirkadaha shaqaaleysiinta. Kormeerka iyo hirgelinta shuruudaha shaqo ee loo-shaqeeyeyaasha shaqaalaha socdaalka. • Isku-xirnaanta hay'adaha kale ee Dawladda. • Hubinta in la raaco heerarka caalamiga ah ee socdaalka." • Sameynta ololayaal wacyi-gelin dadweyne oo ku saabsan socdaalka. • Ka-jawaabista wax-ka-qabashada dhibaatooyinka socdaalka ama xaaladaha degdegga ah
Hay'adaha Horumarinta ee Caalamiga ah	• In uu gacan ka geysto abaabulka ilaha dhaqaale si loo xaqiijiyo hirgelinta qodobbada siyaasaddan. • Bixinta kaalmo farsamo inta lagu jiro muddada fulinta siyaasadda, sida loo baahan yahay, oo ay ku jiraan sameynta dib-u-eegis istiraatijiyadeed, qiimayno iyo daraasado kale. • In la wadaago hababka ugu wanaagsan ee caalamiga ah ee socdaalka shaqada.
Dawladgoboleedyada	• Ku darista qorsheynta shaqada iyo isku-xirnaanta arrimaha shaqada iyo shaqaaleysiinta heer dawlad-goboleed. • In ay kormeeraan hirgelinta siyaasadaha heer degaan. • Hubinta shaqaaleysiinta iyo dejinta shaqaalaha kormeerayaasha shaqada. • Fulinta sharciga shaqada. • Taageeridda hirgelinta sharciga shaqada iyo adeegyada shaqaaleysiinta la xiriira.
Kormeerayaasha Shaqada ee Heer Degmo	□ Daba-galka la-socodka iyo dhaqan-gelinta heerarka shaqada iyo siyaasadaha socdaalka ee heer degmo. .

Wada-hawlgaleyaasha Bulshada	• Taageeridda u-hoggaansanaanta heerarka iyo xeerarka la dejiyey. • Difaacista horumarinta xuquuqda shaqaalaha, ilaalinta iyo wadaxaajoodka guud. • Sameynta cilmi-baaris, keydinta iyo diiwaan-gelinta iyo wadaagista natiijooyinka si loo taageero hirgelinta siyaasadda.
Ganacsiga Gaarka Ah	• Dhammeystirka dadaallada Dawladda iyadoo la siinayo khibrad, dakhli iyo hal-abuurnimo dhinaca shaqada. • Abuurka fursado shaqo, oo ay ku jiraan horumarinta teknoolajiyada iyo hal-abuurka. • Taageeridda tababarada warshadaha, tababarada shaqada iyo shaqooyinka tababarka. • Kobcinta iskaashiga dawladda iyo Ganansiga gaarka ah ee shaqo abuurka.
Dhaqdhaqaaqayaasha Aan Dawliga Ahayn (NGOs iyo Ururrada Bulshada Rayidka ah (CSOs), Jaamacadaha, Warbaahinta)	• La-shaqeynta Dawladda si loo xaqiijiyo hirgelinta waxtarka leh ee barnaamijyada horumarinta shaqo. • Difaacista u-hoggaansanaanta heerarka shaqada iyo xeerarka si loo ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha socdaalka. • Taageeridda iyo ka qeyb qaadashada tababarka iyo cilmi-baarista dhinacyada kala duwan ee shaqo-abuurka. • Aqoonsiga iyo la wadaagista dhaqamada ugu wanaagsan ee wadahawl-galeyaasha bulshada. • Difaacista nidaamyada daba-galka iyo kormeerka si loo hubiyo uhoggaansanaanta heerarka ugu hooseeya ee shaqada iyo sharciga. • Faafinta mabda'a siyaasaddan iyadoo loo marayo warbaahinta kala duwan.

5. Maaliyadda iyo soo-ururinta Kharashaadka

1. Dawladda ayaa hoggaaminaysa dadaallada lagu dhaqaajinayo kheyraadka dhaqaale, farsamo iyo midka hawl-galka si loo taageero hirgelinta siyaasadda. Qodobbada muhiimka ah ee kheyraadka ah ee ay ku jiraan: Taageeridda shaqada joogtada ah ee Guddiga Isku-xirka Siyaasadda Qaranka warbixinta u soo gudbisa NCM.
2. Dhisidda nidaam xogta suuqa shaqada oo si buuxda u shaqeynaya.
3. Xoojinta awoodda hay'adaha si loo hirgeliyo siyaasadaha si waxtar leh dhammaan heerarka.
4. Iyadoo la tixgelinayo caqabadaha kheyraadka iyo dhaqaalaha, Dawladda waxay isticmaalaysaa hababka maal-gelinta kala duwan, oo ay ku jiraan:

Kheyraadka loo qoondeeyo Wasaaradaha, Waaxyaha, Hay'adaha iyo dawlad-goboleedyada ka tirsan miisaaniyadda qaranka; Taageero ka timid bah-wadaagta horumarinta (oo ay ku jiraan ILO, IOM, UNOCHA, UNHCR, UNDP, World Bank, Islamic Bank, GIZ iyo bah-wadaagta horumarinta ee labada iyo ka badan).

5. Kheyraadka laga helo gudaha dalka iyadoo loo marayo ilaha canshuurta iyo kuwa aan canshuurta ahayn (tusaale ahaan, ururinta lacagaha la bixiyo ee Visas, rukhsadaha shaqada iyo khidmadaha ay bixiyaan PEAs, iyo diiwaan-gelinta ganacsiga; iyo kuwa kale).
6. Dhaqaalaha laga helo iskaashiga Dawladda iyo ganacsiga gaarka ah (PPPs) ee ku saabsan tallaabooyinka la qaado oo ay iskaashanayaan Dawladda iyo ganacsiga gaarka ah, iyo bah-wadaagta horumarinta kale.
7. Deeqaha, amaahda (oo ay ku jiraan amaahda dhaqaalaha yar ee mudnaanta leh) ee Dawladda ay raadsan karto si loo taageero tallaabooyinka muhiimka ah ee taageeraya habka socdaalka shaqaalaha.
8. Isticmaalka Sanduuqyada Maal-gelinta Gaarka ah iyo xirmooyinka kale ee maaliyadeed ee hay'adaha maaliyadeed, ururrada caalamiga ah iyo CSOs oo taageeraya maamulka socdaalka shaqaalaha ee IGAD, COMESA iyo meel ka baxsan.
9. Ilaha kale ee maal-gelinta (tusaale ahaan, maal-gelinta cimilada oo xallinaysa dhibaatooyinka masiibooyinka ka dhasha cimilada ee keena barakac dadka iyo socdaalka qasabka ah; iyo sidoo kale ururinta lacagaha laga helo xubnaha qurbojoogta).

In kasta oo Dawladda ay hoggaaminayso ururinta kheyraadka lacagaha si loo hirgeliyo siyaasaddan, waxay dooneysaa in ay dhiirri-geliso daneeyeyaasha kale inay ka qeyb qaataan ururinta kheyraadka. Tani waxaa lagu gaarayaa iyadoo la maal-gelinayo mashaariic soo saaraysa lacag iyo taageero farsamo oo loogu talogalay hirgelinta siyaasadda. Wada-hawl-galeyaasha bulshada, hay'adaha gaarka loo leeyahay, ururrada aan dawliga ahayn (NGOs) iyo ururrada bulshada rayidka ah sida shirkadaha shaqaaleysiinta waxaa lagu taageerayaa sameynta soo-jeedin lacag ururin ah oo loo gudbinayo hay'adaha horumarinta badan, ururrada Qaramada Midoobay, bankiyada horumarinta iyo hay'adaha kale ee maal-gelinta horumarinta ee bixiya maal-gelinta muddada dheer iyo taageerada farsamo.

Kheyraadka loo baahan yahay hirgelinta siyaasadda waa farsamo iyo hawl-gal, taasoo u baahan in la qaato kaabayaasha cusub ee adag iyo jilicsan. Sidaas darteed, hababka maal-gelinta iyo ururinta kheyraadka waxay ku jiriya aqoonsiga baahiyaha aan maaliyadeed ahayn ee kaalin muhiim ah ka ciyaara maamulka socdaalka shaqaalaha. Baahiyahaas waxaa ka mid ah:

1. Qalabka lagu xakameeyo xuduudaha, sida kamaradaha CCTV, qalabka baarista, qalabka gelinta xogta iyo falanqaynta, kaabayaasha amniga internetka, iyo tababarada la xiriira isticmaalka qalabkan. Iyadoo ay socdaalka shaqaalaha yahay arrin ka baxsan hal waax, waxaa muhiim ah in dhammaan hay'adaha lagu aqoonsaday qorsheyaasha hirgelinta ay iskugu keenaan kheyraadka si ay ugu sameeyaan maal-gelin istiraatiji ah oo ay kor u qaaddo guulaha siyaasaddan.

2. Hufnaanta iyo mas'uuliyadda ayaa muhiim u ah in la xaqiijiyo isticmaalka kheyraadka la ururiyey ee ugu wanaagsan. Dawladda waxay sii wadaysaa dadaallada lagu dhisayo awoodda wasaaradaha, waaxyaha, hay'adaha iyo dawlad-goboleedyada si loo hubiyo isticmaalka kheyraadka ugu wanaagsan, iyadoo la xaqiijinayo in hirgelinta siyaasadda lagu sameeyo si hufan oo mas'uuliyad leh.

6. Hababka Isgaarsiinta

Si loo abuuro wacyi-gelin iyo fahamka ku saabsan siyaasaddan, Dawladda ayaa adeegsanaysa habab is-gaarsiineed iyo kanaallo kala si ay ugu dhiirrigeliso daneeyeyaasha taageero u fidinaya hirgelinta siyaasadda. Ujeeddada is-gaarsiinta waa in la kor-qaado masuuliyadda ee daneeyeyaasha kala duwan ee ku saabsan hab-raacyada socdaalka shaqaalaha, hawl-gallada xeer-dejinta, xuquuqda shaqaalaha socdaalka, iyo fursadaha shaqo ee Soomaaliya iyo dalalka loo socdaalo. Kala-duwanaanshaha dadka ayaa la gaarayaa iyadoo la adeegsanayo habab isgaarsiineed kala duwan, iyadoo lagu saleynayo baahiyaha iyo doorbidda ay qabaan. Tani waxay ku lug leedahay isticmaalka noocyo kala duwan oo macluumaad ah, kuwaasoo loo faafinayo kanaallo kala duwan, sida hoos ku xusan:

7. Gaarsiinta Xukuumadda iyo Hay'adaha kale ee Dawladda

Ka dib ansixinta siyaasaddan Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska ayaa adeegsanaua kanaallo warbaahineed ballaaran iyo xeelado is-gaarsiineed si loo faafiyo siyaasaddan, oo ay ku jiraan: barnaamijyada raadiyaha, documentaries-ka telefishanka, agabyo macluumaad, waxbarasho iyo is-gaarsiin, xayeysiisyada, buugaagta, joornaalada, warqadaha, boorar, iyo xayeysiisyo kale oo la mid ah.

Dawladda federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah ayaa taageeraya inay la shaqeeyaan dhaq-dhaqaaqayaasha aan dawliga ahayn iyo qeybta gaarka loo leeyahay si ay u helaan jawaab celin ka timid muwaadiniinta ku saabsan waxtarka siyaasadda. Jawaabaha laga helayo ayaa noqonaya saldhigga

Dawladda ay ka bilaabaysaa tallaabooyin waafaqsan si looga jawaabo arrimaha soo bixaya. Xogta laga ururiyo hab-raacyadan is-gaarsiineed waxaa lagu darayaa xarunta xogta dhexe ee Nidaamka Kheyraadka Socdaalka ee Dijitaalka ah. Tani waxay noqonaysaa meel keydinta iyo maareynta dhammaan xogta socdaalka shaqaalaha iyo habka ilaa heerarka federaalka iyo dawlad-goboleedyada, iyadoo la adeegsanayo kanaallo isgaarsiineed oo ku habboon.

8. Gaarsiinta Wada-hawl-galeyaasha Bulshada

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, oo qeyb ka ah habka saddex-geesoodka ah iyo xulafada la shaqeeya ilaa heerka degmo, waxay adeegsanaysaa shabakado iyo dhacdooyinka wadahadalka bulshada, shirarka, aqoon-is-weydaarsiyada, faafinta warsidaha iyo hawl-gallada warbaahinta kale si ay u caan-qaadiso siyaasaddan. Dawladda ayaa taageeraysa booqashooyinka is-dhaafsan iyo qabanqaabinta munaasabadaha lagu soo bandhigayo tusaalooyinka ugu wanaagsan ee ku saabsan socdaalka shaqaalaha, taasoo dhiirrigelisa habab cusub iyo nidaamyada waxtarka leh.

9. Gaarsiinta Shaqaalaha Socdaalka Soo Gelaya iyo Kuwa Ka Baxaya

Si looga hadlo shaqaalaha socdaalka ee ka baxaya dalka, MoLSA waxay dhisaysaa goobo is-dhex-gal ah, oo ay ku jiraan barnaamijyo raadiyo iyo telefishan, shirar, kulammo bulshada, is-dhex-gal online ah oo ay la sameynayaan muwaadiniinta Soomaaliyeed ee qurbo-joogta ah, iyo sidoo kale barnaamijyada war-baahinta bulshada iyo bogga internet-ka si loo faafiyo mabaadi'da muhiimka ah ee siyaasaddan. Shaqaalaha soo gelaya, fariimo si gaar ah loo diyaariyey ayaa loo sameynayaa si looga daboolo baahiyaha macluumaad ee kala duwan ee shaqaalaha u socda Soomaaliya. Fariimahaan waxay ka hadlayaan siyaasaddan, siyaasadaha la xiriira, nidaamyada sharciga, iyo adeegyada Dawladda ee taageeraya shaqaalaha. Dhanka kale, FESTU waxay adeegsanaysaa Xarunteeda Socdaalka si ay siyaasaddan ugu faafiso daneeyeyaasha ay khuseyso.

10. Gaarsiinta Dawladaha Dalalka Martida Loo Yahay

Dawladdu waxay adeegsanaysaa safaaradaheeda, wakiillada iyo qunsuliyadaha dibadda, iyo sidoo kale teknoolajiyada casriga ah iyo codsiyada is-gaarsiinta, si loo xaqiijiyo is-gaarsiin waxtar leh iyo wadaagista macluumaadka la xiriira dawladaha dalalka loo socdo. Dawladda ayaa sidoo kale ka faa'iidaysanaysaa kanaallo isgaarsiineed dijitaal ah si ay uga wargeliso dadka gudaha iyo dibadda ee daneeyeyaasha muhiimka ah horumarka gobolka iyo heerarka caalamiga ah ee socdaalka shaqaalaha.

11. Helitaanka Fal-celinta/Jawaab-celinta

Si loo hubiyo habka gaarsiinta ee labo-geesoodka ah, dawladdu waxay dejinaysaa nidaam elektaroonig ah oo lagu maamulo cabashooyinka, xarun wicitaan oo leh khad lacag la'aan ah oo loogu talo-galay weydiimaha dadweynaha, isla markaana leh aaladaha is-dhex-galka bulshada. Marka la is weydaarsado macluumaadka ku saabsan siyaasaddan iyo hirgelinteeda, fal-celinta ama jawaab-celinta daneeyeyaasha la helo ayaa loo baaraan-degayaa si ay gacan uga geysato horumarinta joogtada ah ee nidaamka. Habkan wada-xiriirka ah wuxuu kor u qaadayaa qaddarinta wadajirka ah ee ka-qeyb-qaadashada socdaalka shaqadu ku leeyahay horumarinta qaranka.

Guud ahaan, is-gaarsiinta ku saabsan siyaasaddan waxay noqonaysaa hannaan labogeesood ah. Dhanka kale dawladdu waxay sii wadaysaa qabashada jawaab-celinada /fal-celinada dhammaan dadka ay khusayso iyadoo loo marayo ka-qeyb-galyo kala duwan oo is-dhex-gal ah oo ku saabsan arrimaha la xiriira hirgelinta siyaasaddan. Isdhex-galkaani wuxuu fursad siinayaa daneeyeyaasha siyaasaddan si ay uga wada hadlaan arrimaha muhiimka ah oo ay ku heshiiyaan isbeddellada la soo jeediyey ama dib-u-habaynta laga yaabo inay soo baxaan ama loo baahdo muddo ka dib.

12. Qaab-dhismeedka Kormeerka, Qiimeynta iyo Barashada

Habka Is-kuduwidda Qaranka wuxuu hubinayaa in hirgelinta siyaasaddan si joogto ah loo kormeero oo la qiimeeyo si loo ogaado heerka gaaridda himmillooyinkeeda, hawl-galka iyo natiijooyinka. In kasta oo Wasaaradda Shaqada ay kormeerto hirgelinta siyaasadda, habka sare ayaa qaadaya doorka kormeerka heer sare ah. Waxqabadka hirgelinta siyaasaddan waxaa lagu qiimeynayaa iyadoo lala barbardhigo Qorsheha Horumarinta Qaranka ee Soomaaliya iyo halka loo marayo in la gaaro Ujeeddooyinka Horumarinta Waara ee Qaramada Midoobay. Intaas waxaa sii dheer, siyaasaddan waxaa lagu qiimeynayaa iyadoo la tixraacayo saameynta ay ku leedahay siyaasadda guud ee socdaalka dalka, iyadoo la tixgelinayo socdaalka shaqaalaha sida qeyb ka mid ah qaab-dhismeedka siyaasadda socdaalka guud.

12.1 Kormeerka

Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta ee socdaalka shaqaalaha hadda waxaa maamula Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulsahda, oo wada shaqeyn la leh Wasaaradda Qorsheynta, Maal-gashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha iyo Hay'adda Is-taatitikada Qaranka ee Soomaaliya. iyadoo hoos timaada siyaasaddan, cid kasta oo hirgelinaya /ka-qeyb-gal kasta oo hirgelinaya ayaa kormeeraya hawl-gallada oo warbixin ka siinaya horumarka sanadlaha ah, iyadoo la raacayo Tilmaamayaasha Waxqabadka Muhiimka ah (Key Performance Indicators KPIs). Sahan asaasi ah ayaa lagu sameynayaa sannadka ugu horeeya si loo ururiyo xogta bilowga ah ee ku saabsan socdaalka shaqaalaha, iyadoo la dejinayo yoolalka siyaasadda. MoLSA ayaa iskudubbaridaya macluumaadka ka soo ururay hay'adaha kala duwan

warbixin sannadeedka waxqabadka. Dhisidda nidaam xogta suuqa shaqada ee shaqeyneysa ayaa siinaya xogta shaqada ee la cusbooneysiiyey, taasoo ka dhigaya habkan mid ka sahlan. LMIS waxay keydinaysaa tilmaamayaasha socdaalka shaqaalaha iyo KPIs, taasoo suurtogal ka dhigeysa Sahlidda muuqaalka horumarka muddo waqti. Dib-ueegisyada sanadlaha ah ayaa lagu cabbirayaa horumarka, waxaana warbixinnada la soo gudbinayaa kulammada Guddiga Isku-xirka Qaranka. Natiijooyinka waxaa la wadaagayaa NCM si loo muujiyo horumarka. Si loo hubiyo Kormeerka iyo Qiimeynta wax-ku-ool ah, waxaa la dhisayaa qaab-dhismeed iyo qorshe hawleed kormeer iyo qiimeyn ah si loo raadiyo horumarka hirgelinta siyaasadda. Dib-u-eegista farsamo ee soo gudbinta waxay iftiiminaysaa meelaha u baahan in fiiro gaar ah loo yeesho, iyadoo Dawladda ay qaadaya tallaabooyin ku habboon sannadaha hirgelinta ee soo socda. Habkani wuxuu sidoo kale ka koobnaanayaa falanqaynta baahiyaha kheyraadka dhaqaale, farsamo, hawl-gal iyo kuwo kale.

12.2 Qiimeynta

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulsahda ayaa hoggaaminaysa kormeerka joogtada ah ee hirgelinta iyo amrada qiimeynada. Dib-u-eegista dhexdhexaadinta waxay qiimeynaysaa horumarka bartamaha muddada hirgelinta, iyadoo la bixiyo talooyin lagu saxo qaab-dhismeedka hirgelinta siyaasadda. Dhammaadka muddada hirgelinta siyaasadda, MoLSA ayaa amraysa qiimeyn dhammeystiran si loogu wargeliyo qaabeynta siyaasadda beddelka ah, toban sano ka dib hirgelinta.

12.3 Barashada

Kormeerka joogtada ah ee waxqabadka iyo sidoo kale qiimeynnada gudaha ee madaxa-bannaan, waxaa lagu sameynayaa si loo bixiyo macluumaad ku saabsan barashada xogta. Waaxda qorsheynta siyaasadda iyo Daba-galka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa hoggaaminaysa in macluumaadkan uu gaaro sameeyeyaasha siyaasadda, taasoo ka caawineysa inay dibu-eegaan oo ay taageeraan helitaanka natiijooyinka siyaasadda ee la filayo. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa u gudbinaysa natiijooyinka hirgelinta siyaasadda, iyadoo soo bandhigaysa warbixinnada iyo talooyin ay uga soo baxaan Wasaaradda Qorsheynta iyo Hay'adda Is-taatikada Qaranka. Faa'idada ugu dambeysa ee Daba-galka iyo Qiimeynta waa barashada joogtada ah ee hagaajinta nidaamka, taasoo u sahlaysa in la gaaro yoolalka siyaasadda, hawl-galka iyo himmillooyinka.

13. GUNAANADKA

Siyaasaddani waxay ka tarjumaysaa sida ay Soomaaliya uga go'an tahay in ay dhisto hannaan socdaal oo cadaalad ah loona dhan yahay kaas oo kor u qaadaya horumarka dhaqaalaha iyo bulshada, isku dheellitirnaanta baahiyaha suuqayada gudaha iyo ilaalinta sharafta shaqaalaha socdaalka ah.

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxay xaqiijinaysaa in guusha siyaasaddan ay ku xiran tahay:

a) Iskudubarid wax ku ool ah oo ka dhexeeya dhammaan hay'adaha dawladda, lahawlgalayaasha bulshada iyo qaybta gaarka ah.
b) Dabacsanaanta iyo la qabsiga isbeddelada dadweynaha iyo dhaqaalaha caalamiga ah.
c) Daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka hirgelinta habraacyada iyo barnaamijyada.

Waxaan ugu baaqeynaa dhammaan dhinacyada ay khuseyso in ay qaataan aragtidan oo ay ka wada shaqeeyaan sidii loogu beddeli lahaa xaqiiqada, iyadoo mudnaanta koowaad la siinayo sidii shaqaalaha muhaajiriinta ah looga ilaalin lahaa ka faa'ideysiga iyo in ay ka qeyb qaataan horumarinta Soomaaliya iyo dalalka ay u socdaan.

Ugu danbeyn, waxaa loo baahan yahay siyaasadan in shantii (5) sanaba mar dib u eegid lagu sameeyo si ay ula jaanqaado horumarka sharciga caalamiga iyo kan maxaliga ah, loona waafajiyo xaaladaha dhaqan-dhaqaale iyo qorshaha qaran markaas jira, iyadoo laga faa'ideysanayo caqabadahii jiray iyo casharradii laga bartay muddadaas.

Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 182 **Taariikh: 13/07/2025**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
13 JUL 2025
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

XEER RA'IISAL WASAARE

MAGACAABIDDA XUBNAHA GUDDIGA QARAN EE TACLIINTA SARE

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad faqradaha (1)iyo (2); Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (f), (g), iyo (i); Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG ah ee JFS;

Markuu arkay: **Qodobbada 9(1), 11, iyo 12** ee Sharciga Tacliinta Sare (**Sharci Lr. 30** ee **04/12/2024**);

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay **WWH&TS/XW/37/07/2025** kuna taariikheysan **08/7/2025** ee Wasaaradda Waxbarashda Hiddaha iyo Tacliinta Sare , kuna saabsan "**Soojeedinta Magacaabidda Xubnaha Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare**";

Markuu arkay: Taariikh nololeedka, aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin xubnaha la soojeediyay;

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.19.122.07.25** ee **10/07/2025**, kuna saabsan soogudbinta **"Magacaabidda Xubnaha Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare"**oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Baahida loo qabo in la dhiso Guddiga si sare loogu qaado tacliinta sare ee dalka .

Waxaa uu meelmariyay:

Qodobka 1aad:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.19.122.07.25** ee **10/07/2025**, kuna saabsan soogudbinta **"Magacaabidda Xubnaha Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare"**oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad:

Magacaabid

Waxaa **xubnaha Guddiga Tacliinta Sarrre** loo magacaabay xubnaha hoos ku xusan:

1. Dr. Cabdinuur Sh. Maxamuud
2. Dr. Maxamed Cali Faarax
3. Dr. Ayaan Sh. Cabdullaahi Maxamed
4. Dr. Axmed Adam Maxamed
5. Dr. Roble Ibrahim Liban
6. Dr. Cabdulqaadir Cabdulle Cibaar
7. Dr. Cabdishakuur Sh. Xasan (Fiqi)
8. Dr. Cabdullaahi Maxamuud Shariif
9. Dr. Cabdiwahab Ali Mumin
10. Dr. Cismaan Maxamed Cabdiraxman
11. D r. Faysal Cabdiraxmaan Cabdullahi
12. Dr. Maxamed Macallin Abdullahi Kutub
13. Dr. Maxamad Ibraahim Nuur
14. Dr. Maxaamuud Yusuf Garre
15. Dr. Nadiifa Sheekh Cumar

Qodobka 3aad:

Dhaqangal

Magacaabiddani, waxaa ay dhaqangalaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-046-2025
TAARIIKH : 09-08-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guleid
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 183 **Taariikh: 02/08/2025**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
03 AUG 2025
EXII
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA DHIJITALAYNTA NIDAAMKA MAARAYNTA MAALIYADDA GUUD.

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo ee Qodobka 100aad Faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay MOF/**OM/02012025** ee ku taariikheysan **22/07/2025** ee Wasaaradda Maaliyadda kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Dhitijalaynta Nidaamka Maaraynta Maaliyadda Guud;**

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.22.125.07.25** ee **31/07/2025,** kuna saabsan Ansixinta **"Xeer-nidaamiyaha Dhitijalaynta Nidaamka Maaraynta Maaliyadda Guud"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyay: Muhiimadda uu u leeyahay fududaynta adeegsiga hannaan maaliyaddeed oo amni ah **"Xeer-nidaamiyaha Dhitijalaynta Nidaamka Maaraynta Maaliyadda Guud"**

Wuxuu Meelmariyay:

Qodobka 1aad:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.22.125.07.25 ee 31/07/2024,** kuna saabsan ansixinta **"Xeer-nidaamiyaha Dhitijalaynta Nidaamka Maaraynta Maaliyadda Guud"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad:
Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 3aad
Dhaqanqal

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-059-2025
TAARIIKH : 09 - 08 - 2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Guuleed
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

2025

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA MAALIYADDA

XEER-NIDAAMIYAHA DIJITAALAYNTA MAAREYNTA MAALIYADDA GUUD

TUSMO:

CUTUBKA 1-AAD: QODOBBO GUUD **4**

Qodobka 1aad: Magaca Xeer-nidaamiyaha 4 Qodobka 2aad: Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyahan 4

Qodobka 3aad: Erey Bixin 5

CUTUBKA 2-AAD: SAXIIXA ELEKTROONIGA AH **7**

Qodobka 4aad: Saxiixa Elektrooniga ah 7
Qodobka 5aad: Adeegga Shahaado Bixiyayaasha 7
Qodobka 6aad: Hab-dhaqanka Saxiixaha 10

CUTUBKA 3-AAD: DIIWAANNADA ELEKTROONIGA AH IYO ISGAARSIINTA ELEKTROONIGA AH **11**

Qodobka 7aad: Diritaanka iyo Helitaanka Diiwaannada Elektrooniga ah 11
Qodobka 8aad: Beddelista Dukumentiyada 12
Qodobka 9aad: Xeerarka Caddeymaha 12

Qodobka 10aad: Elektroonig ahaan in Dukumentiyada ama Xogta loo Keydiyo 13
Qodobka 11aad: Halbeegga (Heerka) ku Kal-soonaanta 13
Qodobka 12aad: Ilaalinta Taariikhda iyo Waqtiga 13
Qodobka 13aad: Dhawrista Tayada Diiwaanka Elektarooniga ah Muddada uu Keydka ku Jira 13
Qodobka 14aad: Reebbanaanta Wax-ka-Beddelka 14
Qodobka 15aad: Dhammaadka Muddada Keydinta Xog-burburinta 15

CUTUBKA 4-AAD: MAAMULIDDA XOG MAALIYADEED 16

Qodobka 16aad: Baaxadda Maamulka Xog Maaliyadeed 16
Qodobka 17aad: Mabaadi'da Guud ee Maareynta Xog Maaliyadeed 16
Qodobka 18aad: Qaab-maareynta Xog Maaliyadeed 16
Qodobka 19aad: Isla Shaqeynta Nidaamyada 17
Qodobka 20aad: Lakab-xogeedyada Maaliyadeed 17
Qodobka 21aad: Maamulayaasha Xog Maaliyadeed 17
Qodobka 22aad: Ilaaliyeyaasha Xog Maaliyadeed 19
Qodobka 23aad: Khubarada Aagg-xogeedka Maaliyadda 19
Qodobka 24aad: Kala-soocidda Xogta 20
Qodobka 25aad: Waajibaadka iyo Xeerarka Wadaagista Xogta 21
Qodobka 26aad: Hanti-dhawrka Gudaha ee Sare (Chief Internal Auditor) 21
Qodobka 27aad: Hanti-dhawrka Guud ee JFS 22 **CUTUBKA 5-AAD: MASUULIYADAHA HIRGELINTA TEKNOLOOJIYADDA DIJITAALKA EE CASRIGA AH 22**

Qodobka 28aad: Xisaabiyaha Guud 22
Qodobka 29aad: Agaasimaha Miisaaniyadda 22
Qodobka 30aad: Saraakiisha Idman 23
Qodobka 31aad: Qorsheyaasha Joogteynta Shaqada Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Somaaliyeed (SFMIS) 23
Qodobka 32aad: Hannaanka Korjoogteynta Guulaha 23
Qodobka 33aad: Istiraatiijiyadda Maareynta Isbeddelka 24

CUTUBKA 6-AAD: GARAADKA MACMALKA AH 25

Qodobka 34aad: Ujeeddada iyo Baaxadda Adeegsiga Garaadka Macmalka ah 25
Qodobka 35aad: Mabaadi'da Gundhigga u ah Adeegsiga Garaadka Macmalka ah 25
Qodobka 36aad: Samaynta iyo Hawl-gelinta 25
Qodobka 37aad: Qiimeyn iyo Kormeer Joogto ah 26

Qodobka 38aad: Tababar iyo Wacyigelin 26

Qodobka 39aad: U hoggaansanaanta Sharciyada 26

Qodobka 40aad: Ka Qeyb-qaadashada Dadweynaha iyo ka Warbixinta 26

CUTUBKA 7-AAD: QODOBBADA KALE EE GUUD 27

Qodobka 41aad: Ka Reebid 27

Qodobka 35aad: Dhaqan-galka 27

Lifaaq 1-aad: Lakab-xogeedyada Maaliyadda (Fiscal Datasets) 28

CUTUBKA 1-AAD
QODOBBADA GUUD

Qodobka 1aad: Magaca Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa "Xeer-nidaamiyaha Dijitaalaynta Nidaamka Maareynta Maaliyadda Guud".

2. Xeer-nidaamiyahan waxa uu khuseeyaa Xafiisyada Dadweynaha, Mashaariicda ay deeqbixiyayaashu maalgeliyaan iyo Shirkadaha Dawladdu leedahay ama qeyb ku leedahay intaba.

3. Xeer-nidaamiyahan waxa uu khuseeyaa dhammaan maamullada hoos taga Dowladda Federaalka ah.

4. Sida ku cad Qodobka 1(4) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019, Xeernidaamiyahan waxa uu sidoo kale khuseeyaa Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ah, waxaa lagu dabaqayaa ilaa xadka lagu sheegay Xeer-nidaamiyahan, iyada oo aan waxba loo dhibayn xeerka dhaqangalka ah ee heer federaal, ee u dejisan maaraynta maliyadda Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Fedaraalka.

Qodobka 2aad: Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyahan

1. Ujeeddada Xeer-nidaamiyahan waa dhaqan-gelinta Qodobka 56-aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud (2019), si taas loo xaqiijiyo, waxa la dejinayaa xayndaabhawlaha aasaasi ah oo:

   b. loo raaco hawlaha soo iibsiga iyo adeegsiga saxiixyada elektarooniga ah, marka la fulinaayo howlaha maareynta maaliyadda guud ee hoos yimaada Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019;

   t. lagu fududaynaayo adeegsiga ammaanka wax-ku-oolka ah ee isgaarsiinta elektronigga ah, marka la fulinaayo howlaha maareynta maaliyadda guud ee hoos yimaada Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019;

j. loogu talagalay xadidista (qeexitanka) masuuliyadaha maamulka xogta maaliyadeed;

x. loogu talagalay xadidista masuuliyadaha ku saabsan hirgelinta tiknoolajiyada dijitalka ah iyo sii wadista shaqada Hannaanka Maamulista Maaliyadda Soomaaliya ee Elektarooniga ah – Somalia Financial Management Information System; iyo

kh. loogu talagalay adeegsiga garaadka macmalka ah (artificial intelligence), marka la qabanaayo shaqooyinka Maamulka Maaliyadda Guud.

Qodobka 3^{aad}: Erey Bixin

Haddii aan si kale loogu qeexin Xeer-nidaamiyahan gudihiisa, ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa macnaha ku hor qoran:

1. **"Garaadka Macmalka ah (Artificial Intelligence)":** waxa loo la jeedaa aalad amaba barnaamij dijital ah, kaas oo loo qaabeeyay in uu qabto shaqooyin ama hawlo la mid ah kuwa garaadka aadamigu qabto, sida gaarista go'aannada, xallinta mashaakilka, fahmista hadalka iyo wax-ka-barashada xogaha jira.

2. **"Shahaado":** waxa loo la jeedaa fariin kombuutar oo loo adeegsado xaqiijinta iyo hubinta saxnimada xiriirka qofka elektaroonig ahaan wax ku saxiixaya iyo xogta loo isticmaalay abuurista saxiixa laftiisa, si loo xaqiiqsado in ay is leeyihiin saxiixa iyo saxiixuhu.

3. **"Qorshaha soo kabashada iyo joogtaynta shaqada":** Waxa loo la jeedaa qorshe amaba hab loo dejiyo ogaanshaha wixii dhib ah ee dibedda amaba gudaha kaga iman kara hanaanka elektroniga ah ee Maamulka Maaliyadda Guud, iyada oo la dhisaayo hab difaac oo dhinaca qalabka ah (hardware) iyo dhinaca barnaamijyada (software), taas oo keenaysa in la abuuro hannaan wax-ku-ool ah oo ka hortag iyo soo kabasho haddii uu dhib ku yimaaddo habsami u socodka hawlaha Maamulka Maaliyadda Guud ; iyada oo la dhawraayo sumcadda iyo adkaysiga nidaamka, xafidnaanta xogta iyo u diyaarsanaanta xaalad kasta oo timaadda.

4. **"Shahaado bixiye":** waxa loola jeedaa qofka soo saara/bixiya shahaadooyinka elektroniga ah ee xaqijinaaya is-lahaanshaha saxiixa iyo saxiixaha, waxaana suuragal ah in uu qofkaasi bixiyo adeegyo kale oo isla hawlahaas ku saabsan.

5. **"Maaraynta xogta maaliyadeed":** waxa loo la jeedaa nidaamka ka qeexaaya cidda leh xaqa qaadashada go'aannada iyo cidda ay sarantahay masuuliyadda isla xisaabtanku, si loo hubiyo amniga, tyada iyo habsami u socodka hababka xogta maaliyadeed.

6. **“Isla-falgal”:** waxa loola jeedaa qalabyo elektaroonig ah oo kala duwan, shabakado, nidaamyo hawlgelineed (operating systems) iyo barnaamijyo kombuutar in ay si iskood oo wax-ku-ool ah isula shaqayn karaan, oo xog waxtar iyo micnoba leh u wadaagi karaan, iyada oo aanay qalabyadaasi u baahanin in hawlgalkooda ka hor ay cidina ka shaqaysiiso ama la xiriiriyo.

7. **"Xogta Aasaasiga ah":** waa xog guud oo saldhig u ah shaqada nidaamka dijitalka ah, taas oo micnaysa xogta hawlaha maaliyadeed ee lagu shaqaynaayo. Waa xog si duuduub ahaan u qaabaysan, oo aan faahfaahsanayn, kuna saabsan hawsha elegtrooniga ah ee maamulka maaliyadda. Xogta Aasaasiga ah (Master Data) ee nidaamku ku shaqyanaayo waxaa ka mid noqon kara habka kala soocidda madaxyada kala duwan ee miisaaniyadda, iyada oo aan faahfaahin hoose la gelin.

8. **“Hay’addaha Dawladda”:** waxaa loola jeeda Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha Dawladda Fadaraalka ah ee Soomalaiya.

9. **“Wasiirka”:** halkan waxa loo la jeedaa Wasiirka Maaliyadda ee Dawladda Fadaraalka ah.

10. **"Xog-faahfaahinta Xogaha (Metadata)":** waxa loo la jeeedaa xog faahfaahin dheeraad ah ka bixisa dabciga iyo ujeedka xogta la adeegsanaayo lafteeda. Waa xog sharaxaysa fikradaha ay xogtu metelayso, isla markaana micnaynaysa xiriirka u dhexeeya xogta la faahfaahinaayo iyo waxa xogtu ay ku saabsantahay.

11. **“Sarkaal Dawladeed”:** waxa halkan looga jeedaa, sarkaal ah shaqaale dawladeed, oo leh masuuliyad maamul maaliyad dadweyne.

12. **“Tixraac”:** waxa laga wadaa, xog qeexaysa halbeegyo la isla ogolyahay, oo loo isticmaalo dhismaha/qaabaynta xogaha kale, kuwaas oo aan badiyaa is bedbedelin, sida halbeegyada cabbirka iyo furayaasha telefoon ee wadamada oo kale (units of measurement and country codes).

13. **“Ku Kalsooni”:** waxa loola jeedaa qof amaba xafiis kale, oo kalsooni ku qaba kuna shaqeeya saxnimada shahaado ama saxiix elektaroonig ah oo ay cid kale soo saartay.

14. **“Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS)”:** waxaa loola jeeda Nidaamka Dawladda Soomaaliya ee Maaraynta Macluumaadka Maaliyadda (Somalia Financial Management Information System “SFMIS”).

15. **“Saxiixaha”:** waa sarkaalka dawladda ee haya xogta abuurista saxiixa elektrooniga ah, kuna shaqaynaya oo adeegsanaaya saxiixaas, amaba qof uu wakiil ka yahay ugu saxiixaaya.

16. **“Xogta Abuurista Saxiixa”:** waxa loola jeedaa waxyaabaha loo adeegsado marka la samaynaayo saxiix elektaroonig ah, sida xarfo furayaal ah, koodhadh xogo [data codes] amaba waxyaabo kale, si loo abuuro xariir ammaan ah oo u dhexeeya saxiixaha iyo saxiixa laftiisa.

17. **“Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019”:** waxaa loola jeedaa Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee Sharci Lambar 17 ee soo baxay 25 December 2019.

18. **“Erey-bixinaha aan Qeexnayn”:** erey-bixin kasta oo aan Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa lagu qeexin, waxa ay qaadanaysaa amaba loo raacayaa sida ku qeexan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 amaba Xeer-nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2022.

CUTUBKA 2-AAD
SAXIIXA ELEGTAROONIGA AH

Qodobka 4aad:
Saxiixa Elektarooniga Ah

1. Marka la eego ujeedada Xeer-nidaamiyahan, saxiixa elektarooniga ah waxaa loo tixgelinayaa in uu yahay mid lagu kalsoonaan karo, waase marka saxiixaas lagu sameeyo/abuuro iyada oo la adeegsanaayo tiknoolajiyad amaba barnaamij kombuutar oo leh astaamaha soo socda:

   b. Xogta Abuurista Saxiixa, marka la eego micnaha iyo ujeedka loo adeegsanaayo, waa in qofka saxiixaha ah iyo saxiixa la isu garan karo amma la isku xiriirin karo, cid kale na aanay shuqul ku lahayn;

   t. Xogta Abuurista Saxeexu, marka la eego goorta/wakhtiga saxiixa la adeegsaday, waa in ay ahayd mid ku jirta gacanta saxiixaha, oo qof kale aanu shuqul ku lahayn;

   j. Haddiiba ay dhacdo in saxiixa elektrooniga ah wax-ka-beddel lagu sameeyo ka dib marka la adeegsado, waa in is-beddelkaas la garan karo; iyo

   x. Kolba hadii ujeedka adeegsiga saxiixa elegtrooniga ahi tahay in la bixiyo kalsooni lagu qabi karo saxnimada xogta dukumentiga loo adeegsaday, waa in ay jirto qaab

lagu garan karo hadiiba ay dhacdo in xogta dukumentiga lagu sameeyay wax-kabeddel ka dib markii la saxiixay.

2. Wixii go'aanno ah ee la qaato iyada oo lagu salaynaayo faqradda 1aad ee Qodobkan 4aad, waa in ay noqdaan kuwo la socda halbeegyada caalamiga ah ee amuurahaas khuseeya.

Qodobka 5^{aad}: Adeegga Shahaado Bixiyayaasha

1. Marka la eego ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahan, adeeg-bixiyayaasha shahaadaynta (Xaqiijinta) saxiixyada elektarooniga ah, waxa laga qaadan karaa uun xafiis loo aqoonsanyahay in uu yahay 'Shahaado Bixiye',:

2. Marka la eego ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahan, adeeg-bixiyayaasha (Xaqiijinta) shahaadada saxiixyada electarooniga ah, waxa laga qaadan karaa uun xafiis loo aqoonsanyahay in uu yahay 'Shahaado Bixiye', kaas oo:

b. U dhaqma si waafaqsan siyaasadaha iyo hab-dhaqankooda shaqo ee ay iyagu dejisteen;

t. Si digtooni leh u xaqiijiya saxnimada iyo dhammaystirnaanta bayaanada iyo xogaha ay iyagu soo saareen, ee ku saabsan adeegsiga shahaadada inta lagu dhex jiro mudada adeegsigeeda, iyo xogaha shahaadada lafteeda ku keydsan intaba;

j. Sameeya habab hay'adaha/xafiisyada adeegsada shahaadadu ay si macquul ah ugu ogaan karan xogaha soo socda:

i. Aqoonsi (identity) bixiyaha shahaadada;
ii. In qofka saxiixaha ah, sida ay muujinayso shahaadada elegtarooniga ahi uu xogta loo adeegsanaayo abuuritaanka saxiixa elegtaroniga ah gacanta ku hayay waqtiga la bixiyay shahaadada taageeraysa saxiixiisa;

iii. In xogta loo adeegsaday abuurista saxiixu ay ahayd mid sax ah (valid) goorta amaba ka hor goorta la bixiyay shahaadada;

x. In ay shahaado-sameeyayaashu bixiyaan hab/qaab kasta oo si macquul ah shahaadada dhexdeeda, amaba si kale oo ka baxsan ay xafiisyada shahaaddaadaas adeegsadaa amaba ku tiirsani ku ogaan karaan xogaha soo socda:

i. In la ogaan karo dariiqada loo maray aqoonsiga saxiixaha;

ii. Xadaynta ujeedooyinka loo ogolyahay in saxiixa iyo shahaadada ku lamaanba loo adeegsan karo, iyo in la xadido qadarka lacageed ee la ogolyahay in saxiixa iyo shahaadada elektarooniga ah lagu bixin karo;

iii. In xogta loo adeegsanaayo abuurista saxiixu ay tahay mid sax ah, oo aanay cidina jabsanin amaba ku xad-gudbin;

iv. In shahaado-bixiyuhu caddeeyo noocyada khasaaraha ah ee ay masuuliyadeeda qaadanayaan, iyo ilaa xadka ay masuuliyadaasi gaari karto hadii uu khasaare ka yimaado adeegsiga saxiixa iyo shahaadada ay bixiyeen;

v. In ay jiraan siyaabo amaba habab saxiixuhu uu wargelin toos ah ugu diri karo shahaado-bixiyaha, sida ku cad Xeer-nidaamiyahan Faqraddiisa 1aad ee Qodobka 6aad;

vi. In uu jiro adeeg degdeg ah, kaas oo loo adeegsan karo, tusaale ahaan, joojinta shahaado amaba saxiix si qaldan loo adeegsaday;

Kh. Halka lagu xusay adeegyada hoos yimaada Faqrad-hoosaadka 'X', (5), waxa shahaado bixiyaha laga doonayaa in uu abuuro qaab saxiixuhu uu ugu soo gudbin karo wargelin degdeg amaba xaasaasi ah oo ku saabsan amniga saxiixa/shahaadada, sida uu dhigaayo Qodobka 6aad, Faqraddiisa 1aad; halka Faqrad-hoosaadka 'X' (6), lagu sheegay masuuliyadda shahaado-bixiyaha ee sheegaysa in ay bixiyaan adeeg degdeg ah, ka dib marka la war geliyo, adeeggaas oo loo adeegsado joojinta shaqada saxiix elegtaroonig ah amaba shahaadada la socota oo si qaldan loo adeegsaday, amaba wakhtigii jiritaankeeda (cimrigeedu) dhamaday;

d. In shahaado-bixiyayaashu, si ay u bixiyaan adeegyo lagu kalsoonaan karo, ay adeegsadaan nidaamyo sugan, habraacyo iyo dad xirfad u leh hawlahaas.

3. Heshiisyada wax soo iibsigu waa in ay xaqiijiyaan (ay ku caddaato) in bixiyaha adeegga shahaadayntu uu qaadi doono mas'uuliyadda sharci ee ka dhalata hadii aanu buuxin shuruudaha lagu sheegay Faqradda 1aad ee Qodobkan 5-aad.

4. Marka la eego ujeedooyinka Qodobkan 5aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'D', si loo go'aamiyo in kalsooni lagu qabi karo, iyo ilaa xadka lagu kalsoonaan karo nidaamyada, habraacyada iyo hawlwadeenada ay adeegsadaan hay'adaha bixiya shahaadooyinka la raaciyo saxiixyada elektarooniga ah, waa in la eego waxyaabaha soo socda:

b. Awooddooda dhaqaale iyo baaxadda shaqaalahooda, oo lagu daray wixii hanti/raasamaal ah ee jira;

t. Tayada qalabyadooda iyo barnaamijyadooda kombayuutar (Hardware and software) ee ay haystaan;

j. Habraacyadooda farsamaynta shahaadooyinka, maamulka codsiyada shahaadooyinka iyo sida ay u keydiyaan diiwaanada amaba xogaha amuurtaas ku saabsan;

x. Xogaha shahaadada dhexdeeda ku keydsan, sida aqoonsiga saxiixaha, cimriga shahaadada iyo saxnimadeeda iwm, waa in ay yihiin kuwo ay heli karaan saxiixayaasha laftooda iyo dhinacyada kale ee ku tiirsan saxiixas elektaroonigga;

Kh. Shaqada shahaado-bixiyaha in ay hay'ad madax bannaani ku samayso Baaritaanno joogto ah oo wakhtiyaysan, si loo hubiyo waxyaabo ay ka mid yihiin u hogaansamidda

shuruucda jirta, hababka shaqo ee la isla ogolyahay, badbaadada barnaamijyada iyo qalabyada shahaado bixiyaha IWM;

d. In ay jiraan bayaanno (warbixino) ay soo saartay tusaale ahaan, dawladda oo kale, hay'adaha madaxa banaan ee baaritaanka ku sameeya shahaado bixiyaha, amaba xataa warbixino ay soo saareen shahaado-bixiyaha laftoodu, kuwaas oo lagu sheegaayo in loo hogaansamay shuruucdii jirtay iyo habraacyadii la isla ogolaa, sida ku qeexan qodobada kor ku xusan; amaba

r. Wixii kale ee tixgelin u baahan ee hadba soo kordha, ee lagu tilmaamo warbixinada Wasiirka.

5. Marka la go'aaminaayo saxnimada iyo heerka waxtarnimo sharci ee shahaado amaba saxiix elegtaroonig ah, ma aha in tixgelin la siiyo:

   b. Juquraafi ahaan goobta/meesha shahaadada la ga soo saaray, amma saxiixa elektarooniga ah lagu abuuray, ama lagu isticmaalay; ama

   t. Juquraafi ahaan Meesha saldhigga u ah hay'adda soo saartay ama tan adeegsanaysa saxiixa amaba shahadada elegtaroonigga ah.

6. Shahaado lagu sameeyay Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya meel ka baxsan, waxa ay leedahay awood amaba waxtar sharciyeed oo la mid ah shahaadada waddanka Soomaaliya dhexdiisa lagu sameeyay oo kale, waase hadii ay leedahay heer kalsooni oo u dhigma midka gudaha.

7. Saxiixa elektarooniga ah ee lagu sameeyay ama lagu isticmaalay meel ka baxsan Jamhuuriyadda Fadaraalka ah ee Soomalaiya, waxa uu la awood yahay sharci ahaan, midka lagu sameeyo amma lagu isticmaalo waddanka gudahiisa, waase hadii uu leeyahay heerkii astaamaha lagu kalsoonaan karaayay ee kan gudaha waddanku lahaa oo kale.

8. Marka la go'aaminaayo in shahaado amma saxiix elegtaroonig ahi uu leeyahay heer kalsooniyeed oo waafaqsan tilmaamaha Faqradaha 5aad iyo 6aad ee Qodobkan 5aad, waa in lagu qiimeeyo xeerarka iyo habraacyada caalamiga ah ee la isla ogolyahay, iyo tixgelin la siiyo tilmaamaha dheeraadka ah ee uu Wasiirku ka bixiyo hadba waxyaabaha soo kordha.

Qodobka 6^{aad}: Hab-dhaqanka Saxiixaha

1. Saxiixe kasta waa in uu:

   b. Sameeyaa taxaddar kasta oo macquul ah, si uu uga fogaado in xogta abuurista saxiixiisa loo adeegsado si aan la ogolayn;

   t. Isaga oo aan luminin wakhti dheeraad ah hadiiba ay wax qaldamaan, waa in uu saxiixuhu adeegsadaa hababka uu soo saaray bixiyaha adeegga shahaado bixinta, ee lagu xusay Qodobka 5aad ee Xeer-nidaamiyahan, isla markaana uu Wasiirka, Xisaabiyaha Guud, iyo Agaasimaha Miisaaniyadda war-geliyaa haddii:

i. Uu saxiixuhu ka war helo in xogta abuurista saxiixiisa la jabsaday amaba si uun loogu xad-gudbay; amaba;

ii. Uu saxiixuhu si uun u ogaado xogo muujinaaya in ay suurtagal tahay halis weyn, oo ah in la jabsaday amaba si uun loogu xad gudbi karo xogta abuurista saxiixa;

j. Marka shahaado elegtaroonig ah loo isticmaalo taageeridda saxiix elegtaroonig ah, waa in saxiixuhu uu feejignaan dheeraad ah ka muujiyo xaqiijinta iyo dhammeystirka dhamaan xogaha loo adeegsanaayo shahadada, xogahaas oo shahaadada khuseeya mudada adeegsigeedu uu ansaxaa yahay.

2. Hadii ay dhacdo in saxeexuhu ka baaqsado ku dhaqanka shuruudaha ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan, waxa uu si buuxda u qaadi doonaa mas'uuliyadda sharci iyo anshaxeed ee ka dhalata gaabisnimadiisa.

3. Ma jirto qayb Xeer-nidaamiyahan ka mid ah oo loo fasiran karo in la iska dhaafay waajibaadkii la iska rabay ee daacadnimada, oo ah sida ku cad Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah, Sharci Lambar 11, 05-12-2006. Ku xadgudub kasta oo lagu sameeyo Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019, amaba xeer-nidaamiyayaasha isaga hoos yimaada, ee lagu kaco iyada oo la adeegsanayo saxiixa elektaroonigga ah, waxa ciqaab-marinteeda loo raaci doonaa sida uu dhigaayo Qodobka 55-aad ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019.

CUTUBKA 3-AAD
DIIWAANADA ELEKTAROONIGGA AH IYO ISGAARSIINTA ELEGTAROONIGA AH

Qodobka 7aad:
Diritaanka iyo Helitaanka Diiwaanada Elegtarooniga ah

1. Diiwaanka (farriinta) elektaroonig ah ee uu diro sarkaal dowladeed, waxaa loo tixgelinayaa in la diray taariikhda iyo waqtiga marka:

   b. Ay farriintu soo gaarto (gasho) nidaamka elegtarooniga ah ee uu isticmaalaayo loodiraha fariintu, waana marka ay diraha iyo loo diruhu adeegsanayaan laba nidaam oo kala duwan, tusaale ahaan email dawladeed iyo mid guud, sida Gmail oo kale. Loo diruhu marka uu fariinta helo ayaa loo aqoonsanayaa in Fariintaas la diray; ama

   t. Ay fariinta la diray labada qof ee isu diraya adeegsanayaan nidaam isku mid ah, (tusaale ahaan hanaanka email ka dawladda), markaasna waxa loo aqoonsanayaa in fariinta la diray, marka loo diruhu uu dukumentiga/fariinta ka arki karo nidaamka ay wadaagayaan diraha iyo loo diruhu.

2. Iyada oo loo cuskanaayo faqradda 1-aad ee Qodobkan, fariin elegtaroonig ah waxa loo tixgelinayaa in la diray, hadii loo diruhu helitaanka fariimaha noocaas ah u asteeyay amaba u diyaarsaday nidaamkii (qalabkii) ku habboonaa in uu fariinta la soo diray arki karo, gaar ahaan taariikhda iyo wakhtiga ay fariintaasi soo gaarto nidaamka/qalabka uu isticmaalaayo, ee uu awoodi karo in uu fariintaas la soo baxo oo adeegsado.

3. Haddii loo diruhu aanu soo gudbin wargelin sheegaysa in aanu helin oo adeegsanin diiwaan elegtaroonig ah oo loo diray, waxa loo tixgelinayaa in loo diruhu uu helay oo adeegsaday diiwaanka (dukumentiga) elektaroonig ah ee loo diray.

4. Diiwaan amaba dukumenti elektaroonig ah waxa loo qaadanayaa (tixgelinayaa) in sarkaalka loo diray uu helay, goorta iyo wakhtiga helitaanka ee uu muujinaayo nidaamka/qalabka uu sarkaalku adeegsanaayo ee u asteeyay ujeedadaas.

5. Haddii xogta amaba fariimaha elegtarooniga ah uu sarkaalka loo diray la soo bixi kari waayo oo adeegsan kari waayo, waxa suuragal ah in loo tix-geliyo in sarkaalkaasi aanu fariintaas helin.

6. Fariimo amaba diiwaanno dhawr ah oo isku mar la wada diray, waxa loo tixgelinayaa in dhamaantood isku mar la wada helay; goorta iyo taariikhdana waxa loo raacayaa sida ku xusan faqradda 4-aad ee Qodobkan.

7. Caddayn muujinaysa goorta iyo taariikhda la diray amma la helay diiwaan elegtaroonig ah, waxa lagu xaqiijin karaa iyada oo la adeegsanayo xogaha hoos ku xusan midkood, lana hubinaayo in dukumentiga amma diiwaanka la isu diray uu muujinaayo taariikhda iyo saacadda la diray/helay dukumentigaas:

   b. Fariin-qoraal elektaroonig ah, taas oo muujinaysa in dukumentigaas la diray;

   t. Qoraal xaqiijin ah, kaas oo caddaynaaya in fariintii/dukumentigii la helay;
   j. Xog-faahfaahiye (metadata) kasta ku saabsan diiwaanka elektaroonig ah ee la diray; amaba

x. Helitaanka diiwaan kale oo elegtaroonig ah, oo u dhigma kuwaas hore.

Qodobka 8aad:
Bedelista Dukumentiyada

1. Dukumenti kasta waa la bedeli karaa, iyada oo uu ku jiro xog-faahfaahiyihiisu, (metadata), lagana dhigi karaa (rogi karaa) diiwaan elektaroonig ah.

2. Qalab amaba tiknoolajiyaddii la doonaba hala adeegsadee, bedelista amaba rogitaanka dukumentiga elektarooniga laga dhigaayo waa in loo sameeyaa si aan waxyeelo u geysan Tayada iyo micnaha sharci ee dukumentiga la bedelaayo iyo xog-faahfaahiyihiisa (metadata) midkoodna.

3. Si loo muujiyo in diiwaanka elektarooniga loo bedelay iyo xog-faahfaahiyihiisa la xiriiraa (metadata) ay xambaarsanyihiin isla xogtii ku qornayd dukumentigii asalka ahaa ee laga soo guuriyay (laga soo scan gareeyay), lana dhawray tayadooda, sarkaalka dawladdu waa in uu:

(b) Qoraal ka sameeyo faahfaahinta qaabka loo sameeyay bedelista, taas oo ay ku jiraan:

i. xog tixraac noqota oo sheegaysa qaabkii uu ahaa dukumentiga asalka ahaa iyo macluumaadkii ku jirayba, tillaabooyinka la qaaday intii lagu jiray hawsha dukumanti bedelista (scan garaynta), iyo dammaanadaha la socday aaladda amaba barnaamijka loo adeegsaday dukumenti bedelista ee tilmaamaaya dhawrista Tayada dukumentiga asalka ah iyo midka elektarooniga ah iyo xog-faahfaahiyihii (metadata) la socday;

ii. Faahfaahin ku saabsan hubinta dhinaca tayada ee hawsha dukumenti bedelista, haddii faahfaahintaasi ay khuseyso Tayada (sumcadda) diiwaanka elektarooniga ah ee la soo saaray; iyo

iii. Faahfaahin ku saabsan haddii ay jirtay in dukumentigaas marar hore la bedelay (la scan gareeyay).

(t) la keydiyo (xafido) xogta ku saabsan qaabka dukumanti bedelista loo sameeyay, lana hayo mudada lagu jiro wakhtigii loo xaddiday in xogtaas la hayo, taas oo ay tahay in la raaciyo dukumentiga asalka ahaa amaba midka elektarooniga ah, amaba lagu shubo aaladaha xogta elektaroniga ah lagu xafido.

Qodobka 9aad:
Xeerarka Caddaymaha

Haddii dukumeentiga amaba xogta asalka ahayd la burburiyo (amaba ay si kale u lunto), dukumentiga elektaroonigga ah ee kii asalka ahaa laga sameeyay, si sax ahna loo bedelay/rogay, loona keydiyay si waafaqsan Qodobka 8aad ee Xeer-nidaamiyahan, lama diidi karo in la aqbalo sharcinimadiisa, iyada oo diidmadaas lagu salaynaayo dood ah in macluumaadka amaba nuqulka elektarooniga ahi uu yahay mid aan asal ahayn ama la bedelay, loo mana cuskan karo Xeerarka Caddeymaha. Si kale haddii loo dhigo,

dukumentiga si sax ah loo rogay (scan gareeyay) waxa uu sharci ahaan la mid yahay kii asalka ahaa ee laga soo guuriyay, xeerka cadaymuhuna ma qabanaayo.

Qodobka 10aad:
Elektaroonig Ahaan In Dukumenti ama Xog Loo Keydiyo

1. Dukumanti amma macluumaad uu sarkaal dawladeed diyaariyay, diray amaba helay, ayna tahay in la keydiyo, waa in elektaroonig ahaan loo keydiyo haddii:

(b) Goorta dukumentiga amma xogta la abuuraayo, la diraayo amaba la helayo haddii uu:

i. Dukumentiga amma macluumaadku yahay mid aan elektaroonik ahayn, in loo kaydiyo qaab aan waxba ka bedelaynin nuxurkiisa; ama

ii. haddii uu yahay diiwaan elektaroonik ah, loo kaydiyo:

(B) Isla qaabkii uu ku abuurmay, lagu diray ama lagu helay, ama
(T) qaab si sax ah u matala (u dhigma) diiwaankkii amaba dukumentigii elektaroonigga ahaa ee markii hore la abuuray, lagu diray ama lagu helay;

(t) Nuxurka diiwaanka elektarooniga ah iyo xog-faahfaahiyihiisa ku lifaaqan (metadata) si cad loo akhriyi karo ama loo fahmi karo, si mustaqbalka loo isticmaalo; iyo

(j) Qaabka loo keydinaayo iyo qalabka lagu keydinaayo diiwaanka elektaroonigga ahi ay yihiin kuwo leh hab lagu ilaaliyo Tayada dukumentiga, tayadaas oo aan is bedelin ilaa goortii dukumantiga la abuuray, la diray ama la helay, waxaana ku jira faahfaahinta ku saabsan tayada keydinta iyo tallaabooyinka dhinaca maamulka ee ku saabsan keydinta; waxa aanse ku jirin wixii isbedel amaba wax ku dar ah ee yimid amaba dhacay inta lagu jiro habka caadiga ah ee isu dirista, kaydinta ama soo bandhigida.

Qodobka 11aad:
Ilaalinta Taariikhda iyo wakhtiga

Haddii ay jirto amaba muuqato faahfaahin sheegaysa taariikhda iyo saacadda dukumenti elektaroonig ah la diray amaba la helay, sarkaalka dawladdu waa in uu dhawro amaba ilaaliyo xogtaas dheeriga ah.

Qodobka 12aad:
Halbeegga (Heerka) Ku-Kalsoonaanta

Heerka amaba halbeegga kalsoonida loo baahanyahay ee diiwaan (dukumanti) elegtaroonig ahi, waa in uu ku salaysnaado ujeedadii uu qaabaysnaa amaba loo sameeyay dukumentigii asalka ahaa ee uu sarkaalka dawladdu abuuray, diray amma loo soo diray.

Qodobka 13-aad
Dhawrista Tayada Diiwaanka Elektarooniga ah Mudada uu Keydka Ku Jiro

1. Tayada diiwaanka elektarooniga ah waa in la dhawro (ilaaliyo), laga soo bilaabo maalinta sarkaalka dawladdu uu dukumentigaas abuuro, diro, ama loo soo diro, ilaa laga gaaraayo wakhtiga ay ku egtahay muddada loo baahanyahay in la hayo (keydiyo) dukumentiga ama macluumaadka asalka ah.

2. Tayada diiwaanka elektarooniga ah waa in qiimayn lagu sameeyo iyada oo la tixgelinayo heerka talaabooyinka amni ahaan loo saaray:

   b. Diiwaanka elektarooniga ah si loo hubiyo in tayadiisa la dhawro muddada lagu sheegay Faqrada 1aad ee Qodobkan; iyo

   t. Elektaroonig ahaan, nidaamka dukumentiga ama macluumaadka elektarooniga ah lagu abuuray, lagu diray, lagu helay, amaba lagu kaydiyey.

3. Tayada diiwaanka elektarooniga ah waa in la dhawro, waase haddii la xaqiijin karo in dukumentigii asalka ahaa ama macluumaadka iyo xogtiisa dheeraadka ah (metadata) aan waxba laga beddelin, marka laga reebo beddelista la ogolyahay ee ku xusan Qodobka 14aad (Faqraddiisa 2-aad) ee Xeer-nidaamiyahan, xitaa haddii dukumentigu yahay mid farsamo ahaan la yaryareeyay amaba la isku cufay (fragmented or compressed) si loo fududeeyo diritaankiisa (gudbintiisa), ama ku-meel-gaar ahaan loo keydiyay.

4. Diiwaanka elegtaroonigga ah ee tayadiisa la dhawray:

   b. Waxaa loo adeegsan karaa ama uu geli karaa halkii dukumentiga ama macluumaadka asalka ah;

   t. Marba haddii uu dukumentigu elektaroonig yahay, micnaheedu ma aha in aanu sax ahayn amaba aan la adeegsan karin; iyo

   j. Waxa uu leeyahay qiime (maqam) sharciyeed oo la mid ah kan dukumentiga ama macluumaadka asalka ah oo kale, mana loo eegaayo meesha lagu keydiyay, qaabka loo sameeyay, amaba tignoolajiyadii samayntiisa loo adeegsaday.

Qodobka 14^{aad}:
Reebbanaanta Wax-ka-Beddelidda

1. Marka laga reebo Faqradda 2aad ee Qodobkan inta ku xusan, cidna loo ma ogola in ay wax ka bedesho diiwaan/xog elektaroonik ah ama xog-faahfaahiyaha (metadata) ee dukumantigaas ku lammaan, ee uu sarkaal dawladeed sameeyay, diray, amma loo soo diray.

2. Qofka uu Wasiirku u oggolaado uun baa wax-ka-beddel ku samayn kara diiwaan elektaroonig ah ama xog-faahfaahiyihiisa (metadata), marka horese waa in qaab aan waxba laga beddeli karayn loo diiwaangeliyo xogta ku saabsan wax-ka-beddelka la samaynaayo, faahfaahinta qofka is-bedelka samaynaya, taariikhda iyo goorta la samaynaayo intaba.

Qodobka 15aad:
Dhamaadka Mudada Keydinta - Xog-burburinta

1. Goorta la soo gaaro dhamaadka mudada haynta (keydinta) diiwaanka elegtaroonigga ah, diiwaankaas ama xogta waa la baabiin karaa (burburin karaa), waana in faahfaahinta burburin kasta lagu reebo diiwaan hubin ah (audit log) ama dukument kale oo la mid ah, kaas oo qeexaya waxyaabaha soo socda:

   b. Diiwaanka elektarooniga ah ee la burburinayaa ka uu yahay;

   t. Taariikhda iyo goorta diiwaanka elektarooniga ah ee la burburinaayo la sameeyey, la diray ama la helay – waa haddii faahfaahinta noocaas ah markii hore la diyaariyay lana keydiyay;

   j. Magaca qofka bixiyay ogolaanshaha burburinta; iyo

   x. Taariikhda iyo waqtiga dukumantigaas la burburiyay.

CUTUBKA 4-AAD
MAAMULIDDA XOGTA MAALIYADEED

Qodobka 16aad:
Baaxadda Maamulka Xogta Maaliyadeed

1. Xeer-nidaamiyahan waxa uu khuseeyaa dhammaanba nidaamyada macluumaadka ee ku saabsan Maareynta Maaliyadda Guud iyo gebi ahaanba xogta maaliyadeed ee la helo, tan la abuuro, ama ay maamulkooda hayaan hay'adaha maareynta Maaliyadda Guud, iyada oo aan xogahaas loo eegin meelaha ay ka yimaaddeen, qaabka ay yihiin iyo noocooda toona.

2. Xeer-nidaamiyahan waxa uu qeexayaa mabaadii'da ay ku salaysanyihiin maamulka xogta maaliyadeed iyo qaabka loogu shaqeeyo; iyo sidoo kale, doorka iyo waajibaadka ay tahay in ay qaataan shakhsiyaadka hoos ku xusan:

   b. Maareeyaha Xogta Maaliyadeed (Fiscal Data Controller);

   t. Ilaaliyaha Xogta Maaliyadeed (Fiscal Data Steward); iyo

   j. Khabiirka Farsamo ee Aag-xogeedka Maaliyadeed (Fiscal Data Domain Expert).

Qodobka 17aad:
Mabaadii'da Guud ee Maareynta Xogta Maaliyadeed

1. Nidaamyada xogta maareynta maaliyadda ee Wasaaraddu waa in ay yihiin kuwo u hogaansan sharciyada Dowladda Federaalka ah, ee u dejisan ilaalinta xuquuqda asturnaanta gaar ahaaneed iyo dhawrista xogta.

2. Xogta maaliyadeed waa in ay tahay mid diyaar ah, si fududna loo heli karo, laakiin xogaha dabci ahaan xaasaasiga ahi ma ku jiraan, waxayna u baahanyihiin in qarsoodi laga dhigo, lana ilaaliyo.

3. Xogta maaliyadeed waa in loo wadaago, loo uruuriyo, loo maamulo, loona adeegsado sidii Maaliyadda Guud loogu maareyn lahaa si hagaagsan oo wax-ku-ool ah.

Qodobka 18aad:

Qaab-maareyneedka Xogta Maaliyadeed

1. Lakabyada xogaha maaliyadeed waxa loo maareynayaa qaab ay socodsiinta adeeggu hoos timaaddo masuul dawladeed (Data Stewardship).

2. Sarkaalka dawladeed ee ay saarantahay masuuliyadda xogta maaliyadeed, waxa waajib ku ah, oo lagala xisaabtamayaa sidii uu u xaqiijin lahaa in xogtaas loo adeegsado danaha dhamaan nidaamka Maareynta Maaliyadda Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya.

3. Qaab-dhismeedka maareynta xogta maaliyadeed waa in uu ahaado mid ku haboon waxka-tarista baahiyaha hababka maareynta Maaliyadda Guud, iyada oo:

   b. La tix-gelinayo baahida loo qabo in xogta maaliyadeed laga heli karo waaxaha xafiisyada kala duwan ee dawladda;
   t. La hubiyo in la sameeyo ilaalinta ku habboon ee ku saabsan xogaha xasaasiga ah ee maaliyadeed, ee loo calaamadiyay in ay yihiin qarsoodi; iyo

   x. La taageero hirgelinta farsamooyinka casriga ah ee dijitalka ah.

Qodobka 19aad:
Isla Shaqaynta Nidaamyada

1. Waa in ay si habsami leh u wada shaqeeyaan dhammaan nidaamyada macluumaadka ee maareynta maaliyadda guud, ee uu ka mid yahay Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), dhamaantoodna u hoggaansamaan hagayaasha Dawladda ee u dejisan xaqiijinta isla shaqaynta nidaamyada.

2. Dhammaan Nidaamyada Macluumaadka ee Maareynta Maaliyadda Guud waa in ay ahaadaan kuwo si habsami leh isu la shaqeeya, oo si toos ah xogta isu dhaafsan kara, iyada oo aan loo baahan wax faragelin gacmeed ah.

Qodobka 20aad:
Lakab-xogeedyada Maaliyadeed

1. Xogaha maaliyadeed waxa la isu raaciyaa (kala soocaa) hadba intii is ku shaqo ah.

2. Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyahan awgood, lakabyada xogeed ee maaliyaddu waa kuwa ku qoran lifaaqa 1aad ee Xeer-nidaamiyahan.

3. Wasiirku waxa uu Wareegto Wasaaradeed ku shaacin doonaa liiska lakab-xogeedyada maaliyadeed ah, sida ay dhigayso baahida loo qabo qaabayn (jaangoyn) wax-ku-ool ah oo lagu sameeyo hababka maareynta Maaliyadda Guud .

Qodobka 21aad:
Maamulayaasha Xogta Maaliyadeed

1. Wasiirku waxa uu magacaabi doonaa masuuliyiin wadar ahaantooda loogu yeero ‘Maamulayaasha Xogta Maaliyadeed’, waxaanay yeelan doonaan gacan-ku-haynta lakabyada xogeed ee kala duwan ee ka mid ah nidaamyada loo adeegsado maareynta Maaliyadda Guud, waxaana ka mid ah kuwa hoos ku qoran, intaas kuma koobna:

   b. Agaasimaha Guud ee Dakhliga: kaasoo mas’uul ka ah xogta ku saabsan ururinta dakhliga, waxaana ku jira dakhliga cashuuraha ka yimaad iyo dakhliga aan cashuuraha ka iman labadaba.

   t. Xisaabiyaha Guud: kaasoo mas'uul ka ah lakab-xogeedyada Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), meelmarinta miisaaniyadda, warbixin-maaliyadeedyada, habraaca xisaabaadka iyo koontooyinka dowladda intaba.

   j. Agaasimaha Miisaaniyadda: kaasoo mas'uul ka ah lakab-xogeedyada miisaaniyadda khuseeya, sii deynta lacagaha, sida miisaaniyadaha sannadlaha ah, kuwa dhawrkii sanaba mar ah, miisaaniyadda qeybaheeda dibedda ka yimaadda iyo kuwa ku saabsan mashaariicda waaweyn ee kaabayaasha dhaqaale.

   x. Agaasimaha Maareynta Hantida: kaasoo mas'uul ka ah lakabyada xogeed ee ku saabsan hantida Dowladdu leedahay oo dhan.

   Kh. Madaxa Waaxda Maareynta Deynta: kaasoo mas'uul ka ah lakabyada xogeed ee ku saabsan deymaha Dowladda.

d.Xafiiska Xiriirinta Deeq-bixiyeyaasha ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgelinta iyo Horumarinta Dhaqaalaha: kaasoo mas'uul ka ah gacan-ku-haynta lakabyada xogeed ee ku saabsan kaalmada dibadeed oo ay hesho Dowladda Federaalka ah ee Soomalaiya.

2. Maamulayaasha Xogta Maaliyadeed waa in ay:

   b. Hubiyaan tayada xogta maaliyadeed ee hoos timaadda mas'uuliyaddooda sida ku qeexan Faqradda 1aad ee Qodobkan, iyaga oo saddexdii bilood ee kastaba mar baaritaan ku samaynaya xogaha ay hayaan, ka dibna ay warbixin siiyaan Wasiirka, una sii mariyaan Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda, muddo ah soddon maalmood gudahood, oo ka bilaabanta dhamaadka saddexda bilood ee kasta.

   (t) Diyaariyaan oo xafidaan xog-faahfaahiyaha dheeraadka ah (metadata) ee ku saabsan lakab xogeedyada maaliyadeed, iyaga oo hubinaya in dhammaan xogahaas loo kala soocay si waafaqsan Qodobka 24aad ee Xeer-nidaamiyahan.

   (j) Bixiyaan tilmaamo cad (qayaxan) oo ay raacaan maamulayaasha adeegsiga xogaha ee
   maalinlaha ah, ee ku saabsan maareynta xogta, iyada oo tilmaamahaas
   lagu salaynaayo sida xogaha loo kala soocay – (data classification).

   (x) Diyaariyaan, isla markaana kuwa xogaha adeegsanaaya la wadaagaan, jaantusayaasha xogta maaliyadeed - (data catalogues).

(kh) Hawlaha kaydinta iyo burburinta (tirtiridda) xogta ay waafajiyaan shuruucda arimahaas u dejisan.

(d) Hirgeliyaan aalado dijital ah oo loo adeegsado hubinta heerka isku xirnaanta xogta iyo tayadeeda.

(r) Hubiyaan is dhexgalka xogaha, iyada oo si aan kala joogsi lahayn ay macluumaadka isu dhaafsanayaan nidaamyada loo adeegsanaayo maareynta maaliyadda dadweynuhu.

(s) Tababarro siiyaan ilaaliyaayaasha xogta maaliyadeed, ayna hirgeliyaan hab lagu sameeyo ilaalin joogto ah oo ah dhinaca Tayada iyo isku xirnaanta xogta.

(sh) Magacaabaan Khubaro Farsamo oo qaabilsan aag-xogeedyada, kuwaas oo rasmi ahaan u xil saaran maareynta xogaha dheeriga ah (metadata) ee maaliyadeed.

(dh) Magacaabaan Ilaaliyayaasha Xogaha Maaliyadeed oo ku sugan dhamaanba Hay'adaha Dawliga ah (Wasaaradaha, Waaxaha iyo Wakaaladaha) iyaga oo hubinaya jiritaanka habraacyo adag oo ay lahaadaan xafiisyadaas kala duwani, taas oo lagu ilaalinaayo tayada xogta maaliyadeed.

3. Si loo gaaro ujeedooyinka Faqrada 2(b) ee Qodobkan 21-aad, warbixinta saddexbiloodlaha ah ee uu soo gudbinaayo Maamulaha Xogta Maaliyadeed waa in ay ka warbixiso:

(b) Jiritaanka iyo kala soocidda xogta;

(t) Waxtarnimada habka xogta loo farsameeyo/maareeyo;

(j) Hababka xogta lagu farsameeyaa/maareeyaa sida ay u waafaqsanyihiin sharciyada lagu dhaqmo ee hawlahaas ku saabsan; iyo

(x) Ilaalinta xogta iyo maaraynta halista jabsiga xogta.

Qodobka 22^{aad}:
Ilaaliyayaasha Xogta Maaliyadda

1. Ilaaliyayaasha Xogta Maaliyadda waxa saaran mas'uuliyadda tooska ah ee:

(b) Si sugan in ay u soo ururiyaan, una farsameeyaan xogaha ku jira Nidaamka Soomaaliya ee Maareynta Macluumaadka Maaliyadda, iyo nidaamyada kale ee maareynta Maaliyadda Guud, iyaga oo raacaaya tilmaamaha ku dhigan buug-gacmeedyada adeegsiga nidaamyadaas iyo sharciyada u dejisan ururinta xogta;

(t) U hogaansamidda habraacyada u dejisan amniga xogta iyo sharciyada ku saabsan dhawrista xuquuqaha asturnaanta xogaha gaarka ah;

(j) Muddo ah todoba (7) maalmood gudahood (oo ah maalmaha shaqada) in ay ku soo sheegaan doldaloolo kasta oo ku saabsan amniga xogta amaba jebinta nidaamka, oo saameyn ku yeelan karta tayada xogta maaliyadeed;

(x) Sida nidaamku yahay, aqoonsiga iyo xallinta dhibaatooyinka ku saabsan xogta maaliyadda iyo in macluumaadka amuurahaas ku saabsan loo gudbiyo Maamulayaasha Xogaha Maaliyadeed; iyo

(kh) Soo jeedinta isbeddelada suuragalka ah ee maamulka xogaha, gaar ahaan dhinaca siyaasadaha, halbeegyada, xeerarka iyo habraacyada intaba, iyada oo soo jeedimahaasi ku saleysanyihiin natiijada ka dhalata hawlgalada shaqo, waxaana loo gudbinayaa Maamulaayaasha Xogta Maaliyadda ee ay khusayso.

Qodobka 23aad:
Khubarada Aagg-xogeedka Maaliyadda

1. Khubarada Aag-xogeedka Maaliyadda waxa saaran mas'uuliyadaha ah:

(b) Ilaalinta iyo cusboonaysiinta lakab-xogeedyada maaliyadeed ee dheeriga ah, (metadata) saddexdii biloodba mar;

(t) Daabacaadda xogaha dheeriga ah (metadata) kuna faafiyaan barta internetka rasmiga ah ee dowladda iyo in ay xogahaas dheeriga ah la wadaagaan khubarada gacanta ku haya aagxogeedyada nidaamyada kale ee maareynta Maaliyadda Guud;

(j) Hirgelinta dhamaanba qaybaha farsamo ee caawinaaya hawlaha farsamaynta ee ay tilmaamaan/sheegaan Ilaaliyayaasha Xogta Maaliyaddu;

(x) Hirgelinta iyo ka shaqaynta sidii loo joogtayn lahaa qaab midaysan oo xogta loo farsameeyo, loo kaydiyo, loo qaado (gudbiyo), loona gaarsiiyo isticmaalayaasha;

(kh) Fahmista iyo sheegista khataraha amniga xogta; iyo khatarahaasi saamaynta ay ku yeelan karaan xogaha maaliyadeed sirnimadooda, tayadooda iyo jiritaankooda (helitaankooda) intaba;

(d) Hubinta adeegsiga xogtu in uu yahay mid ogolaansho loo haysto, lana xakameeyo;

(r) Hirgelinta talaabooyin munaasib ah oo muuqda iyo kuwo farsamo intaba, kuwaas oo looga jeedo ilaalinta sirnimada, tayada iyo jiritaanka (helitaanka) xogta maaliyadeed; iyo in la qiimeeyo waxtarnimada talaabooyinkaas amniga xogta lagu ilaalinaayo;

(s) Hubinta xogta lagu daraayo lakabyada xogaha maaliyadeed ee jira, in ay waafaqsantahay habraaca iyo hagayaasha u dejisan xogta maaliyadeed;

(sh) Hubinta saxnimada noocyada xogta, gaar ahaan kuwa tixraac ahaan loogu baahanyahay ee joogtada loo adeegsado, iyo xogaha aasaasiga u ah hawsha in la ilaaliyo,

lana diiwaangeliyo wixii is bedelo ah ee filasha elegtaroonigga ah ee xogta lagu sameeyay;

(dh) Marka keyd-xogeedyada (database) is-beddel lagu samaynaayo, in la hubiyo raacista (ku dhaqanka) habraacyada u dejisan maareynta xog-bedelista, si loo ilaaliyo saxnaanta kaydka xogeed;

(c) Hubinta in baaritaanno lagu samayn karo xogta la hayo iyo isbeddellada lagu sameeyay intaba; iyo

(f) Ku dhaqanka (hirgelinta) halbeegyada farsamo ee xogta mas'uuliyadooda ku hoos jirta.

Qodobka 24aad:
Kala Soocidda Xogta

1. Xogta dhaqaale waa in la kala soocaa.

2. Heerka kala soocida, iyo hadba ilaalinta iyo xakamaynta la socota heerka kala soocidda ee la qaato, waa in ay ku salaysnaato (ka turjunto) khataraha/halisaha daran ee ka dhasha xogaha ogolaansho la'aan loo dusiyo (saaro), waana in la qiimeeyo nooca xogta iyo heerka xaasaasinimadeeda.

3. Xogaha jira, haddii ay yihiin kuwo la abuuray iyo haddii ay yihiin xogo ka yimid hay'ado/xafiisyo kalaba, waa in markiiba (durtaba) la kala sooco, kala soocistaasina, ay ahaato mid wakhtiyaysan.

4. Heerarka amaba qeybaha xogta loo kala soocaayo waxa ka mid ah:

   (b) Mid Dadweyne;

   (t) Midda Rasmi ah;

   (j) Mid Qarsoodi ah; iyo

   (x) Mid Xadidan.

5. Wasiirku waxa uu soo saari doonaa tilmaamo uu ku qeexaayo shuruudaha loo raacaayo kala soocida xogaha, waxaana tilmaamahaas ka mid ah qeexid iyo tusaalayaal ku saabsan heer kasta oo ka mid ah heerarka xogaha loo kala saaraayo; habraacyada lagu qiimaynaayo heerka xasaasiyadda xogta, iyo hababka dib-u-eegista iyo cusbooneysiinta kala soocida loo samaynaayo, si loo hubiyo u hoggaansamidda heerarka amniga xogta iyo hab-dhaqanka hagaagsan ee maaraynta khataraha ku saabsan.

6. Sida ku sheegan tilmaamaha Wasiirka ee ku xusan Faqradda 5aad ee qodobkan, Maamulayaasha Xogta Dhaqaaluhu waa in ay hirgeliyaan hannaan xadidaaya wadaagista lakab-xogeedyada maaliyadeed ee ay gacanta ku hayaan.

7. Dhammaan xogta maaliyadeed ee ku calaamadsan ‘Mid Dadweyne’, waa in si joogto ah loogu daabaco bogga internetka ee Wasaaradda, mana loo baahna ogolaansho dheeraad ah oo laga sugo hay’adaha/xafiisyada kala duwan ee Dawladda Fadaraalka ah.

Qodobka 25aad:
Waajibaadka iyo Xeerarka Wadaagista Xogta

1. Si qaab wax-ku-ool ah xogaha maaliyadeed loogu wadaago:

(b) Waa in Marka ay xogaha isu dirayaan Maamulayaasha Xogta Maaliyadeed, ay mudnaanta siiyaan adeegsiga hababka aaminka ah ee wadaagista xogta ee hore loo ansixiyay.

(t) Waa in uu Ilaaliyaha Xogta Maaliyadeed (Data Steward) wixii xog ah cid kale la wadaagaa uun marka dhammaanba mabaadi’da u dejisan amniga xogta la buuxiyo, isla markaana, la dhamaystiro gebi ahaanba shuruudaha u yaalla xakamaynta xogta.

(j) Xogta Dhaqaale ee la wadaagaayo, waa in mar kasta laga reebo wixii faahfaahin shaksi ah ee qof lagu aqoonsan karo, hadii aan laga reebayninna, waa in ay lagama maarmaan u tahay xogta la diraayo, markaas oo kale waa in la raaco sharciyada Dowladda Federaalka ah ee u dejisan ilaalinta xogta iyo dhawrista xuquuqda asturnaanta khaaska ah ee shakhsiyaadka.

(x) Marka xogaha la wadaagaayo, waa in la diyaariyo xog-faahfaahiyayaasha dheeriga ah (Metadata) ee ku saabsan xogta la diray, marka loo baahdana waa in la bixiyo.

Qodobka 26aad:
Hantidhawrka Gudaha ee Sare (Chief Internal Auditor)

1. Hantidhawraha Gudaha ee Sare waxa uu leeyahay awood uu si buuxda ugu heli karo xogaha ku jira dhammaan nidaamyada maareynta Maaliyadda Guud, si uu u guto waajibaadkiisa shaqo ee ku xusan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019, iyo Xeernidaamiyaasha Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee dhaqangalka ah.

2. Hantidhawraha Gudaha ee Sare waxa uu fulin karaa kormeerro joogto ah, oo ay ku jiraan kuwo ay la fuliyaan khubaro dibedda ah, si uu ula socdo adeegsiga nidaamka, u hogaansanaanta joogtada ah ee habraacyada, iyo wax-ku-oolnimada maareynta xogta maaliyadeed iyo weliba saxnimada hababka wadaagista xogta dhaqaale.

Qodobka 27aad:
Hantidhawraha Guud ee Jamhuuriyadda Fadaraalka ee Soomaaliya

Hantidhawraha Guud ee JFS waxa uu leeyahay awood uu si buuxda ugu heli karo xogaha ku jira dhammaan nidaamyada maareynta Maaliyadda Guud, si uu u guto waajibaadkiisa shaqo ee ku xusan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019, Sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guud ee 2023, iyo wixii xeer-nidaamiyaal ah ee kuwaas ka farcama.

CUTUBKA 5-AAD
MASUULIYADAHA HIRGELINTA TIKNOLOOJIYADA DIJITALKA EE CASRIGA

AH

Qodobka 28aad:
Xisaabiyaha Guud

1. Iyada oo loo hoggaansamaayo tilmaamaha Wasiirka, Xisaabiyaha Guud waa in uu ka shaqeeyo kor-u-qaadista adeegsiga tignoolajiyada casriga ah, waana in uu hogaamiyo hirgelintooda ee gudaha Nidaamka Soomaaliya ee Maareynta Macluumaadka Maaliyadeed, sida uu dhigaayo Qodobka 56-aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 iyo Xeer-nidaamiyahan laftiisuba.

2. Si loo gaaro ujeedooyinka Faqradda 1-aad ee Qodobkan, Xisaabiyaha Guud waxa uu mas'uul ka yahay:

(b) in uu garto, isla markaana hirgeliyo isbeddelada loogu baahanyahay si loo bilaabo adeegsiga saxiixyada elegtaroonigga ah ee nidaamyada macluumaadka maaliyadeed ee hoos yimaaddo maamulka Xisaabiyaha Guud;

(t) dhisidda xirfadaha muhiimka u ah in si waxtar leh, oo wax-ku-ool ah looga shaqaysiiyo
Nidaamka Soomaaliya ee Maareynta Macluumaadka Maaliyadeed; iyo

(j) la-talinta Wasiirka ee ku saabsan soo saarista tilmaamaha ay tahay in loo raaco habka tignoolajiyada casriga ah loogu isticmaalaayo Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).

Qodobka 29aad:
Agaasimaha Miisaaniyadda

1. Iyada oo uu hagaayo Wasiirku, Agaasimaha Miisaaniyaddu waxa uu mas'uul ka yahay aqoonsiga iyo hirgelinta isbeddelada loo baahan yahay si loo meelmariyo adeegsiga tiknoolajiyada casriga ah ee khusaysa nidaamka miisaaniyadda, sida uu Xeer-nidaamiyahan dhigaayo iyo weliba Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019, Qodobkiisa 56-aad.

2. Si loo gaaro ujeedooyinka Faqradda 1-aad ee Qodobkan, Agaasimaha Miisaaniyadda ayaa masuul ka ah:

(b) Aqoonsashada iyo hirgelinta isbeddelada loo baahan yahay si loo bilaabo adeegsiga saxiixyada elektarooniga ah ee nidaamyada macluumaadka maaliyadeed, ee hoos yimaadda Agaasinka Waaxda Miisaaniyadda;

(t) Dhisidda xirfadaha muhiimka u ah in si waxtar leh, oo wax-ku-ool ah looga shaqaysiiyo

Nidaamka Macluumaadka Maaliyadeed, inteeda hoos timaadda Agaasinka Waaxda Miisaaniyadda; iyo

(j) La-talinta Wasiirka ee ku saabsan soo saarista tilmaamaha ay tahay in loo raaco habka tiknoolajiyada casriga ah loogu isticmaalaayo hagaajinta iyo xoojinta nidaamka miisaaniyadda.

Qodobka 30aad:
Saraakiisha Idman

1. Saraakiisha Idman ee hay'addaha Dawladda ayaa mas'uul ka ah hirgelinta adeegsiga saxiixyada elektarooniga ah, waxayna raacayaan tilmaamaha iyo hagista Wasiirka hadba sida baahidu tahay.

2. Sarkaalka Idman, haddii ay dhacdo in uu isbeddel ku yimaaddo doorarka iyo mas'uuliyadaha saraakiisha isaga ka hoosaysa ee adeegsada nidaamyada macluumaadka ee maareynta maaliyadda guud, waxa saaran mas'uliyadda ah in uu si degdeg ah isbedeladaas u ogaysiiyo Wasiirka, Xisaabiyaha Guud iyo Agaasimaha Miisaaniyadda.

Qodobka 31aad:
Qorshayaasha Joogtaynta Shaqada Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka
Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS)

Iyada oo loo hoggaansamaayo tilmaamaha Wasiirka, Xisaabiyaha Guud waa in uu ka faa'iideeyo adeegsiga tiknoolojiyadda casriga ah, si uu u hirgeliyo qorshayaal looga dan leeyahay hubinta sii socoshada (joogtaynta) shaqooyinka muhiimka ah ee NidaamXisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), marka ay ku yimaaddaan carqalado amaba khalkhal weyn oo dhinaca tiknoolajiyadda ah, uuna abuuro hannaan soo kabasho.

Qodobka 32aad:
Hannaanka Korjoogtaynta Guulaha

1. Wasaaraddu waa in ay dejisaa, walibana hawlgelisaa Hannaanka Korjoogtaynta Guulaha si loo cabbiro, loogana warbixiyo saamaynta iyo natiijooyinka ka dhasha dadaallada dijitaalaynta nidaamka maareynta maaliyadda guud.

2. Dhammaan hay'adaha Dawladda ee ka qayb-qaadanaya dadaallada dijitaalaynta nidaamka maareynta maaliyadda guud, waa inay si joogto ah usoo gudbiyaan xogta iyo macluumaadka looga baahanyahay, si loo diyaariyo warbixinnada Hannaanka Korjoogtaynta Guulaha.

3. Hannaanka Korjoogtaynta Guulaha waa inuu ka koobnaada:

(b) Halbeegyada bar-bilowga iyo nidaamyada cabbirrista horumarka iyo natiijooyinka;

(t) Jadwallada kasoo warbixinta, kuwaas ee uu ansixiyay Xisaabiyaha Guud; iyo

(j) Habraac si madaxbannaan loogu xaqiijinaayo natiijooyinka la soo gudbiyay.

4. Si uu dib-ugu-eego, kadibna u ansixiyo, Xisaabiyaha Guud waa in uu warbixin sanadle ah ee Hannaanka Korjoogtaynta Guulaha u gudbiyaa Wasiirka.

Qodobka 33aad:
Istaraatiijiyada Maareynta Isbeddelka

1. Hay’ad kasta oo Dawladeed ee ka qayb-qaadanaysa dadaallada dijitaalaynta nidaamka maareynta maaliyadda guud waa inay diyaarsataa, kadibna hawlgelisaa Istaraatiijiyada Maara (haddii loo baahdo); iyoeynta Isbedelka, si loo hubiyo in si wax-ku-ool ah loo dhaqangeliyo dadaallada dijitalaynta nidaamka maaraynta maaliyadda guud.

2. Istaraatiijiyada Maareynta Isbedelka waa inay ka koobnaata:

(b) Qorshayaasha xog-wadaagista iyo habraacyada latashiga daneeyayaasha;

(t) Barnaamijyo lagu tababaraayo shaqaalaha iyo habraacyada iyo agabka kale ee loogu fududeeynaayo shaqaalaha isticmaalka nidaamka dijitaalka ah;

(j) Qorshayaasha dib-u-habeynta hay'add

(x) Tallaabooyinka wax looga qabanayo dhaqamada ka hor imanaya dadaallada dijitalaynta nidaamka maareynta maaliyadda guud.

3. Xisaabiyaha Guud ayaa korjoogteeynaaya sida hay'addaha Dawladdu ugu hoggaansanyihiin Istaraatiijiyadooda Maareynta Isbedelka, waxa uuna lixdii biloodba mar u diraaya Wasiirka, Warbixinta U-hoggaansanaanta Istaraatiijiyada Maareynta Isbedelka.

CUTUBKA 6-AAD
GARAADKA MACMALKA AH

Qodobka 34aad:
Ujeeddada iyo Baaxadda Adeegsiga Garaadka Macmalka ah

Ujeedada Xeer-nidaamiyahan waa in uu hago isticmaalka iyo hawlgelinta barnaamijyada ku shaqeeya garaadka macmalka ah, marka ay timaaddo socodsiinta hawlaha maareynta Maaliyadda Guud; waxaana looga jeedaa in la hubiyo sidii aaladdan loogu adeegsan lahaa si ay ku dheehantahay mas'uuliyad iyo anshax, isla markaana, la jaan-qaadaysa danaha guud ee bulshada.

Qodobka 35aad:
Mabaad'iida Gundhigga u ah Adeegsiga Garaadka Macmalka ah

1. Adeegsiga garaadka macmalka ah, marka loo adeegsanaayo socodsiinta hawlaha nidaamyada macluumaadka Maaliyadda Guud, waa in ay waafaqsanaato amaba la jaanqaaddo mabaad'iida halkan ku xusan:

(b) La sharixi karo (la micnayn karo): Hab-fikirka, hab-socodsiinta shaqada iyo natiijooyinka ka soo bixi kara adeegsiga amaba shaqada barnaamijyada ku shaqeeya garaadka macmalka ah, waa in loo fasiri karo daneeyayaasha ay khusayso si ay faham fiican u helaan;

(t) Mas'uuliyadda: Iyada oo la adeegsanaayo garaadka macmalka ah, hadana waa in ay caddaato cidda lahayd mas'uuliyadda gaarista go'aamadu. Si shaki meesha looga saaro, Saraakiisha Dawladda ayaa leh wixii mas'uuliyad ah, oo lagula xisaabtamayaa, xataa haddii ay adeegsadaan amaba ay caawimo ka helaan barnaamijyada ku shaqeeya garaadka macmalka ah;

(j) Takoor-la'aan iyo Xaqsoor: Nidaamyada ku shaqeeya garaadka macmalka ah, waa in loo qaabeeyo, loona adeegsado si ka maran eex iyo takoor gardarro ah. Si taas loo hubiyo, baaritaano joogto ah waa in nidaamyada lagu sameeyo, lana hubiyo in xeerarkii arimahaas ka yaalay loo hogaansamay.

(x) Asturnaanta iyo Ilaalinta Xogta: Barnaamijyada ku shaqeeya garaadka macmalka ahi waa in ay ku socdaan sharciyada iyo siyaasadaha jira ee u dejisan dhawrista xogta; iyada oo taas looga jeedo hubinta ilaalinta sumcadda shakhsiyaadka iyo dhawrsanaanta xogaha xaasaasiga ah.

(kh) Maareynta Khataraha: Waa in la dejiyo habraacyo looga jeedo aqoonsiga, qiimaynta iyo ka hor tagga khataraha ka iman kara adeegsiga garaadka macmalka ah, oo ay ku jiraan khataraha dhaqaale, bulsho iyo kuwa anshaxeed intuba.

Qodobka 36aad:
Samaynta iyo Hawlgelinta

1. Nidaamyada ku shaqeeya garaadka macmalka ah, waa in samayntooda iyo hawlgelintoodaba lagala tashado khubarada ay khusayso, oo ay ku jiraan saynisyahannada xogta digitalka ah, xeeldheerayaasha dhinaca anshaxa, iyo daneeyeyaasha kale ee ay taabanayso.

2. Ka hor inta aan si buuxda loo hawl gelinin, nidaamyada macluumaadka ee garaadka macmalka ah ku shaqeeya waa in si adag loo tijaabiyo, si loo hubiyo saxnaantooda, is-kuhallayntooda, iyo in aanay soo bixin natiijo aan lagu talagalin.

Qodobka 37aad:
Qiimeyn iyo Kormeer Joogto Ah

1. Nidaamyada ku shaqeeya garaadka macmalka ah, waa in si joogto ah loogu sameeyo kormeer iyo qiimayn, si loo ogaado hawl-qabadkooda, saameyntooda iyo waafaqsanaantooda halbeegyada anshaxa.
2. Waa in la dejiyo habab (talagal) si joogto ah loogu sii horumarinaayo nidaamyadan ku shaqeeya garaadka macmalka ah, iyada oo lagu salynaayo hadba jawaab-celinta dadka adeegsada ka soo noqota iyo marba halbeegyada cusub ee soo baxa.

Qodobka 38aad:
Tababar iyo Wacyigelin

1. Dhammaan shaqaalaha ku lug leh hawlgalka iyo korjoogtaynta nidaamyada garaadka macmalka ah ku shaqeeya waa in la siiyo tababar ku filan.

2. Si daneeyayaasha loo baro arimaha tixgelinta mudan ee dhinaca anshaxa, faa'iidooyinka iyo weliba khataraha ku jira adeegsiga nidaamyada ku shaqeeya garaadka macmalka ah, waa in la sameeyo barnaamijyo wacyigelineed.

Qodobka 39aad:
U-hoggaansanaanta Sharciyada

Barnaamijyada ku shaqeeya garaadka macmalka ah ee loo adeegsado maaraynta maaliyadda guud waa in ay u hoggaansanyihiin sharciyada iyo halbeegyada heer qaran iyo kuwa heer calami ah ee u dejisan adeegsiga garaadka macmalka ah.

Qodobka 40aad:
Ka Qaybqaadashada Dadweynaha iyo Ka Warbixinta

1. Waa in la sameeyo dadaalo looga jeedo dadweynaha iyo daneeyayaasha kalaba in ay qayb ka noqdaan fahmista iyo dib-u-eegista lagu samaynaayo adeegsiga nidaamyada garaadka macmalka ah ku shaqeeya ee dhinaca maareynta maaliyadda guud.

2. Si joogto ah waa in loo soo saaro warbixino ku saabsan waxqabadka, caqabadaha, iyo arimaha tixgelinta mudan marka ay timaaddo adeegsiga aaladaha ku shaqeeya garaadka macmalka ah, ee loo adeegsanaayo maamulka maaliyadda guud.

CUTUBKA 7-AAD
QODOBBADA KALE EE GUUD

Qodobka 41aad:
Ka Reebid

Si loo dejiyo hagayaal cad, Wasiirku waxa uu tilmaamo gaar ah ku soo saari doonaa habraacyada ka midka ah maamulka maaliyadda guud ee aan lagu dabaqayn xeerarka ku saabsan diiwaannada elektarooniga ah, isgaarsiinta elektarooniga ah iyo saxiixyada elektarooniga ah.

Qodobka 42aad:
Dhaqan-Galka

1. Xeer-nidaamiyahan waxa uu dhaqan-gal noqonayaa kadib marka ay ansixiyaan Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS, waxaana lagu Faafinayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyo Mareegta rasmiga ah ee Wasaaradda Maaliyadda.

2. Qodobbada Xeer-nidaamiyahan hadii ay iska hor yimaadaan qodobada ku soo baxay Xeernidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2022, waxa la qaadanayaa qodobada Xeer-nidaamiyahan.

3. Wasiirku wuxuu wareegto kusoo saari karaa amar, kaasoo dib loogu dhigaayo ama lagu hakinayo dhaqangelinta cutubyo, qaybo ama qodobbo ka mid ah Xeer-nidaamiyahan, si loo fududeeyo habsami u socodka dhaqangelinta Xeer-nidaamiyaha.

Lifaaqa 1-aad: Lakab-xogeedyada Maaliyadda (Fiscal Datasets)

Nuuca Xogta	**Tusaalooyinka Lakabyada Xogaha Maaliyadeed**
1. **Lakab-xogeedka Dakhliga**	(b) Dakhliga Cashuuraha: (cashuurta dakhliga, cashuurta shirkadaha, cashuurta iibka, iwm.); (t) Dakhliga aan Cashuuraha ahayn: (khidmadaha, ganaaxyada, iyo dakhliyada kale); (j) Ilo Maaliyadeed oo Dibadeed: (deeqaha iyo deymaha); iyo (x) Lacagaha Kaashka ah ee ka yimid Ilo Maaliyadeed oo Dibadeed (deeq iyo deyn la helay).
2. Lakab-xogeedyada Kharashaadka	(b) Kharashaadka Joogtada ah: (mushaharooyinka, bixinta biilasha korontada/ biyaha iwm, iibsiga badeecooyinka iyo adeegyada); (t) Kharashaadka Maalgashiga (mashaariicda kaabayaasha iyo iibsashada hantida); iyo (j) Maalgashiga Barnaamijyada Guud: (maalgelinta mashaariicda arimaha bulshada iyo qiimaynta natiijooyinka).
3. Lakab-xogeedyada Miisaaniyadda	(b) Miisaaniyadaha la Ansixiyay (Sharciga Qoondada Miisaaniyadda ee Sannadlaha ah); (t) Dib-u-eegisyo iyo Wax-ka-beddelka Miisaaniyadda; iyo (j) Qaabaynta Maaliyadeed ee Muddada Gaaban iyo Mudda Dhexe.

4. Lakab-xogeedyada Maareynta Hantida Dawladda	(b) Diiwaanka Hantida Dawladda (dhulka, dhismayaasha, qalabka, gaadiidka iwm); (t) Jadwallada qiimaha iyo qiima-dhaca hantida Dawlada; iyo (j) Diiwaannada lacagaha ku baxay ama ka soo hoyday hanti Dawladeed oo la iibiyay ama mid la soo iibsaday.
5. Lakab-xogeedyada Maaraynta Deynta	(b) Diiwaanka Deymaha Dowladda (deynta gudaha iyo tan dibedda); (t) Waajibaadka Deyn bixinta (bixinta dulsaarka iyo asalka ah); (j) Waajibaadka bixinta lacagaha cadaanka ah (lacagaha caddaanka ah ee loogu talagalay bixinta dulsaarka iyo
	deynta asalka ah); (x) Qiimeynta sida loo joogtayn karo bixinta deynta; (kh) Istaraatijiyadda Maareynta Deynta ee Muddada-Dhexe; iyo (d) Qorshaha Amaahda ee Sannadlaha ah.
6. Lakab-xogeedka Warbixinnada Maaliyadeed	(b) Warbixinaha Maaliyadeed ee Ku Salaysan Lacagaha Cad (warbixinta qaadashada iyo bixinta lacagaha); (t) Warbixinnada Hantidhawrka (natiijooyinka ka soo baxa baarista hantidhawrka gudaha iyo ka dibedda); iyo (j) Dukumentiyada iyo diiwaanada muujinaaya uhoggaansanaanta shuruucda iyo xeerarka maaraynta maaliyadda guud.
7. Lakab-xogeedyada Maareynta Mucaawinooyinka	(b) Mucaawinada dibedeed ee la helay (macluumaadka deeq-bixiyaha, faahfaahinta mashruuca iwm); (t) Warbixinnada qiimeynta isticmaalka mucaawinooyinka iyo saamayntooda; iyo (j) Warbixinnada qiimeynta isticmaalka lacagaha caddaanka ah ee caawimada ah iyo saameyntooda.

8. Lakab-xogeedyada Wax-qabadyada iyo natiijooyinka	(b) Tilmaamayaasha Muhiimka ah ee Waxqabadka (KPIs) ee ku saabsan maamulka maaliyadda; iyo (t) Natiijooyinka mashaariicda iyo adeegyada dadweynaha oo Dawladu bixiso (warbixinnada qiimeynta saameyntooda).
9. Lakab-xogeedyada Kala soocidda iyo Haykalka Xogaha (Metadata)	(b) Kala soocista xogaha (heerka sir-qarsoodi ee xog kasta, iyo ruqsadaha adeegsiga xogahaas ee loo baahanyahay);iyo (t) Halbeegyada ku aadan Haykalka Xogaha (Metadata) la xiriira Maareynta Xogaha Maaliyadeed.
10. Tilmaamayaasha Heerarka Dhaqaale iyo Kuwa Maaliyadeed	(b) Tilmaamayaasha Dhaqaalaha Guud (Wadarta Waxsoo-saarka Gudaha, heerarka sicir-bararka, shaqaaleynta); iyo (t) Tilmaamayaasha Badqabka Maaliyadeed ee Muddada Dheer (heerka is-dhinka miisaaniyadda, keydka lacageed ee caddaanka ah, isku jaangoynta heerka deynta qaran iyo Wadarta Wax-soo-saarka Gudaha).

Summad:MDW/05/2023-BF **Tr.28/10/2023**

Ujeeddo: Beec Guri lagu iibinayo Naado si waafaqsan Qod.338, 346, 397 ,398 iyo 406 ee XHMS.

Maxkamadda Degmada Waaberi, oo tixraaceyso xukuunnada ka soo baxay isla Maxkamadda Degmada Waaberi, lehna summadaha kala ah, **MDW/51/2021-BG, Lr.06/2022,** kuna taariikheysan **27/03/2022** iyo **Ref:73/2022-BG, Lr.01/2023-BX** kuna taariikheysan **15/01/2023.**

Sidoo kale, tixraaceyso Naadada Summadeedu tahay MDW/05/2023 ee ku tr.17/09/2023 laguna faafiyay si waafaqsan Qod.338, 346, 397 iyo 398 ee XHMS muddo 15 maalin ah oo ka bilaabaneysay 20/09/2023, kuna eg 05/10/2023, Facebook page-ka rasmiga ah ee Maxkamadda Racfaanka G/Banaadir iyo Radio Muqdisho, ayey maanta oo ay Taariikhdu tahay 25/10/2023 qabatay fadhi lagu iibinaayo NAADO GURI oo ay leeyihiin Dhaxaltooyada Marxuum Cabdullaahi Yalaxow Afrax, sida ku cad dhaxalkoobka Summadiisu tahay MDCCS/85/2022 ee ku tr.21/07/2022, lehna warqadda lacag Qabasho No.12298 ee ku tr.28/05/2022 iyo Dukuminti Duplicate ah lehna **B/B/S/10/48/2022,** ee ku tr.28/05/2022, gurigaas oo ku yaallo Degmada Waaberi, waaxda Horseed cabbirkiisu yahay 12x8Mtr, oo uu ka dhisan yahay Hool leh xafiisyo, jihooyinkiisuna yihiin **Waqooyi** Guri dad, **Koofur** jid **Bari** laamiga Via Uganda (Dabka) **Galbeed** Guri dad .

Fadhiga Naadada waxaa ka soo qeyb-galay oo shuruudaha Naadadana buuxiyay shirkadda **Dalkom Somalia** kaliya, oo uu matalayo, Guddoomiye **Maxamed Axmed Jaamac** lehna ID.No.2986, kana soo baxay Favori Airport oo bixiyay Carbuun Dhan ($18,000) sideed iyo toban kun oo doolar.

Majiro shaqsi ama shirkad kale, oo carbuun bixiyay si uu uga qeyb-galo beecaas naadada ah iyadoo xitaa Maxkamadda ay kordhisay muddo 20 cisho ah si loo helo qiimo ka sarreeyo qiimaha ay gaartay shirkadda magaceeda kor ku xusan yahay.

Qiimaha Guriga Aasaaska u ah ayaa ahaa lacag dhan **$180,000** (Boqol iyo Sideedan ku oo doolar ah) oo ay Maxkamadda dalbatay qiimahaas waxaa gaaray Shirkadda Dalkom, girigaas hadda waxaa ijaar ahaan u deggan Shirkadda Rajo Cable Tv.

Gmail: Maxkamaddadegwaaberi@Gmail.Com

CamScanner

Sidaa darted, Maxkamadda Degmada Waaberi waxa ay go'aamisay.

- Guriga leh tilmaanta sare ku xusan waxa ay ka iibisay shirkadda **Dalkom Somalia** uuna matalayo Guddoomiye Maxamed Axmed Jaamac waxa ayna uga iibisay lacag dhan $180,000 (boqol iyo sideetan kun doolar).
- Dhammaan dukumintiyada Guriga ee sare ku xusan waxa ay ku wareejisay iibsadaha oo ah shirkadda Dalkom uuna Matalayo Guddoomiye Maxamed Axmed Jaamac.
- Qarashka lagu sameeyay Duplicate-ka oo ah lacag $3,200 (Sadax kun iyo labo Boqol doolar ah), waxaa la dulsaaray dhaxaltooyada Cabdullaahi Yalaxow Afrax.
- Maaliyadda oo ah 2% waxaa la dulsaaray dhaxaltooyada marxuum Cabdullaahi Yalaxow Afrax, iyadoo la waafajinayo Xeer nidaamiyaha Ujuurada Maxkamadaha ee Ref: MOF/OM/1828/2023 ee soo baxay Maarso 19/2023.
- Go'aankaan waxa uu dhacay manta oo taariikhdu tahay 28/10/2023.

Cabdullaahi Maxamed Rooble
Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Waaberi

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
MAXKAMADDA DEGMADA WAABERI
WABERI DISTRICT COURT
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Gmail: Maxkamaddadegwaaberi@Gmail.Com

SHARCI LR.41 **TAARIIKH: 22-DA OKTOOBAR 2025**

SHARCIGA AXDIGA AFRIKA EE XUQUUQDA IYO BARAARAHA CARUURTA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/778/B11/25**, ku taariikheysan **21/10/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Axdiga Afrika ee Xuquuuqda iyo Baraaraha Caruurta.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Axdiga Afrika Ee Xuquuqda Iyo Baraaraha Caruurta.

Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRAHA GUUD
DIWAAN NO: Han-985-25
TAARIIKH: 13/12/2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

Madaxweynaha J. F.S.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha

Axdiga Afrika ee Xuquuqda iyo Baraaraha Carruurta

Muqdisho - Soomaaliya
August 2023

ARAR

Dawladaha Xubnaha ka ah Ururka Midnimada Afrika, ee Qeybta ka ah Axdigan hadda jira ee lagu magacaabo "Axdiga Afrika ee Xuquuqda iyo Baraaraha Carruurta," ayaa iyagoo:

TIXGALINAYA in Axdiga Ururka Midnimada Afrika uu aqoonsado ahamiyadda sarreynta xuquuqda aadanaha iyo in Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo dadka lagu baaqay la iskuna raacay in ruux kasta uu leeyahay dhammaan xuquuqda iyo xorriyadaha lagu aqoonsaday laguna damaanad qaaday Axdigan iyadoo aan sina loo kala soocin, ha ahaato isir, qolo, midab, jinsi, luqad, diin, ama fikrad siyaasadeed, ama aragti kasta oo kale, qaran ama asal bulsho, hanti, dhalasho, ama xaalad kale,

XUSUUSANAYA Baaqa Xuquuqda iyo Baraaraha Carruurta Afrika (AHG / ST.4 REV.1) ee ay ku ansixiyeen Madaxweyneyaasha Dawladaha iyo Madaxda Xukuumadaha Ururka Midnimada Afrika kalfadhigoodii Caadiga ahaa ee lix iyo tobnaad ee Monrovia - Liberia laga soo bilaabo 17kii illaa 20kii Luulyo 1979kii, inuu aqoonsaday baahida loo qabo in la qaado tallaabooyin habboon, si kor loogu qaado loona ilaaliyo Xuquuqda iyo Baraaraha Carruurta Afrika.

KA WALWALSAN in xaaladda inta badan carruurta Afrika ay tahay mid halis ah iyadoo ay ugu wacan yihiin xaaladaha gaarka ah ee dhaqaale-bulsho, dhaqan, caado iyo duruufaha horumar, musiibooyinka dabiiciga ah, colaadaha hubaysan, kaga-faa'iidaysi duruuf (explotation) iyo baahi, iyadoo la tixgalinayo bisayl la'aanta maskaxeed iyo midda jireeed ee carruurta waxay u baahan yihiin dhowris iyo daryeel gaar ah.

GAROWSADAY in Ilmuhu bulshada Afrika kaga jiraan kaalin sharfan iyo in carruurtu ugu barbaaraan qaab dhammaystiran kuna koraan bay'ad qoys oo ay ku dheehan tahay jawi farxadeed, jacayl iyo isfaham,

GAROWSADAY in ilmuhu sababo la xiriira baahida koritaanka jirkiisa iyo maskaxdiisa dartood uu u baahan yahay daryeel gaar ah oo ku aaddan horumarkiisa caafimaad, jireed, maskaxeed, akhlaaqeed iyo kan bulsho una baahan yahay ilaalin sharciyeed oo ku dhacda jawi xornimo, sharaf iyo amni,

TIXGALINAYA wanaagga hiddahooda dhaqan, sooyaalkooda taariikheed iyo qiyamka ilbaxnimada Afrika kaasoo boggaadiya islamarkaasna tilmaama sida ay u arkaan fikradda xuquuqda iyo baraaraha ilmaha,

TIXGALINAYA in kor u qaadista iyo dhowrista xuquuqaha iyo baraaraha ilmaha ay maldahayso waajibaad saaran ruux kasta,

ADKAYNAYANA KU DHAGANAANTA mabaadii'da xuquuqda iyo daryeelka Carruurta ee ku xusan baaqa, heshiisyada iyo axdiyada kale ee Ururka Midnimada Afrika iyo Qaramada Midoobay, gaar ahaan Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta, iyo baaqa Madaxweyneyaasha Dawladaha iyo Madaxda Xukuumadaha Ururka Midnimada Afrika ee ku saabsan Xuquuqda iyo Bareeraha Carruurta Afrika .

WAXAY ISKU RAACEEN SIDA SOO SOCOTA:

QEYBTA 1
XUQUUQ IYO WAAJIBAAD

CUTUBKA KOWAAD
XUQUUQDA IYO BARAARAHA CARRUURTA

Qodobka 1aad
Waajibaadka Saaran Dawladaha Xubnaha Ka Ah

1. Dawladaha xubnaha ka ah Ururka Midnimada Afrika ee qeybta ka ah Axdiga hadda jira waxay aqoonsan doonaan xuquuqaha, xorriyadaha iyo waajibaadka ku xusan Axdigan, waxayna qaadayaan talaabooyinka lagama-maarmaanka ah, iyadoo la raacayo habraaca dastuuriga ah iyo qodobada ku xusan Axdiga hadda jira, si ay u meelmariyaan shuruuc ama tallaabooyinka kale ee lama-huraanka u ah hirgelinta qodobada axdigan

2. Ma jiro Qodob ku xusan Axdigan oo saamaynaya qodobbada sida ugu wanaagsan u xaqiijinaya xuquuqda iyo baraaraha caruurta ee ku jira xeerka Dawladda Xubinta ka ah ama heshiis kasta oo kale ee Caalami ah ama axdi dhaqangal ka ah dalkaas.

3. Caado kasta, dhaqan iyo hidde kasta, ama dhaqan-diimeed kasta oo aan waafaqsanayn xuquuqda, mas'uuliyadaha iyo waajibaadka ku xusan Axdigan lama dhiirigalinayo, iyadoo la tixgalinayo hadba inta ay la'eg tahay iswaafaqsanaanta.

Qodobka 2aad
Qeexid Caruur

Marka la eego Ujeeddooyinka Axdigan erayga "caruur" micnihiisu waa qof kasta oo ay da'diisu ka yartahay 18 sano.

Qodobka 3aad

Takoor La’aan

Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xuquuqda iyo xorriyadaha lagu aqoonsaday laguna damaanad qaaday Axdigan, iyadoo aan loo eegeyn isir, qolo, midab, jinsi, luqad, diin, fikrad siyaasadeed ama mid kale, asalka qaran ama kan bulsho, hanti, dhalasho ama xaalad kale ee ilmaha waalidkiisa ama mas’uulkiisa sharci.

Qodobka 4aad

Danta Ugu Wanaagsan ee Carruurta

1. Waa in la tixgeliyaa danta ugu wanagsan ee carruurta marka uu qof ama maamul qaadayo tallaabo kasta oo khuseysa carruurta.
2. Dhammaan dacwadaha garsoor ama kuwa maamul ee saamaynaya ilmo awood u leh inuu muujiyo aragtidiisa, waxaa la siinayaa ilmaha fursad lagu dhageysto si toos ah ama iyadoo la sii marayo wakiil dhexdhexaad ah oo qeyb ka ah dacwada, fikradahaasna maamulka ay quseeyaan waxay siin doonaan tixgalin si waafaqsan qodobbada sharciga.

Qodobka 5aad

Badbaado Iyo Horumar

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay nolosha. Xaqaasna waxaa ilaalinaya sharciga.

2. Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan waxay xaqiijinayaan, , badbaadada, ilaalinta iyo horumarinta ilmaha inta ugu saraysa ee suurogal ah.
3. Xukun dil ah laguma ridi karo carruurta fal-dambiyeed ay galeen darteed.

Qodobka 6aad

Magaca iyo Jinsiyadda

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay in loo bixiyo magac marka uu dhasho.
2. Ilmo kasta waa in la diiwaan-galiyaa isla marka uu dhasho .
3. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo jinsiyad.

4. Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan waxay ku dadaalayaan xaqiijinta in sharciyadooda lagu qeexo mabaadii'da uu ilmu ku heli karo Jinsiyada Dawladda uu dhulkeeda ku dhashay, haddii aysan dhalasho siin Dawlad kale si waafaqsan qawaaniinteeda marka uu ilmu dhasho.

Qodobka 7aad
Xoriyadda Hadalka

Ilmo kasta oo awood u leh inuu fikirkiisa ku muujiyo hadal ahaan wuxuu leeyahay xuquuq uu si xor ah ugu cabirayo fikiradihiisa ku saabsan dhammaan arrimaha iyo inuu faafiyo fikradihiisa si waafaqsan sharciga.

Qodobka 8aad
Xoriyadda Isku Imaashada

Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay ka qeyb-galka Urur iyo xorriyadda qabashada kulamo nabadeed si waafaqsan sharciga.

Qodobka 9aad
Xorriyad Fikir, Damiir iyo Diin

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leedahay xorriyadda fikirka, damiirka iyo diinta.

2. Waaliddiinta, iyo mas'uulka sharci ee ilmaha haddii la heli karo, waxaa waajibaad ka saaran yahay inay ilmaha ku hagaan kuna jiheeyaan adeegsiga xuquuqdaas iyaga oo tixgalinaya awoodaha koritaanka ee is bedbedalaya, iyo danaha ugu wanaagsan ee ilmaha.
3. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigaan waxay xushmaynayaan waajibaadka saaran waalidiinta iyo haddii la heli karo, mas' uulka sharci ee ilmaha oo ay tahay inay bixiyaan hagis iyo t i lmaamo ku aaddan helidda xuquuqdan iyadoo lagu salaynayo shuruucda iyo siyaasadaha qaran.

Qodobka 10aad
Illaalinta Nolosha gaarka ah

Ma jiro faro-gelin gardarro ah ama sharci darro ah oo lagu sameyn karo nolosha gaarka ah ee ilmaha, guriga qoyskiisa, ama farriimo loo soo diray, sidoo kale laguma xad-gudbi karo sharaftiisa iyo sumcaddiisa, iyadoo shardigu yahay in waalidka ama mas'uulka sharci ee ilmaha ay ku sameeyaan la-socosho maan-gal ah hab-dhaqanka carruurta. Ilmaha sharciga ayaa ka ilaalinaya faragalinta ama weerarada noocan ah .

Qodobka 11aad

Waxbarasho

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay waxbarasho.
2. Waxbarashada ilmuhu waxay diiradda saaraysaa:
   (a) Kobcinta i y o horumarinta shakhsiyadda ilmaha, hibadooda iyo kartidooda maskaxeed iyo jireed si faa'iidada ugu badan ee suuro-gal ah ay uga helaan ilmuhu;
   (b) Xoojinta ixtiraamka xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha asaasiga ah iyadoo si gaar ah loo tixraacayo kuwa lagu qeexay qodobbada heshiisyada kala duwan ee Afrika ee xuquuqda aadanaha iyo dadyowga, baaqyada iyo heshiishyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha;
   (c) Dhowrista iyo xoojinta akhlaaqda wanaagsan, qiyamka dhaqameed iyo hidaha Afrika;
   (d) U-diyaarinta mas'uuliyad nololeed oo ka dhex jirta bulsho xor ah , oo ay ku dheehantahay fahamka dulqaadka, wadahadalka, xushmadda iyo saaxiibtinimada ka dhaxaysa dhammaan kooxaha diimeed, qabiil iyo isir ee dadyowga;
   (e) Dhowrista madax-banaanida Qaran iyo wadajirka-dhuleed;
   (f) Dhiirri-gelinta iyo gaaritaanka Midnimada iyo wadajirka Afrika;
   (g) Horumarinta ixtiraamka deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah;
   (h) Kor-u-qaadista fahamka ilmaha ee ku aaddan daryeelka caafimaadka asaasiga ah.
3. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka ku habboon iyadoo looga gol-leeyahay sidii loo gaari lahaa xaqiijinta xuquuqdan waxayna si gaar ah:
   (a) U siinayaan carruurta waxbarasho asaasi ah oo lacag la'aan ah oo qasab ah;
   (b) U dhiirigaliyaan horumarinta waxbarashada dugsiga sare noocyadeeda kala duwan iyo in si tartiib-tartiib ah looga dhigo mid lacag la'aan ah oo ay dadka dhan heli karaan;
   (c) Uga dhigayaan tacliinta sare mid ay heli karaan dhammaan dadka iyadoo la eegayo karaanka iyo awoodda loona marayo waddo kasta oo maan-gal ah;
   (d) U qaadayaan tallaabooyin lagu dhiiri-galinayo in carruurtu ay si joogta ah u soo xaadiraan waxbarashada lana yareeyo carruurta waxbarashada ka harta;

(e) U qaadayaan tallaabooyin ku aaddan gabdhaha, carruurta hibada gaarka ah leh, carruurta danyarta ah, kuwa qaba dhibaatooyinka gaarka u ah, si loo xaqiijiyo in dhammaan qeybaha bulshadu ay si siman u wada heli karaan.

4. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay xushmeyn doonaan xuquuqda iyo waajibaadka waalidiinta, iyo mas'uulka sharci, markii ay

suurogal tahay, ay u doori karaan carruurta dugsiyo ka duwan kuwa ay Dawladdu asaastay kuwaas oo dabooli kara shuruudaha ugu hooseeya ee Dawladdu ansixisay si loo xaqiijiyo waxbarashada diimeed iyo midda akhlaaqeed ee carruurta iyadoo la tixgalinayo awoodaha isbadbadalaya ee ilmaha.

5. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka habboonsi loo dammaanad-qaado in ilmaha la kulmay ciqaab waalid ama mid iskuul in loola dhaqmo si ay ku jirto bani'aadamnimada, xushmadda iyo

karaamada ilmaha .

6. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay diyaarinayaan dhammaan talaabooyinka ku habboon si loo xaqiijiyo in carruurta uurka yeelata inta aysan dhammaysan waxbarashadooda ay helaan fursad ay ku sii wataan waxbarashadooda iyadoo la eegayo awoodda ay ku sii wadan karaan

waxbarashada.

7. Ma jirto qeyb kamid ah qodobkan oo loo fasiran karo in lagu faragaliyo xorriyadda shaqsiyaadka iyo ururadu ay ku asaasayaan kuna hagayaan xarumo waxbarasho haddii xarumahaasi u hoggaansan yihiin shuruudaha ku qeexan faqrada (1) ee qodobkan islamarkaasna tayada waxbarashada laga bixiyo xarumahani waafaqsan tahay heerarka ugu hooseeya ee ay dajisay Dawladdu.

Qodobka 12aad
Waqtiyada Firaaqa, Madadaalo Iyo Howlaha Dhaqan

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay aqoonsan yihiin xaqa ilmuhu u leeyahay nasiino iyo firaaqo, iyo inuu helo ciyaar iyo hawlo madadaalo oo ku habboon da'da ilmaha iyo inuu si xor ah uga qeybgalo nolosha dhaqan iyo midda faneed.
2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay xushmeynayaankorna u qaadayaan xaqa uu ilmuhu u leeyahay inuu si buuxda uga qeyb-galo nolosha dhaqan iyo midda faneed, waxayna dhiiri-gelinayaan bixinta fursado loo siman yahay oo habboon kuna aaddan hawlaha firaaqada, madadaalada, dhaqanka iyo fanka.

Qodobka 13aad
Carruurta Naafada ah

1. Ilmo kasta oo qaba naafonimo maskaxeed ama jireed wuxuu xaq u leeyahay tallaabooyin ilaalineed oo gaar ah lana jaan-qaadaya baahidiisa jireed iyo midda akhlaaqeed kuwaasoo dhammaantood ku dhacaya xaalado dammaanad qaadaya sharafta ilmaha korna u qaadaya ku-tiirsanaanta naftiisa iyo inuu si firfircoon uga qeyb-galo nolosha bulshada.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay xaqiijinayaan, iyadoo ku xiran awoodda dhaqaale ee la heli karo, in carruurta naafada ah iyo

   dadka masuulka ka ah daryeelkooda, inay ku helaan kaalmo, codsiyada ay sameeyeen, taasoo ku habboon xaaladaha ilmaha, waxayna si gaar ah Dawladuhu xil iskaga saarayaan in ilmaha naafada ah uu heli karo tababarro tayo leh iyo in loo diyaariyo fursadaha shaqo iyo kuwa madadaalo oo gacan ka gaysan kara in ilmuhu gaari karo isdhexgalka bulsho, horumar shaqsi, dhaqan iyo mid
   akhlaaqeed oo maan-gal ah.
3. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay u adeegsanayaan awooddooda dhaqaalesi tartiib ah nolosha loogu fududeynayo dadka naafada ah, gaar ahaan dhaqdhaqaaqa u sahlaya shaqsiga naafada ka ah maskax iyo jir ahaan galitaanka dhismeyaasha waaweyn iyo goobaha kale ee u baahan yahay qofka naafada ah inuu galo si uu uga fushado dan uu leeyahay.

Qodobka 14aad
Caafimaadka iyo Adeegyada Caafimaadka

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xaaladda caafimaad maskaxeed, jireed ama ruuxeed ee ugu wanaagsan.
2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay dadaal buuuxa ku bixinayaan in si buuxda loo hirgaliyo xaqqan waxayna qaadi doonaan tallaabooyinka:

(a) lagu yaraynayo heerka dhimashada dhallaanka iyo ilmaha;

(b) Lagu xaqiijinayo sidii loogu heli lahaa carruurta oo dhan caawinaadda caafimaad ee lagama-maarmaanka ah, iyadoo la horumarinayo adeegyada daryeelka caafimaadka aasaasiga ah;

(c) Lagu xaqiijinayo bixinta quudin ku filan iyo biyo nadiif ah oo la cabo;

(d) Lagula dagaalamayo cudurrada iyo nafaqo-darrada iyadoo loo marayo nidaamka daryeelka caafimaadka ee asaasiga ah lana adeegsanayo tiknoolajiyadda ku habboon;

(e) Lagu xaqiijinayo in hooyooyinka uurka leh iyo kuwa nuujinaya ay helaan daryeelka caafimaad ee ay u baahan yihiin;

(f) Lagu horumarinayo aqoonta ka-hortagga cudurada iyo nolosha qoyska iyo
bixinta adeegga caafimaad;

(g) Loogu dhafayo barnaamijyada daryeelka caafimaadka asaasiga ah qorsheyaasha horumarinta qaranka;

(h) Lagu xaqiijinayo in dhammaan qeybaha kala duwan ee bulshada, gaar ahaan waalidiinta, carruurta, hoggaamiyeyaasha iyo shaqaalaha bulshada, lagu wargeliyo laguna taageero adeegsiga aqoonta asaasiga ah ee ku saabsan caafimaadka iyo quudinta ilmaha, faa'iidooyinka naas-nuujinta, fayo-dhowrka iyo nadaafadda deegaanka iyo ka-hortagga shilalka guriga iyo kuwa kale;

(i) Lagu xaqiijinayo in si wax-ku-ool ah ay uga qeyb-galaan ururada aan dowliga ahayn, bulshada deegaanka, iyo bulshada la caawinayo, qorshaynta iyo maaraynta barnaamijyada adeegyada asaasiga ah ee carruurta loogu talo-galay;

(j) Lagu taageerayo farsamo iyo maaliyad ahaanba xoojinta awoodda bulshada ee ku aadan diyaarinta daryeel caafimaad oo asaasi ah oo loogu talo-galay carruurta.

Qodobka 15aad
Ku Shaqaysiga Carruurta

1. lmo kasta waxaa laga ilaalinayaa nooc kasta oo ka faa'iideysi dhaqaale ah iyo inuu qabto shaqo kasta oo halis ku keeni karta ama faragalin karta horumarka jireed, maskaxeed, akhlaaqeed, ruuxeed ama kan bulsho ee ilmaha.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka maamul iyo sharci ee habboon si loo xaqiijiyo hirgalinta buuxda ee qodobkaan, kaasoo daboolaya shaqaalaysiinta labada qaybood ee Dawladda iyo kuwa aan rasmig ahayn iyadoo la tixgalinayo qodobbada la xiriira halbeegyada Hay'adda Shaqada Caalamiga ah(ILO) ee ku saabsan carruurta, Dawladaha Xubnaha ka ah Axdiga waxay si gaar ah:

(a) Sharci ugu xeerin doonaan da'da ugu hoosaysa ee aqbalaadda shaqaalaysiin kasta;

(b) u samayn doonaan xeerarka habboon ee qeexaya saacadaha iyo shuruudaha shaqaalaysiinta;

(c) u dajin doonaan ciqaabo munaasib ah ama ganaaxyo kale si loo xaqiijiyo dhaqangelinta wax-ku-oolka ah ee Qodobkan;

(d) kor ugu qaadi doonaan wacyiga dhammaan qeybaha bulshada ee halista ka dhalan karta shaqaalaysiinta carruurta.

Qodobka 16aad
Ka-ilaalinta I lma ha Xad-gudub Iyo Jirdil

1- Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan tallaabooyin maamul, sharci, bulsho iyo waxbrasho oo gaar ah oo ilmaha looga ilaalinayo dhammaan noocyada jirdilka, dhaqamada ka baxsan bini'aadanimada ee bahdilaadda ahgaar ahaan dhaawaca maskaxeed, ama jireed ama xad-gudubyada kale, dayacaad ama dhaqan-xumo ay kamid tahay xad-gudub galmo marka ilmaha la daryeelayo.

2- Tallaabooyinka ilaalinta ee Qodobkan ku xusan waxaa ku jira habraacyo wax-kuool ah oo lagu asaasyo qeybo kormeer oo gaar ah, si ay u bixiyaan taageerada lagama-maarmaanka u ah carruurta iyo kuwa daryeelka siinaya, iyo sidoo kale noocyada kale ee ka-hortag ah iyo aqoonsi, soo tabin, u gudbin baaritaan,

daaweyn iyo dabagal kiisaska xad-gudubka iyo dayaca ee carruurta loo geysto.

Qodobka 17aad
Maamulka Caddaaladda Da'yarta

1- Ilmo kasta oo lagu eedeeyo ama lagu helo dambi ah inuu jabiyay sharci ciqaabeed wuxuu xaq u leey ahay in si gaar ah loola dhaqmo, taasoo waafaqsan dareenka sharafeed iyo qiimo ee

ilmaha, sidoo kale xoojinaysa xushmada uu ilmuhu u hayo xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha asaasiga ah ee dadka.

2- Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay si gaar ah :

(a) U xaqiijinayaan in ilmo la xiray ama xasbi la geliyay ama laga qaaday xorriyaddiisa aan loo geysan jirdil, dhaqan iyo ciqaab ka baxsan bini'aadanimada oo liidaya ilmaha;

(b) U xaqiijiyaan in meesha ay ku xiran yihiin ama ku xabisan yihiin laga aysan la wadaagin dadka waaweyn;

(c) U xaqiijiyaan in ilmo kasta oo lagu eedeeyay jabinta sharci ciqaabeed in:

(d) loo aqoonsado inuu yahay dambi-laawe ilaa iyo inta lagu caddeeynayo inuu geystay dambigaas;

(e) Ilmaha waxaa sida ugu dhaqsaha badan loogu wargalinayaa eedda loo haysto, iyadoo la adeegsanayo luqad uu fahmayo, wuxuuna xaq u leeyahay inuu helo kaalmo tarjumaan haddii uusan fahmayn luqadda la isticmaalayo;

(f) Ilmaha waxaa la siinayaa kaalmada sharci ee uu u baahan yahay iyo wixii kale ee caawin ah, marka la diyaarinayo lana soo jeedinayo difaaciisa;

(g) Kiiska ilmaha waxaa go'aan looga gaarayaa sida ugu dhaqsaha badan ee ugu maan-galsan, iyadoo loo marayo maxkamad dhexdhexaad ah, haddii dambi lagu helana wuxuu xaq u leeyahay inuu racfaan u qaato maxkamad ka saraysa;

(h) Maxkamadeynta waxaa laga mamnuucayaa saxaafadda iyo dadweynaha.

3- Ujeedada ugu muhiimsan ee qaabka loola dhaqmayo ilmo kasta muddada maxkamadeyntu socoto waa iyo sidoo kale marka lagu helo dambi ah inuu ku jabiyay sharci ciqaabeed waa in la toosiyaa, dib loo la mideeyo qoyskiisa, iyo inuu helo dhaqancelin bulsho.

4- Waxaa la xaddidayaa da'da ugu yar ee ay carruurtu masuuliyad ciqaabeed ku qaadi karaan.

Qodobka 18aad
Ilaalinta Qoyska

1. Qoysku wuxuu noqonayaa unugga dabiciiga ah iyo asaaska bulshada. Dawladdu waxay ilaalinaysaa gacanna ka geysanaysaa asaaska iyo hormarka qoyska.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan tallaabooyin ku habboon xaqiijinta sinaanta xuquuqda iyo mas'uuliyadaha lammaanaha

isqaba ee ku aadan carruurta muddada uu guurku jiro iyo xitaa haddii uu yimaaddo furriin. Haddii furriin uu yimaado waxaa la qaadayaa tallaabooyin lagama-maarmaan ah oo lagu ilaalinayo Carruurta..

3. Ilmaha sinaba looguma diidi karo daryeel iyo xanaano iyadoo lagu salaynayo xaaladda guur ee waalidiinta.

Qodobka 19aad
Daryeelka iyo Ilaalinta Waalidka

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo daryeel waalid iyo ilaalin wuxuuna mar kasta oo ay suura-gal tahay, xaq u yeelanayaa inuu la noolaado waalidkiis. Ma jiro ilmo laga kaxaynayo waalidkiisa iyadoo uusan raali ka ahayn arrintaas ilmuhu, marka laga reebo haddii awood garsoor si sharciga waafaqsan ay go'aamiso in kala saaridda noocaas ah ay ku jirto danta ugu wanaagsan ee ilmaha.

2. Ilmo kasta oo laga kaxeeyay mid kamid ah labada waalid ama labadoodaba wuxuu xaq u leeyahay inuu labada waalidba la yeesho xiriir shaqsi iyo xiriir toos ah oo joogto ah.
3. Haddii kala kaxayntu(Separation) ay ka dhalatay tallaabo ay qaaday Dawladda Xubinta ka ah Axdigan, Dawladda Xubinta ka ah Axdigan, waxay ilmaha ama haddii ay ku habboon tahay, xubin oo muhiim ah oo ka tirsan qoyskiisa siinaysaa xogo muhiim ah oo ku saabsan halka ay ku sugan yihiin xubinta ama xubnaha maqan ee qoyska. Dawladaha Xubinta ka ah Axdigan waxay xaqiijinayaan in gudbinta codsigan uusan cawaaqib taban ku yeelanayn shaqsiga ama shaqsiyaadka iyaga dartood loo samaynayo.

4. Haddii Dawlad Xubin ka ah Axdigaan ay xirto ilmo, waxaa sida ugu dhaqsaha badan ee suura-galka ah, xarriggaas ugu wargalinaysaa waalidka ama mas'uulka sharci ee ilmahaas.

Qodobka 20aad
Mas'uuliyadaha Waalid

1. Waalidiinta ama shaqsiyaadka kale ee mas'uulka ka ah ilmaha waxaa saaran mas'uuliyadda kowaad ee barbaarinta iyo horumarinta ilmaha waxaanna waajib ku ah:

a) in danaha ugu wanaagsan ee carruurta mar kasta la siiyo muhiimadda kowaad;
b) In intii karaankooda iyo awooddooda dhaqaale ah ay xaqiijiyaan xaaladaha nololeed ee lagama-maarmaanka u ah nolosha iyo horumarka carruurta; iyo
c) Inay xaqiijiyaan in tallaabooyinka anshax-marinta guriga loo sameeyo si ay ku jirto bini'aadanimo iyo qaab waafaqsan sharafta uu ku dhashay ilmuhu.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay iyagoo tixgalinayo awooddooda dhaqaale iyo duruufaha qaran qaadayaan dhammaan tallaabooyinka habboon ee:

a) lagu caawinayo waalidiinta iyo shaqsiyaadka kale ee mas'uulka ka ah ilmaha, haddii loo baahdana waxay siinayaan cawimaad maaddi ah iyo barnaamijyo taageero oo la xiriira quudinta , caafimaadka, waxbarashada, dharka iyo hoyga;

b) Looga taageerayo waalidiinta iyo shaqsiyaadka kale ee mas'uulka ka ah howsha barbaarinta carruurtalaguna xaqiijiyo horumarinta hay'adaha mas'uulka ka ah bixinta daryeelka carruurta; iyo

c) La xaqiijiyo in carruurta waalidiintooda ay shaqeeyaan la siiyo adeegyada iyo tasiilaadka daryeel ee ay u baahan yihiin.

Qodobka 21aad

Ka-ilaalinta Ilmaha Falalka Dhaqan iyo Kuwo Bulsho ee Waxyeellada Leh

1) Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka ku habboon si loo ciribtiro falalka dhaqan iyo kuwa bulsho ee waxyeelada leh ee saamaynaya baraaraha, sharafta, koritaanka caadiga ah, iyo horumarka ilmaha, gaar ahaanna:

a) Caadooyinka iyo dhaqamada halista ku ah caafimaadka ama nolosha ilmaha; iyo

b) Caadooyinka iyo dhaqamada takoorka ku ah ilmaha ee ku salaysan jinsiga ilmaha ama xaalad kale.

2) Guursiga carruurta iyo in wiil ama gabar loo ballan-qaado in loo guurin doono qof kale xilli ay carruur yihiin, waa la mamnuucayaa waxaana la qaadayaa tallaabooyin wax-ku-ool oo uu ku jiro sharci, kaasoo qeexaya in da'da ugu hoosaysa ee guurka ay tahay 18 sano, iyadoo lagu diiwaan-galinayo dhammaan guurarka diiwaanka rasmiga ah ee Dawladda lagana dhigayo mid qasab ah.

Qodobka 22aad

Colaad Hubaysan

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay ballan-qaadayaan inay Dhowraan isla markaana dammaanad qaadayaan u hoggaansanaanta sharciga Caalamka ee bani'aadanimada, ee lagu dhaqmo marka ay socdaan colaadaha hubaysan ee saamaynaya Carruurta.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka lagama-maarmaanka ah si loo xaqiijiyo in ilmo uusan si toos ah uga qeyb-gelin dagaal iyo in laga waantoobo in ilmo loo qorto askar ahaan.

3. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay si waafaqsan

waajibaadkooda uu farayo sharciga Caalamiga ah ee bani'aadamnimada, ilaalinayaan dadka rayidka ah intay socdaan colaadaha hubaysan waxayna qaadayaan dhammaan tallaabooyinka suura-galka ah si loo xaqiijiyo ilaalinta iyo daryeelka carruurta kuwaas oo ay saameeyeen colaadaha hubaysan, xasaradaha iyo khilaafaadka.

Qodobka 23aad

Carruurta Qaxootiga ah

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan, waxay qaadayaan dhammaan tilaabooyinka ku habboon si loo xaqiijiyo in carruur doonaysa aqoonsi qaxootinimo ama loo arko inay yihiin qaxooti si waafaqsan shuruucda Dalka iyo kuwa caalamiga ah ee arrintan khuseeya, in haddii aan la wehlin ama uu wehliyo waalid, q mas'uul sharci ama qaraabo dhaow, ay helayaan ilaalinta habboon iyo kaalmo bini'aadanimo kuwaas oo ah xuquuqaha ku cad Axdigan iyo heshiisyada kale ee Arrimaha Bini'aadanimada iyo xuquuqda aadanaha ayna Dawladuhu qeyb ka yihiin.

2. Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan waxay ballan qaadayaan inay garab-istaag u muujiyaan dadaalada hay'adaha caalamiga ah ee ka shaqeeya ilaalinta iyo kaalmada ay ku doonayaan inay carruurtan ku caawiyaan kuna baadigoobaan waalidka ama qaraabada carruurta ama ilmo qaxooti oo aysan cidina wehlin si loo helo xogaha muhiimka ah si uu dib-ugula midoobo qoyskiisa.

3. Haddii ay dhacdo in la waayo wax waalid, mas'uul sharci, ama qof qaraabo dhow ah, ilmaha waxaa la siinayaa daryeel u dhigma midka la siiyo ilmaha kale ee si kumeelgaar ah ama joogto ah bay'ada qoyskiisa sababtii doontaaba ha noqotee.

4. Waxaa lagu dabaqayaa axkaamta qodobkan in kastoo isbadal lagu samayn karo(Mutatis Mutandis) carruurta ku barakacday gudaha dalka sababo la xiriira masiibooyin dabiici ah, colaado hubaysan oo maxali ah, dagaal sokeeye, burbur ku yimaada nidaamka bulshada iyo kan dhaqaalaha iyadoo aan la eegin cidda mas'uulka ka ah dhibaatooyinkaas.

Qodobkaka 24aad

Korsasho (Adoption)

Dawladaha Xubnaha ah Axdigan ee aqoonsan nidaamka korsashada (adoption) waxay xaqiijinayaan in danta ugu wanaagsan ee ilmaha mar kasta la siiyo mudnaanta kowaad, waxayna:

1. Asaasayaan hay'ad awood sharci u leh inay go'aamiso arrimaha korsashada(adoption) isla markaasina xaqiijisa in loo fuliyo si waafaqsan shuruucda iyo habraacyada arrintan khuseeya iyadoo laga duulayo dhammaan xogta iyo macluumaadka muhiimka ah ee arrintan la xiriirta iyo in la xaqiijiyo in korsashadan ay tahay mid la ogolyahay marka la eego xaaladda ilmaha ee ku saabsan waalidkiis, dadka mas'uulka ka ah sharci ahaan, iyo qaraabada dhow ee ilmaha iyo in haddii lama huraan ay noqoto in dadka saxda ah ee ay khusayso ay bixiyeen ogolaansho xog-ogaalnimo ku salaysan oo ku saabsan korsashada ilmaha xog-ogaalnimadaas oo ku timid la-talin saxan oo la siiyay cidda ay khusayso;

2. Haddii ilmaha loo waayo qoys baraabirya, korsada ama daryeel kale isagoo ku sugan dalkiisa uu ku dhashay, waxaa lagu dabaqayaa sida ku xusan Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta iyo Axdigan.
3. Xaqiijinayaan in ilmaha ay saamaysay korsashada dalalka ka dhexaysa inuu helo ilaalin iyo heerar nololeed oo u dhigma kuwa uu heli lahaa haddii wadankii uu u
   dhashay lagu korsado;
4. Qaadayaan dhammaan tallaabooyinka habboon si loo xaqiijiyo in marka la samaynayo korsashada dalalka ka dhexaysa, aysan horseedin ka-ganacsi bini'aadan ama ka-macaashid maaliyadeed oo qaldan oo ay ka helaan kuwa isku
   dayaya inay korsadaan ilmaha;
5. Kor u qaadayaan, haddii ay suura-gal ah, ujeedooyinka qodobkaan, iyagoo samaynaya heshiisyo laba geesood ah iyo kuwa dhinacyo badan iskuna dayaya inay adeegsadaan nidaam(framework) xaqiijiya in ilmaha ku sugan wadanka kale ay meeleyeen hay'adaha loo igmaday ee awoodda u leh;

6. Diyaarinayaan nidaam kormeer oo lagula soconayo daryeelka ilmaha la korsanayo(Adopted)

Qodobka 25aad

Ka Fogeynta Waalidka

1. Ilmo kasta oo si joogto ah ama si ku-meel gaar ah looga fogeeyo bay'ada qoyskiisa sababtii doontaa ha keentee, wuxuu xaq u leeyahay in la siiyoilaalin iyo cawimaad;

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan:

   a) Waxay xaqiijinayaan in ilmaha agoonta ama rajada ah ama ilmaha si buuxda ama si ku-meelgaar ah looga foogeeyay bay'ada qoyskiisa ama iyadoo la eegayo danta ugu wanaagsan ee ilmahaas aan loo ogolaan karin in lagu barbaariyo ama lagu koriyo bay'adaas, la siiyo daryeel qoys kale, oo uu ku jiro(in kastoo aysan ku ekayn), ku wareejin qoys koriya, ama

      hay'ad(Xarun) si ilmahu uu daryeel u helo;

   b) Waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka si loo baadigoobo dibna loogula mideeyo qoyskiisa ama eheladiisa, haddii kala fogayntu ay ka dhalatay barakac gudaha ah ama mid dibadeed oo ay sababtay colaad hubaysan ama masiibo dabiici ah..

3. Marka go'aan laga gaarayo qoyska kale ee ilamaha daryeelaya iyo danta ugu wanaagsan ee ilmaha, waxaa tixgalinta ku habboon la siinayaa rabitaanka siiwadida barbaarinta ilmaha iyo sooyaalka luqadeed, diimeed iyo qowmiyadeed ee ilmaha.

Qodobka 26aad

Ka ilaalinta Dir-sooca (Apartheid) iyo Takoorka

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay si kali iyo wadar ahba u ballanqaadayaa inay siinayaan mudnaanta ugu sarreysa baahiyaha gaarka ah ee carruurta ku hoos nool Dir-sooca(Apartheid) iyo Dawladaha ay saamaysay xasilooni la'aanta uu abuuray maamulka Dir-sooca ah.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay si kali iyo wadar ah u ballan-qaadayaan inay siinayaan mudnaanta ugu sarreysa baahiyaha gaarka ah ee carruurta ku hoos nool nidaam ku dhaqma takoor qowmiyadeed, mid qolo, mid diimeed ama noocyada kale ee takoorka, ama Dawlado ay saameeyeen deganaansho la'aan milatari.
3. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay ballan-qaadayaan in ay siiyaan, markii ay suura-gal tahay, kaalmo maadi ah carruurtan iyo inay u duwaan dadaalkooda ciribtirka dhammaan noocyada takoorka iyo dir-sooca ka jira Qaaradda Afrika.

Qodobka 27aad

Ka-faa'iideysi Galmo

Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay ballan-qaadayaan inay ka ilaaliyaan ilmaha dhammaan noocyada ka-faa'iidaysiga galmo iyo xad-gudubyada galmo waxayna gaar ahaan qaadadayaan tallaabooyinkan si looga hortago:

a) ku qancinta, ku dhiiri-galinta, iyo ku qasbidda ilmaha inay ku lugyeeshaan howl galmo;
b) U adeegsiga carruurta howlaha dhillaysiga ama falal kale oo galmo;U adeegsiga carruurta muuqaallada galmada, jilitaanka iyo agabka galmada.

Qodobka 28aad
Isticmaalka Daroogada

Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka ugu habboon si looga ilaaliyo carruurta isticmaalka daroogada iyo adeegsiga sharci darrada ah ee walxaha maan-dooriyaha ah, sida ku qeexan heshiisyada caalaamiga ah ee arrintan khuseeya loogana hortago u adeegsiga carruurta soo saarista iyo tahriibinta walxaha maan-dooriyaha ah.

Qodobka 29aad
Iibin, Tahriibin, Dawarsiga iyo Afduub

Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan tallaabooyin ku habboon si looga hortago:

a) afduubka, iibinta, ama tahriibinta carruurta ujeedkii la doono ha laga lahaadee qaabka uu doonana ha u dhacee oo ay ku kacaan waalidiinta, ama mas'uuliyiinta sharciee ilmaha ama qof kale;
b) u Isticmaalka carruurta dhammaan noocyada dawarsiga(Tuugsi).

Qodobka 30aad
Carruurta Hooyooyinka Xiran

Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay ballan qaadayaan inay si gaar ah ula dhaqmayaan hooyooyinka xaamilooyinka ah iyo hooyooyinka wata dhallaanka, iyo kuwa haysta carruurta yaryar ee lagu soo eedeeyay ama lagu helay dambi ah jabino sharci ciqaabeed waxayna si gaar ah:

a) u xaqiijinayaan in marka ugu horaysa latixgeliyo inaan hooyada lagu ridin xukun horseedi kara in la kala fogeeyo hooyada iyo ilmaha;
b) u asaasayaan korna u qaadayaan tallaabooyin ku aaddan helitaanka nidaam badal ka noqon kara xabsiyada oo lagu maarayn karo hooyooyinkan;

c) u asaasayaan hay'ado kale oo lagu hayo hooyooyinkan;

d) u xaqiijinayaan inaan hooyo lala xirin ilmaheeda;

e) u xaqiijinayaan inaan hooyooyinkan lagu ridin xukun dil ah;

f) ujeeddada ugu muhiimsan ee nidaamkan waa hagaajin iyo in dib hooyada loola mideeyo qoyskeeda iyo dhaqan-celin bulsho.

Qodobka 31aad
Mas'uuliyadda Carruurta

Ilmo kasta waxaa masuuliyadi ka saaran tahay qoyskiisa,bulshada, Dawladda, bulshooyinka sharci ahaan la aqoonsan yahay iyo beesha caalamka. Ilmuhu, iyadoo la eegayo da'diisa iyo awooddiisa iyo waxyaabaha kale ee xaddidi kara ee ku xusan axdigan, waxaa waajibaad ka saaran yahay:

a) inuu ka shaqeeyo wadajirka qoyska, ixtiraamo waalidka, xushmeeyo dadka ka sareeya iyo waayeelka uuna caawiyo haddii loo baahdo.

b) inuu u adeego bulshada Dalkiisa asagoo adeegsanaya awooddiisa jireed iyo maskaxeed;

c) inuu dhowro islamarkaana xoojiyo iwadajirka bulshada iyo qaranka;

d) inuu dhowro, islamarkaasna xoojiyo qiyamka dhaqan ee Afrika marka uu la tacaamulayo xubnaha kale ee bulshada , si jawi dulqaad, wadahadal iyo wadatashi leh, gacanna ka geysto bad-qabka bulshada;

e) inuu dhowro islamarkaasna xoojiyo madax-bannaanida iyo sharafta dalkiisa;

f) inuu mar kasta gacan ka geysto, hadba inta awooddiisa iyo heerkiisa ah, kor u qaadista iyo guusha Midnimada Afrika.

QEYBTA II
CUTUBKA LABAAD

ASAASIDDA QAAB-DHISMEEDKA GUDDIGA XUQUUQDA & BARAARAHA ILMAHA

Qodobka 32aad
Guddiga

Anagoo tixraacayna warqadda sumadeedu tahay XGGSH/0779/B11/25, kuna taariikheysan 16 Oktoobar 2025, kana soo baxday Xafiiska Guddoomiyaha Golaha Shacabka, oo ujeeddadeedu tahay shaacinta liiska xubnaha la doortay ee Soomaaliya ku matalaya Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika.

Iyadoo la fulinayo Qaraarka tirsigiisu yahay BJFSB-11/10/11/25, ee ku saabsan doorashada xildhibaanada Soomaaliya ku matalaya Baarlamaanka Bariga Afrika 2022–2027, gaar ahaan Qodobka 6aad, oo tilmaamaya in marka labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ay ansixiyaan qaraarka, oo ay saxiixaan guddomiyaha Golaha Shacabka iyo Kusimaha Guddoomiyaha Aqalka sare ahna Guddoomiye Ku Xigeenka Aqalka sare, in lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, si waafaqsan Qodobka 84aad ee Dastuurka KMG.

Haddaba, waxaan kaa codsanaynaa in aad qaraarka sare ku xusan ku soo saarto faafin rasmiga ah ee dowladda si waafaqsan sharciga.

Wada-shaqeyn wacan.

M.ne. Cabdiraxman Maxamed Cabdulle (Laabi)
Xoghaye Guud ee Golaha Shacabla, FPS

M.ne. Cabdinasir Ibraahim Guuleed
Xoghayeha Guud ee Aqalka Sare PFS

Hala fadhiyo

22/10/2025

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh 22/10/2025

Tell: +252-61-2888348/ +252 62 9828000
Sg@parliament.gov.so , Sg@Senate.gov.so.

JAMUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

QARAAR

KU SAABSAN

DOORASHADA XILDHIBAANADA SOOMAALIYA KU MATALAYA BAARLAMAANKA BARIGA AFRIKA 2022-2027

Muqdishu, Oktoobar 16, 2025

GUDDOONKA LABADA AQAL BAARLAMAANKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Markuu Arkay: Qodobka 48aad iyo 50aad ee Heshiisa lagu dhisay Bulshada Bariga Afrika, kaas oo xeerinaya tirada iyo qaab loo dooranayo Xildhibaanada Dowladdaha Xubinta ka ah Bulshada Bariga Afrika.

Asagoo Hubiyey: liiska Musharixiinta u tartamaya Golaha Sharci dejinta Bulshada Bariga Afrika, isla markaan hubiyey lailaalinayo Mabaadi'da ku xusan Qodobka 3(3aad) ee Dastuurka Ku meel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Asagoo ku kulansan: Kulanka wadajirka ah ee labada Aqal Kalfadhiga 7aad Kulankiisa 3aad ee caadiga ah oo ku qabsoomay Xarunta Villa Hargeysa, ajenduhuna ahaa Doorashada Xildhibaanada Soomaaliya ku matalaya Golaha Sharci dejinta bulshada Bariga Afrika.

WUXUU GUDOONSADAY QARAARKA HALKAN HOOSE KU XUSAN:

Qodobka 1aad.

Kalfadhiga 7aad Kulankiisa 3aad ee wadajirka Labada Gole (Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare) ee Oktoobar 15, 2025 oo ay goobjoog yihiin labo iyo labaatan iyo labo (222) xildhibaan iyo senator waxaa goobjoog ahaa Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Sh. Aadan Maxamed Nuur (Madoobe) iyo Guddoomiye ku xigeenka Aqalka Sare Mudane Cabudllahi Cali Xersi(Tmadcadde), iyada oo uu shir-guddoomiyey Guddoomiyaha Golaha Shacabka.

Qodobka 2aad

Tiradda Musharixiinta soo codsaday ee buuxiyey shuruudaha laga rabay ayaa noqday Sideed iyo toban (18) oo kursi kasta kasoo baxeen labo (2) Musharax oo loo kale coddeeyey. Liiska Musharaxiinta u tartamay kamid noqoshada xubnaha Soomaaliya ku metelaya Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika.

Sumadda kursiga iyo magacyada Musharixiinta oo dhammeystiran, sida hoos ku qoran:

Tirsi	**Magaca Musharaxa**
1	Amb. Abukar Abdi Osman (EALA/SFP01)
2	Mr. Ali Abdinur Osman (EALA/SFP01)
3	Mr. Hussein Hassan Abdi (EALA/SFP02)
4	Mr. Ahmed Mohamed Abdi(EALA/SFP02)
5	Amb.Zahra Ali Hassan (EALA/SFP03)
6	Ms. Hafsa Abdi Abdi Mohamoud (EALA/SFP03)
7.	Ms.Ilham Ali Gassar (EALA/SFP04)
8	Mr. Abdi Osman Dami (EALA/SFP04)
9.	Amb. Fatima Abdullahi Mohamud Insaniye (EALA/SFP05)
10.	Ms.Fatuma Shiimaay Abow (EALA/SFP05)
11.	Mr. Abdusalam Hadliyeh Omar EALA/SFP06)
12.	Mr. Abdisamad Mohamud Muhumed EALA/SFP06)
13.	Mr. Abdirahman Bashir Shariff EALA/SFP07)
14.	Mr. Mohamoud Dibed Hash (EALA/SFP07)
15	Mr. Faisal A. Roble (EALA/SFP08)
16	Mr. Yaasiin Hussein Ismail (EALA/SFP08)
17.	Hon. Fahma Ahmed Nur (EALA/SFP09)
18	Mr. Hassan Abdirisak Mohamed EALA/SFP09)

Qodob 3aad:

Natiijada Codeynta Doorashada Xildhibaanada kumatalaya Soomaaliya Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika oo faahfaahsan waxay ku cadahay shaxdan hoose:

Tirada Xildhibaanada iyo Senatarada Codeeyey	222	
Codadka Ansaxay	168	
Codadaka Halaabay/Xumaaday	54	
	Wareega 1aad	
Tirsi	**Magaca Musharaxa**	**Codka uu helay**	**Halaabay**
1.	Amb. Abukar Abdi Osman (EALA/SFP01)	152	2
2.	Mr. Ali Abdinur Osman (EALA/SFP01)	68	
3.	Mr. Hussein Hassan Abdi (EALA/SFP02)	193	6
4.	Mr. Ahmed Mohamed Abdi(EALA/SFP02)	23	
5.	Amb.Zahra Ali Hassan (EALA/SFP03)	184	4
6.	Ms. Hafsa Abdi Abdi Mohamoud (EALA/SFP03)	34	
7.	Ms.Ilham Ali Gassar (EALA/SFP04)	181	7
8.	Mr. Abdi Osman Dami (EALA/SFP04)	34	
9.	Amb. Fatima Abdullahi Mohamud Insaniye (EALA/SFP05)	178	5
10.	Ms.Fatuma Shiimaay Abow (EALA/SFP05)	39	

11.	Mr. Abdusalam Hadliyeh Omar EALA/SFP06)	171	10
12.	Mr. Abdisamad Mohamud Muhumed EALA/SFP06)	41	
13.	Mr. Abdirahman Bashir Shariff EALA/SFP07)	172	10
14.	Mr. Mohamoud Dibed Hash (EALA/SFP07)	40	
15	Mr. Faisal A. Roble (EALA/SFP08)	182	4
16	Mr. Yaasiin Hussein Ismail (EALA/SFP08)	36	
17.	Hon. Fahma Ahmed Nur (EALA/SFP09)	171	6
18	Mr. Hassan Abdirisak Mohamed EALA/SFP09)	45	
			54

Qodobka 4aad

Sagaal (**9**) Musharax ayaa ku guuleystay ka mid noqdaan xildhibaanada Sooaamaaliya ku matalaya Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika ayaa kale ah:

Tirsi	**Magaca Musharaxiinta Guuleystay**
1.	Amb. Abukar Abdi Osman (EALA/SFP01)
2.	Mr. Hussein Hassan Abdi (EALA/SFP02)
3.	Amb.Zahra Ali Hassan (EALA/SFP03)
4.	Ms.Ilham Ali Gassar (EALA/SFP04)
5.	Amb. Fatima Abdullahi Mohamud Insaniye (EALA/SFP05)
6.	Mr. Abdusalam Hadliyeh Omar EALA/SFP06)
7.	Mr. Abdirahman Bashir Shariff EALA/SFP07)
8.	Mr. Faisal Abdi Roble (EALA/SFP08)
9.	Hon. Fahma Ahmed Nur (EALA/SFP09)

Qodobka 5aad.

Sida ku xusan Axadiga lagu aasaasay bulshada Bariga Afrika mudada xilhaynta Xildhibaanada Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika waa Shan sano **(5)** sida kucad Qodobka 51aad xarafkiisa (1)ee heshiiska; si kastaba ha ahaatee, xubnaha la doortay ee matalaya soomaaliya ayaa dhameystiran doona inta ka harsan muddada golaha 5aad (2022 2027) ee golaha sharci dejinta Bulshada Bariga Afrika waxaana dib loo soo dooran karaa muddo shan sano ah oo dheeraad ah.

Qodob 6aad:

Qaraarkan ku saabsan doorashada xubnaha Soomaaliya ku matalaya Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika waxa uu dhaqan galayaa marka ay ansixiyaan labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, oo ay saxiixaan Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo Kusimaha Guddoomiyaha Ahna Guddoomiye ku xigeenka Labaad ee Aqalka Sare, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Waxaa Saxiixay:

Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"
Guddomiyaha Golaha Shacabka FPF

Sen. Cabdullahi Cali Xersi "Timacadde"
Kusimaha Guddoomiyaha ahna Guddoomiye Ku Xigeenka 2aad Aqalka Sare PFS

XEER MADAXWEYNE LR. 501 **TAARIIKH: 24-TA LUULIYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1987/2025**, ku taariikheysan **02/02/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cabdulqaadir Cali Abkey.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cabdulqaadir Cali Abkey** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Cabdulqaadir Cali Abkey** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, wuxuuna lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
DIIWAAN NO: HAN-067-2025
TAARIIKH : 16-10-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Obsie
Hantidhowraha Guud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

XEER MADAXWEYNE LR. 502 **TAARIIKH: 24-TA LUULIYO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2042/2025**, ku taariikheysan **26/02/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Xasan Muuse Axmed.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Xasan Muuse Axmed** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Xasan Muuse Axmed** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-069-2025
TAARIIKH : 16-10-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Guutale
Hantidhowraha Guud Ee J.F.S

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

XEER MADAXWEYNE LR. 506 **TAARIIKH: 25-TA LUULIYO 2025**

XIL KA QAADIS GUDDOOMIYE KU-XIGEENKA HOWLAHA GUUD EE GOBOLKA BENAADIR & MAGACAABIS GUDDOOMIYE KU-XIGEENKA CUSUB EE HOWLAHA GUUD EE GOBOLKA BENAADIR

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY:	Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY:	Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S
MARKUU ARKAY:	Qodobka 8aad, Faqradda 4aad ee Xeer Lr. 6 ee soo baxay 12/02/1980, kuna saabsan in G/Banadir iyo Dowladda Hoose ay hoos yimadaan Madaxtooyada J.F.S.
MARKUU TIXGELIYAY:	Waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.
MARKUU GARWAAQSADAY:	In ay jirto baahi loo qabo in loo magacaabo Guddoomiye Ku-Xigeen Cusub ee Howlaha Guud ee Gobolka Benaadir.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Xasan Maxamed Jimcaale** laga qaaday xilkii **Guddoomiye Ku-Xigeenka Howlaha Guud ee Gobolka Benaadir.**
2. Waxaa **Mudane Cabdimajiid Daahir Aadan** loo magacaabay in uu noqdo **Guddoomiye Ku-Xigeenka Howlaha Guud ee Gobolka Benaadir.**

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAIIHI
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRAKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-070-2025
TAARIIKH : 16-10-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Guutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XEER MADAXWEYNE LR.508 **TAARIIKH: 03-DA AGOOSTO 2025**

XIL-KA-QAADIS MAAREEYIHII DEKADDA MUQDISHO & MAGACAABIS MAAREEYAHA CUSUB EE DEKADDA MUQDISHO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87 aad iyo 90 aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Axmed Maxamed Maxamuud (Washington)** laga qaaday xilkii Maareeyaha Dekadda Muqdisho.
2. Waxaa **Mudane Danjire Maxamed Cali Nuur (Ameeriko)** loo magacaabay in uu noqdo **Maareeyaha Dekadda Muqdisho**.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAIIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-071-2025
TAARIIKH : 16-10-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed [illegible]
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XEER MADAXWEYNE LR.509 **TAARIIKH: 05-TA AGOOSTO 2025**

MAGACAABIS LA-TALIYAHA AMNIGA QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87 aad iyo 90 aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.
MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista khabiir amniga Qaranka oo aqoon fiican u leh arrimaha amniga Qaranka, maadaama uu xilka iska casilay La-Taliyihii Amniga Qaranka ee Hore.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Mudane Danjire Aways Xaaji Yuusuf Axmed** in uu noqdo La-Taliyaha Amniga Qaranka ee Madaxweynaha J.F.S.

Qodobka 2aad

La-taliyaha Amniga Qaranka wuxuu gudanayaa waajibaadka loo xil saaray isagoo la kaashanaya hay'adaha amniga iyo hay'adaha kale ee khuseeya, wuxuuna si toos ah warbixin ugu gudbiyaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda.

Qodobka 3aad

Wixii Hawlo, Xuquuq iyo Maamuus ah waxaa lagu dhaqayaa Xeerka Lr. 11 ee 05/12/2006 ee Shaqaalaha Rayidka.

Qodobka 4aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAIIHI
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-076-2025
TAARIIKH : 16-10-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Sutale

XEER MADAXWEYNE LR.513 **TAARIIKH: 09-KA AGOOSTO 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2300/05/2025**, ku taariikheysan **24/05/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Ciise Axmed Warsame.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Ciise Axmed Warsame** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Ciise Axmed Warsame** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN.066.2025
TAARIIKH :
SAXIIX :

XEER MADAXWEYNE LR.535 **TAARIIKH: 23 -DA AGOOSTO 2025**

MAGACAABIS XUBIN KA MID NOQONAYSA GOLAHA DHAQAALAHA QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka "B"ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo khibradda ay leedahay Marwada loo magacaabayo xilkan.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la buuxiyo booskan.

Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa xilkii laga qaaday **Marwo Maluka Dheere Sheekh Cabdulqaadir**, waxaana xilkaas loo magacaabay **Marwo Hani Xasan Sheekh Aadan.**

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-072-2025
TAARIIKH : 16-10-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Gulaid
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XEER MADAXWEYNE LR.537 **TAARIIKH: 02-DA SEBTEEMBER 2025**

XIL KA QAADIS SII-HAYAHA GUDDOOMIYIHII HORE EE JAAMACADDA UMADDA SOOMAALIYEED & MAGACAABISTA GUDDOOMIYAHA CUSUB EE JAAMACADDA UMADDA SOOMAALIYEED

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka "B"ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta SareWarqadda summadeedu tahay **WWH&TS/XW/450/09/2025,** ee kuna taariikhaysan **01/09/2025** ujeedaduna tahay Magacaabis Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo khibradda uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo xeerkaan;

1- **Mudane Dr. Xasan Cismaan Gacal**, Waxaa laga qaaday xilkii Sii-Hayaha Guddoomiyihii Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed.

2- **Mudane Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed**, Waxaa loo magacaabay Guddoomiyihii Cusub ee Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAABIHI
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-073-2025
TAARIIKH : 16 10 -
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guhad
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XEER MADAXWEYNE LR.539 **TAARIIKH: 02-DA SEBTEEMBER 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2301/07/2025**, ku taariikheysan **30/07/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Qaasim Cali Raage.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Qaasim Cali Raage**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Qaasim Cali Raage**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAMIHI
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN - 074 - 2025
TAARIIKH : 16 - 10 - 2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Qutale

XEER MADAXWEYNE LR.540 **TAARIIKH: 11-DA SEBTEEMBER 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2288/2025**, ku taariikheysan **02/06/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Dayah Mohamed Hassan.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Dayah Mohamed Hassan**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Dayah Mohamed Hassan**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
03 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-075-2025
TAARIIKH : 16-10-2025
SAXIIX :

XEER MADAXWEYNE LR.543 **TAARIIKH: 20-KA SEBTEEMBER 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2304/2025**, ku taariikheysan **03/08/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cusmaan Sh.Cali Cilmi.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cusmaan Sh.Cali Cilmi**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Cusmaan Sh.Cali Cilmi**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAIHI
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-077-2025
TAARIIKH : 16-10-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Awale

XEER MADAXWEYNE LR.545 **TAARIIKH: 01-DA OKTOOBAR 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

. MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2305/2025**, ku taariikheysan **12/08/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Aadan Xasan Cumar.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Aadan Xasan Cumar**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Aadan Xasan Cumar**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: Hgm-986-25
TAARIIKH: 12/12/2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Guleid
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

XEER MADAXWEYNE LR.546 **TAARIIKH: 04-TA OKTOOBAR 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1996/2025**, ku taariikheysan **15/02/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cabdisataar Xassan Sh.maxamed.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cabdisataar Xassan Sh.maxamed**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Cabdisataar Xassan Sh.maxamed**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-0872
TAARIIKH : 13-12-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud E.J.S

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY: FADUMO MOHAMED OMAR SAAIIHI
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

XEER MADAXWEYNE LR.549 **TAARIIKH: 09-KA OKTOOBAR 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

. MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2451/07/2025**, ku taariikheysan **05/07/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Ahmed Abukar Ali.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Ahmed Abukar Ali,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Ahmed Abukar Ali**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-088-25
TAARIIKH : 13/11/2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Galale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

XEER MADAXWEYNAHA LR. 574 **TAARIIKH: 08-DA OKTOOBAR 2025**

MAGACAABIS XISAABIYAHA GUUD EE DOWLADDA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Soo Jeedinta Ra'iisul-Wasaaraha warqadda summadeedu tahay **XRW/485/10/2025,** ee soo baxday taariikhda markay ahayd **02 Oktoobar 2025**, kuna saabsan Go'aan gole " Ansixinta Soo Jeedinta Magacaabista Xisaabiyaha Guud ee Dowladda ***Mudane Maxamed Maxamuud Cabdulle***.

MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKUU TIXGALIYAY: Baahida loo qabo dardar galinta hannaanka xisaabaadka ee Maaliyadda.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkan,waxa uu;

1. Xilkii Xisaabiyaha Guud ee Dowladda ka qaaday **Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Anas.**
2. U magaacabay **Mudane Maxamed Maxamuud Cabdulle** in uu noqdo **Xisaabiyaha Guud ee Dowladda.**

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-089-25
TAARIIKH: 13-11-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowrka Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

XEER MADAXWEYNE LR. 601 **TAARIIKH: 25-TA OKTOOBAR 2025**

MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE SIYAASADDA AHNA ISKU-DUWAHA XAFIISKA ISKU-DUWIDDA BARNAAMIJKA SIYAASADEEDKA MADAXWEYNAHA J.F.S.

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Mudanaha xilka loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista La-Taliyahan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkaan, waxaa Mudanaha magaciisu hoos ku qoran yahay loo magacaabay jagada ku hor qoran.

No.	Magaca	Jagada
1.	Dr. Yaxya Ibraahim Macallin	La-Taliye Sare ee Siyaasadda ahna Isku-Duwaha Xafiiska Isku-Duwidda Barnaamijka Siyaasadeedka Madaxweynaha J.F.S.

Qodobka 2aad

Waxaa xilkii La-Taliye Sare ee Siyaasadda Ahaana Isku-Duwaha Xafiiska Isku-Duwidda Barnaamijka Siyaasadeedka Madaxweynaha J.F.S laga qaaday **Marwo Hodan Maxamed Xasan**.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
DIIWAAN NO: Ham-090-25
TAARIIKH: 12-12-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

XEER MADAXWEYNE LR. 602 **TAARIIKH: 28-DA OKTOOBAR 2025**

MAGACAABIS ERGAY GAARKA AH EE KA HORTAGGA IYO LA-DAGAALANKA FIKRADAHA XAGJIRKA AH EE RABSHADAHA WATA (PCVE)

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu mudanaha loo magacaabayo xilkan leeyahay.
MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Ergay Madaxweyne oo aqoon fiican u leh arrimaha ka hortagga iyo la-dagaalanka fikradaha xagjirka ah ee rabshadaha wata (*PCVE*).

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkaan, waxaa **Mudane Xil. Aweys Maxamed Cumar** loo magacaabay in uu Ergay Gaarka ah ee Arrimaha Ka Hortagga Iyo La-Dagaalanka Fikradaha Xagjirka Ah Ee Rabshadaha Wata (*PCVE*).

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO. HAN 079-25
TAARIIKH 13/12/2025
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

XEER MADAXWEYNE LR.605 **TAARIIKH: 05-TA NOFEEMBAR 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2528/2025**, ku taariikheysan **01/11/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cabdinuur Xasan Xuseen.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cabdinuur Xasan Xuseen**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Cabdinuur Xasan Xuseen**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
DIWAAN NO: Han-083-25
TAARIIKH : 13-12-2025
SAXIIX :
Adv. Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY: FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

XEER MADAXWEYNE LR.613 **TAARIIKH: 03-DA DISEEMBAR 2025**

MAGACAABIS MAAREEYAHA GUUD EE HAY'ADDA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay **XRW/483/09/2025**, ku taariikheysan **27/09/2025**, kuna saabsan Soojeedinta Magacaabis Maareeyaha Guud Ee Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha.

MARKUU ARKAY: Taariikh nololeedka, aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay **Mudane Maxamed Nuur Cali.**

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo dardargalinta howlaha Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay **Mudane Maxamed Nuur Cali,** in uu noqdo Maareeyaha Guud ee Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: Han-082-25
TAARIIKH : 13-12-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Sutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S

XEER MADAXWEYNE LR.614 **TAARIIKH: 03-DA DISEEMBAR 2025**

MAGACAABIS XUBNAHA GUDDIGA MADAXA BANNAAN EE XUQUUQUL INSAANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka "B"ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay **XGGSH/0795/B11/25**, ku taariikheysan **26/11/2025**, kuna saabsan Magacaabis Xubnaha Guddiga Madax Bannaan Ee Xuquuqul Insaanka.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la magacaabo guddigan.

Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo xeerkaan Waxaa loo Magacaabay Xubnaha Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuquuqul Insaanka, oo kala ah:-

1- Dr. Maryam Qaasim Axmed.
2- Dr. Cumar Cabdulle Calasow (PhD).
3- Dr. Maxamed Cismaan Maxamuud (PhD).
4- Muumina Shiikh Cumar.
5- Faadumo Cabdiqani Yuusuf.
6- Farxaan Maxamed Jimcaale.
7- Maxamed Haaruun Maxamuud.
8- Cali Maxamed Cilmi.
9- Axmed Shiikh Xamsa Abshir.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: H qn-981-25
TAARIIKH: 13/12/2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Guule
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.628 **TAARIIKH: 27-DA DISEEMBAR 2025**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2530/2025**, ku taariikheysan **01/11/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Mohamed Salad Hassan.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Mohamed Salad Hassan**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Mohamed Salad Hassan**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-094-2025
TAARIIKH: 31-12-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
31 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAALIHI
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia
Tell: +252 1 861000 / 261000 | | Web: www.villasomalia.gov.so

926

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.184 **Taariikh: 16/08/2025**

XIISKA RA'IISUL WASAARAHA BIXID 20 AUG 2025 EXIT OFFICE OF THE PRIME MINISTER

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHIRKADAHA SHAQA-SIINTA GAARKA AH.

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay **MOLSA/OM/270/25** ee ku taariikheysan **17/07/2025** ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Shaqa-siinta Gaarka ah**;

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.23.126.08.25** ee **14/08/2025,** kuna saabsan **Ansixinta Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Shaqa-siinta Gaarka ah** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyay: Muhiimadda uu u leeyahay in la helo hannaan lagula xisaabtami karo shirkadaha shaqosiinta gaarka ah.

Wuxuu Meelmariyay:

Qodobka 1aad:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.23.126.08.25** ee **14/08/2025,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Shaqa-siinta Gaarka ah** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad:

Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 3aad:

Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN- 062
TAARIIKH :
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee XJFS

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Saalax Axmed Jaamac
Kusimaha Ra'iisul Wasaaraha, ahna Ra'iisul Wasaare kuxigeenka XJFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada

XEER-NIDAAMIYAHA
SHIRKADAHA SHAQO-SIINTA GAARKA AH

Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada, Xukuumadda JFS 2025

0

QEYBTA 1AAD
QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad

Magaca Xeer-nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa "Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah".

Qodobka 2aad

Cuskasho

1. Xeer-nidaamiyahan wuxu waafaqsan yahay Xeerka Shaqada Soomaliyeed, Sharci Lr36 ee 24 December 2024 iyo:
2. Axdiyada Caalamiga ah ee ILO, sida:
    a. Axdiga ILO C181 (1997) Qodobbada 1, 1(1), 2, 3(2), 4, 5, 5(c), 7, 8, 10, 14 iyo 15aad;
    b. Axdiga ILO C143 (Supplementary Provisions) (1975) Qodobbada 2, 5,6, 7, 8, 9,10 iyo 11aad;
    c. Axdiga ILO C155 (1981) Qodobbada 4-5, 16-19, 17-22aad; iyo
    d. Axdiga ILO C097 (1949 revised), Qodobbada 1, 5aad iyo C097 (lifaaqa5aad).
3. Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 134 ee (17/06/2021) Xeerka Hab-raaca iyo Adeegga Guud Shaqaalaysiinta Dibadda eeShaqaalaha Xoogsatada Soomaaliyeed.
4. Sharci Lr. 10 ee 09/12/2015 Oggolaanshaha Ansixinta Sharciga Shaqo-qorista Shaqaalaha Shisheeye.

Qodobka 3aad

Ujeeddo

1. Xeer-nidaamiyahani ujeeddadiisu waxay tahay in la aqoonsado oo la rasmiyeeyo kaalinta shirkadaha gaarka loo leeyahay ee qorista iyo meeleynta shaqaalaha gudaha iyo dibadda.
2. Xeer-nidaamiyahani wuxuu fasiraad ka bixinayaa abuuridda shati-siinta iyo hawlgelinta shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah, wuxuuna dejinayaa hab-raacyada kormeerkooda, waxaana looga dan leeyahay in la hubiyo shirkadahaas iyo sida ay u shaqeeyaan, una dhawraan xuquuqda iyo daryeelka shaqaalaha iyo kuwa shaqodoonka ah ee ka-faa'iideysanaya adeegyadooda, iyadoo kor loo qaadayo socdaalka shaqo ee badbaadada iyo sharciga ah, iyo fursadaha shaqo ee shaqaalaha Soomaaliyeed.

Qodobka 4aad

Qeexid

Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, haddii aan si kale loogu qeexin, erayadan soo socda waxay yeelanayaan macnaha ku hor qoran:

1) “Maamul” waxaa loola jeedaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Xukuumadda JFS, ama wax kasta iyo mas’uul kasta oo ay Wasaaraddu u idmato fulinta xeer-nidaamiyahan.

2) “Shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah” waxaa loola jeedaa qof ama shirkad kasta oo leh shakhsiyad qaanuuneed oo ka tirsan shaqaalaha shirkadaha gaarka ah ee bixiya mid ama in ka badan adeegyadan soo socda:
    a) Shaqaaleysiinta shaqo-doonka si ay ugu shaqeeyaan loo-shaqeeye saddexaad, hadday tahay gudaha ama dibadda.
    b) Shaqaale-qoris loo marayo hay'ad kale oo loo xilsaaray in ay ka shaqeyso shaqaaleysiin cid saddexaad; iyo
    c) Shaqaale-qoris kasta oo kale oo loo sameeyo faa’iido-ka-raadin ama isku-xirka shaqo-doonka iyo loo-shaqeeyaha.
3) “Shati” waxaa loola jeedaa shatiga rasmiga ah ama shahaadada ay bixiso Wasaaradda Shaqada si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, taasoo u fasaxaysa shirkad shaqaaleysiineed oo gaar loo leeyahay inay ka shaqeyso oo ay bixiso adeegyada shaqoqorista iyo meeleynta.
4) “Shirkad shati leh” waxaa loola jeedaa hay'ad shaqo-siin oo gaar ah haysatana shati lagu bixiyey si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.

5) “Wasiir” waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Xukuumadda JFS.

6) “Shaqaale” waa qof kasta oo shaqo ka raadsada ama ka hela (ha ahaado mid gudaha ama dibadda ah) isagoo u maraya adeegyada shirkadaha shaqaaleysiinta ee gaarka loo leeyahay.

7) “Loo-shaqeeye” waxaa loola jeedaa qof kasta, shirkad ama urur doonaya in uu shaqaale qorto iyagoo u maraya shirkad shaqaaleysiin oo gaar ah.

8) “Diiwaan-gelin” waxaa loola jeedaa in la siiyo awood qoraal ah shirkad shaqaaleysiin oo gaar loo leeyahay si ay dad uga shaqaaleysiiso gudaha iyo dibadda dalka.

9) “Maareeye” waxaa loola jeedaa qofka maamula, kormeera ama xakameeya hawlaha shaqo ee shirkad shaqaaleysiin gaarka ah ama laamaheeda.

10) “JFS” waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
11) Hay’adda Maamulaysa: Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Xukuumadda JFS ayaa ah hay’adda u xilsaaran dhaqan-gelinta xeer-nidaamiyahan. Wasaaraddu waxay mas’uul ka tahay soo-saarista, cusboonaysiinta, hakinta iyo kala-noqoshada shatiyada shirkadaha shaqaaleysiinta gaarka ah, iyo ilaalinta guud iyo nidaaminta hawlahooda si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 5aad

Shuruudaha Diiwaan-gelinta Shirkadaha

1) Codsadaha doonaya in la diiwaan-geliyo si uu uga shaqeeyo shaqaaleysiin gaarka ah waa in uu ku soo gudbiyaa codsiga si danabeysan (online) ama codsiga uu keenaa Wasaaradda waxaana loo soo gudbinayaa sidan soo socota:

a) Ugu yaraan 51% xubnaha guddiga maamulka sare ee shirkadda waa in ay yihiin muwaadiniin Soomaaliyeed, caddeynta jinsiyadana waa in lagu lifaaqaa codsiga;

b) Warqad codsi diiwaan-gelin shirkad shaqaaleysiinta gaar ah;

c) Nuqul la xaqiijiyey oo ah shahaado ka mid noqoshada shirkad mas'uuliyad xaddidan leh;

d) Xeerka ururka iyo xeer-hoosaadka shirkadda;

e) Raasamaalka ugu yar: Codsaduhu waa in uu soo bandhigaa raasumaal ama hanti aan ka yarayn US$60,000 (lixdan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama lacag shillin Soomaali ah oo u dhiganta, oo laga heli karo in lagu shaqeeyo. Awoodda maaliyadeed waxaa lagu xaqiijin karaa xisaabaadka banki (Bank Statement) ee shahaabadeysan 3da (saddexda) bilood ee ugu dambeysay;

f) Shahaadada diiwaan-gelinta shirkadda oo aan dhacsanayn;

g) Nuqul ka mid ah rukhsadda/shatiga ganacsiga ee maamulka Gobolka Banaadir ama Dawlad goboleedyada dalka;

h) Shahaadada u-hoggaansanaanta Canshuuraha shirkadda ee (TCC) oo ka timid maamulka canshuuraha Soomaaliya oo lagu lifaaqaa codsiga. Shahaadadan waa in ay xaqiijisaa Wasaaraada Maaliyadda in shirkaddu si buuxda u bixisay waajibaadkeeda canshuureed oo aan lagu lahayn wax canshuur ah;

i) Codsaduhu waa in uu muujiyaa jiritaanka cinwaanka xafiiska ay ku shaqeyneyso oo rasmiga ah ee Soomaaliya ka jira oo uu ganacsi ka sameyn doono, Caddeynta la aqbali karo waxaa ka mid ah nuqul heshiis ijaareed sax ah oo uu nootaayo dadweyne oo la aqoonsan yahay diiwaan-geliyey, ama warqad lahaanshaha dhismaha ganacsiga;

j) Maamulaha shirkaddu waa in uu keenaa dokumentiyada soo socda:

   i. Nuqul ka mid ah Kaarka Aqoonsiga ama Baasaboorka Soomaaliga;

   ii. 2 (labo) sawir oo cabbir baasaboor ah; iii. Shahaadada dembi-la'aanta (CID);

   iv. Oggolaanshaha rukhsadda shaqada iyo deganaashaha dalka haddii agaasinku yahay ajnabi; iyo

   v. Waa in uu haystaa ugu yaraan shahaado dugsi sare ama wax u dhigma oo ay aqoonsan tahay Wasaaradda Waxbarashada.

k) Maamulaha shirkaddu waa in uu keenaa dokumentiyada soo socda:

   i. Shahaado jaamacadeed oo la xiriita ganacsiga oo uu ka qaatay jaamacad la aqoonsan yahay, oo ay sugtay Wasaaradda

   Waxbarashada; ii. Warqad ballan ah oo uu saxiixay loo-shaqeeyaha, oo qeexaysa shuruudaha shaqada iyo aqbalaadda; iyo

   iii. Nuqul ka mid ah kaarka aqoonsiga ama baasaboorka maareeyaha.

l) Saamiga lahaanshaha Soomaalida: Muwaadiniinta Soomaaliyeed waa in ay lahaadaan oo ay maamulaan ugu yaraan boqolkiiba kontan iyo kow (51%) hantida

ama saamiga shirkadda. Heshiiska qaab-dhismeedka lahaanshaha waa in lagu shaaciyaa codsiga si loo xaqiijiyo xaaladan;

m) Bixinta khidmadda shatiga: Codsaduhu waa inuu bixiyaa lacagta shatiga ee loo baahan yahay oo uu ku lifaaqo caddeynta lacag-bixinta codsiga. Kharashku wuxuu ku xiran yahay baaxadda adeegyada shaqada, sida ku xusan shaxdan hoose:

n) Shaxda sharaxaada khidmadaha

	SHARAXAADDA KHIDMADAHA	QADARKA (US$)
1)	Kharashka arjiga bilowga ah ee diiwaan-gelinta shirkad ka shaqeysa shaqo-qorista gudaha iyo dibadda.	$ 2,000
2)	Kharashka arjiga bilowga ah ee diiwaan-gelinta shirkad ka shaqeysa shaqo-qorista ajaanibka.	$ 1,500
3)	Kharashka arjiga bilowga ah ee diiwaan-gelinta shirkad ka shaqeysa shaqaaleysiinta gudaha keliya/suuqa Soomaalida.	$ 1,000
4)	Kharashka cusboonaysiinta diiwaan-gelinta shirkad shaqo-qorista ee ajnabiga ah.	$ 750
5)	Kharashyada soo gudbinta arjiga dib u cusboonaysiinta diiwaan-gelinta shirkad ka shaqeysa shaqaaleysiinta gudaha/suuqa Soomaaliya.	$ 500
6)	Khidmadaha wax-ka-beddelka shahaadada diiwaan-gelinta, haddii uu dalbado macmiilku.	$ 100

o) In uu xubin ka noqdo urur la aqoonsan yahay oo ay leeyihiin shirkadaha shaqaaleysiinta ee gaarka ah;

p) Codsaduhu waa in uu dhigaa dammaanad lacageed Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo dhan US$25,000 (shan iyo labaatan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama shillin Soomaali u dhigma. Dammaanadda lacageed waxaa loo isticmaalayaa in lagu daboolo mushaar, mag-dhaw, ama deymo kale oo lagu yeesho looshaqeeyaha haddii ay dhacdo in loo-shaqeeyuhu ku fashilmo bixinta xuquuqdaas. Shuruudaha curaartan ayaa u oggolaanaya maamulka in uu tallaabo ka qaado looshaqeeyaha iyadoo matalaysa shaqaalaha ay khusayso, haddii loo baahdo. Caddeynta rahanka la fuliyey waa in lagu soo gudbiyaa codsiga:

2) Wasaaraddu waxay codsan kartaa macluumaad dheeraad ah ama dokumentiyo iyadoo loo eegayo mid mid, Haddii tafaasiil kasta oo loo baahan yahay uu maqan yahay ama loo baahdo caddeyn, Wasaaraddu waxay ogeysiinaysaa codsadaha in uu ku bixiyo macluumaadka dheeraadka ah muddo cayiman gudaheed. Ku-guuldarreysiga bixinta macluumaadka dheeraadka ah ee loo baahan yahay waxay keeni kartaa in codsiga la diido; iyo

3) Bixinta macluumaad been-abuur ah, marin-habaabin ah ama hilmaamidda warbixinnada qaar marxalad kasta oo uu nidaamka codsiga marayo waa mamnuuc. Haddii mid ka mid ah macluumaadka ku jira codsiga la caddeeyo in ay been yihiin, isla markiiba waa la diidayaa codsiga. Intaa waxaa dheer, haddii shatiga lagu bixiyo xog been ah, isla markiiba waa lagala noqonayaa marka la helo, waxaana laga yaabaa in shirkadda iyo shakhsiyaadka mas'uulka ka ah ay wajihi karaan tallaabo sharci. Sidaa darteed, codsadeyaasha waxaa si adag lagu adkaynayaa in ay hubiyaan in dhammaan macluumaadka iyo dokumentiyada la soo gudbiyey ay yihiin kuwo sax ah.

4) Codsaduhu waa in uu muujiyaa baaxadda shatiga uu ku caddeeyey dalabka arjigiisa, noocyada shaqo-qorista iyo hawlaha shaqaaleysiinta oo ay ku jiri karaan mid ama ka badan qeybaha soo socda:

i. Shaqaaleysiinta muwaadiniinta Soomaaliyeed si ay uga shaqeeyaan gudaha dalka (shaqaale maxali ah)

ii. Shaqaalaysiinta gudaha iyo dibadda: Shaqaaleysiinta muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ka shaqeynaya gudaha dalka iyo dalalka dibadda (shaqo dibadeed), taasoo noqon karta mid guud ama mid caalami ah marka loo eego baaxadda shatiga.

iii. Codsaduhu waa in uu si cad u caddeeyaa heerka ama heerarka shaqaaleysiinta ee uu doonayo in uu qabto, Wasaaraddu waxay soo saareysaa shatiga kaas oo leh oggolaansho cayimidda baaxadda, tusaale, "maxalliga keliya" ama "maxaliga iyo dibadda".

5) U-qalmid-la'aanta Shatiga ee Shirkadaha: Iyadoo aan loo eegin farqada (1), Wasaaradda ayaa diidaysa codsiga shatiga cusub ama dib-u-cusboonaysiinta shatiga jira, haddii codsadaha (ama xaalad shirkad, mid ka mid ah agaasimeyaasheeda ama saraakiisha maamulka) uu la kulmo mid ka mid ah shuruudahan soo socda ee keenaya u-qalmid-la'aanta:

A. Eedaymo Dembiyo Ciqaabo ah: Codsaduhu ay maxkamadi ku riday xukun dembi kasta oo ku lug leh shaqaaleysiin aan la oggolayn ama sharci-darro ah, ka ganacsiga dadka, tahriibinta muhaajiriinta, dembiyada abaabulan, ka ganacsiga daroogada, lacag dhaqidda, musuqmaasuqa, ama dembi kasta oo la xiriira damiir xumo ama ku xadgudbida xuquuqda shaqaalaha (oo ay ku jiraan dembiyada la xiriiraa ku shaqeynta carruurta ama shaqada khasabka ah). Codsadaha lagu riday xukun noocan oo kale ah waxaa loo aqoonsanayaa in uusan u qalmin, haddii si rasmi ah loogu soo oogay oo uu hadda wajahayo dacwad ku saabsan mid ka mid ah dembiyada kor ku xusan (oo uu kiisku hor yaallo maxkamad), Wasaaraddu waa inay dib u dhigtaa tixgelinta codsiga ilaa arrinta laga xallinayo.

B. Jebinta Nidaaminta ka hor: Haddii codsaduhu uu hore u jebiyey shuruudaha shatiga lagu bixiyey xeer-nidaamiyahan ama xeerarkii hore, uuna ku xadgudbay qodobbada xeer-nidaamiyahan ama Xeerka Shaqada, taasoo keentay in laga hakiyo ama la joojiyey rukhsadiisii hore ee Wasaaradda. Haddii hakinta ama ka joojinta caynkaas ahi sii socoto taasoo aan la qaadin ama aysan dhammaan muddada, codsadaha waa laga joojinayaa. sidoo kale, haddii codsadaha lagu helo in uu ku kacay jebinta sharciga, taasoo keentay in la ganaaxo, shatigiisa dib looma cusbooneysiin karo ilaa laga buuxiyo muddo cayiman ama shuruudo ay dejisay Wasaaraddu la fulinaayo;

C. Wareejinta Shatiga aan la oggoleyn: Shatiyada lama wareejin karo sida ku qeexan qoddobka 11aad ee Xeer-nidaamiyahan. Codsadihii isku daya in uu wareejiyo, ama hore u wareejiyey, shatiga ama oggolaanshaha shaqada qof kale ama Shirkad iyadoo aan oggolaansho laga helin Wasaaradda. Dhaqan kasta oo noocaas ah wuxuu keenayaa diidmada shatigiisa; iyo

D. Lumidda shahaadooyinka: Codsaduhu ma siibuuxinayo shuruudaha looga baahan yahay farqada (1) ee soo saarista shatiga, haddii isbeddelada dhacay tan iyo markii la bixiyey shatigii hore aan dib loo sixin. Haddii shirkad hore rukhsad u haysatay ay beddasho la haanshaha ama maamulka, sida in aanay yeelan

maareeye Soomaali ah, raasumaalkeeda uu hoos uga dhacdo inta ugu yar ee loo baahan yahay, ama shahaadooyinka maamulaheedu aanay u dhammayn shirkadaas uma qalanto shati cusub ama dib u cusboonaysiin inta laga soo dhammeystirayo dokumentiyada dhimman.

6) Codsadaha shatiga la siiyey iyo kuwa la siin doono waxaa ku waajib ah in ay ku ogeysiiyaan shirkadda qoraal afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahooda wixii isbeddel ah ee macluumaadka lagu sheegay codsiga. Arrintan waxaa ku jira isbeddellada dhaca inta lagu guda jiro xilliga hubinta codsiga sida beddelka maareyeyaasha shirkadaha, cinwaanka, ama isbeddellada maaliyadeed ee muhiimka ah. Bixinta macluumaadka cusub isla markiiba waxay hubinaysaa in go'aannada maamulku ay ku salaysnaadaan xogta hadda jirta ee saxda ah.

7) Khidmadda Codsiga: Codsi kastaa waa in uu la socdaa bixinta khidmadaha loo qoondeeyey si loo daboolo kharashaadka maamulka si waafaqsan qodobka 1aad faqradda (n) ee Shaxda sharaxaada khidmadaha. Wasaaraddu waxay wax ka beddeli kartaa khidmadaha iyadoo lagu salaynayo xeer, waxayna beddeli kartaa iyadoo lagu salaynayo baaxadda shatiga. Caddeynta lacag bixinta waxaa lagu lifaaqayaa arjiga. Ku guuldaraysiga bixinta khidmadaha waxay keenaysaa in arjigu la hakiyo ilaa laga soo dhammeystiro.

8) Khidmadaha Shirkadaha shaqaalaysiinta aan Faa'iido-doonka ahayn: Wasaaraddu waxay ka dhaafi ama ka dhimmi kartaa khidmadaha shirkadaha shaqaalaynsiinta aan faa'iido-doonka ahayn iyadoo dejinaysa heerar kala duwan oo khidmad ah, loona eegayo nooca shaqadooda sida adeegyada shaqaaleynta aan faa'iido-doonka ahayn. Codsadeyaasha waa in lagu wargaliyaa khidmadda laga dhaafay ama la dhimmay ka hor intaysan soo gudbin arjigooda.

9) Dib-u-eegista codsiyada iyo bixinta shatiga: Ka dib marka la helo codsiga la dhammeystiray iyo dokumentiyada taageeraya, Wasaaraddu waxay ku bixineysaa dadaallada lagama-maarmaanka ah si loo xaqiijiyo saxnaanta iyo xaqiiqda macluumaadka la bixiyey, tan waxaa ku jira xaqiijinta heerka diiwaan-gelinta shirkadda, hubinta tixraacyada, shahaadooyinka, iyo xaqiijinta ansaxnimada dammaanadaha maaliyadeed.

10) Wasaaraddu waxa ay kormeeri doonta goobaha shaqada ee codsadaha iyo adeegyada, si ay u xaqiijiso awoodooda waxqabadka, taasoo qeyb ka ah qiimaynta. Codsaduhu waa in uu oggolaadaa oo fududeeyaa wixii baaritaan ama weydiimo caynkaas ah, oggolaanshaa gelitaanka xafiisyadooda iyo diiwaanadooda, kana jawaabaan su'aalaha si ay awood ugu hesho Wasaaradda xaqiijinta u-hoggaansanaanta shuruudaha Xeer-nidaamiyahan.

11) Waqtiga Go'aan gaarista: Wasaaraddu waxay ku dadaalaysaa in ay ka soo saarto go'aan qoraal ah codsiga muddo ku siman soddon (30) maalmo shaqo gudahooda laga billaabo taariikhda la qabto arjiga oo dhammeystiran, watana dhammaan macluumaadka loo baahan yahay. Go'aanku wuxuu noqon karaa in la bixiyo shatiga ama la diido codsiga, iyadoo la raacinayo sababaha. Haddii codsiga la dhammeystiri waayo, arjiga waxa laga yaabaa in la hakiyo

12) Codsiyada aan dhammeystirnayn: Haddii ay wasaaraddu ogaato, inta ay dib-ueegisteeda ku jirto, in codsigu aanu dhammeystirnayn ama uu u baahan caddeyn dheeraad ah, waa in ay qoraal ku ogaysiisaa codsadaha, iyadoo caddeynaysa macluumaadka dheeraadka ah, dokumentiyada, ama caddeynta loo baahan yahay, Codsadaha waa in la siiyaa fursad macquul ah si uu u soo gudbiyo macluumaadka maqan ama uu caddeeyo mad madowga jira. Xaaladahan oo kale muddo 30 maalmo shaqo ah waa in laga dhigaa waqtiga go'aan qaadashada iyadoo xisaabta laga bilaabayo taariikhda ay Wasaaraddu hesho macluumaadka ama caddeynta oo dhammaystiran. Haddii codsaduhu ku bixin waayo macluumaadka loo baahan yahay muddada la cayimay, Wasaaraddu waxay diidi karta codsiga.

13) Oggolaanshaha iyo Soo saarista Shatiga: Haddii ay Wasaaraddu ku qanacdo in codsaduhu buuxiyey dhammaan shuruudaha, waxay oggolaaneysaa codsiga waxayna siinaysaa shati ay ku shaqeystaan hawlaha shirkadaha shaqo-siinta ee gaarka ah. Shatigu waa in uu ahaadaa qaabkii loo qoondeeyey oo lagu qeexaa magaca shirkadda, mulkiilaha ama maamulaha, goobta shaqada, baaxadda shaqada la oggolaaday, taariikhda bixinta, dhicitaanka, iyo lambarka shatiga gaarka ah

14) Diidmo: Haddii codsiga la diido, Wasaaraddu waxay go'aankeeda ku soo gudbinaysaa hab qoraal ah, iyadoo raacinaysa sababaha diidmada. ku guuldaraysiga shahaadooyinka qaarkood, arrimo ammaanka lid ku ah ama lahaansho diiwaan dembi, ama bixinta xog been ah. Ogeysiiska diidmada wuxuu kaloo ku wargelinayaa codsadaha in uu xaq u leeyahay qaadasho racfaan go'aanka wasaaradda mudada xeerku oggol yahay

15) Shatiga oo caddeyn ahaan loo Isticmaalo: Shatiga ay bixiso Wasaaraddu iyadoo la raacayo xeer-nidaamiyahan waa in uu noqdaa mid dhammeystiran oo ku saabsan uqalmidda shatiga si loo tuso loo-shaqeeyaha, shaqaalaha iyo dhinacyada ay khuseyso in si sharci ah loo fasaxay. Shirkaddu waxay isticmaali kartaa shahaadada shatiga ama nuqul shaabadaysan si ay ugu caddeyso shatigeeda sharciga ah loo-shaqeeyaha, shaqaalaha iyo dhinacyada kale ee ay khuseyso.

Qodobka 6aad

Bandhigidda Shatiga

1. Shirkad walba oo gaar loo leeyahay waa in ay ku soo bandhigtaa shatiga asalka ah ee ay bixisay Wasaaraddu meel la arki karo oo ku taal xarunteeda ugu weyn, Shatiga waa in lagu dhejiyaa meel muuqata oo loogu talo-galay in ka arki karaan macaamiisha iyo dadka soo booqanaya, sida goobta soo-dhaweynta, si loo xaqiijiyo sharcinimada shirkadda.
2. Marka laga reebo muuqaalka goobta xafiiska, lambarka shatiga, taariikhda la soo saaray iyo taariikhda uu dhacayo, waa in lagu daro shatiga dhammaan waraaqaha rasmiga ah iyo agabka xayeysiinta ee shirkadda, tan waxaa ku jira kara warqadda rasmiga ah ee shirkadda, cinwaanka email-ka, buug yaraha, xayeysiinta, mareegaha iyo bogagga warbaahinta

bulshada, ujeedaduna ay tahay in dadweynaha iyo Wasaaraddu ay si fudud u hubin karaan shatiga shirkadda.

3. Shirkad kasta oo war saxaafadeed, ogeysiis ama xayeysiis soo saarta iyadoo aan la isticmaalin astaan rasmiga ah. Shirkaddu waa in ay hubisaa in ogeysiisku si cad loogu xuso magaca shirkadda, lambarka shatiga iyo muddada uu shaqeynayo. Baahin kasta oo si rasmi ah shirkaddu u soo saarto lagama saari karo tixraaca lambarka shatiga shirkadda.
4. Shirkaddu waxba kama beddeli karto qaabka shatiga, ma amaahin karto shatigeeda qof kale ama shirkad kale, haddii ay dhacdo in ay lunto ama dhib gaaro shahaadada shatiga, shirkaddu waa in ay si degdeg ah u soo wargalisaa Wasaaradda, waxayna codsan kartaa in dib loogu daabaco nuqul si ay u soo bandhigto.

Qodobka 7aad

Diiwaan-gelinta Shirkadaha Shaqo-siinta Gaarka ah

1. Wasaaraddu waa in ay haysataa diiwaanka rasmiga ah ee shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah ee sharciyeysan. Diiwaanka waxaa lagu hayn karaa si danabeysan ama nuqul warqad ah, waana in lagu daraa ugu yaraan xogtan soo socota ee shirkad kasta oo sharciyeysan:
    a. Lambarka taxanaha shatiga ama aqoonsiga gaarka ah ee u taagan shatiga
    b. Magaca shirkadda shaqo-siinta gaarka ah (magaca shirkadda) ee shatiga la siiyey.
    c. Faahfaahinta lahaanshaha iyo maamulka, oo ay ku jiraan magaca agaasimayaasha shirkadda
    d. Cinwaanka xarunta dhexe ay shirkaddu ku fuliso hawlaheeda, iyo xafiis kasta oo laamo ah, haddii ay jiraan
    e. Macluumaadka xiriirka shirkadda (lambarka telefoonka, email-ka, website-ka ama faahfaahinta xiriirka kale ee internetka, haddii ay jirto)
    f. Baaxadda shatiga, oo ay ku jiraan qeybaha shaqada ee la oggol yahay sida; maxali, shisheeye, iyo shuruudo kasta oo gaar ah ama xaddidaadyo la xiriira shatiga
    g. Taariikhda soo-saarista bilowga ah ee shatiga iyo taariikhda uu dhacayo shatiga
    h. Sooyaalka shatiga - oo ay ku jiraan taariikhaha cusboonaysiinta, hakinta ama burinta dhacday, iyo tixraaca go'aamada khuseeya: Taariikhda uu qofka shatiga haystaa ka helay Wasaaradda shahaadada shatiga, aqoonsiga qofka helay iyo saxiixiisa.
2. Wasaaraddu waxay ku dari kartaa wixii macluumaad kale ah oo ay u aragto inay lagamamaarmaan u tahay diiwaanka, sida qoraallada u-hoggaansanaanta warbixinada baaritaanada, magacyadda saraakiisha muhiimka ah ee shirkadda, diiwaannada xad-gudubyada ama abaal-marinada muhiimka ah
3. Diiwaanka shirkadaha gaarka ah wuxuu noqonayaa mid u furan in lagu sameeyo kormeer guud saacadaha shaqada rasmiga ah ee xarumaha shirkadda. Qof kasta wuu arki karaa diiwaanka si uu u xaqiijiyo shatiyeynta shirkadaha gaarka ah iyo si uu u eego baaxadda shati bixinta.
4. Haddii qof uu codsado nuqul lagu darayo diiwaanka ama laga soo saarayo, Wasaaraddu way bixin kartaa nuqulkaas, waxayna ku soo rogi kartaa kharashyo maamul oo macquul ah si ay u daboosho kharashaadka raadinta, daabacaadda, ama nuqul ka sameynta diiwaanka, si waafaqsan shaxda kharashaadka gaar ah ee la oggol yahay.

Qodobka 8aad

Cusboonaysiinta Shatiga

1. Muddada Shatiga: Shatiga lagu bixiyey xeer-nidaamiyahan wuxuu jirayaa muddo hal (1) sano ah oo ka bilaabmaysa taariikhda la bixiyey, haddii aan la hakin ama aan dib loogala noqon. Taariikhda dhicitaanku waxay ku qoran tahay shahaadada shatiga.
2. Codsiga Cusbooneysiinta: Shirkadda shaqo-siinta gaarka ah, waa in ay soo gudbisaa arji cusbooneysiin ah, waana in lagu soo gudbiyaa ugu dambayn konton (50) maalmo shaqo, lagamana dib dhici karo muddo shan iyo labaatan (25) maalmo shaqo ka hor taariikhda uu dhacayo shatiga.
3. Shuruudaha isku midka ah ee codsiyada cusub: Shuruudaha cusboonaysiinta waxay la mid yihiin shirkad cusub. Shirkaddu waa in ay keentaa dhammaan dokumentiyada iyo caddeymaha cusub ee Xeer-nidaamiyahan oo ay ku jiraan dokumentiyada shirkadaha, shahaadada u-hoggaansanaanta canshuuraha, cinwaanka goobta shaqada, diiwaannada aqoonsiga iyo hab-dhaqanka xubnaha guddiga iyo sidoo kale, maareeyeyaasha aqoonsiyadooda iyo shahaadooyinkooda.
4. Cawaaqibta ka dhalan karta dib-u-dhigista codsiga: Haddii ay shirkaddu soo gudbin waydo dalabka cusboonaysiinta shatiga ugu yaraan shan iyo labaatan (25) maalmo shaqo ka hor taariikhda uu dhacayo. Ku shaqeynta shatiga dhacay lama oggola. Shirkaddu waa in ay joojisaa shaqada oo ay dib u codsato shati cusub. Maamulka kuma khasbana in uu u xalliyo cusboonaysiinta soo daahday sidii shati aan dhammeystirneyn oo sii socda.
5. Guddiga Qiimaynta iyo Hubinta: Marka lagu daro shuruudaha caadiga ah ee kor lagu soo sheegay, guddiga qiimaynta iyo hubinta wuxuu dib u eegayaa diiwaanka uhoggaansanaanta shirkadda, hab-dhaqanka guud iyo waxqabadkeeda, waxaana ka mid ah:
    i. U-hoggaansanaanta shuruudaha shatiga iyo waajibaadka sharciyeynta; iyo ii. Maqnaanshaha cabashooyinka aan la xallin, ganaaxyo, ama xad-gudubyo.
6. Diiwaanka Shaqaaleysiinta: Shirkadaha muujiya diiwaanno shaqo oo la xaqiijin karo, sharcigana sidiisa u raaca gaar ahaan shaqo-siinta dibadda, waxay helayaan tixgelin gaar ah. Shirkadaha sameeya shaqo-siin badan oo waafaqsan sharciga iyo qiyamka dadka mudnaan gaar ah ayey leeyihiin marka shatiga loo cusboonaysiinayo.

7. Go'aanka Cusboonaysiinta: Go'aanka Guddiga qiimeynta iyo hubinta wuxuu noqon karaa:
    a. Cusbooneysiinta la oggolaaday: Shatiga shirkaddda waa la cusboonaysiin karaa muddo sanad ah si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.

b. Cusbooneysiinta la diiday: Codsiga cusboonaysiinta waa la diidi karaa haddii shirkaddu ku guuldareysato in ay buuxiso shuruudaha ama la ogaado in aysan u-hoggaansamin xeer-nidaamiyahan.

8. Taariikhda dhaqan-gelidda Cusboonaysiinta: Wasaaraddu waxay oggolaanaysaa cusboonaysiinta shatiga dhacay, wuxuuna dhaqan-galayaa laga bilaabo maalinta uu dhacayo shatigii hore maalinta xigta, wuxuuna si caadi ah u shaqeynayaa muddo hal (1) sano ah haddii aysan jirin arrimo maamul kale.

9. Xilliga Kalaguurka: Haddii shirkad ay codsato cusboonaysiinta shatiga muddada la cayimay, go'aanka Wasaaradduna uu weli jiro marka shatiga dhacayo, Wasaaraddu waxay soo saari kartaa warqad wargelin ah oo u oggolaanaysa in ay sii shaqeyso si ku meel gaar ah ilaa go'aanka cusboonaysiinta laga soo saarayo. Si kastaba ha ahaatee, haddii natiijooyinka horudhaca ah ay muujiyaan sababo halis ah oo aan dib loo cusboonaysiin karin, Wasaaraddu waxay ku amri kartaa shirkadda in ay hakiso hawlaheeda inta go'aan laga gaarayo.

Qodobka 9aad
Wareejinta Shatiga

1. Shatiga lagu bixiyey xeer-nidaamiyahan wuxuu gaar u yahay qofka shatiga haysta iyo shirkaddii shatiga la siiyey. Shirkadda shaqo-siinta gaarka ah ma wareejin karto, ma iibin karo ama si kale uguma gudbin karto shatigeeda cid kale. Wareejin kasta ama wadaagis kasta oo la sheegay ee shatiga waa mid aan sax ahayn oo waxayna ka dhigan tahay ku xadgudubka xeer-nidaamiyahan.

2. Haddii ay dhacdo in wax laga beddelo lahaanshaha shirkad shati horey u lahayd, iibinta ganacsiga, isku darka, la wareegidda saamilayda cusub, ama wax kala beddel kasta oo si dhammeystiran ugu wareejiso maamulka shirkadda qof kale ama shirkad kale, shatiga wuxuu dhacayaa isla markiiba. Milkiilayaasha cusub waa in ay ku codsadaan shatiga cusub magaca shirkadooda oo hoos yimaada ganacsigooda cusub ka hor inta aysan sii wadin ganacsiga. Ku-shaqeynta shatiga mulkiilaha hore lama oggola

3. Wasaaradda waa in lagu soo wargeliyaa isbeddel kasta oo ku yimaadda xaalada jiritaanka qaanuuneed ee shirkadda ama qaab-dhismeedka shatiga. Wasaaradda ayaa go'aaminaysa haddii loo baahan yahay shati cusub, ama haddii ay ku filan tahay in la ansixiyo isbeddelka shatiga hadda jira.

Qodob 10aad

Kala-laabashada Shatiga

1. Wasaaraddu waxay joojin kartaa ama gabi ahaanba kala noqon kartaa shatiga shirkadaha shaqoqorista haddii ay go'aansato in tallaabo noocaas ah ay lagama-maarmaan tahay iyadoo lagu saleynayo mid ama in ka badan oo ka mid ah qodobbada soo socda:
    a. U-qalmid-la'aan Shuruudaha Shatiga: haddii ay soo baxdo caddeymo muujinaya in shirkaddu aanay buuxin shuruudaha ku xusan xeer-nidaamiyahan ama ay ku dhacday mid ka mid ah xaaladaha ka reebaya haysashada shatiga markii shatiga la siiyey ka dib, sida haddii saraakiisha shirkadda lagu helo in ay galeen dembiyo ka mid ah kuwa shatiga loogala laaban karo.
    b. Arrimo la Xiriira Waxqabadka: Waxqabadka shirkadda shatiga haysata haddii ay ka hoos marto waxqabadkii laga filaayey ee la xiriiray shaqo-qoris iyo meeleyn shaqodoonka soomaaliyeed, ama ay ku kacaan wax ka baxsan xayndaabka iyo ujeeddada shatiga la siiyey. Arrimahaas waxaa ka mid ah:
        i. Fashil joogto ah oo ku aaddan in si guul leh loo meeleeyo shaqaalaha iyadoo la waafajinayo ballanqaadyadii shirkaddu sameysay, ama
        ii. Shaqaale si aan sharci ahayn loogu meeleeyey ama loogu diray waddamo ka baxsan aysan kuwa wasaaraddu ay heshii kula jirto.
        iii. Arrimahaas waxay keeni kartaa in shirkadda laga joojiyo ama lagala noqdo shatiga si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.
    c. Ku-xad-gudbidda Shuruudaha Shatiga: Ku-guul-darreysiga u-hoggaansanaanta shuruudaha lagu bixiyey shatiga, ama jebinta awaamiirta gaar ah ee ay wasaaraddu soo saartay waxay keeni kartaa shati kala noqosho.
    d. Warbixinta iyo Bixinta Macluumaad: Ku-guul-darreysta soo-gudbinta warbixin, macluumaad ama xog kale oo laga codsaday in shirkaddu soo gudbiso si waafaqsan xeer-nidaamiyahan sida gudbinta warbixin lix-biloodle ah, ama sanadle ah, ama xog kale ee la codsado.
    e. U-hoggaansanaan-la'aanta ogeysiisyada rasmiga ah: Ku-guul-darreysta uhoggaansanaanta ogeysiis rasmi ah ama amar toosin ah oo ka soo baxay wasaaradda, sida amar lagu farayo in la saxo jebin xeer, ama lagu joojiyo dhaqan aan sharci ahayn.
    f. Cabashooyinka iyo Anshax-xumida: Waxaa laga soo gudbiyey dacwooyin culus oo soo noqnoqday oo ka dhan ah shirkadda, taasoo ay ka soo gudbiyeen shaqaalaha, looshaqeeyeyaasha, ama dhinacyo kale, baaritaankuna muujiyo jiritaanka anshax-xumo, ama sidoo kale lagu helo caddeymo muujinaya in shirkaddu ku lug leedahay dhaqanxumo, ku-xad-gudubka xuquuqda shaqaalaha ama xeer-nidaamiyahan.

2. Jebinta mid kasta oo ka mid ah qodobbadan waxay sababi kartaa in la hakiyo ama gabi ahaanba lagala noqdo shatiga shirkaddu ku hawl-gasho.

Qodobka 11aad

Hab-raaca Ka Horeeya Tallaabooyinka Anshax-marinta

1. Marka laga reebo xaaladaha u baahan in tallaabo si degdeg ah loo qaado, Wasaaraddu waa in ay raacdaa nidaamkan ka hor inta aysan joojin ama baabi'in shatiga:
   a. Ujeeddada Wargelinta: Wasaaraddu waxay qoraal ahaan ku wargelinaysaa shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah damaceedu yahay in ay qaaddayso tallaabooyin la qorsheeyey ee noqon kara joojinta ama baabi'inta, iyadoo si cad u sheegaysa sababaha ama saldhigga tallaabadaas degdega ah, iyo weliba iyadoo raacinaysa caddeymo ku filan ama natiijooyin taageeraya sababahaas.
   b. Fursadda Jawaabta: Shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah waxaa la siinayaa fursad macquul ah oo ay ku bixiso jawaab celin ku saabsan ogeysiiska. Sida caadiga ah shirkaddu waxay helaysaa shan (5) maalmood oo shaqo ama muddo ka badan haddii ay Wasaaraddu ku sheegto ogeysiiska, laga billaabo marka la helo ogeysiiska, si ay u soo gudbiso qoraal difaac ah ama ay u saxdo khaladka haddii uu yahay mid la sixi karo. Shirkaddu waxay soo bandhigi kartaa difaac, sharaxaad, ama tallaabooyin sixid ah oo la qaaday.
   c. Tixgelinta Jawaabta: Wasaaraddu waxay tixgelinaysaa jawaab kasta ama caddeynta ay shiraddu u soo gudbiso muddada loo oggol yahay, ka hor inta aysan gaarin go'aan kama dambeys ah.
   d. Go'aan iyo Ogeysiis: Ka dib marka la tixgeliyo dhammaan xogta la heli karo iyo wixii jawaabo ah ee la helay, Wasaaraddu waxay gaaraysaa go'aan waxayna qoraal ahaan ugu wargelinaysaa shirkadda shaqo-siinta gaarka ah, haddii go'aanka yahay in shatiga la joojinaayo ama la baabi'inaayo, ogeysiisku waxaa ku jiraya sababaha go'aankaas lagu gaaray.
   e. Cusboonaysiinta Diiwaanka: Haddii shatiga la joojiyo ama la baabi'iyo, Wasaaraddu waa in ay si degdeg ah u cusboonaysiisaa diiwaanka si waafaqsan Qodobka 9aad ee Xeer-nidaamiyahan si loogu muujiyo isbeddelka xaaladda.
2. Muddo Go'aan Ka hakinta
   a. Hakad kasta oo lagu sameeyo shatiga waa in uu ahaadaa mid leh muddo cayiman ama uu socdaa ilaa la fuliyo shuruudo gaar ah, ogeysiiska hakadka waa in uu qeexaa taariikhda bilowga iyo dhammaadka hakadka, ama shardi lagu xiro soo celinta shatiga tusaale ahaan: ilaa mushaharka la bixiyo oo caddeyn la keeno.
   b. Inta lagu jiro muddada hakinta, waa in shirkaddu joojisaa dhammaan hawlaha shaqaaleysiinta iyo meeleynta.
3. Haddii shirkaddu buuxiso shuruudaha ku keenay hakinta, waa inay wargelisaa Wasaaradda kana codsataa in shatiga dib loo hawlgeliyo.
4. Saameynta Joojinta (Kala-noqoshada) Shatiga: Marka shatiga la baabi'iyo lagala laabto, shirkaddu waa in ay si degdeg ah u joojisaa dhammaan hawlaheeda. Waxa la farayaa shirkadda in ay ku soo celiso shahaadada shatiga asalka ah Wasaaradda muddada la cayimay gudaheeda. Magacyada shirkadda lagala laabtay shatiga ayaa la shaacinayaa si waafaqsan qodobka 13aad ee Xeer-nidaamiyahan si bulshada loo wargeliyo.
5. Iska dhiibid Ikhtiyaari ah (Iskaga tegid Shatiga):

a. Shirkadaha haysta shatiga waxay si ikhtiyaari ah uga tanaasuli karaan shatiga, iyagoo qoraal ahaan ugu soo wargelinaya Wasaaradda sababaha sida xiritaanka ganacsiga.
b. Wasaaraddu waxay baabi'inaysaa shatiga laga bilaabo taariikhda tanaasulka waxayna cusboonaysiinaysaa diiwaanka. Iska dhiibidu kama saamaxayso shirkadda ama saraakiisheeda mas'uuliyada xad-gudub kasta ee horey u dhacay.

Qodobka 12aad

Diiwaanka Guud iyo Keydka Xogta Macluumaadka ee Xarumaha Shirkadaha Shaqo-siinta Gaarka ah

1. Wasaaraddu waa inay xaqiijisaa hufnaanta iyadoo soo bandhigaysa, cusboonaysiinaysana liiska dhammaan Xarumaha Shirkadaha Shaqo-siinta Gaarka ah ee shatiga haysta. Liiskan waa in ugu yaraan lagu daabacaa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda Shaqada, waxaana sidoo kale lagu baahin karaa warbaahin kale ama wargaysyo rasmi ah. Liiska la daabacay waa inuu ka kooban yahay magaca xarunta shirkadda shaqo-siinta gaarka ah ee shatiga leh iyo lambarka shatigeeda, iyadoo lagu dari karo faahfaahin dheeraad ah sida baaxadda shatiga ama xogta xiriirka.
2. Liiska xarumaha shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah ee shatiga haysta waa in si joogto ah loo cusboonaysiiyaa si uu uga tarjumo shatiyada cusub ee la bixiyey, kuwa dhacay ama aan la cusboonaysiin, iyo sidoo kale joojinta ama baabi'inta shatiyada. Tani waxay suurtagelinaysaa in dadka shaqo-doonka ah iyo loo-shaqeeyeyaashu si sahlan u hubiyaan xaaladda rasmiga ah ee xarumaha ay la macaamilayaan.

3. Wasaaraddu sidoo kale waa inay horumarisaa oo ilaalisaa keyd xogeed (database) danabeysan ah oo dhammeystiran oo ku saabsan xarumaha shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah ee shatiga haysta. Keyd xogeedku waa inuu ka tarjumo xogta ku jirta diiwaanka rasmiga ah sida ku cad qodobka 9aad ee xeer-nidaamiyahan, waafaqsana heerarka la oggol yahay ee xogta dadweynaha. Wuxuu ka koobnaan karaa, xog kooban oo ku saabsan astaanta xarunta, adeegyada ay bixiso, taariikhaha ansaxnimada shatiga, iyo tirakoobka waxqabadka.
4. Keydka xogeed sidoo kale waa inuu ka koobnaadaa xogaha laga helay warbixinnada ay xarumaha shaqaaleyntu waajibka ku tahay inay soo gudbiyaan iyadoo la raacayo si waafaqsan qoddobka 17aad ee xeer-nidaamiyahan, iyo xog kasta oo kale oo ay Wasaaraddu uruuriso inta ay fulinayso shaqadeeda kormeerka sida xog kooban oo ku saabsan cabashooyinka ama tallaabooyinka fulineed. Ujeeddadu waa in la helo nidaam dhexe oo lagu kormeero shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah iyo isbeddellada socda ee socdaalka shaqaalaha.
5. Markay shirkaddu horumarinayso oo ilaalinayso keydkan xogeed, waa inay si buuxda ula jaanqaadaa shuruucda khuseysa ee ku saabsan asturnaanta iyo ilaalinta xogta. Xogta shakhsiyadeed ee shaqaalaha ama xubnaha kale ee shaqaalaha waa in si adag loo ilaaliyaa.

Qeybaha laga heli karo dadweynaha ee keydkan xogeed looma oggola in ay muujinayaan aqoonsiyo shakhsiyeed ama xog xasaasi ah oo ku xadgudbi karta xuquuqda gaarka ah.

6. Keydka xogeedka ama ugu yaraan liiska xarumaha shatiga haysta ee hadda ansax ah waa inuu si bilaash ah ugu furnaadaa dadweynaha, iyadoo loo marayo hab danabeysan. Wasaaraddu sidoo kale waxay bixin kartaa adeeg xaqiijin ah oo u oggolaanaya muwaadiniinta inay weydiiyaan xaaladda sharci ee xarun gaar ah.
7. Wasaraaddu waxay la shaqeynaysaa hay'adaha kale ee dowliga ah ee khuseeya sida Hay'adda Socdaalka iyo jinsiyadda ama Booliiska si ay u wadaagaan xogaha khuseeya ee ka yimaada keydka xogkeydiyaha danabeysan wasaaradda ee khuseeya arrimaha shaqaaleysiinta si ay uga qeyb qaataan maareynta guud ee socdaalka shaqaalaha, iyadoo la hubinayo in xog ilsa wadaagiddaasi ay la jaanqaadayso heerarka ilaalinta xogta.

QEYBTA 2AAD
WAAJIBAADKA SHAQO-SIINTA SHIRKADAHA GAARKA AH

Qodobka 13aad Xayeysiin

1. Waa in shirkada shaqo-siinta gaarka ah ay xayeysiiyaan dhamman jagooyinka bannaan ee ay shaqaalaysiinayaan iyagoo isticmaalaya wargeysyada, TV-yada, Raadiyeyaasha, websiteyada iyo baraha bulshada si shaqo-doonku u awoodo in uu fursad u helo in uu codsado shaqada la soo xayeysiiyey. Haddii fursad shaqo soo baxdo shirkaduhu waxay marar naadir ah adeegsan karaan liiska keydka shaqo-doonka ee jira iyagoo cuskanaya sababo sharci ah. Baahinta xayeysiinta loo sameeyo si hufan waxay dhiirri-gelinaysaa dhammaan shaqo-doonka in ay uga faa'iidaystaan fursadaha shaqada si siman.
2. Faahfaahinta Xayeysiinta Waajibka ah: Dhammaan xayeysiinta shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah ay sameynayaan iyagoo isticmaalaya wargeysyada, TV-yada, raadiyeyyaasha, website-yada iyo baraha bulshada, ama madal kale waa in ay ku jiraan macluumaadkan soo socda:
    a. Magaca shirkada iyo lambarka shatiga, iyo taariikhda bixinta iyo dhicitaanka shatiga.
    b. Cinwaanka iyo macluumaadka kale ee xiriirka shirkadda sida telefoonada, emailska si shaqo-doonka iyo Wasaaradda ay si sahlan ula xiriiri karaan shirkadda
    c. Magaca ama faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan shirkadda shaqada laga filayo, goobta shaqada, magaalada iyo dalka, haddii ay tahay dibadda, iyo caddeyn muujineysa in shirkaddu tahay mid qaanuuni ah sida in ay tahay shirkad diiwaangashan oo jirta.
    d. Cinwaanka iyo nooca shaqada la bixinayo iyo tirada jagooyinka jira ee bannaan.
    e. Soo-koobidda shuruudaha iyo xaaladaha shaqada, oo ay ku jiraan ugu yaraan: muddada heshiiska la filayo, heerka mushaharka ama dakhliga, saacadaha shaqada, faa'iidooyinka ama gunnooyinka muhiimka ah, nidaamka fasaxa iyo maalmaha nasashada, iyo cidda qaadaysa kharashyada shaqaalaynta fiisaha, tikidyada duulimaadka, baaritaannada caafimaadka. Xayeysiintu waa in ay si cad u sheetaa haddii milkiilaha shirkadda uu bixinayo hoy, cunto, ama gaadiid.

f. Shuruudaha asaasiga ah ee aqoonta iyo khibradda loo baahan yahay, heerka waxbarashada, sanadaha khibradda, xirfadaha gaarka ah ama heerka luqadda, iyo shuruudo kale oo muhiim u ah shaqada.
g. Tilmaamaha codsiga iyo waqtiga kama dambeysta ah iyo sida loo codsado iyo taariikhda xiritaanka codsiyada.

3. Ka-ilaalinta Xogta Khiyaano iyo Been-abuur: Dhammaan macluumaadka ku jira xayeysiiska waa in uu noqdaa mid sugan oo run ah, isla markaana aysan ku jirin wax marin habaabin ah. shirkadda shaqo-siinta gaarka ah waa in ay ka fogaataa faafinta macluumaad been-abuur ah ama sheegashooyin ka baxsan xaqiiqda oo ku saabsan shaqada. Isticmaalka astaamaha ganacsi ama calaamadaha shirkadda shaqada waa in loo oggolaadaa si looga hortago khiyaano.
4. Takoor-la'aan: Xayeysiintu waa in aysan ku jirin wax luqad ama shuruudo takoor ah oo ka soo horjeeda Xeerka Shaqada Soomaaliya ama heerarka caalamiga ah ee shaqada sida ka doorbidid ku saleysan qabiil, diin, rag iyo dumar. Marka laga reebo arrimo la xiriiro shuruud xirfadeed oo dhab ah. Qoraalka xayeysiisku waa in uu dhiirri-geliyaa in dhammaan musharixiinta u qalma ay soo codsadaan
5. Ku-wargelinta Wasaaradda: Shirkada shaqo-siinta gaarka ah waa in ay Wasaaradda ku soo ogeysiiso dhammaan xayeysiinta ay baahinayso. Shirkaddu waxay soo gudbinaysaa nuqul ku saabsan xayeysiinta inta aan la daabicin ama la baahin iyadoo loo marayo hannaan emails ah ama xogkeydiye danabaeysan. Wasaaraddu waxay dib u eegaysaa xayeysiinta si loo hubiyo u-hoggaansanaanta xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale ee khuseysa shaqada.
6. Wasaaraddu waxay soo saari kartaa tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan heerarka xayeysiinta ee shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah, oo ay ku jiraan qoraal iyo caddeyn mas'uuliyadeed ay tahay in lagu lifaaqo xayeysiinta.
7. Haddii shirkadda shaqo-siinta gaarka ah aysan u-hoggaansamin shuruudaha xeernidaamiyahan sida xayeysiinta shaqooyin aan la oggoleyn, ka tagida faahfaahinta shatiga, ama xayeysiin been-abuur ah, waxaa laga qaadayaa tallaabooyin fulineed oo ay ku jiraan amarro lagu joojinayo xayeysiinta ama ganaax.

Qodobka 14aad Mamnuucidda Kharashaadka Shaqo-siinta

1. Shirkada shaqo-siinta gaarka ah waxaa ka reeban in ay qaadaan ama oggolaadaan kharash, lacag ama dalaal kasta oo la xiriirta adeegyada shaqaaleynta, meeleynta shaqada, ama hawlaha la xiriira qof shaqo-doon ah ama shaqaale. Mamnuuciddani waxay khusaysaa qaab kasta oo lacag ururin ah, ha ahaato mid toos ah ama dadban, sida lacag caddaan ah, ay ka jaraan mushaharka, kharashaad dheeraad ah si shaqada loo helo.
2. Dhammaan kharashaadka sharci ah ee la xiriira shaqaaleynta, dokumentiyada iyo meeleynta shaqaalaha waa in ay iska bixiyaan shirkada ama loo-shaqeeyaha. Shirkadda waxay xaq u leedahay in ay ka qaado kharashaadkaas loo-shaqeeyaha sida heshiiska u dhaxeeya, laakiin kharashaadkaas lama dulsaari karo shaqaalaha. Kharashaadkaas waxaa
ka mid noqon kara qarashaadka xayeysiinta, wareysiyada, dokumentiyada, habaynta fiisaha, iyo adeegyada shaqaaleysiinta.
3. Loo-shaqeeyaha ayaa mas'uul ka ah in uu daboolo kharashaadka safarka ee shaqaalaha laga keenay meesha uu degan yahay ama meesha lugu heshiiyey ee laga dhoofinayo ilaa goobta shaqada oo ay ku jiraan tikidyada diyaaradda, haddii shaqada ay tahay mid dibadda ah, gaadiidka dhulka, hoy ku habboon inta safarka socdo iyo lacagaha habeen dhaxa ah ee lagu noolaado inta safarka lagu guda jiro, haddii ay jirto. kharashaadka baarista caafimaadka,

tallaalada, ama COVID-19 ee looga baahan yahay shaqada ka hor, waa in uu bixiyo loo-shaqeeyaha. Dhammaan kharashaadkaas kor ku xusan lagama qaadi karo shaqaalaha.

4. Lacagaha iyo kharashaadka ay tahay in ay bixiyaan shirkadda ama loo-shaqeeyaha si waafaqsan qodobbada 2aad iyo 3aad lagama jari karo mushaharka shaqaalaha ama faa'iidooyinka uu ku muteystay shaqada waqti kasta. Mushaharka shaqaalaha waa in si buuxda loo siiyo sida ku qoran heshiiska shaqada, iyadoo aan wax qarsoon laga qaadin si lagu daboolo kharashyada shaqaaleynta.
5. Ku Caddeynta Heshiisyada: Marka shirkadda shaqo-siinta gaarka ah ee ku hawlan shaqosiinta xoogsatada Soomaaliyeed ee dibadda ama shaqasiinta ajaanibta gudaha dalka ee la qoray, heshiiska shaqada waa in uu si cad u qeexaa mas'uuliyada bixinta kharashaadka soo socda: lacagaha fiisaha ama rukhsadaha shaqada, kharashaadka safarka, tikidyada, diyaaradda, lacagaha baaritaanka caafimaadka, caymiska, iyo kharashaadka kale ee la xiriira shaqaaleynta sida waafaqsan qodobka 3aad ee sare ku xusan. Ujeeddada waa in la hubiyo hufnaanta, lana ilaaliyo in shaqaalaha laga qaadi karin kharashaadkaas.
6. Xaaladaha gaarka ah: Marka loo-shaqeeyaha aanu qaadin wax kharash ah, sida lacagaha fiisaha, tikidyada diyaaradda, baaritaanka caafimaadka, iyo kharashaadka kale ee safarka shaqada, shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah waxaa keliya ee loo oggol yahay inay ka qaadaan shaqaalaha u safraya dibada lacag dhan hal bil oo ka mid ah mushaarkooda. Arrimahan waa in si adag loogu xaddido oo keliya xaaladaha noocaas ah ee kor ku xusan, looguna sheego si hufan shaqaalaha u safraya dibadda. Oggolaanshaha qoraalka ah ee shaqaalaha waa in la helo ka hor inta aanu aqbalin wax dalab shaqo ah. Wasaaradda ayaa mar walba kormeereysa nidaaminta xaaladaha noocaas ah si loo hubiyo cadaaladda loogana hortago xad-gudubka.
7. Dhaqan-gelinta: Shirkaddii ku xad-gudubta xeer-nidaamiyahan oo lacag ka qaada shaqaalaha, waxaa lagu amrayaa inay lacagtii ay ka qaadeen u soo celiyaan shaqaalaha u safraya dibadda, waxaana laga qaadayaa tallaabooyin ciqaabeed sida ku cad xeernidaamiyahan. Wasaaradda waxay xaq u leedahay inay joojiso ama hakiso shatiga shirkadda ku kacda sababo la xiriira xad-gudubyada noocaas ah.

Qodobka 15aad Heshiisyada Shaqada

1. Heerarka Shaqada Hufan: Shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah waa inay xaqiijiyaan in heshiiska shaqada loo dejiyey shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha uu noqdo mid loo marayo nidaamkan si waafaqsan Xeerka Shaqada Soomaaliyeed, marka shaqada ay tahay Soomaaliya ama Xeerka Shaqada ee dalka martida loo yahay haddii shaqadu dibadda tahay, iyad aoo la raacayo midka shaqaalaha aadka ugu roon isla markaana ilaalinaya shaqaalaha. Shirkadda marnaba kama qeyb qaadan karto fududeynta heshiis jebinaya xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan Xeerka Shaqada Soomaaliyeed ama ama xeerka shaqada dalka martida looyahay ama heerarka shaqo ee caalamiga ah.
2. Ansixinta Heshiiska: Ka hor inta aan shaqaalaha la dhoofin, shirkaddaha shaqo-siinta gaarka ah waa inay soo gudbisaa nuqul ka mid ah heshiiska shaqada ee la saxiixey oo ay u keento Wasaaradda Shaqada si loo eego, loona diiwaan-geliyo. Wasaaradda waxay baaraysaa heshiiska si loo xaqiijiyo inuu u hoggaansamay dhammaan shuruudaha Xeerka Shaqada Somaliyeed, Xeer-nidaamiyahan, iyo shuruucda kale ee khuseeya ama heshiisyada labada dhinac. Wasaaradda ayaa diidi karta ama codsan karta wax-ka-beddel heshisyada aan buuxin shuruudaha xeerka shaqada soomaaliyeed.
3. Qoraal iyo Luqad: Dhammaan heshiisyada shaqada ee ay fududeyaan shirkadda shaqo-siinta gaarka ah waa inay noqdaan qoraal oo ku qoran luqad uu fahmi karo shaqaalaha, sidoo kalena u fahmi karo loo-shaqeeyaha. Haddii heshiiska uu ku qoran yahay luqad

qalaad, waa in shaqaalaha la siiyo nuqul la turjumay oo Af-Soomaali ah ama luqad kale oo uu shaqaalaha fahmayo iyadoona Saxiixa ama Suulsaarka shaqaalaha ee heshiiska la turjumay markuu jiro waa in la siiyaa shaqaalaha, waana in arrintaas lagu xaqiijiyaa is-faham iyo heshiis dhinacyada.

4. Habka Heshiiska Caadiga ah: Wasaaraddu waxay sameyneysaa hab-raac heshiis shaqo oo caadi ah oo ku lifaaqan xeer-nidaamiyahan kaasoo ka kooban dhammaan qodobbada khasabka ah ee shaqada dibadda. heshiisyada shaqada ee la jaanqaada hab-raacan caadiga ah ama leh dhammaan qodobada muhiimka ah ee ku jira ayaa loo aqoonsanayaa in uu sax yahay marka ay diyaarinayaan shirkaddaha shaqo-siinta. Wax ka baxsan qodobada hab-raaca caadiga ah waa in marka hore ay helaan oggolaanshaha Wasaaradda. Hab-raacan caadiga ah wuxuu daboolayaa qodobada mushaharka, saacadaha shaqada, magdhawga, shaqada dheeraadka ah, maalmaha nasashada, hoyga iyo cuntada haddii la bixiyo, daryeelka caafimaadka, caymiska, dib u celinta, cusboonaysiinta iyo joojinta heshiiska, xallinta khilaafaadka, iyo wixii la mid ah.
5. Nuqulka Shaqaalaha: Shirkadda shaqo-siinta gaarka ah waa inay hubisaa in shaqaaluhu helo nuqul ka mid ah heshiiska shaqada ee la saxiixey waqti ku filan ka hor inta uusan shaqaalaha dhoofin haddii shaqadu tahay dibadda ama ka hor billaabidda shaqada marka shaqadu gudaha tahay. Waa in shirkadda heshiiska ugu sharaxdaa shaqaalaha luqad uu fahmi karo, iyadoo lagu muujinayo xuquuqda iyo waajibaadka si shaqaaluhu u noqdo mid xog ogaal ah.
6. Ka-hortagga Beddelaada Heshiiska: Shirkadda marnaba ma oggolaan karto ama ma fududeyn karto in shaqaalaha loo soo bandhigo heshiis beddel ama si weyn uga duwan kan horey loo oggolaaday ee goobta shaqada dalka martida loo yahay ama kadib marka la geeyo, kaasoo yareynaya shuruudihii shaqaalaha lagula heshiiyey. Haddii wax-ka-beddel lagu sameynayo heshiiska sababo aan la filayn awgood, waa in wax-kabeddelkaas ay ansixiso Wasaaradda, shaqaaluhuna uu si qoraal ah u oggolaadaan iyadoo aan wax cadaadis ah lagu saarin.
7. Muddada Heshiiska iyo Cusboonaysiinta: Heshiiska waa inuu si cad u qeexaa muddadiisa. Haddii ay jirto suurtagalnimada cusboonaysiin ama kordhin, waa in shuruudaha cusboonaysiinta heshiis wadajir ah uu jiro, sida ogeysiiskii hore lagu caddeeyey. Shirkadda waa inay la socotaa dhicitaanka heshiisyada shaqaalaha ay shaqaaleysiisay oo ay ka caawisaa, haddii loo baahdo hab-raacyada soo celinta ama cusboonaysiinta heshiiska iyadoo loo eegayo go'aanka shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha.

Qodobka 16aad Ururinta Xogta iyo Warbixinta

1. Shirkad kasta oo rukhsad u haysata shaqasiinta gaarka loo leeyahay waa inay si joogto ah uga warbixisaa hawlaheeda Wasaaradda. Warbixin bille ah waa in la soo gudbiyaa dhammaadka bil kasta, inta rukhsaddu wali shaqeynayso. Wasaaradda waxay ogeysiinaysaa shirkadda taariikhaha saxda ah ee la rabo iyo haddii ay jiraan qaab gaar ah oo warbixintu u baahan tahay.
2. Wasaaraddu waxay xaq u leedahay in ay dalbato warbixinno dheeraad ah, haddii ay jiro walaac ama shaki ku saabsan waxqabadka ama waafaqsanaanta shirkadda. Haddii cabashooyin la helo

ama shirkaddu ay tahay mid cusub, waxaa la farayaa inay si joogto ah u soo gudbiso warbixin ilaa lagu qanco in ay waafaqsan tahay xeer-nidaamiyahan. Shirkadda waa inay raacdaa amar kasta oo la xiriira warbixin dheeraad ah.

3. Waa waajib saaran shirkad kasta oo ah in ay si sax ah u keydiso ayna cusboonaysiiso dhammaan diiwaannada la xiriira hawlaheeda shaqaalaysiinta iyo meeleynta. Diiwaannadani waa inay ku filan yihiin in laga diyaariyo warbixinada loo baahan yahay, oo ay ka mid yihiin:

a. Macluumaadka musharraxiinta ama shaqo-doonka
b. Amarrada shaqo
c. Heshiisyada
d. Meeleynta shaqaalaha;
e. Diiwaannada waa in si ammaan ah loo hayo si loo xaqiijiyo saxnaantooda loogana baaro shirkadda waa inay diiwaannadan shirkaddu haysaa ugu yaraan saddex (3) sano kadib marka ay dhacdo shaqaalaysiinta ama meeleynta la xiriirta.

4. Xafidida Xogtaa: Marka shirkadda shaqasiinta gaarka loo leeyahay ay ururinayso ama soo gudbineyso xog, waa in la hubiyaa in xogta shakhsiyadeed ee shaqaalaha si buuxda u waafaqsan tahay shuruucda iyo mabaadi'da ilaalinta xogta iyo asturnaanta. Haddii suurtagal ah, warbixinnada waa in lagu soo bandhigaa si guud oo aqoonsiyada shakhsiyeed gaar ahaan haddii warbixinaha la daabacayo. Xogta khaaska ah ee shakhsiyaadka ama loo-shaqeeyeyaasha waa in si adag loo ilaaliyaa. Gudbinta xogta shakhsiyadeed ee loo gudbinayo Wasaaradda waa inay u xafiddaa si ammaan ah. Wasaaraddu waxay sidoo kale mas'uul ka tahay in si qarsoodi ah u isticmaasho xogta warbixinnada, iyadoo keliya ugu adeegsanayso ujeeddooyin sharci ah.

5. Nuxurka Warbixinta: Wasaaraddu waxay siinaysaa shikadaha foom mideysan oo warbixinta lagu soo gudbiyo. Guud ahaan, warbixin xilliyeedku waa in uu ka koobnaadaa xogtan hoos ku xusan:

a. Xogta shirkadda:
   i. Magaca shirkadda
   ii. Lambarka shatiga
   iii. Xogta xiriirka
   iv. Qaab-dhismeedka shirkadda
   v. Shaqaalaha muhiimka ah
   vi. Isbeddel kasta oo ku dhacay qodobadan muddada warbixinta
   vii. Caddeynta ansaxnimada iyo faahfaahinta shaatiga

b. Shaqooyinka La Xayeysiiyey:
   i. Tirada xayeysiisyada ama ogaysiisyada shaqo ee shirkaddu bixisay
   ii. Kala saarid ku saleysan qeybaha shaqada
   iii. Kala saarid haddii shaqadu tahay gudaha dalka ama dibadda.

c. Codsiyada La Helay: Tirada guud ee codsiyada shaqo-doonka ee shirkadda heshay muddadaas, oo loo kala saaro iyadoo lagu saleynayo:
   i. Meesha u ka yimid codsiga (gobol ka mid ah Soomaaliya ama dibadda)
   ii. Jinsiyadda
   iii. Jinsiga (lab/dheddig)
   iv. Da'da
   v. Heerka waxbarasho ama xirfadeed
   vi. Xaaladaha kor xusan waxay muujinaysaa muuqaal guud oo ku saabsan dadka raadinaya shaqada iyadoo loo marayo shikadaha

d. Tirada Shaqo-doonka La Shaqaaleysiiyey: Tirada guud ee dadka lagu guuleystay in shaqo loo helo iyadoo la adeegsaday shirkadda muddada warbixinta. Tani waxay si gaar ah u kala saaraa:
   i. Astaamaha shaqaalaha: jinsiga, da'da, heerka waxbarasho, heerka xirfadeed
   ii. Nooca meeleynta: tirada shaqaalaha Soomaaliyeed ee lagu meeleeyey gudaha dalka, iyo kuwa dibadda loo diray
   iii. Wadamada loo diray: wadamada ay shaqaaluhu u dhoofeen iyo tiradooda mid kasta
   iv. Qeybta shaqada: warshadaha/shaqooyinka (sida shaqooyinka guryaha, dhismaha, caafimaadka, hoteelada, amniga)
   v. Muddada heshiiska: haddii shaqadu tahay muddo gaaban ka yar (1) sano, dhexdhexaad (1-2 sano), ama mid joogto ah.

e. Dulmar Shuruudaha iyo Xaaladaha Heshiiska: Caddeyn muujinaysa in dhammaan shaqaalaha la meeleeyey ay heleen heshiisyo buuxinaya shuruudaha loo baahan yahay. Shirkaddu waxay soo bandhigi kartaa tusaalooyin aan magacyo lahayn oo heshiisyo caadi ah, ama ay tilmaami karto kiisaska mushahar aad u sarreeya ama aad u hooseeya. Waxaa sidoo kale lagu xusaa haddii shaqaalahaas la siiyey caymis bulsho, badbaado shaqo.

f. Dhacdooyinka iyo Cabashooyinka Macluumaad ku saabsan:
   i. Cabashooyinka shirkaddu ka heshay shaqaale ama loo-shaqeeye
   ii. Khilaafaadyo ama dhibaatooyin muhiim ah oo soo baxay iyo sida loo xalliyey
   iii. Shilalka ama dhacdooyinka goobaha shaqada ee la xiriira shaqaale shirkaddu dhoofisay

g. Iskaashiga:

Macluumaad la xiriira:
   i. Wada-shaqeynta shirkaddu la samaysay adeegyada shaqo ee dawladda
   ii. ka-qeyb-galayaasha tababbarka
   iii. ka-qeyb-galayaasha bandhigyada shaqo iv. Tababbaridda tababbareyaal gaar ah

h. Xogaha Kale ee Muhiim ah:
   i. Wixii xog ah ee Wasaaraddu ku amarto in la keeno
   ii. Xogta ay shirkaddu u aragto mid muhiim ah sida:
   iii. Isbeddelada suuqa shaqada
   iv. Caqabadaha
   v. Talooyin ku saabsan hagaajinta sharciyada

6. Codsiyo xog dheeraad ah: Wasaaraddu waxay dalban kartaa in ay shirkaddu keento xog ka baxsan midda caadiga ah haddii loo baahdo in la falanqeeyo.

7. Asturnaanta Xogta: Marka shirkadda shaqo-siinta gaarka ah ay ururinayso ama soo gudbineyso xog, waa in la hubiyaa in xogta shakhsiyadeed ee shaqaalaha si buuxda ugu waafaqsan tahay shuruucda iyo mabaadi'da ilaalinta xogta iyo asturnaanta. Haddii ay suurtagal tahay, warbixinta waa in lagu soo bandhigaa si guud ama la qarxiyo aqoonsiyada shakhsiyeed, gaar ahaan haddii warbixinta la daabacayo. Xogta khaaska ah ee shakhsiyaadka ama loo-shaqeeyaha waa in si adag

loo ilaaliyaa. Gudbinta xogta shakhsiyadeed ee loo gudbinayo cid kale waa in lagu sameeyaa si ammaan ah. Shirkaddu waxay sidoo kale mas'uul ka tahay in si qarsoodi ah u isticmaasho xogta warbixinaha, iyadoo keliya ugu adeegsanaysa ujeeddooyin sharci ah.

8. Nuxurka Warbixinta: Wasaaraddu waxay siinaysaa shirkadaha foom cayiman, mideysan oo warbixinta lagu soo gudbiyo. Guud ahaan, warbixinta waqti ka waqti ah waa inay ka kooban yihiin xogtan hoos ku xusan:

a. Xogta Wakaaladda:
    i. Magaca shirkadda
    ii. Lambarka shatiga
    iii. Xogta xiriirka
    iv. Qaab-dhismeedka shirkadda
    v. Shaqaalaha muhiimka ah
    vi. Isbeddel kasta oo ku dhacay qodobadan muddada warbixinta
    vii. Caddeynta ansaxnimada iyo faahfaahinta shatiga

b. Shaqooyinka La Xayeysiiyey:
    i. Tirada xayeysiinta ama ogaysiisyada shaqo ee shirkaddu bixisay
    ii. Kala saarid ku saleysan qeybaha shaqada
    iii. Kala saarid haddii shaqadu tahay gudaha dalka ama dibadda

c. Codsiyada La Helay: Tirada guud ee codsiyada shaqo ee shirkaddu heshay muddadaas, oo loo kala saaro iyadoo lagu saleynayo:
    i. Meesha laga yimid (gobol ka mid ah Soomaaliya ama dibadda)
    ii. Jinsiyadda
    iii. Jinsiga (lab/dheddig)
    iv. da'da
    v. Heerka waxbarasho iyo xirfadeed
    vi. Tani waxay bixisaa muuqaal guud oo ku saabsan dadka raadinaya shaqada iyadoo loo marayo shikad shaqo-siin gaar ah.

d. Tirada Shaqaalaha La Shaqaaleysiiyey: Tirada guud ee dadka lagu guuleystay in shaqo loo helo iyadoo la adeegsaday sihrkadda muddada warbixinta. Tani waa in si gaar ah loogu kala saaraa:
    i. Astaamaha shaqaalaha: jinsiga, da'da, heerka waxbarasho, heerka xirfadeed
    ii. Nooca meeleynta: tirada shaqaalaha Soomaaliyeed ee lagu meeleeyey gudaha Soomaaliya, iyo kuwa dibadda loo diray iii. Wadamada loo diray: wadamada ay shaqaaluhu u dhoofeen iyo tiradooda mid kasta
    iv. Qeybta shaqada: warshadaha/shaqooyinka (sida shaqooyinka guryaha, dhismaha, caafimaadka, hoteelada, amniga, iwm)
    v. Muddada qandaraaska: haddii shaqadu tahay muddo gaaban ka yar 1 sano, dhexdhexaad (1-2 sano), ama mid joogto ah

